FAAFINTA RASMIGA AH

الجريدة الرسمية

OFFICIAL BULLETIN

EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Sanadka 11aad** **Muqdisho, 31 DECEMBER 2024** **Lr.5**

**Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

**FAAFIN BIL SOO BAXA**

Qiimaha waa $XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA**: Sanaddii waa $XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa $XXX Dollar. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa $XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

# KOBNIIN

**BOGGA KOOWAAD**

**SHARCI**

W.M

**BOGGA LABAAD**

XEER

**BOGGA SEDDEXAAD**

**TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM**

**NOVEMBER-DECEMBER**

**2024**

**XEER MADAXWEYNE LR. 26** Taariikh: 21/11/2024
SHARCIGA DHISIDDA GUDDIGA MADAXA-BANNAAN EE DOORASHOOYINKA QARANKA IYO SOOHDIMAHA **Bog 4**

**XEER MADAXWEYNE LR. 27** Taariikh: 21/11/2024
SHARCIGA URURADA IYO XISBIYADA SIYAASADDA EE JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA **Bog 22**

**XEER MADAXWEYNE LR. 28** Taariikh:23/11/2024
SHARCIGA DOORASHOOYINKA QARANKA EE JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA **Boga 47**

**XEER MADAXWEYNE LR. 29** Taariikh: 02/12/2024
SHARCIGA ILAALINTA XUQUUQDA NAAFADA SOOMAALIYEED **Bog 114**

**XEER MADAXWEYNE LR. 30** Taariikh: 04/12/2024
SHARCIGA TACLIINTA SARE **Bog 136**

**XEER MADAXWEYNE LR. 32** Taariikh: 24/12/2024
SHARCIGA HAY'ADDA SHARCIYEEYNTA ADEEGYADA IYO BAARITAANKA BEERAHA SOOMAALIYEED **Bog 169**

**XEER MADAXWEYNE LR. 33** Taariikh: 24/12/2024
SHARCIGA XAKAMEYNTA KIIMIKOOYINKA BEERAHA SOOMAALIYRRD **Bog 186**

**XEER MADAXWEYNE LR. 34** Taariikh: 24/12/2024
SHACIGA BADBAADADA DHIR-BEEREEDKA IYO TAKOORKA **Bog 204**

**XEER MADAXWEYNE LR. 35** Taariikh: 24/12/2024
SHARCIGA ABUURKA IYO NOOCYADA DHIRTA SOOMAALIYEED **Bog 234**

**XEER MADAXWEYNE LR. 36** Taariikh: 24/12/2024
SHARCIGA SHAQADA SOOMAAALIYEED **Bog 252**

**XEER MADAXWEYNE LR. 317** Taariikh: 02/11/2024
MAGACAABIS TALIYAHA CIIDAMADA GAARKA AH EE CXD **Bog 382**

**XEER MADAXWEYNE LR. 320** Taariikh: 02/11/2024
MAGACAABIS TALIYAHA CIIDANKA DHULKA CXD **Bog 383**

**XEER MADAXWEYNE LR. 325** Taariikh: 18/11/2024
XILKAQAADIS TALIYIHII HORE EE TALIYAHA CXD SOOMAALIYEED IYO MAGACAABIS TALIYAHA CXD SOOMAALIYEED **Bog 384**

**XEER MADAXWEYNE L. 354** Taariikh: 01/12/2024
MAGACAABIS XUBNAHA GUDDIGA MADAXA-BANNAAN EE DOORASHOOYINKA QARANKA IYO SOOHDIMAHA **Bog 385**

**XEER MADAXWEYNE LR. 357** Taariikh: 10/12/2024
XILKAQAADIS GUDDOOMIYIHII HORE EE GOBOLKA BENAADIR AHNA DUQA MAGAALADA MUQDISHO IYO MAGACAABIS GUDDOOMIYAHA CUSUB EE GOBALKA BENAADIR AHNA DUQA MAGAALADA MUQDISHO **Bog 387**

**XEER MADAXWEYNE LR. 358** Taariikh: 14/12/2024
XILKAQAADIS AGASIMIHII GUUD EE HAY'ADDA ISTAATISTIKADA QARANKA IYO MAGACAABIS AGASIMAHA GUUD EE HAY'ADDA ISTAATISTIKADA QARANKA **Bog 388**

**XEER MADAXWEYNE LR. 359** Taariikh: 17/12/2024
XILKAQAADIS AGAASIMAHA GUUD EE HAY'ADDA SOCDAALKA IYO JINSIYADDA IYO MAGACAABID AGAASIMAHA GUUD EE HAY'ADDA SOCDAALKA IYO JINSIYADDA **Bog 389**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**SHARCI LR. 26** **TAARIIKH: 21-DA NOFEEMBER 2024**

**SHARCIGA DHISIDDA GUDDIGA MADAXA-BANNAAN ee DOORASHOOYINKA QARANKA & SOOHDIMAHA**

**MADAXWEYNAHA J.F.S,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG.

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG.

**MARKUU ARKAY:** Warqadda Ku-Simaha Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee summaddeedu tahay **XGGSH/656/B11/24**, ku taariikheysan **16/11/2024**, ujeeddaduna tahay Soo Gudbin Ansixinta "Hindisaha Xeerka Dhisidda Guddiga Madaxa-Bannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha.

FR

**MARKUU TIXGELIYAY:** Baahida loo qabo in la meel mariyo sharcigan.

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxaa si rasmi ah loo oggolaaday Xeerka Dhisidda Guddiga Madaxa-Bannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha.

**Qodobka 2aad**

Marka uu Madaxweynaha J.F.S. saxiixo Sharcigan, waxa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-DIS-2025
TAARIIKH: 10-05-2025
SAXIIX
AVV Ahmed ...
Hantidhowraha Guud Federaalka

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
9 MAR 2025
BY: Fadumo Mohamed Omar Sedihi
SAACAD ____ SAXIIX ____

**Madaxweynaha J. F.S.**

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

# JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

# HINDISAHA XEERKA DHISIDDA GUDDIGA MADAXA-BANNAAN EE DOORASHOOYINKA QARANKA IYO SOOHDIMAHA

**16/11/ 2024.**

# Tusmo

**CUTUBKA 1AAD: QODOBBO GUUD** ... **3**
Qodobka 1aad: Magaca Xeerka ... 3
Qodobka 2aad: Qeexid ... 3
Qodobka 3aad: Ujeeddooyinka Xeerka ... 4
Qodobka 4aad: Mabaadi'da guud ee xilgudashada Guddiga ... 4
Qodobka 5aad: Shakhsiyadda Qaanuuniga ah ee Guddiga ... 5
Qodobka 6aad: Xarunta Guddiga ... 5
**CUTUBKA 2AAD: DHISMAHA, XILALKA IYO AWOODAHA GUDDIGA** ... **6**
Qodobka 7aad: Habraaca magacaabista Guddiga ... 6
Qodobka 8aad: Shuruudaha Xubinnimada Guddiga ... 6
Qodobka 9aad Waayitaanka Xubinnimada Guddiga ... 7
Qodobka 10aad: Awoodaha iyo xilalka Guddiga ... 8
Qodobka 11aad: Qaab-dhismeedka Guddiga ... 10
Qodobka 12aad: Doorashada Guddoomiyaha iyo Guddoomiye ku-xigeenka ... 10
Qodobka 13aad: Xilka-qaadista Guddoomiyaha Guddiga iyo Guddoomiye Ku-xigeenka ... 10
Qodobka 14aad: Xilka Guddoomiyaha Guddiga iyo ku-Guddoomiye Ku-xigeenka ... 11
Qodobka 15aad:Muddo-xileedka Guddiga ... 11
Qodobka 16aad: Anshaxa xubnaha Guddiga ... 11
Qodobka 17aad: Xoghayaha Guud iyo shaqaalaha Guddiga ... 13
Qodobka 18aad: Xilka Xoghayaha Guud ee Guddiga ... 13
**CUTUBKA 3AAD XEERARKA GUDDIGA** ... **14**
Qodobka 19aad : Xeer-hoosaadka Guddiga ... 14
Qodobka 20aad: Kulamada iyo go'aan gaaridda Guddiga ... 14
**Qodobka 21aad: Xasaanadda Guddiga iyo Hawl-wadeenadooda** ... **15**
**CUTUBKA 4AAD: DHAQAALAHA GUDDIGA** ... **15**
Qodobka 22aad : Miisaaniyadda Guddiga ... 15
Qodobka 23aad: Mushaharka iyo gunnooyinka Xubnaha Guddiga ... 15
**CUTUBKA 5AAD: QODOBBO GUNNAANAD AH** ... **16**
Qodobka 25aad : Dhaarta Xubnaha Guddiga ... 16
Qodobka 26aad: Warbixinnada Guddiga ... 16
Qodobka 27aad: Maaraynta xogaha iyo macluumaadka ... 16
Qodobka 28aad: Baabi'in xeerar iyo guddiyo ... 17
Qodobka 29aad: Dhaqangalka Xeerkan ... 17

## CUTUBKA 1AAD: QODOBBO GUUD

### Qodobka 1aad: Magaca Xeerka

Xeerkan waxaa lagu magacaabayaa Xeerka Dhisidda Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha.

### Qodobka 2aad: Qeexid

Ereyada soo socda waxay yeelanayaan micnaha mid walba ku hor qoran, haddii aan Xeerkan gudihiisa si kale loogu sheegin:

| | | |
|---|---|---|
| **1.** | **Dastuur** | Waxaa loola jeeda Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya; |
| **2.** | **Xeerkan** | Waxaa loola jeeda Xeerka Dhisidda Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha; |
| **3.** | **Doorashooyinka** | Waxaa loola jeedaa Doorashooyinka heer Qaran, heer Dawlad-goboleedyada, SSC-Khaatumo, Gobolka Benaadir iyo Heer Dawladaha Hoose; |
| **4.** | **Soohdimaha** | Waxaa loola jeedaa soohdin juqraafiyadeed oo maamul ahaan kala soocda deegaan: |
| **5.** | **Xog-dhuleed:** | Waxaa loola jeedaa goob kasta oo dhulka kor kiisa ah oo tilmaan juqraafiyadeed yeelan karta (Geo spatial); |
| **6.** | **Guddiga** | Waxaa loola jeedaa Xubnaha Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha, maamulka iyo hawl-wadeennada Guddiga; |
| **7.** | **Guddoomiye** | Waxaa loola jeedaa guddoomiyaha Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha; |
| **8.** | **Xubin** | Waxaa loola jeedaa xubin ka mid ah xubnaha Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha; |
| **9.** | **JFS** | Waxaa loola jeedaa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. |

## Qodobka 3aad: Ujeeddooyinka Xeerka

Ujeeddada Xeerkaan waa in:

1. Lagu dhiso Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha oo ah Guddi Dastuuri ah sida ku cad qodobka 55aad ee Dastuurka oo madax- bannaan, dhexdhexaad ah una warbixinaya Barlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
2. In lagu qeexo awoodaha iyo xilalka Guddiga ee la xiriira doorashooyinka iyo aftida dalka ee heer degmo, Dawlad-gobaleed/SSC-Khaatumo iyo heer Qaran; iyo
3. In lagu qeexo awoodaha iyo xilalka Guddiga ee la xiriira arrimaha Soohdimaynta JFS.

## Qodobka 4aad: Mabaadi'da guud ee xilgudashada Guddiga

1. Guddigu, inta uu ku guda jiro gudashada waajibaadkiisa, waxa uu u hoggaansamayaa mabaadi'da guud oo ay ka mid yihiin: -
    a. Ilaalinta midnimada iyo wadajirka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
    b. Mabaadi'da nidaamka Dimoqraadiyadda iyo Federaalka; iyo
    c. Ilaalinta Xuquuqda siyaasadeed ee ay xaqa u leeyihiin dhammaan muwaadiniinta Soomaaliyeed si ay codkooda ugu dhiibtaan.
2. Guddigu waxa uu kaloo si gaar ah u ilaalinayaa in doorashooyinku ahaadaan kuwo xor ah oo caddaalad ku dhisan, kuna saleysan:
    a. Cod bixin qarsoodi ah, xor ah, ka dhawrsan wax isdaba marin, musuqmaasuq, laaluush, been abuur, handadaad, cunfi iyo cabsi gelin saameyn ku yeelan karta codbixinta;
    b. In Guddigu xilkiisa u guto si madax-bannaan oo waafaqsan shuruucda lagu maamulayo doorashooyinka iyo ururrada/ xisbiyada siyaasadeed;
    c. In hawlaha doorashooyinka loo maamulo si eex la'aan ah oo dhexdhexaad ah, laguna fuliyo hab tayeysan, taxaddar leh, dhaqan anshexeedka suuban, caddaalad iyo hufnaan;
    d. In guddigu dammaanad qaado xuquuqda siyaasadeed ee muwaaddinka, sida ku xusan qodobka 21aad ee Dastuurka;

e. In uu sugo geeddi-socodka doorashada, oo si sahlan loo fahmi karo xeerarkiisa, qaababkiisa iyo habraacyadiisaba; iyo

f. In la dammaanad qaado ka qaybgalka dhammaan bulshada Soomaaliyeed iyo helidda matalaad dheellitiran oo dhowraysa saami-qaybsiga bulshada.

3. Guddigu waxa uu xaqiijinayaa madax-bannaanida iyo dhedhexaadnimada siyaasadeed ee astaynta Soohdimaha Dawlad-goboleedyada/SSC-Khaatumo iyo maamullada degmooyinka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

4. Guddigu marka uu soohdimaha samaynayo waxa uu tixgelinayaa:

   a. Soohdimihii hore ee jiray 1991kii;

   b. Is-lahaanshaha qaab-degaaneedka ee dhulka; iyo

   c. Isku-xirnaanta degaanka.

## Qodobka 5aad: Shakhsiyadda Qaanuuniga ah ee Guddiga

1. Guddigu waxa uu leeyahay shaqsiyad qaanuuneed oo uu ku guto waajibaadkiisa shaqo ee Xeerkan iyo shuruucda kale ee Dalku u oggolyihiin, wax ku dacweyn karo laguna dacweeyn karo.

2. Guddiga waxa uu sameysanayaa astaan iyo shaabbad u gaar ah.

## Qodobka 6aad: Xarunta Guddiga

Xarunta dhexe ee Guddigu waa Caasimadda dalka ee Muqdisho, waxa uuna xafiisyo ku yeelanayaa dalka oo dhan.

## CUTUBKA 2AAD: DHISMAHA, XILALKA IYO AWOODAHA GUDDIGA

### Qodobka 7aad: Habraaca magacaabista Guddiga

1. Wasiirka Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta, isagoo la tashanaya Dawlad Goboleedyada, SSC-khaatumo, Gobolka Benaadir, hay'adaha ay khusayso iyo qaybaha kale ee bulshada ayaa waxaa uu soo xulayaa 54 musharax, iyada oo laga xulaayo 18 ka buuxiyay shuruudaha xubinnimada guddiga oo uu u gudbinayo Golaha Wasiirrada.
2. Wasiirku marka uu soo xulayo 18-ka Xubnood ee Guddiga, waa in ay ugu yaraan boqolkiiba Soddon (30%) Haween noqdaan.
3. Golaha Wasiirrada ayaa ansixinaya 18ka murashax ka dibna u gudbinaya Barlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
4. Marka loo soo gudbiyo 18ka murashax, Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxa uu fadhi wadajir ah ku ansixinayaa cod hal dheeri ah oo gacan taag ah.
5. Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ayaa ku meelmarinaaya xeer Madaxweyne kadib ansixinta Barlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

### Qodobka 8aad: Shuruudaha Xubinnimada Guddiga

1. Si waafaqsan Qodobka 58aad ee Dastuurka, Xubnaha Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha waa in ay buuxiyaan shuruudaha soo socda:
    a. In uu yahay muwaadin Soomaaliyeed;
    b. In uu haysto Shahaada Jaamacadeed oo la aqoonsan yahay;
    c. In Da'diisu aysan ka yarayn 35 sano;
    d. Dhimirkiisu dhan yahay;
    e. In uu leeyahay ugu yaraan toban (10) sano waayo aragnimo maamul ama sharci; iyo
    f. In uu bulshada ku dhex leeyahay anshax iyo sumcad wanaagsan.

2. Xubinnimada Guddiga looma magacaabi karo:
    a. Qof ka tirsan Xisbi siyaadadeed;
    b. Qof ay maxkamadi ku ridday xukun kama danbays ah oo ay ciqaabtiisu

gaarsiisan tahay Shan (5) sano;

c. Qof kasta oo xil Dawladeed ka haya Hay`adaha Dawladda ee heer federaal iyo heer Dawlad-goboleed/SSC-Khaatumo xilliga magacaabista iyo lixdii (6) bilood ee ka horraysay wakhtiga magacaabista; iyo
d. Qof kasta oo ay ka mamnuucaan Xeerarka JFS.

**Qodobka 9aad Waayitaanka Xubinnimada Guddiga**

1. Xubnaha Guddigu waxay xilkooda ku waayi karaan oo kaliya sababaha soo socda si waafaqsan Qodobka 59aad ee Dastuurka: -
    a. Geeri;
    b. Istiqaalad qoraal ah oo uu u gudbiyey Guddiga lagana aqbalo;
    c. Xil gudasho la'aan joogta ah sababo la xiriira mid jireed ama maskaxeed oo uu caddeeyey dhakhtar takhasus u leh oo la aqoonsan yahay;
    d. Xukun ciqaabeed oo ay maxkamad awood u leh si kama dambeys ah ugu rido;
    e. Aqbalaadda xil kale ee Dawladeed;
    f. Muddada xil haynta oo dhammaata;
    g. Xubinta jabisa xeerka hab-dhaqanka ee shaqo wanaaga;
    h. Xubintii ka maqnaata shan (5) fadhi oo xiriir ah uu Guddigu yeeshay, iyada oo aanay jirin sabab maangal ah oo ay xubintu ku maqnayd.
    i. Jabinta xeerarka kale oo lagu xuso Xeerkan dhexdiisa ama xeerarka kale ee JFS.
2. Guddigu waxa uu soojeedin xil ka qaadis xubinamada ku sameyn karaa xubin kamid ah Guddiga isaga oo u gudbinaya wasiirka si waafaqsan faqradda (1) (c, g iyo h) ee qodobkan, marka ay iskuraacaan saddex meelood labo meel (2/3) ee xubnaha guud eeGuddiga.
3. Wasiirku waxa uu soojeedinta xil kaqaadista u gudbinayaa Golaha Wasiirrada ,hadii ay aqbalaan soojeedintaas waxa ay u gudbinayaan labada aqal ee BJFS, oo cod hal dheeri ah 50+1% xubinta uga qaadayaa xubinnimada Guddiga.

4. Marka ay banaanaato xilka xubin ka mid ah xubnaha Guddiga waxaa lagu buuxinayaa si waafaqsan qodobka 7aad ee Xeerkan.

**Qodobka 10aad: Awoodaha iyo xilalka Guddiga**

Si waafaqsan Qodobka 56aad ee Dastuurka, Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha waxaa xilkiisa iyo waajibaadkiisa ka mid ah:

1. In uu maamulo, la socdo, xaqiijiyo habsami u socodka, xalaalnimada iyo hufnaanta doorashooyinka iyo aftida heerarka kala duwan ee dawladda iyo in uu ku dhawaaqo natiijada doorashooyinka iyo aftida dadweynaha;
2. In uu si joogta ah u diiwaan-geliyo codbixiyeyaasha doorashooyinka oo dhan;
3. In uu diyaariyo, abaabulo, fududeeyo, qabto heerarka kala duwan ee doorashooyinka guud ee dalka;
4. In uu si joogta ah u diiwaan-geliyo, nidaamiyo, iyo kormeero xisbiyada/ururrada siyaasadeed iyo murashaxiinta doorashooyinka guud ee heerarka kala duwan.
5. In uu asteeyo soohdimaha deegaan-doorashooyinka, si xilliyeysanna u asteeyo xarumaha codbixinta;
6. In uu dejiyo hab-dhaqanka doorashooyinka ee murashaxiinta iyo xisbiyada/ururrada siyaasadda;
7. In uu cayimo tirada iyo goobaha codbixinnada ee dalka;
8. In uu xalliyo khilaafaadka doorashooyinka go`aan kama dambays ahna ka gaaro marka laga reebo xaqa codbixinta, xaqa ka qaybgalka doorashada iyo go'aanka kama dambeysta ah ee natiijada doorashada kaasoo looga qaadan karo cabasho Maxkamadda awoodda u leh;
9. In uu soo saaro xeerar, habraacyo iyo qoraallo hagaya habsami u socodka doorashooyinka;
10. In uu xafiisyo ka furto degaannada dalka hadba meelaha ugu habboon oo aan looga maarmin fulinta hawlaha Guddiga iyo xilgudashadiisa;
11. In Guddigu uu qorto shaqaale lagama maarmaan u ah fulinta hawlaha doorashooyinka si waafaqsan Sharciga Shaqaalaha Rayidka;

12. Inuu shaqo joojin ku sameeyo qof kasta oo ka tirsan shaqaalaha Guddiga oo lagu helo fal wax u dhimaya dhexdhexaadnimada, hufnaanta iyo cadaaladda doorashooyinka si waafaqsan sharciga Shaqaalaha Rayidka;
13. In uu diyaariyo, maamulana agabka doorashada iyo goobaha codbixinta;
14. Inuu sameeyo daraasad ku saaabsan kala xulashada nidaamka ku habboon sidii loo soohdimeyn lahaa soohdinta dowlad goboleedyada, SSC-Khaatumo iyo Gobalka Banaadir.
15. Inuu sameeyo dhageysi dadweyne iyo mid xeeldheerayaal ama uu qabto kulamo ku saabsan soohdimeynta soohdinta dowlad goboleedyada, SSC-Khaatumo iyo Gobalka Banaadir.
16. Inuu booqashooyin ku sameeyo goobaha si uu ula tashado shacabka deegaannada khuseeya soohdimeynta dowlad goboleedyada SSC-Khaatumo iyo Gobalka Banaadir.
17. Inuu sameeyo howlgal nakhshadayn ah oo ku saabsan astaamaynta soohdimaha dowlad goboleedyada SSC-Khaatumo iyo Gobalka Banaadir.
18. Inuu soo saaro khariidadaha aasaasiga ah ee Dalka iyo midaynta xog-dhuleedka iyo magacyada juqraafiyadeed oo ay soo saaraan hay`adaha kale ee JFS.
19. In uu u soo jeediyo talooyin Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya si loo soohdimeeyo maamullada iyo degaannada, asagoo tixgelinaya: xogta dadka, dhulka, xaaladda siyaasadeed iyo kan dhaqan, si uu Baarlamaanku go’aan uga gaaro arrimaha soohdimaha
20. Dejinta nidaamka dhaqan-wanaagga murashaxiinta, xisbiyada siyaasadda iyo warbaahinta;
21. In uu ka joojin karo tartanka doorashada murashaxii ku xadgudba shuruucda ama kuwa aan soo buuxin shuruudaha doorashada ku xusan ama dib u celin karo liiska/liisaska lagu soo magacaabay.
22. In uu mas’uul ka noqdo hagista dhammaan hawlaha amniga iyo habsami u socodka doorashooyinka dalka.
23. In uu martiqaad u fidiyo isla markaana uu aqoonsado goobjoogayaasha

doorashooyinka ee maxaliga ah iyo kuwa caalamiga ah.

24. In uu fuliyo hawl kasta ee kale, oo la xiriirta arrimaha doorashooyinka iyo soohdimaha ee ku xusan Dastuurka ama xeerarka kale ee JFS.

**Qodobka 11aad: Qaab-dhismeedka Guddiga**

1. Guddigu waxa uu yeelanayaa qaab-dhismeedka soo socda:
   a. Guddoomiye;
   b. Guddoomiye ku-xigeen; iyo
   c. Xubno
2. Guddigu waxa uu dhisan karaa guddi hoosaadyo ka kooban xubnihiisa hadba sida uu u arko inay lagama maarmaan u tahay gudashada xilkiisa.

**Qodobka 12aad: Doorashada Guddoomiyaha iyo Guddoomiye ku-xigeenka**

1. Xubnaha Guddigu waxa ay kulankooda ugu horreeya iska dhex dooranayaan Guddoomiye iyo ku-xigeen.
2. Xilka Guddoomiyaha iyo Guddoomiye ku-xigeenka waxaa ku guulaysanaya murashaxa hela codad aqlabiyad ah 50%+1 ee xubnaha Guddiga. Haddii murashaxna heli waayo cod aqlabiyad ah 50%+1 ee xubnaha Guddiga; waxaa wareeg kama dambays ah ku tartamaya labada murashax ee ugu codka badan, waxaana lagu kala guulaysanayaa cod hal dheeri ah ee xubnaha codeeyay.
3. Ilaa laga dooranayo Guddoomiyaha iyo Guddoomiye Ku-xigeenka, waxaa kulamada Guddiga shir guddoominaya Xubinta ugu da'da weyn. Guddoomiyaha kumeel gaarka ah ayaa yeelanaya cod dheeri ah haddii ay sinmaan labada murashax ee wareegga sadexaad.

**Qodobka 13aad: Xilka-qaadista Guddoomiyaha Guddiga iyo Guddoomiye Ku-xigeenka**

Xilka-qaadista Guddoomiyaha ama Guddoomiye Ku-xigeenka waxaa soojeedin kara saddex meelood meel (1/3) ee xubnaha Guddiga, waxaana codad saddex meelood laba meel ah(2/3) ku ansixinaya xubnaha Guddiga.

## Qodobka 14aad: Xilka Guddoomiyaha Guddiga iyo ku-Guddoomiye Ku-xigeenka

1. Guddoomiyaha Guddiga waa madaxa Guddiga, waxa uu na u xilsaaran yahay:
   a. Metelaadda Guddiga si sharci ah iyo inuu ku hadlo afka Guddiga
   b. Isugu yeeridda iyo guddoominta kulamada Guddiga;
   c. Hagidda iyo u kuur gelidda fulinta qorshe hawleedka Guddiga;
   d. Xoojinta iyo joogteynta xiriirka shaqo ee kala dhexeeya qaybaha kale ee Dawladda dhexe, Dawlad-goboleedyada, SSC-khaatuma, Gobolka Banaadir iyo Dawladaha Hoose ee JFS; iyo
   e. Fulinta wixii waajib kale ee loogu xil saaro Dastuurka ama Shuruucda kale ee dalka
2. Guddoomiye ku-xigeenka Guddiga waxa uu u xilsaaran yahay inuu:
   a. Fuliyo hawsha iyo waajibaadka Guddoomiyaha Guddiga marka uu maqan yahay ama ku timaado xaalad xil gudasho la'aan ku meel gaar ah; iyo
   b. Fuliyo hawl kasta oo uu u xilsaaro Guddoomiyaha Guddiga.

## Qodobka 15aad:Muddo-xileedka Guddiga

1. Muddada xil-haynta xubnaha Guddiga waa lix (6) sano oo hal mar ah oo aan dib u cusboonaysiin lahayn si waafaqsan qodobka 60aad ee Dastuurka.
2. Si looga hortago dib u dhaca jadwalka howlaha doorashada, xulista xubnaha Guddiga waa inuu bilowdaa lix (6) bilood ka hor inta uusan dhammaan mudda xileedka xubnaha xilka haya.

## Qodobka 16aad: Anshaxa xubnaha Guddiga

1. Madax-bannaanida iyo dhex- dhexaadnimada xubnaha: Xubin kasta oo ka mid ah Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka Qaranka & Soohdimaha, waa inay u gutaan hawshooda si caddaalad, daacadnimo iyo dhexdhexaadnimo ku salaysan, kana maran cabsi gelin kasta ama nacayb iyo eex saameyn ku yeelan karta ee:
   a. Hay'ad kasta oo ka tirsan dawladda;
   b. Xisbi siyaasadeed;
   c. Murashax doorasho;

d. Awood kasta oo kale ama urur

2. Ka madax-bannaanida xafiis siyaasadeed ama dawladeed:
   a. Xubin kasta ee Guddiga iyo shaqaalaha xaq uma laha muddo xiliyeedkooda in:
      i. Loo magaacabo xafiisyo siyaasadeed;
      ii. In loo magacaabo xafiis dawladeed kale.
   b. Xubinta Guddiga doorashooyinka waa:
      i. In aysan si toos ah ama si dadban u taageerin ama uga hor imaanin xisbi si kastaba ama murashax oo ka qaybgalaya doorasho ama arrimo la xiriira xisbi siyaasadeed;
      ii. In uusan isticmaalin ama ka faa`iideysan xogta sirta uu awood u leeyahay helitaankeeda maadaama uu ka tirsan yahay Guddiga;
      iii. In uusan siinin xog ama macluumaad dhinac saddexaad ama shakhsi aanan ka ahayn xogta ama macluumaadka la xiriira hawl-gudashadooda.

3. Xubin kasta oo ka mid ah Guddiga oo si toos ah ama si dadban uga dan leh qandaraas guddigu bixinayo ama ah qandaraas soo jeedin ku jira ama arrin kastoo kale oo ajenda Guddiga horyaal ah oo dan qof ahaan xiriir toos ama dadban ku sameyneysa, kama qaybgalayo fadhiga looga hadlaayo qandaraaskaas ama arrinta kale ee Guddiga hortaal kamana codeynayo, loomana tirinayo guntanka fadhiga arrinta uu Guddigu ka go'aan gaarayo.

4. In uusan ku dhaqmin wax kasta wax u dhimi karta madax-bannaanida Guddiga, ku dhawaaqo ama ka mid noqdo hadal jeedin si toos ama dadban halis u gelin karta hufnaanta iyo dhexdhexaadnimada Guddiga.

5. Xirfad wanaag: Xubin kastoo ka tirsan Guddiga iyo hawl-wadeennada Guddiga waa:
   a. Inay u gutaan xilkooda sida ugu wanaagsan ee u hanan karaankalsoonida dadweynaha;
   b. Inay ula dhaqmaan dadweynaha iyo talo wadaagga si sharaf iyo ixtiraam ku dheehan tahay;
   c. Inay u gutaan xilkooda si xirfad wanaag ay ku dheehan tahay iyadoo la raacayo shuruucda la xiriira doorashooyinka iyo xeer-hoosaadka; iyo

d. Inay ixtiraamaan xuquuqda xoriyadda dhammaan muwaadiniinta.

6. Ku tanaadid sharci darro: Xubin kasta oo ka mid ah Guddiga iyo hawl-wadeennada waa:

    a. In uusan si sharci darro ah u isticmaalin xilka si uu ugu tanaado ama ugu tanaadiyo cid kale;

    b. In uusan qaadan ama weydiisan hadiyad cid kasta oo dan hawleed ka leh xafiiska Guddiga; iyo

    c. In uusan bixin xog ama macluumaad uu hayo si uu uga faa'iideysto ama uga faa'iideeyo cid kale.

**Qodobka 17aad: Xoghayaha Guud iyo shaqaalaha Guddiga**

1. Guddiga ayaa ansixinaya soo jeedinta magacaabista iyo xil-ka-qaadista Xoghayaha Guud ee Guddiga kadib markuu soojeediyo Guddoomiyaha Guddiga.
2. Xoghayaha Guud iyo howlwadeennada kale Guddiga, ee aanan ahayn shaqaalaha kumeelgaarka ah, waxaa lagu dhaqayaa Sharciga Shaqaalaha Rayidka ee JFS.

**Qodobka 18aad: Xilka Xoghayaha Guud ee Guddiga**

1. Xoghayaha Guddigu waxa uu mas'uul ka yahay arrimaha soo socda:
    a. Waa madaxa maamulka Guddiga mas'uulna ka ah hagidda hawlaha xogheynta;
    b. Xoghayaha waa Madaxa Maamulka Xafiiska Doorashooyinka iyo Soohdimaha.
    c. Xoghayaha waxa uu ku shaqeynayaa awaamirta Guddoomiyaha isla markaana waxa uu siinayaa warbixin joogta ah;
    d. Fulinta go'aannada Guddiga;
    e. Waa sarkaalka idman ee Guddiga si waafaqsan sharciga maamulka maaliyadda dalka.
    f. Kormeeridda iyo hagidda habsami u socodka shaqada iyo shaqaalaha Guddiga;
    g. Waxa uu mas'uul ka yahay kaydinta dukumeentiyada Guddiga;
    h. Hawl kasta oo kale oo uu Guddigu u xilsaaro.
2. Xoghayaha Guud kama mid aha xubnaha Guddiga Madaxa-banaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha, waxaa lagu xulayaa habraac ku xusan sharciga shaqaalaha rayidka ee dalka.

3. Xoghayaha guud waxa uu ka qayb-galayaa shirarka Guddiga, waxa uu na ka dhiiban karaa taladiisa hase ahaatee ma codeeyn karo.

## CUTUBKA 3AAD XEERARKA GUDDIGA

### Qodobka 19aad : Xeer-hoosaadka Guddiga

1. Guddiga waxa uu yeelanayaa xeer-hoosaad lagu maamulo hawlaha iyo dhaqan-gelinta qodobada uu Xeerkan tilmaamayo.
2. Xeer-hoosaadka waxaa ka mid noqonaya:
   a. Magacaabista, ansixinta iyo awood-siinta xubnaha xafiisyada hoos yimaada mas'uuliyadda Guddiga si waafaqsan Xeerkan;
   b. Ka qaadista tallaabo anshax-marin sarkaal kasta ee ka tirsan xafiis hoos imaanaya mas'uuliyada Guddiga si waafaqsan sharciyada dalka;
   c. Baabi'in jago horay loo magacaabay ama shaqo ka fariisin shaqaale xafiis kasta oo hoos yimaada mas'uuliyada Guddiga;
   d. Dejinta habraaca goobaha doorashooyinka; iyo
   e. Nidaaminta howl kasta oo kale oo uu Guddigu u arko inay tahay lagama maarmaan xilgudashadiisa.
3. Xeer-hoosaadyada uu dejinayo Guddigu waa inaysan ka hor imaan Xeerkaan.

### Qodobka 20aad: Kulamada iyo go'aan gaaridda Guddiga

1. Gudoomiyaha guddiga oo kaliya ayaa isugu yeeri kara kulamada guddiga, Xubnahan guddigu waxa ay xaq u leeyihiin in ay gudoomiyaha ka codsadaan in uu shir isugu yeero si qoraal ah oo saxiixan, haddii uu gudoomiyuhu shirkaas ku qabanwaayo muddo usbuuc ah, waxa u bannaan saddex meelood laba meel (2/3) ka mid ah xubnaha guddiga in ay isugu yeeraan shir aan caadi ahayn.
2. Kulamada Guddiga waxa ay ku ansaxayaan marka guntanku dhan yahay 50%+1 xubnood oo Guddiga ka mid ah marka laga reebo xaaladaha loo baahan yahay in Guddigu go'aannada ku gaaro saddax meelood laba meel ee xubnaha Guddiga.
3. Dhammaan kulamada Guddiga waxaa shir guddoominaya Guddoomiyaha Guddiga, marka uu maqan yahayna waxaa shir guddoominaya Guddoomiye ku-xigeenka.
4. Haddii ay saddex meelood laba meel (2/3) ee xubnaha guddiga ay codsadaan kulan waa in uu guddoomiyuhu qabto.
5. Go'aannada Guddigu waxa ay ku ansaxayaan cod hal dheeri ah ee tirada guud ee

xubnaha Guddiga (50%+1), marka laga reebo go`aannada masiiriga ah sida ku dhawaaqidda natiijooyinka doorashada iyo Aftida oo ay ku gaarayaan saddex melood laba (2/3) codadka guddiga.

6. Marka codaynta ku xusan Faqradda (4) qodobkan ay noqoto barbardhac, Guddoomiyaha ayaa cod labaad yeelanaya.

**Qodobka 21aad: Xasaanadda Guddiga iyo Hawl-wadeenadooda**

1. Xubin Guddiga ka mid ah ama hawl-wadeenadooda laguma soo oogi karo dacwad ciqaabeed inta ay gudanayaan hawsha doorashada marka laga reebo:
    a. In la qabto isaga/iyada oo dambi faraha kula jira/jirta; ama
    b. In oggolaansho dacwad ku oogid laga haysto Maxkamadda Sare ee Federaalka.
2. Dhismooyinka iyo xafiisyada Guddiga doorashooyinka laguma samayn karo baaris la xiriirta fal-dambiyeed iyada oo aan ogolaansho laga haysannin Maxkamadda Sare ee Dowladda Federaalka.

**CUTUBKA 4AAD: DHAQAALAHA GUDDIGA**

**Qodobka 22aad : Miisaaniyadda Guddiga**

1. Guddigu waxa uu yeelanayaa miisaaniyad u gaar ah oo ka mid ahaanaysa miisaaniyadda guud ee Dowladda Federaalka Soomaaliya.
2. Guddigu waxa uu u madax-bannaan yahay maamulidda miisaaniyadda loo qoondeeyay si waafaqsan xeerarka khuseeya maaraynta maaliyadda guud ee JFS.

**Qodobka 23aad: Mushaharka iyo gunnooyinka Xubnaha Guddiga**

1. Xubnaha Guddigu waxa ay xaq u leeyihiin gunno bileed si waafaqsan habraacyada maaliyadeed ee ay Xukuumadda Federaalka ku dhaqanto.
2. Xubnaha Guddiga waxay xaq u leeyihiin gunno socdaal iyo kharashaadka kale ee kaga baxa gudashada waajibaadka Guddiga.

## CUTUBKA 5AAD: QODOBBO GUNNAANAD AH

### Qodobka 25aad : Dhaarta Xubnaha Guddiga

Ka hor inta aysan qaban xilka xafiiska, dhammaan xubnaha Guddiga waxaa Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya hortiisa ku dhaarinaya Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee dalka dhaarta hoos ku qoran:

***"Waxaan ku dhaaranayaa magaca Ilaahay inaan xilkayga u gudanaayo si daacad ah oo danta dalka, dadka iyo diintu ku jirto, dhawrana Dastuurka qaranka iyo shuruucda kale oo dalka u yaalla"***

### Qodobka 26aad: Warbixinnada Guddiga

1. Guddigu waxa uu u soo gudbinayaa labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka warbixin kal-fadhigiiba ugu yaraan hal mar ama ka badan hadii loo baahdo.
2. Guddigu waxa uu kaloo soo saarayaa qoraallo iyo wacyi-gelin dadweyne.
3. Guddigu waxa uu soo saarayaa warbixinnada kale ee Xeerkan iyo Shuruucda kale ee Dalku masuuliyaddeeda siinayaan.
4. Guddigu waxa uu warbixin siin karaa laamaha fulinta ee heerarka kala duwan ee Dowladda.

### Qodobka 27aad: Maaraynta xogaha iyo macluumaadka

1. Guddigu waxa uu daabacayaa islamarkaana faafinayaa dhammaan macluumaadka muhiimka ah ee ku saabsan awaamirta iyo talooyinka uu siinaayo dadweynaha.
2. Bixinta macluumaadkaas waxaa la waafajinaayaa xafidaadda ama ilaalinta sirta Guddiga iyo xeerarka kale ee ilaalinaya xogta dadweynaha.
3. Xubin kasta oo ka mid ah Guddiga iyo hawl-wadeennadiisa waxa ay saxiixayaan heshiis laxiriira dhawrista sirta iyo xafidaadda macluumaadka doorashooyinka.
4. Guddigu markuu arko inay habboon tahay, waxa uu baahinayaa ama ogeysiinayaa dadweynaha macluumaadka lagama maarmaanka ah si qeexan:

a. Halka ay xafiisyada Guddigu ku yaallaan;

b. Cinwaanadda xafiisyada, lambarrada talefoonnada iyo habkii kale ee lagula xiriir karo.

5. Isgaarsiinta iyo xogaha ha ahaadeen qoraal, maqal ama muuqaal waxaa lagu wadaagi karaa kaliya mareegaha iyo fariinsideyaasha (email) rasmiga ah ee JFS.

**Qodobka 28aad: Baabi'in xeerar iyo guddiyo**

1. Xeerkan waxa uu baab`inayaa sharci kasta ee dalka ka jira oo ka hor imaanaya ama aan la socon karin Xeerkan.
2. Xeerkan waxa uu baabi`inaya guddi kasta ee doorasho iyo soohdimo ee ka jira Dalka JFS, oo aan ka ahayn Gudiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha.

**Qodobka 29aad: Dhaqangalka Xeerkan**

Xeerkan waxa uu dhaqangelayaa marka uu Baarlamaanka Federalka ansixiyo, uuna saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ee Dawladda.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**SHARCI LR. 27** **TAARIIKH: 21-DA NOFEEMBER 2024**

**SHARCIGA URURADA & XISBIYADA SIYAASADDA ee JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA**

**MADAXWEYNAHA J.F.S,**

| | |
|---|---|
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG. |
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobka 82aad, Faqradda 3aad ee Dastuurka KMG. |
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG. |
| **MARKUU ARKAY:** | Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee summaddeedu tahay **XGGSH/633/B11/24**, ku taariikheysan **23/11/2024**, ujeeddaduna tahay Soo Gudbin Ansixinta "Hindisaha Xeerka Ururada iyo Xisbiyada Siyaasadda ee J.F.S. |
| **MARKUU TIXGELIYAY:** | Baahida loo qabo in la meel mariyo sharcigan. |

FR

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxaa si rasmi ah loo oggolaaday Xeerka Ururada iyo xisbiyada Siyaasadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

**Qodobka 2aad**

Marka uu Madaxweynaha J.F.S. saxiixo Sharcigan, waxa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-814-2025
TAARIIKH: 10-06-2025
SAXIIX
AVV. Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud F. JFS

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
29 MAR 2025
BY Faduma Mohamed Omar Salidi
SAACAD ______ SAXIIX ______

**Madaxweynaha J. F.S.**

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

**JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA**

**HINDISAHA XEERKA URURRADA IYO XISBIYADA SIYAASADDA JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA**

**20/11/2024**

## Tusmo

**CUTUBKA 1AAD: QODOBBO GUUD ........ 4**

Qodobka 1aad: Magaca Xeerka........ 4

Qodobka 3aad: Mabaadii'da Guud ee Ururrada iyo Xisbiyadda Siyaasadda ........ 5

Qodobka 4aad: Qeexitaan........ 5

Qodobka 5aad: Xaqa ka qeybgalka Siyaasadda ........ 7

Qodobka 6aad: Xafiiska Diiwaanhayaha Ururrada ama Xisbiyada Siyaasadda........ 8

Qodobka 7aad: Habraaca iyo shuruudaha magacaabista Diiwaanhayaha........ 8

**CUTUBKA 2AAD: DIIWAANGELINTA URUR IYO AQOONSIGA XISBI SIYAASADEED ........ 9**

Qodobka 8aad: Dawrka Ururrada iyo Xisbiyada Siyaasadda ........ 9

Qodobka 9aad: Shuruudaha jiritaanka Urur ama Xisbi Siyaasadeed ........ 9

Qodobka 10aad: Qaabdhismeedka Urur ama Xisbi Siyaasadeed........ 10

Qodobka 11aad: Shuruudaha Diiwaangelinta Ururrada Siyaasadda ........ 10

Qodobka 12aad: Dastuurka iyo xeerarka Ururka ama Xisbiga Siyaasadeed ........ 12

Qodobka 13aad: Diidmo Diiwaangelin........ 13

Qodobka 14aad: Xuquuqda iyo waajibaadka Ururka iyo Xisbiga Siyaasadeed ........ 13

Qodobka 15aad: Sababaha Waayidda Xubinnimada Ururka ama Xisbiga Siyaasadeed..... 14

**Qodobka 16aad: Isbaheysi Ururro ama Xisbiyo Siyaasad ........ 14**

Qodobka 17aad: Midowga Ururrada Siyaasadeed........ 15

Qodobka 18aad: Waajibka keydinta xogaha Ururka iyo Xisbiyada Siyaasadda........ 15

Qodobka 19aad: Waajibka Gudbinta dokumentiyada iyo wargelinta isbeddellada ........ 16

Qodobka 20aad: Kulamada Dadweynaha ........ 16

Qodobka 21aad: Kala reebbidda Ururrada Siyaasadeed........ 16

Qodobka 22aad: Taakulaynta farsamo ee shisheeyaha........ 17

**CUTUBKA 3AAD: ARRIMAHA MAALIYADDA EE URURRADA IYO XISBIYADA SIYAASADDA ........ 17**

Qodobka 23aad: Sanduuqa Maaliyadda ee Xisbiyada Siyaasadeed ........ 17

Qodobka 24aad: Ujeeddada Sanduuqa Xisbiyada........ 17

Qodobka 25aad: Ilaha Maaliyadeed ee Sanduuqa Xisbiyada........ 18

Qodobka 26aad: Qoondaynta iyo adeegsiga dakhliga Sanduuqa ........ 18

Qodobka 27aad: Ilaha dhaqaale ee Urur ama Xisbi Siyaasadeed ........ 19

Qodobka 28aad: Faafinta ilaha dhaqaale ee Ururka ama Xisbiga Siyaasadeed ..... 20
Qodobka 29aad: Diiwaanka xisaabaadka Ururka ama Xisbiga Siyaasadeed ..... 20

**CUTUBKA 4AAD: QODOBBO GUNNAANAD AH ..... 21**
Qodobka 30aad: Xallinta khilaafaadka Ururka ama Xisbiga Siyaasaddeed ..... 21
Qodobka 31aad: Ka garsooridda go'aannada maamul ..... 21
Qodobka 32aad: Dambiyada, Xadgudubyada iyo ciqaabaadka ..... 21
Qodobka 33aad: Xeer-nidaamiyeyaal iyo habraacyo ..... 23
Qodobka 34aad: Muddada jiritaanka xisbiyada siyaasadeed ..... 23
Qodobka 35aad: Marxaladaha kala-guurka ..... 24
Qodobka 36aad: Baabi'in ..... 24
Qodobka 37aad: Dhaqangalka Xeerkan ..... 24

## CUTUBKA 1AAD: QODOBBO GUUD

### Qodobka 1aad: Magaca Xeerka

Xeerkan waxaa loogu yeerayaa Xeerka Ururrada iyo Xisbiyada Siyaasadda ee JFS.

### Qodobka 2aad: Baaxadda iyo Ujeeddada Xeerka

1. **Baaxadda Xeerkani waa:**

Xeerku waxa uu nidaaminayaa diiwaangelinta, maalgelinta iyo fulinta howlaha Ururrada iyo Xisbiyada Siyaasadda ee JFS.

2. **Ujeeddada Xeerkani waa;**
   a. In lagu maamulo Ururrada iyo Xisbiyadda Siyaasadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
   b. In uu tilmaamo habraaca dhismaha Ururrada iyo Xisbiyadda Siyaasadda si waafaqsan Dastuurka KMG Federaalka;
   c. In lagu hirgaliyo doorashooyin xilliyeysan oo qof-iyo-cod ah oo xor iyo xalaal ah toos ah codkuna yahay qarsoodi kana maran cabsi gelin, loona maamulay si madaxbannaan, dhexdhexaad ah, hufan, kuna saleysan habraac sharci oo dhaqan-gal ah.
   d. In lagu nadaamiyo hanaanka Diiwaangelinta Ururrada iyo Xisbiyadda Siyaasadda in uu ku dhiirrigeliyo muwaadinka Soomaaliyeed ka qeybgalka arrimaha siyaasadda ee dalka, uuna sameysan karo, kuna biiri karo urur ama xisbi siyaasadeed una tartami karo xil kasta oo xisbiga/ururka gudihiisa ah.
   e. In uu dhiirrigeliyo in bulshada Soomaaliyeed ku midoobaan aragti, qiyam ku dhisan qarinnimo kana fog isbahaysi qabiil iyo ujeeddooyin lid ku ah midnimada Soomaaliyeed.
   f. In lagu tilmaamo nidaaminta ururradii hore u diiwaan gashanaa iyo marxaladaha kala guurka ah
   g. In uu tilmaamo dib u furidda xisbiyada siyaasadeed, si ay u helaan ururrada cusub fursad ay ugu tartami karaan ka mid noqoshada saddexda xisbi qaran.

### Qodobka 3aad: Mabaadii'da Guud ee Ururrada iyo Xisbiyadda Siyaasadda

Mabaadii'da guud ee Ururrada iyo Xisbiyadda Siyaasadda looga baahan yahay in ay u hoggaansamaan waa:

1. Dhawrista shareecada Islaamka iyo dhaqanka suubban ee Soomaaliyeed.
2. Ilaalinta, ku dhaqnka, adkeynta, horumarinta midnimada Jamhuuriyadda;
3. Xurmaynta, qaddarinta, horumarinta iyo difaaca xuquuqda aadanaha.
4. U hoggaansanaanta mabaadii'da dimuqraadiyadda iyo maamul wanaagga;
5. Reebbanaanta u ol'oleeynta kala goynta dalka iyo isku dirka bulshada;
6. In uu ka fogaado adeegsiga maaliyad ka timid ilo sharcidarro ah; ama
7. Adeegsado hanti dowladeed, la yimaaddo fal laaluush iyo musuqmaasuq ah si uu u gaaro dano gaar ah.

### Qodobka 4aad: Qeexitaan

Erayada soo socda waxa ay Xeerkaan gudihiisa ku yeelanayaan qeexitaanka mid walba ku hor qoran:

| | | |
|---|---|---|
| **1.** | **Xisbi Siyaasadeed** | Waxaa loola jeedaa Urur Siyaasadeed ka qaybgalay doorashooyinka goleyaasha deegaanka kana mid noqday saddexda Urur Siyaasad ee helay codadka ugu badan ee ansaxay si waafaqsan Xeerka Doorashooyinka JFS; |
| **2.** | **Urur Siyaasadeed** | Waxaa loola jeedaa Muwaadiniin is urursaday ama isku biiray lehna fulin ujeeddo iyo barnaamij siyaasadeed nabdoon, u abaabulan hab dimoqraadi ah, u degsan yihiin dastuur iyo xeerar nidaamiya hawlahooda laguna diiwaangeliyay si waafaqsan Xeerkan iyo xeerarka kale ee dalka si uu ugu tartamo doorashada goleyaasha deegaannada ee JFS; |
| **3.** | **Dastuur** | Waxaa loola jeedaa Dastuurka KMG JFS; |

| | | |
|---|---|---|
| **4.** | **Diiwaan-haye** | Waxaa loola jeedaa mas'uulka ugu xilsaaran G.M.D.Q.S diiwaangelinta Ururrada Siyaasadda, aqoonsiga Xisbiyada siyaasadda ee ku soo baxay doorashada goleyaasha deegaanka, kormeerka iyo nidaaminta hawlaha Ururrada iyo Xisbiyada Siyaasadda si waafaqsan Xeerkan; |
| **5.** | **Doorasho** | Waxaa loola jeedaa micnaha lagu siiyay Xeerka Doorashooyinka JFS; |
| **6.** | **Guddoomiyaha** | Waxaa loola jeedaa xubin uu Shirweynaha Ururka ama Xisbiga Siyaasadeed u doortay xilka guddoomiyenimada Ururka ama Xisbiga; |
| **7.** | **Guddiga/ G.M.D.Q.S** | Waxaa loola jeedaa Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha ee JFS; |
| **8.** | **Guddiga Fulinta** | Waxaa loola jeedaa Guddi ka kooban xubno ka tirsan Ururka ama Xisbiga Siyaasadeed kaasi oo leh awoodda fulineed sida ay dhigayaan dastuurka iyo xeerarka Ururka ama Xisbiga Siyaasadeed; |
| **9.** | **Shirweynaha Ururka/ Xisbiga** | Waxaa loola jeedaa shirka guud oo ay xubno ka yihiin ergooyin metala laamaha uu Ururku ama Xisbiga Siyaasadeed ku leeyahay dalka; |
| **10.** | **Isbahaysi** | Waxaa loola jeedaa heshiis isbahaysi siyaasadeed oo dhexmara laba Xisbi siyaasadeed kuna saabsan fulin qorshe siyaasadeed oo midaysan iyada oo Xisbi Siyaasadeed kastaa ahaanayo mid leh jiritaankiisa qaanuuneed ee gaarka u ah; |
| **11.** | **Laan** | Waxaa loola jeedaa farac uu Urur ama Xisbi Siyaasadeed ku leeyahay Dowlad-goboleed, SSC-Khaatuma iyo Gobolka Benaadir; |
| **12.** | **Midow** | Waxaa loola jeedaa isku biiridda laba Urur Siyaasadeed ama ka badan ka hor doorashada goleyaasha deegaanka si waafaqsan Xeerkaan, xeer-nidaamiyeyaashiisa iyo xeerarka kale ee dhaqangalka ah. |

| | | |
|---|---|---|
| **13.** | **Muwaadin** | Waxaa loola jeedaa muwaadin Jamhuuriyadda Soomaaliyeed si waafaqsan xeerka Jinsiyadda Soomaaliya; |
| **14.** | **Xarunta Dhexe** | Waxaa loola jeeda xaruntaUrur ama Xisbi Siyaasad ku leeyahay geyiga JFS; iyo |
| **15.** | **JFS** | Waxaa loola jeedaa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya |

## Qodobka 5aad: Xaqa ka qeybgalka Siyaasadda

1. Si uu dhigayo Qodobka 21aad ee Dastuurka JFS, Muwaadinka oo gaaray da'da siddeed iyo toban (18) sano waxa uu xaq u leeyahay inuu abuuro ama ka mid noqdo Urur ama Xisbi Siyaasadeed marka laga reebo:
    a. Xubnaha ka tirsan ciidamada qalabka sida, garsoorka, diblomaasiyiinta, hawl-wadeennadda safaaradaha, shaqaalaha rayidka ah ee dowladda federaalka, dowlad goboleedyada, SSC-Khaatuma, Gobolka Benaadir iyo dowladaha hoose; iyo
    b. In xuquuqdiisa qabashada xafiis ama xil Dowladeed lagu xayiray xukun garsoor oo kama dambays ah si waafaqsan xeerarka Dalka.
2. Xubnaha ku xusan faqradda 1aad, xarafkiisa (a ) ee qodobkaan waxaa ka reebban:
    a. Ka qayb-qaadashada ol'ole siyaasadeed kaas oo khuseeya Ururrada iyo Xisbiyada Siyaasadeed; iyo
    b. Soo bandhigidda aragtiyo siyaasadeed oo muujinaya dhexdhexaadnimo la'aan ama kala doorbidid ku saabsan Ururrada ama Xisbiyada Siyaasadeed.
3. Marka laga reebo xaaladaha kale ee sharcigan ku tilmaaman, shisheeyaha waxa gebi ahaanba ka reebban inuu aas'aaso, xubin ka noqdo ama ku lug-lahaado fulinta howlaha Ururrada, Xisbiyada Siyaasadda iyo doorashada JFS.
4. Waxaa reebban in Muwaaddinku xubin ka ahaado in ka badan hal Urur ama Xisbi Siyaasadeed.

**Qodobka 6aad: Xafiiska Diiwaanhayaha Ururrada ama Xisbiyada Siyaasadda**

1. Xafiiska Diiwaanhayaha Ururrada/Xisbiyada Siyaasadda waxa uu hoosyimaadaa Guddiga wuxa uuna ugu xilsaaran yahay:
   a. Diiwaangelinta, hagidda, u kuurgelidda, kormeeridda iyo baarista howlaha Ururrada iyo Xisbiyada siyaasadda si uu u hubiyo u hoggaansanaanta xeerarka iyo habraac-yadiisa.
   b. La socodka maaraynta sanduuqa dhaqaalaha ee Xisbiyada Siyaasadda;
   c. Xaqiijinta faafinta xisaab sannadeedka la hanti-dhowray ee Ururrada/Xisbiyada Siyaasadda;
   d. Hubinta iyo shaacinta diiwaanka Ururrada ama Xisbiyada Siyaasadda;
   e. Kaydinta diiwaanka iyo summadaha Ururrada ama Xisbiyada Siyaasadda;
   f. Xaqiijinta in qofku ka mid yahay keliya hal Urur ama Xisbi Siyaasadeed;
   g. Hubinta in doorashada xilalka Ururrada ama Xisbiyada Siyaasadeed u dhacaan si waafaqsan dastuuradooda iyo xeerarkooda;
   h. Baaridda cabashooyinka soo gaara iyo u gudbinta natiijada ka dhalata Guddiga Doorashooyinka si waafaqsan Xeerkaan; iyo
   i. Fulinta howl kasta oo kale oo loo xilsaaro si waafaqsan Xeerkan ama xeer-nidaamiyeyaashiisa.
2. Guddiga ayaa go'aaminaya qaab-dhismeedka maamul ee uu yeelanayo Xafiiska Diiwaanhayaha Ururrada/Xisbiyada Siyaasadeed.

**Qodobka 7aad: Habraaca iyo shuruudaha magacaabista Diiwaanhayaha**

1. Guddiga ayaa magacaabaya, xilkana ka qaadi kara Diiwaanhayaha ka dib marka uu helo soojeedinta Guddoomiyaha Guddiga.
2. Qofka loo magacaabayo Diiwaanhayaha Ururrada iyo Xisbiyada Siyaasadda waa inuu buuxiyaa shuruudaha soo socda:
   a. Waa inuu yahay muwaaddin Soomaaliyeed, da'diisuna aysan ka yarayn 30sano;
   b. Inuu haysto shahaado jaamacadeed oo la aqoonsan yahay
   c. Inuu leeyahay ugu yaraan 5 sano oo khibrad shaqo ah.

## CUTUBKA 2AAD: DIIWAANGELINTA URUR IYO AQOONSIGA XISBI SIYAASADEED

### Qodobka 8aad: Dawrka Ururrada iyo Xisbiyada Siyaasadda

1. Si waafaqsan Qodobka 52aad ee Dastuurka, Ururrada iyo Xisbiyada Siyaasadeed waxa ay si nabadgelyo iyo dimuqraaddi ah ugu tartamayaan hoggaanka siyaasadeed ee JFS.
2. Si waafaqsan faqradda 2aad ee Qodobka 52aad ee Dastuurka, Xisbiyada siyaasadeed kuwooda xukunka haya ama kuwa mucaaradka ahba waxa ay ka mid yihiin tiirarka nolosha siyaasadda iyo dimuqraadiyadda JFS.

### Qodobka 9aad: Shuruudaha jiritaanka Urur ama Xisbi Siyaasadeed

1. Si waafaqsan Qodobka 53aad ee Dastuurka, Ururka/Xisbi Siyaasadeed kasta waa inuu:
    a. Ilaaliyaa, ku dhaqmaa, adkeeyaa, horumariyaana midnimada Jamhuuriyadda;
    b. U hoggaansamaa Dastuurka iyo xeerarka JFS iyo talinta sharciga;
    c. In uu u taagan yahay xurmaynta, qaddarinta, horumarinta iyo difaaca xuquuqda aadanaha;
    d. U hoggaansamaa mabaadii'da dimuqraadiyadda iyo maamul wanaagga;
    e. In uu xaqiijiyaa matalaadda dadweynaha ee loo dhan yahay isagoo siinaya mudnaan gaar ah beelaha laga tirada badan yahay iyo dadka naafada ah ay ku leeyihiin xubinnimada iyo hoggaamintaba;
    f. Siiyo haweenka ugu yaraan boqolkiiba soddon (30%).
    g. Maraa habraaca diiwaangelinta Ururrada iyo Xisbiyada siyaasadeed.
    h. Dhawraa shareecada Islaamka iyo dhaqanka suubban ee bulshada Soomaaliyeed.
2. Waxaa reebban Urur/Xisbi Siyaasadeed kasta oo:
    a. Qarsoodi ah, qaab ciidan ama ciidan-u-yaalle ah, u abaabulan colaad si ujeeddooyinkiisu ku gaaro ama hubeysan si xukunka u qabsado, leh magac, astaan ama abaabul qabiil;
    b. U ol'oleeya kala goynta dalka iyo isku dirka bulshada;
    c. Adeegsada maaliyad ka timid ilo sharcidarro ah; ama
    d. Adeegsada hanti dowladeed, la yimaada fal laaluush iyo musuqmaasuq si uu u gaaro dano gaar ah.

## Qodobka 10aad: Qaabdhismeedka Urur ama Xisbi Siyaasadeed

1. Urur ama Xisbi siyaasadeed kasta waxa uu yeelanayaa qaab-dhismeedka soo socda:
    a. Shirweynaha Ururka ama Xisbiga
    b. Golaha dhexe;
    c. Guddiga Fulinta;
    d. Laamaha Ururka ama Xisbiga; iyo
    e. Garabyo kala duwan oo taageerayaashiisa ah hadba sida ay dhigayaan dastuurka iyo xeerarka Ururka ama Xisbiga Siyaasadeed.
2. Urur ama Xisbi Siyaasadeed kasta waa inuu ku yeeshaa Laan ugu yaraan Saddex dowlad goboleed, SSC-Khaatuma iyo Gobolka Banaadir, iyada oo Laan waliba xubnaheedu aysan ka yaraan karin laba kun (2,000) xubnood.
3. Shirweynaha Ururka ama Xisbiga Siyaasadeed waxa uu ugu yaraan ka koobnaanayaa ergo tiradooda tahay kun (1,000) xubnood oo ka kala imaanaya Laamihiisa.
4. Ururku ama Xisbi Siyaasadeedku waa inuu hubiyaa in metalaadda iyo saami qaybsiga qaybaha kala duwan ee bulshada Soomaaliyeed isku-dheelitiran tahay isla markaana fuliyaa qoondada haweenka ugu yaraan boqolkiiba soddon (30%) ee dhammaan xubinnimada iyo xilalka kala duwan ee Ururka ama Xisbiga.
5. Dastuurka iyo xeerarka Ururka ama Xisbiga Siyaasadeed ayaa lagu qeexayaa xilalka iyo awoodaha Shirweynaha, golaha dhexe, guddiga fulinta, laamaha iyo garabyada kala duwan ee Ururka ama Xisbiga Siyaasadeed.
6. Urur ama Xisbi siyaasadeed kasta waxaa waajib ku ah inuu si toos ah ugu baahiyo bulshada Soomaaliyeed tartanka ay xubnihiisu ugu tartamayaan xilalka kala duwan ee goleyaasha dhexe, Guddoomiyaha, guddiga fulinta iyo guddiyada kale.

## Qodobka 11aad: Shuruudaha Diiwaangelinta Ururrada Siyaasadda

1. Si waafaqsan Xeerkan, Urur Siyaasadeed waxaa la diiwaangelinayaa marka uu buuxiyo shuruudaha/mabaadii’da ku xusan qodobka 9aad iyo qodobka 10aad faqradihiisa 2aad, 3aad iyo 4aad.
2. Urur Siyaasadeed waa inuu u soo gudbiyaa Guddiga si loo diiwaangeliyo:
    a. Codsi diiwaangelin oo qoraal ah kuna saxiixan yahay Guddoomiyaha ama Xoghayaha Guud ee Ururka;
    b. Caddaymo muujinaya qabsoomidda Shirweynaha Ururku iyo doorashada

golaha dhexe, Guddoomiyaha iyo guddiyada kale;

c. Nuqulka dastuurka ee uu ansixiyay Shirweynaha Ururka kuna cad yihiin arrimaha ku xusan qodobka 10aad ee Xeerkaan;
d. Astaanta Urur Siyaasadeedka
e. Nuqullada xeerarka lagu dhaqayo maaliyadda, shaqada iyo shaqaalaha Ururka, anshaxmarinta xubnaha Ururka iyo xallinta khilaafka Ururka.
f. Nuqul diiwaanka xubnaha Ururka oo ay ku cad yihiin: magac oo afaran, da'da, goobta dhalashada, sawirka, deegaanka, xilliga ku biiridda Ururka, goobta lagu diiwaangeliyay, dheddig iyo lab xubinta;
g. Caddaymo muujinaya cinwaannada Xarunta dhexe iyo Laamaha Ururka ku leeyahay Dowlad-goboleedyada, SSC-Khaatumo iyo Gobolka Banaadir.

2. Ururku waxa uu bixinayaa khidmada diiwaangelinta oo dhan toban kun (10,000.00) oo Doolarka Maraykanka ah ama Shillin Soomaali u dhigma, halka ay saddexda Urur ee u gudba xisbinimada qaran ay bixin doonan (100,000.00) oo ah khidmada shahaadada xisbinimo.
3. Guddigu waxa uu diiwaangelinayaa Urur kasta oo buuxiya shuruudaha uu Xeerkani dhigayo isaga oo guddoonsiinaya shahaado caddaynaysa ahaanshihiisa Urur Siyaasadeed.
4. Urur Siyaasad loo diiwaan-geliyay si waafaqsan Xeerkan waxa uu yeelanayaa shaqsiyad qaanuuuneed uu:
   a. Ku oogo ama lagu soo oogo dacwad;
   b. Ku yeesho kuna maareyn karo hanti si waafaqsan xeerarka khuseeya; iyo
   c. Ku geli karo heshiis.
5. Urur aanan lagu diiwaangelin si waafaqsan Xeerkan lana guddoonsiin shahaadada caddaynaysa ahaanshiyihiisa Urur Siyaasad ma yeelanayo jiritaan qaanuuni ah, waxaana ka reebban inuu u howlgalo ama fuliyo howlaha uu Xeerkaani u oggolaanayo Ururrada ama Xisbiyada Siyaasadda.
6. Urur siyaasadeed lagu diiwaangeliyay kana mid noqday saddex Xisbi Siyaasadeed ee ku soo baxa doorashooyinka goleyaasha degaanka sinaba laguma kala diri karo. Xubnaha Xisbiga waxaa u furan oo keliya inay ka baxaan Xisbigaasi haddii ay doonaan iyadoo aan la kala dirin Xisbiga.

## Qodobka 12aad: Dastuurka iyo xeerarka Ururka ama Xisbiga Siyaasadeed

Dastuurka Ururka ama Xisbiga Siyaasadeed waa in lagu caddeeyaa arrimaha soo socda:

a. Magaca Urur Siyaasadeedka oo dhammaystiran iyo isaga oo la soo gaabiyay;
b. Astaanta Urur Siyaasadeedka;
c. Aragtida ama barnaamijka siyaasadeed ee Ururka;
d. Cinwaanka Xarunta Dhexe iyo Laamaha Ururku ku leeyahay dalka;
e. Qaab-dhismeedka ama habka abaabulnaanta Ururka;
f. Qaab-dhismeedka maamul ee Ururka;
g. Shuruudaha xubinnimada Ururka;
h. Xuquuqda iyo waajibaadka xubinta Ururka;
i. Hannaanka go'aaminta qaaraanka ay bixinayaan xubnaha Ururku;
j. Sababaha iyo habraaca waayidda xubinnimada Ururka;
k. Nidaamka kulamada, guntanka iyo go'aan gaarista Shirweynaha, golaha dhexe, guddiga fulinta iyo guddiyada kale ee Ururka;
l. Shuruudaha, habka doorashada iyo muddo xileedka golaha dhexe, Guddoomiyaha, Guddiga Fulinta, guddiyada kale iyo laamaha Ururka;
m. Xilalka iyo awoodaha shirweynaha, golaha dhexe, Guddoomiyaha, Guddiga Fulinta, guddiyada iyo Laamaha Ururka;
n. Habraaca diyaarinta iyo ansixinta xubnaha Ururka ugu tartamaya xilalka xeerdejineed iyo fulineed ee Dowladda Hoose, Dowlad-goboleedka, SSC-Khaatumo, Gobolka Banaadir iyo Dowladda Federaalka;
o. Habraaca xaqiijinta isu-dheelitirnaanta metelaadda iyo saami qaybsiga bulshada Soomaaliyeed ee xilalka Ururka iyo xilalka sida tooska ah loo doorto ee ku xusan qodobka 49aad ee Dastuurka JFS;
p. Habraaca gelidda iyo ansixinta heshiisyada isbahaysiga iyo midowga;
q. Habraaca samaynta iyo wax ka beddelka xeerarka Ururka;
r. Habka wax ka beddelka dastuurka Ururka; iyo
s. Habraaca baabi'inta Ururka iyo Maaraynta arrimaha khuseeya hantida, waajibaadyada kale ee lagu leeyahay Ururka si waafaqsan xeerarka dalka.

## Qodobka 13aad: Diidmo Diiwaangelin

1. Diiwaanhayuhu waxa uu u soo jeedinayaa Guddiga inuu diido codsi diiwaangelin Urur haddii uusan buuxinin shuruudaha uu Xeerkaani dhigayo.
2. Guddigu ma diiwaangelin karo Urur haddii magaciisa oo dhammaystiran, gaabsan iyo astaantiisa la mid noqdaan ama u ekaadaan Urur ama Xisbi Siyaasadeed horay loo diwaangeliyay.
3. Ka hor inta uusan diidin codsiga diiwaangelinta, Guddigu waa inuu si qoraal ah ku ogeysiiyaa Ururka shuruudaha uu buuxin waayay isagoo faraya in muddo 30 maalin shaqo gudahood ku soo buuxiyo shuruudaha lagu wargeliyay inuusan Ururku buuxin.
4. Marka ay dhammaato muddada ku xusan faqradda 3aad ee qodobkaan, Guddigu waxa uu go'aankiisa diidmada ku soo saarayaa todoba maalin gudahood oo ka bilaabanaysa taariikhda ay dhammaatay muddada ku xusan faqradda 3aad

## Qodobka 14aad: Xuquuqda iyo waajibaadka Ururka iyo Xisbiga Siyaasadeed

1. Urur ama Xisbi siyaasadeed ee loo diiwaangeliyay si waafaqsan Xeerkan waxa uu xaq u yeelanayaa: -
    a. Inuu shirar ku qabsan karo meel kasta oo ka mid ah JFS si nabdoon waafaqsanna sharciyada dalku leeyahay;
    b. U bandhigo dadweynaha aragtiyihiisa iyo baarnaamijyadiisa siyaaasadeed;
    c. In hay'adaha ammaanku ilaaliyaan nabadgelyada goobaha Ururku ama Xisbigu shirarka ku qabsanayo;
    d. Dhammaan Ururrada iyo Xisbiyada Siyaasadeed waxa ay xaq u wada leeyihiin in si simman u wada adeegsadaan noocyda kala duwan ee warbaahinta ee hoos-timaadda Dowladda Federaalka, Dowlad-goboleed/SSC-Khaatumo ama Dowlad Hoose.
2. Urur ama Xisbi siyaasadeed kasta oo lagu diiwaangeliyay si waafaqsan Xeerkan waxaa waajib ku ah dhowrista, ku dhaqanka iyo u hoggaansamidda xeerarka dalka u yaalla.

## Qodobka 15aad: Sababaha Waayidda Xubinnimada Ururka ama Xisbiga Siyaasadeed

1. Sababaha iyo hannaanka waayidda xubinnimada Ururka ama Xisbi Siyaasadeed waxaa lagu nidaaminayaa dastuurka iyo xeerarka Ururrada iyo Xisbiyada Siyaasadda.
2. Iyadoo aan waxba loo dhimmeyn faqradda 1aad ee qodobkaan, Xubin ka tirsan Urur ama Xisbi siyaasadeed waxa ay luminaysaa xubinnimada haddii ay:
   a. Sameysato Urur ama Xisbi siyaasadeed kale;
   b. Ka qeyb-qaadato sameynta Urur ama Xisbi siyaasadeed kale;
   c. U ol'oleyso sameynta Urur ama Xisbi siyaasadeed kale;
   d. Dhiirrigaliso aragtiyaha iyo barnaamijyada siyaasadeed ee Urur ama Xisbi siyaasadeed kale; ama
3. Haddii xubin ka tirsan Urur ama Xisbi siyaasadeed weydo xubinnimadeeda, sabab kasta ha ku timmaaddee, waa in si qoraal ah loogu wargeliyaa Diiwaanhayaha Ururrada iyo Xisbiyada Siyaasadda.
4. Xubnaha Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, Golaha Wakiillada Dowlad-gobolleedyada/SSC-Khaatumo iyo Golaha Degaanka Dowladaha Hoose JFS waxa ay luminayaan xubinnimadooda haddii ay waayaan xubinnimada xisbigooda ama ku biiraan xisbi kale.

## Qodobka 16aad: Isbaheysi Ururro ama Xisbiyo Siyaasad

1. Laba xisbi oo kaliyaha ayaa samayn kara isbaheysi iyaga oo isku bahaysan kara hal murashax Madaxwayne, halka labo Urur iyo ka badan ay samaysan karaan isbahaysi.
2. Ururrada ama Xisbiyada siyaasadeed ee isbahaysanaya waxa ay u gudbinayaan Guddiga heshiiska isbaheysiga oo ay ku cad yihiin arrimaha soo socda:
   a. Ururrada iyo Xisbiyada xubnaha ka ah isbaheysiga;
   b. Barnaamijka siyaasadeed ee Isbahaysiga;
   c. Habka awood qaybsiga ee Ururrada ama Xisbiyada isbahaystay;
   d. Xeerarka iyo habraacyada go'aan qaadashada;
   e. Curinta siyaasadaha, wadatashiga, qaab dhismeedka go'aan qaadashada, xeerarka iyo habraacyada siyaasadda;
   f. Hab dhaqanka isbahaysiga oo ay ka mid tahay qiyamka iyo mabaadiida Ururrada ama Xisbiyada bahoobay;
   g. Habraaca xallinta khilaafadka;

h. Sababaha loo kala diri karo isbahaysiga iyo farsamada iyo habraaca loo marayo; iyo
i. Habka maaraynta raadadka sharci ee ka dhalanaya baabi'inta isbahaysiga.

## Qodobka 17aad: Midowga Ururrada Siyaasadeed

1. Urur Siyasadeed waxa uu la midoobi karaa Ururro dhiggiisa ah ka hor inta aanan Guddigu soo saarin jadwalka doorashada ee goleyaasha degaanka.
2. Ururrada Siyaasadeed ee midoobay waxa ay baaba'ayaan marka la diiwaangeliyo Urur Siyaasadeedka cusub si waafaqsan qodobka 11aad ee Xeerkaan.
3. Xubnaha Ururrada ee midoobay waxa ay si toos ah uga mid noqonayaan Ururka cusub.
4. Waxaa gebi ahaanba reebban midow dhexmara saddexda Xisbi Siyaasadeed qaran ee ku guulaysta doorashooyinka goleyaasha deegaanka.

## Qodobka 18aad: Waajibka keydinta xogaha Ururka iyo Xisbiyada Siyaasadda

1. Ururka/Xisbiga siyaasadeed waa inuu ku kaydiyaa Xaruntiisa Dhexe iyo Laamihiisa:
   a. Nuqullada dastuurkiisa iyo xeerarkiisa;
   b. Nuqul ka mid ah barnaamijkiisa iyo qorsheyaalkiisa siyaasadeed;
   c. Diiwaanka xubnaha oo uu ku cad yahay xogaha uu Xeerkaani tilmaamay;
   d. Qoraallada iyo dokumintiyada Shirweynahiisa, golihiisa dhexe iyo guddiyadiisa
   e. Keydka-xogeed iyo qoraalleed ee khuseeya howlihiisa maamul iyo kuwa farsamo;
   f. Xogta hantida ah uu leeyahay, xilliga iyo qaabka lagu helay hantidaas;
   g. Xogaha la xiriira maaraynta miisaaniyaddiisa iyo hantidiisa
   h. Ilaha dhaqaale iyo maaliyadeed;
   i. Xogaha kale ee uu Guddigu u arko inay lagama maarmaan u yihiin xilgudashadiisa ku aaddan nidaaminta Ururrada iyo Xisbiyada Siyaasadda.
2. Qofkii waxyeelleeya, asal-roga, khariba ama burburiya xogta iyo qoraallada Ururka ama Xisbiga Siyaasadeed waxaa lagu ciqaabayaa si waafaqsan Xeerka Ciqaabta Guud ee JFS.

**Qodobka 19aad: Waajibka Gudbinta dokumentiyada iyo wargelinta isbeddellada**

1. Urur ama Xisbi Siyaasadeed waxaa waajib ku ah in uu si qoraal ah ugu soo gudbiyo Diiwaan- hayaha xog iyo dokumenti kasta muddo 21 maalmo shaqo gudahood oo ka billaabata marka laga dalbado.
2. Urur ama Xisbi siyaasadeed kasta waa inuu Diiwaanhayaha ku wargeliyaa muddo 14 maalin shaqo gudahood is-beddel kasta oo uu ku sameeyo:
    a. Dastuurkiisa;
    b. Xeerarkiisa;
    c. Xilalka sar sare
    d. Astaantiisa iyo halku-dheggiisa; iyo
    e. Xarunta Dhexe iyo Laamihiisa.
3. Guddigu waa inuu ku faafiyaa faafinta rasmiga ah ee dowladda iyo hababka kala duwan ee warbaahineed isbeddelada waafaqsan faqradda 2aad ee qodobka muddo soddon maalin shaqo oo ka billaabmaysa taariikhda loo soo gudbiyay.

**Qodobka 20aad: Kulamada Dadweynaha**

Urur ama Xisbi Siyaasadeed waxa uu qabsan karaa kulamo dadweyne isaga oo ogeysiinaya heerarka hay'adaha dowladeed oo ay khuseyso una hoggaansamaya xeerarka nidaaminaya qabsoomidda kulamada dadweynaha. Si waafaqsan Xeerka Nabad-Gelyada Guud ee Xeer Lr.21 soona baxay Agoosto, 1963.

**Qodobka 21aad: Kala reebbidda Ururrada Siyaasadeed**

1. Urur Siyaasadeed si rasmi ah u diiwaangashan waxa uu u tartami karaa doorashooyinka goleyaasha degaanka marka uu ka tartamayo ugu yaraan saddex meelood laba meel (2/3) ee dhammaan degmooyinka doorashooyinku ka qabsoomayaan.
2. Urur siyaasadeedka aanan buuxin shardiga ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan uuwaayayaa xaqa ka qaybgalka doorashooyinka heer gole degaan, Guddigana waxa uu ka saaraya diiwaanka Ururrada Siyaasadeed.
3. Saddexda Urur Siyaasadeed ee helay codadka ugu badan ee ansaxay ee doorashada

goleyaasha deegaanka ayaa noqonaya saddexda Xisbi Siyaasadeed ee JFS.

4. Deegaanadda ay horay uga qabsoontay dooraashada golayaasha deegaanka, waxa ay u codeenayaan ururadda ugu gudbaya xisbiyo qaran.
5. Murashaxiinta ku guuleysta xubnaha goleyaasha deegaanka ee ururkooda u gudbi waayo xisbi, waxa ay ku biiri karaan saddexda xisbi siyaasadeed ee soo baxaa si waafaqsan xeerarka xisbiga.

### Qodobka 22aad: Taakulaynta farsamo ee shisheeyaha

1. Guddiga ayaa ku korjoogteynaya Ururrada iyo Xisbiyada qorsheynta iyo fulinta taakuleynta farsamo oo ay ka helaan shisheeyaha.
2. Urur ama Xisbi Siyaasadeed waxaa gebi ahaanba ka reebban in uu shisheeye ka helo taakulo farsamo si toos ama si dadban iyada oon oggolaansho laga haysan Guddiga.
3. Taakuleynta farsamo ee uu Urur ama Xisbi Siyaasadeed ka heli karo shisheeye kuma jirto hanti nooca ay doonto ha noqotee.

## CUTUBKA 3AAD: ARRIMAHA MAALIYADDA EE URURRADA IYO XISBIYADA SIYAASADDA

### Qodobka 23aad: Sanduuqa Maaliyadda ee Xisbiyada Siyaasadeed

1. Dowladdu waxa ay abuuraysaa sanduuqa maaliyadda Xisbiyada Siyaasadda kaas oo loo maaraynayo si waafaqsan Xeerka Maaraynta Maaliyadda Guud ee Dowladda Federaalka.
2. Guddiga ayaa u xilsaaran maaraynta Sanduuqa, waxaana ku korjoogtaynaya Hanti-dhowre Madax-bannaan oo la aqoonsan yahay si waafaqsan Xeerarka khuseysa.

### Qodobka 24aad: Ujeeddada Sanduuqa Xisbiyada

Dakhliga sanduuqa Maaliyadeed ee Xisbiyada Siyaasadeed waxaa loo adeegsanayaa ujeeddooyinka hoose:

a. Horumarinta iyo dhiirrigelinta guud ahaan muwaaddiniinta Soomaaliyeed si

ay ula socdaan ugana qayb qaataan howlaha doorashooyinka;

b. Horumarinta iyo dhiirrigelinta in dhammaan qaybaha kala duwan ee bulshada ku yeeshaan metalaad loo dhan yahay hay'adaha sida tooska ah loo doorto;
c. Daboolista kharajyada Xisbiyada Siyaasadeed intii suurtagal ah;
d. Kor u qaadista wacyiga Muwaadiniinta ee ku aaddan dimoqraaddiyadda, hannaanka doorashooyinka kala duwan; iyo
e. Ujeeddo kasta oo kale oo lagu caddeeyo xeer-nidaamiyeyaasha Xeerkaan.

**Qodobka 25aad: Ilaha Maaliyadeed ee Sanduuqa Xisbiyada**

1. Ilaha dakhli ee sanduuqa waxa ay ka kala imaanayaan:
   a. Xukuumadda Federaalka oo bixinaysa 1% ee miisaaniyad sanadeedkeeda;
   b. Xukuumadaha dowlad-goboleedyada/SSC-Khaatumo oo middiiba bixinayso 0.5% miisaaniyad sanadeedkeeda;
   c. Deeqo ay bixiyaan ilaha daneeya dhiirigelinta iyo horumarinta dimoqraadiyadda; iyo
   d. Dakhliga kasoo xarooda diiwaangelinta iyo ganaaxyada Ururrada iyo Xisbiyada siyaasadda.
2. Dakhliga sanduuqa Xisbiyada Siyaasadda looma adeegsan karo ujeeddo aan ahayn midda sanduuqa loo sameeyay, loomana wareejin karo xisaab kale.

**Qodobka 26aad: Qoondaynta iyo adeegsiga dakhliga Sanduuqa**

1. Dakhliga sanduuqa waxaa loo adeegsanayaa boqolkiiba sagaashan (90%) howlaha Xisbiyada Siyaasadeed, halka boqolkiiba tobanka ah (10%) ee dakhliga sanduuqa noqonayo kharajka lagu maaraynayo maamulka sanduuqa.
2. Saddexda xisbi siyaasadeed waxa ay ka helayaan sanduuqa qoondo siman.
3. Xisbiga siyaasadeed waxa uu u adeegsanayaa qoondada dakhli ee uu sanduuqa ka helay:
   a. qaddar aan ka badnayn boqolkiiba soddon (30%) howlihiisa maamul;
   b. qaddar aan ka badnayn todobaatan boqolkiiba (70%) hawlaha kale ee Xisbiga si waafaqsan xeer-nidaamiyeyaasha Xeerkan.
4. Dakhliga loo qoondeeyey Xisbiga looma adeegsan karo ujeedooyin aan ahayn kuwa ku

xusan Xeerkan.

5. Qoondada dakhli ee uu Xisbi Siyaasadeed ka helo sanduuqa :
    a. uma siin karo xubin ama taageere Xisbi mushahar ahaan, gunno, khidmad, abaalmarin ama faa'iido kale marka laga reebo shaqaalaha iyo howlwadeennada Xisbiga u shaqeeya;
    b. kuma bixin karo arrin, dhacdo iyo howl kasta oo si toos ah ama dadban uga hor imanaysa xeerarka dalka, dhaqanka, anshaxa iyo qiyamka suubban ee bulshada Soomaaliyeed;
    c. uma adeegsan karo ujeeddo ganacsi, hantin dheef maaliyadeed ama ku yeelasho hanti nooca ay doonto ha ahaatee si toos ah ama dadban;
    d. uma adeegsan karo fal iyo ujeeddo kasta oo lid ku ah hormarinta nidaamka dimuqraaddiyadda, qabsoomidda doorashooyin xor ah oo xalaal ah, amniga iyo danaha qaranka.
6. Guddigu waxa uu kormeer ku samaynayaa isla markaana xaqiijinayaa in Xafiiska Hantidhowrka Guud baaro habka maaraynta qoondada dakhli ee Xisbi Siyaasadeed kasta uu ka helay sanduuqa si waafaqsan xeerarka dalka.
7. Xisbiga ku xadgudba nidaaminta maaliyadeed ee ku xusan qodobkaan waxaa lagu ciqaabayaa ganaax maaliyadeed oo aan ka yarayn 25,000.00 kana badnayn 35,000.00 doolar Maraykanka ah ama Shillin Soomaali u dhigma.

## Qodobka 27aad: Ilaha dhaqaale ee Urur ama Xisbi Siyaasadeed

1. Ilaha dhaqaale ee Urur ama Xisbi Siyaasadeed waxa ay ka imaan karaan:
    a. Khidmadda xubinnimada Ururka ama Xisbiga;
    b. Deeq ama kaalmo aan shardi lahayn oo laga helay ilo sharciga waafaqsan; iyo
    c. Qoondada dakhli ee uu Xisbi Siyaasad ka helo sanduuqa Xisbiyada;
2. Urur ama Xisbi Siyaasadeed waa inuu u soo gudbiyo Guddiga warbixin tifaftiran oo la xiriirta dhammaan dhaqaalaha soo galay iyo ilaha ay ka soo gashay muddo afar iyo toban (14) maalmo shaqo gudahood oo ka billaabmaysa taariikhda uu helay deeqda ama kaalmada dhaqaale.
3. Urur iyo Xisbi Siyaasadeed kasta waxaa ka reebban inuu guddoomo:
    a. Deeq ama kaalmo dhaqaale oo ay bixiyeen dowlado, shirkado ama ururro shisheeye; iyo

   b. Deeq ama kaalmo dhaqaale oo wiiqi karta madax-bannaanida, midnimada iyo wadajirka JFS.

4. Urur ama Xisbi Siyaasadeed ma qaadan karo deyn dhaqaale.

### Qodobka 28aad: Faafinta ilaha dhaqaale ee Ururka ama Xisbiga Siyaasadeed

1. Ka dib dhammaadka sannad maaliyadeedka, Urur ama Xisbi siyaasadeed kasta waa in muddo afartan iyo shan (45) maalmo shaqo gudahood ku shaaciyo ama baahiyo warbaahinnada kala duwan ee dalka warbixin dhammaystiran oo ku saabsan ilahiisa dhaqaale.
2. Warbixinta dhaqaale ee Ururka ama Xisbiga ee ku xusan faqradda 1aad ee qodobkaan waa inay si cad u qeexdaa:
   a. Qaddarka qoondada uu ka helay sanduuqa Xisbiyada.
   b. Qaddarka qaaraanka uu ka helay xubnihiisa iyo taageerayaashiisa.
   c. Qaddarka deeqaha uu helay iyo cidda uu ka helay;
   d. Dakhliga iyo kharashka Ururka ama Xisbiga.

### Qodobka 29aad: Diiwaanka xisaabaadka Ururka ama Xisbiga Siyaasadeed

1. Urur iyo Xisbi Siyaasadeed kasta waxaa waajib ku ah inuu sameeyo diiwaanka xisaabaadka, dakhliga, kharashka iyo hantida.
2. Urur ama Xisbi Siyaasadeed kasta waa inuu u soo gudbiyaa Guddiga xisaab xirka sannad miisaaniyadeedka dhammaaday.
3. Urur ama Xisbi Siyaasadeed kasta waa inuu xisaab xir kasta ku hayaa diiwaan xisaabaadkiisa ugu yaraan muddo shan (5) sano oo ka billaabata sanadka uu xisaab xirkaasi khuseeyo.
4. Qof kasta waxa uu xaq u leeyahay in uu Guddiga waydiisto nuqul ku saabsan xisaab xirka Urur ama Xisbi Siyaasadeed ka dib marka uu iska bixiyo khidmada ku waajibta.

## CUTUBKA 4AAD: QODOBBO GUNNAANAD AH

### Qodobka 30aad: Xallinta khilaafaadka Ururka ama Xisbiga Siyaasaddeed

1. Khilaaf ka dhex dhasha Urur amaXisbiga dhexdiisa waa in la isku dayaa in lagu xalliyo si waafaqsan dastuurka iyo xeerarka xallinta khilaafaadka ee u degsan Xisbiga.
2. Haddii khilaafaadka lagu xalin waayo si waafaqsan xeerarka Xisbiga waxaa loo gudbinayaa G.M.D.Q.S oo ku dadaalaya xallinta khilaafka u dhaxeeya ururka ama xisbiga dhexdiisa, ka hor inta aanan loo gudbin maxkamadda awoodda u leh oo ka soo saaraysa go'aan kama dambays ah.
3. Maxkamadda ka garnaqaysa dacwad ama khilaaf u dhaxeeya Urur ama Xisbi siyaasadeed dhexdiisa waa in dhagaysiga iyo ka go'aan gaaridda dacwaddu ku dhammaysaa muddo lixdan (60) maalmo shaqo gudahood oo ka bilaabanaysa taariikhda loo gudbiyay dacwadda.

### Qodobka 31aad: Ka garsooridda go'aannada maamul

1. Go'aannada maamul ee Guddiga waxaa cabasho looga qaadan karaa Maxkamadda Sare ee heer federaal.
2. Xubin kasta oo ka mid ah Urur ama Xisbi Siyaasadeed taasi oo cabasho ka qabta go'aannada Ururka iyo Xisbiga Siyaasadeed ee aan waafaqsanayn xeerarka dhaqangalka ku ah, dastuurkiisa iyo xeerarkiisa waxa ay cabashadeeda u gudbin kartaa Maxkamadda Sare ee heer federaal.
3. Maxkamadda Sare marka ay ka garnaqayso cabashooyinka ku xusan faqradaha 1aad iyo 2aad ee qodobkaan waa in ay dhagaysiga iyo ka go'aan gaaridda cabashada ku dhammaysaa muddo lixdan (60) maalmo shaqo gudahood ah oo ka bilaabanaysa taariikhda loo gudbiyay dacwadda.

### Qodobka 32aad: Dambiyada, Xadgudubyada iyo ciqaabaadka

1. Haddii xubnaha Ururka ama Xisbi Siyaasadeedka ku kacaan falalka ku xusan xarfaha faqraddan, Guddigu waxa uu Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud u gudbinayaa warbixin si uu baaris fal-dambiyeed u sameeyo, dacwad ciqaab ahna ugu soo oogo xubinta:
   a. Isku dayda ama ku kacda fal lid ku ah gobannimada, madax-bannaanida,

midnimada iyo wadajirka JFS;

b. Isku dayda, ku kacda ama taageerta fal-dambiyeed lagu afgambinayo nidaamka dastuuriga ee JFS;
c. U abaabulan qaab ciidan ama ciidan-u-yaalle; ama
d. Isku dayda inuu xukunka dalka ku gaaraan qaab aan nabdoonayn.
e. Isku dayda ama ku kacda fal uu bulshada Soomaaliyeed dhexdeeda uga hurinayo colaad;
f. Isku dayda ama ku kacda fal lid ku ah danaha iyo amniga qaranka ee JFS;
g. Dhaqaale ka guddooma qof, dowlad, urur ama shirkad shisheeye ah isagoo ama iyagoo wakiil ka ah Urur ama Xisbi Siyaasadeed.

2. Urur ama Xisbi Siyaasadeed ee jebiya ama ku xadgudba qodobada Xeerkaan waxaa Guddigu ku ciqaabayaa:
   a. Digniin;
   b. Ganaax; ama
   c. Hakin howlihiisa muddo cayiman.
3. Ciqaabta hakinta howlaha Ururka ama Xisbiga Siyaasadeed ee ku xusan qodobkan waxa ay ka reebbaysa Ururka ama Xisbiga Siyaasadeed oo ay khusayso dhammaan howlaha uu Xeerkani u oggolyahay Ururrada iyo Xisbiyada Siyaasadda muddada ay dhaqangal tahay.
4. Urur ama Xisbi Siyaasadeed kaas oo aan ku soo gudbin xogaha, qoraalada iyo dokumentiyada ee uu Xeerkani ku waajibinayo muddada loo cayimay waxaa lagu ciqaabayaa:
   a. Digniin shaacsan oo loo baahiyo dadweynaha;
   b. Ganaax lacageed oo qaddarkiisu uusan ka yaraan karin boqol (100) kana badnaan karin shan boqol (500) doolarka Maraykanka ah ama Shillin Soomaali u dhigma maalinkiiba illaa taariikhda uu Guddiga ugu soo gudbinayo xogaha, qoraallada ama dokumentiyada;
   c. Hakin howlihiisa muddo uu Guddigu cayimo; ama
   d. Saddexdaba.
5. Urur ama Xisbi Siyaasadeed kaas oo soo gudbiya xog, qoraal ama dokumentiyo aan run ahayn waxaa lagu ciqaabayaa:
   a. Ganaax lacageed oo qaddarkiisu yahay saddax kun (3,000) doolarka Maraykanka ama shillin Somali u dhigma;
   b. Hakin howlihiisa illaa uu ka soo gudbinayo xogaha, qoraallada iyo dokumentiyada dhabta ama runta ah;ama
   c. Labadaba.

6. Urur ama Xisbi Siyaasadeed:
    a. Oo aanan ku gudbin qoraallada iyo warbixinnada ku saabsan ilaha dhaqaalihiisa iyo hantidiiisa muddada uu Xeerkani ama Guddigu cayimay;
    b. Oo aanan soo gudbin xisaabxirka sannad miisaaniyadeedkiisa muddada Xeerkani cayimay;
    c. Oo aanan ku faafin ama shaacin ilihiisa dhaqaale muddada iyo habka uu Xeerkani dhigayo;

    Dhamaan falalka ku xusan xarfaha (a, b, & c) ee faqrada lixaad waxaa lagu ciqaabayaa;

    i. Ganaax lacageed oo qaddarkiisu uusan ka yaraan karin shan boqol (500) doolarka Maraykanka ama Shillin Soomaali u dhigma maalinkiiba illaa taariikhda uu gudbiyo qoraallada iyo warbixinnada ku saabsan ilaha dhaqaalihiisa iyo hantidiiisa, xisaabxirka sannad miisaaniyadeedkiisa ama uu u shaacinayo ilihiisa dhaqaale iyo hantidiisa sida Xeerkan dhigayo;
    ii. Hakin howlihiisa ilaa taariikhda uu u gudbiyo qoraallada iyo warbixinnada ku saabsan ilaha dhaqaalihiisa iyo hantidiiisa, xisaabxirka sannad miisaaniyadeedkiisa ama uu u shaacinayo ilihiisa dhaqaale iyo hantidiisa; ama
    iii. Labadaba.
7. Iyadoo aan waxba loo dhimmayn mas'uuliyadaha kale ee ciqaabeed ama madani ee ka dhalan kara, qof kasta oo ku xadgudba Xeerkani waxaa lagu ciqaabayaa xabsi shan (5) sano, ganaax lacageed oo aan ka badnayn shan kun (5,000.00) oo doolarka Maraykanka ah ama Shillin Soomaali u dhigma, ama labadaba.

## Qodobka 33aad: Xeer-nidaamiyeyaal iyo habraacyo

Guddiga ayaa soo saaraya xeernidaamiyeyaal lagu dhaqan gelinayo xeerkan oo uu ka mid yahay Xeerka anshaxa iyo habdhaqanka ururrada iyo xisbiyada, habraacyo iyo hageyaal aan ka hor imaanayn Xeerkan.

## Qodobka 34aad: Muddada jiritaanka xisbiyada siyaasadeed

1. Marka la siiyo shahaadada xisbi-nimo, xisbi siyaasadeed kasta waxa uu jiritaan qaanuuni ah leeyahay muddo ku cayiman 15 sano.

2. Marka ay dhamaato muddada ku xusan farqada koowaad ee qodobkan, xisbi siyaasadeed kasta waxa u furan in uu tartanka ururrada/xisbiyada ka qeybgalo.
3. Urur Siyaasadeed waxaa la abuuri karaa ugu yaraan lix bilood ka hor maalinta la qabanayo doorashooyinka goleyaasha deegaanka.

**Qodobka 35aad: Marxaladaha kala-guurka**

1. Dhammaan Xisbiyada sida ku-meel-gaar ah loogu diiwaangeliyay si waafaqsan Xeer L.19 soo baxay 27ka Juun 2016 waxaa waajib ku ah inay buuxiyaan shuruudaha ku cad qodobbada 8aad iyo 9aad dibna isu diiwaangeliyaan si waafaqsan qodobbada 10aad iyo 11aad ee Xeerkaan.
2. Ururradii ama xisbiyadii lagu diiwangeliyay Xeer Lr.19 ee buuxiyay shuruudaha looga baahnaa, waajib kuma ahan bixinta khidmadaha diiwaangelinta.
3. Xisbi si ku meelgaar ah loogu diiwaangeliyay si waafaqsan Xeer L.19 soo baxay 27ka Juun 2016 kaas oo aanan buuxin shuruudaha ku cad qodobbada 9aad iyo 10aad loona diiwaangelin Urur Siyaasadeed ahaan si waafaqsan qodobbada 11aad iyo 12aad ee Xeerkaan waxa uu noqonayaa waxba kama jiraan.

**Qodobka 36aad: Baabi'in**

Xeerkan waxa uu baabi`inayaa Xeer Lr.19 ee soo baxay 27ka Juun 2016 iyo xeer kasta oo ka hor imaanaya ama aan la socon karin.

**Qodobka 37aad: Dhaqangalka Xeerkan**

Xeerkani waxa uu dhaqangelayaa marka uu ansixiyo Baaralamaanka Federaalka Soomaaaliya, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya uu saxiixo laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**SHARCI LR. 28** **TAARIIKH: 23-TA NOFEEMBER 2024**

**SHARCIGA DOORASHOOYINKA QARANKA ee JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA**

**MADAXWEYNAHA J.F.S,**

| | |
|---|---|
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobka $87^{aad}$, Faqradda $1^{aad}$ iyo Faqradda $2^{aad}$ ee Dastuurka KMG. |
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobka $82^{aad}$, Faqradda $3^{aad}$ ee Dastuurka KMG. |
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobka $90^{aad}$, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG. |
| **MARKUU ARKAY:** | Warqadda Ku-Simaha Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee summaddeedu tahay **XGGSH/636/B11/24**, ku taariikheysan **23/11/2024**, ujeeddaduna tahay Soo Gudbin Ansixinta ''Hindisaha Xeerka Doorashooyinka Qaranka ee J.F.S. |
| **MARKUU TIXGELIYAY:** | Baahida loo qabo in la meel mariyo sharcigan. |

FR

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:**

**Qodobka $1^{aad}$**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxaa si rasmi ah loo oggolaaday Xeerka Doorashooyinka Qaranka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

**Qodobka $2^{aad}$**

Marka uu Madaxweynaha J.F.S. saxiixo Sharcigan, waxa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-013-2025
TAARIIKH: 10-03-2025
SAXIIX
AVV. Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud ee JFS

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXI'D / SENT
29 MAR 2025
BY: Faduma Mohamed Omar
SAACAD SAXIIX

**Madaxweynaha J. F.S.**

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

**JAMHUURIYADA FEDERAALKA SOOMAALIYA**

# HINDISAHA XEERKA DOORASHOOYINKA QARANKA EE JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

**23/11/2024**

**Tusmo**

**CUTUBKA 1AAD: QODOBBO GUUD**....5
Qodobka 1aad: Magaca Xeerka....5
Qodobka 2aad: Qeexid....5
Qodobka 3aad: Mabaadi'da Doorashooyinka Qaranka....8
Qodobka 4aad: Baaxadda iyo Ujeeddada Xeerka....9
**CUTUBKA 2AAD: MAAMULKA DOORASHOOYINKA**....10
Qodobka 5aad: Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha....10
Qodobka 6aad: Qaab-dhismeedka Maamulka Doorashooyinka....10
Qodobka 7aad: Xilka iyo Awoodaha Guddiga Doorashooyinka....11
Qodobka 8aad: Samaynta Xafiisyo doorasho iyo Astaynta Goobaha Codbixinta....12
Qodobka 9aad: Shaqaalaha Xafiisyada Doorashooyinka....13
Qodobka 10aad: Xasaanadda Xubnaha Guddiga....14
**CUTUBKA 3AAD: NIDAAMKA DOORASHOOYINKA DALKA**....14
Qodobka 11aad: Nidaamka Doorashooyinka Dalka....14
Qodobka 12aad: Doorashada Madaxweynaha JFS....15
Qodobka 13aad: Doorashooyinka Golaha Shacabka ee BFS....15
Qodobka 14aad: Doorashooyinka Aqalka Sare ee BFS....16
Qodobka 15aad: Doorashada Hoggaamiyeyaasha iyo Ku-xigeenka....17
Qodobka 16aad: Doorashooyinka Golayaasha Wakiillada Dowlad goboleedka/SSC-Khaatumo....18
Qodobka 17aad: Muddo xileedyada....18
Qodobka 18aad: Cayimaadda Taariikhda Doorashooyinka la qabanayo....19
**CUTUBKA 4AAD: DOORASHOOYINKA DOWLADAHA HOOSE EE DALKA**....20
Qodobka 19aad: Nidaamka doorashada dowladaha hoose....20
Qodobka 20aad: Doorashada golayaasha deegaanka ee degmooyinka dalka....20
Qodobka 21aad: Shuruudaha u tartamidda doorashooyinka dowladaha hoose....21
Qodobka 22aad: Muqdisho iyo Degmooyinka Gobolka Banaadir....22
Qodobka 23aad: Degmooyinka Dowlad-goboleedyada/SSC-Khaatumo iyo Darajooyinkooda....23
**CUTUBKA 5AAD: DIIWAANGELINTA CODBIXIYEYAASHA**....**23**
Qodobka 24aad: Xaqa ka qaybgalka doorashooyinka....23
Qodobka 25aad: Mabaadi'da Diiwaangelinta Codbixiyaha....24
Qodobka 26aad: Shuruudaha diiwaan-gelinta codbixiyaha....25
Qodobka 27aad: Fulinta Diiwaan-gelinta codbixiyaha....25
Qodobka 28aad: Bilawga Diiwaan-gelinta Codbixiyeyaasha....26
Qodobka 29aad: Xogta codbixiyaha....27

Qodobka 30aad: Kaalinta Ururrada/Xisbyada, Goobjoogeyaasha & Saxaafadda ee la xiriirta Diiwaangelinta ..... 27
Qodobka 31aad: Dhisidda Guddiga Xallinta Cabashooyinka Diiwaangelinta Codbixiyeyaasha: ..... 29
Qodobka 32aad: Kaarka Codbixinta ..... 29
Qodobka 33aad: Dhawrista Xogta Codbixiyaha ..... 30
Qodobka 34aad: Soo-saarista liiska codbixiyeyaasha ..... 30
**CUTUBKA 6AAD: MURASHAXIINTA IYO OLOLAHA DOORASHOOYINKA EE URURRADA /XISBIYADA SIYAASADDA** ..... 31
Qodobka 35aad: Ururrada/Xisbiyada siyaasadda ee ka qaybgelaya Doorashooyinka ..... 31
Qodobka 36aad: Murashaxiiinta Doorashooyinka ..... 32
Qodobka 37aad: Shuruudaha doorashada Madaxweynaha ..... 32
Qodobka 38aad: Shuruudaha doorashada Hoggaamiyaha iyo ku-xigeenka ee dowlad goboleedka/SSC-Khaatumo ..... 33
Qodobka 39aad: Shuruudaha Murashaxiinta labada Gole ee BJFS ..... 33
Qodobka 40aad: Shuruudaha murashixiinta Golayaasha Wakiillada dowlad-goboleedka/SSC-Khaatumo iyo Golaha Caasimadda Muqdisho ..... 34
Qodobka 41aad: Khidmadaha murashaxiinta Doorashada ..... 35
Qodobka 42aad: Soo-gudbinta liiska Murashaxiinta ..... 36
Qodobka 43aad: Hubinta iyo Kala Saarista Murashaxiinta ..... 37
Qodobka 44aad: Astaamaha tartanka doorashooyinka ..... 38
Qodobka 45aad: Ololaha Doorashooyinka ..... 38
Qodobka 46aad: Tabeelayaasha iyo Halku-dhigyada ..... 39
Qodobka 47aad: Waxyaabaha ka Reebban Ololaha ..... 39
Qodobka 48aad: Warbaahinta iyo Doorashooyinka ..... 40
**CUTUBKA 7AAD: DIYAAR-GAROWGA DOORASHOOYINKA IYO CODBIXINTA** ..... 41
Qodobka 49aad: U Diyaar Garowga Dawlaha Doorashada ..... 41
Qodobka 50aad: Diyaarinta Agabka Doorashooyinka ..... 41
Qodobka 51aad: Waraaqaha Codbixinta ..... 42
Qodobka 52aad: Agabka goobaha iyo xarumaha Doorashada ..... 42
Qodobka 53aad: Diyaar Garawga Codbixinta ..... 44
Qodobka 54aad: Waajibaadka Maamulaha Goobta Doorashada ..... 45
Qodobka 55aad: Nidaamka Goobta Codbixinta ..... 45
Qodobka 56aad: Goobta codbixinta dhexdeeda ..... 46
Qodobka 57aad: Codbixinta ..... 47
Qodobka 58aad: Muddada codbixinta ..... 48
Qodobka 59aad: Cabashooyinka Goobta Codbixinta ..... 48

**CUTUBKA 8AAD: TIRINTA CODADKA IYO NATIIJADA DOORASHOOYINKA** .................49
Qodobka 60aad: Isku Diyaarinta Tirinta Codadka ....................................................49
Qodobka 61aad: Tirinta codadka Goobta ....................................................50
Qodobka 62aad: Soo-gabagabeynta tirinta codadka ....................................................51
Qodobka 63aad: Waraaqaha Codadka Xumaaday ....................................................52
Qodobka 64aad: Gudbinta Natiijada Goobta ....................................................52
Qodobka 65aad: Rarista iyo Wareejinta Agabka Doorashooyinka ....................................................53
Qodobka 66aad: Hubinta Natiijada Goobaha ....................................................53
Qodobka 67aad: Ku Dhawaaqista Rasmiga ah ee Natiijada Doorashada ....................................................55
Qodobka 68aad: Nidaamka Qaybinta Kuraasta iyo Codadka ee Golaha Shacabka ....................................................55
Qodobka 69aad: Nidaamka Qaybinta Kuraasta iyo Codadka ee Aqalka Sare ....................................................56
Qodobka 70aad: Nidaamka Qaybinta Kuraasta Golaha Wakiilada iyo Golaha Deegaanka ....................................................57
Qodobka 71aad: Habka buuxinta kuraasta bannaanaatay ....................................................58
Qodobka 72aad: Habka Tirinta cododka jajabka ah ....................................................58
Qodobka 73aad: Dacwadaha La-xiriira Arrimaha Doorashooyinka ....................................................58
**CUTUBKA 9AAD: QODOBBO QUBANE AH** ....................................................59
Qodobka 74aad: Dambiyada iyo Ciqaabaha ka Dhalanaya Jabinta Xeerkan ....................................................59
Qodobka 75aad: Kala-dirista Goleyaasha Deegaanka ....................................................61
Qodobka 76aad: Maamuus ka-xayuubinta Duqa Caasimadda Muqdisho/Ku-xigeennada iyo Guddoomiyeyaasha Degmooyinka/Ku-xigeenka ....................................................62
Qodobka 77aad: Dhowrista Xeerka ....................................................63
Qodobka 78aad: Dib-u-dhaca doorashooyinka ....................................................63
Qodobka 79aad: Sugidda Amniga ....................................................64
Qodobka 80aad: Xaaladaha Anshax Marinta ....................................................65
Qodobka 81aad: Soo-Saarista Xeer-nidaamiyeyaasha ....................................................65
Qodobka 82aad: Doorashooyinka kala-duwan ee Dalka ....................................................66
Qodobka 83aad: Baabi'in ....................................................66
Qodobka 84aad: Dhaqan-galka Xeerka ....................................................66

# CUTUBKA 1AAD: QODOBBO GUUD

## Qodobka 1aad: Magaca Xeerka

Xeerkan waxaa lagu magacaabaa Xeerka Doorashooyinka Qaranka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

## Qodobka 2aad: Qeexid

1. Xeerkan gudihiisa haddii aan si kale loogu qeexin, ereyada soo socda waxa ay leeyihiin macnaha ku hor qoran:

| | |
|---|---|
| **a. Dastuur:** | Waxaa loola jeedaa Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya; |
| **b. Dowlad:** | Waxaa loola jeedaa dhammaan hay'adaha heerarka kala duwan ee Dowladda JFS; |
| **c. Qof:** | Waxaa loola jeedaa bani'aadam caqli leh ama shakhsi sharcigu sameeyey (hay'ad leh shakhsiyad qaanuuneed) |
| **d. Doorasho:** | Waxaa loola jeedaa hannaanka qof iyo cod ee muwaadiniinta JFS ugu codaynayaan si loogu kala guulaysto jago siyaasadeed oo loo tartamayo; |
| **e. Xisbi:** | Waxaa loola jeedaa sida lagu qeexay xeerka ururrada iyo xisbiyada siyaasadda; |
| **f. Urur:** | Waxaa loola jeedaa sida lagu qeexay xeerka ururrada iyo xisbiyada siyaasadda; |

| | |
|---|---|
| **g. Wakiil:** | Waxaa loola jeedaa wakiillada xisbiyadu/ururradu u soo dirsadaan la socodka xarumaha iyo goobaha ay ka dhaceyso diiwaan-gelinta codbixiyeyaasha iyo codeynta; |
| **h. Guddiga:** | Waxaa loola jeedaa Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha; |
| **i. Goobaha codbixinta:** | Waxaa loola jeedaa dhismo kasta, qaybka mid ah dhismo, guri ama goob xiran oo loogu tala-galay in lagu qabto codbixinta inta ay socdaan hawlaha codbixinta; |
| **j. Xafiisyada sare:** | Waxaa loola jeedaa xafiis waliba ee ka sarreeya xafiiska shaqada haya ee qaab-dhismeedka Guddiga ee ku xusan qodobka 6 (1) ee Xeerkan; |
| **k. Baarlamaan:** | Waxaa loola jeedaa Golaha Shacabka iyo Aqalka Sare ee BJFS; |
| **l. Goleyaasha Wakiilada:** | Waxaa loola jeedaa laamaha sharci-dejinta ee heer dowlad goboleed sida uu dhigayo dastuurka dowlad-goboleed kasta/SSC-Khaatumo; |
| **m. Goleyaasha Deegaanka:** | Waxaa loola jeedaa golayaasha deegaanka ee degmooyinka dalka; |
| **n. Magaalo:** | Waxaa loola jeedaa degmo iyo deegaan kasta oo maamul juqraafiyad ahaan u hoostaga degmadaas; |
| **o. Xarun doorasho:** | Waxaa loola jeedaa meesha laga maamulo goobaha codbixinta; |

| | | |
|---|---|---|
| p. | **Codbixiye:** | Waxaa loola jeedaa qof kasta ee buuxiya shuruudaha lagu xusay qodobbada Xeerkan, kuna jira diiwaanka cod-bixiyaha; |
| q. | **Diiwaanka codbixiyeyaasha:** | Waxaa loola jeedaa Buug, Aalad ama qalab kasta oo lagu keydiyo xogta cod-bixiyeyayaasha sida ku cad Xeerkan; |
| r. | **Warbaahinta:** | Waxaa loola jeedaa nooc kasta oo ka mid ah qaababka warka laysu gaarsiiyo si guud oo qoraal, maqal, muuqaal ah ama baraha bulshada ee kala duwan; |
| s. | **Dokumentiyada:** | Waxaa loola jeedaa warqad, aalad ama qalab lagu keydiyo macluumaad qoraal ahaan, maqal ama muuqaal; |
| t. | **JFS:** | Waxaa laga soo gaabiyay Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya; iyo |
| u. | **BJFS:** | Waxaa laga soo gaabiyay Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya. |
| v. | **GSH:** | Waxaa loola jeedaa Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya |
| w. | **AQS:** | Waxaa loola jeedaa Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya |

2. Haddii Xeerkan dhexdiisa lagu sheego lab ama dheddig waxaa loola jeedaa labada jinsi.
3. Haddii Xeerkaan dhexdiisa lagu sheego magac keli ah waxa uu noqon karaa wadarta keligaas haddii siyaaqa (dhihiddu) sidaas khasbayso.

### Qodobka 3aad: Mabaadi'da Doorashooyinka Qaranka

Mabaadi'da guud ee nidaamka doorashooyinku waa in ay ahaadaan kuwo:

a) Xor ah, caddaalad ah, codkuna qarsoodi yahay, oo ka maran: takoor, eex, musuqmaasuq, cabsigelin, hanjabaad, marin-habaabin iyo faragelin shisheeye;

b) Dammaanad qaada xuquuqda siyaasadeed ee muwaaddinka, sida ku xusan qodobka
21aad ee Dastuurka;

c) Sugaya geeddisocodka doorashada, oo si sahlan loo fahmi karo xeerarkiisa, qaababkiisa iyo habraacyadiisaba, uuna fulinayo Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka
Qaranka iyo Soohdimaha;

d) Dammaanad qaadaya in dhammaan muwaaddiniinta buuxiyey shuruudaha xeerku tilmaamayo ay leeyihiin xaqa dhiibashada codkooda si siman;

e) Sharci ku salaysan, geed-disocodkiisana loo maareeyey, loona korjoogteeyey si madaxbannaan oo sugaya hab daahfuran oo isla xisaabtan leh;

f) Xaqiijinaya in aan lagu xadgudbin midnimada Jamhuuriyada iyo bulshada Soomaaliyeed;

g) Dammaanad qaada in dhammaan qaybaha kala duwan ee bulshada Soomaaliyeed ay helaan matalaad caddaalad ah, siiba dadka baahiyaha gaarka ah qaba

h) Dammaanad qaada fulinta qoondada haweenka ee boqolkiiba soddon (30%)

i) Xaqiijinaya in bulshada Jamhuuriyadda Soomaaliya ay helaan matalaad caaddil ah siiba beelaha laga tirada badan yahay si loo gaaro caddaalad loona ilaaliyo dheelitirka saamiqaybsiga bulshada Soomaaliyeed;

j) Dhiirigelinaya nidaamka siyaasadeed ee xisbiyada badan, islamarkaana tixgalinaya xaaladda amni iyo tan dhaqan dhaqaale ee Jamhuuriyadda;

k) Qof kasta oo muwaadin ah oo ka tirsan urur/xisbi buuxiyana shuruudaha doorashada waxa uu xaq u leeyahay in uu u tartamo xilalka hay'adaha sida

tooska ah loo doorto ee heer deegaan, Dowlad-goboleed/SSC-Khaatumo iyo heer Qaranba; iyo

l) Ka hortaga hurinta colaadaha.

## Qodobka 4aad: Baaxadda iyo Ujeeddada Xeerka

1. Xeerkan waxaa lagu dhaqayaa dhammaan hawlaha maamulka doorashooyinka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
2. Ujeedooyinka Xeerkan waa:
   a) In lagu qeexo laguna tilmaamo nooca doorasho ee loogu guuleeysanayo xilal loo tartamaayo iyo deegaandoorashada ee dalka JFS;
   b) In lagu nidaamiyo habka iyo hannaanka diiwaangelinta codbixiyeyaasha iyo murashixiinta ka qaybgalaya hawlaha doorashooyinka;
   c) In lagu maamulo doorashooyinka Madaxweynaha, Hoggaamiyayaasha iyo Hoggaamiye Ku-xigeennada Dowlad Goboleedyada/SSC-Khaatumo iyo Gobolka Banaadir;
   d) In lagu maamulo doorashooyinka Golaha Shacabka iyo Aqalka Sare ee BJFS;
   e) In lagu maamulo doorashooyinka golayaasha wakiillada ee Dowlad Goboleedyada/ SSC-Khaatumo;
   f) In lagu maamulo doorashooyinka golayaasha deegaanka, Duqa magaaalada, iyo Ku-xigeenka Duqa ee dowladaha hoose;
   g) In uu caddeeyo awoodaha iyo waajibaadka xafiisyada doorashooyinka ee uu dhiso
      Guddiga una xilsaaran maamulidda hawlaha doorashada;
   h) In lagu nidaamiyo habka iyo hannaanka hawlaha doorashooyinka; iyo
   i) In lagu cayimo falalka lidka ku ah hannaanka iyo hawlaha doorashooyinka JFS iyo ciqaabaha ay la kulmeyso ciddii ku kacda.

# CUTUBKA 2AAD: MAAMULKA DOORASHOOYINKA

## Qodobka 5aad: Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha

1. Guddigu waa hay'adda u xilsaaran maamulka iyo hirgelinta doorashooyinka kala duwan iyo arrimaha soohdimaha ee JFS.
2. Guddigu si uu u guto una fuliyo waajibaadka doorashooyinka ee loo dhisay waxa uu ku yeelanayaa xafiisyo degaannada kala duwan ee Dalka.
3. Xafiisyada Guddiga ee dalku waxa ay u xilsaaran yihiin fulinta hawlaha doorasho ee uu Guddigu u xilsaarto ee ka dhacaya meelaha ay ka dhisan yihiin.
4. Guddigu waxa uu magaalo-madaxyada Dowlad-goboleedyada/SSC-Khaatumo ku yeelanayaa xafiisyo doorasho oo qaab-dhismeedkooda iyo waajibaadkooda shaqo uu Guddigu ku soo saarayo xeer-nidaamiye waafaqsan Xeerkan iyo Xeerka lagu dhisay Guddiga.
5. Haddii duruufuhu ay saamixi waayaan in xafiisyo laga furo degaannada qaarkood waxaa go'aan ka gaarayo guddiga.

## Qodobka 6aad: Qaab-dhismeedka Maamulka Doorashooyinka

1. Qaab-dhismeedka Guddiga ee maamulka doorashooyinku waxa ay noqonayaan sidan soo socota:
   a) Xarunta Dhexe ee Guddiga;
   b) Xafiisyada doorashada ee Dowlad Goboleedyada/SSC-Khaatumo iyo Gobolka Banaadir.
   c) Xarumaha doorashooyinka ee degmooyinka;
   d) Goobaha Codbixinta.

2. Dhismaha, hagista, iyo korjoogtaynta xafiisyada heerarka kala duwan ee doorashada waxaa leh Guddiga si waafaqsan Xeerkan iyo Xeerka lagu dhisay Guddiga.

## Qodobka 7aad: Xilka iyo Awoodaha Guddiga Doorashooyinka

1. Iyada ooaan waxba loo dhimmayn awoodaha Guddiga ee ku xusan Dastuurka iyo Xeerka lagu dhisay, Guddigu waxa uu fulinayaa hawlaha soo socda:
   a) In uu sameeyo daraasad ku saabsan sidii loo sameyn lahaa goobo codbixin oo ay codbixiyeyaashu codkooda ka dhiibtaan maalinta doorashada;
   b) In uu muddeeyo wakhtiga doorashooyinka la qabanayo;
   c) In uu cayimo tirada iyo goobaha cod-bixinta ee dalka;
   d) In uu magacaabo, eryo, anshax-mariyo shaqaalaha xafiisyada kala duwan ee doorashooyinka si waafaqsan Xeerka lagu dhisay Guddiga iyo Xeerarka kale ee khuseeya;
   e) In uu qorsheeyo dhaqaalaha iyo miisaaniyadda lagu maamulayo hawlaha doorashooyinka;
   f) In uu ku dhawaaqo natiijooyinka doorashooyinka dalka si ku meel gaar ah, inta aan
   Maxkamadda Sare ee Federaalka ansixin, si kama-dambeys ah;
   g) In uu si joogto ah u kormeero goobaha kala duwan ee loo asteeyay in ay codbixintu ka dhacdo;
   h) In ay u kormeeraan si kedis ah iyo si qorshaysanba goobaha doorashooyinka iyo meel kasta oo hawshoodu khuseyso;
   i) In uu go'aan ka gaaro murannada iyo cabashooyinka doorashooyinka ee ka soo gaara xafiisyada hoos yimaada ee doorashooyinka; iyo
   j) In uu diiwaangeliyo ururrada/xisbiyada siyaasadeed iyo codbixiyeyaasha.
2. In ay fuliyaan waajibaad kasta oo ay awood u siiyeen Xeerka lagu dhisay Guddiga iyo Xeerarka kale ee dalka ee dhaqan-galka ah.

## Qodobka 8aad: Samaynta Xafiisyo doorasho iyo Astaynta Goobaha Codbixinta

1. Guddigu si uu u guto waajibadkiisa shaqo waxa uu astaynayaa xarumaha iyo goobaha codbixinta dalka.
2. Xarumaha doorasho ee ku xusan faqrada (1) ee Qodobkan, waxa ay hoos imaanayaan xafiisyada doorasho ee magaalo-madaxyada Dowlad Goboleedyada/SSC-Khaatumo iyo Gobolka Banaadir ee uu Guddigu dhisayo waxa ayna fulinayaan hawlaha doorasho ee xarumahaasi u xilsaaran yihiin si waafaqsan Xeerkan.
3. Goobaha codbixinta ee ku xusan faqrada (1) ee Qodobkan, waxa ay hoos imaanayaan Xarumaha Doorasho uu Guddigu dhisayo waxa ayna fuliyaan hawlaha doorashada ee goobaha codbixinta.
4. Xafiisyada doorashooyinka waxaa ka hawl-galaya hawl-wadeeno kala duwan oo ay u idmadaan Guddigu.
5. Xafiisyada Doorasho ee magaalo-madaxyada dowlad goboleedyadu/ SSC-Khaatumo waxa ay mas'uul ka yihiin fulinta hawsha doorashooyinka ee ka dhacaysa deegaanka Dowlad-goboleedka/ SSC-Khaatumo ay ka dhisan yihiin.
6. Xarun iyo goob kasta ee codbixineed waxa ay yeelanaysaa oo ka hawl-galaya maamule, maamule ku-xigeen, xoghaye iyo hawl-wadeen iyo shaqaale ku filan.
7. Magacaabista, shaqaalaysiinta, anshax-marinta iyo eryidda dhammaan hawl-wadeenada kala duwan ee ka hawl-galaya xafiisyada iyo goobaha doorasho waxaa iska leh Guddiga si waafaqsan Xeerka lagu dhisay Guddiga iyo Xeerkan.
8. Guddigu waxa ay kordhin karaan tirada shaqaalaha ku-meel gaarka ah ee ka hawl-galaya xafiisyada doorasho ee heer Dowlad-goboleed/SSC-Khaatumo, xarumaha iyo goobaha codbixinta haddii loo baahdo.

## Qodobka 9[aad]: Shaqaalaha Xafiisyada Doorashooyinka

1. Shaqaalaha ku-meel gaarka ah iyo hawl-wadeenada ka hawl-galaya xafiisyada doorasho ee ku xusan faqradda 7aad ee qodobka 8[aad] ee Xeerkan waa in lagu wargeliyo laguna tababaro mas'uuliyadda loo idmaday.
2. Madaxda iyo hawlwadeennada ka hawlgalaya xarumaha iyo goobaha doorashooyinka, waxaa lagu hor dhaarinayaa xubno kamid ah Guddiga, dhaar fagaare ah oo la baahiyay, taasoo ah sidan "Waxaan ku dhaaranayaa magaca Ilaahay in aan hawsha doorashooyinka u guto si xilkasnimo, dhexdhexaadnimo iyo daacadnimo leh, kuna shaqaynayo caddaalad iyo si waafaqsan Dastuurka iyo xeerarkakale ee Dalka".
3. Dhaarta ku xusan faqradda kore kama saamaxayso dhaar kasta oo kale oo uu sharci waajibiyay oo laga doonayo xubintaas.
4. Dadka ku jira xisbiyada/ururrada siyaasadda, xubnaha ciidamada kala duwan, shaqaalaha Dowladda iyo cid kasta oo arrimo siyaasadeed si ugu lug leh, looma magacaabi karo in ay ka hawlgalaan xafiisyada doorashooyinka ee ku xusan qodobka 6 (1) ee Xeerkan.
5. Shaqaalaha ku-meel gaarka ah ee ka hawl-galaya xafiisyada doorashooyinka waxa ay shaqadoodu dhammaanaysaa marka ay dhammaato doorashadu oo natiijada loogu dhawaaqo, hase yeeshee Guddigu wuu u kordhin karaa muddada shaqada haddii loo baahdo.
6. Shaqaalaha iyo hawl-wadeennada ka hawl-galaya xafiisyada doorashooyinka waxa ay yeelanayaan gunnooyin uu Guddigu qorsheeyo iyaga oo ku salaynaya xilalka ay ku kala magacaaban yihiin.
7. Dhammaan shaqaalaha iyo hawl-wadeennada waxaa waajib ku ah dhawrista dhammaan xeerarkadoorashooyinka waxa ayna saxiixayaan Xeerka hab-dhaqanka shaqaalaha iyo hawlwadeenada doorashooyinka ee uu Guddigu soo saaro.

### Qodobka 10aad: Xasaanadda Xubnaha Guddiga

1. Xubnaha Guddigu waxa ay leeyihiin xasaanadda lagu siiyay Dastuurka iyo Xeerka lagu dhisay.
2. Waxaa reeban in xubnaha Guddiga laga qaado tallaabo baaritaan, waraysi dacwadeed, qabasho ama xiritaan ama tallaabo kale oo ciqaab la xiriirta inta uu ku guda jiro shaqadiisa, haddii aan lagu qaban isaga oo dambi faraha kula jiro ama aan oggolaansho looga helin Maxkamadda Sare ee Federaalka ee Dalka.
3. Dhammaan shaqaalaha ku-meel gaarka ah ee ka shaqaynaya xafiisyada doorashooyinka waxa ay la mid yihiin sharci ahaan Saraakiisha Dowladda inta ay shaqeynayaan (Public officers) waana in lagu xurmeeyo shaqadooda inta ay ku guda jiraan gudashadooda hawlaha doorashooyinka.
4. Shaqaalaha ku xusan faqrada (3) ee Qodobkani haddii ay galaan dambi la xiriira doorashooyinka waxaa lagu soo oogi karaa dambigaas kaddib marka doorashadu dhammaato haddii aan la qaban iyaga oo dambi faraha kula jira.
5. Dhismooyinka, xafiisyada iyo agabka Guddiga doorashooyinka laguma samayn karo baaris la xiriirta dacwad ciqaabeed inta ay doorashadu socoto iyada oo aan oggolaansho laga haysanin Maxkamadda Sare ee Federaalka ee Federaalka.

## CUTUBKA 3AAD: NIDAAMKA DOORASHOOYINKA DALKA

### Qodobka 11aad: Nidaamka Doorashooyinka Dalka

1. Hannaanka doorashada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, Hoggaamiyaha iyo Hoggaamiye Ku-xigeenka Dowlad Goboleedka, SSC-Khaatumo, Duqa Caaasimadda Muqdisho, Ku-xigeennada, Duqa Magaalada iyo Ku-xigeenka ee degmooyinka waxa ay noqonaysaa doorasho lagu kala guulaysanayo cod hal dheeri ah ee ah tirada codadka ansaxay.

2. Hannaanka Doorashada labada aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya waxa ay noqonaysaa doorasho lagu kala guulaysanayo nidaamka matalaadda isu-dheeli-tiran ee liiska furan.
3. Hannaanka Doorashada ee Xildhibaannada Golaha Shacabka ee Gobolada Waqooyi (Soomaaliland) iyo beelaha laga tirada badanyahay waxaa lagu soo dooranayaa habka doorashada ee 'horreeyaa dheereeya' ee listada furan ee Xisbiga Dalka oo midaysan.
4. Hannaanka Doorashada Golaha Wakiillada Dowlad-gobolleedyada/SSC-Khaatumo, Golaha Caasimadda Muqdisho iyo Golaha Deegaanka ee degmooyinka waxa ay noqonaysaa doorasho lagu kala guulaysanayo nidaamka matalaadda isu-dheeli-tiran ee liiska xiran.
5. Doorashadu waxa ay ka dhacaysaa meel walba oo ay suuragal ka tahay dalka.

## Qodobka 12aad: Doorashada Madaxweynaha JFS

1. Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ah waxaa soo dooranaya codbixiyeyaasha diiwaangashan ee JFS waxaana ku tartamaya murashixiinta saddexda xisbi ee Dalka iyada oo murashixiinta Madaxweyne lagu dooranayo hal warqad codbixineed.
2. Doorashada Madaxweynaha Dowladda Federaalka Soomaaliya waxaa ku guuleysanaya murashaxa Madaxweyne ee hela cod hal dheeri ah tirada codadka ansaxay.

## Qodobka 13aad: Doorashooyinka Golaha Shacabka ee BFS

1. Golaha Shacabka waxaa dooranaya dhammaan codbixiyeyaasha diiwaangashan ee JFS, waxaana ku tartamaya saddexda xisbi ee dalka waxaana loogu kala guuleysanaya kuraasta habka ku qeexan qodobka 68aad ee Xeerkan.

2. Si wafaqsan Dastuurka, kuraasta loo tartamayo ee Golaha Shacabku waa 275 xubnood, waxa ayna matelaan dhammaan Bulshada Soomaaliyeed meel walba oo ay joogaan.
3. Xildhibaannada Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya waxaa lagu dooranayaa doorasho toos ah, qarsoodi ah, xor ah oo xalaal ah oo ku salaysan nidaamka doorasho ee habka liiska furan ee isu-dheellitirka kuraasta iyo codadka dalka oo midaysan.
4. Xisbi kasta waxa uu soo gudbinayaa laban laab dhammaan liiska murashaxiinta Golaha Shacabka ee dalka oo dhan una qoran si taxane ah oo uu ku cadyahay tirsiga kursigu magaca hortiisa.
5. Labada liis waxa ay kala noqonayaan: liiska murashaxiinta tartamaya iyo liiska kayd ka ah.
6. Hannaanka Doorasho ee Golaha Shacabku waxa uu noqonayaa mid tixgelinaya isku dheellitirnaanta qaybaha bulshada iyo saami-qaybsiga beelaha Soomaaliyeed.
7. Guddiga oo la tashanaya madaxda xisbiyada ayaa Xeer ku soo saaraya habraaca iyo shaxda ay xisbiyadu raacayaan marka ay soo gudbinayaan liisaska murrashaxiinta Goleyaasha iyada oo la dhowrayo dheellitirka matelaadda qaybaha bulshada, saami-qaybsiga beelaha Soomaaliyeed iyo fulinta qoondada haweenka ee boqolkiiba soddon (30%).

## Qodobka 14aad: Doorashooyinka Aqalka Sare ee BFS

1. Aqalka Sare waxaa uu matelaa Dowlad Goboleedyada dalka/SSC-khaatumo waxa uuna ka kooban yahay 54 xubnood iyo metalaada Gobolka Banaadir sida lagu xaqiijin doono Cutubka 5aad ee Dastuurka JFS.
2. Xubnaha Aqalka Sare ee Dowlad Goboleed, SSC-Khaatumo iyo Gobolka Banaadir waxaa soo dooranaya codbixiyeyaasha diiwaangashan ee deegaanka dowlad-goboleedkaas/ SSC-Khaatumo iyada oo ay ku tartamayaan murashixiinta saddexda xisbi ee dalka, waxaana loogu kala guuleysanayaa kuraasta sida ay u kala helaan tirada guud ee codadka ansaxay sida uu tilmaamayo qodobka 69aad ee Xeerkan.

3. Xildhibaannada Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya waxaa lagu dooranayaa doorasho toos ah, qarsoodi ah, xor ah oo xalaal ah oo ku salaysan nidaamka doorasho ee habka liiska furan ee isu-dheellitirka kuraasta iyo codadka.
4. Xisbi kastaa waxa uu soo gudbinayaa laban laab liiska murashaxiinta kuraasta Aqalka Sare oo Dowlad gobolaysan/SSC-Khaatumo una qoran si taxane ah.
5. Labada liis waxa ay kala noqonayaan: liiska murashaxiinta tartamaya iyo liiska kayd ka ah.
6. Hannaanka Doorasho ee Aqalka Sare waxaa waajib ah in uu tix-geliyo isku dheellitirnaanta qaybaha bulshada ee wada dega deegaanka Dowlad-goboleed kasta/SSC-Khaatumo
7. Guddiga oo latashanaya madaxda xisbiyada ayaa xeer ku soo saaraya habraaca iyo shaxda ay xisbiyadu raacayaan marka ay soo gudbinayaan liisaska murrashaxiinta Aqalka Sare, ee dheellitirka matelaadda bulshada iyo fulinta qoondada haweenka boqolkiiba soddon (30%).
8. Doorashada xildhibaanada Aqalka Sare ee gobollada waqooyi ee Soomaaliland waxa ay ka dhacaysaa magaalo madaxda Muqdisho, waxaana dooranaya dhammaan cod-bixiyeyaasha diiwaangashan ee ka soo jeeda Gobollada Waqooyi.
9. Xubnaha Aqalka Sare ee SSC-Khaatumo waxaa lagu soo dooranayaa Caasimadda SSC-Khaatumo.
10. Hadii ay doorashada Aqalka Sare ka qabsoomi waydo Dowlad Goboleed/SSC-Khaatumo, duruufo jira awgood, waxaa xubnaha Aqalka Sare ee ka soo jeeda deegaanadaas dooranaya codbixiyeyaasha diiwaangashan ee deegaanada kale ee Guddigu u asteeyo

### Qodobka 15aad: Doorashada Hoggaamiyeyaasha iyo Ku-xigeenka

1. Hoggaamiyaha iyo Hoggaamiye ku-xigeenka dowlad goboleedka/SSC-khaatumo waxaa soo dooranaya codbixiyeyaasha diiwaangashan ee deegaanka dowlad-goboleedkaas/ SSC-Khaatumo waxaana ku tartamaya murashixiinta saddexda xisbi ee Dalka.

2. Doorashada Hoggaamiyaha iyo Hoggaamiye ku-xigeenka dowlad goboleedka/SSC-Khaatumo waxaa ku guuleysanaya murashaxa Hoggaamiye iyo Hoggaamiye ku-xigeenka ee hela cod hal dheeri ah ee tirada codadka ansaxay.

## Qodobka 16aad: Doorashooyinka Golayaasha Wakiillada Dowlad goboleedka/SSC-Khaatumo

1. Tirada xubnaha iyo shuruudaha xubinnimada golayaasha wakiillada dowlad-goboleedkasta/SSC-Khaatumo waa sida lagu cayimo dastuurka dowlad goboleedka/ SSC-Khaatumo.
2. Xubnaha golayaasha wakiillada ee dowlad-goboleed/ SSC-Khaatumo kasta waxaa dooranaya codbixiyeyaasha diiwaangashan ee deegaanka dowlad-goboleedkaas/ SSC-Khaatumo waxaana ku tartamaya murashixiinta saddexda xisbi ee dalka waxaana loogu kala guuleysanayaa kuraasta sida ay uga kala helaan tirada guud ee codadka ansaxay sida uu tilmaamayo qodobka 70aad ee Xeerkan.

## Qodobka 17aad: Muddo xileedyada

1. Muddada xil-haynta Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, Hoggaamiyaha iyo Hoggaamiye Ku-xigeenka Dowlad-goboleedka, SSC-Khaatumo, Duqa Caasimadda Muqdisho iyo Ku-xigeennada, Duqa Magaalada iyo Ku-xigeenka ee degmooyinka waa shan (5) sano oo ka bilaabanta maalinta loo dhaariyo xilka.
2. Muddada xil-haynta xubnaha Aqalka Sare, Golaha Shacabka, Golayaasha Wakiillada Dowlad goboleedyada SSC-khaatumo, Golaha Caasimadda Muqdisho iyo Goleyaasha Deegaanka degmooyinka waa shan (5) sano oo ka bilaabanta maalinta loo dhaariyo xilka.

**Qodobka 18aad: Cayimaadda Taariikhda Doorashooyinka la qabanayo**

1. Doorashooyinka dalka waxaa la qabanayaa shantii sanaba mar si waafaqsan Qodobka 50aad (2) ee Dastuurka.
2. Doorashada Barlamaanka Federaalka Soomaaliya iyo Madaxweynaha Jamhuuriyadda

   Federaalka Soomaaliya waxaa la qabanayaa hal xilli doorasho oo midaysan shantii (5) sanaba mar iyada oo Guddigu cayimayo taariikhda ay qabsoomayso doorashada ugu yaraan boqol iyo sideetan (180) maalmood ka hor taariikhda ay codbixintu dhacayso.
3. Doorashada Golaha Wakiilada iyo Hoggaamiyaha iyo ku-xigeenka ee dowlad-goboleedka/SSC-Khaatumo waxaa la qabanayaa hal xilli doorasho oo midaysan shantii (5) sanaba mar iyada ooGuddigu cayimayo taariikhda ay qabsoomayso doorashada ugu yaraan sagaashan (90) maalmood ka hor taariikhda ay codbixintu dhacayso.
4. Doorashada Golaha Caasimadda Muqdisho, Golayaasha Deegaanka, iyo Duqa Caasimadda Muqdisho iyo ku-xigeennada, Duqa Magaalada iyo Ku-xigeenka ee degmooyinka kale ee dalka waxaa la qabanayaa hal xilli doorasho oo mideysan iyada oolaga soo hormarinayo doorashooyinka hay'adaha kale ee dastuuriga ah, Guddiga ayaana cayimaya taariikhda ay qabsoomayso doorashada ugu yaraan sagaashan (90) maalmood ka hor taariikhda ay codbixintu dhacayso.
5. Haddii laba xisbi oo ka mid ah xisbiyada qaran ay qaaddacaan doorashada la muddeeyay, xisbiyadaasi qaaddacay doorashada waxa ay xaq u leeyihiin in ay Maxkamadda Sare ee Federaalka u gudbiyaan cabashadooda la xiriirta qaadicidda doorashada.
6. Guddigu waxa uu u gudbinayaa Maxkamadda Sare ee Federaalka si ay go'aan uga gaarto qabashada doorashada muddo aan ka badnayn 21 maalmood oo ka billaabata marka guddiga uu u soo gudbiyo codsigiisa.

# CUTUBKA 4AAD: DOORASHOOYINKA DOWLADAHA HOOSE EE DALKA

## Qodobka 19aad: Nidaamka doorashada dowladaha hoose

1. Duqa Caasimadda Muqdisho, Ku-xigeennada, Duqa magaalada iyo ku-xigeenka ee degmooyinka, Golaha Caasimadda Muqdisho iyo golayaasha deegaanka ee degmooyinka dalka waxaa si toos ah, qof-iyo-cod ah, qarsoodi ah ku dooranaya muwaadiniinta codbixiyeyaasha ah ee deggan kana diiwaangashan Caasimadda Muqdisho iyo degmooyinka kale ee Dalka.
2. Murashixiinta urur/xisbi kasta ee u tartamaya Duqa Caaasimadda Muqdisho iyo ku-xigeennada, duqa magaalada iyo ku-xigeenka ee degmo kasta oo ay doorasho ka dhacayso waxaa lagu dooranayaa iyaga oo isku sidkan oo ka dhigan hal murashax, waxaana loogu kala guuleysanayaa cod hal dheeri ah ee codadka ansaxa ah ee Caasimadda Muqdisho iyo degmada loo tartamay.
3. Ururrada/xisbiyada marka ay soo gudbinayaan liisaska musharaxiinta goleyaasha deegaanka ama dowladaha hoose waa in ay fuliyaan qoondada haweenka oo ah boqolkiiba soddon (30%).
4. Degmooyinka dalka ee ay doorashadu ka qabsoomayso waa degmooyinkii jiray 31 Diseembar 1990.

## Qodobka 20aad: Doorashada golayaasha deegaanka ee degmooyinka dalka

1. Doorashada Golayaasha deegaanka ee degmooyinka dalka waxaa ku tartamaya ururrada/xisbiyada siyaasadda ee diiwaangashan waxaana loogu tartamayaa nidaamka matelaadda isu-dheellitiran ee liiska xiran.
2. Hannaanka Doorasho ee goleyaasha deegaanka ee degmooyinka wuxuu noqonayaa mid tix-galinaya isu dheeli tirnaanta qaybaha bulshada beelaha Soomaaliyeed ee wada daga degmooyinka doorashadu ka dhaceyso isla markaana loo xiro qoondada haweenka oo ah boqolkiiba soddon (30%).

3. Guddiga ayaa xeer-nidaamiye ku soo saaraya habraaca iyo shaxda ay ururrada/xisbiyadu raacayaan marka ay soo gudbinayaan liisaska murashaxiinta golayaasha deegaanka degmooyinka si loo dhawro dheellitirka matelaadda bulshada ee ku xusan faqradda 2aad ee qodobkan.
4. Doorashada golayaasha deegaanka ee degmooyinka oo ay ku tartamayaan Ururrada Siyaasadda waxaa ku guuleysanaya saddexda urur siyaasadeed ee hela codadka ugu badan ee ansaxa ah ee doorashooyinka goleyaasha deegaanka ee degmooyinka kuwaas oo noqonaya saddexda xisbi ee uu Dalku yeelanayo sida uu dhigayo Qodobka 54 (2) ee Dastuurka KMG ah.
5. Xubnaha golayaasha deegaanka ee ku soo baxay ururro siyaasadeed aan xisbi noqon waa in ay ku biiraan mid ka mid ah saddexda xisbi ee guuleeystay.

### Qodobka 21aad: Shuruudaha u tartamidda doorashooyinka dowladaha hoose

1. Duqa magaalada iyo kuxigeenka duqa magaalada, iyo xubnaha golayaasha deegaanka ee degmooyinka dalka waxaa u tartami kara qofkii buuxiya shuruudaha soo socda:
    a) In uu yahay muwaaddin JFS;
    b) In uu yahay codbixiye ka diiwaangashan degmada uu ka tartamayo;
    c) In taariikhda doorashada u buuxsantay 25 sano jir;
    d) In uu ku soo galo tartanka magaca Urur/xisbi siyaasadeed.
    e) In aanu ku dhicin xukun maxkamad awood u lihi kaga joojisay qabashada xil dowladeed ama looga qaaday xuquuqdiisa tartanka iyo codeynta doorashooyinka dambi culus awgiis;
    f) In aanu hayn xil dowladeed kale; iyo
    g) In uu bixiyo khidmada tartanka.
2. Qofkii loo doorto jagooyinka ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan waxaa ka reebban muddada uu hayo xilka loo doortay:
    a) Qabashada xil dowladeed kale aan sharcigu u oggolaan;

b) In uu hantidiisa ka iibiyo dowladda ama ka ijaaro;

c) In uu iibsado ama kireysto hanti dowladeed.

### Qodobka 22[aad]: Muqdisho iyo Degmooyinka Gobolka Banaadir

1. Magaala-madaxda Dalka ee Muqdisho waxa ay yeelanaysaa Golaha Caasimadda Muqdisho oo ka koobnaanaya 97 xubnood iyo Duqa Caasimadda Muqdisho iyo ku-xigeennada oo ay si toos ah, qarsoodina ah u soo dooranayaan cod-bixiyeyaasha ka diiwaangashan magaalada Muqdisho.
2. Degmo kasta ee magaalo madaxda Dalka ee Muqdisho waxa ay yeelanaysaa gole deegaan oo ay si toos ah, qof-iyo-cod ah, qarsoodi ah u soo dooranayaan codbixiyeyaasha ka diiwaangashan degmada.
3. Guddoomiyaha Degmada iyo kuxigeenka guddoomiyaha degmada ee degmooyinka caasimadda Muqdisho waxaa iska dhex dooranaya Goleyaasha Deegaanka ee degmo kasta.
4. Degmooyinka Caasimadda Muqdisho waxa ay yeelanayaan laba darajo oo kala ah: (A) iyo (B) iyada oo tirada golaha deegaanka ee degmooyinka darajadoodu tahay (A) noqonayso 27 xubnood, halka tirada golaha deegaanka ee degmooyinka darajadoodu tahay (B) noqonayso 21 xubnood.
5. Darajada degmo kasta oo ka mid ah degmooyinka Caasimadda Muqdisho waxaa soojeedinaya Duqa Caasimadda Muqdisho isaga oo gudbinaya Wasiirka Arrimaha Gudaha ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya iyada oo ay ansixinayaan Golaha Wasiirada Xukuumadda Federaalka, Madaxweynaha JFS uu ku soo saarayo digreeto.

## Qodobka 23aad: Degmooyinka Dowlad-goboleedyada/SSC-Khaatumo iyo Darajooyinkooda

1. Degmo kasta ee Dowlad Goboleedyada, SSC-Khaatumo ee waafaqsan sida ku qeexan faqradda 4aad ee qodobka 19aad ee Xeerkan waxa ay yeelanaysaa gole deegaan, duqa magaalada iyo ku-xigeenka oo ay si toos ah, qof-iyo-cod ah, qarsoodi ah ku soo doortaan codbixiyeyaasha ka diiwaangashan degmada.
2. Darajooyinka iyo tirada xubnaha gole deegaan kasta ee degmooyinka dowlad goboleedka/ SSC-Khaatumo waxaa lagu salaynayaa Xeerarka u degsan dowlad-goboleedyada ee nidaaminaya arrimaha dowladaha hoose iyada oolagu jaangoynayo degmooyinkii jiray ka hor 31 Diseembar 1990.

# CUTUBKA 5AAD: DIIWAANGELINTA CODBIXIYEYAASHA

## Qodobka 24aad: Xaqa ka qaybgalka doorashooyinka

1. Si Muwaadiniinta JFS u adeegsadaan xaqa ka qaybgalka siyaasadda ee ku xusan Qodobka 21aad ee Dastuurka JFS, Guddigu waa in uu qaado tallaabo kasta ee lagama maarmaan u ah in muwaadiniinta Soomaaliyeed ay ka qaybqaataan doorashooyinka, isku diiwaangeliyaan codbixiye ahaan, codeeyaan doorashooyinka heerarka Dowladda ugana qayb noqdaan dhaqdhaqaaqa siyaasadeed ee nabdoon.
2. Tallaabooyinka Guddiga ee faqraddaan waxaa ka mid noqon kara:
   a) In uu dejiyo oo fuliyo qorshe wacyigelineed ee codbixiyeyaasha;
   b) In uu dejiyo oo suurtageliyo qaab ay dadka dhan uga qayb qaadan karaan doorashada sida diyaarin barnaamijyo dhiirrigelin ah ee xaqa ka qaybqaadashada;
   c) In uu korjoogtayn ku sameeyo habka dimuqraadiyadeed ee xisbiyada iyo ururrada siyaasaddu u shaqeeyaan si ay u soo doortoon xubnaha uga qaybgalaya doorashooyinka;

d) In uu muddo ku filan ku soo saaro xeer-nidaamiyeyaasha dhaqangelinta doorashooyinka iyo in uu u fududeeyo in qaybaha bulshadu ogaadaan Xeerarka lagu maamulo doorashooyinka; iyo

e) In uu suurtageliyo hab sahlan oo lagu heli karo xogta doorashooyinka iyo qaababka muwaaddinku uga qaybqaadan karo.

f) In Guddigu xubnihiisa iyo dhammaan masuuliyiinta, hawl-wadeennada iyo shaqaalihiisa ku tababaro dhaqangelinta Xeerarka iyo dhowrista anshax doorashada.

### Qodobka 25aad: Mabaadi'da Diiwaangelinta Codbixiyaha

1. Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxa ay yeelaneysaa diiwaanka codbixiyeyaasha dalka oo uu diyaarinayo Guddigu oo ay ku jiraan dhammaan codbixiyeyaasha JFS.
2. Diiwaan-gelinta codbixiyeyaasha waxaa ka mas'uul ah Guddiga waxa uuna sameynayaa diiwaanka codbixiyeyaasha oo lagu diiwaan-gelinayo qof kasta oo buuxiya shuruudaha diiwaan-gelinta codbixiyaha.
3. Guddiga ayaa mas'uul ka ah diiwaan-gelinta, kaydinta xogta diiwaanka iyo xafidaadda xogta ku jirta diiwaanka si waafaqsan Xeerkan iyo Xeerka Dhowrista Xogta.
4. Codbixiyuhu waxa uu codkiisa ka dhiibanayaa maalinta doorashada meesha uu iska diiwaangeliyey.
5. Codbixiyuhu waxa uu xaq u leeyahay in uu helo marka la diiwaangeliyo Kaarka diiwaan-gelinta codbixiyaha oo ay ku dhameystiran tahay faahfaahinta ku xusan Qodobka 29aad, Faqrada (2) ee Xeerkan.
6. Guddigu doorasho kasta ee golayaasha deegaanka waa in ay cusbooneysiiyaan diiwaanka codbixiyeyaasha kaasoo lagu geli doono doorashooyinka heerarka kale ee Dowladda.
7. Muwaadin kasta ee doonaya in uu isku sharraxo jago loo tartamayo ama doonaya in uu codeeyo waa in uu yahay codbixiye diiwaangashan.

8. Muwaadin kasta hal mar ayuu isku diiwaangelin karaa codbixiye ahaan.
9. Diiwaangelinta codbixiyaasha, wixii aan halkan lagu sheegin, waxaa nidaaminaya xeer gaar ah oo Guddigu soo saaro.

### Qodobka 26aad: Shuruudaha diiwaan-gelinta codbixiyaha

1. Waxaa codbixiye ahaan isku diiwaangelin kara qof kasta oo muwaadin Soomaali ah oo gaaray da'da 18 sano waqtiga diiwaan-gelinta.
2. Diiwaan-gelinta codbixiyeyaasha waxaa ka reebban:
   a) Muwaadin kasta oo aan xiskiisku dhammeyn;
   b) Maxaabiista xukuman ama xabsi ugu jira dambi uu galay awgeed;
   c) Dadka ajaanibta ah ee dalka ku sugan;
   d) Muwaadinka ay maxkamad awood u leh ku ridday xukun kama dambays ah oo la xiriira dambi doorasho shantii sano ee la soo dhaafay; ama
   e) Qofka xukun maxkamad awood u leh looga joojiyay codeynta.
3. Qofna xaq uma lahan in uu isku diiwaangeliyo hal mar kabadan, sidoo kale xaq uma lahan in uu hal mar kabadan codeeyo.

### Qodobka 27aad: Fulinta Diiwaan-gelinta codbixiyaha

1. Doorashooyinka oo idil ee JFS waxaa ka codayn kara oo kaliya codbixiyeyaasha isku diiwaangeliyay in ay codkooda dhiibtaan.
2. Diiwaan-gelinta codbixiyeyaashu waa lacag la'aan lagumana xiri karo lacag ama shuruud kale oo aan ahayn shuruudaha ku xusan Qodobka 26aad ee Xeerkan.
3. Guddigu marka uu fulinayo diiwaangelinta codbixiyeyaasha si Xeerkan waafaqsan. waa in uu adeegsadaa habka gaarka ah ee aqoonsiga codbixiyaha (Unique Biometric Voter identification).
4. Si loo fuliyo diiwaan-gelinta codbixiyeyaasha, Guddigu waxa uu shaqaaleysiinayaa shaqaale xirfad iyo waayo-aragnimo u leh hawlaha diiwaan-gelinta.

5. Guddiga ayaa ka mas'uul ah habeynta, dhaqan-gelinta iyo daabacaadda liiska codbixiyeyaasha.
6. Guddigu waxa ay soo saari karaan xeer-nidaamiyeyaal, go'aamo, habraacyo iyo amarro lagu dhaqan-gelinayo diiwaan-gelinta codbixiyeyaasha.

### Qodobka 28aad: Bilawga Diiwaan-gelinta Codbixiyeyaasha

1. Guddigu ka hor inta aysan shaacinin waqtiga la bilaabayo diiwaan-gelinta codbixiyeyaasha iyo muddada ay soconeyso, waxa ay wargelinayaan jadwalka diiwaangelinta Madaxda qaranka iyo madaxda xisbiyada ama ururrada siyaasadeed ee tartamaya.
2. Guddigu waa in uu diyaariyaa macluumaadka muhiimka ah ee la xiriira diiwaan-gelinta una bandhigaa dadweynaha isagoo isticmaalaya warbaahinta iyo baraha bulshada ee kala duwan ee dalka.
3. Si dadweynaha Soomaaliyeed u fahmaan diiwaangelinta, Guddigu waa in ay baraan kuna wacyigeliyaan muwaadiniinta Soomaaliyeed muhiimadda diiwaangelintu ay leedahay iyo sida la isku diiwaangelinayaba.
4. Si loo gaaro nuxurka faqrada 2aad ee qodobkani tilmaamayo, Guddigu waa in uu diyaariyaa barnaamijyo wacyigalineed oo codbixiyaha lagu barayo diiwaan-gelinta codbixiyeyaasha iyo doorashooyinka.
5. Guddiga ayaa qorshaynaya xarumaha/goobaha diiwaan-gelinta codbixiyeyaasha ee dalka iyaga oo tixgalinaya duruufaha jira markasta iyo meelkasta.
6. Xisbiyada/ururrada siyaasaddu waxa ay u soo dirsan karaan wakiillo goobaha diiwaan-gelinta codbixiyeyaasha si ay u la socdaan in nidaamka diiwaan-gelintu waafaqsan yahay Xeerka iyo in aysan jirin wax kala takoorid ah ama gabood-fal ah oo muwaaddiniinta qaar looga reebayo diiwaan-gelinta sifo aan Xeerka waafaqsanayn.

## Qodobka 29aad: Xogta codbixiyaha

1. Waxaa jiraya foomka diiwaan-gelinta codbixiyeyaasha oo asaas u noqonaya diiwaan-gelinta codbixiyeyaasha kaasoo ka koobnaanaya xogtan:
   a) Magaca codbixiyaha oo afaran waafaqsanna aqoonsiga qofka haddii uu jiro;
   b) Taariikhda uu dhashay codbixiyuhu iyo meesha uu ku dhashay;
   c) Lab ama dheddig midka uu yahay codbixiyuhu;
   d) Deegaanka (Tuulo, Degsiimo, xaafad) uu ka deggan yahay degmada;
   e) Saxiixa codbixiyaha ama tilmaan muujinaysa codbixiyaha aan saxiixi karayn;
   f) Tirsiga (lambarka) lagu diwaan-galiyay codbixiyaha;
   g) Tirsiga aqoonsiga codbixiyaha haddii uu leeyahay.
2. Kaarka codbixiyaha waxaa waajib ah in ay ka muuqato xogtan hoose:
   a) Magaca codbixiyaha oo afaran;
   b) Sawirka codbixiyaha;
   c) Lambarka tixraaca diiwaan-gelinta codbixiyaha;
   d) Taariikhda uu dhashay codbixiyuhu;
   e) Taariikhda la diiwaangeliyay codbixiyaha
   f) Lab iyo dheddig midka uu yahay;
   g) Goobta diiwaangelinta ee uu codbixiyuhu iska diiwaangeliyay; iyo
   h) Xogtii kale ee Guddigu uu muhiim u arko.

## Qodobka 30aad: Kaalinta Ururrada/Xisbyada, Goobjoogeyaasha & Saxaafadda ee la xiriirta Diiwaangelinta

1. Xisbiyada/ururrada siyaasaddu waxa ay u soo dirsan karaan wakiillo goobaha diiwaan-gelinta codbixiyeyaasha si ay u la socdaan in nidaamka diiwaangelintu waafaqsan yahay Xeerka iyo in aysan jirin wax kala takoorid ah ama gabbood-fal

ah oo muwaaddiniinta qaar looga reebayo diiwaangelinta sifo aan Xeerka waafaqsanayn.

2. Ururka/xisbiga waa in ay soo magacaabaan wakiilladooda afar iyo toban (14) maalmood ka hor waqtiga diwaan-gelinta.
3. Guddigu waxa uu siinayaa kaarka aqoonsiga wakiilnimo wakiillada ururrada/xisbiyada siyaasadda.
4. Guddigu waxa uu la saxiixanayaa wakiillada ururrada/xisbiyada heshiish, in uu wakiil kasta xushmaynayo anshaxa goobta diiwaan-gelinta.
5. Guddigu waxa uu ka saari karaa goobta diwaan-gelinta wakiilkii ku kaca falal lid ku ah anshaxa iyo amniga goobta.
6. Goob-joogeyaal ka socda gudaha iyo dibadda oo oggolaansho ka haysta Guddiga ayaa kor- joogtayn kara hawsha diiwaan-gelinta waana in ay sitaan kaarka aqoonsiga ee Guddigu ugu talogalay.
7. Goob-joogeyaashu waxa ay tegi karaan goob kasta oo diwaan-gelin laga samaynayo, iyaga oo raacaya hagayaasha (guidelines) Guddiga Doorashooyinka.
8. Saxaafadda maxaliga ah iyo midda caalamiga ahi waxa ay la socon karaan, isla markaana baahin karaan hawlaha diiwaan-gelinta cod-bixiyeyaasha.
9. Saxaafadda ka haysata oggolaansho Guddiga, waxa ay geli karaan goobaha diiwaan- gelinta wakhtiyada ay shaqadu socoto, waana in ay sitaan kaararka aqoonsiga isla markaana dhowraan xeerarka iyo hab-dhaqanka Anshaxa Saxaafadda.

## Qodobka 31aad: Dhisidda Guddiga Xallinta Cabashooyinka Diiwaangelinta Codbixiyeyaasha:

1. Xeerkani waxa uu asaasayaa Guddiga Xallinta Cabashooyinka Diiwaangelinta Cod- bixiyeyaasha oo awood u leh go'aan ka gaaridda cabashooyinka la xiriira diwaan-gelinta cod-bixiyeyaasha.
2. Guddiga Xallinta Cabashooyinka Diwaangelinta Codbixiyeyaasha ee maaamul, waxaa saldhig u ah Xarunta Guud ee Guddiga Doorashooyinka.
3. Guddiga Xallinta Cabashooyinka waxa uu ka kooban yahay todobo (7) xubnood oo kala ah:
   a. Saddex xubnood oo ka tirsan Guddiga.
   b. La-taliyaha arrimaha xeerka ee Guddiga.
   c. Madaxa Waaxda diiwaan-gelinta Guddiga.
   d. Madaxa Waaxda Hawl-gelinta (operations) ee Guddiga.
   e. Madaxa Waaxda Farsamada (IT) ee Guddiga.
4. Inta ay socoto diiwaangelinta codbixiyeyaasha waxa ay xubnaha Guddiga Xallinta Cabashooyinka Diwaangelinta ee maamul, ka hawl-geli karaan kolba gobolka ay ka socoto diwaan-gelinta, iyaga oo cabashooyinka soo gaara go'aan uga gaaraya muddo aan ka badnayn todobo (7) maalmood.

## Qodobka 32aad: Kaarka Codbixinta

1. Kaarka codbixintu waa in uu yahay laf ama wax u dhigma aan si fudud loo been abuuri karin, waxna looga bedeli karin isla markaana aan si fudud u duugoobayn.
2. Codbixiye kasta oo uu ka lumo ama ka xumaado kaarka codbixintu, waxa uu soo wargelinayaa xarunta ugu dhow halka uu iska diiwaan-geliyay ama xarunta dhexe ee Guddiga.
3. Mas'uuliyiinta Guddiga ee qaabilsan diiwaan-gelintu marka ay soo gaaraan wargelinta ku xusan faqrada (2) ee Qodobkan, waa in ay diyaariyaan kaar

codbixineed oo cusub lehna xogtii iyo tixraacii kaarkii hore ee lumay ama ka xumaaday codbixiyaha marka uu bixiyo khidmadda cusboonaysiinta ee uu Guddigu xaddido.

4. Codbixiyaha uu ka xumaado kaarku waxa uu xaq u leeyahay in loo beddelo marka uu keeno kaarkii ka xumaaday ama caddaynta kaarka ka lumay soddon maalmood (30) ka hor maalinta codbixinta.
5. Qofka kasta oo hela kaarka codbixiye ee lumay waxaa ku waajib ah in uu geeyo saldhigga boolis ee ugu dhow, Dowladda Hoose ama Xafiiska Guddiga ee ugu dhow.

**Qodobka 33aad: Dhawrista Xogta Codbixiyaha**

1. Xogta diiwaanka codbixiyuhu waa sir gaar u ah JFS iyo codbixiyaha is-diwaan-geliyey, waxaana kaydinaya Guddiga oo ku ilaalinaya dalka gudihiisa.
2. Ilaalinta xogta diiwaanka codbixiyuhu waa waajib, waxaana reebban in sifo aan Xeerka waafaqsanayn looga faa'iidaysto.
3. Qofkasta oo sifo aan Xeerkan iyo Xeerarka kale ee dalka waafaqsanayn u bixiya xogta, wax uga beddela ama si kale uga faa'iidaysta waxaa uu mutaysanayaa ciqaabta ku xusan Xeerka Ciqaabta Guud ee la xiriira bixinta sirta JFS.
4. Xogta cod-bixiyaha waa sir, cidna lalama wadaagi karo, hase yeeshee waxaa lagu bixin karaa oo keliya haddii uu sharci sidaas waajibinayo ama amar ay soo saartay Maxkamad awood u leh.

**Qodobka 34aad: Soo-saarista liiska codbixiyeyaasha**

1. Marka la dhameystiro diiwaan-gelinta codbixiyeyaasha, Guddigu waxa uu soo saarayaa liis kumeel-gaar ah muddo laba bilood gudahood ah.
2. Markii Guddigu sixitaan iyo dib-u-eegis ku sameeyo liiska ku-meel-gaarka ah, lana diiwaan-geliyo wixii is-beddel ah ee lagu sameeyay, Guddigu waxa uu diyaarinayaa liis kama-dambeys ah oo noqonaya midka la faafinayo laguna codeynayo.

3. Guddigu waxa ay la wadaagi doonaan liiska kama danbeysta ah Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Ururrada/Xisbiyada siyaasadda muddo soddon (30) maalmood ka hor maalinta doorashada.

## CUTUBKA 6AAD: MURASHAXIINTA IYO OLOLAHA DOORASHOOYINKA EE URURRADA /XISBIYADA SIYAASADDA

### Qodobka 35aad: Ururrada/Xisbiyada siyaasadda ee ka qaybgelaya Doorashooyinka

1. Murashixiinta ay soo xuleen Ururrada/xisbiyadda ayaa uga qeyb-galaya doorashooyinka kuraasta loo tartamayo.
2. Ururradu/xisbiyaddu marka ay soo xulayaan murashaxiinta uga qeyb-galaysa doorashooyinka waa in ay dhawraan tixgaliyaana isu-dheellitirnaanta saami-qaybsiga bulshada Soomaaliyeed.
3. Xisbiyadu marka ay soo xulayaan murashaxiinta doorashooyinka uga qeyb-galaya waa in ay fuliyaan qoondada haweenka oo ah ugu yaraan ah boqolkiiba sodon (30%) xubnaha la dooranayo ee liisaska xisbi kasta, iyada oo saddexdii kursi-ba mid kamid ah ay haween kali ah ku tartamayaan.
4. Ururradu/xisbiyadu waa in ay ilaaliyaan matelaadda qaybaha bulshada markay sameynayaan liiska murashaxiinta,
5. Guddiga ayaa hubinaya liisaska ururradu/xisbiyadu ay u soo sharraxayaan golayaasha kala duwan ee loo tartamayo in ay yihiin kuwa dheellitiran sida ku xusan faqradaha 3aad, 4aad iyo 5aad ee qodobkan, iyaga oo raacaya xeer-nidaamiye uu Guddigu soo saaray.

## Qodobka 36[aad]: Murashaxiiinta Doorashooyinka

1. Qof kasta oo Soomaali ah oo buuxiyay shuruudaha sharcigu tilmaamay waxaa uu xaq u leeyahay in la doorto waxna uu doorto, sida ku cad qodobka 21 (2) ee Dastuurka.
2. Musharaxdoorasho u taagan waxaa noqon kara qof kasta oo shuruudaha murashaxnimada buuxiyay isla markaana uu urur/xisbi soo sharraxay.
3. Ururrada siyaasadeed ama xisbi siyaasadeed kasta marka uu magacaabayo murashaxiintooda uga qeybgalaya jagooyinka doorashada ee loo tartamayo waxa ay raacayaan dastuurradooda, Xeerkan, Xeerka xisbiyada siyaasadda iyo Xeerarka Guddiga.
4. Xubnaha ciidamada qalabka-sida, shaqaalaha dowladda, diblomaasiyiinta, xubnaha guddiyada madaxa-bannaan iyo hay'adaha madaxa-bannaan iyo xubnaha bahda garsoorka looma soo sharrixi karo doorasho haddii aysan keenin caddeyn shaqo ka tagis lix (6) bilood ka hor maalinta doorashada.
5. Shaqo-ka-tegidda ama is casilaadda ku xusan faqrada (4) ee qodobkan waa in ay soo caddeyso hay'addii uu ka tirsanaa helidda ogeysiinta shaqo ka tegista.
6. Qofna looma diidi karo in uu ka qaybqaato doorashada si waafaqsan Xeerkan oo ay ka mid tahay in uu iska casilo jago kasta ee ka hor istaagi karta ka qaybgalka doorashada.

## Qodobka 37[aad]: Shuruudaha doorashada Madaxweynaha

1. Murashaxa xilka Madaxweyne ee Jamhuuriyadda Federaalku waa in ay buuxiyaan shuruudaha ku xusan Dastuurka Federaalka Soomaaliya.
2. Murashax kasta ee u tartamaya xilka Madaxweynaha Dowladda Federaalka waa in saddexdii sano ee u dambeysay murashaxnimadiisa ka hor aysan Maxkamadi ku ridin xukun culus oo ciqaab ah oo kama-dambays ah oo aan ka yarayn shan sano.

3. Murashax kasta ee u tartamaya xilka Madaxweynaha waa in uu soo gudbiyo qoraal shakhsi ah oo caddeynaya in uu aqbalay murashaxnimada uu xisbigu u soo sharraxay iyo in uu dhawrayo Xeerarka iyo anshaxa doorashooyinka dalka.
4. Murashax kastaa waa in uu bixiyo khidmadda tartanka.

## Qodobka 38aad: Shuruudaha doorashada Hoggaamiyaha iyo ku-xigeenka ee dowlad goboleedka/SSC-Khaatumo

1. Murashixiinta jagada Hoggaamiyaha iyo Hoggaamiye Ku-xigeen ee dowlad-goboleedyada, SSC-Khaatumo waa in ay buuxiyaan shuruudaha Dastuurka dowlad-goboleedka ee aan ka hor-imaanayn Dasuurka JFS.
2. Murashax kasta ee u tartamaya xilka Hoggaamiye iyo Ku-xigeenka Dowlad Goboleed/SSC-Khaatumo waa in saddexdii sano ee u dambeysay murashaxnimadiisa ka hor aysan Maxkamadi ku ridin xukun culus oo ciqaab ah oo kama-dambays ah oo aan ka yarayn shan sano.
3. Murashax kasta ee u tartamaya xilka Hoggaamiyaha iyo ku-xigeenka ee dowlad goboleedka/ SSC-Khaatumo waa in uu soo gudbiyo qoraal shakhsi ah oo caddeynaya in uu aqbalay murashaxnimada uu xisbigu u soo sharraxay iyo in uu dhawrayo Xeerarka iyo anshaxa doorashooyinka dalka.
4. Murashax kastaa waa in uu bixiyo khidmadda tartanka.

## Qodobka 39aad: Shuruudaha Murashaxiinta labada Gole ee BJFS

1. Murashaxiinta u tartamaya xubnaha labada Gole ee Baarlamaanka Federaalku waa in ay buuxiyaaan shuruudaha Dastuurka oo tilmaamaya qofka kamid noqonaya xubnaha Baarlamaanka federaalka una dhigan sidan:
    a) In uu yahay muwaadin u dhashay Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo codbixiye ahaan u diiwaangashan;

b) Xiskiisku dhan yahay;

c) Da'diisuna ka yarayn 25 jir;

d) Waa in uu kamid yahay codbixiyeyaasha ku jira Diiwaanka codbixiyaha;

e) Leeyahay ugu yaraan aqoon dugsi sare ama waayo aragnimo u dhiganta;

f) Waa inuu iska casilaa xil kasta oo dowladeed sida: hay'adaha amniga ee kala duwan, shaqaalaha dowladda, diblomaasiyiinta, guddiyada madaxa-bannaan iyo hay'adaha madaxa-bannaan iyo xubnaha bahda garsoorka lix (6) bilood ka hor gudbinta murashaxnimadiisa.

2. Iyada ooaan waxba loo dhimmayn shuruudaha ku xusan faqrada (1) ee qodobkan, murashaxa u tartamaya doorashooyinka Baarlamaanka waa in aan shantii sano ee u danbeeyay aanu ku dhicin xukun ciqaab oo kama-dambeys ah.

3. Qof kasta oo Murashax Baarlamaan ahi waa in uu soo gudbiyo qoraal shakhsi ah oo caddeynaya in uu aqbalay murashaxnimada xisbigu u soo sharraxay iyo in uu dhawrayo Xeerarka iyo anshaxa doorashooyinka dalka.

4. Musharixiinta u tartamaya xubinnimada labada Gole ee BJSF waa in ay bixiyaan khidmadda tartanka.

## Qodobka 40aad: Shuruudaha murashixiinta Golayaasha Wakiillada dowlad-goboleedka/SSC-Khaatumo iyo Golaha Caasimadda Muqdisho

1. Murashixiinta u tartamaya xubnaha golayaasha wakiillada ee dowlad-goboleedyada, ssc-khaatumo waa in ay buuxiyaan shuruudaha ku xusan Dastuurka dowlad-goboleedka/ SSC-Khaatumo ee aan ka hor-imaanayn Dastuurka JFS.

2. Qof kasta oo murashax u ah Gole Wakiillo Dowlad Goboleed/SSC-Khaatumo, ama Golaha Caasimadda Muqdisho waa in uu soo gudbiyo qoraal shakhsi ah oo caddeynaya in uu aqbalay murashaxnimada xisbigu u soo sharraxay iyo in uu dhawrayo Xeerarka iyo anshaxa doorashooyinka dalka.

3. Musharaxiinta u tartamaya xubinnimada golayaasha wakiillada dowlad-goboleedkasta/ SSC-Khaatumo iyo Golaha Caasimadda Muqdisho waa in ay bixiyaan khidmadda doorashada.

## Qodobka 41aad: Khidmadaha murashaxiinta Doorashada

Murashax kasta ee u tartamaya xilalka hoos ku cad waa inuu bixiyaa khidmadda ku hor qoran oo aan celin lahayn taasi oo lagu shubayo khasnadda midaysan ee Dowladda Federaalka:

a. Xilka Madaxweynaha Jamhuuriyadda Konton kun (50,000) oo Doollarka Federaalka Maraykanka ah ama shillin Soomaali u dhigma;
b. Xilka Hoggaamiyaha dowlad-goboleedka/ SSC-Khaatumo Soddon kun (30,000) oo Doollarka Maraykanka ah ama shillin Soomaali u dhigma;
c. Xilka Hoggaamiye ku-xigeenka dowlad-goboleedka/SSC-Khaatumo Shan iyo toban kun (15,000) oo goboleedka Doollarka Maraykanka ah ama shillin Soomaali u dhigma;
d. Xilka Duqa Caasimadda Muqdisho Soddon kun (30,000) oo Doollarka Maraykanka ah ama shillin Soomaali u dhigma;
e. Xilka ku-xigeenka Duqa Caasimadda Shan iyo toban kun (15,000) oo Muqdisho Doollarka Maraykanka ah ama shillin Soomaali u dhigma;
f. Duqa degmada iyo ku-xigeenka Laba boqol iyo konton (250) oo Doollarka Maraykanka ah ama shillin Soomaali u dhigma;
g. Xilka xubinnimada Barlamaanka Federaalka toban kun (10,000) oo Doollarka Soomaaliya Maraykanka ah ama shillin Soomaali u dhigma;
h. Xilka xubinnimada Golaha Wakiilada dowlad-goboleed/ SSC-Khaatumo kun (1,000) oo Doollarka Maraykanka goboleedka ah ama shillin Soomaali u dhigma;
i. Xilka xubinnimada Golaha Caasimadda kun (1,000) oo Doollarka Maraykanka Muqdisho ah ama shillin Soomaali u dhigma;

j. Xilka xubinnimada goleyaasha deegaanka Boqol (100) oo Doollarka Maraykanka ah ama shillin Soomaali u dhigma;

## Qodobka 42aad: Soo-gudbinta liiska Murashaxiinta

1. Ururrada siyaasadda ama xisbiyadu waa in ay soo gudbiyaan liiska murashaxiinta ururkooda/xisbigooda uga qeyb-galaya doorashooyinka loo tartamayo 120 (Boqol iyo labaatan) oo maalmo shaqo ah ka hor maalinta doorashada golaha loo tartamayo.
2. Qoraalka ururrada ama xisbiyadu ku soo gudbinayaan murashaxiintooda waa in ay ku soo caddeeyaan, magaca murashaxa oo afaran, magaca hooyada oo afaran, da'diisa iyo deegaanka uu deggan yahay.
3. Dhammaan xisbiyada siyaasadda waa in ay si cad ugu soo Muujiyaan Murashixiintooda Madaxweyne ee Dowladda Federaalka, Liiska Musharixiinta ay u soo gudbinayaan Guddiga.
4. Liiska murashaxiinta ururrada ama xisbiyadu u soo gudbinayaan Guddiga waxaa waajib ah in la soo raaciyo: -
   a) Caddeymaha Murashax kasta ku muujiyey in uu oggolyahay murashaxnimada la soo gudbiyay iyo in uu ixtiraamayo Xeerarka iyo anshaxa doorashooyinka;
   b) Go'aanka ururku ama xisbigu ku ansaxiyay murashaxiinta doorashooyinka uga qeybgalaysa; iyo
   c) Warqadda caddeynta lacag qabashada khidmadda.
5. Muran iyo khilaaf kasta oo ku saabsan xulista ama soo-gudbinta liiska murashaxiinta kaas oo ka dhex dhasha urur ama xisbi gudihiisa waxaa loo raacayaa si waafaqsan xeerka ururrada iyo xisbiyada siyaasadda.
6. Guddigu waxa uu hubinayaa in ururku ama xisbigu uu u soo xulay murashaxiintiisa si waafaqsan dastuurka u dhigan Xisbiga/ururka, Xeerkan, xeerka xisbiyada siyaasadda iyo Xeerarka doorashooyinka.

7. Urur/xisbi kasta marka uu soo gudbinaayo liiska murashaxiinta waxaa ku waajib ah in uu soo gudbiyo qoondada haweenka ee boqolkiiba soddon (30%), isaga oo xaqiijinaya in saddexdii kursiba mid ka mid ah uu haween yahay.

### Qodobka 43aad: Hubinta iyo Kala Saarista Murashaxiinta

1. Xisbiyada/ururrada siyaasadda waxaa waajib ku ah in ay si caddaalad ah u kala saaraan murashaxiinta marka ay soo xulayaan.
2. Xisbiyadu/ururradu waa in ay hubiyaan in xubnaha ay soo sharraxayaan buuxiyeen shuruudaha xeerku tilmaamay isla markaana xilka iyo mas'uuliyadda loo idmanayo u gudan karaan si hufan oo habboon.
3. Guddigu marka ay helaan liiska murashaxiinta ururrada ama xisbiyadu soo gudbiyeen waa in ay qof qof u hubiyaan in murashaxiinta la soo gudbiyay buuxiyeen shuruudihii loo baahnaa.
4. Haddii xubno/xubin liiska ka mid ahi aysan buuxin shuruudaha murashaxnimo, Guddigu, waxa uu muddo 6 maalmood gudahood oo ka bilaabanta marka ay helaan liiska ku ogeysiinayaan xisbigii/ururkii u soo gudbiyey in uu muddo 14 maalmood ah ku soo dhammaystiro shuruudaha dhimman ama murashaxa/murashaxiinta beddelkiisa/kooda ku keeno.
5. Marka uu hubiyo shuruudaha murashaxiinta ee uu ku qanco Guddigu waxaa uu si rasmi ah u shaacinayaa liiska murashaxiinta ee loo soo gudbiyay.
6. Guddiga iyo xafiisyada doorashooyinka ee hoos yimaada waa in ay goob kasta oo codbixineed gaarsiiyaan nuqullada liisaska murashaxiinta doorashada ee ka sharraxan xisbiyada/ururrada siyaasadda ee tartamaya.

## Qodobka 44aad: Astaamaha tartanka doorashooyinka

1. Urur/xisbi siyaasadeed kasta waxa uu yeelanayaa sumad u noqonaya astaan u gaar oo lagu aqoonsado.
2. Astaamaha ururrada iyo xisbiyaddu waa in ay kala duwanaadaan oo ururna/xisbina uusan isticmaalin astaan urur ama xisbi kale.
3. Astaantu waa in ay noqoto mid gaar ah oo muujinaysa summadda aqoonsiga Ururka ama xisbiga. Waxaa reebban in ay ka muuqato calaamad dowladeed, mid qabyaaladeed iyo mid dariiqo ama astaanta ururka ama xisbiga.
4. Murashaxiinta u tartamaya doorashooyinka ee uu Guddigu shaaciyay si waafaqsan faqradda 5aad ee qodobka 43aad ee Xeerkan, waxa ay xaq u leeyihiin in la ilaaliyo xuquuqdooda murashaxnimo si waafaqsan Xeerarkadalka.

## Qodobka 45aad: Ololaha Doorashooyinka

1. Ololaha doorashooyinka waxaa maamulaya Guddiga oo u qoondaynaya xisbiyada/ururrada siyaasadda doorashooyinka ku loolamaya wakhtiga iyo maalmaha ololaha ay kala yeelanayaan.
2. Ololaha doorashadu waxaa uu bilaabanayaa 45 maalmood ka hor maalinta loo cayimay qabsoomidda doorashooyinka waxa uuna dhammanayaa 48 saac ka hor taariikhda doorashooyinka.
3. Guddiga ayaa go’aaminaya sida ay xisbiyadu/ ururrada ololaha u kala galayaan iyo maalmaha ay kala yeelanayaan iyaga oo qiimaynaya xaaladaha kala duwan ee ku gaadaaman doorashooyinka.
4. Guddiga waxaa ku waajib ah in ay siiyaan xisbiyada/ururrada ku tartamaya doorashooyinka tiro maalmo ah oo isla’eg haddii ay timaaddo in maalmo kala duwan loo qoondeeyo.
5. Wasaaradaha/hay’adaha ay khusayso waxaa waajib ku ah in ay ku dhaqmaan jadwalka wakhtiyaysan ee Guddigu soo saareen uguna kala qoondeeyeen

xisbiyada/ururrada siyaasadda sida ay u kala yeelanayaan maalmaha ololaha doorashooyinka.

## Qodobka 46[aad]: Tabeelayaasha iyo Halku-dhigyada

1. Tabbeelayaasha (boorarka), waraaqaha halku-dhigyada ee ololaha doorashooyinka iyo farriimaha kala duwan ee urur ama xisbi ama musharaxugu talo galay ololaha waxaa xeernidaamiye ka soo saaraya Guddiga.
2. Haddii tabeelayaasha iyo waraaqaha halku-dhigyadu xanbaarsanyihiin waxyaabo ka soo horjeeda Xeerarka doorashooyinka iyo kuwa anshaxa, Guddigu waa ay joojinayaan mana oggolaanayaan.
3. Tabeelayaasha, waraaqaha halku-dhigyada ee ololaha iyo fariimaha kale ee la xiriira doorashooyinka wax cashuur ah lagama qaadayo.
4. Tabeelayaasha iyo waraaqaha ololaha doorashooyinka loogu talo galay laguma dhajin karo lagumana xiri karo goobaha cibaadada, waxbarashada, caafimaadka, gaadiidka dowladda, xafiisyada dowladda, xafiisyada Guddiga iyo xarumaha diblomaasiyiinta.

## Qodobka 47[aad]: Waxyaabaha ka Reebban Ololaha

1. Waxaa reeban in ololaha doorashada lagu qabto goobaha cibaadada, waxbarashada, caafimaadka, gaadiidka dowladda, xafiisyada dowladda, xafiisyada Guddiga iyo xarumaha diblomaasiyiinta.
2. Isku soo baxyada iyo kulamada ururrada ama xisbiyadu ay qabsanayaan waqtiga ololaha waxaa ka reebban in loo qaato hub, labis ciidan ama wax u eg, marka laga reebo ciidamada ammaanka.
3. Waxaa reebban haddalada xanafta leh ee bulshada Soomaaliyeed kala fogaynaya waxna u dhimaya dhaqanka, diinta, nabadgalyada iyo danta guud ee ummadda Soomaaliyeed.

4. Waxaa ka reebban xisbiyada/ururrada siyaasadda in ay ku ololeeyaan arrimo qabiil iyo kuwo diimeed.
5. Waxaa reebban in urur ama xisbi gaar ahi hantida ummada u adeegsado ololaha doorashooyinka.
6. Ururrada/xisbiyadu si siman ayey u isticmaalayaan warbaahinta Dowladda iyo fagaarayaasha lays kugu soo baxo muddada ololaha doorashadu socoto.
7. Ururrada/xisbiyada ku tartamaya doorashooyinka waxaa ka reeban oo mamnuuc ka ah in ay dhaqaale shisheeye u isticmaalaan ololaha Doorashooyinka sida uu qabo xeerka xisbiyadu.
8. Urur/xisbi kasta oo ay ku caddaato in uu dhaqaale shisheeye ku isticmaalay ololihiisa waxaa lala tiigsanayaa xeerka, iyada oo diiwaan-gelinta xisbinnimo lagala noqonayo si waafaqsan xeerka xisbiyada siyaasadda iyo Xeer-nidaamiyeyaasha Guddiga.
9. Waxaa ka reebban xubnaha hay'adaha amniga ee kala duwan, shaqaalaha dowladda, diblomaasiyiinta, guddiyada madaxa-bannaan iyo hay'adaha madaxa-bannaan iyo xubnaha bahda garsoorka inay ka qaybgalaan ololaha doorashooyinka.

### Qodobka 48aad: Warbaahinta iyo Doorashooyinka

1. Warbaahinta waxaa ku waajib ah xilliga doorashooyinka in ay tabiyaan warar isku-dheeli-tiran oo ka maran been abuur, nacayb, kicin iyo wax kasta oo wadajirka umadda Soomaaliyeed waxyeelaya dhaawacayana nabadgalyada dalka.
2. Warbaahinta waxaa kaalintoodu tahay baahinta barnaamijyada iyo fariimaha wacyigalinta ee ku saabsan doorashooyinka si dadweynaha Soomaaliyeed u helaan xogta ay u baahanyihiin ee la xiriira doorashooyinka.
3. Warbaahintu ma tabin karto warar la xiriira natiijada doorashooyinka oo aan Guddiga ka soo bixin.

4. Warbaahintu waxa ay wararka ku saabsan geedi-socodka doorashooyinka iyo natiijada doorashooyinka ka qaadan karaan keliya Guddiga.
5. Warbaahintu waxa ay ku dhaqmayaan xeerka hab-dhaqanka saxaafada ee xilliga doorashooyinka oo Guddigu soo saaro.

## CUTUBKA 7AAD: DIYAAR-GAROWGA DOORASHOOYINKA IYO CODBIXINTA

### Qodobka 49aad: U Diyaar Garowga Dawlaha Doorashada

1. Guddigu waxa ay diyaarinayaan jadwal muddaysan oo si cad u tilmaamaya qorshaha hawl-galka doorashooyinka.
2. Guddigu waxa ay siinayaan tababarro ku filan shaqaalaha iyo hawl-wadeenada ka hawl-galaya goobaha doorashooyinka.

### Qodobka 50aad: Diyaarinta Agabka Doorashooyinka

1. Guddigu waxa uu diyaarinayaa agabka muhiimka u ah doorashooyinka ee ku xusan qodobka 51aad ee Xeerkan iyo agabkii kale ee loo baahdo si howsha doorashooyinku ugu qabsoonto sida uu sharcigu tilmaamay.
2. Agabka doorasho ee ku xusan faqrada (1) ee qodobkan, Guddiga waxa ay ku bixin karaan qandaraas furan oo loo siman yahay loona maamulay si daah-furnaan iyo caddaalad ah, waafaqsanna Xeerka Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka.
3. Qandaraaslaha ku guulaysta qandaraaska furan, Guddigu waxa uu la gelayaa heshiis qandaraas muddaysan oo lagu caddeeyay nooca iyo baaxadda qandaraaska, muddada lagu keenayo agabka iyo sida loo bixinayo lacagta. Haddii xaalado degdeg ah soo baxaan waxaa loo noqonayaa Xeerka Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka.

4. Xubnaha Guddiga, qoysaskooda iyo meheradahooda ganacsiba waxaa ka reebban in ay ka qeybgalaan ama dan ganacsi ku yeeshaan qandaraasyada ay bixiyaan Guddigu.

## Qodobka 51aad: Waraaqaha Codbixinta

1. Waraaqaha codbixinta waa in lagu soo daabacaa astaamaha xisbiyada/ururrada siyaasadda iyo shaqsiyaadka sida tooska loo dooranayo ee doorashooyinka ka qaybgelaya.
2. Waraaq codbixin waliba waa in ay leedahay meel bannaan oo loo asteeyay in codbixiyuhu codkiisa ku muujin karo.
3. Waraaqaha cod-bixintu waa in ay noqdaan kuwo leh astaamo qarsoon oo aan la been-abuuri karin, isla markaana waa in ay leeyihiin tirsi taxane ah (serial number).
4. Guddiga ayaa go'aaminaya astaamaha kale ee ay yeelanayaan waraaqaha codbixintu haddii loo baahdo.
5. Guddigu waxa ay daabacayaan waraaqo codbixineed oo tusaale ah (sample) oo loogu talo galay in xisbiyadu/ururrada siyaasadeed ay taageerayaashooda ku fahansiiyaan qaabka loo codaynayo.

## Qodobka 52aad: Agabka goobaha iyo xarumaha Doorashada

1. Guddigu waxa uu diyaarinayaa agabka muhiimka u ah xarun/goob codbixineed walba laga rabo oo ay ka mid yihiin:
    a) Nuqul xeerka doorashooyinka ah;
    b) Xirmo xiran oo ay ku jiraan shaabad iyo khadkeeda;
    c) Xirmo xiran oo ay ku jiraan waraaqaha cod-bixinta;
    d) Sanduuqa ama sanduuqyada lagu codeenayo;
    e) Liiska rasmiga ah ee codbixiyeyaasha xarunta/goobta;

f) Saddex foom oo kala ah midka cabashada, midka warbixinta iyo midka tirinta codadka;

g) Qalimo ku filan calaamadinta warqadaha codbixinta;

h) Tilmaamo tusaya codbixiyeyaasha qaabka ay u calaamadinayaan waraaqda codbixinta;

i) Khadka aan tirmin ee lagu calaamadiyo qofka codka dhiibtay; iyo

j) Qalab ama agab kasta oo muhiim u noqon kara codbixinta doorashooyinka.

2. Qalabka xafiis kasta ee doorasho waa in lagu rido sanduuq gaar ah waa in la xiraa lana lingaxaa.
3. Guddigu waa in ay qalabka muhiimka ah ee doorashooyinka diraan waqti munaasib ah iyaga oo ay la socdaan sanduuqyadii codbixinta.
4. Qalabka ku xusan faqrada (3) ee qodobkan waxaa loo dirayaa xafiisyada doorashooyinka ee heer Dowlad-goboleed/ SSC-Khaatumo oo iyaguna u sii gudbinaya xarumaha codbixinta oo iyaguna usii qeybinaya goobaha codbixinta.
5. Waraaqaha codbixinta ee goobaha codbixinta waxa uu Guddigu ku jaan-goynayaa tirada codbixiyeyaasha goobta ka diiwaan-gashan oo lagu daray tirada dadka ka hawl-galaya goobta codbixinta oo ah shaqaalaha Guddiga, goobjoogayaasha maxalliga ah, wakiillada xisbiyadda/ururrada siyaasadda iyo ciidanka amniga ee goobta ku qoran.
6. Guddigu waxa ay goob kasta oo codbixineed u diyaarinayaan waraaqo codbixineed oo dheeraad ah kuwaas oo aan ka badnayn 4% tirada waraaqaha loogu talo galay goobta.
7. Waraaqaha dheeraadka ah ee ku xusan faqrada (6) ee qodobkan waxaa keliya loo adeegsanayaa beddelaadda waraaqaha codbixinta ee xumaada inta aan lagu codayn.
8. Mar kasta oo lagu codeeyo warqad ka mid ah waraaqaha dheeraadka ah waa in la diiwaan-geliyo lana sheego sababta loogu codeeyay waraaqda dheeraadka ah.
9. Guddigu isagoo ka duulaya baahiyaha degdegga ah ee soo baxa lana soo darsa xarumaha codbixinta, waxa uu awood u leeyahay in uu kordhiyo ama dhimo qalabka goobta codbixinta.

## Qodobka 53aad: Diyaar Garawga Codbixinta

1. Marka agabka doorashooyinka uu goobta codbixinta loogu talo galay soo gaaro, maamulaha goobtu waxaa uu: -
   a) Ku wargelinayaa hawl-wadeennada goobta sida ay u kala leeyihiin shaqada goobta;
   b) Hubinayaa in wakiillada xisbiyada/ururrada tartamayaa ay goob-joog yihiin;
   c) Hubinayaa in agabkii goobtu dhanyahay xiranyahayna, iyada ooay joogaan wakiillada xisbiyaddu/ururradu;
   d) Marka la hubiyo in agabkii doorashooyinka ee goobtu dhanyahay sida shaabbadihii iyo waraaqihii codbixinta, maamulaha goobtu waxaa uu furayaa xirmooyinka waraaqaha codbixinta waxa uuna ku shaabbadeynayaa shaabbadda goobta, iyada ooaan la furi karin maalinta codbixinta ka hor;
   e) Warqadaha codbixinta waxaa la shaabbadeenayaa marka codbixiyaha la siinayo warqadda codbixinta;
   f) Hubinayaa in liiska murashaxiinta Xisbiyada/ururrada siyaasadda iyo warqadaha tilmaamaha doorashadu ku dhajisan yihiin meel muuqata oo dadku arki karo.
2. Waxaa reebban in qof aan goobta ku qornayn oo aan ahayn shaqaalaha iyo hawl-wadeennada doorashooyinka uu goob-joog ahaado marka la fulinayo waajibaadka ku xusan faqrada (1) ee qodobkan.
3. Maamulaha goobtu waa in uu si qoraal ah ku caddeeyaa shaabbadda, tirada waraaqaha codbixinta iyo agabka kale ee goobta la keenay kana saxiixaa hawl-wadeennada iyo wakiillada xisbiyada/ururrada siyaasadda.
4. Marka la qabto shaqooyinka ku xusan faqrooyinka 1aad, 2aad iyo 3aad ee qodobkan waa in Maamulaha goobtu ku dhawaaqo in codbixintu furan tahay.

5. Haddii ay dhacdo in xisbiyada/ururrada siyaasadda tartamaya wakiillo u soo dirsan waayaan goobta codbixinta, doorashadu si caadi ah ayay u soconeysaa una joogsan mayso maqnaanshaha wakiillada xisbiyada/ururrada siyaasadda.

### Qodobka 54aad: Waajibaadka Maamulaha Goobta Doorashada

1. Maamulaha goobtu waa mas'uulka koowaad ee goobta codbixinta waxa uuna xil ka saaran yahay in uu ilaaliyo nidaamka goobta codbixinta iyo habsami u socodka hawlaha doorashooyinka.
2. Howl-wadaneenada goobta ka hawlgalaya oo dhan oo ay ku jiraan xubnaha ciidanka ah ee amniga goobta sugayaa waxa ay ka amar qaadanayaan maamulaha goobta.
3. Maamuluhu waxa uu amri karaa hay'adaha amniga doorashooyinka in dibedda looga saaro ama la xiro cid kasta oo goobta codbixinta khalkhal galineysa.
4. Maamulaha goobtu waxa uu awood u leeyahay in uu goobta codbixinta xiro haddii duruufo adag oo aysan doorashadu ka socon karayn la soo darsaan.
5. Maamulaha goobtu waa in uu xarunta goobtu hoostimaado wargeliyaa marka uu isticmaalayo awoodda ku xusan faqrada 4aad ee qodobkan.
6. Maamulaha goobtu isaga ayaa ku dhawaaqaya in codbixinta goobtu furan tahay, isaga ayaana ku dhawaaqaya in codbixintii goobtu xiran tahay marka ay gaarto saacaddii loo qabtay.
7. Haddii maamulaha goobtu awoodi waayo gudasha waajibaadkiisa si kastaba haku timaaddee ama uusan joogin waxaa beddelkiisa gelaya maamule ku-xigeenka isla goobtaas ama Guddiga.

### Qodobka 55aad: Nidaamka Goobta Codbixinta

1. Goobta codbixinta ee doorashadu ka socoto waxaa geli kara oo kaliya shaqaalaha iyo hawlwadeennada ka shaqeynaya ee Guddiga ka socda, wakiillada

xisbiyada/ururrada, codbixiyeyaasha, warbaahinta, goob-joogeyaasha doorashada iyo Ciidamada Amniga doorashooyinka haddii Maamulaha goobtu sidaas codsado.

2. Goob-joogeyaasha iyo warbaahintu waa in ay wataan kaararka lagu aqoonsado oo Guddigu bixiyey muujinayana in ay yihiin goob-joogeyaasha iyo warbaahinta doorashooyinka.
3. Codbixiyeyaashu saf ayay gelayaan iyada oo loo gelayo goobta codbixinta sida ay u soo kala horeeyeen.
4. Dadka jilicsan ee da'da ah, naafada, hooyooyinka uurka leh ama caruurta sita waa in loo samofalaa oo dadka kale laga hormariyaa.
5. Waxaa reebban in codbixiyeyaashu hub nooc kasta oo uu yahay la yimaadaan goobta.

### Qodobka 56aad: Goobta codbixinta dhexdeeda

1. Goob kasta oo codbixineed waxa ay yeelanaysaa ugu yaran laba qol yar (daahyo ayaa laga sameyn karaa) oo loogu talo galay in codbixiyuhu ku calaamadiyo warqadda codbixinta.
2. Qolka waa in la hubiyaa in aanay ku jirin ama cod-bixiyuhu uusan la gelin wax lid ku ah qarsoodi ahaanshiyaha codbixinta marka laga reebo codbixiyaha codkiisa dhiibanaya iyo cidda kaalmeynaysa haddii uu kaalmo u baahan yahay.
3. Goob kasta ee codbixineed waa in uu yaalaa liiska magacyada shaqaalaha iyo hawl-wadeenada oo ay ku jiraan wakiillada xisbiyada/ururrada siyaasadda.
4. Goobta codbixinta iyo agabka doorasho ee dhexyaalaba waxaa ilaalinaya tiro ciidan ah oo loogu talo galay, haseyeeshee looma oggolo in ay galaan, Maamulaha oo sidaas codsada mooyee.

## Qodobka 57aad: Codbixinta

1. Cod-bixiyuhu waxa uu leeyahay hal cod oo uu ugu codeyn karo hal musharaxama urur/xisbi siyaasadeed ee heerka doorasho ee uu hadba codkiisa ka dhiibanayo.
2. Xoghayaha goobtu waxa uu hubinayaa in kaarka codbixinta ee uu sito codbixiye kasta uu yahay midkii saxda ahaa, qofka sitaana uu yahay qofkii lahaa isla markaana uusan horey codkiisa u soo dhiiban.
3. Codbixiyaha waa in la siiyaa warqadda cod-bixinta oo shaabaddii goobta leh marka la hubiyo ka dib.
4. Codbixiye kasta marka uu codka dhiibanayo waxa uu gelayaa qolka codeynta waxa uuna u calaamadinayaa warqadda codbixinta qaabka loogu talo galay.
5. Codbixiyuhu waxa uu sanduuqa codbixinta ku ridayaa warqadda codbixinta iyada ooisku laaban.
6. Codbixiyuhu marka uu codka dhiibto waa in faryarada bidix lagaga calaamadiyo khad aan tirmayn oo muujinaysa in uu codeeyay. Hadii aanu lahayna gacanta midigta ayaa beddeleysa, haddii iyadana aysan jirin, waxaa laga calaamadinayaa faraha gacmihiisa middood, haddii uusan fara gacmeed lahayna waxaa laga calaamadinayaa meel muuqata oo jirkiisa ka mid ah.
7. Haddii warqadda codbixintu aysan dhammayn ama dhaawac qabto inta uusan calaameyn, codbixiyuhu waa in uu soo celiyo oo Maamulaha goobta weydiisto mid dhammaystiran oo sax ah.
8. Codbixiyeyaashu waa in aysan cudurdaar la'aan ku daahin qolka codbixinta, haddii ay dhacdana maamulaha goobtu waxa uu awood u leeyahay in uu ka saaro kana qaado waraaqda codbixinta qof kasta oo ku daaha qolka sabab maangal ah la'aanteed.
9. Codbixiyeyaasha goobta looga saaray si waafaqsan faqrada 8aad ee qodobkan waxaa mar kale loo ogolaan karaa inay codkooda dhiibtaan marka dhammaan dadka kale ee goobta ku sugani codkooda dhiibtaan.
10. Haddii codbixiye lagu helo in uu sito waraaq codbixineed oo aan ahayn tan goobta laga bixiyey ama waraaqo dheeraad ah ama uu hore codkiisa u soo dhiibtey,

Maamulaha goobtu waa in uu si degdeg ah u amro in la qabto oo booliska loo dhiibo si maxkamad loo horgeeyo, waana in arrintaa warbixinteeda loo gudbiyo xafiisyada sare ee Guddiga.

11. Codbixiyeyaasha qaba duruufo gaar ah oo aan u saamaxayn in ay codkooda si caadi ah u dhiibtaan sida dadka naafada ah ama da'da ah iyo qof kasta oo codsada in loo calaamadiyo waxaa u calaamadinaya maamulaha goobta ama hawlwadeenkii uu u xilsaaro iyada ooay goob-joog yihiin wakiillada xisbiyadu/ururada siyaasaddu.

## Qodobka 58aad: Muddada codbixinta

1. Muddada codbixintu waa hal maalin oo dhammeystiran oo ka bilaabmeysa 6:00 subaxnimo kuna eg 6:00 maqribnimo.
2. Wakhtiga ku xusan faqrada 1aad ee qodobkan haddii ay jiraan codbixiyayaal safka ku jira oo aan wali codkooda dhiiban ilaa laga dhammaystirayo codbixiyeyaasha markaas safka taagan muddada codbixinta waa la kordhin karaa.
3. Marka ay gaarto saacadda xiritaanka (6:00 maqribnimo) ee goobta, maamulaha goobta ama hawlwadeen uu igmaday ayaa soo baxaya oo eegaya/fiirinaya dadka safka ku jira ee aan wali codkooda dhiiban qofka u danbeeya ayuuna calaamadsanayaa si aysan cid danbe ugu soo biirin safka.
4. Marka la dhammeystiro dadka safka ku jira ee ku xusan faqrada 3aad ee qodobkan ayuu maamuluhu ku dhawaaqayaa in codbixintii xiran tahay.

## Qodobka 59aad: Cabashooyinka Goobta Codbixinta

1. Wixii cabashooyin ah ee ay qabaan wakiillada xisbiyadu/ururrada siyaasaddu waa in ay qaab qoraal ah ugu gudbiyaan Maamulaha goobta ayaga oo buuxinayo foomka cabashada.
2. Maamulaha goobtu waa in uu go'aan ka gaaro cabashooyinka fudfudud ee loo soo gudbiyay iyo wixii muran ah ee ka dhashay hawsha doorashooyinka.

3. Cabashooyinka goobta ee qoraal ahaan loo soo gudbiyay ama loo soo jeediyay waa in qoraal lagu diwaangeliyaa si xafiisyada sare ee Guddiga loola socodsiiyo.
4. Cabashooyinka la xiriira xaqa codbixinta, tartanka iyo natiijada kama dambaysta ee doorashada waxaa looga caban karaa Maxkamadda Sare ee Federaalka ee heer federaal.

## CUTUBKA 8AAD: TIRINTA CODADKA IYO NATIIJADA DOORASHOOYINKA

### Qodobka 60aad: Isku Diyaarinta Tirinta Codadka

1. Marka dhammaan codbixiyeyaasha safka ku jira la dhammeystiro ee ay codkooda dhiibtaan, maamulaha goobtu waxaa uu ku dhawaaqayaa in goobta codbixintu xiran tahay.
2. Maamulaha goobtu waxa uu isugu yeerayaa dhammaan shaqaalaha, howl-wadeenada goobta, wakiilada xisbiyada/ururrada siyaasadda iyo goobjoogeyaasha isaga oo ku wargelinaya in goobtu xiran tahay lana bilaabayo tirintii codadka la dhiibtay iyada oocid soo gali karta iyo cid ka bixi kartaana aysan jirin inta ay tirintu socoto.
3. Ka hor inta aan la bilaabin tirinta codadka, maamulaha goobtu waa in uu hawl-wadeenada goobta ku amraa in dhammaan waraaqaha iyo qalabka goobta yaal ee aan muhiimka u ahayn tirinta codadka laga saaro meesha.
4. Maamuluhu waxa uu hubinayaa iyada oo ay goobjoog yihiin hawlwadeennada iyo wakiillada
Xisbiyada/ururrada siyaasadda tirada guud ee codbixiyeyaasha codka dhiibtay isaga oo isku fiirinaya tirada waraaqaha codbixinta ee la isticmaalay iyo tirada codbixiyeyaasha ka diwaangashan goobta isagoo ku qoraya foomka warbixinta.

5. Waxa uu tirinayaa maamuluhu iyaga oo dhammaan hawl-wadeennada goob-joog ka yihiin waraaqaha codbixinta ee aan la isticmaalin waxa uuna ku ridayaa buqshad loogu talo galay.
6. Waxaa la tirinayaa tirada waraaqaha codbixinta ee xumaaday ee ay soo celiyeen codbixiyeyaashu ama la arkay in ay xun yihiin waxaana lagu ridayaa buqshad u gaar ah oo loogu talo galay.

**Qodobka 61aad: Tirinta codadka Goobta**

1. Marka la dhammeystiro hawsha diyaargarawga tirinta codadka ee ku xusan qodobka 60aad ee Xeerkan waxaa la bilaabayaa tirinta waraaqaha codbixinta ee sanduuqa ku jira.
2. Tirintu waxa ay ku bilaabmeysaa furista lingaxa sanduuqa, xoghayaha goobta ayaana marba hal warqad codbixineed ka soo saaraya sanduuqa waxa uuna u dhiibayaa maamulaha goobta oo furaya warqadda cod la maqli karana ku sheegaya xisbiga/ururka siyaasadeed ama murashaxa uu codbixiyuhu codkiisa siiyay.
3. Marka uu maamuluhu sheego xisbiga/ururka ama murashaxa codka la siiyay waxa uu ku celinayaa xoghayaha oo sii tusaya wakiillada xisbiyada/ururrada.
4. Marka lagu dhawaaqo xisbiga/ururka ama murashaxa codka la siiyay, hawl-wadeenka u xilsaaran ayaa gelinaya natiijada foom loogu talo galay tirinta codadka xisbiyadu/ururradu iyo murashaxiinta kala heleen, warqaddana waxa uu ku ridayaa buqshad xafidan oo calaamadda xisbiga/ururka ama murashaxa codka helay leh.
5. Hawsha tirinta waxaa maamulaya hawl-wadeennada Guddiga ee doorashooyinka ee goobta, wakiillada xisbiyaduna/ururraduna si feejigan ayey ula soconayaan si ay u xaqiijiyaan in tirintu si habsami ah u socoto.
6. Marka hawsha tirintu dhammaato, hawl-wadeennada goobta oo uu maamuluhu hogaaminayo waxa ay hubinayaan in ay tiro ahaan isleeyihiin isku gaynta waraaqaha codbixinta, waddarta tirada codadka xisbiyadu/urarradu ama

murashaxiintu heleen, codadka lagu muransan yahay, xumaaday ama aan ansaxa ahayn, kuwa aan la isticmaalin iyo codbixiyeyaasha diiwaanka ku qoran.

7. Maamulaha goobtu waxa uu waraaqaha codbixinta ee xumaaday, kuwa waxba kama jiraanka laga soo qaaday, kuwa muranku ka taaganyahay iyo waraaqaha cabashada ku ridayaa mid walba buqshad gaar ah oo loogu talo galay.
8. Maamuluhu waxa uu waraaqaha codbixinta ee la tiriyay ku ridayaa buqshad gaar ah iyaga oo kala soocan ama u kala xiran xisbi-xisbi/urur-urur ama musharaxsanduuqii ayaana lagu celinayaa laguna lingaxayaa.

## Qodobka 62aad: Soo-gabagabeynta tirinta codadka

1. Tirinta codadka goobta waa in lagu dhammeeya 24 saacadood gudahood, waana in lagu dhejiyaa natiijada doorashada goobta codbixinta marka laga reebo natiijada doorasho ee lagu muransan yahay ama ay jiraan duruufo kale oo sababaya in aanan la dhejin natiijada doorashada.
2. Marka la dhameystiro hawsha tirinta codadka doorashooyinka ee ku xusan qodobka 61aad ee Xeerkan, Maamulaha goobtu waxaa uu ku dhawaaqayaa wadarta guud ee tirada codbixiyeyaasha, codadka guud ee ansaxay, codadka xumaaday iyo xisbi/urur ama musharaxwaliba tirada codadka uu goobta ka helay.
3. Baqshadaha lagu riday waraaqaha kala duwan ee codbixinta waa la xirayaa oo la lingaxayaa, waxaana dusha lagaga dhufanayaa shaabbadda goobta waxaana dusha ka saxiixaya Maamulaha goobta codbixinta.
4. Baqshad walba oo wax lagu riday waxa dusheeda lagu qorayaa faahfaahinta waxa ku jira buqshadda.
5. Guddigu waxa ay awood u leeyihiin in ay soo saaraan habraacyo faahfaahinaya hawlaha tirinta codadka haddii loo baahdo.

## Qodobka 63aad: Waraaqaha Codadka Xumaaday

1. Waraaqaha codbixinta ee xumaaday waa kuwa aan:
   a) Ahayn kuwa rasmiga ah ee Guddigu go'aamiyey in doorashooyinka lagu galo;
   b) Lahayn shaabbaddii goobta;
   c) Lahayn calaamad;
   d) Loo calaamadayn hal murashax, hal xisbi/urur ee loo calaamadeeyay wax ka badan;
   e) Calaamadayn goobtii loo asteeyay in la calaamadeeyo iyada oola caleemadeeyay meel ka baxsan.
2. Warqadda codbixintu waxa ay waxba kama jiraan noqoneysaa marka ay si wada jir ah isugu raacaan Maamulaha, hawl-wadeennada goobta codbixinta iyo wakiillada xisbiyadu/ururradu ama murashaxa.
3. Haddii ay isku khilaafaan Maamulka, hawl-wadeenada iyo wakiilladu saxnimada warqadda codbixinta, waxaa warqadda codbixinta loo aqoonsanayaa warqad khilaaf ka taagan yahay, waxaana loo gudbinayaa xarunta dhexe ee tirinta codadka ee Guddiga.

## Qodobka 64aad: Gudbinta Natiijada Goobta

1. Marka la dhammaystiro hawlaha tirinta ee goobta codbixinta si waafaqsan qodobada Xeerkan isla markaana waraaqaha lagu rido buqshadaha loogu talo galay, waxaa la raacinayaa qoraallada raadraaca ah ee tilmaamaya waxa ku jira sanduuqa agabka lagu riday.
2. Natiijadii goobta codbixinta oo ay la socdaan qoraalada raadraaca ahi ayaa loo gudbinayaa xarunta ay hoostimaad goobta codbixintu oo iyaduna u sii gudbineysa xafiiska doorashooyinka Guddiga ee Dowlad-goboleedka/ SSC-Khaatumo oo isna

hubin kadib u sii gudbinaya xarunta dhexe ee tirinta codadka ee Guddiga Doorashooyinka Qaranka.

3. Nuqullada qoraalka raadraaca ah ee natiijada goobta laga soo raacinayo waxaa go'aaminaya Guddiga, waxaana waajib ah in nuqul ka mid ah lagu rido sanduuqa agabku ku jiro, iyada oomin hal nuqulna la siinayo xafiiska Guddiga ee heer Dowlad-goboleed SSC-Khaatumo iyo xarunta dhexe ee tirinta codadka ee Guddiga.

### Qodobka 65aad: Rarista iyo Wareejinta Agabka Doorashooyinka

Hawl-wadeennada xarumaha codbixintu waxa ay natiijooyinka uga yimid goobaha codbixinta oo ay ku jiraan qoraaladii raadraaca iyo agabka kala duwan ee codbixinta u wareejinayaan xafiiska doorashooyinka Guddiga ee Dowlad-goboleed/ SSC-Khaatumo sida ugu dhakhsaha badan iyada ooay la socdaan wakiillada xisbiyada/ururrada siyaasadeed iyada oo ay Hawl-wadennada Guddigu ay qaadayaan dhammaan agabka doorashooyinka isla markaana ay Ciidanka amnigu ay leeyihiin ilaalinta sanduuqa codeynta

### Qodobka 66aad: Hubinta Natiijada Goobaha

1. Xafiiska Doorashooyinka ee Guddiga ee heer Dowlad-goboleed/ SSC-Khaatumo marka uu helo natiijooyinka goobaha iyo agabka kale ee doorashada ee Xeerkan ku xusan, waxa uu qaadayaa talaabooyinkan soo socda:
   a) Waxa uu hawlgalinayaa hawl-wadeennada Guddiga iyo wakiillada xisbiyada/ururrada siyaasadda in ay si wada jir ah ugu hubiyaan natiijooyinka loo soo gudbiyay;
   b) Waxa uu hubinayaa in buqshadihii kala duwanaa ee loo qorsheeyay in lagu soo riddo agabka iyo waraaqaha codbixinta ay dhan yihiin;
   c) Waxa uu hubinayaa natiijooyinka goobaha codbixinta oo dhan;

d) Waxa uu isku gaynayaa natiijooyinka codadka ansaxa, kuwa xumaaday, kuwa aan lagu codayn iyo kuwa lagu muransan yahay ee Dowlad Goboleedkaas/ SSC-Khaatumo.

e) Waxa uu xisaabinayaa tirada guud ee xisbi/urur ama musharaxwaliba ka helay codadka laga dhiibtay goobaha codbixinta.

2. Xafiiska doorashooyinka ee Guddiga ee heer Dowlad-goboleed/ SSC-Khaatumo waxa uu natiijada codadka laga dhiibtay goobaha codbixinta oo laysku geeyay iyo cabashooyinka haddiiba ay jiraan u gudbinayaa xarunta dhexe ee tirinta codadka ee Guddiga.

3. Xafiiska doorashooyinka ee Guddiga ee heer Dowlad-goboleed/SSC-Khaatumo natiijada xarumaha codbixinta ay u soo gudbiyeen, waxa uu natiijadaas codadka Dowlad-goboleedka/SSC-Khaatumo oo dhan oo ku qoran foom loogu talo galay u gudbinayaa Xarunta dhexe ee Tirinta Codadka ee Guddiga.

4. Natiijooyinka iyo agabka doorashooyinka ee xarumaha iyo raadraacooda marka ay soo gaaraan xarunta dhexe ee Tirinta Codadka, waxa ay Guddigu isku diyaarinayaan hubinta natiijooyinka dhammaan Dalka ka soo gaaray.

5. Guddigu waxa ay u yeerayaan wakiillada xisbiyada/ururrada siyaasadda heer qaran si ay goobjoog ugu noqdaan xarunta hubinta iyo isku geynta natiijooyinku ka dhacayso.

6. Guddiga iyo wakiilladu waxa ay si wada jir ah u hubinayaan in buqshadaha loo soo gudbiyay ku wada xiranyihiin lingixii loogu talo galayna ka muuqdo, marka ay intaa hubiyaan ayuu Guddiga furayaa buqshadaha natiijooyinku ku jiraan.

7. Guddigu waxa uu si daah-furnaan leh isu-geynayaa natiijooyinka goobaha codbixinta, wadarta codadka, inta ansaxday, inta xumaatay, codadka xisbiyadu/ururradu ama murashaxiintu kala heleen oo u kala habeysan heer xafiisyada doorashooyinka Guddiga ee heer Dowlad-goboleed/SSC-Khaatumo iyo mid guud.

8. Guddigu waxa ay go'aan ka gaarayaan cabashooyinka la xiriira Natiijada doorashooyinka toddobo (7) maalmood oo shaqo gudahood oo ka bilaabanta maalinta xigta marka ay dhammaato codbixintu.

## Qodobka 67aad: Ku Dhawaaqista Rasmiga ah ee Natiijada Doorashada

1. Guddigu marka uu sameeyo hubinta ku xusan qodobka 66aad ee Xeerkan waxa uu si rasmi ah ugu dhawaaqayaa natiijada doorashooyinka muddo afar iyo labaatan saac gudahood marka ay dhammaato tirinta codadka.
2. Guddigu ayaa cayimaya taariikhda la dhaarinayo xubnaha la doortay si waafaqsan Xeerarka dalka.

## Qodobka 68aad: Nidaamka Qaybinta Kuraasta iyo Codadka ee Golaha Shacabka

1. Xisbiga gudihiisa murashaxiinta waxa ay u kala guuleysanayaan sida ay u kala cod badan yihin iyada oo la dhawrayo habka saami qaybsiga beelaha soomaaliyeed.
2. Beel wadaagta kursi lambar oo ka soo baxda xibsi siyaasadeed mar labaad ama saddexaad kama soo bixi karto xisbi kale.
3. Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha waxa uu marka kowaad ku dhawaaqayaa kuraasta xisbiga helay codadka ugu badan waxaana soo baxaya murashaxiinta ugu codadka badan ee tirada guud ee xildhibannada uu xisbiga helay.
4. Marka labaad waxa ay guddigu qaybinayaan kuraasta uu xisbiga kaalinta labaad galay waxaana soo baxaya murashaxiinta ugu codadka badan ee aan ka soo jeedin beelaha ku guuleystay kuraasta xisbiga kaalinta kowaad galay.
5. Marka saddexaad waxa ay guddigu qaybinayaan kuraasta xisbiga kaalinta saddexaad galay waxaana soo baxaya murashaxiiinta aan ka soo jeedin beelaha ku guulaystay xisbiyada kaalmaha kowaad iyo labaad galay.
6. Kuraasta Xildhibaanada Golaha Shacabka ee ka soo jeeda Gobolada Waqooyi (Soomaaliland) waxa ay ugu kala guulaysanayaan sida ay u kala cod badan yihiin (horreeyaa dheereeya) ee Liistada furan ee xisbiga dalka oo midaysan. Haddii ay

dhacdo in labo murashax isku cod helaan waxaa guulaysanaya murashaxa xisbigiisu ugu codadka badan yahay.

7. Kuraasta Xildhibaanada Golaha Shacabka ee ka soo jeeda beelaha laga tirada badan yahay waxa ay u kala guulaysanayaan sida ay u kala cod badan yihiin (horreeyaa dheereeya) ee Liistada furan ee xisbiga dalka oo midaysan. Haddii ay dhacdo in labo murashax isku cod helaan waxaa guulaysanaya murashaxa xisbigiisu ugu codadka badan yahay.
8. Astaanta kuraastu waa tirsiga ama lambarka kursiga (GSH).

### Qodobka 69[aad]: Nidaamka Qaybinta Kuraasta iyo Codadka ee Aqalka Sare

1. Marka ay tirinta codadka ee dhammaan Dowlad -goboleedku/ SSC-Khaatumo soo geba-gebowdo ee la isku geeyo tirada guud ee codadka ansaxay waxaa la qaybinayaa tirada kuraasta ee Dowlad -goboleedka/ SSC-Khaatumo markaa waxaa la ogaanayaa tirada guud ee kuraasta uu hal xisbi helay.
2. Kuraasta Dowlad Goboleedka/SSC-Khaatumo ee Aqalka Sare waxa ay Xisbiyadu ugu kala guulaysanayaan sida ay ugu kala cod badan yihiin saamiga codadka ay Xisbiyadu Dowlad Goboleedka/SSC-Khaatumo ka heleen.
3. Kuraasta Xildhibaanada Aqalka Sare ee kasoo jeeda Gobolada Waqooyi (Soomaaliland) waxa ay xisbiyadu ugu kala guulaysanayaan sida ay ugu kala cod badan yihiin saamiga codadka ansaxay ee ay xisbiyadu kala heleen.
4. Xisbiga gudihiisa murashaxiintu waxa ay u kala guulaysanayaan sida ay u kala cod badan yihiin iyada oo la dhawrayo habka saami-qaybsiga Beelaha Soomaaliyeed.
5. Guddiga Madaxa Bannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimuhu waxa uu marka koowaad qaybinayaa kuraasta Xisbiga ugu codadka badan waxaana soo baxaya murashaxiinta ugu codadka badan ee tirada guud ee xildhibaannada uu Xisbigu helay.

6. Marka labaad waxa ay Guddigu qaybinayaan kuraasta uu xisbiga kaalinta labaad galay uu ku guulaystay waxaana soo baxaya xildhibaannada ugu codadka badan ee aan ka soo jeedin beelaha ku guulaystay kuraasta xisbiga kaalinta koowaad galay.
7. Marka saddexaad waxa ay Guddigu qaybinayaan kuraasta uu xisbiga kaalinta saddexaad galay uu ku guulaystay waxaana soo baxaya xildhibaannada aan ka soo jeedin beelaha ku guulaystay kuraasta xisbiyada kaalinta koowaad iyo labaad galay.
8. Marka tirada codadka ansaxay ee Dowlad -goboleedka/SSC-Khaatumo iyo tirada kuraasta la isku qaybiyo, haddii ay jiraan tirooyin codad jajab ah oo xisbi kasta marka gaarkiisa loo eego ka yar qadarka codadka hal kursi lagu heli karo, waxa xisbiyadu kursiga ama kuraasta hartay u kala helayaan sida ay ugu kala badan yihiin tirada codadka jajabka ah.
9. Si loo ilaaliyo habka saami-qaybsiga ee beelaha Soomaaliyeed waxaa reebban in hal beel oo isku kursi ah in ay laba ama saddex xisbi ka soo baxdo.
10. Astaanta kuraastu waa tirsiga ama lambarka kursiga (AQS).

## Qodobka 70aad: Nidaamka Qaybinta Kuraasta Golaha Wakiilada iyo Golaha Deegaanka

1. Xisbiyadu/ururradu waxa ay u kala helayaan kuraasta loo tartamay ee degmooyinka sida ay u kala helaan tirada guud ee codadka ansaxay.
2. Tirada codadka uu xisbi/urur waliba helo ayaa loo beddelayaa boqolley ka dibna kuraas.
3. Guddigu waxa uu xaqiijinayaa in xisbi/urur waliba helo kuraas u dhiganta boqolleyda uu ka helay codadka guud ee ansaxay.
4. Guddigu waxa ay ku dhawaaqayaan tirada iyo magacyada xildhibaannada ee Goleyaasha Deegaanka iyo Golaha Wakiilada ee uu xisbi/urur waliba ku guuleystay iyada oola raacayo sida ay u kala horreeyaan liiska murashaxiinta.

5. Xildhibaan ka tirsan gole deegaan ama gole wakiilada ee la doortay kaasi oo baneeya jagada sabab kastaba ha ahaatee, waxaa lagu soo buuxinaya xubinta ku jirta liiska kaydka.

### Qodobka 71[aad:] Habka buuxinta kuraasta bannaanaatay

1. Haddii uu bannaanaado kursi ka mid ah kuraasta Golaha Shacabka waxaa kursigaas soo buuxinaya Xubinta kayd ah ee Xisbiga uu ka tirsanaa xubinta kursiga bannaysay.
2. Haddii uu bannaanaado kursi ka mid ah kuraasta Aqalka Sare waxaa kursigaasi soo buuxinaya Xubinta kayd ah ee Xisbiga uu ka tirsanaa xubinta kursiga bannaysay.
3. Haddii uu bannaanado kursi ka mid ah kuraasta Golaha wakiillada Dowlad Goboleedka/SSC-Khaatumo, golaha Caasimadda Muqdisho ama gole deegaan waxaa kursigaasi soo buuxinaya Xubinta kayd ah ee Xisbiga uu ka tirsanaa xubinta kursiga bannaysay.

### Qodobka 72[aad:] Habka Tirinta cododka jajabka ah

Guddiga ayaa xeer-nidaamiye ka soo saaraya habka tirinta cododka jajabka ah ee ay ururrada ama xisbiyadu ka helaan doorashooyinka heerarkooda kala duwan.

### Qodobka 73[aad]: Dacwadaha La-xiriira Arrimaha Doorashooyinka

1. Dacwadaha la xiriira doorashooyinka waxaa awood u leh oo ka garnaqaysa Maxkamadda Sare ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
2. Dacwadaha Maxkamadaha u gudbi kara, waa kuwa la xiriira xaqa codbixinta, xaqa ka qaybgalka doorashada iyo go’aanka kama dambaysta ah ee natiijada doorashada.

3. Dacwadaha la xiriira doorashooyinka ee ku xusan faqradda 2aad ee qodobkan, waxaa Maxkamadaha u soo gudbin kara codbixiyaha ama xisbiga/ururka siyaasadeed ay khuseyso.
4. Xisbiyada/ururrada dacwadda ka qaba natiijada doorashada waa in ay Maxamadda Sare ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya u soo gudbiyaan dacwadooda muddo todobo (7) maalmood gudahood ah oo ka bilaabanta maalinta Guddiga ku dhawaaqaan natiijada doorashada.
5. Maxkamadda Sare waa in ay dacwadaha doorashooyinka ee ay u soo gudbiyeen dhinacyada ku xusan faqrada 2aad ee qodobkani go'aan kaga gaartaa muddo 14 maalmood ah oo ka bilaabmaysa maalinta dacwadda ay qabatay maxkamaddu.
6. Dacwadaha ku saabsan go'aannada maamul ee ka soo baxay Guddiga, waxaa cabasho looga qaadan karaa Maxkamadda Sare ee Federaalka.
7. Go'aannada Guddiga ee la xiriira diiwaangelinta codbixiyaha, diiwaangelinta murashixiinta u tartamaya doorashooyinka, hawlgallada codbixinta, iyo ku dhawaaqista natiijadu waxaa cabasho looga qaadan karaa Maxkamadda Sare ee Federaalka.

## CUTUBKA 9AAD: QODOBBO QUBANE AH

### Qodobka 74aad: Dambiyada iyo Ciqaabaha ka Dhalanaya Jabinta Xeerkan

1. Qof kasta oo ku xadgudba qodobbada Xeerkan waxa uu mutaysanayaa ciqaab u dhiganta xadgudubka uu gaystay. Haddii aan ciqaab ka weyn lagu mutaysan iyada oo la raacayo Xeerka Ciqaabta Guud ee dalka, ciqaabta dambiyada la xiriira doorashadu waxa ay noqonaysaa sidan soo socota:
   a) Qof kasta oo hal mar ka badan isdiiwaangaliya waxaa uu mutaysanayaa xarig dhan hal (1) sano ama ganaaax oo gaaraya ($500) oo Doollarka Mareynkanka ah ama shillin Soomaali u dhigma.

b) Qof kasta oo ka been sheega xogtiisa waxaa uu mutaysanayaa ciqaab xarig aan ka badnayn lix (6) bilood ama ganaaax oo gaaraya ($300) oo Dooolarka Mareynkanka ah ama shillin Soomaali u dhigma.

c) Qofka aan u dhalan Dalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee isku daya in uu isku diiwaangeliyo codbixiye ahaan ama ay caddaato in uu sifo khaldan isku diwaangeliyay waxaa uu mutaysanayaa ciqaab aan ka yarayn labo iyo toban (12) bilood oo xarig ah iyo ganaax lacageed oo gaaraya ($2000) oo Doollarka Mareynkanka ah ama shillin Soomaali u dhigma.

d) Mas'uuliyiinta iyo hawl-wadeenada ka shaqeynaya doorashooyinka iyo hawsha ka horeysa ee diiwaan-gelinta codbixiyeyaasha ee ku xadgudba qodobada Xeerkan waxaa ay mutaysanayaan xarig sannad illaa saddex (3) sano ah.

e) Qof kasta oo been abuuro ku sameeyo kaararka codbixinta ama wax-ka-beddela diiwaanka codbixiyeyaasha waxa uu mutaysanayaa xarig ciqaab ah oo u dhaxeeya laba (2) sano illaa shan (5) sano.

f) Codbixiyaha la yimaada goob codbixineed kaarka codbixinta oo uusan lahayn waxa uu mutaysanayaa xarig dhan lix (6) bilood illaa sanad iyo ganaax lacageed oo gaaraya ($1,000) oo Doollarka Mareynkanka ah ama shillin Somali u dhigma.

g) Qof kasta oo uruursada kaarar codbixineed oo cid kale leedahay isaga oo uga jeeda in uu si kale uga faa'iidaysto maalinta codbixinta doorashada waxa uu mutaysanayaa ciqaab xarig oo aan ka yarayn sanad kana badnayn laba sano iyo ganaax lacageed oo gaaraya ($2,000) oo Doollarka Mareynkanka ah ama shillin Somali u dhigma.

h) Qof kasta oo sameeyo ama ka qaybqaata in la sameeyo kaar codbixineed oo been abuuur ah, waxa uu mutaysanayaa xarig aan ka yarayn laba (2) sano kana badnayn afar (4) sano iyo ganaax lacageed oo gaaraya ($4,000) oo Doollarka Mareynkanka ah ama shillin Somali u dhigma.

i) Qof kasta oo sameeyo ama ka qayb qaata samaynta waraaqo codbixineed oo been abuur ah oo aan ahayn kuwa Guddiga doorashadu soo sameeyay,

waxa uu mutaysanayaa xarig dhan saddex (3) sano ilaa shan (5) sano ah iyo ganaax lacageed oo gaaraya ($6,000) oo Doollarka Mareynkanka ah ama shillin Somali u dhigma.

2. Waxaa reebban in goobta codbixinta laga ololeeyo, looga caga jugleeyo codbixiyeyaasha, loo hanjabo ama laga hor istaago in ay coddeeyan ama khalkhal la geliyo goobaha iyo habsami u socodka doorashooyinka.
3. Hawl-wadeen kasta oo ka qaybqaata samaynta dambiyada ku xusan faqrada 2aad ee qodobkan ama fududeeya in la sameeyo waxa uu mutaysanayaa saddex (3) ilaa lix (6) sano oo xarig ah iyo ganaax lacageed oo dhan ($6,000) oo Doollarka Mareynkanka ah ama Shillin Somali dhigma.
4. Qof kasta oo aan ahayn hawlwadeennada doorashada ee sameeya danbiyada ku xusan faqrada 2aad ee qodobkan waxa uu mutaysanayaa ciqaab xarig oo aan ka yarayn hal (1) sano iyo ganaax lacageed oo dhan ($4,000) oo Doollarka Mareynkanka ah ama Shillin Somali dhigma.
5. Hawl-wadeen kasta ee Guddiga oo si bareer ah u gudan waaya waajibaadkiisa shaqo ama sameeya in uu wax ka beddelo natiijada doorashooyinka ee uu gacanta ku hayo, waxyeelleeya waraaqaha codbixinta ama agabka kale ee goobta codbixinta waxa uu mutaysanayaa xarig u dhexeeya labo sanad (2) ilaa afar (4) sano iyo ganaax lacageed oo dhan ($6000) oo Doollarka Mareynkanka ah ama shillin Somali u dhigma.

## Qodobka 75aad: Kala-dirista Goleyaasha Deegaanka

1. Goleyaasha Deegaanka ee dalka waa la-kala diri karaa iyaga oo aan dhammaysan muddo xileedkooda.
2. Xaaladaha lagu kala diri karo iyo qaabka loo kala diri karo waxaa kamid ah:
    a) Marka ay saddex kalfadhi oo is-xiga sabab la'aan u qabsan kari waayaan.
    b) Marka ay dhacdo in khilaaf iyaga gudahooda ah uu ragaadiyo shaqadii loo igmaday

c) Marka ay saddex meelood meel (1/3) oo xubnaha Golaha deegaanka ah ay soo jeediyaan isla-markaana ay ansixiyaan saddex meelood labo meel (2/3).

d) Marka uu guddi gaar ah oo madax-bannaan oo uu u magacaabay Madaxwaynaha JFS ay baaraan gefafka dhacay ee Golaha Caasimadda ama Golaha degmo ka mid ah Caasimadda ee lidka ku ah xil-gudashadooda ay warbixin iyo talooyin hufan ka keenaan

e) Marka uu guddi gaar ah oo madax-bannaan oo uu magacaabo Hogaamiyaha Dowlad Goboleedka/SSC-Khaatumo ay baaraan gefafka dhacay ee lidka ku ah xil-gudashadooda ay warbixin iyo talooyin hufan ka keenaan

3. Marka ay dhacdo xaaladaha ku-xusan faqradda 2aad ee Qodobkaan Madaxwaynaha JFS waxa uu kala diri karaa Golaha Caasimadda ama Golaha deegaanka ee degmo kamid ah Caasimadda.

4. Marka ay dhacdo xaaladaha ku-xusan faqradda 2aad ee Qodobkaan Hogaamiyaha Dowlad Goboleedka/SSC-Khaatumo waxa uu kala diri karaa Golaha deegaanka ee degmo kamid ah degmooyinka maamulkaas.

5. Hadii ay dhacdo mid kamid ah xaaladdaha ku xusan faqrada 3aad iyo 4aad ee qodobkan Madaxwaynaha JFS ama Hogaamiyaha Dowlad Goboleed/SSC-Khaatumo waxa uu magacaabayaa maamul ku-meel-gaar ah inta laga dooranayo Gole-deegaan oo cusub muddo Lix (6) bilood ah.

### Qodobka 76aad: Maamuus ka-xayuubinta Duqa Caasimadda Muqdisho/Ku-xigeennada iyo Guddoomiyeyaasha Degmooyinka/Ku-xigeenka

1. Maamuus ka-xayuubinta Duqa Caasimadda/Ku-xigeennada ama Guddoomiyeyaasha Degmooyinka Caasimadda waxaa soo-jeedin kara saddex meelood meel (1/3) ee Golaha Caasimadda ama Golaha Deegaanka ee Degmada.

2. Maamuus ka-xayuubinta Duqa Magaalada ama Guddoomiyeyaasha Degmooyinka Dowlad Goboleedyada/SSC-Khaatumo waxaa soo-jeedin kara saddex meelood meel (1/3) ee Golaha Deegaanka ee Degmada.
3. Masuuliyiinta kor ku xusan waxaa maamuus ka-xayuubin lagu samayn karaa hadii ay dhacaan sababaha soo socda:
   a) Xil gudasho la'aan jir ahaaneed ama mid maskax ahaaneed.
   b) Ku xad-gudub Dastuur iyo jabinta Xeerarka
   c) Maamul xumo, Musuq-maasuq iyo ku-takri fal awoodeed
   d) Ku kicida falal anshax xumo oo liddi ku ah Shareecada Islaamka iyo dhaqanka suuban
4. Hadi ay dhacdo in Duqa magaalada ama Ku-xigeenka lagu sameeyo Xasaanad ka-xayuubin Golaha Caasimadda ama Golaha Deegaanka ayaa iska dhex dooranaya xubintii buuxin lahayd booskaas.

## Qodobka 77aad: Dhowrista Xeerka

1. Dhowrista iyo ku dhaqanka Xeerkani waa waajib saaran dhammaan shacabka Soomaaliyeed iyo hay'addaha Dowladda ee sida gaarka ah ay u khuseeyo hawlaha doorashada.
2. Ku dhaqan la'aanta iyo ku xadgudubka Xeerkan waxaa lagu mutaysanayaa ciqaabaha ku xusan Xeerkan iyo Xeerarka ciqaabta ee dalka.
3. Guddiga waxaa waajib ku ah meelmarinta iyo ku dhaqanka qodobada Xeerkan.

## Qodobka 78aad: Dib-u-dhaca doorashooyinka

1. Guddiga doorashooyinka ayaa ku dhaawaqaya dib u dhaca doorashooyinka marka ay suurtagali weydo in doorashooyinkii ay ku qabsoomaan waqtigii loo cayimay daruufa adag oo dalka oo dhan ka dhacay ama qaybo ka mid ah dalka.

2. Duruufaha adag ee ku xusan faqrada 1aad ee qodobkan waxaa ka mid ah nabadgelyo darro baahsan oo dalka oo dhan ka dhacda ama qaybo ka mid, aafooyinka dabiiciga ah sida dhul gariirka iyo cudurrada faafa, abaaro baahsan iyo fatahaadaha webiyada iyo duufaanta iyo wax kasta oo lagu tilmaami karo musiibo Qaran. Sidoo kale, duruufaha adag waxaa ka mid noqon kara in aanay doorashadu farsamo ahaan qabsoomi karin.

3. Marka duruufaha ku xusan faqrada 2aad ee qodobkani dhacaan Guddigu waxaa ay la tashanayaan madaxda xisbiyada/ururrada iyo Madaxweynaha, waxa ayna Baarlamaanka Federaalka u gudbinayaan qoraal sababaysan oo xambaarsan duruufaha adag iyo asbaabta kalliftay in doorashooyinka dib loo dhigo.
4. Muddada cusub ee doorashooyinka baaqday ku dhici karaan, waxaa cayimaya Guddiga kadib marka uu qiimayn ku sameeyo xaaladda iyo muddada duruuftaas lagaga bixi karo.
5. Hawsha qiimaynta muddada lagaga bixi karo duruufaha adag ee ku xusan faqrada 4aad ee qodobkan, Guddigu waxa ay la kaashanayaan Xukuumadda iyo Hay'adaha Dowladda ee qaabilsan wax kaqabashada duruufahaas.

## Qodobka 79[aad]: Sugidda Amniga

1. Qof kasta oo Soomaali ah waxaa waajib ku ah inuu gacan ka gaysto sugidda amniga inta lagu gudajiro doorashooyinka.
2. Sugidda amniga waxaa si gaar ah uga mas'uul ah ciidamada booliska oo ka amar qaadanaya Guddiga, waana in dhamaan hay'adaha kala duwan ee ay khuseyso ee heerarka Dowladda ka caawiyaan Guddiga sidii loo xaqiijin lahaa in doorashadu ku qabsoonto jawi nabdoon.
3. Goobaha dorasho waxaa loo qoondaynayaa ciidan boolis si gaar ah loogu tababaray arrimaha doorashooyinka

4. Hay'addaha mas'uuliyadda sugidda amniga leh ee ku xusan faqrada 2aad ee qodobkan waxaa waajib ku ah in ay awaamiirta Guddiga ku shaqeeyaan xilliga doorashooyinka lagu jiro.

## Qodobka 80aad: Xaaladaha Anshax Marinta

1. Iyada oo la raacayo qodobbada xeerkan iyo Xeerarka kale ee khuseeya, Guddigu waxa ay ka mas'uul yihiin taabbagalinta doorashooyinka iyo habsami u socodka doorashooyinka, waxa ayna awood u leeyihiin in ay anshax mariyaan qof kasta oo ku kaca gef maamul ama ku xadgudba doorashooyinka iyo Xeerarka doorashooyinka wakhtiga doorashooyinka lagu jiro.
2. Guddiga waxa ay u soo bandhigayaan codbxiyeyaasha xisbi/urur kasta oo ku xadguba nidaamka doorashooyinka iyaga oo warbaahinta u marinaya xadgudubka iyo gefafka sharci ee xisbigaasi/ururkaasi gaystay.
3. Guddigu waxa uu tallaabooyin ku habboon oo anshaxmarin ah ka qaadayaa hawl-wadeenada iyo shaqaalaha doorashooyinka ee fulin waaya xeerka ama jabiya qodobada xeerarka doorashooyinka.
4. Xadgudubyada waaweyn ee gaarsiisan dambi wax u dhimaya habsami u socodka nidaamka doorashooyinka, waxa lagu mutaysanayaa ciqaab iyo xarig.

## Qodobka 81aad: Soo-Saarista Xeer-nidaamiyeyaasha

1. Guddigu waxa uu awood u leeyahay in uu curiyo soona saaro xeer-nidaamiyayaal, xeerar anshax, habraacyo iyo hageyaal si ay u dabaqaan una dhaqan galiyaan qodobada Xeerkan iyo Xeerarka kale ee khuseeya.
2. Guddigu waxa ay soo saari karaan buug-yareyaal iyo hageyaal lagu wacygalinayo codbixiyeyaasha iyo dadweynaha Soomaaliyeed oo lagu faahfaahinayo Xeerkan kuwaas oo aan ka hor imanayn qodobada Xeerkan.

## Qodobka 82aad: Doorashooyinka kala-duwan ee Dalka

1. Dhammaan heerarka kala duwan ee Doorashooyinka dalka, ha ahaadaan kuwo heer Federaal sida Doorashada Madaxweynaha iyo Labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, Hogaamiyeyaasha Dowlad Goboleedyada/SSC-Khaatumo iyo Ku-xigeenadooda, Goleyaasha Wakiilada, Golaha Caasimadda Muqdisho, Duqa Caasimadda, Goleyaasha Deegmooyinka Dalka, iyo Duqa Magaalada iyo Ku-xigeenka waxaa lagu dooranayaa si waafaqsan Xeerarka Doorashooyinka Qaranka, Ururrada/Xisbiyada iyo Dhisidda Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha.
2. Doorasha kasta oo lagu qabto si aan waafaqsanayn hanaanka ku xusan faqrada 1aad ee qodobkaan waa waxba kama jiraan (null and void).

## Qodobka 83aad: Baabi'in

1. Xeerkan ayaa aasaas u ah dhammaan hawlaha doorashooyinka ee heerarka kala duwan ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
2. Waxaa la baabi'iyay sharci ama xeer kasta oo doorasho oo ka hor-imaanaya Xeerkan.
3. Waxaa la baabi'iyay Xeerarka soo socda:
   a) Sharci lr.23 ee 20 Feb 2020 Doorashooyinka qaran ee heer federal.
   b) Sharci lr.30 ee 11 October 2020 ansixinta heshiiska siyaasadeed ee jiheynta doorashooyinka Baarlamaanka Federaalka 2020/21.

## Qodobka 84aad: Dhaqan-galka Xeerka

Xeerkani waxa uu dhaqan-gelayaa marka ay ansixiyaan Baarlamaanka Federaalka, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyana saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dowladda.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**SHARCI LR. 29** **TAARIIKH: 02-DA DISEEMBAR 2024**

**SHARCIGA ILAALINTA XUQUUQDA NAAFADA SOOMAALIYEED**

**MADAXWEYNAHA J.F.S,**

| | |
|---|---|
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG. |
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobka 82aad, Faqradda 3aad ee Dastuurka KMG. |
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG. |
| **MARKUU ARKAY:** | Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee summaddeedu tahay **XGGSH/642/B11/24**, ku taariikheysan **01/12/2024**, ujeeddaduna tahay Soo Gudbin Ansixinta "Hindisaha Sharciga Ilaalinta Xuquuqda Naafada Soomaaliyeed. |
| **MARKUU TIXGELIYAY:** | Baahida loo qabo in la meel mariyo sharcigan. |

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxaa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga Ilaalinta Xuquuqda Naafada Soomaaliyeed.

**Qodobka 2aad**

Marka uu Madaxweynaha J.F.S. saxiixo Sharcigan, waxa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-012-2025
TAARIIKH: 10-05-2025
SAXIIX:
AVV. Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud ee J.F.S

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
29 MAR 2025
BY: Eduma Mohamed Omar Sealikhi
SAACAD
SAXIIX

**Madaxweynaha J. F.S.**

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOMAALIYA

# HINDISE-SHARCIYEEDKA
# "SHARCIGA ILAALINTA XUQUUQDA NAAFADA SOOMAALIYEED"

## TUSMO

**CUTUBKA KOWAAD** ..... 1
**QODOBO GUUD** ..... 1
Qodobka 1aad ..... 1
Magaca sharciga ..... 1
Qodobka 2aad ..... 1
Erey-bixin ..... 1
Qodobka 3aad ..... 2
Ujeeddada Sharciga ..... 2
Qodobka 4aad ..... 2
Baaxadda Sharciga ..... 2
**CUTUBKA LABAAD** ..... 2
**XUQUUQDA GAARKA AH EE DADKA NAAFADA AH** ..... 2
Qodobka 5aad ..... 2
Xaqa Nolosha ..... 2
Qodobka 6aad ..... 3
Xaqa Sinaanta ..... 3
Qodobka 7aad ..... 3
Xaqa Ka-qeyb-galka Siyaasadda iyo Maamulka ..... 3
Qodobka 8aad ..... 4
Xaqa Badbaadada iyo Nabad-gelinta Naafada ..... 4
Qodobka 9aad ..... 4
Xaqa Daryeelka ..... 4
Qodobka 10aad ..... 4
Xaqa Helidda Adeegyada Guud ..... 4
Qodobka 11aad ..... 5
Canshuur-dhaaf ..... 5
Qodobka 12aad ..... 5
Xaqa Dacwadda ..... 5



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
جمهورية الصومال الفيدرالية
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

**CUTUBKA SADDEXAAD** ........ 6
**AWOODSIINTA NAAFADA ISTICMAAL DEEGAAN OO AAN CAQABAD LAHEYN IYO KA HORTAGA ISBADALKA CIMILADA** ........ 6
Qodobka 13aad ........ 6
Dhismayaasha Danta Guud, Gaarka ah iyo Adeegyada Gaadiidka ........ 6
Qodobka 14aad ........ 6
War-isku-tabinta Naafada ........ 6
Qodobka 15aad ........ 7
Wax-ka-beddelidda Manaahijta Waxbarashada ........ 7
Qodobka 16aad ........ 7
Xeerarka Hal-beegga Dhismooyinka Danta Guud ........ 7
Qodobka 17aad ........ 7
Ka Hortagga iyo ka Jawaabidda Xaaladaha Degdagga ah ee ka Dhasha Isbaddelka Cimilada iyo Colaadaha Saameynta ay ku Leeyihiin Dadka Naafada ah. ........ 7
**CUTUBKA AFARAAD** ........ 8
**DIIWAANGELINTA, WAXBARASHADA, TABABARRADA IYO SHAQAALEYSIINTA NAAFADA** ........ 8
Qodobka 18aad ........ 8
Diiwaangelinta Naafada ........ 8
Qodobka 19aad ........ 8
Waxbarasho Lacag La'aan ah ........ 8
Qodobka 20aad ........ 9
Ka-qebgal Waxbarasho Takoor La'aan ah ........ 9
Qodobka 21aad ........ 9
Mudnaanta Fidinta Waxbarashada Naafada ........ 9
Qodobka 22aad ........ 9
Hirgelinta Waxbarasho gaar ah iyo Agabkeedi ........ 9
Qodobka 23aad ........ 9
Hirgelinta Xarumo iyo Macaahid Gaar ah ........ 9
Qodobka 24aad ........ 10

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

Tababarrada Naafada ........ 10
Qodobka 25aad ........ 10
Takoorid La'aanta Naafada ee Shaqo-qorista ........ 10
Qodobka 26aad ........ 11
Ka-qeyb-noqoshada Fursadaha Shaqo ........ 11
**CUTUBKA SHANAAD** ........ 11
**DARYEEL CAAFIMAAD IYO AWOOD-SIIN NAAFO** ........ 11
Qodobka 27aad ........ 11
Daryeel Caafimaad ........ 11
Qodobka 28aad ........ 12
Awood-siinta Iyo Tayeynta Naafada ........ 12
**CUTUBKA LIXAAD** ........ 13
**KA-QEYB-GALKA NAAFADA EE ARIMAHA BULSHADA, DHAQANKA, MADADAALADA IYO CIYAARAHA** ........ 13
Qodobka 29aad ........ 13
Ka-qeyb-galka Dhaqanka ........ 13
Qodobka 30aad ........ 13
Ka-qeyb-galka Hal-abuurka iyo Adeegyada Farshaxanka ........ 13
Qodobka 31aad ........ 13
Ka-qeyb-galka Ciyaaraha iyo Isboortiga ........ 13
**CUTUBKA TODDOBAAD** ........ 14
**DEMBIYADA IYO CIQAABTA** ........ 14
Qodobka 32aad ........ 14
Faquuqa Naafada ........ 14
Qodobka 33aad ........ 14
Falalka Reebban ........ 14
Qodobka 34aad ........ 15
Qarinta Qof Naafo ah ........ 15
Qodobka 35aad ........ 15



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

Taxadar-xumada Hawl-wadeennada Caafimaadka .......... 15
Qodobka 36aad .......... 15
Been-ka-sheegidda Xaaladda Naafanimada .......... 15
**CUTUBKA SIDEEDAAD** .......... 16
**QODOBO KAMA-DAMBEYS AH** .......... 16
Qodobka 37aad .......... 16
Fulinta Sharciga .......... 16
Qodobka 38aad .......... 16
Baabi'in .......... 16
Qodobka 39aad .......... 16
Dhaqan-gal Sharcigan .......... 16

# CUTUBKA KOWAAD
# QODOBO GUUD

## Qodobka 1aad
## Magaca sharciga

Sharcigaan waxaa lagu magacaabaa **"Sharciga Ilaalinta Xuquuqda Naafada Soomaaliyeed".**

## Qodobka 2aad
## Erey-bixin

**"Naafo"** waxaa loola jeedaa qof kasta oo awood la'aan ka ah xubin ama xubno ka-mid ah jirkiisa, saameynna ku yeeshay dhismaha xubnaha jirkiisa, awoodda jirkiisa iyo maskaxdiisa ama dareenkiisa.

**"Wasiir"** waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Qoyska iyo Horumarinta Xuquuqda Aadanaha.

**"Wasaaradda"** waxaa loola jeedaa Wasaaradda Qoyska iyo Horumarinta Xuquuqda Aadanaha.

**"Hay'ad"** waxaa loola jeedaa Hay'adda Naafada Qaranka Soomaaliyeed.

**Takoor/Faquuq** waxaa loola jeedaa kala sooc kasta oo ku saleysan ama sabab ay u tahay xaaladda naafanimo ee qofka la takoorayo ama la faquuqayo.

**"Dadka Qaba Baahiyada Gaarka Ah"** waxaa loola jeedaa dadka naafada ah.

**"Awood-siinta Naafada"** waxaa loola jeedaa adeeg lagu tayeynayo naafada looguna talo-galay dhisidda awoodda wax-ku-oolnimo ee qofka naafada ah.

**"JFS"** waxaa loola jeedaa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

## Qodobka 3aad
## Ujeeddada Sharciga

1. Ujeeddada sharciga waxaa ka mid ah:
   - b) Ilaalinta xuquuqda naafada;
   - t) Hirgelinta, dhawrista iyo ilaalinta xuquuqda gaarka ah ee naafada.
   - j) Daryeelka naafada iyo damaanad-qaadka hirgelinta xuquuqda ku xusan qodobbada $10^{aad}$, $11^{aad}$, $13^{aad}$ iyo $27^{aad}$ ee Dastuurka Ku-meel- gaarka ah ee JFS.

2. Si waafaqsan Axdiga Qaramada Midoobay ee Xuquuqda Dadka Naafada ah (CRPD), kuwa gobolka, borotokooladooda, Dastuurka Ku-meel-gaarka ah ee JFS iyo shuruucda dalka oo dhan, Sharciga Ilaalinta Xuquuqda Naafada Soomaaliyeed wuxuu damaanad-qaad siinayaa xaqiijinta:
   - b) Daryeelka iyo ilaalinta xuquuqda dadka qaba baahiyaha gaarka ah;
   - t) In dadka naafada ah ay ku noolaadaan nolol la mid ah tan dadka kale.
   - j) In loo diyaariyo qorsheyaal iyo miisaaniyad lagu hirgelinayo tas-hiilaadka adeegyada muhiimka u ah nolosha dadka baahiyaha gaarka ah qaba.
   - x) Ka-hortagga nooc kasta oo takoor ah oo lid ku ah naafada.

## Qodobka 4aad
## Baaxadda Sharciga

Sharciga Ilaalinta Xuquuqda Naafada Soomaaliyeed wuxuu saameynayaa naafada Soomaaliyeed iyo naafada shisheeyaha ah ee si sharci ah ku daggan gudaha dalka JFS.

# CUTUBKA LABAAD
# XUQUUQDA GAARKA AH EE DADKA NAAFADA AH

## Qodobka 5aad
## Xaqa Nolosha

Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay nolol sida ku cad Qodobka $13^{aad}$ ee Dastuurka KMG ah ee JFS, sidoo kale qofka naafada ah wuxuu xaq u leeyahay inuu u noolaado si la mid ah dadka aan Naafada ahayn, dawladda JFS waxay xaqiijinaysaa.

1. In naafadu ay helaan adeegyada asaasiga ah ee nolosha, gaar ahaan xubnaha u

baahan taageerada lagama-maarmaanka ah sida cunto, dhar iyo hoy ku habboon.

2. Dawladdu waxay u diyaarinaysaa dadka naafada ah hannaan horumarineed oo ay tababaro ugu fidinayso dadka naafada ah in ay maareyn karaan noloshooda, iyadoo siineysa la-talin iyo kaalmo.

3. Dawladdu waxay ka shaqeynaysaa shaqo u abuuridda naafada shaqeysan karta, naafada aan shaqeysan karina waxay u fidinaysaa kaalmo.

**Qodobka 6aad**
**Xaqa Sinaanta**

Qofka Naafada ah wuxuu xaq u leeyahay xaqa sinnaanta sida ku cad Qodobka 11 aad ee Dastuurka KMG ah ee JFS, inuu u isticmaalo si la mid ah dadka aan naafada ahayn.

**Qodobka 7aad**
**Xaqa Ka-qeyb-galka Siyaasadda iyo Maamulka**

1. Dadka Naafada ah qeybahooda kala duwan waxay xaq u leeyihiin, sida ku cad **Qodobka 22aad** ee Dastuurka KMG ah ee JFS, in ay si buuxda uga qeyb-geli karaan siyaasadda iyo muumulka hay'adaha dawladda iyadoo aan lagu takoorayn xaaladooda naafanimo ka-qeyb-galkaas.

2. Dawladda JFS waxay dhiirri-gelineysaa sida ay naafadu uga qeyb noqon lahayd xilalka siyaasadeed iyo kuwa maamul ee dawladda JFS, dawladaha xubnaha ka ah dawladda federaalka iyo Gobolka Benaadir.

3. Dawladda JFS waxay soo saaraysaa nidaam iyo habraac iyadoo u qoondaynaysa **5%** (boqolkiiba shan) oo ay ku jiraan haweenka naafada ah in ay xaq u leeyihiin dhammaan goleyaasha Dawladda Heer Federaal, Dawladaha xubnaha ka ah Dowlada Federaalka, Gobolka Benaadir, goleyaasha Dawladaha hoose, agaasimeyaasha wasaaradaha iyo guddiyada madaxa-bannaan.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

## Qodobka 8aad
## Xaqa Badbaadada iyo Nabad-gelinta Naafada

1. Dawladda JFS waxay damaanad qaad gaar ah iyo ilaalin buuxda siinaysaa xuquuqda nabad-gelyada qof-nimo sida ku cad qodobbada 13aad iyo 15[aad] ee Dastuurka KMG ah ee JFS, qof kasta oo naafo ah wuxuu xaq u leeyahay nabad-gelyada qof-nimadiisa iyo bed-qabka jirkiisa oo dhammeystiran.

2. Dawladdu waxay naafada ka ilaalinaysaa wax kasta oo naftooda u keeni kara halis iyo dhibaato.

## Qodobka 9aad
## Xaqa Daryeelka

1. Qofka naafada ah wuxuu xaq u leeyahay daryeel gaar ah inuu ka helo qoyskiisa, haddii aysan qoyskiisa kafaalo qaadi karin, dawladdu waxay u fidinaysaa daryeel buuxa oo u oggolaanaya inuu ka qeyb-galo hawlaha bulshada uu la nool yahay, sida fanka/suugaanta, ciyaaraha, siyaasadda, waxbarashada iyo dhaqaalaha.

2. Dawladdu waxay waajib gaar ah iska saaraysaa daryeelka carruurta, haweenka, naafada da'da ah ee aan ubadkoodu awoodin inay daryeelaan.

## Qodobka 10aad
## Xaqa Helidda Adeegyada Guud

1. Hay'adaha dawladda ee bixiya adeegyada guud waa in ay u diyaariyaan naafada siiyaanna adeegyada guud ee ay bixiyaan iyagoo tixgelinaya baahiyaha gaarka ah oo ay qabaan naafadu.

2. Dawladdu waxay sameynaysaa Sanduuqa Horumarinta Arrimaha Naafada. Sanduuqan waxa loo isticimaalayaa arrimaha ay ka mid yihiin:
   b) Waxbarashada;
   t) Caafimaadka;
   j) Kaabeyaasha dhaqaalaha; iyo
   x) Barnaamijyada horumarineed ee naafada.

3. Sanduuqa waxaa maamulaya Guddiga Sare ee Maamulka Hay'adda Naafada

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

Qaranka.

## Qodobka 11aad
## Canshuur-dhaaf

1. Dawladddu waxay canshuur-dhaaf u sameyneysaa agabyada iyo gaadiidka naafadu u isticmaalaan noloshooda nooc kasta oo ay yihiin.

2. Waxaa ka reebban oo aan canshuur-dhaaf lahayn haddii ay Hay'adda Naafada yeelato hawlo ganacsi oo ujeeddadoodu tahay faa'iido-doon, waxaa lagu dhaqi doonaa sharciga canshuuraha Dalka.

## Qodobka 12aad
## Xaqa Dacwadda

1. Dadka naafada ahi waxay xaq u leeyihiin in ay dacwad ka furtaan maxkamadda awoodda u leh.

2. Hannaanka dacwo-qaadista waa inuu noqdaa mid ku habboon naafada, garsooraha maxakamaddana waa inuu tix-geliyaa baahiyaha gaarka ah oo ay qabaan dadka naafada ah, fududeeyaana dhammaan wax kasta oo ay u baahdaan inta ay gudanayaan dacwadda uu qabo qofka naafada ah ama la soo eedeeyay, sida: in loo diyaariyo aaladaha akhriska, maqalka, turjumaan iyo in loo oggolaado xaaladda ay uga qeyb qaadan karaan.

3. Dawladdu waxay naafada u fidinaysaa difaac lacag la'aan ah, Hay'adda Naafada Qaranka ayayna waajib ku tahay in ay u qabato qareen.

4. Hay'adda Naafada Qaranku waxay khidmadda qareenka iyo kharashka maxkamadda ka bixineysaa khasnadda Hay'adda Qaranka.

5. Hay'addu haddii aysan u helayn dhaqaale, waxay ka dalbanaysaa Wasaaradda Qoyska iyo Xuquuqul Insaanka, wasaaradda haddii aysan awoodin waxay hordhigeysaa baahidooda Golaha Wasiirrada.

## CUTUBKA SADDEXAAD
## AWOODSIINTA NAAFADA ISTICMAAL DEEGAAN OO AAN CAQABAD LAHEYN IYO KA HORTAGA ISBADALKA CIMILADA

### Qodobka 13aad
### Dhismayaasha Danta Guud, Gaarka ah iyo Adeegyada Gaadiidka

1. Dhismayaasha danta guud iyo adeegyada gaadiidka oo ay ku jiraan wadooyinka, garoommada diyaaradaha, noocyada kala duwan ee gaadiidka, garoommada ciyaaraha, fagaareyaasha , dugsiyada , masaajidda iyo hoteellada, waa in loo diyaariyo qeybo ay naafadu isticmaali karaan caqabad la'aan iyo goobaha la midka ah ee bulshadu adeegsato.

2. Dawladdu waa in ay sharciyeysaa dhammaan adeegyada ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan, iyadoo kasoo saareysa Xeerar iyo hagayaal la raaco.

### Qodobka 14aad
### War-isku-tabinta Naafada

1. Naafada noocyadeed kala duwan gaar ahaan dadka maqalka la' iyo dadka aragga la' waxay xaq u leeyihiin helidda xogaha ku habboon baahiyahooda.

2. Fara-ku-hadalka dadka maqalka la', farta dadka aragga la' iyo qaababka kale ee war-isku- tabinta naafada, waa in lagu daraa hawlaha adeegyada dawladda iyo kuwo gaarka loo leeyahay sida warbaahinta iyo dukumintiyada in ay noqdaan kuwo ay naafadu isticmaali karaan isla markaasna fahmi karaan.

3. Dawladda Federaalka, Dawladaha Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka iyo Maamulka Gobolka Banaadir waa inay u diyaariyaan dhammaan dadka naafada ah, wax kastoo u fududaynaya fahamka iyo ka qeyb-qaadashada ololaha doorashooyinka iyo cod-bixinta.

4. War-bixinnada iyo isgaarsiinta oo ay ka mid yihiin adeegyada danabka ku shaqeeya (electronic), waa in ay noqdaan kuwa ay naafadu isticmaali karaan kana faa'iidaysan karaan, waana in loogu talo-galaa aaladaha electronikada u gaarka ah naafada, waxay canshuur-dhimis u sameyneysaa dawladda soo-dajinta aaladahaas.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

## Qodobka 15aad
## Wax-ka-beddelidda Manaahijta Waxbarashada

Dawladda federaalka waxay diyaarinaysaa  oo hirgalineysaa manaahij waxbarasho oo ku haboon dadka  naafada sida dugsiyo, aalado waxbarasho iyo maktabado caadi ah ama  kuwo electronik ah.

## Qodobka 16aad
## Xeerarka Hal-beegga Dhismooyinka Danta Guud

1. Wasaaradda hawlaha guud waa inay soo saartaa xeer iyo naqshad u noqoda hal-beeg la tixraaco, xeerkaas oo xaqiijinaya in dhismooyinka danta guud iyo dhismooyinka degaan ay noqdaan kuwo naafadu u isticmaali karaan si dhib la'aan ah.

2. Xeerka hal-beegga naqshadaha dhismooyinka waa inuu si isku mid ah u saameeyaa  dhismooyinka danta guud iyo kuwa gaarka ah.

## Qodobka 17aad
## Ka Hortagga iyo ka Jawaabidda Xaaladaha Degdagga ah ee ka Dhasha Isbaddelka Cimilada iyo Colaadaha Saameynta ay ku Leeyihiin Dadka Naafada ah.

Dowlada Federaalka iyo Dawladaha Xubnaha ka ah Dawlada Federaalka waa in ay ilaaliyaan, hubiyaanna saameynta xaaladaha degdagga iyo  isbaddelka cimilada ay ku yeelan karaan dadka naafada ah.

1. Dadka naafada ah waa in laga qeyb galiyaa barnaamijyada la xariira ka hortaga iyo ka jawaabidda isbadelka cimilada oo ay ku jiraan dhaqaalaha cagaaran.

2. Qeybaha kala duwan ee dadka naafada ah waa in lagu daro siyaasadaha iyo Qorshayaasha isbadelka cimilada ee loo siman yahay.

3. Istiraatiijiyadaha looga hor tagayo loogana jawaabi karo khataraha ka dhasha isbedelka cimilada waa in ay ku jiraan kaabayaasha danta guud oo ay isticmaali karaan dadka naafada ah, Dawlada Federaalka iyo Dawladaha Xubnaha ka ah



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

Dawlada Federaalka oo kaashanaya saaxiibada horumarinta waa in ay qorsheeyaan horumarinta kaabayaasha, goobo ammaan ah iyo bixinta agabka caawinta dadka naafada ah si ay ugu diyaar garoobaan xaaladaha degdagga ah.

4. Dadka naafada ah wa in ay helaan macluumaad, adeegyo iyo dhaqaale la xariira la qabsashada iyo yareynta qataraha isbadalka cimilada waana in la sameeyaa qaab isgaarsiineed oo dadka naafada looga digayo qataraha soo socda.

## CUTUBKA AFARAAD
## DIIWAANGELINTA, WAXBARASHADA, TABABARRADA IYO SHAQAALEYSIINTA NAAFADA

### Qodobka 18aad
### Diiwaangelinta Naafada

1. Muwaadin kasta oo Soomaaliyeed oo naafo ah waa inuu iska diiwaangeliyaa Hay'adda Naafada Qaranka Soomaaliyeed.
2. Ajaanibta shisheeye ee naafada ah dalkana ku dagan sifo sharci ah Hay'adda Naafada Qaranku waa inay diiwaangelisaa xogtooda.
3. Naafada diiwaangashan oo keliya ayaa ka faaidaysanaya adeegyada ay bixinayso dawladdu.
4. Sanad kasta Hay'adda Naafada Qaranku waxay soo bandhigaysaa warbixin sanadeed ku saabsan xaaladaha ay ku sugan yihiin Naafada Soomaaliyeed.

### Qodobka 19aad
### Waxbarasho Lacag La'aan ah

1. Dhammaan noocyadda naafada kala duwan waxaa Dawladdu ku waajib ah in ay u diyaariso waxbarasho kala gedisan iyo waxbarashada farsamada gacanta oo ku habboon baahidooda isla-markaana lacag la'aan ah.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

## Qodobka 20aad
## Ka-qebgal Waxbarasho Takoor La'aan ah

Dhammaan dugsiyada dalka waa in laga dhigaa qaar caruurta oo dhami ay wax ka baran karaan oo ay ku jiraan caruurta naafada ah iyadoo aan lagu takooreyn naafanimadooda.

## Qodobka 21aad
## Mudnaanta Fidinta Waxbarashada Naafada

Dawladdu waxay mudnaan siineysaa hurumarinta, baahinta iyo fidinta waxbarashada naafada, waxaana la dejinayaa siyaasad iyo barnaamij lagu hormarinayo laguna tayeynayo waxbarashada naafada.

1. Dawladda waxay mudnaan siineysaa fidinta waxbarashada naafada, waxaana kamid noqonaya; canshuur-dhaaf loo fidinayo dugsiyada gaarka loo leeyahay ee u habeysan waxbarashada naafada, qalabka waxbarasho, qalabka Jimicsiga iyo kuwa tababarrada naafada ay la soo degayaan.

2. Macalimiinta waxbaraya naafada waxaa loo sameynayaa canshuur dhimis mushaarkooda ah.

## Qodobka 22aad
## Hirgelinta Waxbarasho gaar ah iyo Agabkeedi

Dawladdu waxay xaqiijineysaa hirgelinta barnaamijyo waxbarasho gaar u ah dadka naafada ah qaybahooda kala duwan dadka maqalka la', dadka araga la', iyo dadka baahiyaha gaarka ah qaba sida ootiisamka barnaamijyadaas oo noqonaya kuwo ku habboon baahiyahooda gaarka ah, watana qalabkii loo adeegsan lahaa.

## Qodobka 23aad
## Hirgelinta Xarumo iyo Macaahid Gaar ah

Dawladdu waxay xaqiijinaysaa hirgelinta macaahid farsamo iyo xarumo cilmi-baaris oo u gaar ah naafada, hirgelinta howshaasna waxaa u xilsaaran Wasaarada Waxbarashada iyo Hay'adda Naafada Qaranka.

## Qodobka 24aad
## Tababarrada Naafada

Dawladdu waxay ka shaqeyneysaa kor-u-qaadidda xirfadda iyo garaadka naafada, iyadoo loo fidinayo tababrro gaar ah.

## Qodobka 25aad
## Takoorid La'aanta Naafada ee Shaqo-qorista

Naafadu waxay xaq u leeyihiin takoorid la'aan inay shaqada u tartamaan laguna shaqaaleeyo aqoontooda iyo xirfaddooda.

1. Waxaa reebban loo-shaqeeyaha inuu takooro naafada isla markaana shaqo ugu diidoxaaladdooda naafanimo awgeed.
2. Waxaa ka reebban loo-shaqeeyaha inuu naafada ku takooro iyadoo loo eegayo nooca iyo dabeecada shaqada.
   b) xayeysiinta shaqada;
   t) shaqaaleysiinta;
   j) musharaadka iyo gunnooyinka;
   x) tababarrada shaqaalaha iyo dallacsiintooda.
3. Loo-shaqeeyaha ku kaca fal kasta oo takoor ama faquuqid ah, wuxuu ku muteysanayaa ganaax lacageed oo dhan 1,600$ Doolarka Mareykanka ah ama Shilin Soomaali u dhiganta.
4. Naafada dacwadooda kowaad waxay u gudbisanayaan Hay'adda Naafada Qaranka, hay'adduna waxay u gudbineysaa xafiiska kormeeraha Shaqada iyo Shaqaalaha ee Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada sida ku cad Qodobbada 110 aad iyo 111aad, ee Xeerka Shaqada sidoo kale Qodobbada dacwadaha 143aad, 144 aad iyo 146 aad ee Xeerka shaqada.
5. Guddiga Xalinta Khilaafaadka ee Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada ee ku xusan qodobkan 134 aad ee Xeerka Shaqada ayaa go'aan ka gaaraya dacwadda.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

6. Loo-shaqeeyaha ku qanci waaya, waxaa u furan racfaan inuu u qaato maxkamadda awoodda u leh.

7. Hay'adda Naafada haddii ay ku qanci weydo go'aanka xubnaha kale aqlabiyadda ku gaareen, waxaa u furan sidoo kale inay rafcaan u qaadato Maxkamadda awoodda u leh.

### Qodobka 26aad
### Ka-qeyb-noqoshada Fursadaha Shaqo

1. Dhammaan shaqooyinka Dawladda Federaalka, Dawladaha Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka, Maamulka Gobolka Banaadir iyo Dawladaha Hoose, waxaa waajib ku ah inay u qoondeeyaan dadka naafada ah 5% (boqolkiiba Shan) nooc kasta oo shaqo ah.

2. Qoondadan boqolkiiba shanta ah (5%) waxay sidoo kale saamayneysaa shaqooyinka gaarka loo leeyahay, hay'adaha aan dawliga aheyn, shirkadaha iyo loo-shaqeeye kasta waxaa waajib ku ah dhammaan inay fuliyaan xeerkan, qoondadoodana siiyaan dadka naafada ah ka-qeyb-galka shaqooyinka ay bixinayaan.

3. Loo-shaqeeyaha waa inay goobahooda shaqo u diyaariyaan qaab iyo hannaan naafadu ku gudan karaan shaqadooda.

4. Waxaa waajib ku ah loo-shaqeeyaha inuu diyaariyo agab naafadu ku isticmaali karaan gudashada waajibaadkooda shaqo.

## CUTUBKA SHANAAD
## DARYEEL CAAFIMAAD IYO AWOOD-SIIN NAAFO

### Qodobka 27aad
### Daryeel Caafimaad

Hay'adda Naafada Qaranka iyo Wasaaradda Caafimaadka, waa inay diyaariyaan hirgeliyaana barnaamijyo caafimaad oo lagu xaqiijinayo daryeelka caafimaadka naafada sida arimaha hoos ku qoran:

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

1. Diiwaan-gelinta nooca naafanimada iyo sababta keentay.
2. Ka-hortagga wax kasta oo keeni kara naafanimo.
3. Hor-u-garashada naafanimada caruurta yar yar iyo dadka da'da ah.
4. Gargaar iyo daaweyn deg-deg ah ee qofka naafada ah.
5. U fidinta dadka Naafada ah adeeg caafimaad oo lacag la'aan ah.
6. Daawaynta iyo ciribtirka cudurada iyo waxyaabaha sababa naafanimada.

## Qodobka 28aad
## Awood-siinta Iyo Tayeynta Naafada

Dawladdu waxay diyaarineysaa siyaasad dhammeystiran oo la xiriirta awood-siinta, baxnaanada iyo tayeynta dadka naafada ah iyadoo la sameynayo hab adeeg-bixineed oo ku wajahan baahiyaha dadka naafada ah:

1. Dhammaan hawl kasta oo khusaysa arrimaha dadka naafada ah, waa in lagala tashado Hayadda Naafada Qaranka heerarka diyaarinta, qorsheynta iyo fulinta intaba.
2. Xoojinta iyo kobcinta adeegyada ay bixiyaan xarumaha baxnaanada iyo tayeynta.
3. Diyaarinta iyo dhiirri-gelinta tababarrada shaqaale takhasus u leh ee ka-shaqeynta adeegyada xarumaha baxnaanada iyo tayeynta.
4. Xaqiijinta qoondo lacageed ee ay dawladdu ku muujineyso Miisaaniyadda Qaranka ee loogu adeegayo xarumaha baxnaanada iyo tayeynta.
5. Dhiirri-gelinta iyo sameynta adeegyo baxnaano iyo tayeyn oo lagu daryeelayo dadka naafada ah iyadoo loo hawl-galayo adeeggaas in la gaarsiiyo meelaha miyiga ah.
6. Dawladdu waa inay u xaqiijiso dadka naafada ah inay heli karaan qalabka caawinaya xubnaha naafada ah kuwa socodka, maqalka, aragga, iwm, oo lacag la'aan ah.
7. Dawladdu waa inay u xaqiijiso dadka nafaada ah iyo qoysaskooda inay ka qayb-geli karaan marka la qorsheynayo adeegyadan awood-siineed, iyo sida ay u

qaabaysan yihiin adeegyadaas.

8. In la kordhiyo wacyi-gelinta iyo fahamka bulshada ee ku saabsan baahida loo qabo qalabka socodka iyo dhaqdhaqaaqa caawiya iyo adeegyada jirdhis (physiotherapy).

## CUTUBKA LIXAAD
## KA-QEYB-GALKA NAAFADA EE ARIMAHA BULSHADA, DHAQANKA, MADADAALADA IYO CIYAARAHA

### Qodobka 29aad
### Ka-qeyb-galka Dhaqanka

Dawladdu waxay xaqiijinaysaa xaqa dadka naafada ah u leeyihiin ka qeyb-galka dhaqanka si lamid ah dadka aan naafada aheyn.

1. In dadka naafada ah si sahlan u helaan qalab iyo agab ay uga qeyb-geli karaan dhaqanka iyo ciyaaraha.
2. In naafadu si ku habboon u heli karaan barnaamijyada telefishinka, filimada, bandhigyada riwaayadaha iyo noocyada kale ee dhaqanka la xiriira.
3. In ay u geli karaan caqabad la'aan goobaha bandhigyada iyo adeegyada dhaqanka sida goobaha riwaayadaha, maktabadaha, matxafyada iyo goobaha muhumidda taariikheed leh.

### Qodobka 30aad
### Ka-qeyb-galka Hal-abuurka iyo Adeegyada Farshaxanka

Dawladdu waxay qaadeysaa talaabooyin ku habboon, si loogu sahlo xubnaha Naafada ah ka qeyb-galka hal-abuurka, farshaxanka iyo soo bandhigida awoodda maskaxeed ee ku jirto xubnaha naafada ah.

### Qodobka 31aad
### Ka-qeyb-galka Ciyaaraha iyo Isboortiga

Wasaaradda Dhalinyarada iyo Isboortiga ee JFS iyo Guddiga Olimbikada waxay qaadayaan tallaabooyin lagu suurta-gelinayo in xubnaha naafada ay ka-qeyg-galaan



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

ciyaaraha iyo isboortiga, si la siman dadka kale gudaha iyo dibedda.

1. Dhiirri-gelinta xubnaha naafada ah inay si buuxda uga qeyb-galaan dhammaan heer kastoo ciyaaraha iyo isboortiga.
2. Xaqiijinta dadka naafada ah inay helaan fursad ay isku abaabulaan, kuna horumariyaan, ka-qeyb-galka ciyaaraha.
3. Xaqiijinta in xubnaha naafada ah ay si sahlan oo caqabd la'aan ah u gali karaan garoomada ciyaaraha.
4. Xaqiijinta in fursad loo siiyo caruurta naafada ah ka-qeyb-galka ciyaaraha si la siman caruurta kale.
5. Goobo sporti oo gaar u ah iyo qalab.

## CUTUBKA TODDOBAAD
## DEMBIYADA IYO CIQAABTA

### Qodobka 32aad
### Faquuqa Naafada

1. Faquuq kasta oo sababtiisu tahay xaaladda naafanimo ee uu ku sugan yahay qofka la fuquuqayo waa fal-dembiyeed, qofka falkaas sameeya wuxuu muteysanayaa ganaax lacageed oo uu xadidayo Garsooraha ikhtisaaska u lihi, haddii uusan jirin Qoddob sharci oo si cad u qeexaya.
2. Qof kastoo ku kaca fal faquuqid ah, haddii falkaas ay ka dhalato khasaare jireed, maskaxeed ama dhaqaale, wuxuu muteysanayaa ciqaab u dhiganta dhibka uu geystay.

### Qodobka 33aad
### Falalka Reebban

1. Waxaa reebban in qofka naafada ah lagu takooro xaaladdiisa naafanimo awgeed, kuna waayo xuquuqdiisa dastuuriga ah.
2. Waxaa reebban in qofka naafada ah lagu sameeyo arrimahan:

   b) In si khaldan looga faa'iideysto iyadoo lagu shaqeysanayo hab addoonsi, hab isticmaalid sida ka ku cad qodobada $455^{aad}$ iyo $459^{aad}$ ee Xeerka

Ciqaabta Soomaaliyeed (XCS) ama taageerada loo fidiyo xubnaha naafada ah si kale looga faa'iideysto;

t) Dadka naafada ah in xoog loogu shaqeysto waa fal-demabiyeed waxaana lagu muteysanayaa ciqaabta ku cad Qodobbada 464aad iyo 465aad ee XCS;

j) In la yaso ama erayo liiditaan ah lagu dhaho qofka naafada ah ama sharafkiisa wax loo dhimo;

x) In qofka naafada ah maqaamkiisa hoos loo dhigo xilliga shaqada/mushaarka iyo xuquuqda kale ama xiligga ka-qeyb-galka arrimaha bulshada, dhaqanka, suugaanta iyo ciyaaraha kala gedisan.

**Qodobka 34aad**
**Qarinta Qof Naafo ah**

Qof kasta oo ah waalidka ama mas'uulka qof naafo ah waa in uu kasoo diiwaan galiyaa Hay'adda Naafada Qaranka Soomaaliyeed, haddii aysan jirin duruufo maangal ah oo ka hor istaagaya, waana fal-dambiyeed haddii ay ku caddaato waalidka ama mas'uulka qarinta qof naafa ah, wuxuuna mutaysanayaa Ganaax maaliyadeed oo ay go'aaminayso Maxkamadda ikhtisaaska uleh.

**Qodobka 35aad**
**Taxadar-xumada Hawl-wadeennada Caafimaadka**

1. Hawl-wadeen kasta ee caafimaad oo si taxadar-xumi ah ugu sabab noqdo qof uu daaweynayay naafanimo laga baaqsan karay, wuxuu muteysanayaa ganaax waafaqsan Sharciga Mihnadlayaasha Caafimaadka Qaranka iyo Shuruucda kale ee Dalka.
2. Hawl-wadeenka caafimaad ee ku xusan faqrada 1aad ee qodobkan, wuxuu bixinayaa magdhaw u dhigma dhibka uu u geystay bukaanka uu naafeeyay.

**Qodobka 36aad**
**Been-ka-sheegidda Xaaladda Naafanimada**

Qof kasta oo sheegta inuu yahay naafo asagoo aan aheyn, si uu u helo adeegyada gaarka ah ee dadka naafada loo fidinayo, wuxuu ku muteysanayaaa ganaax lacageed oo dhan $1,600 (kun iyo lix boqol) Doolarka Mareykanka ama Shilin Soomaali u

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

dhiganta.

## CUTUBKA SIDEEDAAD
## QODOBO KAMA-DAMBEYS AH

### Qodobka 37aad
### Fulinta Sharciga

Sharciga Ilaalinta Xuquuqada Naafada Soomaaliyeed waxaa fulintiisa mas'uul ka ah Hay'adda Naafada Qaranka iyo Hay'adaha kale ee Dawladda.

### Qodobka 38aad
### Baabi'in

Sharcigan wuxuu baabi'inayaa sharci kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin.

### Qodobka 39aad
### Dhaqan-gal Sharcigan

Sharcigani wuxuu dhaqan-gelayaa marka uu ansixiyo Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, uuna saxiixo Madaxweynaha JFS, laguna soo-saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**SHARCI LR.30** **TAARIIKH: 04-TA DISEEMBAR 2024**

**SHARCIGA TACLIINTA SARE**

**MADAXWEYNAHA J.F.S,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG.

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 82aad, Faqradda 3aad ee Dastuurka KMG.

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG.

**MARKUU ARKAY:** Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee summaddeedu tahay **XGGSH/646/B11/24**, ku taariikheysan **04/12/2024**, ujeeddaduna tahay Soo Gudbin Ansixinta ''Hindisaha Sharciyeedka Tacliinta Sare.

FR

**MARKUU TIXGELIYAY:** Baahida loo qabo in la meel mariyo sharcigan.

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxaa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga Tacliinta Sare.

**Qodobka 2aad**

Marka uu Madaxweynaha J.F.S. saxiixo Sharcigan, waxa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-020-2025
TAARIIKH: 10-04-2025
SAXIIX
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud ee JFS

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
29 MAR 2025
BY: Faduma Mohamed Omar Sanhi
SAACAD SAXIIX

**Madaxweynaha J. F.S.**

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

## JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

# HINDISE-SHARCIYEEDKA TACLIINTA SARE

Tusmo;

Cutubka 1aad....1
Qodobada Hordhaca ah....1
Qodobka 1aad....1
Magaca iyo Ujeeddada Sharciga....1
Qodobka 2aad....1
Qeexitaanno....1
Qodobka 3aad....3
Mabaadii'da Asaasiga ah ee Sharciga....3
Qodobka 4aad....3
Qodobka 5aad....4
Qodobka 6aad....5
Waajibaadka Hay'ad Tacliin Sare....5
Qodobka 7aad....5
Hawlaha Agaasinka Tacliinta Sare....5
Qodobka 8aad....6
Qaybaha Hay'adaha Tacliinta Sare....6
Cutubka 2aad....6
Dhismaha Guddiga Qaran ee Tacliinta Sare....6
Qodobka 9aad....6
Dhismaha Guddiga....6
Qodobka 10aad....7
Cidda uu Hoos tagayo Guddiga....7
Qodobka 11aad....7
Qaab-dhismeedka iyo Dastuurka Guddiga....7
Qodobka 12aad Shuruudaha Xubinimada Guddiga....7
Qodobka 13aad....8
Mushaaraadka iyo Gunnooyinka Guddiga....8
Qodobka 14aad....8
Xil-waayidda Xubnaha Guddiga iyo Buuxinta Jagada Bannaanaata....8
Qodobka 15aad....8
Xog-hayaha Guddiga....8
Qodobka 16aad....9
Shuruudaha Xog-hayaha Guddiga....9

Qodobka 17aad....................9
Saraakiisha Maamulka iyo Shaqaalaha Guddiga....................9
Qodobka 18aad....................9
Kulamada Guddiga....................9
Qodobka 19aad....................10
Shaqada iyo Awoodaha Guddiga....................10
Qodobka 20aad....................12
Awoodda Xeer Samaynta....................12
Qodobka 21aad Warbixin Sanadeedka Guddiga....................12
Qodobka 22aad....................12
Miisaaniyadda iyo Maaliyadda Guddiga....................12
Cutubka 3aad....................13
Aasaasidda iyo Aqoonsiga Hay'adaha Tacliinta Sare....................13
Qodobka 23aad....................13
Asaasidda Jaamacadaha....................13
Qodobka 24aad....................14
Diiwaan-gelinta iyo Aqoonsiga Ku Meel Gaarka ah....................14
Qodobka 25aad....................14
Saameeynta Aqoonsiga Ku Meel Gaarka ah....................14
Qodobka 26aad....................14
Mudada Jiritaanka Aqoonsiga Ku Meel Gaarka ah....................14
Qodobka 27aad....................15
Kala Noqoshada Aqoonsiga Ku Meel Gaarka ah....................15
Qodobka 28aad....................15
Bixinta iyo Diidmada Shahaadada Aqoonsiga ee Rasmiga ah....................15
Qodobka 29aad....................16
Faafinta Shahaadada Aqoonsiga....................16
Qodobka 30aad....................16
Wax ka Bedelka iyo Kala Noqoshada Shahaadada Aqoonsiga Rasmiga ah....................16
Qodobka 31aad....................17
Dhismaha Hay'ado Tacliin Sare oo Bixiya Barnaamijyo Gaar ah....................17
Qodobka 32aad....................17
Hay'adaha Tacliinta Sare ee aan Ahayn Jaamacadaha....................17
Qodobka 33aad....................17
Ogeysiiska Hay'ad Waxbarasho in ay TahayHay'ad Tacliin Sare ee Dowladeed....................17

Qodobka 34aad ... 18
Isku Biiritaanka Hay'ado Tacliin Sare ee Dowladeed ... 18
Qodobka 35aad ... 18
Jaamacadaha Dowlad Goboleedyada ... 18
Qodobka 36aad ... 19
Aqoonsiga Jaamacadaha Shisheeye ... 19
Qodobka 37aad ... 19
Isticmaalka Magac Jaamacadeed Ogolaasho La'aan ... 19
Cutubka 4aad ... 20
Habka Maamulka Hay'adaha Tacliinta Sare ... 20
Qodobka 38aad ... 20
Hay'adaha Tacliinta Sare ee Dowladda ... 20
Qodobka 39aad ... 20
Hay'adaha Tacliinta Sare ee Gaarka Ah ... 20
Qodobka 40aad ... 20
Xafiisyada Muhiimka Ah ee Hay'ad Tacliinta Sare ... 20
Qodobka 41aad ... 21
Goleyaasha iyo Guddiyada Hay'ad Tacliin Sare ... 21
Qodobka 42aad ... 22
Kulamada Hay'ad Tacliin Sare ... 22
Qodobka 43aad ... 22
Xeer-nidaamiyayaasha Hay'adaha Tacliinta Sare ... 22
Qodobka 44aad ... 22
Tallaabooyinka Anshax Marinta ... 22
Qodobka 45aad ... 23
Iska Diiwaangelinta Hay'ad Tacliin Sare ... 23
Cutubka 5aad ... 23
Maaliyadda Guud ee Jaamacadaha ... 23
Qodobka 46aad ... 23
Dakhliga Jaamacadaha Dowladda ... 23
Qodobka 47aad ... 23
Hanti Kasbasho ... 23
Qodobka 48aad ... 23
Maalgelinta Dakhliga ... 23
Qodobka 49aad ... 24

Xisaabaadka iyo Hanti Dhowrka ........ 24
Qodobka 50aad ........ 24
Sanad Maaliyadeedka ........ 24
Qodobka 51aad ........ 24
Maamulka Maaliyadda Jaamacadaha Gaarka ah ........ 24
Qodobka 52aad ........ 25
Maalgelinta Dakhliga Jaamacadaha Gaarka ah ........ 25
Cutubka 6aad ........ 25
Burinta iyo Maaraynta Arrimaha Kala Guurka ........ 25
Qodobka 53aad ........ 25
Aqoonsiyadi Ku Meel Gaarka ah ee Horay Loo Bixiyay ........ 25
Qodobka 54aad ........ 25
Burin ........ 25
Cutubka 7aad ........ 26
Qodobada Kama Dambaysta Ah ........ 26
Qodobka 55aad ........ 26
Magac Ka Beddelidda Hay'ad Tacliin Sare ........ 26
Qodobka 56aad ........ 26
Dambiyada Lagu Galo Sharcigaan ........ 26
Qodobka 57aad ........ 26
Iska Hor Imaadka Sharcigan iyo Sharciyada Kale ........ 26
Qodobka 58aad ........ 26
Xeer Nidaamiyayaasha ........ 26
Qodobka 59aad ........ 27
Dhaqan-galka Sharciga ........ 27

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

## Cutubka 1aad
## Qodobada Hordhaca ah

### Qodobka 1aad
### Magaca iyo Ujeeddada Sharciga

1. Sharcigan waxaa lagu magacaabayaa "Sharciga Tacliinta Sare ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed".

2. Ujeeddada Sharcigan waa hagidda, nidaamintа, horumarinta iyo tayaynta tacliinta sare ee dalkaqeybaheeda kala duwan tan dowladda iyo midda gaarka ah.

### Qodobka 2aad
### Qeexitaanno

Haddii aan si kale loo qeexin erayada hoos ku xusan waxa lagu macnayn doonaa sida soo socota,markii Sharcigan la joogo:

1. **"Dowlad"** waxaa loola jeedaa Dowladda Federaalka Soomaaliya.

2. **"Dowlad Goboleed"** waxaa loola jeedaa dawladaha xubnaha ka ah dawladda federaalka.

3. "**Wasiir**" waxaa loola jeedaa Wasiirka ku shaqada leh howlaha tacliinta sare ee heer qaran.

4. "**Wasaarad**" waxaa loola jeedaa Wasaaradda ku howlahan maareynta howlaha tacliinta sare eedalka.

5. "**Agaasinka**" waxaa loola jeedaa Agaasinka Tacliinta Sare u qaabilsan Wasaaradda u xilsaaranarrimaha tacliinta sare.

6. "**Anshax-marin**" waxaa loola jeedaa anshax marinta lagu sameeyo qof ama koox ka mid ah shaqaalaha ama ardayda hay'ad tacliin sare, kuwaas oo baal maray ku dhaqanka Sharcigan iyo xeerarka kale ee waafaqsan.

7. "**Aqoonsi Barnaamij**" waxaa loola jeedaa habka ay Guddigu ugu aqoonsadaan barmnaamijyadawaxbarasho ee hay'ad tacliin sare si waafaqsan Sharciga iyo xeer-nidaamiyayaashiisa.

8. "**Aqoonsi**" waxaa loola jeedaa habka rasmiga ah ee ay Guddigu ugu aqoonsadaan

hay'ad waxbarasho in ay tahay hay'ad tacliin sare sida ku xusan Cutubka 4-aad ee Sharcigan.

9. "**Arday**" waxaa loola jeedaa qof ka diiwaan-gashan jaamacad ama hay'ad kale oo bixisa tacliin sare.

10. "**Diiwaangelin**" waxaa loola jeedaa aqbalaadda codsiyada asaasidda hay'adaha tacliinta sare, iyada oo lagu salaynayo shuruudaha ku xusan qodobada Sharcigan iyo xeer-nidaamiyayaasha ka faracamaya.

11. "**Golaha Maamulka Sare**" waxaa loola jeedaa gole sare oo ay leedahay hay'ad tacliin sare ee dowladeed ama mid gaar loo leeyahay oo iska leh go'aamada kama dambaysta ah ee hay'adda arrimaheeda masiiriga ah la xiriira.

12. "**Guddi**" waxaa loo jeedaa Guddiga Qaran ee Tacliinta Sare ee lagu dhisay si waafaqsan Qodobka 9-aad ee sharcigan.

13. "**Guddoomiye**" waxaa loola jeedaa guddoomiyaha Guddiga ee ku xusan Qodobka 11aad ee Sharcigan.

14. "**Hay'ad Tacliin Sare**" waxaa loola jeedaa hay'ad loogu talo galay in ay bixiso waxbarasho heer jaamacadeed, cilmi baaris iyo hal abuur ama mid u dhiganta, waxabarashadaas oo ka sarreysa midda lagu qaato dugsiyada sare.

15. "**Jaamacad Dowaladeed**" waxaa loola jeedaa jaamacad leh Miisaaniyad Baarlamaan ansixiyey, laguna dhisay hantida Qaranka iyo deeqaha dowladda loo fidiyo; maamulkeeduna uu ku jiro gacanta Dowladda.

16. "**Jaamacad Gaar ah**" waxaa loola jeedaa jaamacad kasta oo aan lagu dhisin laguna kharash- garayn hantida dowladda.

17. "**Jaamacad Shisheeye**" waxaa loola jeedaa jaamacad si Sharci ah uga dhisan dalka dibadiisa, oo fasax loo siiyay in ay waxbarasho jamacadeed ka bixiso Soomaaliya.

18. "**Jaamacad**" waxaa loola jeedaa Hay'ad Tacliin Sare bixisa takhasusyo kala duwan, oo kudhisan si waafaqsan qodobada Sharcigan.

19. "**Machad (Kolleej) Sare**" waxaa loola jeedaa hay'ad bixisa tacliin sare oo u gaar ah qeybo ka mid ah qaybaha cilmiga, laguna qaato shahaadada darajada kowaad

(Bachelor) oo u dhiganta midjaamacadeed iyo wixii ka sareeya.

20. "**Machad (Kolleej)**" waxaa loola jeedaa hay'ad bixisa tacliin sare oo aan gaarsiisneen heerka kowaad (Degree) jaamacadeed kuna eg oo kaliya muddo labo sano (Diploma) ah.

21. "**Shahaado**" waxaa loola jeedaa marqaatikaca la guddoonsiiyo qof dhamaystay waxbarasho jaamacadeed, ama aqoon xirfadeed oo wadata magaca jaamacad ama hay'ad kale ee tacliin sare oo la aqoonsan yahay, loona ogolaaday in ay bixiso barnaamijyo waxbarasho iyo shahaadooyin.

22. "**Xeer hoosaad**" waxaa loola jeedaa xeer jaamacadeed oo ay soo saareen Golaha Maamulka Jaamacadda.

23. "**Xog-hayaha**" waxaa loola jeedaa xoghayaha Guddiga, ahna Agaasimaha Maamulka ee Guddiga, ee lagu magacaabay si waafaqsan Qodobka 15aad ee Sharcigan.

## Qodobka 3aad
## Mabaadii'da Asaasiga ah ee Sharciga

1. Si waafaqsan qodobka 3aad ee Dastuurka JFS mabaadii'da asaasiga ah ee Sharcigan saldhigau ah waa Shareecada Islaamka, iyo mabaadii'da caddaaladda bulshada.

2. Si la mid ah farqadda kore sharcigan iyo xeer-nidaamiyayaashiisa waxaa saldhig u ah hubinta tayada tacliinta sare, xorriyada waxbarashada, madaxbannaanida hay'adaha tacliinta sare, ilaalinta xuquuqda ardayda iyo u sinnaanta tacliinta.

## Qodobka 4aad
## Hogaaminta Siyaasadda Qaran ee Tacliinta Sare

1. Iyada oo aan waxba loo dhimeynin Sharcigan, Wasiirku waa in uu hogaamiyaa siyaasadda qaran ee tacliinta sare marka uu wadatashiyo la sameeyo wasaaradaha waxbarashada dowlad goboleedyada iyo Guddiga Qaran ee Tacliinta Sare.

2. Wasiirku waa in uu:
(b) Horgeeyaa siyaasadda qaran ee tacliinta sare Golaha Wasiirada;
(t) Siyaasadda qaran ee tacliinta sare ku soo saaraa Faafinta Rasmiga ah;
(j) Korjoogtayn, kormeer iyo hubin joogta ah ku sameeyaa fulinteeda.

## Qodobka 5aad
## Ujeeddada Waxbarashada Tacliinta Sare

Ujeeddada waxbarashada tacliinta sare waa:

1. Sare u qaadista aqoonta iyada oo la adeegsanayo wax dhigista iyo cilmi baarista;

2. Sare u qaadista waxbarashada ardayda iyo guud ahaan bulshada;

3. Hormarinta dhaqanka, dhaqaalaha iyo nolosha bulshada;

4. Tageeridda iyo ka qayb qaadashada xaqiijinta qorshayaasha qaran ee la xariira dhaqaalaha iyohormarinta arrimaha bulshada;

5. Hormarinta halbeegyada iyo tayaynta wax dhigista iyo cilmi-baarista;

6. Waxbaridda, tababaridda iyo dib u tababaridda dadka leh xirfadaha aadka u sarreeya,farsamada iyo maamulka;

7. Baahinta natiijada cilmi baarisyada ay sameeyaan jaamacadaha si ay bulshadu uga faa'iideysato;

8. Fududeynta iyo joogtaynta waxbarashada iyada oo la hor marinayo waxbarashada dadka waaween iyo waxbarashada joogtada ah;

9. Xoojinta awoodda fikirka wax naqdinta madax-bannaan ee aradayda dhigata hay'adaha tacliinta sare;

10. Sare u qaadista abuurista fursado loo simanayahay oo la siiyo ardayda iyo shaqaalahahay'adaha tacliinta sare;

11. Sare u qaadista iyo abuurista deegaan ay dadka baahiyaha gaarka ah qaba kula siman yihiin dadka kale.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

## Qodobka 6aad
## Waajibaadka Hay'ad Tacliin Sare

Marka ay gudanayso waajibaadkeeda hay'ad tacliin sare oo isticmaalaysa awoodaheeda sida ku xusan sharcigan waa in ay raacdaa ilaalisaana mabaadii'da aas-aasiga ah ee lagu sheegay qodobka 3aad ee Dastuurka waana in iyada oo tix raacaysaa arrintaas:

1. Xoojisaa ku dhaqanka iyo ilaalinta akhlaaqda suuban ee ay farayaan qur'aanka iyo sunnada;
2. Sare u qaaddaa tayada iyo isu dheelitirnaanta barnaamijyadeeda waxbarasho;
3. Sare u qaaddaa u sinnaanta helidda adeegyadeeda;
4. Xoojisaa habka nidaamka maamul ee loo dhanyahay, tayaysan oo daah furnaan leh aynajoogtaysaa aaminaadda dadwaynaha;
5. dhistaa habdhaqan maamul oo ku dhisan nidaamka hubinta iyo is-dheelitirka;
6. Xoojisaa, hormarisaana nidaamka wax wadaagga waxbarashada jaamacadeed ee labada qeybood dowladda iyo kan gaarka ah;
7. Lagu dhisaa hay'adda habdhaqan ku asteysan sinaan iyo caddaalad.
8. Diyaarisaa dhammaan agab iyo kaadir shaqaale oo bixin kara adeeg waxbarasho oo tayo leh.

## Qodobka 7aad
## Hawlaha Agaasinka Tacliinta Sare

1. Agaasinku waxa uu qabanayaa hawlaha soo socda:

   b. Fulinta siyaasadaha iyo istaraatijiyadaha tacliinta sare ee qaranka, iyo soo saaritaanka hagitaannada la xiriira guud ahaan arrimaha tacliinta sare iyada oo kaashanaysa Guddiga iyo wasaaradaha iyo waaxyaha u qaabilsan waxbarashada gobolada;

   t. Hubinta hirgelinta siyaasadaha qaran ee hay'adaha tacliinta sare.

   j. Isku dubaridka yoolka Hay'adaha Tacliinta Sare iyo Himilooyinka Qorshaha Isbeddelka Qaran.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

x. Isku xirka Hay'adaha kala duwan ee Dowladda ee xiriirka la yeelan kara Hay'adaha Waxbarashada Sare si loo helo wadashaqeyn miro dhal ah.

kh. Iyada oo aan waxba loo dhimayn madaxbannaanida Guddiga, waxa uu agaasinku qabanayaa hawlaha korjoogtaynta iyo la socodka hannaanka maamulka deeqaha waxbarashada ee ka imaanaya dalka dibaddiisa.

d. Qoondeynta miisaaniyadda jaamacadaha dowladda iyo mashaariicda cilmi baarista iyada oo lagu salaynayo baahida qaranka.

### Qodobka 8aad
### Qaybaha Hay'adaha Tacliinta Sare

1. Hay'adaha tacliinta sare waxa ay u qeybsamaan, marki la joogo Sharcigan, sida soo socota:
   (b) Jaamacad;
   (t) Mac-had (College) Sare iyo;
   (j) Mac-had (College).

2. Dhammaan Hay'adaha Tacliinta Sare waxaa lagu dhisayaa si waafaqsan Qodobada Sharcigan.

## Cutubka 2aad
## Dhismaha Guddiga Qaran ee Tacliinta Sare

### Qodobka 9aad
### Dhismaha Guddiga

1. Isla marka uu sharcigaan ku soo baxo Faafinta Rasmiga ah, waa in la dhisaa guddi lagumagacaabo Guddiga Qaran ee Tacliinta Sare.

2. Guddigu waxa uu yeelanayaa shakhsiyad qaanuuneed oo, si waafqsan Sharcigan, uu ku yeelan karo, ku haysan karo, kuna tasarufi karo hanti, guurto iyo maguurto, ku geli karo heshiisyo sidookalana magaciisa uu ku dacwoon karo, laguna dacwayn karo.

3. Xarunta dhexe ee Guddiga waa in ay noqotaa Caasimadda Dalka, waxa uuna faracyo ka samaysanayaa Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

## Qodobka 10aad
## Cidda uu Hoos tagayo Guddiga

Guddigu waxa uu Siyaasad ahaan hoostagayaa Wasiirka ku howlan maareynta iyo maamulka howlaha tacliinta sare, isaga ayaana korjoogteynaya arrimaha Guddiga.

## Qodobka 11aad
## Qaab-dhismeedka iyo Dastuurka Guddiga

1. Guddigu waxa uu ka koobanaanayaa 15 xubnood oo boqolkiiba soddon (30%) ay yihiin haween, oo kala ah:
   (b) Guddoomiye;
   (t) Guddoomiye ku xigeen;
   (j) Saddex iyo toban xubnood;

2. Guddigu waxa uu yeelanayaa Agaasime Guud oo qaabilsan maamulka howlaha Guddiga, noqonayana xoghayaha Guddiga.

3. Guddigu waxa uu yeelan karaa guddi hoosaadyo hadba intii loo baahdo.

4. Xubnaha Guddiga waxa ay xafiiska hayn karaan muddo shan sano ah oo loo cusbooneysiin karo hal mar oo qura.

## Qodobka 12aad
## Shuruudaha Xubinimada Guddiga

1. Shuruudaha xubinimada Guddiga waa:
   (b)In uu Soomaali yahay/tahay;
   (t) In uu haysto/haysato shahaadada darajada seddaxaad (Doctrates) ee jaamacad la aqoonsanyahay;
   (j) In uu leeyahay/leedahay ugu yaraan khibrad toban (10) sano oo ah hormarinta tacliinta sare, cilmibaarista ama maamulka iyo hoggaaminta.
   (x) In uu noqdaa/noqotaa qof ku sifoobay karti, akhlaaq iyo dhaqan suuban, daacadnimo, daahfurnaan iyo u adeegidda danta guud ee bulshada.

2. Waa in xubnaha Guddiga ay yeeshaan muuqaal qaran, isku dheellitirnaan xaga aqoonta, xirfadaha, deegannada, lab iyo dheddig.

3. Xubnaha Guddiga waxa ay ku imaanayaan si daah furan, iyada oo Guddi talo

bixin oo Wasiirku magacaabay ay ka soo xulayaan dadka soo xareystay codsiyada xubinimada Guddiga.

4. 15ka xubnood ah ee soo buuxiyay shuruudaha ku xusan faqradda 1aad iyo 2aad ee Qodobkan ayna u soo gudbinayaan Wasiirka, Wasiirkuna uu horgeeyo Golaha Wasiirada.
5. Golaha Wasiirada ayaa ansixinaya xubnaha Guddiga, waxaana Dekreeto ku soo saaraya Ra'iisul Wasaaraha JFS.

### Qodobka 13aad
### Mushaaraadka iyo Gunnooyinka Guddiga

Dhammaan xubnaha Guddiga waxa ay yeelanayaan mushaar joogto ah, gunno iyo xuquuqahakale ee loogu cayimo sharci gaar ah ama mid guud.

### Qodobka 14aad
### Xil-waayidda Xubnaha Guddiga iyo Buuxinta Jagada Bannaanaata

1. Xubnaha Guddigu waxa ay xubnimadooda ku waayi karaan:
   (b) Is casilaad qoraal ah oo uu aqbalo Wasiirka;
   (t) Xil gudasho la'aan ka dhalatay dhibaato jireed ama maskaxeed oo daba dheeraatay oodhaqtar soo caddeeyey.
   (j) Lagu helo fal anshax xumo oo liddi ku ah shaqadiisa
   (x) Lagu helo fal dambiyeed, oo ay maxkamad awood u leh xukuntay.
   (kh) Ka maqnaasho saddex kulan oo isku xiga shirarka iyo howlaha Guddiga cudurdaar la'aan.
2. Boos kasta oo xubinimadiisa Guddiga ay ku bannaanaato sababaha lagu sheegay faqradda 1aad waxaa lagu soo buuxinayaa iyada oo loo marayo habraaca Qodobka 12aad faqradda 3aad iyo faqradda 4aad ee Sharcigan.

### Qodobka 15aad
### Xog-hayaha Guddiga

1. Agaasimaha Maamulka Guddiga waxa uu noqonayaa xoghayha Guddiga, waxa uuna Guddiga iyo guddoonka Guddigaba ka tageerayaa howlaha kala duwan ee Guddiga.

2. Xog-hayaha Guddiga waxa uu masuul ka yahay maamulka maalinlaha ah ee shaqada



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

Guddiga iyo fulinta dhammaan amarada, go'aamada, hagitaannada iyo siyaasadaha Guddiga.

**Qodobka 16aad**
**Shuruudaha Xog-hayaha Guddiga**

1. Qofka loo magacaabayo Xog-hayaha Guddiga waa in uu:
   (b) Haystaa shahaadada darajada seddaxaad (Doctrates) ee jaamacad la aqoonsayhay;
   (t) Leeyahay khibrad ugu yaraan toban (10) sano oo habka maamulka hay'ad tacliin sare.

2. Marka lagu daro shuruudaha farqadda 1aad ee qodobkaan qofka loo magacaabayo Agaasimaha Guddiga waa in uu buuxiyaa shuruudaha ku xusan Cutubka 11aad ee Dastuurka.

**Qodobka 17aad**
**Saraakiisha Maamulka iyo Shaqaalaha Guddiga**

1. Guddigu waxaa uu shaqaalaysiin karaa hadba saraakiisha iyo shaqaalaha uu u arko in aylagama maarmaan u yihiin gudashada shaqadooda sida ku cad Sharcigan.

2. Dhammaan magacaabista lagu sameeyo si waafaqsan qodobkaan waa in ay ka muuqataa isu dheelitirnaanta Lab iyo Dheddig sida ku cad Qodobka 11-aad ee Dastuurka JFS.

**Qodobka 18aad**
**Kulamada Guddiga**

1. Kulamada joogtada ah ee Guddiga waa in la qabtaa bishiiba hal mar, iyada oo uu kulanku ku qabsoomayo maalinta, waqtiga iyo goobta uu go'aamiyo Guddoomiyaha Guddiga.

2. Guddigu waxa uu yeelan karaa kulan aan caadi ahayn marki uu isugu yeero Guddoomiyaha oocuskan sabab meel mar ah.

3. Sagaal xubnood iyo ka badan ayaa codsan karta in la qabto kulan aan caadi ahayn oo ay isugu yimaadaan Guddiga, haddii ay dhacdo midaas, Guddomiyaha Guddiga iyo Xog-haynta Guddiga wa in ay isugu yeeraan Guddiga muddo todobaad gudahiis ah oo ka bilaabmaysa maalinta uu codsigu soo gaaray.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

4. Guntanka fadhiyada Guddiga waxa uu ku dhameestirmayaa tiro kasta oo ka badan kala bar tirada xubnaha Guddiga marka uu kulanku yahay mid caadi ah, haddiise kulanku yahay kulanaan caadi ahayn ama ay ka soo baxayaan go'aamo masiiri ah waa in la helaa guntanka saddex meelood labo (2/3) ee guud ahaan xubnaha Guddiga.

5. Haddii uu Guddoomiyaha Guddiga maqanyahay, Guddiga waxaa shir guddoominaya guddoomiye ku xigeenka Guddiga.

6. Go'aamada Guddiga waxaa lagu soo saarayaa aragtida aqlabiyadda xubnaha Guddiga ee goob-joogga ka ah kulanka iyo codeyntooda. Haddii ay sinmaan codadka xubnaha Guddiga waxaa codka raacayaa meesha uu jiro codka Guddomiyaha Guddiga ama xubinta shir- guddoonka ah.

## Qodobka 19aad
## Shaqada iyo Awoodaha Guddiga

1. Iyada oo ay ujeedadu tahay qiimeeynta iyo sare u qaadista tacliinta sare, cilmi baarista iyohorumarka guud ee dalka, Guddigu waa in uu:
   (b) Hormariyaa ujeeddada tacliinta sare;
   (t) Soo saaraa halbeegyada lagu furi karo ama lagu howlgelin karo hay'adaha tacliinta sare;
   (j) Xaddidaa habraacyada iyo shuruudaha ay hay'adaha tacliinta sare ku bixin karaan shahaadooyin;
   (x) Ku sameeyaa kormeer iyo qiimeyn, siiyaana aqoonsi hay'adaha tacliinta sare iyo laamahooda, kuliyadahooda, waaxyahooda iyo takhasusaadka ay bixiyaan.
   (kh)Diyaariyaa, isagoo wada tashiyo la sameynaya hay'adaha ay khuseyso, Siyaasadda iyo Qorshaha Istaraatiijiyadda Qaranka ee lagu horumarinaayo tacliinta sare.
   (d) Talo bixin ka siiyo Wasiirka siyaasadaha la xariira waxbarashada sare;
   (r) Soo saaro shuruudaha iyo habraacyada looga baahanyahay iska diiwaangelinta ardayda ee hay'adaha tacliinta;
   (s) Tageeraa hormarinta isku xirka hay'adaha tacliinta sare iyo goobaha shaqada, sidoo kalana uu isku xir u sameeyaa hay'adaha tacliinta sare iyo hay'adaha qaran ama caalami ee maalgelinta ku sameeya cilmi-baarista;
   (sh)U fududeeyaa hay'adaha tacliinta sare hirgelinta barnaamijyada tacliimeed ee daboolaya baahida ka jirta suuqa iyo sare u qaadidda barashada culuumta aas-aasiga iyo culuumta dabbaqaadda u baahan qeybaheeda kala duwan.

(dh) Ku dhiirri geliyaa hay'adaha tacliinta sare isku dheeli-tirka dhigista iyo cilmi baarista;

(c) Go'aamiyaa isu qalmidda iyo aqoonsiga shahaadooyinka iyo dibloomooyinka ay bixiyeen hay'adaha tacliinta sare ee gudaha dalka iyo dibaddiisa.

(g) Abuuraa habraacyo la xariira shuruudaha lagama maarmaanka u ah furitaanka kulliyad ama takhasus cusub oo ay rabto hay'ad tacliin sare in ay soo kordhiso.

(f) Qaada tallaabooyin lagu abuurayo wehel-cilmi baaris (fellowship), deeqo-waxbarsho (scholarship), iyo barnaamijyo ay barayaasha jaamacado kale isku weydaarsanayaan jaamacadaha dalka;

(q) Hormariyaa xariirka ka dhaxeeya hay'adaha tacliinta sare ee gudaha dalka si ay u kala faa'iidaan khibradaha iyo agabka waxbarashada, sidoo kalana sare u qaadaa isku xirka hay'adaha tacliinta sare ee heer qaran iyo kuwa caalamiga ee dhanka is-weydaarsiga aqoonta, cilmi-baaris wadaagga, is dhaafsiga shaqaalaha iyo ardayda;

(k) Ururiyaa, baahiyaa, joogteeyaana xogta waxbarashada jaamacadaha iyo hay'adaha tacliinta sare ee kale;

(l) Aqoonsadaa hay'adaha tacliinta sare si waafaqsan Sharcigan;

(m) Soo saaraa habraacyada dallacsiinta barayasha jaamacadaha heerarkooda kale duwan;

(n) Hormariyaa cilmi baaris tayaysan, dhiirri-geliyaana allifaadda iyo ikhtiraaca;

(w) Uu qabtaa dhammaan shaqooyinka kale oo aan waxba u dhimeyn qodobada Sharcigan ee loo cayimo ama ka dhalanaya shaqadooda ama raacsan qeyb ahaan ama guud ahaan shaqooyinka kor ku xusan.

2. Guddigu, haddii uu u arko munaasib, waxa uu qeyb shaqadiisa ka mid ah u idman karaa qof ama hay'ad si ay u fuliso arrin gaar ah, iyada oo maanka lagu haaynayo in shaqooyinka ku xusanqodobkan cidda kaliya ee awood u leh ay tahay Guddiga.

3. Guddigu waxa uu qabanayaa dhammaan howlaha la xiriira tacliinta sare ee Sharcigan ama xeer-nidaamiyaalkiisu aysan si toos ah ama si dadban awoodooda u siinayn hay'ad kale.

## Qodobka 20aad
## Awoodda Xeer Samaynta

Guddigu waxaa uu awood u leeyahay in uu soo saaro xeer hoosaadyo iyo xeer nidaamiyayaal lagu fulinayo howlaha Guddiga oo aan khilaafsanayn ujeeddooyinka Sharcigan.

## Qodobka 21aad
## Warbixin Sanadeedka Guddiga

1. Guddigu waa in uu saddexdii biloodba mar warbixin u soo gudbiyaa wasiirka.

2. Guddigu waa in, muddo laba bilood gudahood ah ka dib dhammaashiyaha sanad maaliyadeedka, uu u gudbiyaa Wasiirka warbixin ku saabsan howl gudashadooda sanad maaliyadeedkii tagay.

3. Wasiirku waa in uu nuqullada warbixinta horgeeyaa Golaha Wasiirada isla marka ay Guddiga u soo gudbiyaan warbixin sanadeedka.

## Qodobka 22aad
## Miisaaniyadda iyo Maaliyadda Guddiga

1. Ilaha dhaqaalaha uu ka soo galo Guddiga waxa ay kala yihiin:
   (b) Miisaaniyadda uu u ansixiyay Baarlamaanka;
   (t) Deeqaha, tabarucaadda iyo dakhli kasta oo sifo sharci ah ku soo gala Guddiga;

2. Sanad maaliyadeedka Guddigu waxa uu noqonayaa sanad maaliyadeedka dowladda.

3. Ugu yaraan saddex billood ka hor billowga sanad maaliyadeed kasta, Guddigu waa in uudiyaariya odoroska maaliyadda Guddiga ee sanadkaas.

4. Odorosku waa in uu ku salaynaadaa habraaca maamul xisaabeedka dowladda.

5. Guddigu waa in uu ilaaliyaa habraaca maamulka maaliyadda dowladda ee la xiriiraxisaabaadka iyo hanti-dhowrka.

6. Xisaab xirka sanadlaha ah ee Guddiga waa in loo diyaariyaa, loo hubiyaa, loona gudbiya siwaafaqsan qodobada Sharciga Hanti Dhowrka Guud.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

## Cutubka 3aad
## Aasaasidda iyo Aqoonsiga Hay'adaha Tacliinta Sare

### Qodobka 23aad
### Asaasidda Jaamacadaha

1. Xubnaha doonayo in ay aasaasaan jaamacad, waa in ay codsi qoraal ah u soo gudbiyaan Guddiga.

2. Codsiga ku xusan faraqadda kore waa in uu la socdaa dastuurka jaamacadda la doonayo in la aasaaso, kaas oo cadaynayo arrimaha khuseeya jaamacadda, oo ay ka mid yihiin:
   (b) Magaca jaamacadda;
   (t) Nidaamka iyo qaab-dhsimeedka maamulka;
   (j) Xubnaha iyo shaqaalaha;
   (x) Hab maamulka maaliyadeed;
   (kh) Isticmaalka shaabadaha iyo dukumintiyada rasmiga ah;
   (d) Qaabka shirarka iyo go'aan gaarista;
   (r) Habka xalinta khilaafaadka;
   (s) Habka kala dirista jaamacadda;
   (sh) Habka xulista hay'adaha iyo shakhsiyaadka maamulka jaamacadda;
   (dh) Barnaamijyada aas-aasiga ah ee ay jaamacaddu bixinayso;
   (c) Hantida guurtada iyo maguurtada ah ee ay jaamacaddu leedahay ama qorsheynayso in ayyeelato; iyo
   (g) Wax kasta oo uu Guddigu ka dalbado ee waafaqsan shaqadiisa.

3. Guddigu waxa uu isaga oo la tashanaya Qeybaha Bulshada iyo Maamul Goboleedyada u soo jeedin karaa Wasiirka suuragalnimada aasaasidda jaamacad dowladeed iyadoo loo maraayo hab ku dhisan Cilmi Baaris.

4. Wasiirku isaga oo tixgelinaaya soojeedinta Guddiga iyo miisaaniyadda loo hayo ee Baarlamaanku u qoondeeyey, waxa uu Golaha wasiirada horgeynayaa Hindisaha aasaasid Jaamacad Dowladeed, Mac-had iyo Mac-had Sare, kadib Madaxweynaha ayaa ku soo saaraya Xeer.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

## Qodobka 24aad
## Diiwaan-gelinta iyo Aqoonsiga Ku Meel Gaarka ah

1. Guddiga isagoo tixgelinaya codsiga loogu soo gudbiyay si waafaqsan qodobka 23aad, baaris iyo qiimeynna ku sameeynaya ilaha xogta codsiga, haddii uu ku qanco in codsigu uu soo buuxiyay shuruudaha ku xusan Sharcigan, waxa uu soo jeedin aqoonsi Ku Meel Gaar ah u gudbinayaa Wasiirka

2. Wasiirku waxuu soo saaraya aqoonsiga ku meel gaarka ah sida ku xusan farqadda 1aad markauu hubsado in hay'addaas ay soo buuxisay shuruudaha.

## Qodobka 25aad
## Saameeynta Aqoonsiga Ku Meel Gaarka ah

1. Hay'adda la siiyay Aqoonsiga Ku Meel Gaarka ah sida ku xusan qodobka 24aad, waxa ay yeelanaysaa shaqsiyad qaanuuneed iyo shaabbad gaar ah waana in ay yeelata awood ay wax ku dacwayso laguna dacweeyo, hanato, haysato kuna tasarufto hanti guurto iyo maguurto, ayna sameeyso dhammaan waxyaabaha iyo ficillada uu u ogolaanayo sharciga.

2. Hay'adda la siiyay aqoonsiga ku meel gaarka ah waxa ay awood u yeelanaysaa in ay:
   (b) Sameysato qaab-dhismeedka maamulka jaamacadda iyo cidda maamulaysa;
   (t) Billawdo ama socodsiiso jiritaankeeda dhismeed;
   (j) Billawdo ama socodsiiso ururinta iyo kaydinta ilaha tacliinta (Academic Resources);
   (x) Iyada oo Guddiga ka heleysa ogolaansho, in ay xayaysiisato ayna u qorato arday barnaamijyada ay bixiso hay'adda;
   (kh) Dhistaa ayna joogteeysaa hab lagu hubiyo tayada si waafaqsan halbeegyada uu dejiyay Guddiga;
   (d) Qabataa howlaha kale ee uu ka dalbado Guddigu ee la xiriira shaqadiisa.

## Qodobka 26aad
## Mudada Jiritaanka Aqoonsiga Ku Meel Gaarka ah

1. Aqoonsiga Ku Meel Gaarka ah ee lagu bixiyay si waafaqsan qodobka 23aad waxa uu socon karaa muddo afar sano ah oo laga billaabayo taariikhda la soo saaray waana loo cusbooneysiin karaa oo kaliya muddo afar sano ah oo kale, kadib marka uu Wasiirku talo bixin ka helo Guddiga.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

2. Haddii jaamacaddu ku heli wayso aqoonsiga rasmiga ah muddada ku xusan farqadda kore, waxaa la joojinayaa howlaha jaamacadda.

3. Hay'adda lagala laabto Aqoonsiga Ku Meel Gaarka ah sida ku xusan farqadda 2aad, waa in lagu kala diraa si waafaqsan Sharcigan.

### Qodobka 27aad
### Kala Noqoshada Aqoonsiga Ku Meel Gaarka ah

Wasiirka ka dib marka uu talo bixin ka helo Guddiga in lagala laabto aqoonsiga ku meel gaarka ah hay'ad tacliin sare, waxa uu soo saarayaa kala noqoshada Aqoonsiga Ku Meel Gaarka ah.

### Qodobka 28aad
### Bixinta iyo Diidmada Shahaadada Aqoonsiga ee Rasmiga ah

1. Hay'ad kasta oo haysata aqoonsi ku meel gaar ah, waxa ay Guddiga u soo gudbinaysaa codsi aqoonsi rasmi ah muddo lix bilood ka hor inta uusan dhammaan xilliga aqoonsiga ku meel gaarka ah.

2. Guddigu waxa uu warbixin ka diyaarinayaa hay'ad kasta oo dhamaysatay muddada aqoonsiga ku meel gaarka ah in ay soo buuxisay shuruudaha laga rabo si ay u hesho aqoonsi rasmi ah.

3. Guddigu waxa uu Wasiirka u gudbinayaa warbixinta aqoonsiga rasmiga ah ee ku xusan farqadda 2aad iyada oo ay la socoto talo bixintooda.

4. Wasiirku isaga oo tixgelinaya warbixinta iyo talo-bixinta loo soo gudbiyay:
   (b) Waxa uu siinayaa hay'adda Shahaadada Aqoonsiga Rasmiga haddii ay soo buuxisay shuruudaha;
   (t) Waxa uu u kordhinayaa Aqoonsiga Ku Meel Gaarka ah afar sano oo kale, kama dambaysna ah, haddii shuruudihii looga baahnaa hay'adda aysan qayb ahaan soo buuxin, iyada oo uu Guddigu u caddaynayo shuruudaha ka dhiman;
   (j) Haddii ay dhamaato muddada loogu kordhiyay aqoonsiga ku meel gaarka ah; hay'adduna ay soo buuxin wayso shuruudaha aqoonsiga rasmiga ah, waxa laga joojinayaa shaqada iyada oo kala diristeeda loo marayo si waafaqsan sharciga.
   (x) Haddii hay'adda laga joojiyo shaqada, Wasiirka oo la tashanaya Guddiga waxa uu magacaabayaa hal qof ama ka badan oo sii maamula hay'adda si loo ilaaliyo danta guud ee bulshada ay u khidmaynaysay hay'adda.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

## Qodobka 29aad
## Faafinta Shahaadada Aqoonsiga

Wasiirku waxa uu ku soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah Shahaadada Aqoonsiga Rasmiga ah eelagu bixiyay si waafaqsan qodobka 28aad.

## Qodobka 30aad
## Wax ka Bedelka iyo Kala Noqoshada Shahaadada Aqoonsiga Rasmiga ah

1. Guddigu waxaa uu si waafaqsan xeer nidaamiyayasha, baaris ku sameeynayaa jaamacadaha haysta Shahaadada Aqoonsiga Rasmiga ah, si uu u hubiyo tayada waxbarashada ee hay'adda.

2. Haddii ay caddaato in ay is dhintay awooddii jaamacadda ee lagu siiyay aqoonsiga rasmiga ah, Guddigu waxa ay talo-bixin u jeedinayaan Wasiirka.

3. Wasiirku, isaga oo tix-gelinaya talo-bixinta Guddigu uu soo gudbiyay, waxa uu wax ka bedli karaa, kala noqon karaa ama si kale u dhigi karaa qodobada ku xusan Shahaadada Aqoonsiga Rasmiga ah iyada oo la tixgelinaayo qiimeynta iyo talo soo jeedinta Guddiga.

4. Wax ka badalka ku xusan farqadda kore, waa in uu abuuraa jawi u suura gelinaya hay'adda aykhuseyso in ay shaqadeed u gudato si wanaagsan.

5. Haddii Shahaadada Aqoonsiga lagula laabto si waafaqsan faraqadda 3aad, Wasiirku waa in uu ogeysiiska diidmada ku baahiyaa Faafinta Rasmiga ah, iyada oo kala dirista loo marayo si waafaqsan Sharciga.

6. Kala noqoshada Shahaadada Aqoonsiga Rasmiga ah ee ku xusan farqadda 3aad ma saameyn doonto sax ahaanshiyaha shahaadooyinka ay bixsay jaamacaddu inta aan lagala noqon Shahaadada Aqoonsiga.

7. Isla marka ay dhacdo kala noqoshada, wasiirku waa in uu magacaabo qof ama ka badan oo sii maamula jaamacadda si waafaqsan qodobka 28aad, farqadda 4aad (x) ee Sharcigan.

## Qodobka 31aad
## Dhismaha Hay'ado Tacliin Sare oo Bixiya Barnaamijyo Gaar ah

1. Guddigu waxa uu qaban karaa codsiyada uga yimaada hay'ado dowladeed oo aasaasaya waxbarasho tacliin sare oo la xiriirta takhasusyo gaar ah.

2. Guddigu waxa uu warbixin u gudbinayaa wasiirka isaga oo ku lifaaqaya talo-bixin la xiriirta hay'adda la soo jeediyay.

3. Wasiirku waxa uu la wadaagaya Golaha Wasiirrada si loo ansixiyo dhismaha hay'addaas.

4. Marka uu Golaha Wasiirrada ansixiyo, Wasiirku waxa uu siinayaa hay'adda Shaahado Aqoonsi Rasmi ah.

5. Hay'adda lagu dhiso sida ku xusan farqadda kore waxa ay yeelanaysaa Xeer gaar ah, waxaana lagu maamuli doonaa xeerka ay ku dhisantahay, iyadoo Guddigu uu qiimeyn joogta ah ku samaynayo barnaamijyadeeda waxbarasho.

## Qodobka 32aad
## Hay'adaha Tacliinta Sare ee aan Ahayn Jaamacadaha

1. Wasiirku, isaga oo tix gelinaya talo bixinta Guddiga waxa uu xeer wasiir ku soo saari karaa hay'ad in ay tahay machad, waana in ay soo buuxisaa shuruudaha, halbeegyada iyo hagitaannada Guddiga.

2. Machadyada iyo hay'ad kasta ee tacliin sare oo bixisa tacliin farsamo waxaa lagu maamuli doonaa Sharci gaar ah.

## Qodobka 33aad
## Ogeysiiska Hay'ad Waxbarasho in ay TahayHay'ad Tacliin Sare ee Dowladeed

1. Wasiirka isaga oo la tashanaya Guddiga ayuu ogeysiin karaa hay'ad waxbarasho in ay tahayhay'ad tacliin sare ee dowladeed sida jaamacad ama kolleej.

2. Ogeysiisku waa in uu ku soo baxaa Faafinta Rasmiga ah waana in lagu go'aamiyaa:
   (b) Taariikhda ay hay'adda waxbarasho isu beddelayso jaamacad ama kolleej;
   (t) Magaca jaamacadda ama kolleejka;
   (j) Goobta iyo deegaanka jaamacadda ama kolleejka.

3. Wasiirku waxa uu tallaabooyinka ku xusan faraqdda 1-aad iyo 2-aad qaadi karaa oo kaliya marku wada tashiyo la yeesho maamulka hay'adda waxbarasho haddii ay tahay mid dowladeed, haddii hay'adda waxbarasho ay tahay mid gaar loo leeyahay Wasiirku waa in uu wada tashi kala yeesha milkiilaha goobta waxbarasho iyo Wasiirka Maaliyadda.

4. Lama ogeysiin karo hay'ad waxbarsho in ay tahay hay'ad tacliin sare ee dowladeed iyada oo aan la hubin in loo shaqeeyuhu uu ka soo baxay waajibaadka shaqaalaha hay'adda uuna fuliyay qawaniinta shaqada la xariirta.

## Qodobka 34aad
## Isku Biiritaanka Hay'ado Tacliin Sare ee Dowladeed

1. Guddigu haddii uu u arko iney habboon tahay in la isku daro laba hay'adood Tacliin Sare ee Dowladeed wuxuu warbixin tafaftiran u dirayaa Wasiirka, iyada oo lagu cadaynayo asbaababaha isku biiritaanka iyo waajibaadka maamul iyo maaliyadeed ee ka dhalan kara.

2. Wasiirku, ka dib marki uu wada tashi la yeesho Guddiga, waxa uu aqbalayaa in laba hay'ad iyo ka badan ee hay'ado tacliin sare ee dowladeed la isku daro lagana dhigo hal hay'ad tacliin sare ee dowladeed.

3. Hay'adda tacliinta sare ee ku xusan farqadda 2-aad waxaa loo tix-gelinyaa in ay tahay hay'ad tacliin sare ee dowladeed oo ku dhisan si waafaqsan Sharcigan.

## Qodobka 35aad
## Jaamacadaha Dowlad Goboleedyada

1. Dowlad goboleed kasta waxa uu dhisan karaa jaamacad iyada oo la marsiinayo habka iyo nidaamka lagu dhiso jaamacadaha ee ku xusan qodobada Sharcigan.

2. Dowlad goboleed marka uu dhiso jaamacad, si waafaqsan Sharcigan, waxa uu masuul ka noqonayaa guud ahaan tasiilaadka ku baxaya jaamacaddaas, waxaana miisaaniyadeeda ansixinaya Baarlamaanka dowlad goboleedkaas.

3. Talo bixinta Guddiga Tacliinta Sare kadib Dowladda Federaalka ah waxa ay jaamacad ama hay'ad kale ee tacliin sare ka furi kartaa dhammaan dhulka Jamhuuriyadda, hadba goobti ay u aragto in ay muhiim u tahay, isla markaana Dowladda Federaalka ayaa qaadaysaa dhammaan masuuliyadda maamul iyo inta badan masuuliyadda maaliyadeed



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

ee jaamacadda ay furtay, iyadoo dowlad goboleedka uu ka qayb qaadanayo masuuliyadda maaliyadeed.

## Qodobka 36aad
## Aqoonsiga Jaamacadaha Shisheeye

1. Haddii jaamacad ku taalla meel ka baxsan Soomaaliya ay doonayso in ay waxbarsho jaamacadeed ka bixiso Soomaaliya, waa in ay aqoonsi ka heshaa Guddiga si waafaqsan qodobada Sharcigan.

2. Jaamacad shisheeye waxa ay heshiis la geli kartaa hay'ad tacliin sare ee la aqoonsan yahay, si ay u bixiso barnaamijyadeeda ama barnaamijyo dhigis wada jir ah, marka ay ogolaasho ka hesho Guddiga.

3. Jaamacad kasta ee shisheeye ee loo ogolaado sida ku xusan farqadda 2aad waa in ay Guddiga usoo gudbisaa caddayn in ay aqoonsi ka haysato dalkeeda.

4. Guddigu waa in uu baahiyaa liiska jaamacadaha shisheeye ee uu aqoonsaday una ogolaaday inay ka howlgalaan dalka saddexdii biloodba mar.

5. Hay'ad kasta oo sheegata in ay shahaado bixinayso iyada oo isticmaalayso jaamacad aan haysan aqoonsi, waxa ay galaysaa fal dambiyeed, waxaana lala tiigsanayaa hay'adaha garsoorka ee dalka.

## Qodobka 37aad
## Isticmaalka Magac Jaamacadeed Ogolaasho La'aan

1. Marka laga reebo ogolaashiyo qoraal ah oo ka soo baxay gole jaamacadeed, qofkii ama hay'addii:
   (b) U isticmaasha magac jaamacadeed si uu sare ugu qaado ama ugu xayaysiisto ganacsigiisaama xirfaddiisa; ama
   (t) Soo saaro shahaado uu ku sheegayo in ay ka soo baxday jaamacadaas, waxa uu galayaa fal dambiyeed, waxaana lala tiigsanayaa hay'adaha garsoorka ee dalka.

2. Iyada oo aan la eegeyn sharci kale oo qaran, looma ogola sarkaalka dowladeed ee qabanaya shaqooyinka diiwaan gelinta shirkadaha, magacyada ganacsiga iyo calaamadaha ganacsiga in uu aqbalo diiwaan gelinta magac la mid ah ama aad ugu dhow oo dadweynaha ku shaki gelin kara magac jaamacadeed, haddii aan ogolaasho laga haysan golaha jaamacadda ay arrintu khuseyso.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

## Cutubka 4aad
## Habka Maamulka Hay'adaha Tacliinta Sare

### Qodobka 38aad
### Hay'adaha Tacliinta Sare ee Dowladda

1. Hay'adaha tacliinta sare ee heer jaamacad dowladeed, waxaa lagu maamulayaa sharci gaar ah oo xeerinaya maamulka jaamacadaha dowladda.

2. Hay'adaha tacliinta sare ee aan ahayn jaamacad, oo ay dowladdu leedahay, waxaa lagu maamulayaa xeer gaar ah oo loo soo saarayo ujeeddadaas.

### Qodobka 39aad
### Hay'adaha Tacliinta Sare ee Gaarka Ah

1. Hay'adaha tacliinta sare ee gaarka ah, waxaa lagu maamulayaa hannaanka maamul ee ku xusan dastuurkooda, wixii aan ka hor imaanayn Sharcigan iyo xeer-nidaamiyaasha ay Guddigu udejiyeen ujeeddadaas.

2. Guddiga isaga oo ilaalinaya nidaamka guud ee maamulka hay'adaha tacliinta sare, hubinayana halbeegyada maamul ee noocyada hay'adaha tacliinta sare waxa uu dejin karaa halbeegyo iyo hannaan maamul oo quseeya hay'adaha tacliinta sare ee gaarka ah noocyadooda kala duwan.

### Qodobka 40aad
### Xafiisyada Muhiimka Ah ee Hay'ad Tacliinta Sare

1. Jaamacad kasta, mid dowladeed iyo mid gaar ah intaba, iyada oo abuuran karta hadba xafiisyada ay u aragto in ay muhiim u yihiin fulinta howlaheeda tacliinta, haddana waxaa laga maar-maan ah in ay yeelato xafiisyada soo socda ama kuwo u dhigma, marka la guddoonsiiyo Aqoonsiga KMG ah:
   (b) Xafiiska Guddoomiyaha Jaamacadda;
   (t) Xafiiska Arrimaha Maamulka iyo Maaliyadda;
   (j) Xafiiska Arrimaha Tacliinta;
   (x) Xafiiska Diiwaanhayaha Jaamacadda;
   (kh) Xafiiska Cilmi Baarista iyo Casriyeynta;
   (d) Xafiiska Arrimaha Sharciga;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE

(r) Xafiiska Shaqada iyo Shaqaalaha;
(s) Waaxda Warbixinnada iyo Xiriirka Teknoolojiyadda (ICT);
(sh)Xafiiska Arrimaha Ardayda;
(dh)Xafiiska Aqoonsiyada iyo Hubinta Tayada;
(c) Xafiiska Hanti-dhowrka (Internal Audit); iyo
(g) Xafiiska Joogtaynta iyo Dayactirka Kaabayaasha;

2. Iyada oo aan waxba loo dhimeyn farqadda kore, jaamacad dowladeed qaab-dhismeedkamaamulkeeda iyo howlaha la xariira waxaa si faah-faahsan loogu sheegayaa Xeerka Maamulka Jaamacadaha Dowladda.

3. Hay'adaha tacliinta sare ee dowladeed oo aan ahayn jaamacadaha, qaab-dhismeedkooda waxaa lagu sheegi doonaa xeer gaar ah oo loo soo saarayo ujeeddadaas.

4. Hay'adaha tacliinta sare ee gaarka ah, waxaa hagaya dastuurka ay ku dhisanatahay, oo aan khilaafsaneen Sharcigan iyo xeer-nidaamiyayaasha uu Guddigu ka soo saaro arrimaha la xiriira qaab-dhismeedkooda.

**Qodobka 41aad**
**Goleyaasha iyo Guddiyada Hay'ad Tacliin Sare**

1. Jaamacad kasta, mid dowladeed iyo mid gaar ah, si ay howlaheeda ugu gudato si heer sare ah waxaa lagama maar-maan ah in ay yeelato goleyaasha iyo guddiyada soo socda ama kuwo u dhigma, marka la guddoonsiiyo Aqoonsiga KMG ah:
   (b) Golaha Maamulka Sare (Governing Board);
   (t) Golaha Maamulka Dhexe (Senate);
   (j) Golaha Tacliinta (Academic Council);
   (x) Guddiga Cilmi Baarista iyo Casriyeynta;
   (kh) Golaha Arrimaha Ardayda;
   (d) Guddiga Shaqada iyo Arrimaha Shaqaalaha;
   (r) Guddiga Anshaxa iyo Daah-furnaanta.

2. Qaab-dhismeedka goleyaasha iyo guddiyada jaamacad dowladeed waxaa si faah-faahsan loogu qeexayaa Xeerka Maamulka Jaamacadaha Dowladda, iyo xeer-nidaamiyayaashiisa.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

3. Qaab-dhismeedka goleyaasha jaamacadaha gaarka ah, waxaa hagaya dastuurka ay jaamacaddu ku dhisantahay iyo xeer-nidaamiyayaasha uu Guddigu u soo saaro ujeeddadaas.

4. Haydaha tacliinta sare ee aan ahayn jaamacadaha, qaab-dhismeedka golayaashooda waxaa lagu maamuli doonaa si la mid ah sida ku xusan Qodobka 40aad, faqradaha 3aad iyo 4aad.

**Qodobka 42aad**
**Kulamada Hay'ad Tacliin Sare**

1. Hay'ad tacliin sare ee dowaladeed waa in ay kulamadeed u qabsataa sida ku xusan XeerkaMaamulka Jaamacadaha Dowladda ama xeernidaamiye arrintaas loo saaray.

2. Hay'adaha tacliinta sare ee gaarka ah waxaa ay kulamadooda u qabsanayaan si waafaqsandastuurka ay ku dhisantahay hay'adda iyo halbeegyada uu u dejiyay Guddigu arrimahaas.

**Qodobka 43aad**
**Xeer-nidaamiyayaasha Hay'adaha Tacliinta Sare**

1. Maamulka hay'ad tacliin sare ee dowladeed waxa uu soo saari karaa xeerarka, xeer hoosaadyada iyo xeer nidaamiyaasha ay u arkaan in ay muhiim u yihiin habsami u socodka howlaha hay'adda si waafaqsan Sharcigan iyo habraacyada uu soo saaro Guddigu.

2. Hay'adaha tacliinta sare ee gaarka ah waxaa hagaya xeer-nidaamiyayasha ka soo baxa Guddiga, waxayna yeelan karaan xeer-nidaamiyayaal aan ka hor imaanayn Sharcigan iyo xeer nidaamiyayshiisa.

**Qodobka 44aad**
**Tallaabooyinka Anshax Marinta**

Qof kasta ee dhigta ama ka shaqeeya hay'ad tacliin sare ee dowladeed ama mid gaar ah, oo ku kaca fal anshax xumo ah, waxaa la marsiinaya anshax marin, hadba sida ay go'aamiyaan xeerarka anshax marinta (code of conduct) ee hay'addu leedahay.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE

**Qodobka 45aad**
**Iska Diiwaangelinta Hay'ad Tacliin Sare**

1. Si waafaqsan qodobada Sharcigan, hay'ad kasta oo tacliin sare waa in ay soo saartaa, baahisaana buugga hay'adda iyo xeerarka qabashada ardayda oo ay la socoto shuruudaha laga doonayo isdiiwaangelinta barnaamijyada waxbarasho ee hay'adda.

2. Qofna looma aqbali karo barnaamij waxbarasho oo uusan soo buuxin shuruudihiisa sida ku qoran xeerarka qabashada ardayda.

3. Guddiga ayaa ah cidda go'aaminaysa hannaanka qabashada ardayda iyo shuruudaha barnaajmiyada ka baxa hay'adaha tacliinta sare; waxa ayna ku soo saarayaan xeerar gaar ah oo tilmaaamaya arrimahaas.

**Cutubka 5aad**
**Maaliyadda Guud ee Jaamacadaha**

**Qodobka 46aad**
**Dakhliga Jaamacadaha Dowladda**

1. Dakhliga jaamacad dowladeed waxa uu koobanaan karaa:
   (b) Miisaaniyadda loo ansixiyay;
   (t) Khidmadaha adeegyada;
   (j) Dakhliyada ilaha kale sharciga uu jideeyay.

**Qodobka 47aad**
**Hanti Kasbasho**

Dhammaan hantida maguurtada ah iyo hantida guurtada ah ee ay ku shaqaynayso jaamacad dowladeed waxa ay noqonayaan hanti ay leedahay jaamacad dowladeed waana in lagu diiwangeliyaa magaca jamacadda.

**Qodobka 48aad**
**Maalgelinta Dakhliga**

1. Jaamacad dowladeed, si sharciga waafaqsan, waxa ay sameysan kartaa maal-gashi dakhligasoo gala.

2. Maal-gelinta ay ku sameynayso jaamacad dowladeed dakhligeeda, si waafaqsan farqaaddakore, waa in ay ogolaasho uga heshaa Golaha Sare ee jaamacadda.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

**Qodobka 49aad**
**Xisaabaadka iyo Hanti Dhowrka**

1. Jaamacad dowladeed waa in ay ilaalisa dhammaan buugaagta diiwanada xisaabaadka dakhliga, kharashaadka iyo hantida jaamacadda.

2. laba bil ka dib dhammaadka sanad maaliyadeed kasta, jaamacad dowladeed waa in ay Hanti-dhowrka Guud u gudbisaa xisaabaadka jaamacadda oo ay la socdaan:
   (b) Warbixin sheegaysa dakhliga iyo kharashaadka jaamacadda inu lagu guda jiray sanadmaaliyadeedka; iyo
   (t) Warqadda isku dheelitirka xisaabaadka jaamacadda illaa maalinti ugu dambaysaysanadka.
   (j) Xisaab xirka sanadlaha ah ee xisaabadka jaamacadaha dowladda waa in loo diyaariyaa,loo hubiyaa, loona gudbiya si waafaqsan qodobada Sharciyada Hanti Dhowrka Guud.

**Qodobka 50aad**
**Sanad Maaliyadeedka**

Sanad maaliyadeedka Hay'ad Tacliin Sare waa in uu la mid noqdaa sanad maaliyadeedka dowladda.

**Qodobka 51aad**
**Maamulka Maaliyadda Jaamacadaha Gaarka ah**

1. Jaamacad kasta oo gaar ah, si waafaqsan maabaadi'da guud ee xisaabaadka iyo habraacyadooda, waa in ay:
   (b) Ilaalisa buugaagta iyo diiwaannada dakhliga iyo kharashaadka, hantida iyo daymaha;
   (t) Diyaarisaa warbixin maaliyadeedyada ugu badnaan laba bilood ka dib dhammaadka sanadka waana in ay la socdaan warbixinta dakhliga iyo kharashaadka sanadkii tagay iyo waraaqadda isku dheelitirka xisaabadka tan iyo sanadkii tagay.

2. Jaamacad kasta oo gaar ah inta lagu guda jiro sanad maaliyadeedka waa in:
   (b) Ay diyaarisaa warbixin hanti dhowr sanadle ah oo ay samaysay hay'ad hanti dhowrmadax banaan oo diiwaangashan;
   (t) Ay u gudbisaa maamulka sare ee jaamacadda nuqul tasdiiqsan oo ah warbixinta hantidhowraha ee sanadlaha ah;



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

(j) Ay u hogaansantaa dhammaan xeerarka maaliyadeed, ayna bixisaa dhammaan waajibaadka maaliyadeed ee ay dowladda ku leedahay oo ku xusnaa karta Sharci kale;

(x) Ay xisaabisaa dhammaan maaliyadda uga timaada dowladda haddi ay jirto;

(kh) Ay u soo gudbiso Guddiga, marka uu ka dalbado warbixin maaliyadeed iyo hanti-dhowr, iyada oo aan Guddigu baahin karin xogta maaliyaded, haddii aan ogolaasho laga helin jaamacadda ay khuseyso ama hay'adaha dowladda ee awoodda u leh.

## Qodobka 52aad
## Maalgelinta Dakhliga Jaamacadaha Gaarka ah

Jaamacad gaar loo leeyahay waxa ay maaliyadeeda ku maal gashan kartaa hadba sidi ay uansixiso cidda masuulka ka ah, si waafaqsan sharciga.

## Cutubka 6aad
## Burinta iyo Maaraynta Arrimaha Kala Guurka

## Qodobka 53aad
## Aqoonsiyadi Ku Meel Gaarka ah ee Horay Loo Bixiyay

1. Hay'ad tacliin sare ee gaar ah haddi ay haysato Aqoonsiga Ku Meel Gaarka ah inta uusan dhaqan gelin Sharcigan, waxaa laga soo qaadayaa Hay'ad lagu dhisay si waafaqsan Sharcigan.

2. Jaamacadaha dalbanaya Shaahadada Aqoonsiga Rasmiga ah waa in ay soo maraan tallaabooyinka lagu qeexay Sharcigan si ay u hesho Shahaadada Aqoonsiga ee Rasmiga ah.

## Qodobka 54aad
## Burin

Sharci ama xeer kasta oo ka hor imanaya ama aan la jaan qaadi karin qodobada Sharcigan waa laburiyay.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

## Cutubka 7aad
## Qodobada Kama Dambaysta Ah

### Qodobka 55aad
### Magac Ka Beddelidda Hay'ad Tacliin Sare

1. Golaha maamulka sare ee hay'ad tacliin sare ee dowladeed waxa ay soo jeedin karaan in laga badalo hay'adda magaca waana in Wasiirka magaca cusub uu ku soo saara Faafinta Rasmiga ah.

2. Haddii hay'adda magaca laga badalayo ay tahay mid ku dhisan sharci baarlamaan waxaa kaliya oo magaca looga badali karaa wax ka badalka sharciga ay ku dhisantahay.

3. Haddii ay tahay hay'adda mid gaar ah ayna soo go'aamiyaan maamulka iyo dadka maalgeliya in laga badalo magaca waxaa ay codsigooda soo marsiinayan Guddiga isaga ayaana go'aan ka gaaraya si waafaqsan sharciga.

### Qodobka 56aad
### Dambiyada Lagu Galo Sharcigaan

Dhammaan dambiyada lagu galo si baal marsan qodobada Sharcigan, waxaa loo aqoonsanayaa fal dambiyeed waxaan lagu ciqaabayaa si waafaqsan xeerarka garsoorka dalka.

### Qodobka 57aad
### Iska Hor Imaadka Sharcigan iyo Sharciyada Kale

1. Haddii ay iska hor imaanayaa qodobada Sharcigan iyo sharciyo kale oo ka hadlaya wax la xariira arrimaha tacliinta sare waxaa mudnaanta leh qodobada Sharcigan.

2. Nuqulka afka Soomaaliga ah waa nuqulka rasmiga ah ee Sharcigan, haddii la isku qabto fasiraadda qodobada Sharcigan ee nuqullo afaf kale waxaa mudnaanta leh nuqulka Af- soomaaliga ku qoran.

### Qodobka 58aad
### Xeer Nidaamiyayaasha

1. Wasiirka isaga oo xeerinaya hadba baahida loo qabo waxa uu soo saari karaa xeer nidaamiyayaal guud oo hoos imaanaya Sharcigan oo looga dan leeyahay habsami u fulinta ujeeddooyinka Sharcigan.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

2. Iyada oo aan waxba loo dhimaynin farqadda kore, xeer nidaamiyayaalka hoos imaanaya Sharcigan waxa ay ay wax ku soo kordhin karaan qodobo la xariira:
   (b) Dhismaha hay'adaha tacliinta sare noocyadooda;
   (t) Soo saaritaanka, kala noqoshada iyo wax ka bedelka Shahaadada Aqoonsiga ee Rasmiga
   (j) Aqoonsiyada joogtada ah sida barnaamijyada waxbarashada iyo hubinta tayada;
   (x) Habraaca kala noqoshada Aqoonsiga KMG ah; iyo
   (kh) Diiwaangelinta iyo aqoonsiga wakiilada hay'adaha tacliinta sare ee shisheeye.

**Qodobka 59aad**
**Dhaqan-galka Sharciga**

Sharcigan waxa uu dhaqan-gelayaa marka uu ansixiyo Baarlamaanka ka dibna saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ah ee Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa faafinta rasmiga ah.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**SHARCI LR.32** **TAARIIKH: 24-TA DISEEMBAR 2024**

**SHARCIGA HAY'ADDA SHARCIYAYNTA ADEEGYADA BAARITAANKA & BEERAHA SOOMAALIYEED**

**MADAXWEYNAHA J.F.S,**

| | |
|---|---|
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG. |
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobka 82aad, Faqradda 3aad ee Dastuurka KMG. |
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG. |
| **MARKUU ARKAY:** | Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee summaddeedu tahay **XGGSH/656/B11/24**, ku taariikheysan **23/12/2024**, ujeeddaduna tahay Soo Gudbin Ansixinta''Hindisaha Sharciyeedka Hay'adda Sharciyeeynta Adeegyada & Baaritaanka Beeraha Soomaaliyeed. |
| **MARKUU TIXGELIYAY:** | Baahida loo qabo in la meel mariyo sharcigan. |

FR

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxaa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga Hay'adda Sharciyeeynta Adeegyada & Baaritaanka Beeraha Soomaaliyeed.

**Qodobka 2aad**

Waxa uu sharcigan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-011-2025
TAARIIKH: 10-05-2025
SAXIIX
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIX'D / SENT
29 MAR 2025
BY: Eduna Mohamed
SAACAD ... SAXIIX

**Madaxweynaha J. F.S.**

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

**JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA**

**WASAARADDA BEERAHA IYO WARAABKA**

# SHARCIGA HAY'ADDA SHARCIYEYNTA ADEEGYADA & BAARITAANKA BEERAHA SOOMAALIYEED

# "SOMALI AGRICULTURAL REGULATORY AND INSPECTION SERVICES (SARIS) LAW"

**NOFEEMBAR 2024**

Tusmo;

QODOBADA GUUD ........ 1
Qodobka 1aad ........ 1
Magaca Sharciga ........ 1
Qodobka 2aad ........ 1
Baaxadda Sharciga ........ 1
Qodobka 3aad ........ 1
Qodobka 4aad ........ 2
Ujeedada Sharcigan ........ 2
CUTUBKA 2AAD ........ 3
MIISAANIYADDA IYO QAAB-DHISMEEDKA HAY'ADDA SARIS ........ 3
Qodobka 5aad ........ 3
Miisaaniyadda Hay'adda ........ 3
Qodobka 6aad ........ 3
Qaab-dhismeedka Hay'adda iyo Muddada Xil-Haynta Golaha Hay'adda ........ 3
Qodobka 7aad ........ 4
Shuruudaha Xubinnimada Golaha SARIS ........ 4
Qodobka 8aad ........ 4
Waajibaadka Golaha Hagista (Board of Directors) SARIS ........ 4
Qodobka 9aad ........ 5
Kulamada Golaha Hay'adda ........ 5
Qodobka 10aad ........ 5
Gunnada Xubnaha Golaha Hay'adda ........ 5
Qodobka 11aad ........ 6
Muddada Xil-haynta Maareeyahaa iyo Maareeye Ku xigaanka Hay'adda ........ 6
Qodobka 12aad ........ 6
Shuruudaha Maareeyaha iyo Maareeye ku xigeenka ........ 6
Qodobka 13aad ........ 6
Magacaabista Maareeyaha iyo Maareeye ku xigeenka ........ 6
Qodobka 14aad ........ 6
Awoodaha Maareeyaha Hay'adda ........ 6
Qodobka 15aad ........ 7
Awoodaha Maareeye Ku-xigeenka ........ 7
Qodobka 16aad ........ 7
Sababaha lagu waayi karo xilka Golaha ........ 7

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

Qodobka 17aad........................................................ 8
Shuruudaha iyo Qaadashada Shaqaalaha SARIS........................................................ 8
Qodobka 18aad........................................................ 8
Waajibaadka Shaqada........................................................ 8
Qodobka 19aad........................................................ 8
Sababaha lagu waayi karo xilka........................................................ 8
Qodobka 20aad........................................................ 9
Xafiisyada SARIS........................................................ 9
Qodobka 21aad........................................................ 9
Awoodaha SARIS........................................................ 9
Qodobka 22aad........................................................ 10
Baaritaanka SARIS........................................................ 10
Qodobka 23aad........................................................ 10
La-shaqeynta SARIS........................................................ 10
Qodobka 24aad........................................................ 11
Xeer-nidaamiyaal Hagaya Shaqada Hay'adda........................................................ 11
Qodobka 25aad........................................................ 11
Dukumintiyada Dadweynaha........................................................ 11
Qodobka 26aad........................................................ 11
Dowrka Wasaaradda Beeraha kaga aadan SARIS........................................................ 11
Qodobka 27aad........................................................ 12
Cabasho........................................................ 12
Qodobka 28aad........................................................ 12
Hab-raaca Caddaaladda........................................................ 12
Qodobka 29aad........................................................ 12
Ujuurooyinka iyo Khidmooyinka........................................................ 12
Qodobka 30aad........................................................ 13
Qoondeynta shaqaalaha farsamo ee muhiimka ah........................................................ 13
Qodobka 31aad........................................................ 13
Dib-u-eegista Sharciga........................................................ 13
Qodobka 32aad........................................................ 13
Baabi'in........................................................ 13
Qodobka 33aad........................................................ 13
Dhaqan-galka Sharciga........................................................ 13

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

# CUTUBKA 1AAD
# QODOBADA GUUD

## Qodobka 1aad
## Magaca Sharciga

Sharcigaan waxaa lagu magcaabaa "Sharciga Hay'adda Sharciyeynta Adeegyada & Baaritaanka Beeraha Soomaaliyeed"- Somali Agricultural Regulatory and Inspection Services (SARIS) Law.

## Qodobka 2aad
## Baaxadda Sharciga

1. Hay'adda Sharciyeynta Adeegyada & Baaritaanka Beeraha Soomaaliyeed (SARIS) waxaa loo dhisay oo hadii la soo koobo shaqadeedu tahay Baadhitaanka iyo Kontoroolka kimikooyinka, Sumaha, dullinida iyo Bacrimiyayaasha beeraha ee xad dhuleedka JFS sida;
    - b. Kormeerka hawlaha bedqabka Beeraha ee Soomaaliya gudaheeda;
    - t. Ka badbaadada dhirta & dhul beereedka Soomaaliyeed khataraha ay keenaan sumaha iyo kimikooyinka Beeraha.
    - j. Hirgelinta tallaabooyinka xakameynta kiimikooyinka Beeraha.
    - x. Baaritaanka & Caddeynta abuurka iyo noocyada dhirta iyadoo la kaashanaysa Waaxda Cilmi Baarista iyo Fidinta Abuurka( Research-ka iyo extention-ka) ee abuurku hoos tago.
    - kh. Baaritaanka tayada bacramiyayaasha Iyo caddeyntooda
    - d. Baaritaanka tayada sumaha iyo caddeyntooda
    - r. Xakameynta dullinada iyo la imaatinka nidaamyo lagula socda.

## Qodobka 3aad
## Eray Bixin

Ayada oo la eegayo ujeedada Sharcigani, haddii aan macnaha si kale loo dhigin, ereyada soo socda waxaa loo qaadanayaa mid walba qeexidda ku hor qoran:

1. **"Kiimikooyinka Beeraha"** Waxaa loola jeedaa bacramiyeyaasha, Xakameeyeyaasha kobaca, fermoonis (**Pheromones**), iyo kiimikooyinka badbaadinta dhirta ay ka mid yihiin, fangi- dileyaasha, Dullin-dilayaasha, nema-dilayaasha (**Nematicides**), geed-hoosaad-dilayaasha, caaro- dilayaasha,

bakteeriya-dilayaasha, jiir-dilayaasha, dixri-dilayaasha, shimbir-dilayaasha, Dullin-dilayaasha, kiimikooyinka noolaha saameyn ku lahayn, nooleyaha bacramiye ama kiimiko kasta oo kale oo loo isticmaalo kor u qaadista, ilaalinta caafimaadka dhirta iyo waxsoo saarka dhirta iyo waxyaabaha ka dhasha;

2. **"Beeraha"** waxaa loola jeedaa dhul cayiman oo loo asteeyay ama loogu tala-galay ku dhaqanka ku saabsan tacabashada dalagyada si loogu adeegsado quud ama ganacsi;
3. **"Cilmiga Beeraha"** waa barashada aqoonta iyo dhaqanka beerista beeraha;
4. **"Wasiir"** waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaadda Beeraha iyo Waraabka ee JFS;
5. **"Wasaarad"** waa Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka ee JFS;
6. **"SARIS"** waa Hay'adda Sharciyeynta Adeegyada & Baaritaanka Beeraha Soomaaliyeed "Somali Agricultural Regulatory and Inspection Services (SARIS)";
7. **"Iibin"** waxaa loola jeedaa bixinta, xayeysiinta, xafididda, shaacinta, gudbinta, gaarsiinta, geynta ama kala-beddelashada;
8. **"Dulin"** waxaa loola jeedaa noole kasta (dhir, xayawaan, cayayaan, jeermis, IWM) ee jooga goob iyo waqti aan loo baahneyn waxyeelana u geysan kara si toosa ama dadban dhir, dalag, xoolo iyo dad;

## Qodobka 4aad
## Ujeedada Sharcigan

Ujeedooyinka sharcigaan waa:

1. In uu dhaqo dhammaan mas'uuliyadaha loo xilsaaray hay'adda in ay fuliso, ayna matashaa hay'adda dawladeed ee u qaabilsan si waafaqsan Sharciga Noocyada Ayniga dhirta, Sharciga Xakameynta Kiimikooyinka Beeraha, Sharciga Badbaadada Dhirta iyo Takoorka, iyo shuruucda kale ee loo xilsaaro had iyo jeer, iyo sidoo kale la-imaatinka xeer hoosaadyo.
2. In uu nidaamiyo ku dhaqanka iyo maareynta Kiimikooyinka Beeraha, Caafimaadka, Badqabka iyo Arrimaha Deegaanka, Cilmiga Beeraha, Maamulka Ganacsiga ama Maareyntiisa.

3. In uu xaqiijiyo xasiloonida iyo hurumarka wax-soo-saarka beeraha, iyada oo la kaashanaayo ka hortaga soo galida iyo faafidda dulinnada.

4. In uu nidaamiyo maamulka dhammaan arrimaha la xariiro Abuurka iyo Noocyadda dhirta ee Jamhuuriyadda Federaaka Soomaaliya iyo inuu dejiyo mabaadi'da aasaasiga ah iyo habraacyadda abuurka iyo kooxaynta dhirta.

## CUTUBKA 2AAD
## MIISAANIYADDA IYO QAAB-DHISMEEDKA HAY'ADDA SARIS

### Qodobka 5aad
### Miisaaniyadda Hay'adda

1. Miisaaniyadda Hay'addu waxay ka mid noqoneysaa miisaaniyadda guud ee Qaranka
2. Hay'addu waxay u madax-bannaan tahay maamulka miisaaniyaddeeda iyadoo raacaysa Xeerka maamulka miisaaniyadda ee Xukuumadda JFS.

### Qodobka 6aad
### Qaab-dhismeedka Hay'adda iyo Muddada Xil-Haynta Golaha Hay'adda

1. Hay'adda SARIS waxay yeelaneysaa Golaha Hagista (Board of Directors) oo ka kooban 11 xubnood kuwaas oo boqolkiiba soddon ay haween yihiin lehna qaab – dhismeedka soo socda:

    b. Maareeyaha iyo Maareeye ku xigeenka hay'adda oo lagu soo doortay si waafaqsan Qodobka 13aad ee Sharcigan; iyo

    t. 9 Xubnood oo ah Wakiilo laga soo magacaabay:

        1. Beeraleeyda/Iskaashatooyinka beeraha
        2. Ganacsatada Beeraha ee Diiwaangashan
        3. Rugta Ganacsiga Soomaaliyeed
        4. Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka
        5. Wasaaradda Xanaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa.
        6. Wasaaradda Deegaanka & Isbedelka Cimillada.
        7. Wasaaradda Maaliyadda
        8. Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Dhaqaalaha Buluugga ah.
        9. Wasaaradda Caafimaadka.

2. Golaha Maamulka Hay'adda SARIS waxay iska dhex dooranayaan Guddoomiye iyo Guddoomiye ku xigeen lakiin Maareeyaha iyo Maareeye Ku xigeeenka isuma sharxi karaan xilka Guddoomiyaha iyo Guddoomiye ku xigeenka Golaha.

3. Xubnaha waxa ay xafiiska hayn karaan muddo dhan afar (4) sano, waxaana loo cusbooneynsiin karaa hal mar oo kaliya.

**Qodobka 7aad**
**Shuruudaha Xubinnimada Golaha SARIS**

1. Waa in uu yahay muwaadin Soomaaliyeed.

2. Waa in da'diisu ka yareyn 35 (soddon iyo shan) sano.

3. In uu haysto shahaado Jaamacadeed oo la aqoonsanyahay uuna ku bartay culuumta beeraha, maamulka iyo maareynta iyo wixii la xariira.

4. Xubinta waa in uusan horey u gelin fal-dambiyeed ay Maxkamadi si kama dambays ah ugu xukuntay.

5. In uu leeyahay ugu yaraan 2 sano oo waaya-aragnimo ah ee Cilmiga Beeraha, maamulka iyo maareynta iyo wixii laxariira.

6. Xubinta waa in ay leedahay akhlaaq suuban, hufnaan iyo karti uu ku gudan karto shaqadeeda.

**Qodobka 8aad**
**Waajibaadka Golaha Hagista (Board of Directors) SARIS**

1. Waxay meel-mariyaan miisaaniyada, qaab dhismeedka waaxyaha iyo Qorshe-hoowleedka Hay'adda kaddib marka uu horkeeno Maareeyaha.

2. Golaha maamulka iyo maareeyaha waa in ay ku soo saaraan shirkooda ugu horreeya waajibadka shaqo ee agaasime waaxeedyada hay'adda.

3. Waxay ku kormeeraan Maamulka hay'adda fulinta howlihii loo Xilsaaray.

4. Waxay qiimeyaan ka dibna ansixiyaan xeer-hoosaadyada hay'adda.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

## Qodobka 9aad
## Kulamada Golaha Hay'adda

Golaha Hay'adda SARIS wuxuu yeelan karaa shir caadi ah iyo shir aan caadi ahayn haddii loo baaahdo, waxayna u dhici karaan sida soo socoto:

1. Kooramka Hay'adda SARIS waxa uu ku guntamaa lix (6) xubnood.

2. Kulamada caadiga ah ee Golaha waxay noqonayaan sadexdii bilba mar. Haddii aysan Goluhu go'aansan in la qabto waqti ka duwan, waxaana isugu yeeraya guddoomiyaha golaha.

3. Kulamada caadiga ah xubin kasta waxay xaq u leedahay in la soo gaarsiiyo ajendaha shirka ugu yaraan 24 (labaatan iyo afar) saac ka hor inta uusan qabsoomin shirka.

4. Guddoomiyuhu wuxuu isugu yeeri karaa kulan deg deg ah oo aan caadi ahayn haddii loo baahdo, sidoo kale haddii ay soo jeediyaan 1/3 (saddex meelood hal meel) ee xubnaha Golaha.

5. Go'aanka aqlabiyadda xubnaha Golaha ee shirka jooga ayaa noqonaya go'aanka kama dambeyska ah ee Golaha, haddii ay dhacdo inay isla ekaadan codadka diidmada iyo ogolaanshaha ee Golaha, codka qofka shirka guddoominaya ayaa loo xisaabinayaa laba (2) cod.

## Qodobka 10aad
## Gunnada Xubnaha Golaha Hay'adda

1. Golaha Maamulka hay'addu Shaqadoodu waa shaqo waqti dhiman (Part-time), mana lahan Mushahaar joogto ah marka laga reebo Maareeyaha iyo Maareeye ku xigeenka.

2. kow iyo (11) xubnood oo aanay ku jirin Maareeyaha iyo Maareeya ku xigeenku waxa kaliya oo ay xaq u leeyiihiin gunno lagu siinayo fadhiyadooda oo looga bixinayo kharashka ku galay ka soo qayb galka kulamada.

3. Gunnada xubnaha Goluhu (board of Directors) ku helayaan fadhiyadooda waxaa lagu qeexi doonaa xeer nidaamiyaha Hay'adda.

## Qodobka 11aad
## Muddada Xil-haynta Maareeyahaa iyo Maareeye Ku xigaanka Hay'adda

Maareeyaha iyo Maareeye ku xigeenka Hay'adda SARIS ee Soomaaliyeed waxay xilka haynayaan mudo shan (5) sano ah oo la cusboonaysiin karo hal mar.

## Qodobka 12aad
## Shuruudaha Maareeyaha iyo Maareeye ku xigeenka

1. Maareeyaha iyo Maareeye ku xigeenka waa ina ay leeyihiin khibrad iyo shahaadooyin la hubiyey ka heystaan mid ka mid takhasusyada soo socda:

    b. Kiimikooyinka Beeraha;
    t. Caafimaadka, Badqabka iyo arrimaha deegaanka;
    j. Cilmiga Beeraha;
    x. Sharciga; ama
    kh. Maamulka ganacsiga ama maareynta

2. Maareeyaha iyo Maareeye ku xigeenka waa in aaney noqon milkiile, saamile, agaasime, sarkaal, shirkad ama si kale uusan ugu jirin ganacsiga soo saarista, iibinta, soo-gadashada, gudbinta, dhoofinta, soo-dejinta ama si kale uusan ugu lug lahayn ganacsiga kiimikooyinka Beeraha iyo abuurka ee Soomaaliya.

## Qodobka 13aad
## Magacaabista Maareeyaha iyo Maareeye ku xigeenka

Magacaabista Maareeyaha iyo Maareeye ku xigeenka Hay'adda waxaa soo jeedinaya Wasiirka Wasaaradda Beeraha & Waraabka XFS, waxaana ansixinaya Golaha wasiirada ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya.

## Qodobka 14aad
## Awoodaha Maareeyaha Hay'adda

1. Maareeyaha Hay'adda SARIS ee Soomaaliyeed waa masuulka ugu sareeya waana hagaha iyo madaxa maamulka hay'adda SARIS.

2. Waxaa uu masuul ka yahay fulinta howl-maalmeedka Hay'adda.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

3. Waxaa uu ku matalaa magaca hay'adda xiriirka ay la leedahay Hay'adaha kale ee Dowladda, kuwa aan dowliga ahayn iyo Xiriirka Hay'adaha Caalamiga ah.

4. Waxa uu diyaariyaa,fuliyaana qorsha-howleedka hay'adda kadib marka ay ansixiyaan Golaha maamulka.

5. Wuxuu u kuur-galaa fulinta dhammaan hawlaha Hay'adda ee ku cad sharcigan.

6. Waxa uu magacaabayaa agaasimayaasha waaxyaha Hay'adda iyo Madaxda Xafiisyada Dawlad-goboleedyada Xubnaha ka ah Dowlada Federaalka.

7. Wuxuu magacaabi karaa guddiyo farsamo asaga oo kusoo xulaaya aqoon iyo takhasus, iyo

8. Wixii kale ee Sharcigan iyo xeer-hoosaadka hay'addu u xilsaaro.

9. Wuxuu diyaariyaa una gudbiyaa Golaha Hay'adda warbixinta iyo xisaabxirka Hay'adda.

## Qodobka 15aad
## Awoodaha Maareeye Ku-xigeenka

1. Wuxuu buuxiyaa kaalinta Maareeyaha marka uu maqan yahay ama ay ku yimaadaan duruufo ka hor-istaagi kara gudashada waajibaadkiisa.

2. Wuxuu qabanayaa wixii kale ee uu Maareeyuhu u xilsaaro.

## Qodobka 16aad
## Sababaha lagu waayi karo xilka Golaha

1. Dhammaan Golaha Hay'adda waxay xilka ku waayi karaan arrimaha soo socda:
   b. Geeri;
   t. Is-casilaad la aqbalay;
   j. In caafimaad-darro awgeed u-gudan waayo waajibaadkiisa;
   x. In lagu helo danbi la xariira shaqadiisa ama maxkamadi xukunto si kama danbaysa;
   kh. Maareeyaha iyo Maareeye ku xigeenka waxay sidoo kale xilkooda ku waayi karaan sidii lagu soo magacaabay.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

## Qodobka 17aad
## Shuruudaha iyo Qaadashada Shaqaalaha SARIS

1. Waa in aan qof la magacaabin ama uusan shaqaalaha SARIS sii ahaan karin haddii uu qofkaasi yahay mulkiile, saamile, agaasime, sarkaal, shirkad/hay'ad ama si kale uusan ugu jirin ganacsiga soo saarista, iibinta, soo-gadashada, gudbinta, dhoofinta, soo-dejinta ama si kale uusan ugu lug lahayn ganacsiga Kiimikooyinka Beeraha iyo abuurka ee Soomaaliya, ama uu wax xiriir ah, ammaah ama deyn kale uu la leeyahay shirkad/hay'ad ku lug leh ganacsi noocaasi ah.

2. Magacaabis kasta oo ku saabsan u adeegidda SARIS waa in ay ahaataa mid ku saleysan mudnaan iyo waafaqsanaanta sharciga.

3. Shaqaalaha SARIS waxaa loo qaadanayaa habka shaqo qorista shaqaalaha rayidka dawladda ee uu Maamulo Guddiga Qaran ee Shaqaalaha Rayidka Soomaaliya si loogu aqoonsado in ay yihiin shaqaale Rasmi ah..

4. SARIS waxa ay ku maamuleysaa shaqaalaha la qaatay, si waafaqsan Sharciga Shaqaalaha Rayidka Soomaaliya.

## Qodobka 18aad
## Waajibaadka Shaqada

Shaqaalaha SARIS waxaa waaajib ku ah:

1. In ay si aaminaad leh u gutaan waajibaadkooda shaqo si waafaqsan sharciga,

2. In ay u shaqeeyaan si eex la'aan ah oo daacad ah.

3. in aysan uga faa'iideysan shaqadooda raadinta faa'iidooyin sharci-darro ah.

4. In ay xifdiyaan qarsoodinnimada sirta ganacsiga ee shakhsiga iyo shirkadaha.

## Qodobka 19aad
## Sababaha lagu waayi karo xilka

1. Dhammaan shaqaalaha Hay'adda waxay xilka ku waayi karaan arrimaha soo socda:

b. Geeri;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

t. Is-casilaad la aqbalay;
j. In caafimaad-darro awgeed u-gudan waayo waajibaadkiisa;
x. In lagu helo danbi la xariira shaqadiisa ama maxkamadi xukunto si kama dambays ah.

## Qodobka 20aad
## Xafiisyada SARIS

1. Hay'adda Adeegyada iyo Baaritaanka Beeraha Soomaaliyeed xarunteeda dhexe waa Muqdisho, waxayna xarumo ku yeelaneysaa dhaaman dowlad goboleedyada dalka.

2. Hay'adda SARIS waxa ay kormeerid joogto ah ku sameyneysaa dhamaan xarumaha dowlad goboleedyada dalka.

3. Xafiis kasta oo ay SARIS ka fureyso dowlad goboleedyada waa in ay ku wargelisaa Wasaaradda Beeraha & Waraabka XFS.

4. Xafiiska hay'adda waa in uu qabtaa codsiyada, go'aamada, dikreetooyinka iyo ammarrada looga baahan yahay hay'adda ama xaq u leedahay in ay qabato kuwaasi oo gebi ahaanba ku jira gudaha xudduudaha Dowlad Goboleedyada laga dhisay.

## Qodobka 21aad
## Awoodaha SARIS

Waajibaadka iyo awoodaha Hay'adda SARIS waxaa ka mida ah:

1. Dejinta xeer-nidaamiyaal si waafaqsan sharcigan oo lagu xakameynaayo tayada sumaha beeraha, bacrimiyaasha, abuurka iyo dalagyada beeraha.

2. Yagleelidda sheybaar lagu hubiyo tayada iyo badqabka dalagyada beeraha iyo dhirta dalka la soo geliyo ama laga dhoofiyo, sumaha, bacrimiyaasha iyo abuurka.

3. Diiwangelinta shirkadaha/dadka soosaara, warshadeeya, soo dejiya, dhoofiya sumaha, bacrimiyaasha, dhirta, abuurka IWM.

4. Diiwangelinta, kormeerka, baarista, bixinta shahoodooyinka sumaha, bacrimiyaasha, dhirta , abuurka IWM.

5. Baarista, xakameynta iyo karantiilka dullinada beeraha iyo dhirta dalka soo gelaya iyo la imaatinka nidaamyo lagula socdo.

6. Iskaashiga hay'adaha shisheeye, wasaaradaha ama waaxyaha u qaabilsan sharciyeynta beeraha iyo adeegyada beeraha ee ka jira waddamada deriska, gobolka, qaaradda Afrika iyo caalamka ee arrimaha ku saabsan iibsiga waxyaabaha u kala gooshayo xuduudaha ay ka mid yihiin sumaha, bacriymiyaasha ,dalagyada beeraha kasoo go'a , dhirta, abuurka IWM.

7. Soo rogidda ciqaabaha ka dhasha jebinta go'aan, ammar ama jihayn kasta oo ay soo saartay hay'adda si waafaqsan sharcigan iyo sharciyada kale ee dalka.

## Qodobka 22aad
## Baaritaanka SARIS

1. Hay'adda SARIS, ayadoo gudaneysa waajibeedka shaqo, waxay baaris ku sammeyneysaa adeegyada iyo hawlaha la xariira beeraha sida abuurka, dalagyada, dhirta, sumaha , bacrimiyaasha IWM, si waafaqsan mabaadi'da iyo ujeedooyinka sharcigan.

2. Waa waajib saaran SARIS inay baarto haddii ay jiraan shuruudo la jabiyay ama la jabinayo ayna soo saarto warbixino, go'aanno, amarro ama jihayn la xiriirta natiijada baarista.

## Qodobka 23aad
## La-shaqeynta SARIS

1. Hay'adda SARIS, xubnaheeda iyo shaqaalaheeda marka ay u gudanayaan mas'uuliyadahooda si waafaqsan sharciga, dadka ama shirkadaha uu ku socdo kormeerka ama baaritaanka waa in ay la shaqeeyaan ayna bixiyaan dukumintiyada iyo agabka saxda ah ee loo baahan yahay.

2. Waxaa reeban diidmada la shaqeynta, ishor-istaaga kormeerida ama qarinta dukumintiyada ama agabka loo baahan yahay ee la xiriirta shaqada hay'adda taasoo ka dhalaneyso ciqaab waafaqsan sharcigan iyo shuruucda kale ee dalka.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

## Qodobka 24aad
## Xeer-nidaamiyaal Hagaya Shaqada Hay'adda

1. Kadib, marka ay SARIS wadatashi la sameyso wasaaradda, waxay dejineysaa xeer nidaayimyaal cusub ama dib u eegis ku sameynaysa xeer hoosaadyo hore ujiray hadii ay ubaahato qaabeynta iyadoo tixgelineyso waajibaadyadeeda iyo masuuliyadahadeeda si loo xaqiijiyo shaqo hufan ee adeegyada ay hay'adda fuliso.

2. SARIS marka ay dejineyso ama dib u eegis ku sameyneyso xeer nidaamiyaasha waa inay ku dhistaa mabaadii'da ah cadaalad, hufnaan, daahfurnaan, madax banaani iyo isla xisaabtan.

## Qodobka 25aad
## Dukumintiyada Dadweynaha

Hay'adda SARIS waxa ay dadweynaha u shaacisaa:

1. Xeer nidaamiyaasha ay sammeeysay SARIS iyadoo raaceysa qodobka 24aad ee sharcigan;

2. Go'aamada, ammarrada iyo dikreetooyinka ay soo saartey SARIS;

3. Ciqaabaha ay soo rogeyso SARIS;

## Qodobka 26aad
## Dowrka Wasaaradda Beeraha kaga aadan SARIS

1. Hay'adda SARIS waxay hoos timaadaa Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka DFS, waxayna Wasaaraddu ku leedahay dowr weyn hagista hawlaha Hay'adda, siyaasadda iyo qorshe hawleedka ay ku shaqeyso.

2. Marka ay gudaneyso Hay'adda SARIS Waajibaadyadeeda ku xusan Sharcigaan, SARIS waa in ay tixgelisaa Siyaasadaha iyo qorshayaasha ay soo saartay Wasaaraddu ama dalka u dejisan.

3. Hay'adda SARIS oo ah Hay'adda leh hawlo takhasus Beereed iyo hawlo farsamo oo la xidhiidha eyniyada Noocyada dhireed, Kimikooyinka, Sumaha iyo Bacriminta Beeraha waxay u madaxbannaan tahay in ay go'aamo cilmiyeysan ka gaadho hawlaheeda iyo masuuliyadeeda farsamo ee u gaarka ah.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

## Qodobka 27aad
## Cabasho

1. Marka laga reebo sida ku xusan qodobkaan, go'aan, ammar ama dikreeto kasta ee ay soosaarto SARIS waa kama dambeys.

2. Cabasho go'aan, amar ama jihayn ay soo saareen xafiisyada hay'adda ee Dowladd Goboleedyada waxaa loo gudbinayaa SARIS.

3. Cabashooyinka la xiriira sharcinimadda iyo awoodda ee go'aannada, amarrada iyo jihanyta ay soo saarto SARIS waxaa looga racfaan qaadanaya Maxkamadda Sare sida ku qeexan qodobka 26aad ee sharcigan, si kale rafcaan loogama qaadan karo SARIS, Si kale racfaan loogama qaadan karo go'aanada SARIS.

4. Codsiga cabashada waa in la gudbiyaa soddon (30) beri gudahood kaddib soo saarista go'aanka, ammarka ama dikreetada la rabo in racfaanka laga qaato.

## Qodobka 28aad
## Hab-raaca Caddaaladda

Iyadoo gudaneysa mas'uuliyadaheeda ku xusan sharcigan, SARIS waa:

1. In ay ogeysiisaa shakhsiyaadka daneynaya codsi kasta ee la qabtey ama dhageysi kasta oo SARIS ay qaban doonta sida ku cad sharcigan;

2. In ay bixisaa sababo qoraal ah oo ku saabsan go'aamadeeda,ammarradeeda, iyo jihaynteeda, sababahaasi oo ay tahay in la bixiyo waqtiga go'aanka, ammarka ama jihaynta;

3. In go'aan, amar ama jihayn kasta oo la soo saaraayo kadib dhageysi, waa in lagu saleeyaa cadeymaha, doodaha iyo macluumaadka lagu soo bandhigay dhageysiga.

## Qodobka 29aad
## Ujuurooyinka iyo Khidmooyinka

1. SARIS, oo ujeedkeedu yahay soo celinta dhammaan ama qayb ka mid ah kharashaadka waxay go'aamineysaa iyadoo tixgelinayo mas'uuliyadaheeda ku

xusan sharcigan iyo shuruucda kale dalka ayna soo rogeysaa ujuurooyin iyo khidmooyin shirkad/shakhsi kasta oo heysata shati lagu bixiyey sharcigan isla markaana dejinaysaa hab loo xisaabiyo ujuurooyinka iyo khidmooyinka ay bixinayso shirkad/shakhsi si lacag loogu shubo sanduuqa qasnadda guud.

2. SARIS waxay sidoo kale qeexaysaa qiimaha dulsaarka ama qaabka loo xisaabiyo qiimaha ganaaxa ay bixineyso shirkad/shakhsi ee ku saabsan ujuurada iyo khidmada uu bixiyo qofka ama shirkadda marka la joogo ama ka hor taariikhda la doonayo in la bixiyo.

## Qodobka 30aad
## Qoondeynta shaqaalaha farsamo ee muhiimka ah

Maareeyaha hay'adda isaga oo tixgelinaya aqoonta iyo takhasuska wuxuu soo magacaabayaa Xubnaha Shaqaalaha Farsamada iyo Agaasimeyaasha Dowlad Goboleedyada.

## Qodobka 31aad
## Dib-u-eegista Sharciga

Sharcigaan waxaa dib-u-eegis lagu sameyn karaa goorwalba ee loo baahdo.

## Qodobka 32aad
## Baabi'in

Sharci walba oo ka soo horjeeda sharcigan waa waxba kama jiraan.

## Qodobka 33aad
## Dhaqan-galka Sharciga

Sharcigaan waxa uu dhaqan-galayaa marka uu ansixiyo Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, uuna Saxiixo Madaxweynaha JFS, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda Federaalka Soomaaliya.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**SHARCI LR.33** **TAARIIKH: 24-TA DISEEMBAR 2024**

**SHARCIGA XAKAMEYNTA KIIMIKOOYINKA BEERAHA SOOMAALIYEED**

**MADAXWEYNAHA J.F.S,**

| | |
|---|---|
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG. |
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobka 82aad, Faqradda 3aad ee Dastuurka KMG. |
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG. |
| **MARKUU ARKAY:** | Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee summaddeedu tahay **XGGSH/657/B11/24**, ku taariikheysan **23/12/2024**, ujeeddaduna tahay Soo Gudbin Ansixinta''Hindisaha Sharciyeedka Xakameeynta Kiimikooyinka Beeraha Soomaaliyeed. |
| **MARKUU TIXGELIYAY:** | Baahida loo qabo in la meel mariyo sharcigan. |

FR

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxaa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga Xakameynta Kiimikooyinka Beeraha Soomaaliyeed.

**Qodobka 2aad**

Waxa uu sharcigan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIWAAN NO: HAN-016-2025
TAARIIKH: 10-...-2025
SAXIIX
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud ee JFS

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
2 9 MAR 2025
BY: Fadumo Mohamed Omar Sedichi
SAACAD ________ SAXIIX ________

**Madaxweynaha J. F.S.**

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

WASAARADDA BEERAHA IYO WARAABKA

# SHARCIGA XAKAMEYNTA KIIMIKOOYINKA BEERAHA SOOMAALIYEED

NOFEEMBAR 2024

TUSMO

*CUTUBKA 1AAD* ........ 1

*QODOBADDA GUUD* ........ 1

Qodobka 1aad ........ 1

Magaca Sharciga ........ 1

Qodobka 2aad ........ 1

Baaxadda Sharciga ........ 1

Qodobka 3aad ........ 1

Eray bixin ........ 1

Qodobka 4aad ........ 3

Ujeedadooyinka Sharcigan ........ 3

*CUTUBKA 2AAD* ........ 4

*MAAMULKA IYO HOWLAHA KIIMIKOOYINKA* ........ 4

Qodobka 5aad ........ 4

Maamulka Xakameynta Kiimikooyinka ........ 4

Qodobka 6aad ........ 5

Codsiga Diiwaangelinta Kiimikooyinka ........ 5

Qodobka 7aad ........ 6

Soo dejinta, Warshadaynta, Dhoofinta iyo Iibinta Kiimikooyinka Beeraha ........ 6

*CUTUBKA 3AAD:* ........ 7

*BAARAYAASHA IYO KORMEERAYAASHA* ........ 7

Qodobka 8aad ........ 7

Magacaabista Baarayaasha iyo Falanqeeyayaasha ........ 7

Qodobka 9aad ........ 7

Awoodaha Baaraha ........ 7

Qodobka 10aad ........ 8

Qaadashada Aqoonsiga shaqaalaha ........ 8

Qodobka 11aad ........ 9

Baarista (inspection) iyo soo Qaadista Muunadaha ........ 9

Qodobka 12aad ........ 10

Falanqaynta Muunadaha ku Saleysan Codsi ........ 10

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

Qodobka 13aad ........ 10

Shahaadooyinka falanqaynta (Analyst) ........ 10

Qodobka 14aad ........ 10

Ilaalinta Deegaanka ........ 10

*CUTUBKA 4AAD* ........ *11*

*DAMBIYADA IYO CIQAABAHA* ........ *11*

Qodobka 15aad ........ 11

Dambiyada ka dhalan kara Sharcigan ........ 11

Qodobka 16aad ........ 12

Ciqaabaha Dambiyada ku xusan Sharcigan ........ 12

Qodobka 17aad ........ 12

Caddeymo ........ 12

Qodobka 18aad ........ 12

Mas'uuliyadda Dambiga ee Maareeyayaasha ,Wakiillada iyo Shaqaalaha ........ 12

Qodobka 19aad ........ 13

Amarro Dhameystira Xukunka ........ 13

*CUTUBKA 5AAD* ........ *13*

*QODOBO KALE OO ISKU DHAFAN* ........ *13*

Qodobka 20aad ........ 13

Dhiirigelinta wax soo sarka Gudaha ........ 13

Qodobka 21aad ........ 13

Xeer Nidaamiyayaal ........ 13

Qodobka 22aad ........ 13

Dib-u-eegis ........ 13

Qodobka 23aad ........ 14

Baabi'in ........ 14

Qodobka 24aad ........ 14

Dhaqan-galka Sharciga ........ 14


JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

## CUTUBKA 1AAD
## QODOBADDA GUUD
### Qodobka 1aad
### Magaca Sharciga

Sharcigan waxaa lagu Magacaabaa Sharciga Xakameynta Kiimikooyinka Beeraha Soomaaliyeed.

### Qodobka 2aad
### Baaxadda Sharciga

Si waafaqsan Qodobada 25, 27, 45,52 iyo 126 ee Dastuurka kumeel-gaarka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Sharcigan waxaa looga dhaqmi doonaa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

### Qodobka 3aad
### Eray bixin

Ayada oo la eegayo ujeedada sharcigan, haddii aan si kale loo dhigin, ereyada soo socda waxaa loo qaadanayaa mid walba qeexidda ku hor qoran:

1. **"Kiimikooyinka Beeraha"** Waxaa loola jeedaa bacramiyeyaasha, Xakameeyeyaasha kobaca, fermoonis (**Pheromones**), iyo kiimikooyinka badbaadinta dhirta ay ka mid yihiin, fangi- dileyaasha, Dullin-dilayaasha, nema-dilayaasha (**Nematicides**), geed-hoosaad-dilayaasha, caaro- dilayaasha, bakteeriya-dilayaasha, jiir-dilayaasha, dixri-dilayaasha, shimbir-dilayaasha, Dullin-dilayaasha, kiimikooyinka noolaha saameyn ku lahayn, nooleyaha bacramiye ama kiimiko kasta oo kale oo loo isticmaalo kor u qaadista, ilaalinta caafimaadka dhirta iyo wax soo saarka dhirta iyo waxyaabaha ka dhasha;
2. **"Beeraha"** waa loola jeeda dhul cayiman oo loo asteeyay ama loogu tala-galay ku dhaqanka ku saabsan tacabashada dalagyada si loogu adeegsado quud ama ganacsi;
3. **"Baare"** waxaa loola jeeda qof lagu magacaabey si waafaqsan sharcigan si uu u noqdo baare ujeedooyinka sharcigan;
4. **"Falanqeeye-Analyst "** waxaa loola jeeda qof lagu magacaabey si waafaqsan sharcigan si uu u noqdo falanqeeye ujeedooyinka sharcigan;



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

5. **"Dhoofiye"** waa qof lagu diiwaan geliyey sharcigan si uu u dhoofiyo Kiimikooyinka Beerahaama maadooyinkooda;

6. **"Bacrimiye"** waa walxo kasta ama isku-qas sheeyaal loogu talo-galay ama loo bixiyey hagaajinta ama joogteynta koritaanka dhirta ama wax-soo-saarka, waxaana ku jira digada, qashinka, dambaska, Jeesso ama wasakhda marka lagu iibiyo xaaladeeda asal iyo magac iskumid, aan ka ahayn nuurad.

7. **"Sun bixiye"** waa waxii Kiimiko Beereed ah ee ku muujinaya sunnimo weji uumi;

8. **"Soo dejiye"** waa qof lagu diiwaan geliyey sharcigan inuu soo dejiyo Kiimikooyinka Beeraha ama Maadooyinkooda.

9. **"Summad"** waa wax kasta oo la qoray, la daabacay ama qaab garaaf ama ku dhegan waxii Kiimiko Beereed ama weelka lagu keenay Kiimikooyinka Beeraha iyo weelka dibadda ama xirmooyin tafaariiq ee Kiimikooyinka Beeraha;

10. **"Soo saare"** Waa qof lagu diiwaan geliyey sharcigan si uu u soosaaro Kiimikooyinka Beeraha ama maadooyinka loo isticmaalo Kiimikooyinka Beeraha;

11. **"Wasiir"** waa Wasiirka beeraha iyo waraabka xukuumadda Federaalka Soomaaliya;

12. **"Wasaarad"** Waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka ee JFS;

13. **"Dulin"** Waxa loola jeedaa noole kasta (dhir,xayawaan,cayayaan,jeermis,IWM) ee jooga goob iyo waqti aan loo baahneyn waxyeelana u geysan kara si toosa ama dadban dhir,dalag,xoolo iyo dad.

14. **"Adeegsade dulindile"** waa qof haysta shuruudaha adeegsiga sunta dulindilaha sidaasna uga diiwaan gashan sharcigan;

15. **"Dulindile"** waa kiimiko, oo qaabka astaamaheeda summadeed loogu adeegsado in dulinka looga laayo dalagga beeraha;

16. **"Dhismayaasha"** waa dhismooyin sida lagu qeexay xeerarka lagu sameeyey sharcigan;

17. "**Qalabka Ilaalinta Shakhsiyeed"** waa dhammaan dharka loo baahanyahay inuu ilaaliyo adeegsadaha ama qofka ka shaqeeya Kiimikooyinka Beeraha sida lagu cadeeyey sharcigan;

18. **"Ganacsade Diiwaan gashan"** waa qof Ganacsade ah oo sharcigan uga diiwaan gashan inuu iibiyo Kiimikooyinka Beeraha;



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

19. **"Khabiir sunta uumiga oo diiwaan gashan"** waa qof haysta qoraal inuu u qalmo ka shaqeynta sunta uumiga bixisa una diiwaan gashan sida ku shaqeeye suntaas ama ka hawlgale sharcigan;

20. **"Kiimiko Beereed la Xadiday"** waxa loola jeedaa kiimiko beereed u keeni karta halis Caafimaad Bulshada, Beeralayda, Xoolaha, Duurjoogta, Shinnida, Deegaanka iyo dalagyada.

21. **"Badqab"** waxaa loola jeedaa badqabka aadanaha, xoolaha, duurjoogta, shimbiraha, kalluunka iyo noolayaasha kale iyo dhul, biyo, hawo iyo deegaan guud;

22. **"SARIS"** Waa Hay'adda Sharciyeynta Adeegyada & Baaritaanka Beeraha Soomaaliyeed "Somali Agricultural Regulatory and Inspection Services (SARIS)".

23. **"Iibin"** waxaa loola jeedaa bixinta, xayeysiinta, xafididda, shaacinta, gudbinta, gaarsiinta, geynta ama kala-beddelashada.

## Qodobka 4aad
## Ujeedadooyinka Sharcigan

Ujeedooyinka sharcigaa waa:

1. In la xakameeyo soo dejinta, dhoofinta, iibka, wax soo saarka, Badqabka iyo sidoo kale ilaalinta caafimaadka bulshada, dhowridda iyo xanaaneynta deegaan marka laga hadlayo Kiimikooyinka Beeraha.

2. In la helo ama la abuuro suuq iyo jawi xor ah ayna u siman yihiin dhamman kuwa soo dejiya, soo saara iyo kuwa qaybiya kiimikooyinka beeraha.

3. In la xaqiijiyo saameynta ama waxtarka kiimikooyinka beeraha ay u/ku leeyihiin dulinnadda iyo dalagyada loogu talagaley.

4. In la xakameeyo in kiimikooyinka beeraha ay ku galaan gacan qaldan.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

# CUTUBKA 2AAD
# MAAMULKA IYO HOWLAHA KIIMIKOOYINKA
## Qodobka 5aad
## Maamulka Xakameynta Kiimikooyinka

1. Hay'adda SARIS ayaa leh masuuliyadda inay kormeerto, maamusho ama hirgeliso ku dhaqanka sharcigan.

   Hawlaha Xakameynta Kiimikooyinka waxa ka mid ah:

   b. Baaritaanka iyo la socodka arrimaha la xiriira Warshadda Kiimikooyinka Beeraha oo ay tahay inay SARIS kormeerto.

   t. Hubinta in kiimikooyinka Beeraha sida ugu habboon loo diiwaan geliyey iyo in Kiimikooyinka Beeraha noocaas ah loo adeegsado hab raacsan sumaddooda ku saleysantahay xeerarka lagu sameeyey qodobkan.

   j. Dejinta habka lagu kormeero tayada, soo gelinta iyo qaybinta Kiimikooyinka Beeraha Soomaaliya.

   x. Tixgelinta codsiyada diiwaan gelinta ee soo-saareyaasha Kiimikooyinka Beeraha, codsadayaasha ganacsi shatiyeeysan ee Kiimikooyinka Beeraha iyo khubarada sunta uumiga ee diiwaan gashan iyo bixinta shatiyada

   kh. Hakinta, burinta, ka-laabashada shahaado diiwaan gelin, shati lagu bixiyey sharcigan ama Xeer nidaamidaamiyayaasha hay'adda.

   d. Kala talinta Wasiirka arrimaha ku saabsan siyaasadaha kiimiikooyinka beeraha.

   r. Kala shaqaynta hay'adaha kale dhaqan gelinta sharcigan; iyo.

   s. Habeynta Warshadda kiimiikooyinka Beeraha ee Soomaaliya ay ka mid tahay soo saarka, baakadeynta, soo dejinta iyo suuqgeynta kiimikooyinka beeraha.

   sh. Habeynta soo dejinta alaabta aan la warshadayn ee loo isticimaalo samaynta kiimikooyinka beeraha.

   dh. Sare u qaadida soo-saaridda kiimikooyinka beeraha.

   c. Kala talinta dowladda Federaaalka iyo dowlad Goboleedyada dalka

      i. Soo iibsiga, soo dejinta iyo qaybinta hufan ee waqtiga ku habboon ee kiimikooyinka Beeraha.

      ii. Samaynta xarumo bixinta tafaariiqda kiimikooyinka Beeraha ee

degmooyinka.

iii. Dejinta siyaasadaha la xiriira soo-saaridda iyo qeybinta kiimikooyinka Beeraha.

g. Kormeeridda iyo tijaabinta kiimikooyinka Beeraha si loo hubiyo tayada iyo badqabka.

f. Bixinta shatiyada soo-saarayaasha, qaybiyeyaasha iyo kuwa iibiya tafaariiqda kiimikooyinka Beeraha.

q. Kor u qaadida, iyadoo lala kaashanayo daneeyayaasha warshadaha beeraha, cilmi baarista ku saabsan kiimikooyinka Beeraha.

k. Xaqiijinta in kiikikooyinka Beeraha ee la soo dhoofiyey ama la soo saaray ama lagu qaybiyey in ay waafaqaan heerarka tayada iyo Badqabka sida sharcigan uu farayo; iyo.

l. Daraasayn iyo u-kurgelida arrimaha la xiriira warshadaha kiimikooyinka Beeraha oo ay Wasaaraddu ka codsato SARIS inay la socoto, oo ay waqti ka waqti u soo gudbiso arrimahaas oo ay ku taliso tallaabooyinka ay u aragto inay lama huraan yihiin ama laga talo bixin karo danaha dadweynaha ee maareynta iyo horumarinta warshadahaas.

## Qodobka 6aad
## Codsiga Diiwaangelinta Kiimikooyinka

1. Codsiga diiwaan-gelinta ee Kiimikooyinka Beeraha waxaa loo dirayaa Hay'adda SARIS si waafaqsan qodobka iyadoo la isticmaalayo foom cayiman oo ay la socon doonaan waxyaabaha soo socda-
   b. Khidmad horay loo qoray; iyo
   t. Xogta, Muunado iyo Aalad kasta oo ay u baahan karto SARIS

2. Marka ay hesho codsi isdiiwaan-gelin, SARIS waxay baari doontaa codsiga si ay u go'aamiso in Kiimikada beeraha ee la codsanayo ay tahay mid wax ku ool ah oo ku habboon in lagu isticmaalo Soomaaliya ama ay waafaqsan tahay xeer nidaamiyayaasha.

3. SARIS waxa ay sameyn kartaa, kadib markii ay baarto codsiga:
   b. Inay ogolaato diiwaangelinta Kiimikooyinka Beeraha;
   t. Inay diido diiwaan-gelinta Kiimikooyinka Beeraha;
   j. Inay dib u dhigto go'aan ka gaarista haddii loo baahdo macluumaad dheeri



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

ah; ama

x. Haddii Kiimikada Beeraha ay ka diiwaan gashant ahay waddan kale, ay diiwaan geliso Kiimikooyinka Beeraha iyada oo la marinayo tijaabooyin dheeri ah, ha noqoto gudaha Soomaaliya ama sheybaar shisheeye oo la aqoonsan yahay, si loo hubiyo wax ku oolnimadeeda iyo ku habboonaanta Soomaaliya.

4. Haddii ay SARIS diiwaan-geliso Kiimikooyinka Beeraha, waxay siinaysaa codsadaha:
   b. Shahaado iyada oo markaasina ku dhejineysa, shahaadada la siiyay shuruudaha la xiriira soo dejinta, dhoofinta, warshadaynta, astaynta, xayeysiinta, qaybinta, iibka iyo adeegsiga Kiimikooyinka Beeraha si loo hubiyo wax ku oolnimada iyo ku habboonaanta Soomaaliya.
   t. Kala saarida Kiimikooyinka Beeraha iyagoo ah Kiimikooyinka xadaysan ee Beeraha si loogu maareeyo daryeel gaar ah una keenin wasakheynta deegaanka, ama waxyeello ugu geysan aadanaha, xayawaanka ama nolosha dhirta; ama
   j. In adeegsiga Kiimikooyinka Beeraha ay u baahantahay in lagu adeegsado iyada oo uu jiro kormeerka qof ay u xilsaartey SARIS.

## Qodobka 7aad

## Soo dejinta, Warshadaynta, Dhoofinta iyo Iibinta Kiimikooyinka Beeraha

1. Qofna ma dhoofin karo, sooma gelin karo, ma iibin karo, kumana warshadayn karo Gudaha Soomaaliya walxaha Kiimikooyinka Beeraha kuwaas oo aan lagu diiwan gelinin, baakadaynin si waafaqsan xeer nidaamiyayaasha lagu sameynayo sharcigan.

2. Qofna Soomaaliya dibadda ugama dhoofin karo ama dib uguma soo-dhoofin karo Kiimikooyinka Beeraha ilaa uu qofka ama kiimakooyinka beeraha ay buuxiyaan shuruudaha lagu tilmaamay Sharcigan.

3. Qofna kuma iibin karo Soomaaliya dhexdeeda kiimikooyinka Beeraha ilaa uu qofku yahay/tahay iibiye leh shati ku diiwaangashan si waafaqsan sharcigan.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

# CUTUBKA 3AAD
# BAARAYAASHA IYO KORMEERAYAASHA

## Qodobka 8aad
## Magacaabista Baarayaasha iyo Falanqeeyayaasha

1. Maareeyaha hay'addda SARIS, ayaa magacaabaya Falanqeeyayaasha iyo baarayaasha ku haboon oo u qalma fulinta ujeedada sharcigan; iyada oo shuruudu tahay in ruqsadda la gala noqon karo haddii ay ku kacaan kiisas anshax xumo iyo wax kasta oo sharciga ka hor imanaya.

2. Qofka lagu magacaabay si waafaqsan faqrada (1aad), kuma lug yeelan karo wax hawl ah oo la xiriirta soo dejinta, dhoofinta, soo-saaridda, ka-shaqaynta, iibinta ama qaybinta Kiimikooyinka Beeraha.

## Qodobka 9aad
## Awoodaha Baaraha

1. Baaraha oo ujeedkiisu yahay fulinta howlihiisa/howlaheeda sida ku xusan sharcigan awoodihiisu waa;
   b. Inuu galo ama baari karo meel kasta, dhismooyin, gaari ama doon, ujeedkeedu yahay in uu fuliyo howl kasta oo lagu tilmaamay sharcigan iyo xeer nidaamiyayaasha lagu sameeyey sharcigan iyadoo uu raacayo tilmaamaha hoos ku xusan.
      i. In baaruhu aammisan yahay in Kiimikooyinka Beeraha oo uu sharcigan khuseeyo lagu keydiyey, iibiyey ama loo adeegsaday;
      ii. In baaruhu uu aaminsan yahay in ay jiraan walax, qof, xayawaan, ama dalag oo ay waxyeeleysay Kiimikooyinka beeraha.
      iii. In goobta loo adeegsan karo Warshadaynta kiimikooyinka Beeraha.
      iv. In baaruhu si maangal ah uga shakisan yahay in loo adeegsan karo ama laga yaabo in loo adeegsado fulinta fal-dambiyeed sida uu dhigayo dharcigan ama Xeer nidaamiye kasta oo lagu sameeyo sharcigan.
   t. Inuu baaro walax kasta ee kiimikooyin Beeraha ee laga helo meel kasta sida sida; Dhismooyin, Gaari, Markab ama furidda weelka laga helo Dhismooyinka ee la rumeysanyahay inay ku jirto Kiimikooyinka beeraha kana qaado Muunado.
   j. Baaruhu inuu waydiiyo qofka soo saaridda dukumantiyada, buugaagta



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

iyo wax kasta oo la xiriira kiimikooyinka beeraha si uu u baaro ama nuqul uga qaato.

2. Mulkiilaha ama qof kasta oo Mas'uul ka ah goob kasta, dhismooyinka lagu xusay faqrada (1aad) ee qodobkan iyo qof kasta oo laga helo dhismaha ama goobta waa inuu siiyaa baaraha dhammaan cawimaadda maangalka ah ee u suurtagalinaya baarayaasha inay fuliyaan waajibaadkooda shaqo sida ku xusan sharcigan ama xeer nidaamiyayaasha uu sameynayo sharcigani.

3. Qof walba oo u diida gelitaanka baaraha ku shaqeynaya qodobkan ama ka horjoogsada baaritaanka ama isagoo si cudurdaar la'aan ah ugu guul darreysta inuu soo saaro Kiimikooyinka Beeraha, qalab ama dukumanti si loo baaro, wuxuu galayaa dembi.

4. Qofna xaq uma leh in la siiyo lacag ama magdhaw qaddarka kiimikooyinka beeraha ee muunad ahaan loo qaaday sida ku xusan qodobkan.

## Qodobka 10aad
## Qaadashada Aqoonsiga Shaqaalaha

1. Baaraha waxaa la siinayaa aqoonsi leh sawirka iyo darajada baaraha iyo sumadda SARIS marka loo magacaabo baare si uu howshiisa uga guto islamarkaana sitaa marka uu galayo goobaha, Dhismooyinka, Gaari ama markab sida ku xusan faqrada 1aad ee qodobka 9aad ee sharcigan.

2. Kaarka ama Aqoonsiga waxaa in la tusaa dadka ay qusayso marka Baarayaashu ay adeegsanayaan awoodooda iyadoo la raacayo tilmaamaha faqradda 1aad ee qodobkan 10aad, ama markii uu ka codsado qofka ay khusayso.

3. Qofka la macaamilaya baaraha waa inuu weydiiyaa baaraha inuu tuso aqoonsigiisa oo ay ku caddaahay macagiisa iyo darajadiisa.

4. Mulkiilaha ama qofkasta oo mas'uulka ka ah goob kasta, Dhismooyin lagu xusay faqrada (1aad) ee qodobkan iyo qof kasta oo laga helo dhismaha ama goobta waa inuu siiyaa baaraha dhammaan caawimaadda maangalka ah ee u suurtagelinaya Baarayaasha inay ku fuliyaan waajibaadkooda shaqo sida ku xusan Sharciga ama xeer nidaadmiye kasta oo kale ee lagu sameeyo sharcigan.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

## Qodobka 11aad
## Baarista (inspection) iyo soo Qaadista Muunadaha

1. Baaraha wuxuu waqti kasta oo macquul ah iyo xilliga wax-soo-saarka, haddii uu u baahdo—
   b. Galayaa oo baarayaa dhisma walba, goob ama gaari oo uu u hayo sabab macquul ah oo uu ku aamino inay kujiraan wax Kiimiko Beeraha ama diiwaanno la xiriira soo dejinta, warshadayn ama iibka Kiimikooyinka Beeraha.
   t. Haddii baaruhu u arko inay lagama maarmaan tahay la wareegi karaa ama dibadda u soo saari karaa wixii Kiimikooyinka Beeraha ah ama buugaagta, diiwaanno ama dukumiintiyo ee kujira Dhismooyinkaas, goobtaas ama gaarigaas kuwaasi oo ku saabsan soo saarista, soo dejinta, isku-qaska, isku-lifaaqa ama iibinta Kiimikooyinka Beeraha oo uu uhayo sabab macquul ah uu ku aamino inay keeneyso caddayn ku saabsan wax kasta oo ka hor imanaya mid ka mid ah shuruudaha sharcigan ama xeer nidaamiye kasta oo lagu sameeyay sharcigan;
   j. Qaadaya muunadaha noocaas ah sida loogu talagalay wax kasta oo Kiimikooyin Beeraha ah maadaama uu u arki karo in lagama maarmaan u tahay gaarista ujeedka tijaabo ama baaritaan una yeeran karaan qofka kujira dhismaha ay kujirto Kiimikooyinka Beeraha, si uu u siiyo caawimaad macquul ah u baahan karo fulinta hawsha.

2. Baaruhu wuxuu qaadayaa tillaabooyinka sida ugu macquulsan loogu dhaqmi karo inuu ogolaado in milkiilaha ama qofka ku jira dhismaha Kiimikooyinka Beeraha fursad ay goobjoog ku ahaadaan marka wax baaritaan ah laga sameeynayo dhismayaasha.

3. Haddii la rabo in muunad loo gudbiyo baaritaan (anaylsis), baaraha gudbinaya muunadda waa inuu kahor ama sida ugu dhaqsaha badan kadib markii uu soo gudbiyo ogeysiiyo milkiilaha Kiimikooyinka Beeraha, inuu doonayo inuu muunadda baaritaan urabo.

4. Haddii uu baaruhu soo qaado muunada si loo falanqeeyo wuxuu u kala qaybin doonaa Saddex (3) qaybood wuxuuna sameynayaa in qayb kasta la calaamadeeyo, la shaanbadeeyo ama la xiro, wuxuuna u dirayaa labo (2) qayb oo ka mid ah muunadda falanqayn uuna weheliyo qoraal saxiixan oo ah in muunadda loo qaaday qaabkii loogu tala galay, qaybta saddexaadna waa inuu



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

u geeyo milkiilaha ama iibiyaha.

5. Marka uu u qaadayo muunadda si loo soo falanqeeyo sida ku xusan qodobkan, baaruhu wuxuu raacayaa habraaca loo dejiyey.

6. Qofna xaq uma yeelan doono in lacag lasiiyo ama uu magdhow u dalbado qaddarka Kiimikooyinka Beeraha ee muunada ahaan loo qaatay sida ku xusan qaybtaan sharciga.

**Qodobka 12aad**
**Falanqaynta Muunadaha ku Saleysan Codsi**

1. Mar kasta oo iibsadaha kiimikooyinka beeraha uu qoraal kaga codsado hay'adda islamarkaana iibsaduhu uu bixiyo kharashka muunadda oo ay wehliso khidmadda soo qaadidda muunadda sida uu qabo sharcigan,

2. Baare ka socda hay'adda ayaa soo iibinaya muunadda Kiimikada Beeraha una gudbinaya falanqeeyaha (analyst) ka dibna wuxuu u gudbinayaa iibsadaha shahaadada falanqaynta.

**Qodobka 13aad**
**Shahaadooyinka falanqaynta (Analyst)**

1. Shahaado kasta oo uu sameeyey falanqeeye si waafaqsan sharcigan waxa ay noqoneysaa mid kama dambays ah.

2. Haddii uu jiro hab loo dejiyey falanqeynta walxaha kiimikada Beeraha, falanqeeyuhu waa inuu caddeyaa inuu raacay habkii loo dejiyey.

**Qodobka 14aad**
**Ilaalinta Deegaanka**

1. Qof kasta oo adeegsanaya Kiimikooyinka Beeraha waxaa waajib ku ah:
   b. Yareeynta burburka deegaanka;
   t. Inuusan qubin Kiimikooyinka Beeraha;



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

j. Ka-hortagga wasakheynta iyo ku qubidda dhulka, hawada iyo biyaha;
x. Ka hortagga in kiimikooyinka Beeraha ay galaan deegaanka iyaga oo marayo qulqulka biyaha.
kh. Inuu u nadiifiyo kiiimikooyinka beeraha si deg deg ah ayadoo la adeegsanayo habraacyo loogu tala-galay;

## CUTUBKA 4AAD
## DAMBIYADA IYO CIQAABAHA

### Qodobka 15aad
### Dambiyada ka dhalan kara Sharcigan

1. Qof kasta waxa uu noqon karaa dambiile haddii uu:
   b. Si ula kac ah u sameeyo qoraal been ah, oraah ku jirta warbixin, diiwaan, dukuminti lagu tilmaamay sharcigan, ama amar ay soo saartay Hay'adda SARIS, iyada oo la raacayo sharcigan iyo shuruucda kale ee dalka.
   t. Si ula kac ah u beeniya ama u baabi'iya warbixin ama dukumintiyo kale ee lagu tilmaamay xeer nidaamiyayaal ay soo saartey Hay'adda SARIS.
   j. Si ficil ah ugu xadgudba qodobada sharcigan, khatar geliya nolosha iyo jiritaanka qof ahaaneed ama khatar geliya hanti ama deegaanka.

2. Qof kasta oo xannibaad ku sameeya baare (inspector) ama falanqeeye (Analyst) wuxu gelaya dambi haddii:
   b. Cudurdaar la'aan uu carqaladeeyo, dhibaateeyo ama ka horjoogsado baare ama falanqeeye isaga oo kujira fulinta awoodahiisa sida ku xusan Sharcigaan;
   t. Si ula-kac ah ama taxaddar la'aan ah u sameeya bayaan ama soo-saaro dukumiinti been ah kaasoo marin-habaabin ku ah baaraha ama falanqeeyaha ku hawlan gudashada waajibaadkiisa si waafaqsan Sharcigan.

3. Dembiyada ay gasho shirkad.
   b. Haddii dambi ay gashay shirkad leh shakhsiyad qaanuuneed la caddeeyo in lagu galay ogolaanshaha ama qarinta, ama loo aanayn karo diidmo ka timid Agaasime, Maareeye, Xoghaye ama Sarkaal kale oo ka tirsan Shirkadda ama qof kasta oo ku shaqeynayay jagadaas, shirkadda ayaa gashey dembigaas waxana lagu oogayaa dacwad ciqaabeed si waafaqsan sharcigan.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

4. Dambiyada la xiriira wasakhaynta deegaanka:

5. Qof kasta oo deegaanka ku wasakheeya kiimikooyinka beeraha wuxuu galayaa fal-dambiyeed.

## Qodobka 16aad
## Ciqaabaha Dambiyada ku xusan Sharcigan

Dambi kasta ee ka dhasha jabinta sharcigan waxaa lagu dhaqayaa Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed iyo Xeerarka kale ee dalka.

## Qodobka 17aad
## Caddeymo

1. Dacwad kasta oo lagu qeexey Sharcigan waxaa caddeyn u noqonaya:
   b. Muunad Kiimikooyin Beereed oo uu soo qaaday baare, kana kooban walxo isku mid ah isla markaana lehna sifo iyo tayo isku mid ah, marka loo eego walxihii laga soo dhex qaaday;
   t. Shahaado falanqeyn oo uu saxiixay falanqeeye.

## Qodobka 18aad
## Mas'uuliyadda Dambiga ee Maareeyayaasha, Wakiillada iyo Shaqaalaha

1. Mar kasta oo Maamule, Wakiil ama Shaqaale soo-saare, soo-dejiye ama ganacsade diiwaan gashan ee Kiimikooyinka Beeraha uu sameeyo ama uu ka tago sameynta ficil kasta oo dhib keena wuxuu ku noqonaya dambi soo saaraha, soo-dejiyaha ama milkiilaha wuxuuna ku muteysanayaa ciqaab sida xusan sharcigan ama shuruucda kale ee dalka.

2. Markasta oo soo-saare, soo-dejiye , mulkiile, ama ganacsade diiwaan gashan ee Kiimikooyinka Beeraha uu sameeyo ama uu ka baaqsado hawl weliba oo noqon karta dembi wuxuu ku muteysanayaa ciqaab sida ku xusan sharcigaan ama shuruucda kale ee dalka.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

### Qodobka 19aad
### Amarro Dhameystira Xukunka

1. Maxkamaddu marka ay xukumeyso qof kasta oo dembi ku galey sharcigan ama xeer nidaamiyayaasha hoos yimaada, waxay qaadaysaa tallaabo kasta oo ay u aragto inuu ku haboon yahay, sida:
   b. La wareegidda ama tuuridda/ka takhalusidda Kiimikooyinka Beeraha;
   t. Bixinta qayb ka mid ama dhammaan kharashaadka iyo lacagaha kale ee ku baxa falanqeynta ( Analysis) Kiimikooyinka Beeraha;
   j. la wareegid hanti(lacag, dukumiintiyo, xafiisyo ama dhisme, baabuur, farshaxan, doonyo ama qalab) loo adeegsaday fulinta dembiga;

## CUTUBKA 5AAD
## QODOBO KALE OO ISKU DHAFAN

### Qodobka 20aad
### Dhiirigelinta wax soo sarka Gudaha

Wasiirka Maaaliyadda asagoo ka duulaya talo soo jeedinta Hay'adda SARIS wuxuu hirgelinayaa siyaasadaha cashuureed ee ku saabsan Kiimikooyinka beeraha ee laso dejiyo si loo dhiiragliyo warshadaha gudaha.

### Qodobka 21aad
### Xeer Nidaamiyayaal

SARIS iyadoo la tashaneysa Wasaaradda, waxay soo saaraysaa xeer-nidaamiyayaasha kiimikooyinka beeraha si waafaqsan sharcigan.

### Qodobka 22aad
### Dib-u-eegis

Sharcigaan waxaa dib-u-eegis lagu sameyn karaa xilli kasta oo baahi lagama maarmaan ah ay timaado kadib markuu dhaqan-galo;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

## Qodobka 23aad
## Baabi'in

Sharcigaan waxa uu baabi'inayaa laga billaabo marka uu dhaqan-galo Sharci lambar. 49 ee 17 July 1971 kuna saabsan sunta cayayaanka ama xeer kasta oo kale oo kahor imaanaya ama aan la socon karin sharcigan.

## Qodobka 24aad
## Dhaqan-galka Sharciga

Sharcigaan waxa uu dhaqan-gelayaa marka uu ansixiyo Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, uuna Saxiixo Madaxweynaha JFS, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda FS.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**SHARCI LR.34** **TAARIIKH: 24-TA DISEEMBAR 2024**

**SHARCIGA BADBAADADA DHIR-BEEREEDKA & TAKOORKA**

**MADAXWEYNAHA J.F.S,**

| | |
|---|---|
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG. |
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobka 82aad, Faqradda 3aad ee Dastuurka KMG. |
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG. |
| **MARKUU ARKAY:** | Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee summaddeedu tahay **XGGSH/654/B11/24**, ku taariikheysan **23/12/2024**, ujeeddaduna tahay Soo Gudbin Ansixinta''Hindisaha Sharciyeedka Badbaadada Dhir-Beereedka & Takoorka. |
| **MARKUU TIXGELIYAY:** | Baahida loo qabo in la meel mariyo sharcigan. |

FR

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxaa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga Badbaadada Dhir-Beereedka & Takoorka.

**Qodobka 2aad**

Waxa uu sharcigan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIWAAN NO: HAN-012-2025
TAARIIKH: 10-05-2025
SAXIIX
AVV. Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
29 MAR 2025
BY: Fadumo Mohamed Omar Sahal
SAACAD ______ SAXIIX ______

**Madaxweynaha J. F.S.**
**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

**JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA**

**WASAARADDA BEERAHA IYO WARAABKA XFS**

# SHARCIGA BADBAADADA DHIR-BEEREEDKA IYO TAKOORKA

**NOFEEMBAR 2024**

# Tusmo;


CUTUBKA 1AAD ..... 1
QODOBADA GUUD ..... 1
Qodobka 1aad ..... 1
Magaca Sharciga ..... 1
Qodobka 2aad ..... 1
Baaxadda iyo Ujeedada Sharciga ..... 1
Qodobka 3aad ..... 1
Eray-Bixin ..... 1
CUTUBKA 2AAD ..... 5
MAAMULKA ..... 5
Qodobka 4aad ..... 5
Maamulka badbaada dhir-beereedka & takoorka ..... 5
CUTUBKA 3AAD ..... 6
BAARAYAASHA IYO BAARITAANKA ..... 6
Qodobka 5aad ..... 6
Magacaabista Baarayaasha fayadhowrka Dhir-beereedka iyo takoorka ..... 6
Qodobka 6aad ..... 7
Hawlaha baaraha fayadhowrka Dhir-beereedka ..... 7
Qodobka 7aad ..... 8
Awoodaha Baaraha ..... 8
Qodobka 8aad ..... 8
Qaadashada Aqoonsiga ..... 8
Qodobka 9aad ..... 9
Faafinta xogaha daahsoon ..... 9
Qodobka 10aad ..... 9
Codsi wada shaqayn iyo caawinta maamulada ..... 9
Qodobka 11aad ..... 9
Ka hortag dacwad ku oogid ..... 9
CUTUBKA 4AAD ..... 10
XAKAMEYNTA DULINNADA ..... 10
Qodobka 12aad ..... 10
Xakameynta iyo ciribtirka dulinnida ..... 10
Qodobka 13aad ..... 10
Ka laabasho goob hore loo takooray ..... 10
Qodobka 14aad ..... 11
Ku dhawaaqista goobaha aan dulinka lahayn ee wax soo saarka ..... 11
Qodobka 15aad ..... 11
Ku dhawaaqista goobaha ay ku yar yihiin dulinnada ..... 11
Qodobka 16aad ..... 11
Dulinno Takooran ..... 11
Qodobka 17aad ..... 12


JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
جمهورية الصومال الفيدرالية
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
مجلس الشيوخ
AQALKA SARE

Dulin Takoorka gudaha dalka ....... 12

Qodobka 18aad ....... 12

Baaritaanka Dhir-beereedka la Cayimay ....... 12

Qodobka 19aad ....... 13

Qaadista khidmadda iyo ogolaanshaha bixinta ....... 13

Qodobka 20aad ....... 13

Xadidaadda dhaq-dhaqaaqa dhir-beereed ....... 13

Qodobka 21aad ....... 13

Mamnuucista raridda Dhir-beereedka ....... 13

Qodobka 22aad ....... 13

Joojin rarid gaadiid ....... 13

Qodobka 23aad ....... 13

Qubis ayadoo la adeegsanayo burburin ....... 13

Qodobka 24aad ....... 14

Xakameyn Deg-deg ah ....... 14

Qodobka 25aad ....... 14

Tallaabooyinka ay SARIS qaadeyso inta lagu jiro xaalad deg-deg ah ....... 14

Qodobka 26aad ....... 14

Mumnuucidda kutir-kuteen ....... 14

CUTUBKA 5AAD ....... 15

NIDAAMINTA SOO DEJINTA IYO DHOOFINTA ....... 15

Qodobka 27aad ....... 15

Tallaabooyinka soo dejinta ee fayadhowrka Dhir-beereedka ....... 15

Qodobka 28aad ....... 16

Caddeynta walxaha soo gala dalka ....... 16

Qodobka 29aad ....... 16

Fasax soo dejin iyo shahaado fayadhowr dhir-beereed ....... 16

Qodobka 30aad ....... 16

Baarista walxaha la soo dejiyo ....... 16

Qodobka 31aad ....... 17

Kharashka daaweynta ee shixnadda la soo dejiyo ....... 17

Qodobka 32aad ....... 17

Mamnuucid soo dejin Ciid ....... 17

Qodobka 33aad ....... 17

Xaddidaadda soo dejinta ....... 17

Qodobka 34aad ....... 18

Baarista Dhir-beereedka lasoo dhoofiyo, wax soo-saarka Dhir-beereedka iyo Waxyaabaha la xakameeyey ....... 18

Qodobka 35aad ....... 19

Qubidda, Burburinta iyo Nadiifinta ....... 19

Qodobka 36aad ....... 19

Wargelin ama ogeysiin amar ayadoo la adeegsanayo xogta lagu gudbiyo aaladaha elektaroonigga ah ....... 19

Qodobka 37aad ....... 19

Magacaabista goobta la rabo in la indho-indheeyo lana baaro ....... 19




JAMHUURIYADDA FEDERAAL KA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

Qodobka 38aad ..... 20
Waxyaabaha si ku meel gaar ah ugu jira dhul biyoodka dalka (teritorial water) ..... 20
Qodobka 39aad ..... 20
Dhir-beereedka iyo walxaha soo gala dalka ee ay wataan dadka safraya ..... 20
Qodobka 40aad ..... 20
Shahaadada dhoofinta ee fayadhowrka Dhir-beereedka ..... 20
Qodobka 41aad ..... 21
Baakadaynta habboon iyo kharashka baaritaanka ..... 21
Qodobka 42aad ..... 21
Qaababka dhoofinta ..... 21
Qodobka 43aad ..... 21
Dib u dhoofinta shixnadda ..... 21
Qodobka 44aad ..... 22
Shixnad gudbeysa ..... 22
CUTUBKA 6AAD ..... 23
QODOBO ISKU DHAFAN ..... 23
Qodobka 45aad ..... 23
Magdhowga khasaaraha ..... 23
Qodobka 46aad ..... 23
Racfaan ..... 23
Qodobka 47aad ..... 23
Gaadiid aan laheyn ruqsad ..... 23
Qodobka 48aad ..... 24
Dambiyada ..... 24
Qodobka 49aad ..... 24
Ciqaabaha Dambiyada ku xusan Sharcigan ..... 24
Qodobka 50aad ..... 24
Sanduuqa dhaqaalaha deg-dega ah ee badbaadada Dhir-beereedka ..... 24
Qodobka 51aad ..... 25
Xeer nidaamiyaal ..... 25
Qodobka 52aad ..... 25
Dib u eegista ..... 25
Qodobka 53aad ..... 25
Baabi'in ..... 25
Qodobka 54aad ..... 25
Dhaqangalka Sharciga ..... 25

JAMHUURIYADDA FEDERAAL KA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
جمهورية الصومال الفدرالية
THE UPPER HOUSE
مجلس الشيوخ
AQALKA SARE

# CUTUBKA 1AAD
# QODOBADA GUUD
## Qodobka 1aad
## Magaca Sharciga

Sharcigan waxaa lagu Magacaabaa Sharciga Badbaadada Dhir-beereedka iyo Takoorka

## Qodobka 2aad
## Baaxadda iyo Ujeedada Sharciga

1. Si waafaqsan Qodobada 25, 27, 45,52 iyo 126 ee Dastuurka kumeel-gaarka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Sharcigan waxaa looga dhaqmi doonaa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

2. Ujeedada sharcigaan waa:
   b) in la xaqiijiyo xasiloonida iyo hurumarka wax-soo-saarka beeraha, iyadoo laga hortagayo soo galida iyo faafidda dulinnada
   t) fududeynta ganacsiga caalamiga ah iyo suuq u helida wax soo saarka dhir-beereedka Soomaaliyeed iyo dalagyada ka soo go'a.

## Qodobka 3aad
## Eray-Bixin

Ayada oo la eegayo ujeedada sharcigan, haddii aan si kale loo dhigin, ereyada soo socda waxaa loo qaadanayaa mid walba qeexidda ku hor qoran:

1. "**Dhul Beereed**" waxaa loola jeeda beeraha, dhul ku habboon beerashada, dhul geed-mirood, dhul daaqsimeed iyo goobaha dhir- beereedka lagu beero.

2. "**Meelaha dulinku ku yaryahay**" waxaa loola jeedaa qayb ka mid ah goob ama dhammaan ee dal ama dalal dhawr ah mas'uuliyiinteedu ay u aqoonsadeen inuu dulin gaar ah ku noolyahay/ dagan yahay si heer hoose oo u baahan la socod ama qaadista tillaabooyin xakameyn.

3. "**Sarkaal idman**" waa sarkaal ka tirsan Hay'adda Sharciyeynta Adeegyada & Baaritaanka Beeraha Soomaaliyeed

4. "**SARIS**" Waxaa loola jeedaa Hay'adda Sharciyeynta Adeegyada & Baaritaanka Beeraha Soomaaliyeed "Somali Agricultural Regulatory and Inspection Services (SARIS)".

5. "**Hannaanka ku xakameynta noole**" Waxaa loola jeedaa ku xakameynta dulinka cadow dabiici ah, ama wax liddi ku ah, la tartama ama noole kale.

6. "**Aaga/dhulka la xadidey**" waxaa loola jeed aag ku hareereysan goob si gaar ah

loogu talagalay ujeedooyin fayodhowr dhireed ama tallaaabooyin kale si loo yareeyo suurto-galnimada faafidda dulinka la beegsanayo si uusan u gelin ugana soo bixin aagga wareegsan.

7. **"Shixnad"** waxaa loola jeeda cadadka dhir-beereedka, dalagyo ama walxa kale oo la geynayo dal kale oo lagu safrinayo shahaadada fayadhowrka oo kaliya taasoo ka koobnaan karta badeecooyin kala duwan.

8. "**Shixnad gudbeysa**" waxaa loola jeedaa badeeco ka gudubta waddan aan loo soo dhoofin, laakiin laga yaabo in la marsiiyo tilaabooyin fayadhowr dhireed.

9. "**Xakameynta**" waxaa loola jeeda adeegsiga tilaabooyin fayadhowr dhireed si looga hortago faafidda dulin gudaha ama hareeraha aagga wax yeeleysan.

10. "**Doorsoon**" waxaa loola jeeda marka ay soo galaan dulinno ama wax kale oo uu sharcigan diidayo badeeco, bakhaarada, gaadiid iyo kunteenar.

11. "**Xannibbid**" waxaa loola jeedaa ilaalinta shixnad meel gaar ah lagu xiro taas oo ah tilaabo fayadhowr dhireed ah.

12. "**Maareeye**" Waxaa loola jeeda madaxa ugu sareeya Hay'adda Sharciyeynta Adeegyada & Baaritaanka Beeraha Soomaaliyeed).

13. "**Warbixin Elektaroonig ah**" waxaa loola jeeda nidaam isku duba ridaya macluumaad, kaas oo u gudbinaya xogta si elektoroonig ah (lehna agab ku shubis/ka shubis si isku mid ah) oo ay adeegsato hay'adda SARIS kuna xiran khadka isgaarsiinta Elektarooniga ah.

14. "**Tallaabo deg-degg ah**" waxaa loola jeedaa talaabo fayadhowr dhireed, taasoo ku abuuranto si deg-deg ah markii la wajahayo xaalad fayadhowr dhireed cusub ama lama filaan ah.

15. "**Aaga khatarta ah**" waxaa loola jeeda deegaanka laga soo sheegay inuu dulin ka dillaacay ama ka dhashay kaas oo joogistiisu keeni karto bur-bur ilo-dhaqaale oo muhiim ah.

16. "**Ciribtirka**" Waxaa loola jeeda adeegsiga tilaabooyin fayadhowr dhireed looga ciribtirayo dulin ku sugan goob

17. "**Rusqadda soo dhoofinta**" waxaa loola jeeda qoraal rasmi ah oo ogolaanaya soo dhoofin badeeco ayadoo la waafijinaayo shuruudo u gaar ah fayadhowr dhireed.

18. "**Baaris**" waxaa loola jeeda baaris muuqaal rasmi ah ee dhir-beereedka, waxyaabaha dhir-beereedka laga sameeyo iyo waxyaabaha uu xeerku qorayo, si loo ogaado in

dulin uu jiro iyo in kale sida waafaqsan xeerka badqabka Dhir-beereedka sharcigaan.

19. **"Baare"** waxaa loola jeeda qof lagu magacaabey si waafaqsan sharcigan si uu u noqdo baare ujeedooyinka sharcigan;

20. **"IPPC"** Waxaa loola jeedaa Heshiiska Caalamiga ah ee Badbaadada Dhir-beereedka (International Plant Protection Convention-IPPC)

21. "ISPM" waxaa loola jeedaa Halbeegyada Caalamiga ah ee Tillaabooyinka Faydhowrka Dhir-beereedka (International Standards for Phytosanitary Measures -ISPM)

22. **"Wasaarad"** Waxaa loola jeedaa Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka ee JFS;

23. "**Wasiir"** waxaa loola jeedaa Wasiirka beeraha iyo Waraabka xukuumadda Federaalka Soomaaliya;

24. **"Dulin aan la takoorin"** waxaa loola jeedaa dulinka dabiiciga ah ee aagu leeyahay.

25. "**Xakameyn Rasmi ah**" waxaa loola jeeda xoojinta firfircoon ee xeerarka badqabka dhir-beereedka waajibka ah iyo adeegsiga habraacyada faydhowrka dhir-beereedka ujeedaduna tahay ciribtirka ama xakameynta dulinada la takooro ama kuwa aan la takoorin.

26. "**Dulin**" waxaa loola jeeda noole kasta (dhir, xayawaan, cayayaan, jermis, iwm) ee jooga goob iyo waqtiga aan loo baahneyn waxyeelana ugu geysan kara si toos ah ama dadban dhir, dalag, xoolo iyo dadkaba.

27. "**Aag aan dulin laheyn**" waxaa loola jeeda aag aan laga helin dulin waxyeello geysta sida lagu xaqiijay cilmi-baaris.

28. "**Aag wax soo saar aan dulin laheyn**" waxaa loola goob wax soo saar, taas oo aan laga helin dulin oo lagu xaqiijiyey cilmi-baaris laguna sheegay in si wanaagsan looga shaqeeyay goobtaas mudadii loogu talogalay.

29. " **Falanqeyn halis dulin**" waxaa loola jeeda geedi socodka lagu qiimeeyo xaqiijinta dhaqaaleed, bayolojiyeed ama cilmi-baariseed si loo ogaado inuu noole dulin yahay iyo in kale, loona baahan yahay in la takooro lana qaado tillaabooinka fayodhowr dhireed ee ku habboon.

30. "**Shahaadada Fayadhowrka dhir-beereedka**" waxaa loola jeeda shahaado ama warqad khaas ah, dukumiinti elektaroonig ah oo waafaqsan shahaadooyinka badqabka shixnadda. Sidoo kalana, cadeyneysa in la soo baaray oo ay buuxisay sharuudihii looga baahnaa wax soo dhoofinta.

31. **"Tillaabada fayadhowrka Dhir-beereedka"** waxaa loola jeeda wax kasta oo

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

sharci, xeer ama habraac rasmi ah lehna ujeeddo ka hortegid soo gelid ama faafid dulinno takooran ama xadeynta saamaynta dhaqaale ee dulinnada aan la takooray

32. "**Xeerka nidaamiye fayadhowrka Dhir-beereedka**" waxaa loola jeeda habraac qodobo ku qotoma sharci oo lagu ilaalinayo faydhowrka dhir-beereedka, beeraha, xoolaha iyo dadka,sidoo kalena, looga hortagayo faafidda dulinka khatarta ah laguna takoorayo, ilaalinayo dulinka aan la takoorin ee loo baahan yahay.

33. "**Wax soosaarka dhir-beereedka**" waa walax asalkooda dhir kasoo jeeda lana warshadeyn (sida badar ama xabuub) iyo kuwa warshadeysan ee noocooda ama habayntooda darteed, abuuri karta halista soo gelin iyo faafin dulino.

34. "**Marin soo gelid**" waxaa loola jeeda garoomada diyaaradaha, dekedaha ama xaduudaha dhulka oo si rasmi ah loogu talagalay soo dejinta badeecadaha ama soo gelidda rakaabka.

35. "**Takoor**" waa xannibid rasmi ah ee walxaha la waafajiyo xeerarka lagu indha-indheeyo laguna cilmibaaro ama lagu sameeyo baaritaan, hubin ama daaweyn dheeri ah.

36. "**Aag takooran**" waa goob dhexdeeda uu ku jiro dulin la takooro si rasmi ahna loo xakameynayo

37. "**Dulin takooran**" waa dulin dhibaato weyn ee dhaqaale u geysan kara goobta uu ka jiro iyo meesha uusan ka jirin ama uu ka jro laakin uusan aad ugu faafin.

38. "**Waxyaabaha la xakameeyay**" waxaa loola jeedaa wax kasta oo ah dhir, dalag, bakhaar, baakad, gaadiid, weel, ciid iyo wax kasta oo noole ah, ama gabbaad u noqon kara ama fidin kara dulinnada loogu baahan yahay tillaabooyinka fayadhowr-dhireedka, gaar ahaan meelaha ay isaga gooshaan safarrada caalamka.

39. "**Maareynta dulin aan la takoorin**" waxaa loola jeeda marka dulinka aan la takoorin uu dhir-beereedka ku jiro ama fuulo, ee la doonayo in la isticmaalo dhirtii, dhir-beereedka kaas oo ah mid leh saameyn dhaqaale isla markaana lagu maaraynayo isla goobta laga soo dhoofinayo dhirta.

40. "**Xadadista dulinka**" waxaa looga jeedaa dulin la takooray iyo midka aan la takoorin.

41. "**Walxaha ciidda**" waxaa loola jeeda ciidda dhammaan ama qeyb ahaan kasoo jeedda lakabka sare ee oogada dhulka oo tiiriya nolosha dhir-beereedka.

42. "**Sahminta**" waxaa loola jeedaa geedisocod rasmi ah oo lagu ururiyo laguna keydiyo xogta eray kasta oo aan si gaar ah loo xusin waxaa lagu qeexaa si waafaqsan Heshiiska Caalamiga ah ee Badbaadada Dhir-beereedka International Plant Protection Convention (IPPC) iyo Halbeegyada Caalamiga ah ee Tillaabooyinka

Faydhowrka Dhir-beereedka - International Standards for Phytosanitary Measures (ISPMs).

**CUTUBKA 2AAD**
**MAAMULKA**
**Qodobka 4aad**
**Maamulka badbaada dhir-beereedka & takoorka**

1. Hay'adda SARIS ayaa leh masuuliyadda inay kormeerto, maamusho ama hirgeliso ku dhaqanka sharcigan

2. Hawlaha waxaa kamid ah balse aan ku koobneyn:
   b) Soo saaridda/bixinta Shahaadooyin ayadoo la tixraacaayo xeerarka fayadhowr dhireed ee waddanka shixnadaha soo dhoofsanaya.
   t) Sharciyeynta dhamman walxaha la xiriira badbaadada Dhir-beereedka.
   j) Maamulidda dhammaan walxaha/arimaha la xiriira hababka badqabka iyo fayadhowr dhireed hoostaga heerarka badqabka iyo fayadhowr dhireed ee Ururka Ganaciga Adduunka (World Trade Organization)
   x) Sharciyeynta soo dhoofinta iyo dhoofinta dhir-beereedka iyo walxaha laga soo saaro.
   kh) La socoshada dhir-beereedka koreysa oo ay ku jiraan kuwa la beerto iyo kuwa keymaha ku yaala iyo walxaha dhir-beereedka laga soo saaro ee ku jira bakhaarada ama saaran gaadiidka, gaar ahaan taas oo u jeedku yahay soo gudbinta warbixin ku saabsan joogis, dilaac, faafid dulin ama noole dhib-geysta iyo xakameyntiisa;
   d) Fulinta tijaabada/baaritaanka abuurka, dulindilayaasha, biyaha, ciida, bacrimiyayaasha iyo baaritaannada kale ee dalka soo gelaya ee la xiriira ayadoo la adeegsanayo sheybaar diiwaan gashan;
   r) Bixinta adeegyada fududeeya gacancsiga; fasax soo dhooofin, adeegyada fayadhowr iyo shahaado baaritaan;
   s) Baaritaanka shixnadaha dhir-beereedka iyo walxaha laga soo saaro dhir-beereedka ee isaga goosha caalamka ama haddii ay suura gasho baaritaanka walxaha sharciga xeerka qoran, gaar ahaan ujeedo ka hortag soo gelid ama faafid dulin dal gudihii;
   sh) Hirgelinta iyo xoojinta xeerarka la xiriira badqab-noole oo ay ka mid yihiin soo gelidda, isticmaalka noole hidisidihiisa la bedeley, cayayaanada, noolayasha il-maqabatada ah, walxaha dhir-beereedka laga soo saaro.
   dh) Diinwaangelinta iyo ruqsad-siinta dhammaan kuwa ka ganacsada soo

dejinta abuurka, kuwa soo dhoofsada.

c) Diinwaan gelinta iyo ruqsad-siinta dhammaan kuwa dhoofiya iyo kuwa soo dhoofiya waxyaabaha la xiriira beeraha ee dibadda dalka looga keenayo.

g) Amridda jeermis- dilid shixnad dhireed, walxaha laga soo saaro dhir-beereedka si loo xaqiijiyo in ay waafaqsanyihiin xeerarka iyo shuruudaha loo dejiyey .

f) Ilaalinta goobaha khatarta ugu jira dabargo'a iyo magacaabista, daryeelka iyo isha-ku-haynta goobaha dulinka ka maran iyo kuwa dulinku ku yaryahay.

q) In ay noqoto xafiiska uga wakiilka ah dalka dhammaan xeerarka la xiriira badbaadada dhir-beereedka, dulin dile, bacrimin iyo badqab-noole ee heer gobol iyo heer caalami.

k) Fulinta baaritaan khatar dulin

l) Iyada oo adeegsaneyso habab ku haboon in ay xaqiijiso amniga fayadhowr dhireed ee shixnadaha ka dib marka shahaadada la baxiyo, bedelka iyo ka hortagga dib-ka-qurmidda dhoofinta ka hor.

m) Tababaridda iyo dhisidda aqoonta shaqaalaha badbaadada dhir-beereedka

n) Qaybinta warbixin ku saabsan dulinno la xakameeyey ee gudaha dalka iyo hababka looga hortagi karo laguna xakameyn karo.

w) Cilmi-baarista iyo baaris ee ku saabsan badbaadada dhir-beereedka

h) Ogeysiinta habab fayadhowr dhireed si waafaqsan shuruuudaha loo dejiyey heshiisyada heer gobol iyo heer caalami

y) Siinta warbixinta ayadoon la weydin wax kharash ah taas oo ku saleysan kala bedelasho, wixii khuseeya xeerarka soo dejinta iyo dhoofinta ee dhaqan galey, shuruudaha farsamo ee Dhir-beereedka iyo walxaha dhir-beereedka laga soo saaro iyo walxaha la xakameeyey, ka dib marka uu codsado urur walba ee badbaadada dhir-beereedka heer qaran, gobol ama caalami.

bb) U gudbinta warbixinnada ururada badbaadada Dhir-beereedka ee dal walba iyo u gudbinta wixii is bedel ah Xoghayaha Xeerka Caalamiga ah ee Badbaadada Dhir-beereedka (IPPC).

**CUTUBKA 3AAD**
**BAARAYAASHA IYO BAARITAANKA**
**Qodobka 5aad**
**Magacaabista Baarayaasha fayadhowrka Dhir-beereedka iyo takoorka**

1. Maareeyaha hay'addda SARIS, ayaa magacaabaya baarayaal ku habboon, oo u

qalma fulinta ujeedada sharcigan, ayada oo ansixinayaan Golaha Hagista (Board of Directors) hay'adda.

2. Qofka lagu magacaabay si waafaqsan faqrada 1aad, kuma lug yeelan karo wax hawl ah oo la xiriirta soo dejinta, dhoofinta, soo-saarka, ka-shaqaynta, iibinta ama qaybinta dhir-beereed.

3. Baaraha marka la magacaabo ka dib, waa inuu dhaartaa inta uusan waajibaadkiisa guda gelin.

4. Haddii uu gudan waayo waajibaadkiisa shaqo, waxaa lagala noqonayaa ruqsadda.

**Qodobka 6aad**
**Hawlaha baaraha fayadhowrka Dhir-beereedka**

Baarayaasha fayadhowrka dhir-beereedka masuuliyadda laga doonayo waa sida soo socota:

1. In ay baaraan dhulbeereed, dhir-beereedka, dalagga, noolaha faa'idada leh, iyo walxaha la xakameeyey, kuwaas oo ku jira kayd ama ah kuwa safraya si loo soo gudbiyo jiritaanka, dillaacitaanka iyo faafitaanka dulinno la xakameeyey.

2. In ay baaraan shixnidaha dhireed, dalagyada, noolaha faa'idada leh iyo walxaha la xakameyey ee ka soo dega ama loo diyaarey in ay ka dhoofaan dalka.

3. Dalbaan/weydiistaan daaweynta shixnad dhireed, dalaga ama walxaha la xakameeyey kuwaa oo la rabo in laga soo dejiyo ama laga dhoofiyo dalka sidaas si la mid ah konteenarada iyo goobaha alaabta lagu xirxiro si loo dhoofiyo.

4. Hubinta in si fiican looga takhallusay haraadiga walxaha ee:
   (b) Gaadiidka imaanaya dalka.
   (t) Goobaha/dhismayaasha lagu hagaajiyo lagu gubo qashinka dibada laga keeno.

5. Bixinta shahaadooyinka fayadhowrka dhir-beereedka.

6. In ay weydiiyaan qof walba si loo baaro ama ay ka qaadaan nuqullada buugaagta, sharciyada rarista gaadiidka dukumintiyada leh tilmaamaha ama dukumintiyo kale ah oo la xiriira sharcigan iyo xeernidaamiyayaasha hay'adda.

7. Iyo shaqooyinkii kale oo loo xilsaaro.

## Qodobka 7aad
## Awoodaha Baaraha

1. Baaraha oo ujeedkiisu yahay fulinta howlihiisa sida ku xusan sharcigan awoodihiisa waa:
   b) Inuu baaro ama galo dhul, dhisme, bakhaar, xafiis ganacsi, markab, tareen, diyaarad, ama dhir-beereed, kartoonno, alaab iyo kunteenaro haddii ay jirto sabab uu u arko inuu galay dulin isla markaana su'aal weydiiya qofka shaqada ku leh ama muunad ka qaado dhir-beereedka, kartoonada alaabta ama kunteenarada ay khuseyso, mana bixin doono wax kharasha ah oo magdhow u ah muunadii la qaadey si loo baaro.
   t) Inuu amro qof walba oo leh ama maamula dhir-beereed, qalabka wax lagu baakadeeyo ama konteenarada, dhismayaal, bakhaar, xaafiis ganacsi, markab, tareen ama diyaarad inuu jeermis-dilo/nadiifiyo, haddii uu ka shakiyo in ay jiraan dulinno kuwaas oo loo sababeynayo baaritaan sida ku xusan xarafka (b) iyo marka lagama maarmaan tahay inuu sameeyo xakameyn iyo ka hortag faafid dulin.

2. Awoodda baaraha marka uu galo dhismooyin, su'aalana weydiiyo soona qaado muunad sida ku xusan faqradda 1aad looma fasiri karo dambi baaris la soo ansixiyey.

3. Qof walba oo u diida gelitaanka baaraha ka shaqeynaya qodobkan ama ka horjoogsada baaritaanka ama isagoo si cudurdaar la'aan ah ugu guul darreysta inuu soo saaro dhir-beereedka ama qalabka si loo baaro, ama dukumenti kasta oo looga baahdo inuu soo saaro sida ku xusan qodobkan, waxuu galayaa dembi.

4. Qofna xaq uma yeelan doono in la siiyo lacag ama magdhow qaddarka dhir-beereedka ee muunaad ahaan loo qaatay sida ku xusan qodobkan;

## Qodobka 8aad
## Qaadashada Aqoonsiga

1. Baaraha waxaa la siinayaa aqoonsi leh sawirka iyo darajada baaraha iyo sumadda SARIS marka loo magacaabo baare si uu howshiisa uga guto isla markaana uu sitaa marka uu galayo goob walba, dhismooyin, gaari ama markab.

2. Kaarka ama Aqoonsiga waa in la tusaa dadka ay qusayso marka baarayaashu ay adeegsanayaan awoodooda iyadoo la raacayo tilmaamaha faqradda 1aad ee qodobka 7aad, ama markii uu ka codsado qofka ay khusayso.

3. Qofka la macaamilaya baaraha waa inuu weydiiyaa baaraha inuu tuso aqoonsigiisa oo ay ku caddaahay macagiisa iyo darajadiisa.

4. Mulkiilaha ama qof kasta oo mas'uul ka ah goob kasta, dhismooyin lagu xusay faqrada 1aad ee qodobkan iyo qof kasta oo laga helo dhismaha ama goobta waa inuu siiyaa baaraha dhammaan caawimaadda maangalka ah ee u suurtagelinaya baarayaasha inay ku fuliyaan waajibaadkooda shaqo sida ku xusan sharciga ama xeer nidaadmiye lagu sameeyay sharcigaan.

## Qodobka 9aad
## Faafinta xogaha daahsoon

1. Looma ogala qofka u xilsaaran fulinta qodobbada sharcigaan inuu soo bandhigo xog kasta oo lagu helo gudashada hawlaha sharcigan marka laga reebo ujeeddada gudashada waajibaadkiisa ama marka ay u baahato maxkamad ama sharci qoran.

2. Qof kasta oo jebiya faqradda 1aad wuxuu gelaya dembi sida ku xusan xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.

## Qodobka 10aad
## Codsi wada shaqayn iyo caawinta maamulada

1. Maareeyaha ayaa haddii ay dhacdo in ay lagama-maarmaan noqoto fulinaya xakameyn degdeg ah, sida ku xusan Qodobka 25 farqadiisa 1aad ee badbaadada dhir-beereedka iyo shuruucda takoorka, waxa uuna ka codsan karaa dadka deegaanka, beeraleyda, iskaashatooyinka, ama shirkadaha xakameynta ee gaarka loo leeyahay si ay uga qayb qaataan howlaha xakameynta.

2. Inta ay shaqada ku gudo jiraan baarayaasha waxa ay u yeeran karaan sarkaal dowladeed oo khibrad u leh ama mid shacab ah.

3. Baarayaasha badbaadada waxa ay cawinaad ka codsan karaan booliska, xafiiska canshuuraha, bulshada ama shaqaalaha gaarkaa ee adeega boostada iyo cidkasta oo ay awood ka heli karaan.

4. Qof kasta oo ay ha'addu ka codsato caawimaad si waafaqsan faqraddaha 1aad, 2aad iyo 3aad ee qodobkan waa inuu yimaado goobta si uu u caawiyo.

## Qodobka 11aad
## Ka hortag dacwad ku oogid

1. SARIS ama baarayaasha fayadhowka Dhir-beereedka mas'uul kama noqon doonaan wixii hallaaba ama luma waqtiga fulinta sharcigan.

2. SARIS ama baarayaasha dacwad loo guma soo oogi karo go aamo rasmi ah oo la qaatay,sidoo kale wax kasta ee la sameeyey ama la doonayey in wax lagu hagaajiyo, si

waafaqsan sharcigan.

## CUTUBKA 4AAD
## XAKAMEYNTA DULINNADA
### Qodobka 12aad
### Xakameynta iyo ciribtirka dulinnida

1. Marka ay SARIS xaqiijiso in aag ama deegaan ama goob wax soo saar uu joogo dulin la takooro, waa in ay qaado talaabooyinkan soo socda:
   b) In la tago goobta noocaas ah;
   t) In la baaro dhammaan dhir-beereedka, dalagga, noolayaasha faa'idada leh, wax-yaabaha la xakameeyey, bakhaarada, wax kasta oo wax lagu dahaaro iyo gaadiidka.
   j) In ay qaadaan muunado marka ay u arkaan lagama maarmaan
   x) In la cadeeyo aagga la takooray markii loo baahdo, lana siiyo ogeysiis qoraal ah oo loogu talogalay milkiilaha ama milkiilayaasha, qofka ama dadka degan aagaas iyo haddii loo arko inay ku habboon tahay milkiilaha/milkiilayaasha qofka ama dadka deggan dhulka ama dhismooyinka u dhow aagaas, si loo qaado tillaabo kasta oo khuseyso aaggaas, Wasaaradda ama Hey'adda SARIS, haddii ay u arkaan in ay ku habboon tahay in la ciribtiro ama la xadido faafida dulin takooran.
   kh) In la joojiyo ama la xadido dhaq-dhaqaaqa dadka, xoolaha, gaadiidka, walxaha soo galayo ama ka baxaya aagga la takoorey.
   d) Haddii milkiilaha ama milkilayaasha, qofka ama dadka deggan ay ku guuldareystaan ama aysan awoodin in ay u hoggaansamaaan mudada ogeysiiska ku xusan xarafka (x) ama tallaabo deg-deg ah loo baahan yahay khatar laga cabsi qabo awgeed, Wasaaraddu waxa ay awood u leedahay in ay u ogolaato dadku in ay raadsadaan meel kale oo ku habboon oo ay degaan; sida dhismooyinka dhul kale si loo fuliyo shuruudaha ogeysiiska.

### Qodobka 13aad
### Ka laabasho goob hore loo takooray

1. SARIS waa in ay si joogta ah ula soctaa xaaladda marka loo eego aag kasta oo la takoorey, Ayada oo mid-mid loo eegayo xaaladahaan soo socda:

   b) Dulinka la takoorey inuusan joogin goobta.
   t) SARIS marka ay garowsato in aan loo baahneyn in la sii wado takoorka qaar ama dhammaan goobaha la takoorey.
   j) Waa in la ogeysiiyaa in takoorka laga qaadey dhammaan milkiilayaasha ama dadka deggan dhulkii la takoorey iyo bulshada dariska la ah.

## Qodobka 14aad
## Ku dhawaaqista goobaha aan dulinka lahayn ee wax soo saarka

1. SARIS halkey u garato, iyada oo adeegsaneysa habab la socod ee ku haboon, in dulinku uusan ku nooleyn goob cayiman ama meel wax soo saar, inay qaado tilaabooyin xakameeyaan si goobtu u ahaato meel xor ka ah aafo ayana dhisto nidaam la socod si loo wanaajiyo joogteynta xaaladda jirta, SARIS waxa ay cadeneysaa in goobahaasi xor ka yihiin dulinka iyo caddeynta sababaha xor ahaanshaha goobaha iyo meelaha wax soo saarka.

2. SARIS waxa ay soo saareysaa shahaadooyinka goobaha iyo meelaha wax soo saarka marka uu soo dalbado milkiiluhu uuna bixiyo qarashaka baaritaanka.

3. SARIS waxay bixineysaa caddayn farsamo oo lagu caddeeyey faqradda 1aad, haddii ay ka codsato hay'ad kasta oo heer gobol ama heer caalami ah ee ka shaqeeysa arimaha badbaadada dhir-beereedka.

4. SARIS waxay sameynaysaa habraaca iyo shuruudaha la xiriira caddaynta ee joogteynta iyo ka saaridda aag ka caagan dulinka.

## Qodobka 15aad
## Ku dhawaaqista goobaha ay ku yar yihiin dulinnada

1. SARIS waxay caddeyneysaa in goobtu dulinkeedu hooseeyo marka ay jirto sabab ay u rumeysan karto in dulin aag gaar ah uu yahay mid hooseeya, ayadoo adeegsaneynsa hab lasocod wax ku ool ah, xakameyn ama joogteyn habab ciribtir ku haboon oo loogu tala galey dulinkaas ayna sameysey nidaam baaritaan si loo xaqiijiyo hooseynta dulinka.

2. Sharcigan xeer nidaamiyayaasha ka dhalanaya ayaa lagu sameynaya habraaca iyo shuruudaha la xiriira caddaynta, joogteynta iyo ka saaridda aag dulinkeedu hooseeyo.

## Qodobka 16aad
## Dulinno Takooran

1. Dulinno takooran sida ku xusan qaybtaan waa dulinno dhireed oo ay SARIS u aqoonsatey in faafidooda ay sababi karto khasaaro dhireed oo ay la socon karo mid ka mid ah kuwa soo socda:
   b) Dulinno dhireed oo aan la xaqiijin inay joogaan Soomaaliya;
   t) Dulinno dhireed oo horey u joogey qeybo ka mid ah dalka iyo saadaasha dilaacidooda ayna tahay lagama maarmaan in talaabo la qaado.

## Qodobka 17aad
## Dulin Takoorka gudaha dalka

Waxaa waajib ku ah SARIS in ay abuurto adeeg takoor oo waafaqsan qodobbada cutubkaan si looga hortago faafidda dulinno dhireed oo waqti dhow soo galey ama horayba u joogey qeyb ka mid ah dalka isla markaan ay kasoo saartaa xeer nidaamiye.

## Qodobka 18aad
## Baaritaanka Dhir-beereedka la Cayimay

1. Waxaa ku waajib ah shaqsi walba oo dhir u soo saara hab waafaqsan sharcigan (dhir beere iyo dhir mucayin ah) inuu helo baaritaanka ay fuliyaaan baarayaasha fayadhowrka dhir-beereedka ee loogu tala galey dhir mucayin oo ku taal beeraha inta lagu guda jiro xili beereedka;

2. Baarayaasha fayadhowrka dhir-beereedka waxay sameynayaan baadhitaanno dheeraad ah oo dhir-bereedka la ciyimay ka hor beerashada ama goosashada ka dib, haddii aaney ku filneyn baaritaanka gudaha ee ku xusan faqradda hore inuu xakameeyo ama ka hortago faafid dulin dhireeed.

3. Baarayaasha fayadhowrka dhir-beereedka, haddii ay u arkaan in dhir-beereedka la asteeyey ay ka madax bannaan yihiin dulinnada dhirbeereedka ay qeexdey SARIS, inuu siiyo shahaadada Baaritaanka ee dhir beeraha ay khuseeyso asagoo ku saleynayo natiijada baaritaanka.

4. Lama wareejin karo dhir-beereedka la asteeyey, lamana rari karo si loo wareejiyo ama lagamana qaadi karo meel lagu beero si loo geeyo goob kale, haddii aaney la socon shahaadada baarista sida ku xusun faqradda hore ama nuqul asal ah ama summad cadeyneysa shahaadada baarista ay bixiyeen baarayaasha fayadhowrka dhir-beereedka.

5. Baarayaasha fayadhowrka dhir-beereedka, haddii ay u arkaan in dhir-beereedka la asteeyey ay ku dhaceen dulinnada dhir-beereedka ee lagu qeexay faqaradda 3aad, natiijada baaritaanka ee ku xusan faqrada 1aad ama 2aad, inuu hakiyo baaritaanka bixiyana amar qoraal ah oo khuseeya beeraleyda taas oo fareysa in uu xakameeyo dulinnada dhir-beereedka ee khuseeya, ama qaado tallaabooyinka lagama maarmaanka ah si looga hortago faafidda;

6. Dhir beere kasta ee fuliyey amarka lagu farey faqrada 5aad asagoo raacaya tallaabooyinka xakameynta lagama maarmaanka ah waa inuu ka codsadaa baarayaasha fayadhowrka dhir-beereedka in lasii wado baaritaanka iyada oo la tixraacayo faqradaha 1aad iyo 2aad.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

## Qodobka 19aad
## Qaadista khidmadda iyo ogolaanshaha bixinta

SARIS waxay ka qaadi doonta khidmad qofka loo sameynayo baarista sida ku xusan faqradda 1aad ee qodobka 18aad (baaritaanka dhir-beereedka la cayimay), khidmaddaas oo ay SARIS kusoo saari saareyso xeer nidaamiye.

## Qodobka 20aad
## Xadidaadda dhaq-dhaqaaqa dhir-beereed

Dhir-beereedka, walxaha wax lagu baakideeyo ama konteenarada yaala degmooyinka ay qeexdey SARIS ayna magacawday in lagama maarmaan tahay in la xadido u kala gooshidda degmooyinka si looga hortago faafidda dulinno dhireed, marka laga reebo xaaladaha ay SARIS ka reebtey, looma qaadi karo degmooyin kale ogaal la'aanta baarayaasha fayadhowr dhir-beereedka ayna ogyihiin inan dulin laga helin ka dib natiijada baarista.

## Qodobka 21aad
## Mamnuucista raridda Dhir-beereedka

1. Dhir-beereedka, dulinnada dhir-beereedka ama ciidda degmooyinka lagu qeexay amar kasoo baxay SARIS kaas oo lagu mamnuucay u kala gooshidda degmooyinka si looga hortago faafidda dulinno dhireed oo ay ka mid yihiin walxaha wax lagu baakideeyo ama konteenarada, looma qaadi karo degmooyin kale,

2. Arrinka ku xusan faqradda 1aad laguma dabaqi karo haddii ay SARIS bixisey ogolaansho hore oo ah in loo isticmaalayo ujeeddo tijaabo iyo cilmi baaris.

## Qodobka 22aad
## Joojin rarid gaadiid

Baarayaasha fayadhowrka dhirtu waxa ay awoodaan, haddii ay noqato lagama maarmaan in ay ka hortagaan xadgudubka qodobka 20aad ama qodobka 21aad, ayna amraan milkiilayaasha dhir-beereedka iyo dulinnada, carrada iyo walxaha wax lagu baakideeyo ama konteenarada inaan la saarin ama laga dejiyo doon, gaari ama diyaarad.

## Qodobka 23aad
## Qubis ayadoo la adeegsanayo burburin

Baarayaasha fayadhowrka dhir-beereedka waxa ay amri karaan milkiilaha dhir-beereedka, dulinka dhir-beereedka, carrada iyo walxaha wax lagu baakideeyo ama kunteenarada, kuwaas oo loo arkay in ay jabiyeen qodobka 21aad ama qodobka 22aad si loo burburiyo waxyaabaha la xiriira, ama si iskood ah ayey ugu

burburinayaan isla goobtaas.

## Qodobka 24aad
## Xakameyn Deg-deg ah

1. Waxaa waajib ku ah SARIS inay soo afjarto ama ay ka hortagto faafidda dulinno isla markaanka ay xakameyso, haddii ay dhacdo in lasoo sheego in dulinno dhireed cusub ama kuwa horey u joogey qeybo ka mid ah waddanka ay halis gelin karaan ama faafidooda khasaare weyn u geysan karto dhir-beereed manaafacaad dhaqaale leh, ama haddii dhir-beereedka la dhoofinayo ay halis ugu jiraan dulin dhir-beereed sida ku xusan cutubkan.

2. Si loo dhaqangeliyo xakameynta sida ku xusan faqrada sare, SARIS ayadoo la tashaneysa Wasaaradda waxay soo saaraysaa ogeysiis muddo aan ka yareyn 30 maalmood gudohood kaas oo ku saabsan arrimha soo socda:
   b. Goobta iyo goorta la xakameynayo
   t. Nooca dulinnad dhir-beereedka
   j. Qorshaha xakameynta iyo habraaca la raaci lahaa
   x. Wax kastoo lagama maarmaan ah

## Qodobka 25aad
## Tallaabooyinka ay SARIS qaadeyso inta lagu jiro xaalad deg-deg ah

1. Xaaladda deg-dega ah ama xaaladda lama filaanka ah oo u muuqata in ay halis weyn ku tahay caafimaadka dhir-beereedka, SARIS waa inay qaadaa tallaabooyin degdeg ah si loo ciribtiro khatarta.

2. Mar haddii caqabadda la ciribtiro am la yareeyo, SARIS waa inay wax ka bedeshaa ama ka laabataa wixii tallaabooyin ah ee lagu qaaday faqradda kore.

3. SARIS waxay soo saareysa xeer nidaamiye iyo habraac lagu xakameynayo xaaladaha deg degga ah.

## Qodobka 26aad
## Mumnuucidda kutir-kuteen

Qofna ma faafin karo war kutiri-kuteen oo ku saabsan faafidda dulinka dhir-beereedka iyo dalagga ama waxyaabaha la xakameeyay taas oo ujeedadeedu tahay helista faa'iido uusan xaq u lahayn ama faa'ido uu u rabo qof kale.

## CUTUBKA 5AAD
## NIDAAMINTA SOO DEJINTA IYO DHOOFINTA
### Qodobka 27aad
### Tallaabooyinka soo dejinta ee fayadhowrka Dhir-beereedka

1. Si looga hortago loogana ilaaliyo dalka soo gelitaanka ama faafida dulinada, SARIS waa in ay:
   b. Qortaa ayna hirgelisaa tallaabooyinka fayadhowrka dhir-beereedka ee la xiriira soo dejinta dhir-beereedka, soo saarista dhir-beereedka iyo waxyaabaha kale ee la xakameeyay;
   t. Mamnuucdaa soo gelidda ama gacanna ku dhigtaa,dalabtaa daaweynta, burburinta ama ka saaridda waddanka shixnadaha dhir-beereedka iyo soo saarka dhir- beereedka iyo waxyaabaha kale ee la xakameeyay oo aan waafaqsaneyn tallaabooyinka fayadhowrka dhir- beereedka kuna cad xaraf (b).
   j. Mamnuucdaa ama xadiddaa soo gelidda soohdimaha dalka noolayaasha la dhalan rogey-Genitically Modified Organisms (GMO) iyo dhir-beereed halis ah oo loo arko in ay yihiin dulin la xakameeyay;
   x. Qaaddo oo ayna hirgeliso tallaabooyin deg-deg ah ee loga hortagayo soo dejinta;
   kh. Mamnuucdaa ama xaddidaa soo gelidda sooh-dimaha qaranka ee noolayaasha lagu xakameeyo dulinnada iyo noolayaasha kale ee khuseeya fayadhowrka dhir-beereedka maadaama loo aqoonsan yahay dulin xakameysan ;
   d. Diidaa ogolaashaha, kusoo rogtaana xayiraad, codsataa daweyn ama burburinta dhir-beereedka, dalagga iyo waxyaabo kale ee la xakameeyay oo aan u hoggaansanayn dawooyinka fayadhowrka dhir-beereedka ee lagu go'aamiyey sida xarafka (t); iyo
   r. Tallaabooyin kasta oo fayadhowr dhir-beereedka ah haddii loo arko muhiim.

2. Tallaabooyinka xayiraadaha ee lagu xusay Sharcigaan waxa ay ku saleysnaan doonaan falanqaynta khatarta dulinka iyo/ama waxay ku xirantahay Heerarka Caalamiga ah ee Halbeegyada Caalamiga ee Xakameynta Fayadhowrka (ISPMs).

3. Hay'adda waa inay waxa ka bedeshaa ama ay ka laabata tallaabooyinka fayadhowr dhir-beereedka ee ku xusan faqradaan haddii ay isbedelaan xaaladaha ama yimaadaan xaqiiqooyin cusub ayna u aragto in tallaabooyinkaan laga maarmi karo.

4. Hay'adda marka laga codsado waa inay caddeysaa maangalnimada shuruudaha fayadhowrka dhir-beereedka, xaddidaadda iyo mamnuucidda.

5. Dulin aan la xakameyn iyo dulin leh khatar heer qaran laguma dabaqi doono halbeegyada badqabka Dhir-beereedka. Hay'adda SARIS ayaa soo saareysa liiska dulinnada halis qaran leh.

## Qodobka 28aad
## Caddeynta walxaha soo gala dalka

1. Soo dejiya-yaasha waxa saaran mas'uuliyad ah in ay caddeeyaan dhammaan dhir-beereedka iyo dalagga beeraha faa'iidada leh iyo badeecada sharciga waafaqsan isla marka ay soo galaan dalka.

2. Qof kasta oo soo galiyo dalka alaabo la xaddiday wuxuu alaabta ku wargelinayaa sarkaal ka socda kastamka marka ay soo gasho alaabta sidoo kale sarkaalka ayaa xannibi kara alaabtaas markii loo baahdo.

3. Sarkaal kasta oo kastam jooga ee lagu wargaliyo ama ka war helo soo- gelista wadanka dhir-beereed sharci darro ah, waxaa waajib ku ah inuu ku wargeliyo Baaraha hay'adda.

4. Wax kasta oo uu xayiray sarkaal ka socda kastamka hoos yimaada qaybta hore (1) lama sii daynayo ilaa inta ay ka oggolaato SARIS.

## Qodobka 29aad
## Fasax soo dejin iyo shahaado fayadhowr dhir-beereed

1. Looma ogola in la keeno dalka shixnad aan lahayn ogolaansho soo dejin iyo shahaadada fayadhowrka dhir-beereedka ah ee ay bixiso hey'adda awoodda u leh ee dalka soo dhoofiyey.

2. Hay'adda (SARIS) ayaa awood u leh in ay dejiso shuruudo fayadhowr-dhireed loo baahan yahay in la buuxiyo ka hor intaan la keenin shixnad ka timaadda waddanka soo dhoofinaya/laga soo dhoofinayo.

3. Hay'adda awoodda u leh waxa ay ka dhaafi kartaa shuruudaha qaar ayadoo ku saleynaysa heerka khatarta la xariirta badeecadaha.

## Qodobka 30aad
## Baarista walxaha la soo dejiyo

1. Waa in la baaraa dhir-beereedka ama dalagga la soo dhoofiyay iyo badeecada waafaqsan sharciga marka loo soo dhoofinayo dalka uuna baaraa baaraha ku sugan marinka soo gelidda.

2. Haddii aanay jirin sharci kale oo arrintan xaddidaya, baarista hoos-qodobka

faqradda 1aad ee hore waa in lagu sameeyaa saacadaha shaqada caadiga ah, haddii aysan alaabtu ku jirin safar ama aysan ahayn kuwo dhakhsa xumaada/baa'ba, ka dib soo gudbinta codsiga iyo bixinta khidmadaha.

3. Ka dib baarista lagu xusey faqraddaha 1aad iyo 2aad, haddii badeecadda la soo dhoofiyey laga helo ama leedahay khatar ku saabsan keenista iyo faafinta ama aysan buuxin sharcigan, SARIS waxay sameyneysaa ogaysiis qoraal ah oo ku socda soo dhoofiyaha badeecadda kaasoo caddeynaya in la qaadayo todobaad gudihiisa mid ka mid ah tallaabooyinka soo socda:

   (b) Daaweyn ku habboon si loo meesha looga saaro khatarta;
   (t) Dib-ugu-celinta waddankii laga keeney ama;
   (j) Burburinta sida ku qoran ogeysiiska.
   (x) SARIS waxay ka tanaaasuleysaa ogeysiiska haddii ay go'aamiso in burburinta alaabta ay tahay mid degdeg ah ama ogeysiiska uusan suurtagal ahayn.

4. Kharashka iyo masuuliyadda ficil kasta oo lagu qaato qodobkan, oo ay ku jirto kharashka ka-dejinta/raridda, daabulidda, dib-u-dhoofinta, daaweynta iyo burburinta, waa in uu bixiyaa soo dejiyuhu.

## Qodobka 31aad
## Kharashka daaweynta ee shixnadda la soo dejiyo

1. Kharashka daaweynta shixnadda waxaa go'aaminaya xeer nidaamiye ay hay'addu soo saarto.

2. Haddii marinka gelidda uusan lahayd qalabka daweynta badeecadaha, soo dejiyaha asagoo la baxaya kharashka wuxuu u daabulayaa marinka gelidda ugu dhow ee leh qalabka daaweynta waxaana lagama maarmaan ah ka warqabka Hay'adda SARIS.

## Qodobka 32aad
## Mamnuucid soo dejin Ciid

Waxaa mamnuuc ah soo dejinta carrada ama bacrimiyayaasha asalkoodu yahay noole aan la jeermis dilin ama aan la daaweynin.

## Qodobka 33aad
## Xaddidaadda soo dejinta

1. Dhir-beereed, wax soo saarka dhir-beereedka ama waxyaabaha la xakameeyey waa in aan la keenin dalka haddii aysan lahayn shahaadada fayadhowrka dhir-beereedka oo ay soo saartey hay'adda mas'uulka uga ah dalka soo dhoofinaya taasi oo cadaynaysa in la baarey badeecadda isla markaana aan lahayn dulin dhireed.

2. Dhir-beereed, wax soo saarka dhir-beereedka ama waxyaabaha la xakameeyey sida ku xusan faqradda 1aad ee isla qodobkan lagama soo gelin karo marin aan ka ahayn marinka gelidda ay qeexdey SARIS, marka laga reebo badeecadaha ku yimaada boostada.

3. Dhir-beereed, wax soo saarka dhir-beereed ama waxyaabaha la xakameeyey sida ku cad faqrada 1aad laguma keeni karo boosto haddii aysan ahayn wax yar oo baakadeysan lana ogolaaday.

4. Qof kasta ee loogu keeno boosto dhir,dalag ama waxyaabaha la xakameeyay ee ku qeexan faqrada 1aad iyo 3aad ee qodobkan, waa inuu SARIS ku wargaliyo kuna wareejiyo alaabta si waajibaadkeeda ugu gudato.

## Qodobka 34aad
## Baarista Dhir-beereedka lasoo dhoofiyo, wax soo-saarka Dhir-beereedka iyo Waxyaabaha la xakameeyey

1. Qof kasta oo soo dhoofiya dhir, dalag ama waxyaabaha la xakameeyey waa inuu si deg deg ah ugu wargeliyaa hay'adda SARIS laguna sameeyaa baaritaan.

2. Baaritaanka ku xusan qodobka hore waxaa lagu sameynayaa goob ay u asteeyeen baarayaasha fayadhowrka dhir-beereedka ee gudaha marinka gelidda sida ku qeexan farqadda 2aad ee qodobka 33aad.

3. Baarayaasha fayadhowrka dhir-beereedka waxaa u furan haddii ay u baahdaan in ay baaraan dhir-beereedka, dalagga ama waxyaabaha la xakameeyey ee saaran markabka ama diyaaradda ka hor inta aan la soo dajin.

4. Waxaa waajib ku ah in xafiiska boostada ee ku lugta leh macaamilka, marka la helo rasiidka ama warqadda boostada la socota dhir-beereedka, dalagga ama waxyaabaha la xakameeyey inuu ku wargeliyo SARIS si deg deg ah.

5. Baarayaasha fayadhowrka dhir-beereedka marka ay helaan warbixinta lagu tilmaamay faqradda hore in ay dejiyaan baakadaha sida ku cad faqradda hore inuu furo isla maarkaana ku sameeyo baaritaan iyadoo uu goob joog yahay masuulka xaafiiska boostada.

6. Qof kasta oo hela boosto ay ku jiraan dhir, alaabta dhir-beereedka ama alaab la soo dejiyey oo aan la marsiin wax baaritaan ah sida ku xusan faqrada 5aad waa inuu ugu wargeliyo SARIS si deg deg ah si ay baarayaasha fayadhowrka dhirtu u baaraan.

7. Wax kasta oo dhir-beereed ah oo ay xadiddey SARIS, baarista ku xusan faqradaha 1, 3, 5aad ayna caddaato inuu jiro dulin takooran, sarkaalka takoorka

JAMHUURIYADDA FEDERAAL KA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

dhir-beereedka wuxuu amrayaa milkiilaha dhir- beereedku inuu ku beero dhirta goob takooran isla markaana baaris lagu sameeyaa goobta takooran si waafaqsan habraaca SARIS.

### Qodobka 35aad
### Qubidda, Burburinta iyo Nadiifinta

1. Baarayaasha fayadhowrka Dhir-beereedka hadii ay arkaan in dhirta ama dalagga ama waxyaabaha la xakameeyey ay ku jiraan dulin mamnuuca ah sida ku cad qodobka hore in ay nadiifiyaan ama baabi'iyaan dhir-beereedka ama qalabka wax lagu qaado ama konteenarrada, ama uu ka dalbado milkiiluha, maamulaha inuu nadiifiyo ama burburiyo asaga oo goob joog ah.

2. Baarayaasha fayadhowrka dhir-beereedka waxa ay burburin karaan dhir-beereedka, wax soo saarka dhir-beereedka ama waxyaabaha la xakameeyey ee lasoo dhoofiyo haddii ay ka hor imaaneyso qodobada 32aad ama qodobka 34aad faqradiisa 1aad ama 6aad waxayna amri karaan milkiile kasta in uu nafsad ahaantiisa burburiyo iyaga oo jooga. Tani waxaa lagu dabaqayaa dhir-beereedka, dalagga ama waxyaabaha la xkameeyey hadii ay ka hor imaanayaan amarka takoorka beerista ee ku cad qodobka 34aad.

3. Baarayaasha fayadhowrka dhir-beereedka waa inay burburiyaan walxaha lasoo dhoofiyo ee mamnuuca ah kana hor imaanaya qodobka 34aad.

4. Baarayaasha fayadhowrka ayaa soo saaraya shahaado caddeyneysa dhir-beereedka, wax soo saarka dhir-beereedka ama waxyaabaha la xakameeyey ay mareen baaritaan caafimaad isla markaana aanu lahayn walxaha la mumnuucay ama dulin takooran.

### Qodobka 36aad
### Wargelin ama ogeysiin amar ayadoo la adeegsanayo xogta lagu gudbiyo aaladaha elektarooniga ah

SARIS ayaa soo saareysa xeer nidaamiye ku saabsan hababka wergelinta ama ogeysiinta loo maro

### Qodobka 37aad
### Magacaabista goobta la rabo in la indho-indheeyo lana baaro

1. SARIS ayaa:
   b. Cayimaysa meelaha noqonaya xarumaha takoorka dhir-beereedka, wax soo saarka ama waxyaabaha la xakameeyey lagu hayn karo si loola socdo fayadhowrka, isla markaana loogu sameeyo cilmi-baaris, baaritaan, tijaabo,

xayirid, dib ula wareegis ama burburin.

t. Codsaneysa dhir-beereedka lasoo dhoofiyo, dalagga ama waxyaabaha la xakameeye in lagu hayo xarunta takoorka dhir-beereedka, ama meel kasta oo si rasmi ah loo asteeyey iyada oo hoos imaaneysa baaritaanka saraakiisha hay'adda awoodda u leh hadba waqtiga uu arko daruuri.

## Qodobka 38aad
## Waxyaabaha si ku meel gaar ah ugu jira dhul biyoodka dalka (teritorial water)

Waxyaabaha sida ku meel gaarka ah ugu jira dhul-biyoodka dalka, kuwaas oo ay mamnuuc tahay ama la xaddiday in laga soo dejiyo dalka si waafaqsan sharcigan, waxaa xeer nidaamiye kasoo saaraya ha'adda SARIS si loo fuliyo ujeeddooyinka sharcigan.

## Qodobka 39aad
## Dhir-beereedka iyo walxaha soo gala dalka ee ay wataan dadka safraya

Dhir-beereedka, dalagga dhir-beereedka ama waxyaabaha la xakameeyey ee soo galaya dalka ee ay sitaan dadka safraya ee aan loo soo dejin ujeedooyiin beerasho, waxaa laga yaabaa in laga dhaafo shuruudaha shahaadada fayadhowrka, hase yeeshee waa in la baaro.

## Qodobka 40aad
## Shahaadada dhoofinta ee fayadhowrka Dhir-beereedka

1. Qof kasta oo doonaya in uu dhoofiyo dhir-beereedka, wax soo saarka dhir-beereedka ama waxyaabaha la xakameeyey ee u socda dal kale waa inay heystaan shahaadada fayadhowrka dhir-beereedka oo ay bixisey SARIS si waafaqsan sharciga lana baarey, lagana hubiyey shuruudaha dalka loo dhoofinayo.

2. Baaritaanka ku xusan faqradda hore ee qodobkaan waa in lagu sameeyaa goobta ay asteeysey SARIS, haddii baarayaasha fayadhowrka dhir-beereedka ay u arkaan in loo baahan yahay, waxaa sameyn karaan goobo kale oo lagu baarayo.

3. Dhir-beereedka, wax soo saarka dhir-beereedka ama waxyaabaha la xakameeyey ee uu soo dalbado wadanka soo degsanaya waxaa lagu baarayaa goobta beerashada ama goob kale ee ay u asteeysey SARIS, haddiise aysan ka gudbin baaritaankaas, laguma sameynayo baaritaanka faqrada 1aad.

4. Marka lagu baarayo sida ku xusan faqradda 2aad, SARIS waa in ay:
   b. Soo saartaa shahaadada fayadhowrka, haddii ay badeecaddu waafaqdo shuruudaha la xariira tallaabooyinka fayadhowrka Dhir-beereedka.
   t. Ka dalbataa dhoofiyaha in uu sameeyo tallaabooyinka fayadhowrka ee lagama



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
مجلس الشيوخ
AQALKA SARE

maarmaanka ah shuruudaha fayadhowrka dhir-beereedka ee dalka; ama

j. Diidaa shahaadada haddii aan la buuxin shuruudaha ku xusan farqaradda 1aad.

**Qodobka 41aad**
**Baakadaynta habboon iyo kharashka baaritaanka**

1. Dhammaan shixnadaha la dhoofinayo waa in si habboon loo geliyo baakado si wanaagsan loo xirey ka hor dhoofinta.
2. Kharashka baaritaanka dhoofinta waxaa la saarayaa dhoofiyaha.
3. Looma ogola dhoofiyo inuu furo shixnadda loo asteeyey dhoofin baarintaanka ka dib.

**Qodobka 42aad**
**Qaababka dhoofinta**

1. Shixnada waa in lagu dhoofiyaa hal todobaad gudihiis laga bilaabo taariikhda ay soo baxdo shahaadada fayadhowrka dhir-beereedka.
2. Baaraha fayadhowrka dhir-beereedka waxa uu kordhin karaa mudada waqti ee lagu qeexay faqradda 1aad markii loo eego nooca shixnadda, xaaladaha keydinteeda, iyo shuruudaha socdaal.

**Qodobka 43aad**
**Dib u dhoofinta shixnadda**

1. Marka loo soo dhoofiyo Soomaaliya si loogu sii dhoofiyo dal kale, dhoofiyuhu waa in uu:
   b) Ka codsadaaa SARIS shahaadada fayadhorka dhir-beereedka ee dib u dhoofinta;
   t) Bixiyaa shahaadada asalka ah ee fayadhowrka dhir-beereedka iyo wixii dukuminti ah ee ku qeexan xeer nidaamiyayaasha lagu sameeyay sharcigan.
   j) Alaabta u diyaariyaa si baaris loogu sameeyo;
   x) In uu bixiyaa khidmadaha baarista.

2. Baaraha fayadhowrka dhir-beereedka markuu ka helo codsi dhoofiye sida ku xusan faqradda 1aad xarafka (b) inuu baaro sheyga iyada oo aan dib loo dhigin, sida ku xusan xeer nidaamiyayaasha lagu sameeyay sharcigan.
3. Marka Baaritaanka loo sameeyo sida ku xusan faqradda 2aad, Baaraha fayadhowrka dhirtu wuxuu soo saaraaya shahaadada dib-u-dhoofinta b faydhowrka a dhir-beereedka,

4. Marka la soo saaro shahaadada dib-u-dhoofinta faydhowrka, ayaa dib loo dhoofinaya shixnadda si waafaqsan shuruudda ay cayintey SARIS oo ku saabsan hufnaanta shixnadda iyo badqabka fayadhowrka dhir-beereedka .

5. Haddii mid ka mid ah shuruudaha lagu sheegy faqradda 3aad aan la buuxin ama haddii shixnadda loo soo dhoofiyey in dib-u dhoofin loogu sameeyo dalka ay lumiso hufnaanta oo la warshadeeyo sama uu aafeeeyo caabuq ka dhasha dulin, waxaa loo tixgelinayaa inay tahay badeecad loo dhoofiyo si waafaqsan qodobka 40aad.

6. Shahaadada fayadhowrka dhir-beereedka ee lagu soo saaro si waafaqsan faqradda 3aad waxay tilmaamaysaa waddanka ay shixnaddu asal ahaan ka soo jeeda.

7. Habraacyada shahaadada dib-u-dhoofinta waxaa lagu daraa buugga howl galada shahaadada wax dhoofinta

## Qodobka 44aad
## Shixnad gudbeysa

1. Badeecadaha gudbaya waa inay wataan shahaadooyinka faydhowrka dhir-beereedka.

2. Dhammaan qodobada sharcigan waxa lagu dhaqayaa badeecadaha gudbaya haddii laga helo dulin.

3. Marka laga helo in shixnad gudbeysa ay keeneyso khatar dulin, baaruhu wuxuu amraya soo dhoofiyaha inuu geliyo meel ka hortageysa faafinta dulinka ah inta lagu gudajiro daabulidda, iyadoo kharashkanna uu bixinayo soo dhoofiyaha.

4. Shixnadda kuma sii jiri doonto goobta marinka gelidda in ka badan saddex maalmood, hay'adda SARIS ayaa awood u leh kordhinta waqtiga haddii ay u aragto in ay lagama maarmaan tahay, duruuf walba oo jirta, badeecad kasta oo la keenay dalka waa inay uga baxda toddobaad gudihii laga bilaabo taariikhda soo gelitaanka

5. Habraacyada shixnadaha gudbaya waxaa la raacinayaa buugga howl galada shahaadada dhoofinta.

JAMHUURIYADDA FEDERAAL KA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

# CUTUBKA 6AAD
# QODOBO ISKU DHAFAN
## Qodobka 45aad
## Magdhowga khasaaraha

SARIS ayaa soo dejineysa xeer nidaamiyea ku saabsan magdhowga khasaaraha si waafaqsan sharcigan.

## Qodobka 46aad
## Racfaan

1. Wax cabasho ah lagama gudbin karo amarka SARIS ee ku xusan qodobka 20aad ama qodobka 35aad oo ku saleysan maamulka, haddii aanan ficiladaas loo qaadin si khalad ah ama gef ah ama ku-xad-gudub awoodeed ah.

2. Qof kasta oo aan ku qanacsanayn natiijada baaritaanka kama dambeysta ah ee uu soo saaro baaruhu wuxuu cabasha uga qaadan karaa maxkamadda sare.

## Qodobka 47aad
## Gaadiid aan laheyn ruqsad

1. Baare kasta oo ka shakiya in kunteenar ama gawaarida soo galaya gudaha dalka oo laga yaabo inuu la socdo dulin la qeexay, waxa uu joojin karaa asagoo aan haysan ogolaansha baaritaan ee kunteenarkaas ama gaarigaas, wuxuuna la wareegi karaa wax walba oo la xiriira dhir-beereedka, dalagga, noolaha faa'idada leh, carrada, ama wax kasta oo cudur qaba ama lagu tuhun san yahay inuu aafeeyo waxyaabaha la xakameeyay.

2. Waxaa la siinayaa warqad rasmi ah mulkiilaha shay kasta oo la qabtay ama lagu xiray faqradda kore (1) isla markaana warbixin rasmi ah la siiyaa hay'adda awoodda u leh muddada ay u dejisay.

3. Marka la raaco tilmaamaha hay'adda awoodda u leh , baaruhu wuxuu amri karaa daaweyn, burburin ama tuuris shay kasta oo lagu qabtay faqradda 2aad markaay duruuftu qasabto.

4. Haddii uu soo dhoofsaduhu uusan fulin ama uusan oggolaan daaweynta sida lagu amrey faqradda 3aad ee hay'adda awoodda u leh waxay xaq u leedahay inay la wareegto sida ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan.

5. Kharashka iyo masuuliyadda ficil kasta oo lagu qaato qodobkan waa qaadaya mulkiilaha.

6. Dhammaan gaadiidka imaanaya ama ka gudbaya aagga loo arko inuu aafeeyey dulin la xakameeyay waa in la nadiifiyo haddii gaadiidka noocan oo kale ah uu awood u leeyahay gudbinta/keenidda dulin la xaddiday.

## Qodobka 48aad
## Dambiyada

1. Qof kasta waxa uu noqon karaa dambiile haddii uu:

    b. Si ula kac ah u sameeyo qoraal been ah, oraah ku jirta warbixin, diiwaan, dukuminti lagu tilmaamay sharcigan, ama amar ay soo saartay Hay'adda SARIS, iyada oo la raacayo sharcigan iyo shuruucda kale ee dalka.

    t. Si ula kac ah u beeniya ama u baabi'iya warbixin ama dukumintiyo kale ee lagu tilmaamay xeer nidaamiyayaal ay soo saartey Hay'adda SARIS.

    j. Si ficil ah ugu xadgudba qodobbada sharcigan, khatar geliya nolosha iyo jiritaanka qof ahaaneed ama khatar geliya hanti ama deegaanka.

2. Qof kasta oo xannibaad ku sameeya baare (inspector) ama falanqeeye (Analyst) wuxu gelaya dambi haddii:

    b. Cudurdaar la'aan uu carqaladeeyo, dhibaateeyo ama ka horjoogsado baare ama falanqeeye isaga oo ku jira fulinta awoodahiisa sida ku xusan sharcigaan;

    t. Si ula-kac ah ama taxaddar la'aan ah u sameeya bayaan ama soo-saaro dukumiinti been ah kaasoo marin-habaabin ku ah baaraha ama falanqeeyaha ku hawlan gudashada waajibaadkiisa si waafaqsan sharcigan.

3. Dembiyada ay gasho shirkad

    b. Haddii dambi ay gashay shirkad leh shakhsiyad qaanuuneed la caddeeyo in lagu galay ogolaanshaha ama qarinta, ama loo aanayn karo diidmo ka timid Agaasime,maamule, Maareeye, Xoghaye ama Sarkaal kale oo ka tirsan Shirkadda ama qof kasta oo ku shaqeynayay jagadaas, shirkadda ayaa gashey dembigaas waxana lagu oogayaa dacwad ciqaabeed si waafaqsan Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.

## Qodobka 49aad
## Ciqaabaha Dambiyada ku xusan Sharcigan

Dambi kasta oo ka dhasha jabinta sharcigan waxaa lagu dhaqayaa Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed iyo xeerarka kale ee dalka.

## Qodobka 50aad
## Sanduuqa dhaqaalaha deg-dega ah ee badbaadada Dhir-beereedka

1. Wasiirku wuxuu abuurayaa Sanduuq dhaqaale ee Xaaladdaha Degdegga ah ee Badbaadada Dhir- beereedka iyo takoorka si loo helo dhaqaale lagu fuliyo howlaha qodobbada 23aad iyo 24aad ee sharcigan.

2. Maaraynta Sanduuqa lagu xusay qodobkaan waxaa lagu soo saarayaa xeer nidaamiye.

3. Sanduuqaan wuxuu sidoo kale gacan ka geysanayaa magdhowga dadka ay saameeyeen habraacyada ciribtirka.

## Qodobka 51aad
## Xeer nidaamiyaal

SARIS iyada oo kaashanaysa Wasaaradda, waxay soo saaraysaa xeer-nidaamiyayaasha badbaadada dhirbeereedka iyo takoorka si waafaqsan sharcigan.

## Qodobka 52aad
## Dib u eegista

Sharcigaan waxaa dib-u-eegis lagu sameyn karaa xilli kasta oo baahi lagama maarmaan ah ay timaado kadib markuu dhaqan-galo;

## Qodobka 53aad
## Baabi'in

Sharcigaan waxa uu baabi'inayaa laga billaabo marka uu dhaqan-galo Sharci lambar. 6 ee 2da Jannaayo 1971 kuna saabsan Dulin Takoorka ama xeer kasta oo kale oo ka hor imaanaya ama aan la socon karin sharcigan.

## Qodobka 54aad
## Dhaqangalka Sharciga

Sharcigaan wuxuu dhaqan-gelayaa marka uu ansixiyo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, u una saxiixo Madaxweynaha JFS, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda JFS.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**SHARCI LR.35** **TAARIIKH: 24-TA DISEEMBAR 2024**

## SHARCIGA ABUURKA & NOOCYADA DHIRTA SOOMAALIYEED

### MADAXWEYNAHA J.F.S,

| | |
|---|---|
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG. |
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobka 82aad, Faqradda 3aad ee Dastuurka KMG. |
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG. |
| **MARKUU ARKAY:** | Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee summaddeedu tahay **XGGSH/658/B11/24**, ku taariikheysan **23/12/2024**, ujeeddaduna tahay Soo Gudbin Ansixinta''Hindisaha Sharciyeedka Abuurka & Noocyada Dhirta Soomaaliyeed. |
| **MARKUU TIXGELIYAY:** | Baahida loo qabo in la meel mariyo sharcigan. |

FR

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:**

### Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxaa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga Abuurka iyo Noocyada Dhirta Soomaaliyeed.

### Qodobka 2aad

Waxa uu sharcigan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIWAAN NO: HAN-018-2025
TAARIIKH: 18-05-2025
SAXIIX
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIX'D / SENT
29 MAR 2025
BY: Fadumo Mohamed Omar Sabdi
SAACAD ______ SAXIIX ______

**Madaxweynaha J. F.S.**

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

WASAARADDA BEERAHA IYO WARAABKA XFS

# SHARCIGA ABUURKA IYO NOOCYADA DHIRTA SOOMAALIYEED

NOFEEMBAR 2024

# TUSMO

*CUTUBKA 1AAD*............................................................1
*QODOBADDA GUUD*............................................................1
Qodobka 1aad............................................................1
Magaca Sharciga............................................................1
Qodobka 2aad............................................................1
Baaxadda Sharciga............................................................1
Qodobka 3aad............................................................1
Eray bixin............................................................1
Qodobka 4aad............................................................2
*CUTUBKA 2AAD*............................................................3
*MAAMULKA IYO HAWLAHA ABUURKA IYO NOOCYADA DHIRTA*............................................................3
Qodobka 5aad............................................................3
Maamulka hawlaha abuurka iyo noocyada dhirta............................................................3
*CUTUBKA 3AAD*............................................................3
*FALANQAYN IYO BAARITAAN*............................................................3
Qodobka 6aad............................................................3
Magacaabidda falanqeeyayaal iyo baarayaal............................................................3
Qodobka 7aad............................................................3
Awoodda baarayaasha............................................................3
Qodobka 8aad............................................................4
Qaadashada Aqoonsiga Shaqaalaha............................................................4
*CUTUBKA 4AAD*............................................................5
*ABUURKA*............................................................5
Qodobka 9aad............................................................5
La wareegidda iyo qubidda Abuurka, noocyada dhirta iyo qalabka warshadaynta abuurka............................................................5
Qodobka 10aad............................................................5
Faafinta xogta daahsoon............................................................5
Qodobka 11aad............................................................6
Tusmada magacyada noocyada dhirta............................................................6
Qodobka 12aad............................................................6
Xannibaadda iibka abuurka noocyada dhirta aan tusmeysneyn............................................................6



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

Qodobka 13aad ........................................................................................................................... 7

Dhawridda taxda noocyada dhirta qaranka ........................................................................ 7

Qodobka 14aad ........................................................................................................................... 7

Tijaabooyinka dalagyada iyo warbixinnada ........................................................................ 7

*CUTUBKA 5AAD* ........................................................................................................................ *7*

*TIJAABADA ABUURKA* ............................................................................................................ *7*

Qodobka 15aad ........................................................................................................................... 7

Shaybaarrada Tijaabada Abuurka ........................................................................................ 7

Qodobka 16aad ........................................................................................................................... 7

Shahaadooyinka Baarista ....................................................................................................... 7

Qodobka 17aad ........................................................................................................................... 7

*CUTUBKA 6AAD* ........................................................................................................................ *8*

*HUBINTA SOO DEJINTA IYO KA HORTAGA ISKU-FAXLIDDA* ........................................... *8*

Qodobka 18aad ........................................................................................................................... 8

Xakamaynta soo dejinta abuur iyo noocyada dhirta ay suurtagal tahay inay wax yeelo geystaan ........ 8

Qodobka 19aad ........................................................................................................................... 8

Ka-hortagga isku-faxlidda waxyeelada leh ........................................................................ 8

*CUTUBKA 7AAD* ........................................................................................................................ *8*

*XUQUUQAHA DHALAN ROGAHA DHIRTA* ........................................................................... *8*

Qodobka 20aad ........................................................................................................................... 8

Bixinta Xuquuqaha ee dhalan rogaha dhirta ...................................................................... 8

Qodobka 21aad ........................................................................................................................... 8

Shuruudaha bixinta xuquuqaha ............................................................................................ 8

Qodobka 22aad ........................................................................................................................... 9

Muddada la haysan karo xuquuqaha .................................................................................... 9

Qodobka 23aad ........................................................................................................................... 9

Nooca xuquuqaha ..................................................................................................................... 9

Qodobka 24aad ........................................................................................................................... 9

Noocyada dhirta ee la ilaalshay .............................................................................................. 9

Qodobka 25aad ........................................................................................................................... 9

Dayactirka dhirta ..................................................................................................................... 9

Qodobka 26aad ........................................................................................................................... 9

Ruqsadaha ................................................................................................................................. 9

Qodobka 27aad ........................................................................................................................... 9



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

Xog iyo Matelaad khaldan .......... 9
Qodobka 28aad .......... 9
Asaasidda Xarun Qaran ee Keyd Hiddo-sidyo Dhireed .......... 9
*CUTUBKA 8AAD* .......... *10*
*GUDDIGA KA GARNAQIDDA ARIMAHA ABUURKA IYO DHIRTA* .......... *10*
Qodobka 29aad .......... 10
Dhismaha guddiga .......... 10
Qodobka 30aad .......... 10
Awoodda ( ikhtisaas) Guddiga ka Garnaqidda Armimaha Abuurka iyo Dhirta .......... 10
Qodobka 31aad .......... 11
Qaab-dhismeedka Guddiga ka-garnaqidda armimaha Abuurka iyo Dhirta .......... 11
Qodobka 32aad .......... 11
Racfaan ka qaadashada go'aannada guddiga .......... 11
*CUTUBKA 9AAD* .......... *11*
*DAMBIYADA IYO CIQAABAHA* .......... *11*
Qodobka 33aad .......... 11
Dembiyada .......... 11
Qodobka 34aad .......... 12
Ciqaabaha Dambiyada ku xusan Sharcigan .......... 12
*CUTUBKA 10AAD* .......... *12*
*QODOBBO GUUD* .......... *12*
Qodobka 35aad .......... 12
Xeer Nidaamiyaasha abuurka .......... 12
Qodobka 36aad .......... 12
Dib-u-eegista .......... 12
Qodobka 37aad .......... 13
Baabi'in .......... 13
Qodobka 38aad .......... 13
Dhaqangalka .......... 13

# CUTUBKA 1AAD
# QODOBADDA GUUD
## Qodobka 1aad
## Magaca Sharciga

Sharcigan waxaa lagu Magacaabaa Sharciga Abuurka iyo Noocyada dhirta Soomaaliyeed.

## Qodobka 2aad
## Baaxadda Sharciga

Si waafaqsan Qodobada 25, 27, 45,52 iyo 126 ee Dastuurka kumeel-gaarka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Sharcigan waxaa looga dhaqmi doonaa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

## Qodobka 3aad
## Eray bixin

Ayada oo la eegayo ujeedada Sharcigan, haddii aan macnaha si kale loo dhigin, ereyada soo socda waxaa loo qaadanayaa mid walba qeexidda ku hor qoran:

1. **"Dhalan-roge"** waxaa loola jeeda qofka dhalan rogaa sama soo saara hormariyana abuur ama noocyo dhireed oo ay ku jiraan qofka shaqaaleysiisa dhalan rogaha.
2. **"Sarkaal idman"** waxaa loola jeedaa sarkaal lagu magacaabey sharcigaan.
3. **"Abuur la caddeeyey"** waxaa loola jeedaa abuur shahaadadiisa lagu bixiyey sharcigaan.
4. **Dhirta"** waxaa loola jeeda dhamaan dhiraha dalagyada Beeruhu ka soo baxaan ama kuwo kale ee cuduro u keeni kara dhirta dalagayda Beeraha.
5. **"Baare"** waa qof lagu magacaabey si waafaqsan sharcigan si uu u noqdo baare ujeedooyinka sharcigan.
6. **"Wasaarad"** waxaa loola jeedaa Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka JFS.
7. **"Wasiir"** waxaa loola jeedaa wasiirka Wasiirka Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka ee JFS.
8. **"Shaxda noocyada qaran"** waxaa loola jeedaa shaxda dhamaan noocyada dhirta ee looga faa'ideysto ganacsi ahaan.
9. **"Xuquuqaha Dhalan roga dhirta"** waaxaa loola jeedaa xuquuq lagu soo saarey sharcigaan.
10. **"Dhir -baare"** waxaa loola jeeda qof leh khibrad ku habboon laguna soo magacaabay sharcigan.
11. **"Noocyada dhirta"** waxaa loola jeeda kooxda dhirta ee kawada tirsan heerka ugu hooseeya ee qeybta dhir-barashada, taasoo ay qeexeen astaamaha muujiya nooca



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

hiddo-sidka ama isku tagga noocyo hiddo-sidyo ka soocan koox dhireed kale ayagoo muujinaya ugu yaraan mid ka mid ah astaamaha la xusay, tarmi karana asagoon isbeddelin.

12. **"Abuur"** waxaa loola jeedaa qeyb ka mid ah dhirta oo loogu talogalay in loo adeegsado tarmin waxana ka mid ah iniin, curdun, jirid, qurub, buruq, xidid, laan iwm.
13. **"Falanqeeeye-abuur"** waxaa loola jeedaa qof leh xirfad ku habboon laguna magacaabay sharcigaan.
14. **"Soo saare-abuur"** waxaa loola jeeda qofka si gaar ah ama si guud ugu jira ka ganacsiga abuur islamarkaana soona saara abuur iib ah.
15. "**Xeer nidaamiye abuur"** waxaa loola jeedaa xeer nidaamiyaha lagu soo saarey sharcigaan
16. **"Xarun tijaabo"** waxaa loola jeedaa beer loo diiwaan-geliyey in lagu tijaabiyo dabuurka;
17. **"Iib"** waxaa ka mid ah bixinta, xayaysiinta, haynta, soo bandhigista, gudbinta, qaadista u diyaarin iib ama ku beddelasho iwm.
18. **"SARIS"** Waa Hay'adda Sharciyeynta Adeegyada & Baaritaanka Beeraha Soomaaliyeed "Somali Agricultural Regulatory and Inspection Services (SARIS)".
19. **"Bayaan sharcgi"** waxaa loola jeedaa bayaan lagu bixiyay iyadoo la raacayo Shuruucda abuurka, kaasoo noqanka qaab ogeysiis ah ama dukumeenti kale, ama qaab tafaasiil ah oo lagu bixiyay calaamad kasta, weel ama xirmo, ama nooc kasta oo kale.
20. "**Tusmo**" waxaa loola jeedaa magacyada noocyada dhirta ee la diyaariyey.
21. **"Gacal"** waxaa loola jeedaa nooc ka mid ah noocyada dhirta kuwaas oo isku tusmo ah.

## Qodobka 4aad
## Ujeedooyinka Sharcigan

Ujeedooyinka sharcigan waa:

1. In la maamulo dhammaan arrimaha la xariiro Abuurka iyo Noocyadda dhirta ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
2. Ina la dejiyo mabaadi'da aasaasiga ah iyo xeer nidaamiyayaasha abuurka iyo kooxaynta dhirta.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

## CUTUBKA 2AAD
## MAAMULKA IYO HAWLAHA ABUURKA IYO NOOCYADA DHIRTA
### Qodobka 5aad
### Maamulka hawlaha abuurka iyo noocyada dhirta

1. Hay'adda SARIS ayaa leh masuuliyadda inay kormeerto, maamusho ama hirgeliso ku dhaqanka sharcigan.
2. Hawlaha maamulka abuurka iyo noocyada dhirta waxa ka mid ah balse aan ku koobneyn:
    **(b)** Nidaaminta dhammaan arrimaha la xiriira abuurka iyo noocyada dhirta;
    **(t)** Inay magacawdo baarayaal iyo falanqeeayaal abuur iyo noocyada dhireed.
    **(j)** Diyaarinta liiska noocyada dhirta ee qaranka kaas oo ka kooban magacyada noocyada dhirta ee loo siidaayo ganacsi;
    **(x)** In la ilaaliyaa lana cusboonaysiiyaa liiska noocyada dhirta qaranka lana geliyaa faafin rasmi ah si ay dadweynuhu u heli karaan;
    **(kh)** In la yegleelo xarumo tijaabo abuur oo rasmi ah.

## CUTUBKA 3AAD
## FALANQAYN IYO BAARITAAN
### Qodobka 6aad
### Magacaabidda falanqeeyayaal iyo baarayaal

1. Hay'addda SARIS, ayaa magacaabaysa Baarayaal ku haboon oo u qalma fulinta ujeedada sharcigan, ayada oo ay ansixinayaan Golaha Hagista(Board of Directors) ee hay'adda.
2. Qofka lagu magacaabay si waafaqsan faqrada (1aad), kuma lug yeelan karo wax hawl ah oo la xiriira soo dejinta, dhoofinta, soo-saarka, ka-shaqaynta, iibinta ama qaybinta Abuurka iyo noocyada dhirta.
3. Baaraha marka la magacaabo ka dib, waa inuu dhaartaa inta uusan waajibaadkiisa guda gelin.
4. Haddii uu gudan waayo waajibaadkiisa shaqo, waxaa lagala noqonayaa ruqsadda.

### Qodobka 7aad
### Awoodda baarayaasha

1. Baaraha oo ujeedkiisu yahay fulinta howlihiisa/howlaheeda sida ku xusan sharcigan awoodihiisu waa;
    b) Inuu galo ama baari karo meel kasta, dhismooyin, gaari ama doon, ujeedkeedu

yahay in uu fuliyo howl kasta oo lagu tilmaamay sharcigan iyo xeer nidaamiyayaasha lagu sameeyey sharcigan iyadoo uu raacayo tilmaamaha hoos ku xusan:

i. In baaruhu aammisan yahay in abuurka beeraha ee sharcigan khuseeyo, lagu keydiyey, iibiyey ama loo isticmaaley si macquul ah.
ii. In baaruhu uu aaminsanyahay in ay jiraan walax, qof, xayawaan, ama dalag oo wasakheyn kara abuurka.
iii. In baaruhu uu aaminsan yahay in goobta loo adeegsan karo warshadaynta abuurka
iv. In baaruhu si maangal ah uga shakisan yahay in loo adeegsado ama loo isticmaali karo gelitaan dembi hoos yimaada sharcigan ama xeer nidaamiye uu yeelanayo sharcigan;

2. Mulkiilaha ama qofkasta oo mas'uul ka ah goob kasta, dhismooyinka lagu xusay faqrada 1aad ee qodobkan iyo qof kasta oo laga helo dhismaha ama goobta waa inuu siiyaa baaraha dhammaan caawimaadda maangalka ah ee u suurtagelinaysa baarayaasha inay ku fuliyaan waajibaadkooda shaqo sida ku xusan sharcigan ama xeer nidaadmiye lagu sameeyay sharcigan.

3. Qof walba oo u diida gelitaanka baaraha ka shaqeynaya howshaan ama ka horjoogsada baaritaanka ama isagoo si cudurdaar la'aan ah ugu guul darreysta inuu soo saaro abuurka iyo noocyada dhirta, qalabka si loo baaro, ama dukumenti kasta oo looga baahdo inuu soo saaro sida ku xusan qodobkan, wuxuu galayaa dembi.

4. Qofna xaq uma leh in la siiyo lacag ama magdhaw qaddarka abuurka iyo noocyada dhirta ee muunad ahaan loo qaaday sida ku xusan qodobkan.

## Qodobka 8aad
## Qaadashada Aqoonsiga Shaqaalaha

1. Baaraha waxaa la siinayaa aqoonsi leh sawirka iyo darajada baaraha iyo sumadda SARIS marka loo magacaabo baare si uu howshiisa uga guto isla markaana uu sitaa marka uu galayo goobaha, dhismooyinka, gaari ama markab sida ku xusan faqrada 1aad ee qodobka 7aad ee sharcigan.
2. Kaarka ama Aqoonsiga waa in la tusaa dadka ay khusayso marka baarayaashu ay adeegsanayaan awoodooda iyadoo la raacayo tilmaamaha faqradda 1aad ee qodobkan ama markii uu ka codsado qofka ay khusayso.
3. Qofka la macaamilaya baaraha waa inuu weydiiyaa baaraha inuu tuso aqoonsigiisa oo ay ku caddahay macagiisa iyo darajadiisa

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

4. Mulkiilaha ama qof kasta oo mas'uul ka ah goobta, dhismooyinka lagu xusay faqradda 1aad ee qodobkan iyo qof kasta oo laga helo dhismaha ama goobta waa inuu siiyaa baaraha dhammaan caawimaadda maangalka ah ee u suurtagelinaya Baarayaasha inay ku fuliyaan waajibaadkooda shaqo sida ku xusan sharcigan ama xeer nidaadmiye kasta lagu sameeyay sharcigaan.

**CUTUBKA 4AAD**

**ABUURKA**

**Qodobka 9aad**

**La wareegidda iyo qubidda Abuurka, noocyada dhirta iyo qalabka warshadaynta abuurka**

1. Mar kasta oo baaruhu uu si maangal ah u rumaysto in qodobbada sharcigan la jebiyey, baaruhu waxa uu qaban karaa oo hayn karaa nooc kasta oo abuur ah ama dhir ah oo la xariirta jabinta sharcigan.
2. Maxkamaddu marka ay qofka ku xukunto dembi si waafaqsan sharcigan, waxa ay soo saari kartaa amar ah:
   (b) baabi'inta ama tuurista nooc kasta oo abuur ah ama dhir ah oo dembiga lagu galay; ama
   (t) qofka la xukumay inuu bixiyo kharashaadka falanqaynta abuurka, dhirta ama xarunta warshadaynta abuur ee la xiriirta xukunka.
3. Marka uu baaruhu qabto abuur ama noocyada dhirta ah isla markaana mulkiilaha abuurka ama dhirta uu ogolaado in la qubo si qoraal ah, waa in loo qubaa abuurka ama noocyada dhirta sida uu baaruhu tilmaamo isla markaanaa ay goob joog ka tahay SARIS, kharashka qubidda waxaa bixinaya mulkiilaha ama qofka oggolaaday qubidda.
4. Qof kasta oo is-hortaag ku sameeya baaraha isaga oo isticmaalaya awoodihiisa waxa uu gelayaa dembi.

**Qodobka 10aad**

**Faafinta xogta daahsoon**

1. Looma ogala qofka u xilsaaran fulinta qodobbada sharcigan inuu soo bandhigo xog kasta oo lagu helo gudashada hawlaha sharcigan. Marka laga reebo ujeeddada gudashada waajibaadkiisa ama marka ay u baahato maxkamad.
2. Qof kasta oo jebiya faqradda 1aad wuxuu gelaya dembi sida ku xusan xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

**Qodobka 11aad**

**Tusmada magacyada noocyada dhirta**

1. Hay'adda SARIS ayada oo kaashanaysa Wasaaradda waxay diyaarinaysaa tusmo magacyo ah ee noocyada dhirta si loogu adeegsado iibinta abuurka noocyadaas dhirta ah.
2. Tusmada waa in leysugu geeyaa qeybo, qeyb kastana waa in ay qeexdaa nooca dhir ee gacalka (the class) uu ereygaas la xiriiro si suurtagal looga dhigo caddeynta nooc kasta oo dhir ah in ay ka tirsan yihiin gacalka (the class) iyo in kale, iyadoo aan la tixgelineynin noocaasi inuu ku jiro tusmada iyo in kale.
3. Qeybo kala geddisan oo tusmo ah ayaa la diyaarin karaa isla markaana la dhaqan-gelin karaa waqtiyo kala duwan.
4. Ogeysiinta dhaqan-gelinta qeyb ka mid ah tusmada, ee lagu soo daray, la saxay ama la tirey dhaqan-gelka ka dib, waa in lagu baahiyaa faafinta rasmiga ah ee dalka, iyadoo la xaqiijinayo soo jiidashada rabitaanka daneeyayaasha tusmada, ama gacalka noocyada dhirta ee qeybta ka ah tusmada la xiriirta.
5. Ka dib dhaqangalka qeyb ka mid ah tusmada, qof wuxuu galay dembi haddii uu adeegsado magacyo qaar oo aan ku jirin liiska tusmada ee nooca dhirtaas, ha ahaado magac la adeegsado ama uu uga jeedo isagu inuu u adeegsado kala soociddda abuur noocyo dhir kale ah ee isla kooxda qeybtan la xiriira.
6. Hay'adda SARIS oo kaashaneysa Wasaaradda Beeraha ayadoo eegeysa ujeeddooyinka qodobkan waxay diyaarinaysaa tixraaca soo ururinta nooc dhireedka.

**Qodobka 12aad**

**Xannibaadda iibka abuurka noocyada dhirta aan tusmeysneyn**

1. Iyadoo la raacayo sharcigan, ka dib dhaqangalka tusmada, qof kasta oo iibinaya abuur ama nooc ka mid ah dhirta kaas oo ka tirsan gacalka ay qaybtaas tixraaceedu la xiriirto isla markaana aanu ka mid ahayn tusmada, oo isticmaala magac asagu samaystey si uu uga sooco abuurada noocyada dhirta kale ee gacalkaas, wuxuu gelayaa dembi.
2. Farqada 1aad ee qodobkan laguma dabaqi doono qofka u adeegsan doona abuurka ama qaybta dhirta ujeedooyin cilmibaaris.

**Qodobka 13aad**
**Dhawridda taxda noocyada dhirta qaranka**

1. Hay'adda SARIS oo kaashanaysa Wasaaradda waxay diyaarinayaan shaxda noocyada dhirta taas oo ka kooban magacyada noocyada dhirta ee ganacsi ahaan loo fasaxay.
2. Wasaaradda Beeraha iyo Hay'adda SARIS waa inay dhawraan oo casriyeeyaan shaxda noocyada dhirta ayna ku sameyaan faafin rasmi ah si bulshada fursad ugu hesho.

**Qodobka 14aad**
**Tijaabooyinka dalagyada iyo warbixinnada**

1. Hay'adda SARIS oo kaashaneysa Wasaaradda waxay soo saareysaa xeer nidaamiye la xiriira tijaabooyinka dalagyada;
2. Natiijada tijaabada dalagyada SARIS ayaa warbixin kasoo saareysa.

**CUTUBKA 5AAD**
**TIJAABADA ABUURKA**
**Qodobka 15aad**
**Shaybaarrada Tijaabada Abuurka**

Hay'adda SARIS ayaa ka mas'uul ah inay sameyso shaybaarro lagu baaro abuurrada ayadoo dejineysa xeer nidaamiye.

**Qodobka 16aad**
**Shahaadooyinka Baarista**

Shahaadada natiijada baarista ee falanqeeyaha abuurka ee muunad uu u qaaday sarkaal loo igmaday ujeeddooyinka mid ka mid ah qodobbada sharcigan waa in ay ahaataa qaabka uu qeexayo xeer nidaamiyaha abuurka

**Qodobka 17aad**
**Isticmaalka muunado ee dacwadaha dembiyada**

Muunad uu soo qaadey sarkal idman looma adeegsan karo caddeyn dacwad dembi, ilaa la hubiyo muunada in loo soo qaadey si waafaqsan xeer nidaamiyaha abuurka ee loo dejiyay.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

## CUTUBKA 6AAD
## HUBINTA SOO DEJINTA IYO KA HORTAGA ISKU-FAXLIDDA

### Qodobka 18aad
### Xakamaynta soo dejinta abuur iyo noocyada dhirta ay suurtagal tahay inay wax yeelo geystaan

1. Haddii ay ula muuqato Hay'adda SARIS in ay muhiim tahay ama habboon tahay, waa inay adeegsataa awoodda la siiyey ee qodobkan si looga hortago in la soo geliyo dalka.
2. Abuur ama noocyada dhirta, haddii loo isticmaalo taranka dhirta dalka, keeni karaan ama laga yaabo inay xumaayeen noocyada kala dhirta duwan dalka iyadoo la adeegsanayo is faxlid, isku-dar ah ama siyaabo kale;
3. Soo dejinta dhammaan abuurada ama noocyada dhirta ee qodobkani khuseeyo waa mamnuuc marka laga reebo haysashada fasax lagu helay si waafaqsan shuruudaha, shatiga uu bixiyo sarkaal idman.
4. Qof kasta oo soo dejiya ama isku dayaya inuu keeno abuur khilaafsan faqradda 3aad ee qodobkan, wuxuu gelaya dembi.

### Qodobka 19aad
### Ka-hortagga isku-faxlidda waxyeelada leh

Hay'adda SARIS oo kaashanaysa Wasaaradda Beeraha ayaa soo saaraysa Xeer nidaamiye ku saabsan kahortagga isku faxlidda waxyeelada leh.

## CUTUBKA 7AAD
## XUQUUQAHA DHALAN ROGAHA DHIRTA

### Qodobka 20aad
### Bixinta Xuquuqaha ee dhalan rogaha dhirta

Hay'adda SARIS oo kaashanaysa Wasaaradda waxay soo saari doonaan xeer nidaamiye ku saabsan bixinta xuquuqaha ee dhalan rogaha dhirta si waafaqsan shargican.

### Qodobka 21aad
### Shuruudaha bixinta xuquuqaha

Hay'adda SARIS oo kaashanaysa Wasaaradda waxay soo saari doonaan xeer-nidaamiye ku saabsan shuruudaha bixinta xuquuqaha ee dhalan rogaha dhirta si waafaqsan shargican.

**Qodobka 22aad**

**Muddada la haysan karo xuquuqaha**

Hay'adda SARIS iyada oo kaashanaysa Wasaaradda waxay soo saari doonaan xeer nidaamiye ku saabsan muddada la haysan karo xuquuqaha si waafaqsan shargican.

**Qodobka 23aad**

**Nooca xuquuqaha**

Hay'adda SARIS oo kaashanaysa Wasaaradda waxay soo saari doonaan xeer nidaamiye ku saabsan nooca xuquuqaha dhalan rogaha si waafaqsan shargican.

**Qodobka 24aad**

**Noocyada dhirta ee la ilaalshay**

Hay'adda SARIS oo kaashanaysa Wasaaradda waxay soo saari doonaan xeer nidaamiye kusaabsan noocyada dhirta ee la ilaalshey si waafaqsan shargican.

**Qodobka 25aad**

**Dayactirka dhirta**

Hay'adda SARIS iyada oo kaashanaysa Wasaaradda waxay soo saari doonaan xeer nidaamiye ku saabsan habka dayactirka dhirta si waafaqsan shargican.

**Qodobka 26aad**

**Ruqsadaha**

Hay'adda SARIS oo kaashanaysa Wasaaradda waxay soo saari doonaan xeer nidaamiye ku saabsan habka bixinta ruqsadaha si waafaqsan shargican.

**Qodobka 27aad**

**Xog iyo Matelaad khaldan**

Qof kasta oo si ula kac ah ubixiya xog iyo matelaad khaldan wuxuu gelayaa dembi.

**Qodobka 28aad**

**Asaasidda Xarun Qaran ee Keyd Hiddo-sidyo Dhireed**

1. Wasaaradda Beeraha DFS waa inay aasaastaa Xarunta Qaran ee Kheyraadka Hiddo-sidyo ee Dhirta-National Plant Genetic Resources Centre ("NPGRC") oo mas'uul ka

ah ilaalinta iyo ka faa'iidaysiga joogtada ah ee kala duwanaanshaha dhirta ee dalka.

2. Wasaaradda beeraha DFS waxay soo saareysaa xeer nidaamiye ku saabsan Hawlaha Xarunta Qaran ee Kheyraadka Hiddo-sidyo ee Dhirta-National Plant Genetic Resources Centre ("NPGRC")
3. Waa inuu jiraa guddi la socda Xarunta Qaran ee Keyd Hiddo-sidyo Dhireedka.
4. Waxaa jiri doona Guddiga Xarunta Kheyraadka Hiddaha ee Dhirta Qaranka Soomaaliyeed kaas oo kormeeri doona arrimaha xaruntaas.
5. Wasaaradda ayaa dejineysa xeer nidaamiye kala hagaya oo qeexaya shuruudaha xubnaha guddiga iyo hawlaha guddiga.

## CUTUBKA 8AAD

## GUDDIGA KA GARNAQIDDA ARIMAHA ABUURKA IYO DHIRTA

### Qodobka 29aad

### Dhismaha guddiga

1. Wasiirka Wasaaradda Beeraha oo la tashanaya hay'adaha farsamo ee ku shaqada leh ayaa dhisaya Guddiga ka garnaqidda armimaha abuurka iyo dhirta.
2. Ilaa iyo inta guddiga ka garnaqidda armimaha abuurka iyo dhirta si rasmi ah loo aas-aasayo, dhammaan shaqooyinkiisa waxaa qaban doona wasaaradda.

### Qodobka 30aad

### Awoodda ( ikhtisaas) Guddiga ka Garnaqidda Armimaha Abuurka iyo Dhirta

Awoodaha guddigan waxay ka kooban yihiin"

1. Xalinta Khilaafaadka la xiriira Shahaado Siinta Abuurka iyo noocyada dhirta
2. Dacwadaha la xiriira muranka ku saabsan shahaado siinta abuurka ama xuquuqda abuurka in lagu iibiyo Soomaaliya.
3. Qabashada iyo ka garnaqidda racfaannada arimaha abuurka iyo noocyada dhirta ee ka yimaada go'aannada waaxyaha iyo hay'adaha Wasaaradda Beeraha.
4. Ka garnaqidda dacwadaha la xiriira xuquuqda maskaxda iyo Ilaalinta noocyada Dhirta.
5. Ka garnaqidda dacwadaha la xiriira khilaafaadka ku saabsan diiwaangelinta, lahaanshaha, ama jebinta xuquuqda la xiriirta noocyada dhirta ee Soomaaliya.
6. Ka garnaqidda dacwadaha la xiriira eedaymaha sheegaya in abuurka ama dhirtu aysan waafaqsanayn halbeegyada badqabka deegaanka ama caafimaadka.
7. Ka garnaqidda dacwadaha la xiriira khilaafaadka ka dhaxeeya shirkadaha abuurka, beeralayda, qaybiyeyaasha, ama dhinacyada kale ee la xiriira waajibaadka heshiisyada ama jebintooda.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

### Qodobka 31aad
### Qaab-dhismeedka Guddiga ka-garnaqidda armimaha Abuurka iyo Dhirta

1. Guddigaan waxaa uu ka kooban yahay xubnaha soo socda:

    b) Guddoomiyaha oo ah: khabiir sharci una qalma ama garyaqaan sare oo uu magacaabey wasiirka Wasaaradda Beeraha qofkaas oo aan da'diisuna ka yareen afartan(40) sano.

    t) Laba Khabiir Farsamo: oo ah khubaro ku takhasustay arimhaha beeraha, abuurka, iyo dhirta oo ay magacawdey Wasaaradda. Khubaradan oo leh aqoon gaar ah oo ku saabsan shahaado siinta abuurka, noocyada dhirta, iyo tayada abuurka haystana shahaadada heerka labaad (MSc) iyo khibrad shaqo 15 sano.

    j) Laba Wakiil Beeralay: oo ah xubno ka tirsan bulshada beeralayda, oo ay soo xuleen iskaashatooyinka beeralayda oo la aqoonsan yahay, kuwaas oo matalaya danaha beeralayda.

2. Guddigan wuxuu yeelan doonaa xafiis diiwaan-gelin iyo shaqaale maamul oo mas'uul ka ah maamulka dacwadaha iyo shaqooyinka kale ee maamulka.

### Qodobka 32aad
### Racfaan ka qaadashada go'aannada guddiga

1. Dhinacyada aan ku qanacsaneyn go'aanka guddiga waxay racfaan u gudbin karaan Maxkamadda Sare ee dalka 30 maalmood gudahood laga bilaabo marka go'aanka la soo saaro.
2. Racfaanku wuxuu ku saleysnaanayaa khaladaadka sharciyeed, hab-dhaqanka guddiga aan cadaalad ahayn, ama khaladka xaqiiqooyinka iyo cadeymaha loo adeegsaday go'aanka.

## CUTUBKA 9AAD
## DAMBIYADA IYO CIQAABAHA
### Qodobka 33aad
### Dembiyada

Qofku waxa uu noqon karaa dambiile haddii:

1. Si ula kac ah u bixiyo warbixin been ah marka uu buuxinaayo foomka codsiga;

2. Si ula kac ah u bixiyo macluumaad been ah si u khiyaameeyo kormeeraha abuur, falanqeeyaha abuur ama baaraha dhirta;
3. Is hortaago, farageliyo ama u hogaansami waayo amar kasta oo sharci ah oo uu bixiyo kormeeraha abuur si uu u fuliyo awooddiisa ama waajibaadkiisa hoos yimaada sharcigan;
4. Sameeyo ama sababo in la sameeyo hadal been abuur ah, xayaysiis been ah, iyo in uu soo saaro ama lasoo baxo shahaado been abuur ah aan lagu bixin si waafaqsan sharcigan
5. Iyada oo aan loo diwaan gashanayn , uu soo dejiyo, dhoofiyo, warshadeeyo abuur ama noocyada dhirta iyo baakadeynta abuur si uu u iibiyo.
6. Iibiya ama soo bandhiga iibka nooc kasta oo abuur ama dhir ah oo aan ku qorneyn shahaadadii lagu siiyey si waafqasan sharcigan;
7. Uu soo bandhigo iib iyadoo abuurka uusan buuxineyn halbeegga abuurka laga doonayo ama loo diiday shahaadada abuurka noocyada dhirta.

**Qodobka 34aad**

**Ciqaabaha Dambiyada ku xusan Sharcigan**

Dambi kasta ee ka dhasha jabinta sharcigan waxaa lagu dhaqayaa Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed iyo xeerarka kale ee dalka.

## CUTUBKA 10AAD
## QODOBBO GUUD

**Qodobka 35aad**

**Xeer Nidaamiyaasha abuurka**

Hay'adda SARIS oo kaashanaysa wasaaradda ayaa samayneysa xeer-nidaamiyaasha abuurka si waafaqsan sharcigan.

**Qodobka 36aad**

**Dib-u-eegista**

Sharcigan waxaa dib-u-eegis lagu sameyn karaa xilli kasta oo baahi lagama maarmaan ah ay timaado kadib markuu dhaqan-galo.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

## Qodobka 37aad
## Baabi'in

Sharcigaan waxa uu baabi'inayaa laga billaabo marka uu dhaqan-galo sharci kasto oo ka hor imaanaya ama aan la socon karin sharcigan.

## Qodobka 38aad
## Dhaqangalka

Sharcigaan waxa uu dhaqan-gelayaa marka uu ansixiyo Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, uuna Saxiixo Madaxweynaha JFS, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda FS.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**SHARCI LR.36** **TAARIIKH: 24-TA DISEEMBAR 2024**

**SHARCIGA SHAQADA SOOMAALIYEED**

**MADAXWEYNAHA J.F.S,**

| | |
|---|---|
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG. |
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobka 82aad, Faqradda 3aad ee Dastuurka KMG. |
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG. |
| **MARKUU ARKAY:** | Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee summaddeedu tahay **XGGSH/655/B11/24**, ku taariikheysan **23/12/2024**, ujeeddaduna tahay Soo Gudbin Ansixinta''Hindisaha Sharciyeedka Shaqada Soomaaliyeed. |
| **MARKUU TIXGELIYAY:** | Baahida loo qabo in la meel mariyo sharcigan. |

FR

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxaa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga Shaqada Soomaaliyeed.

**Qodobka 2aad**

Waxa uu sharcigan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-019-2025
TAARIIKH: 10-05-2025
SAXIIX:
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
29 MAR 2025
BY: Fadumo Mohamed Omar Salihi
SAACAD ________ SAXIIX ________

**Madaxweynaha J. F.S.**

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

## JUMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

# HINDISE-SHARCIYEEDKA XEERKA SHAQADA SOOMAALIYEED

NOFEEMBAR, 2024

Tusmo;


QEYBTA IAAD ........ 1
SHARCIYADA GUUD IYO XEERARKA ........ 1
CUTUBKA 1AAD ........ 1
Magaca iyo Qeexidda Erayada ........ 1
Qodobka 1aad Magaca Xeerkan ........ 1
Qodobka 2aad ........ 1
Qeexidda Erayada ........ 1
Qodobka 3aad ........ 7
Ku Dhaqmid ........ 7
CUTUBKA 2AAD ........ 8
MABAADDI'DA GUUD ........ 8
Qodobka 4aad ........ 8
Xaqa Xoriyadda Mihnadda ........ 8
Qodobka 5aad ........ 8
Mas'uuliyadda Ilaalinta Xeerka Shaqada iyo Aqoonsiga Kaalinta Shaqaalaaha ........ 8
Waxaa Iska Leh Dowladda ........ 8
Qodobka 6aad ........ 8
Sinnaanta iyo Takoor La'aanta ........ 8
Qodobka 7aad ........ 10
Shaqo khasab ah ........ 10
Qodobka 8aad ........ 11
Xadgudub Damac Galmo iyo Faduullin (Faduullin, ama Qash-qashaad Dhaqan Xumo ah) ........ 11
Qodobka 9aad ........ 12
Xoriyadda ku Biiridda ........ 12
Qodobka 10aad ........ 12
Xuquuqda Shaqaaluhu Waa Lama Taabtaan ........ 12
Qodobka 11aad ........ 12
Qodobada Lagu Xallinayo Khilaafaadka Shaqada ........ 12
QEYBTA II: ........ 13
MAAMULKA, KORMEERKA IYO BAARISTA SHAQADA ........ 13
CUTUBKA 3AAD: ........ 13
MAAMULKA HEER WASIIR ........ 13
Qodobka 12aad ........ 13
Wasiirka ........ 13
Qodobka 13aad ........ 14
Guddiga Sare ee Shaqada Federaalka ........ 14
Qodobka 14aad ........ 14
Agaasimaha Shaqada ........ 14
Qodobka 15aad ........ 15
Agaasimaha Badqabka Mihnadda iyo Caafimaadka Goobta Shaqada: ........ 15
Qodobka 16aad ........ 15
Saraakiisha kale: Magacaabidda, Awoodaha iyo Hawlaha ........ 15
Qodobka 17aad ........ 19
Warqadda Awoodsiinta Iyo Kaarka Aqoonsiga ........ 19
Qodobka 18aad ........ 19
Awoodda Gelidda Goobaha Shaqada ........ 19
Qodobka 19aad ........ 20
Iskaashiga Hay'adaha Dawladda ........ 20
Qodobka 20aad ........ 20
Mamnuucid ........ 20

Qodobka 21aad ... 20
Awood La mid ah Tan Saraakiisha Booliska ... 20
Qodobka 22aad ... 20
Soo Gudbinta Warbixinnada iyo Ilaalinta Siraha ... 20
Qodobka 23aad ... 21
Diiwaangelinta Ururrada Shaqaalaha iyo Ururrada Loo-Shaqeeyayaasha ... 21
Qodobka 24aad ... 22
Daadejinta Awoodaha iyo Hawlaha Saraakiisha ... 22
CUTUBKA 4AAD: ... 22
GUDDIGA SHAQADA FEDERAALKA ... 22
Qodobka 25aad ... 22
Sameynta Guddiga ... 22
Qodobka 26aad ... 22
Ka Koobnaanta iyo Magacaabista ... 22
Qodobka 27aad ... 23
Awoodaha iyo Hawlaha Guddiga ... 23
Qodobka 28aad ... 23
Sameynta Guddiyada ... 23
Qodobka 29aad ... 24
Xuquuqda Guddiga ... 24
Qodobka 30aad ... 24
Habraacyada Xeer-Hoosaadka ... 24
QEYBTA III: ... 24
SAMEYNTA XEER-NIDAAMIYAASHA GOOBAHA SHAQADA ... 24
CUTUBKA 5AAD: ... 24
MAAMULKA IYO DHAQANGELINTA ... 24
Qodobka 31aad ... 24
Agaasimaha ... 24
Qodobka 32aad ... 24
Awoodaha iyo Waajibaadka Agaasimaha Guud ... 24
CUTUBKA 6AAD: ... 27
SAMEYNTA IYO DIIWAANGELINTA ... 27
Qodobka 33aad ... 27
Diiwaanka Goobaha Shaqada ... 27
Qodobka 34aad ... 28
Diiwaangelinta Goobaha Shaqada ... 28
CUTUBKA 7AAD: ... 29
XAALADAHA GOOBAHA SHAQADA ... 29
Qodobka 35aad ... 29
Waajibaadka Guud ee Qofka Mas'uulka ka ah Goobta Shaqada ... 29
Qodobka 36aad ... 31
Daryeel ... 31
Qodobka 37aad ... 31
Caafimaadka Goobaha Shaqada ... 31
Qodobka 38aad ... 32
Badqabka Goobaha Shaqada ... 32
Qodobka 39aad ... 34
Diiwaan Gelinta Tababar-xilliyeed ama Mid Billaw ah ... 34
Qodobka 40aad ... 34
Wargelinta Cudurrada Mihnadda iyo Shilalka Ka Dhaca Goobaha Shaqada ... 34
Qodobka 41aad ... 35
Wargelinta Xogta Shillalka iyo Cudurrada Mihnadda ee Goobaha Shaqada ... 35

Qodobka 42aad ... 35
Xarumaha Caafimaadka ... 35
Qodobka 43aad ... 35
Gurmadka Shaqaalaha Dhaawacma iyo kuwa Xanuunsada ... 35
Qodobka 44aad ... 36
Dhejinta Habraaca Badqabka Mihnadda iyo Caafimaadka Shaqaalaha ... 36
Qodobka 45aad ... 36
Meel Marinta Hannaanka iyo habraacyada Badqabka Mihnadda iyo Caafimaadka Goobaha Shaqada ... 36
QEYBTA IV: ... 37
SHAQO SIIN ... 37
CUTUBKA 8AAD: ... 37
ADEEGGA HESHIISKA CAADIGA AH ... 37
Qodobka 46aad ... 37
Qaabka Heshiiska ... 37
Qodobka 47aad ... 37
Faahfaahinta Shaqo siinta ... 37
Qodobka 48aad ... 38
Waajibaadka Loo-shaqeeyaha ... 38
Qodobka 49aad ... 39
Waajibaadka Shaqaalaha ... 39
CUTUBKA 9AAD: ... 39
HESHIISKA FARSAMO BARADKA ... 39
Qodobka 50aad ... 39
Qeexid, Ujeedooyin iyo Wax-ka-dhaafid ... 39
Qodobka 51aad ... 39
Faahfaahin ... 39
Qodobka 52aad ... 40
Muddada iyo Xaaladda Farasamo-baradka ... 40
Qodobka 53aad ... 40
Baaris Caafimaad ... 40
Qodobka 54aad ... 40
Shaqo Sii wadasho ... 40
Qodobka 55aad ... 41
Waajibaadka Loo-shaqeeyaha ... 41
Qodobka 56aad ... 41
Waajibaadka Farsamo-baradka (Apprentice) ... 41
Qodobka 57aad ... 41
Imtixaanka Qiimeynta ... 41
Qodobka 58aad ... 42
Shaqosiin Waajib ah ... 42
CUTUBKA 10AAD: ... 42
QANDARAASYO HOOSAAD ... 42
Qodobka 59aad ... 42
Ogeysiiska iyo Soo Gudbinta Nuqullada ... 42
Qodobka 60aad ... 42
Mas'uuliyadda ... 42
CUTUBKA 11AAD ... 43
XAALADAHA IYO SHURUUDAHA ... 43
Qodobka 61aad ... 43
Xaaladaha Ugu Yar ee Aasaasiga u ah Shaqosiinta ... 43
Qodobka 62aad ... 43
Saacadaha Shaqada ... 43

Qodobka 63aad ..... 43
Shaqooyinka aan Xiriirka Aheyn ..... 43
Qodobka 64aad ..... 43
Fasaxyada Nasashada ee Todobaadka ..... 43
Qodobka 65aad ..... 44
Fasaxyada Qaranka ..... 44
Qodobka 66aad ..... 44
Biyaha ..... 44
Qodobka 67aad ..... 45
Cuntada ..... 45
Qodobka 68aad ..... 45
Daryeelka Caafimaadka ..... 45
Qodobka 69aad ..... 46
Fasax Sannadeedka ..... 46
Qodobka 70aad ..... 46
Fasax Xanuun ..... 46
Qodobka 71aad ..... 47
Fasax Gaar ah ..... 47
Qodobka 72aad ..... 47
Diiwaanka Fasaxa ..... 47
CUTUBKA 12AAD: ..... 47
GO'AAMINTA IYO ILAALINTA XUQUUQDA ..... 47
Qodobka 73aad ..... 47
Xuquuq ..... 47
Qodobka 74 aad ..... 48
Ku Filnaasho iyo U Sinnaansho ..... 48
Qodobka 75aad ..... 48
Qaababka Bixinta Xuquuqda ..... 48
Qodobka 76aad ..... 49
Ujuurada ugu yar ..... 49
Qodobka 77aad ..... 49
Dheef Kale oo Dheeraad ah ..... 49
Qodobka 78aad ..... 49
Gunnooyinka Ciidaha ..... 49
Qodobka 79aad ..... 50
Nooca iyo Muddada Lacag Bixinta ..... 50
Qodobka 80aad ..... 50
Warqadaha Lacag Bixinta ..... 50
Qodobka 81aad ..... 51
Dhisidda Golayaasha Xuquuqda ..... 51
Qodobka 82aad ..... 51
Waajibaadka iyo Awoodaha ..... 51
Qodobka 83aad ..... 52
Dalabka Xuquuqaha ..... 52
Qodobka 84aad ..... 54
Ilaalinta ..... 54
Qodobka 85aad ..... 55
Lacag Ka Jarista iyo Ganaaxyada Anshax Marinta ..... 55
CUTUBKA 13AAD ..... 56
DIIWAANNADA SHAQO SIINTA ..... 56
Qodobka 86aad ..... 56
Diiwaannada Laga Rabo in uu Keydiyo Loo-shaqeeyuhu ..... 56

Qodobka 87aad ..... 56
Qoraal Been-Abuur ah ..... 56
CUTUBKA 14AAD: ..... 57
CEYMISKA IYO ILAALINTA SHAQAALAHA ..... 57
Qodobka 88aad ..... 57
Ceymiska iyo Ilaalinta Shaqaalaha ..... 57
CUTUBKA 15AAD: ..... 57
HESHIISKA SHAQOSIINTA DIBEDDA ..... 57
Qodobka 89aad ..... 57
Awoodda Gelidda Heshiiska ..... 57
Qodobka 90aad ..... 58
Dammaanad ..... 58
Qodobka 91aad ..... 58
Ku Qalqaalinta ama ku Khasbidda Shaqo Dibadeed Heshiis La'aan ..... 58
CUTUBKA 16AAD: ..... 58
MAAREYNTA SHAQADA ..... 58
Qodobka 92aad ..... 58
Agaasime ama Sarkaal Idman ..... 58
Qodobka 93aad ..... 59
Ogeysiisyada ..... 59
Qodobka 94aad ..... 59
Diiwaangelinta Shaqaalaha ..... 59
Qodobka 95aad ..... 60
Meeleynta Shaqaalaha ..... 60
Qodobka 96aad ..... 60
Shaqo siinta Shaqo-doonka ..... 60
Qodobka 97aad ..... 60
Araajida Shaqo siinta Shaqaalaha ..... 60
Qodobka 98aad ..... 61
Mudnaanta iyo Tixraaca Shaqo siinta ..... 61
Qodobka 99aad ..... 61
Loo-shaqeeyeyaashu Waa Ay Diidi Karaan In Ay Aqbalaan Shaqaalaha Qaarkood ..... 61
Qodobka 100aad ..... 62
Howlgelinta Tooska ah ee Shaqaalaha ..... 62
Qodobka 101aad ..... 62
Ka Dhaafid ..... 62
Qodobka 102aad ..... 62
Dembiyada ka Dhalan kara Jebinta Qoddobada Cutubkan ..... 62
CUTUBKA 17AAD ..... 62
SHAQO KA SAARIS ..... 62
Qodobka 103aad ..... 62
Shaqo Ka Saaris Ogeysiis Leh ..... 62
Qodobka 104aad ..... 63
Magdhawga Beddalka Shaqo Ka Saaris Ogeysiis La'aan ..... 63
Qodobka 105aad ..... 63
Habka u Beddelidda Shaqo siin Shaqaale Ku-Meel-Gaar ah Heshiis Shaqo ..... 63
Qodobka 106aad ..... 63
MuddadaTijaabada ah ..... 63
Qodobka 107aad ..... 64
Shaqaale Dhimis ..... 64
Qodobka 108aad ..... 65
Dhaqan Xumo ..... 65

Qodobka 109aad ..... 65
Caddeynta Sababta Shaqo ka Saarista ..... 65
Qodobka 110aad ..... 65
Shaqo Ka Saaris Degdeg ah ..... 65
Qodobka 111aad ..... 66
Shaqo Ka Saaris Caddaalad Darro ah ..... 66
Qodobka 112aad ..... 67
Ka Cabasho Caddaalad Darro iyo Shaqo Ka Saaris Degdeg ah ..... 67
Qodobka 113aad ..... 67
Magdhawga Shaqo ka Saarid Khaldan ama Heshiis ka Bixid Caddaalad Darro ah ..... 67
Qodobka 114 aad ..... 68
Hakinta Xiriirka Shaqo Siinta ..... 68
Qodobka 115aad ..... 69
Musallafidda Loo-shaqeeyaha ..... 69
Qodobka 116aad ..... 70
La Kala Wareegid Goob Shaqo ..... 70
Qodobka 117aad ..... 70
Arrimaha Mamnuuca ka ah ee Qof Shaqada Looga Saari Karin ..... 70
Qodobka 118aad ..... 71
Dheefta Duugta (Geerida) ..... 71
Qodobka 119aad ..... 71
Shahaadada Adeegga ..... 71
QEYBTA V ..... 71
DARYEEL GAAR AH ..... 71
CUTUBKA 18AAD ..... 71
QODOBBADA GUUD ..... 71
Qodobka 120aad ..... 71
Qeexidda "Shaqada Habeenkii" ..... 71
Qodobka 121aad ..... 71
Shaqo Reebban (Mamnuuc) ..... 71
Qodobka 122aad ..... 72
Awoodaha Wasiirka ee la Xiriira Shaqada Habeenkii ..... 72
CUTUBKA 19AAD ..... 72
CARRUURTA ..... 72
Qodobka 123aad ..... 72
Macnaha "Shaqosiin" ..... 72
Qodobka 124aad ..... 72
Carruur ..... 72
Qodobka 125aad Shaqosiinta Carruurta ..... 73
Qodobka 126aad ..... 74
Diiwaanka Shaqo siinta Carruurta ..... 74
Qodobka 127aad ..... 75
Baaris Caafimaad ..... 75
CUTUBKA 20AAD ..... 75
HAWEENKA ..... 75
Qodobka 128aad ..... 75
Shaqosiinta Haweenka ..... 75
Qodobka 129aad ..... 75
Fasax Dhalmo ..... 75
Qodobka 130aad ..... 76
Naas-Nuujinta ..... 76
CUTUBKA 21AAD ..... 76

DADKA NAAFADA AH ... 76
Qodobka 131aad ... 76
Xaqa Shaqada iyo Takoor La'aanta Shaqo siinta ... 76
Qodobka 132aad ... 77
Hawlgelin Shaqo oo ku Habboon ... 77
Qodobka 133aad ... 78
Bixinta Taageerada Lagama Maarmaanka ah ... 78
QEYBTA VI: ... 78
CUDURRADA, DHAAWACYADA IYO SHILALKA MIHNADDA ... 78
CUTUBKA 22AAD: ... 78
MAAMULKA ... 78
Qodobka 134aad ... 78
Agaasimaha ... 78
Qodobka 135aad ... 78
Diidmooyinka iyo Cabashooyinka Laga Qaato Go'aanada Agaasimaha ... 78
CUTUBKA 23AAD ... 79
WAAJIBAADKA AGAASIMAHA, LOO-SHAQEEYAHA, SHAQAALAHA EE KU AADDAN SHILALKA MIHNADDA, DHAAWACYADA IYO CUDURRADA SHAQADA ... 79
Qodobka 136aad ... 79
Waajibaadka Guud ee Loo-Shaqeeyaha ... 79
Qodobka 137aad ... 80
Waajibaadka Guud ee Shaqaalaha ... 80
Qodobka 138aad Waajibaadka Agaasimaha ... 81
Qodobka 139aad ... 81
Daryeel Caafimaad ... 81
CUTUBKA 24AAD ... 82
MAGDHAWGA, DEMBIYADA, SHURUUCDA GAARKA AH IYO XEER-NIDAAMIYEYAASHA ... 82
Qodobka 140aad ... 82
Xaqa Magdhowga ... 82
Qodobka 141aad ... 83
Xad-Gudubyada iyo Ciqaabaha ... 83
Qodobka 142aad ... 84
Ansixinta Shuruucda Gaarka ah, Xeer-nidaamiyayaasha La-xiriira Magdhawga Shilalka Mihnadaha, Dhaawacyada iyo Cudurrada Shaqada ... 84
QEYBTA VII ... 85
XIRIIRKA SHAQO WADAREEDKA ... 85
CUTUBKA 25AAD ... 85
XORRIYADDA KU BIIRISTA ... 85
Qodobka 143aad ... 85
Xaqa iyo Xorriyadda ku Biirista Urrurada Shaqaalaha ... 85
Qodobka 144aad ... 86
Ilaalinta Xuquuqda Shaqaalaha ... 86
Qodobka 145aad ... 86
Xaqa iyo Xorriyadda ku Biirista Urrurada loo-shaqeeyeyaasha ... 86
Qodobka 146aad ... 87
Ilaalinta Xuquuqda Loo-shaqeeyeyaasha ... 87
Qodobka 147aad ... 87
Xuquuqda Guud iyo Waajibaadka Ururrada Shaqaalaha, Ururrada Loo-shaqeeyeyaasha iyo Xiriirka Ururada Shaqaalaha/loo-shaqeeyeyaasha ... 87
Qodobka 148aad ... 88
Madax Bannaani ... 88

Qodobka 149aad ... 89
Khilaafaadka Ka Dhalan Kara Cutubka ... 89
Qodobka 150aad ... 89
Xayiraadda Ururrada, Mas'uuliyadda Dembiyada Ciqaabta Iyo kuwa Madaniga ah ... 89
Qodobka 151aad ... 89
Nuxurka Dastuurka iyo Qawaaniinta ... 89
Qodobka 152aad ... 90
Soo Gudbinta Nuqullada Dastuurka iyo Qawaaniinta ... 90
CUTUBKA 26AAD ... 90
SAMEYNTA IYO DIIWAANGELINTA URURRADA SHAQAALAHA IYO URURRADA LOO-SHAQEEYAYAASHA ... 90
Qodobka 153aad ... 90
Ururrada iyo Ujeeddooyinka ... 90
Qodobka 154aad ... 90
Hawlaha Ururrada Shaqaalaha ... 90
Qodobka 155aad ... 90
Asaasid Urur ... 90
Qodobka 156aad ... 91
Arjiga Diiwaangelinta Urur Shaqaale ama Urur Loo-shaqeeye ... 91
Qodobka 157aad ... 91
Shuruudaha Diiwaangelinta Urur Shaqaale ... 91
Qodobka 158aad ... 92
Shuruudaha Diiwaangelinta Urur Loo-Shaqeeye ... 92
Qodobka 159aad ... 92
Shuruudaha Diiwaangelinta Xiriirka Guud ee Ururro Shaqaale ... 92
Qodobka 160aad ... 92
Shuruudaha Diiwaangelinta Xiriirrada Guud eeUrurrada Loo-shaqeeyeyaasha ... 92
Qodobka 161aad ... 93
Arjiga Diiwaangelinta ... 93
Qodobka 162aad ... 94
Diiwaangelinta Ururrada Shaqaalaha, Ururrada Loo-shaqeeyeyaasha ama xiriirka ururada shaqaalaha/loo-shaqeeyeyaasha ... 94
Qodobka 163aad ... 94
Diidista Diiwaangelinta Ururro Shaqaale, Ururro Loo-shaqeeyeyal ama Xiriirka Ururada Shaqaalaha/loo-shqeeyeyaasha ... 94
Qodobka 164aad ... 94
Waxyaabaha Sharci Ahaanka Dhalan karaDiiwaangelinta ... 94
Qodobka 165aad ... 95
Waxyaabahaka Dhalan Kara Is-Diiwaangelin La'aanta ... 95
Qodobka 166aad ... 95
Xafiis Diiwaangashan ... 95
Qodobka 167aad ... 96
Laamaha ... 96
Qodobka 168aad ... 96
Midoobid ... 96
Qodobka 169aad ... 97
WargelintaWax Ka Beddelka Magaca ama Dastuurka ... 97
Qodobka 170aad ... 98
Baabi'in ama Hakin Diiwaangelin ... 98
Qodobka 171aad ... 99
Kala Dirid ... 99
Qodobka 172aad ... 100

Cabasho ka Qaadashada Go'aanka Diiwaanhayaha ........ 100
CUTUBKA 27AAD ........ 100
XUBINNIMADA IYO MAAREYNTA ........ 100
Qodobka 173aad ........ 100
Xubinnimada Urur Shaqaale ........ 100
Qodobka 174aad ........ 100
Xubnaha Cod-bixinta ee Urur Shaqaale ........ 100
Qodobka 175aad ........ 100
Saraakiil Sar-sare ........ 100
Qodobka 176aad ........ 101
Doorashada Saraakiisha Sare ........ 101
Qodobka 177aad ........ 101
Wargelinta Saraakiisha Sare ........ 101
Qodobka 178aad ........ 101
Waajibaadka Saraakiisha Sar-sare ........ 101
CUTUBKA 28AAD: ........ 102
LACAGAHA, HANTIDA, XISAABAADKA IYO DHEEFAHA ........ 102
Qodobka 179aad ........ 102
Saraakiisha Sare oo ah Guddiga Sare ee Maamulka ........ 102
Qodobka 180aad ........ 102
Qaaraanka Xubnaha ........ 102
Qodobka 181aad ........ 103
Lacag ka Jarista Shaqaale la Ururreyn karo oo ku Jira Heshiis Wadareed ........ 103
Qodobka 182aad ........ 103
Qodobbo Guud ee Lacag Ka-Jarista ........ 103
Qodobka 183aad ........ 104
Isticmaalka Lacagaha ........ 104
Qodobka 184aad ........ 104
Mamnuucidda Bixinta Ganaaxyada ama Lacagaha Ciqaabta ........ 104
Qodobka 185aad ........ 104
Ku Takrifalka Lacagta iyo Hantida Kale ........ 104
Qodobka 186aad ........ 104
Diyaarinta iyo Awoodda Xisaabaad Faahfaahsan ........ 104
Qodobka 187aad ........ 105
Baarista Xisaabaadka iyo Xasuus Reebka ........ 105
Qodobka 188aad ........ 106
Ku Takrifal Hanti ........ 106
CUTUBKA 29AAD: ........ 107
AQOONSASHADA URURRADA SHAQAALAHA ........ 107
Qodobka 190aad ........ 107
Aqoonsasho ........ 107
CUTUBKA 30AAD ........ 108
HESHIIS WADAREEDYO ........ 108
Qodobka 191aad ........ 108
Dhinacyada Heshiisku Khuseeyo ........ 108
Qodobka 192aad ........ 108
Habraaca Diyaarinta Heshiiska ........ 108
Qodobka 193aad ........ 109
Dulucda Heshiis Wadareedka ........ 109
Qodobka 194aad ........ 109
Diiwaangelin Heshiiska ........ 109
Qodobka 195aad ........ 109

Saameynta Sharciga ee Heshiis Wadareedka ........ 109
Qodobka 196aad ........ 110
Qodobbo U Roon Shaqaalaha ........ 110
Qodobka 197aad ........ 110
Ka Dhaafidda Khidmada Shaabadda iyo Diiwaangelinta ........ 110
Qodobka 198aad ........ 110
Xudduudaha iyo Muddada uu Ansax Yahay Heshiisku ........ 110
Qodobka 199aad ........ 110
Ka Qeyb Noqosho Heshiiska Xiga ........ 110
Qodobka 200aad ........ 111
Dhaqangal ........ 111
Qodobka 201aad ........ 111
Baabi'in Heshiis Wadareed ........ 111
Qodobka 202aad ........ 111
Heshiisyo Shaqo oo Dheeraad ah ........ 111
Qodobka 203aad ........ 111
Xiriirrada Shaqo siinta ee Aan ku Xirneen Xeer-nidaamiyeyaal Wadareed ........ 111
Qodobka 204aad ........ 111
Xallinta Khilaafaadka ........ 111
CUTUBKA 31AAD: ........ 112
GUDDIGA BAARISTA ........ 112
Qodobka 205aad Magacaabista iyo Waajibaadka ........ 112
Qodobka 206aad ........ 112
Warbixinnada ........ 112
CUTUBKA 32AAD ........ 113
XALLINTA KHILAAFAADKA SHAQADA ........ 113
Qodobka 207aad ........ 113
Khilaafaadka Shaqada ee Dhinacyada ........ 113
Qodobka 208aad Baaraha Shaqada Gobolka ........ 113
Qodobka 209aad ........ 113
Khilaafaad Wadareed Shaqo ........ 113
Qodobka 210aad ........ 114
Cabashada Laga Qaato Go'aannada Maxkamadda Gobolka ........ 114
Qodobka 211aad ........ 114
Xuquuqda Shaqo joojin iyo Xirasho Goob Shaqo (Lockouts) ........ 114
QEYBTA IX ........ 116
QODOBBO GUUD ........ 116
CUTUBKA 33AAD: ........ 116
CIQAABAHA ........ 116
Qodobka 212aad ........ 116
Is-hortaagista Baarayaasha Shaqada ........ 116
Qodobka 213aad ........ 116
Xadgudubyada Kale ........ 116
Qodobka 214aad ........ 116
Lacagta Ganaaxyada ........ 116
Qodobka 215aad ........ 116
Dembi ku Soo Noqnoqosho ........ 116
Qodobka 216aad ........ 117
Gal Furid Cabasho ........ 117
Qodobka 217aad ........ 117
Xeer-Nidaamiye ........ 117
Qodobka 218aad ........ 117

Baabi'in ... 117
Qodobka 219aad ... 117
Dhaqangal ... 117

s

## QEYBTA IAAD
## SHARCIYADA GUUD IYO XEERARKA

### CUTUBKA 1AAD
### Magaca iyo Qeexidda Erayada

**Qodobka 1aad Magaca Xeerkan**

Magaca Xeerkan waxaa loogu yeerayaa "**Xeerka Shaqada Soomaaliyeed" (*Somali Labour Code*).**

**Qodobka 2aad**
**Qeexidda Erayada**

Haddii aan si kale loogu qeexin xeerkan dhexdiisa, qeexidda erayada soo socda waa sidan:

1. **"Diikhowga Hawada"** waxaa loola jeedaa walxo wasakh ah oo hawada ku jira, kuwaas oo waxyeello u geysan kara caafimaadka noolaha iyo deegaanka.

2. **"Sarkaal Idman"** waxaa loola jeedaa Sarkaal kasta oo la siiyo awood uu ku fulin karo ficil kasta iyo adeegyada ku xusan xeerkan, kaas oo wakiilka ah Guddiga Shaqada ee Fadaraalka, Agaasimaha Shaqada, Agaasimaha Badbqabka iyo Caafimaadka goobta shaqada.

3. **"Xoogsade Maalin Goosad ah"** waxaa loola jeedaa qof kasta oo fulinaya hawl Mucayin ah, kuna hawlgala shuruudaha shaqada taas oo beddelkeeda uu ku qaadanayo lacagta uu kasbaday marka shaqadu dhammaato

4. **"Habraac Shaqo"** waxaa loola jeedaa qoraal kasta oo loogu talagalay in lagu hago shaqada si loo gaaro waxqabad wanaagsan, haddii ay ahaan laheyd mihnad, xirfad, warshad ama shirkad.

5. **"Carruur"** waxaa loola jeedaa qof kasta oo aanay da'diisu gaarin **18** Sano.

6. **"Gorgortan Wadareed"** waxaa loola jeedaa wada xaajood u dhaxeeya loo-shaqeeye, koox loo-shaqeeye ah ama wax ka badan ururro loo-shaqeeye ah ama wax ka badan ururro shaqaale si:
   - **b)** Loo go'aamiyo duruufaha shaqada iyo shuruudaha shaqosiinta;
   - **t)** Loo nidaamiyo xiriirrada u dhaxeeya labada dhinac ee loo-shaqeeye iyo shaqaale;
   - **j)** Loo nidaamiyo xiriirrada u dhaxeeya ururro loo-shaqeeye ama ururro shaqaale.

7. **"Heshiis Wadareed"** waxa loola jeedaa heshiis diiwaan gashan oo ku salaysan shuruudaha iyo xaaladaha shaqo siinta oo qoraal ah, sida: qoraal dhexmara urur shaqaale iyo urur loo-shaqeeye, koox loo-shaqeeye ah ama urur shaqaale.

8. **"Guddi Sare"** waxaa loola jeedaa Guddiga Sare ee Shaqada Federaalka ee lagu aasaasay qodobka **25**[aad] ee xeerkan.

9. **"Qof Tababaran"** waxaa loola jeedaa qof kasta oo haysta shahaadooyin, leh tababar iyo waayo-aragnimo ku filan oo u suurtogalinaysa in uu qabto, fuliyo waajibaad gaar ah ama shaqo mucayin ah.

10. **"Heshiis Shaqo siin"** waxaa loola jeedaa heshiis la shaaciyey ama mid aan la shaacin, qaab kasta ama ku shaqeyn shaqaale muddo cayiman oo ay ka mid tahay heshiis farsamo barad.

11. **"Ku-tiirsane"** waxaa loola jeedaa xubin ka mid ah qoyska qofka shaqaalaha ah ama qaraabadiisa,

kaas oo noloshiisu si weyn ugu tiirsan tahay shaqaalahaa

**12. "Agaasime"** waxaa loola jeedaa Agaasimaha Shaqada, Badqabka Mihnadda iyo Caafimaadka ama midkood.

**13. "Naafo"** waxaa loola jeedaa nuqsaan kasta oo ku timaadda qofka jirkiisa, maskaxdiisa, dareenkiisa ama xaalado kale taas oo waxyeeli karta qofka araggiisa, maqalkiisa, waxbarashadiisa, fikirkiisa ama awooddiisa oo saameyn ku yeelan karta in uu ka qayb qaadan waayo dhaqan-dhaqaalaha bulshada.

**14. "Shaqaale"** waxaa loola jeedaa qof kasta oo fulinaya hawl maskaxeed ama mid gacmeed oo uu la galay loo-shaqeeye, noqon kartana heshiis gaar ah ama mid guud oo af ama qoraal ah, taas oo ah shaqo farsamo-barad ama tijaabo ah, laguna helayo xuquuq.

**15. "Loo-Shaqeeye"** waxaa loola jeedaa loo-shaqeeye si sharci ah loogu shaqeeyo, shaqana u dira dad shaqaale ah, shaqadaasuna joogto ha ahaato ama aanay ahayn midkoodba loo-shaqeeya yaashaasna waxaa kamid ah:

- **b)** Hay'ad dawladeed, dawladi maamusho ama shirkad guud;
- **t)** Loo-shaqeeye dhaxal ah, la wareege ah, wakiil ah ama laysku wareejiyay;
- **j)** Wakiil, Agaasime ama qof kasta oo u xilsaaran inuu matalo loo-shaqeeyaha;
- **x)** Hay'ad fursadaheeda shaqo loo siman yahay, hadaf keeduna yahay in shaqo siinteedu aan dadka lagu kala takoorin, haddii ay tahay hay'ad dawladdeed ama mid gaar ah.

**16. "Urur Loo-Shaqeeye"** waxaa loola jeedaa urur kasta oo ay dhisteen loo-shaqeeyayaashu iyada oo ujeeddadu tahay kordhinta iyo difaacidda danaha loo-shaqeeyeyaasha.

**17. "Wakaalad Shaqo siin"** waxaa loola jeeda qof kasta, shirkad, hay'ad, wakaalad kasta ama hay'ad kale, ha ahaato mid guud ama mid gaar loo leeyahay, taas oo ka dhex-shaqaysa shaqalaha iyo loo shaqeeyaha, iyada oo ujeedkeeduna tahay in dadka ay shaqo siiyaan oo ay ka faa'iiddo, kana hesho macaash, lacag go'an, sida lacagta soo gelitaanka/diiwaan-gelinta dhowrto muddeysan, ama lacag adeegyo kale.

**18. "Dayac"** waxaa loola jeedaa xaddiga qofka shaqaalaha ah ka soo gaaraya goobta shaqada oogadiisa, gudihiisa ama jug qarsoon midkood oo si taxaddir la'aan u dhacda.

**19. "Xiriir"** waxaa loola jeedaa urur diiwaan gashan oo leh laba ama in ka badan oo ururro shaqaale ah, laba ama in ka badan oo ururro loo-shaqeeyeyaal ah ama laba ama in ka badan oo xiriirro guud ah.

**20. "Juujuubid ama Shaqo Qasab ah"** waxaa loola jeedaa shaqo ama adeeg kasta oo si jajuub ah qof loogu shaqeysto iyada oo loogu gooddinayo ama loogu hanjabayo ciqaab, sida xuquuq la'aan ama Sharaf-diliyo wixii la mid ah ee xeerka shaqada ka soo horjeeda.

**21. "Qiiq/Qaac"** uu ku jiro gaas ama uumi.

**22. "Dareere si Fudud u Ololi Og"** waxaa loola jeedaa dareere kasta, milan ama dhibco bukhaar ah oo ku guban kara ugu yaraan **32** digrii sentigarayd **(32° C)**

**23. "Digniin Toosin ah"** waxaa loola jeedaa ogeysiis loo soo saaray qof kasta oo ku howlan arrimo ka hor imaanayaan badqabka mihnadda iyo caafimaadka ee xeerkan ama qawaaniin kasta oo hoos

timaadda si loo saxo xeer-jebinta muddo cayiman.

**24. "Hawlo Warshadeed"** waxaa ka mid ah:

**b)** Qodaalka, faagidda macdanta iyo shaqooyinka kale ee wax lagala soo baxayo dhulka hoostiisa

**t)** Hooso (Garaash), wax soo saar, warshad ama meel agab ceeriin yaalo ama alaabo kale lagu sameeyo, loogana shaqeeyo ama lagu baakadeeyo.

**j)** Dhismaha, dib u dhiska, dayactirka, hagaajinta, beddelidda ama duminta dhisme kasta, waddada tareenka, deked, marso, deked yar, kannaal, biyo- mareen, waddo, waddo-dhuumeed (Tunnel), buundo, kubri, bullaacad, tuubbo qashinsaar, ceel, telegraphic ama rakibidda telefoonnada, korontada, shaqada gaaska, shaqada biyaha ama shaqo kasta oo dhismo ah, iyo sidoo kale diyaarinta ama aasaasidda hawlahaas ama dhismayaal noocaas ah;

**x)** Gaadiidka rakaabka ama badeecadaha ku yimaada waddooyinka dhulka sida jidadka baabuurta, tareenka, ama waddooyinka dalka ee mara biyaha hoostooda, iyo isku xirka rakaabka ama badeecadaha;

**Kh)** Meelo kale ama hawl kasta wasiirku marka uu tixgeliyo nooca shaqada wuxuu amrayaa hawl warshadeedka la rabo in la fuliyo.

**25. "Khilaafka Shaqada ama Shaqaalaha"** waxaa loola jeedaa khilaaf kasta oo u dhexeeya:

**b)** Loo-shaqeeye iyo shaqaale;
**t)** Urur loo-shaqeeye iyo urur shaqaale;
**j)** Xiriir loo-shaqeeye iyo xiriirro ururro shaqaale;
**x)** Shaqaale iyo shaqaale kale;
**Kh)** Urur shaqaale iyo urur shaqaale kale;
**d)** Shaqaale iyo urur shaqaale;
**r)** Urur shaqaale iyo xiriir ururro shaqaale;
**s)** Urur loo-shaqeeye iyo xiriir ururro loo-shaqeeye

Taas oo ku xiran:

**b)** Shaqo siin ama mid aan aheyn shaqo siin;
**t)** Shuruudaha shaqo siinta;
**j)** Xaaladaha shaqada ee shaqaale kasta;
**x)** Xubinnimo, goobo shaqo ama caymis;
**Kh)** Wax kasta oo xiriir la leh heshiis shaqo siin;

**26. "Shaqo Fudud"** Macnaheedu, waa mid aan suurtagal aheyn:

**b)** In ay wax u dhinto caafimaadka, ama horumarka Carruurta;

**t)** Ka cagajiidka carruurta imaanshaha iskuulka, ka qaybgalka carruurta barnaamijyada wacyigelinta iyo tababarka xirfadaha ama awoodda ilmuhu uga faa'iidaysan karaan habraacyada khuseeya arrintaan ee uu wasiirku ansixiyey.

**27. "Xirasho Goob Shaqo"** waxaa loola jeedaa xiritaan goob shaqo, shaqo hakin ama diidmo loo-shaqeeyaha uu diido in ay u shaqeeyaan shaqaalaha, iyada oo ujeeddadu tahay in uu ku qasbo shaqaalaha in ay aqbalaan dalab kasta oo la xiriira khilaafka shaqo ee jira.

**28. "Matoor"** waxaa loola jeedaa shay kasta ama isugeynta qalab loo isticmaalo ama loogu talo galay in loo adeegsado dhalinta nooc kasta oo tamar/koronto ah si shaqo loogu qabto, ama loo

isticmaalo looguna talo galay in loo adeegsado horumarinta, helista, kaydinta, haynta, xakameynta, beddelidda, gudbinta, wareejinta ama hubinta nooc kasta oo tamar/koronto ah.

29. **"Halista ugu Weyn ee Rakibaadda"** macnaheedu waa rakibaadda:

**b)** Meel xaddigii ama walxo intii loogu talo galay in ka badan lagu keydiyo muddo kastaba;
**t)** Meel kasta oo wax lagu soo saaro, lagu farsameeyo, lagu isticmaalo, lagu maamulo ama loogu keydiyo qaab ay suurtagal tahay inay keento shil weyn.

**30. "Shil Weyn"** waxaa loola jeedaa shil baaxad leh oo ka dhasha isticmaalka warshad ama matoor goob shaqo oo hawl loogu qabanayey.

**31. "Ilaalin Caafimaad"** waxaa loola jeedaa barnaamij qorshaysan oo marmar baaritaan la sameeyo, kaas oo ay ku jiri karaan baaritaan dhiig, tijaabo caafimaad oo lagu sameeyo dadka la shaqo siiyey, waxaana baaritaannadaas sameynaya xeeldheere caafimaad ama shaqaale mihnad u leh arrimaha caafimaadka.

**32. "Shaqaale Dool ah"** qof kasta oo si iskiis ah u yimid si uu uga xoogsado gudaha Soomaaliya, waxaana ka mid ah dadka dool ahaan shaqo loogu oggolaado oo aan aheyn kuwa xadduudaha ka soo gala, farshaxan yahannada ama aqoon yahannada ku joogayo mudo gaaban iyo badmaaxiinta.

**33. "Wasiir"** Waxaa loola jeedaa wasiirka federaalka ee u xilsaaran arrimaha shaqada.

**34. "Wasaarad"** waxaa loola jeeda wasaaradda mas'uulka ka ah arrimaha shaqada.

**35. "Buuq/Guux"** waxaa loola jeedaa dhammaan dhawaqa tamarta ama hugunka dhawaaqa matoorrada, kuwaas oo keeni kara maqal la'aan, waxyeellana u geysan kara caafimaadka qofka shaqaalaah ama khatar kale.

**36. "Nadaafadda Goobaha Mihnadda"** macnaheedu waa ka hortagga iyo xakameynta xaaladaha goobta shaqada, taas oo keeni karta cudur ama saameyn xun ku yeelan karta caafimaadka shaqaalaha.

**37. "Sarkaalka Badqabka iyo Caafimaadka"**macnaheedu waa sarkaal kasta oo lagu magacaabo xeerkan oo uu ku jiro agaasimaha.

**38. "Buuxiye/Shaqeeye"(Occupier)** waxaa loola jeedaa qofka ama dadka si dhab ah uga shaqeynaya goobta shaqada, ha ahaado milkiile ama yuusan noqon, uuna ku jiro loo-shaqeeyaha.

**39. "Shaqaale Leexsan"** waxaa loola jeedaa qof kasta oo la shaqo siiyey in uu qabto shaqo, balse waa shaqaale ku shaqeynaya guriga ama meel ka baxsan goobta loogu tala galay shaqada

**40. "Milkiile"** waxaa loola jeedaa qofka qaadanaya lacagta kirada ama macaashka dhismaha, ama akoonkiisa ha ugu dhacdo ama wakiilkiisa uu aaminay ha u qaadee, ama qofka qaadanaya kirada iyo faa'iidada haddii dhismaha la kireeyo.

**41. "Gabal Shaqo"** waxaa loola jeedaa shaqo kasta ama adeeg kasta oo heerka lacag bixintu ay ku xiran tahay xaddiga shaqada la qabtay, iyada oo aan la eegeyn baaxadda waqtigii la shaqeynayey.

**42. "Warshad"** waxaa loola jeedaa agab kasta, makiinad, matoor, iyo agab kasta oo loo adeegsado warshad.

**43. "Dhismooyin ama Goobo Dhisan"** waxaa loola jeedaa meel kasta oo wax la dhigto, gaar ahan;

**b)** Gaari, markab, diyaarad ama gaari biyood (baabuur bad iyo berriba loo isticmaalo) haddii ay dhaqaaqayaan ama aanay dhaqaaqeyn;
**t)**Wax kasta oo lagu rakibo dhul ama biyo dushood, ama meel kale, haddii ay ahaan laheyd mid sabbaynaysa badda dusheeda ama badda hoosteeda yaalla, ama ku jira dhul biyo kor dageen ama dhulka hoostiisa;
**j)** Teendho ama guri kasta oo guuri guuri kara;

**44. "Dhaqaajiyaha Koowaad"** waxaa loola jeedaa mishiinka matoorka ama qalabka kale ee bixiya awoodda tamarta.

**45. "Heshiis Tijaabo ah"**waxaa loola jeedaa heshiis shaqo siin ah, kaas oo aan ka badnayn muddo 12 bilood ah ama wax ka yar, heshiis kaasi waa qoraal waxa uuna qeexayaa in waqtigaasi uu tijaabo yahay qofka shaqaalaha ah.

**46. "Xilliga Tijaabada"** waxaa loola jeedaa xilli shaqaalaha iyo loo-shaqeeyahaba uu midba midka kale iska tijaabinayo.

**47. "Hannaanka Dhaqaajinta Matoorka"** waxaa loola jeedaa adeegsiga wax kasta oo dhaqaaqa, wax dhaqaajiya ama sahla dhaqaajinta bir ama matoor.

**48. "Digniin Gaar ah"** waxaa loola jeedaa ogaysiis la soo saaray ee ku aaddan qof kasta oo ku hawlan ama gacanta ku haya hawl kasta oo:

**b)** Ka hor imaaneysa qodobbada xeerkan ama habraac kasta oo hoos yimaada;
**t)** Ku lug leh ama ku lug yeelan kara mustaqbalka, khatar dhaawac halis ah ee shaqaale, taas oo keeni karta in hawlihii la qaban waayo ilaa:

**i)** Xaaladaha ku qoran digniinta lagu qanco;
**ii)** Xadgudubyada jira la saxo.

**49. "Goob Munaasab ah"** waxaa loola jeedaa goob shaqo ah oo laga heli karo waxa qof ku u baahan karo ee buuxinaya shuruudo iyo degganaan ku filan oo munaasab ah, oo ay ku jiraan isbeddello lagama maarmaan ah oo ku habboon, sidoo kale aan ku keeneynin culays aan loo baahnayn, lana ilaaliyo dadka lixaad la'aanta ah si ay u helaan qanaaco iyo jimicsi la siman dadka kale, iyadoo la tixgelinayo dhammaan xuquuqda aadanaha iyo xorriyadda asaasiga ah.

**50. "Shaqaale Dhimis"**waxaa loola jeedaa hoos u dhaca shaqada, mihnadda ama xirfadaha, iyada oo aan qofka shaqaalaha ahi eed ku laheyn, taas oo ay keentay shaqo ka saaris uu loo-shaqeeyuhu ku dhaqaaqey, taas oo inta badan keenta in hawshii xafiiska ay baaba'do shaqo siintuna yaraato.

**51. "Diiwaangeliye"** waxaa loola jeedaa diiwaangeliyaha ururrada shaqaalaha iyo ururrada loo-shaqeeyeyaasha ee lagu tilmaamay xeerkan.

**52. "Xuquuq"** waxaa loola jeedaa dhammaan lacagaha la siiyo shaqaale gutay ama ka soo dhalaalay shaqadiisa, oo ay ku jiraan wax kasta oo lagu dhiirigelinaayo shaqaale.

**53. "Khatar"** waxaa loola jeedaa suurtagalnimada dhacdo saameyn xun ku yeelata nolosha sida naafonimo oo ka timaadda walxo dadka ama deegaanka dhibaato u keeni karta, cawaaqib aad u xun na uu ka dhasho.

**54. "Nadaafad Munaasab ah"** waxaa loola jeedaa hagaajinta meelaha kaadida, falaashka musqusha, biyo-fariisiga, tubbada qashinka qaadda,qashinka, musqusha, godadka musqusha iyo wax kasta oo la mid ah oo munaasab u ah dadka naafada ah iyo qaab kasta oo fududey naya adeegga fayadhawrka goobta shaqada.

**55. "Iskii u Shaqeyste"** waxaa loola jeedaa qof iskii u shaqaysta si uu faa'iido ama kasab u helo isaga oo aan heshiis shaqaalenimo cidna la gelin ama kula jirin

**56. "Uumi-kuleyliye"** waxaa loola jeedaa weel kasta oo xiran, oo uumiga ku soo saaraa cadaadis ka badan ka jawiga dhulka dushiisa ah, oo ay ku jiraan qalabka loo isticmaalo karkarinta biyaha lagu shubo weel kasta oo noocaas ah, iyo weel heer kulkiisu sareeyo oo loo isticmaalo kuleylka si loo helo tamar/uumi.

**57. "Shaqo Joojin"** waxaa loola jeedaa shaqo joojin ay si wada jir ah u sameeyaan shaqaale, ama diidmo midaysan ama diidmo ay si guud iskula fahamsan yihiin shaqaaluhuna in ay joojiyaan shaqada oo aanay sii wadin, iyada oo ujeeddadu tahay in ay ka helaan dalabkooda loo-shaqeeyaha ama ururro loo-shaqeeye ee loo-shaqeeyehoodu xubin ka yahay si ay u helaan dalabkooda ku aaddan khilaafka shaqada si waafaqsan xeerkan.

**58. "Qandaraas-Hoosaad Qaate"** waxaa loola jeedaa qof ama shirkad qandaraas-hoosaad ka qaata qandaraasle isaga ooqoranayashaqaaleloo baahan yahay, wuxuu na heshiis qoraal ah la galayaa qandaraaslihii si loo fuliyo shaqo cayiman ama ay uqabtaan adeegyada lagu heshiiyey oo leh qiima go'an.

**59. "Walxo"** waxaa loola jeedaa wax kasta oo dabiici ah ama gacan ku sameysi ah ama maaddo ah, ha ahaadeen adke, dareere, gaas ama uumi.

**60. "Qeybiye"** waxaa loola jeedaa qof ama shirkad iibiye ah maadooyin ama walax ku bixinaya hab iib ah, kireyn, shaqo siin ama iibsasho, haddii uu yahay maamule ama wakiil.

**61. "Hawl"** waxaa loola jeedaa xaddiga shaqada ee qofka shaqaalaha ahi uuqaban karo caadi ahaan maalintii, marka la tixgeliyo sida uu arkomadaxdiisa tooska ah ee shaqada.

**62. "Urur Shaqaale"** waxaa loola jeedaa urur kasta oo shaqaale oo ujeeddadiisa kowaad tahay ilaalinta iyo difaacidda danaha shaqaalaha.

**63. "Dhaqaajiyaha Mashiinka"**waxaa loola jeedaa wax kasta oo mashiin wareejiya, taayar, tanbuurad, garaangar, nidaam adkeeya ama dabciya garaangarta, buleejada, shiingiyahaama qalab kale oo muhiim ah kaas oo dhaqaaqa hore u gudbiya ama ka hela mashiin kasta ama qalab kasta.

**64. "Meel Shaqo"** waxaa loola jeedaa meel kasta ama dhismooyin oo ay shaqaale ku shaqeeyaan.

**65. "Isticmaale"** marka laga hadlayo warshad ama mashiin, waxaa loola jeedaaqof isticmaale ah oo danihiisa uga faa'iideysta warshad ama mashiin, kaas oo xaq u leh ilaalintooda, hase yeeshee, waxaan ku jirin kireystaha iyo qofka loo shaqaaleeyey inuu ku shaqeeyo mashiin iyo warshad wax soosaar.

**66. "Gariir"** waxaa loola jeedaa tamarta makaanikada iyo korontada ah oo u gudubta jirka qofka iyada oo gilgisha ama gariirisa dhibaato ama halis weyn na ku ah caafimaadka qofka.

**67. "Haweeney"** waxaa loola jeedaa qof dumar ah oo 18 sano jirta ama ka weyn.

**68. "Shaqaale"** waxaa loola jeedaa qof kasta oo fulinaya hawl ama shaqo oo loo qabanayo loo-shaqeeye lala galay heshiis gaar ah ama mid guud oo afka ama qoraal ah, ama farsamo barad ah ama tijaabo ah, taas oo uu xuquuq ku kasbanayo.

**69. "Goob Shaqo"** waxaa loola jeedaa dhul kasta, dhisme, meel, markab ama doon, diyaarad ama shay shaqaalaha u dhow, agtiisa, gudahiisa, ama korkiisa ah inta uu ku jiro muddada shaqada.

**70. "Qol Shaqo"** waxaa loola jeedaa qol kasta ama qeyb gooni ah, kaas oo qofka shaqaalaha ahi uu ku shaqeeyo.

**71. "Qaabka Ugu Xun ee Shaqo Siinta Carruurta"** marka loo eego shaqo siinta da'yarta, ama u isticmaalidda fal kasta oo ay ka mid tahay:

**b)** Dhammaan habdhaqanka la midka ah addoonsiga sida iibinta, kala gudbinta, rahan u haysasho iyo ka ganacsiga carruurta suuqa madow ee addoonsi ahaan loo qabsado, khasab ugu shaqaysiga carruurta ama u adeegsiga iyo hubeyntooda carruurta xilliga colaadaha;
**t)** Isticmaalidda, qorista, u soo bandhigidda ama ku qalqaalinta ka ganacsiga jirka carruurta si loo soo saaro sawirro ama filimo anshax xumi ah;
**j)** Isticmaalidda, qorista, u soo bandhigidda ama ku qalqaalinta carruurta falal sharci darro ah, sida soo saaridda iyo kala gudbinta daroogada suuqa madow, sida ku qeexan xeerarka, heshiisyada iyo cahdiyada caalamiga ah ee khuseeya carruurta;
**x)** Shaqooyin kaas iyo kuwa la nooc ah ama duruufaha iyo xaaladaha ku xeeran ee lagu fuliyo, oo dhaawici kara caafimaadka, bedqabka iyo niyadda carruurta.

**72. "Baare Shaqo"** waxaa loola jeedaa Baaraha Shaqada Degmada ama Baaraha Shaqada Gobolka.

**73. "Maxkamadda awoodda u leh"** waxaa loola jeedaa Maxkamadda Gobolka, Maxkamadda Sare.

## Qodobka 3aad
## Ku Dhaqmid

**1.** Qodobbada xeerkan ama xeer-hoosaadkiisa waxaa ay khuseeyaan ama lagu dhaqayaa dhammaan loo-shaqeeyayaasha iyo shaqaalaha, oo ay ku jiraan kuwa ka shaqeeya adeegga dadweynaha iyo hay'adaha dawladda haddii aanu jirin shuruudo iyo xaalado adeeg shaqo oo lagu maamulo sharci kale.

**2.** Qodobbada Xeerkan ama xeer nidaamiyayaasha hoos yimaada laguma dabaqayo ciidamada qalabka sida (Xoogga Dalka, Booliska, Asluubta iyo Nabad Sugidda) marka laga reebo kuwa lagu shaqaaleeyey nidaam rayid ah.

## CUTUBKA 2AAD
## MABAADDI'DA GUUD

### Qodobka 4aad
### Xaqa Xoriyadda Mihnadda

Qof kasta waxa uu xaq u leeyahay in uu doorto mihnadda shaqo ee uu rabo.

### Qodobka 5aad
### Mas'uuliyadda Ilaalinta Xeerka Shaqada iyo Aqoonsiga Kaalinta Shaqaalaaha Waxaa Iska Leh Dowladda

**1.** In ay ilaaliso shaqada noocyadeeda kala duwan iyo hirgelinteeda haddii ay ahaan lahayd shaqo hay'adeed ama mid fulineed, mid aqooneed, mid farsamo ama mid xoogsi.

**2.** In ay dhiirrigeliso xaaladaha saamaxaya in qofka si buuxda u adeegsado xuquuqihiisa, isaga oo gudanaya waajibaadka ku xusan qodobka 4[aad] ee xeerkan.

**3.** In ay aqoonsato ahmiyadda kaalinta weyn ee shaqaaluhu ku leeyahiin horumarinta dhaqaalaha dalka, iyada oo la dhiirrigelinayo, lana xaqiijinayo ka qeybgalkooda xagga qorsheynta iyo maareynta wax-soo-saarka.

### Qodobka 6aad
### Sinnaanta iyo Takoor La'aanta

1. Qof kasta waxa uu xaq u leeyahay in uu dadka kale ula sinnaado fursadaha shaqa siinta iyo mihnadaha iyada oo aan lagu takooreyn wax ku shuqul leh: sinjigiisa, midabkiisa, ceyntiisa jinsi (lab iyo dheddig), luqaddiisa, diintiisa, ra'yigiisa siyaasadeed iyo wax kale oo uu aaminsan yahay, jinsiyaddiisa (dhalashadiisa), qoladiisa ama bulshada uu ka soo jeedo, naafonnimo, uur, xaaladdiisa maskaxeed, da'diisa ama in uu qabo fayruska dila difaaca jirka aadanaha (HIV Aids), waxaana sidoo kale qofka shaqaalaha ah waajib ku ah in uu dad kale u oggolaaddo xuquuqaha kor lagu xusay ee sinnaanta iyo takoor la'aanta.

2. Takoorku waa fal-dambiyeed lagu muteysanayo ciqaab si waafaqsan Xeerarka Dalka.

3. Waxaa waajib ku ah wasiirka iyo dhammaan saraakiisha wasaaradda, dhammaan hay'adaha dawladda, iyo loo-shaqeeyeyaasha in ay dhiirrigeliyaan oo ay dammaanad qaadaan u sinnaanta fursadaha, si loo cirib tiro takoorka dhanka shaqasiinta.

4. Xaqa u sinaanta fursadaha shaqo iyo daryeelka shaqaalaha ee la xiriira shaqa-siinta iyo nooca mihnadda iyo waajibaadka dhiirrigelinta iyo xaqiijinta xaqa u sinnaanta fursadaha shaqada ee ay leeyihiin shaqaalaha waddanka, waxaa si lamid ah xaqaas yeelanaya shaqaalaha doolka ah iyo qoysas kooda ee heysta sharciga deganaanshaha dalka.

5. Iyada oo aan waxyeello ku keeneynin guud ahaanba faqradda 3[aad] ee qodobkan ee la xiriirta shaqaalaha doolka, si looga hortago, loona cirib tiro wixii xadgudub ah ee loo geysan karo shaqaalaha doolka ah iyo qoysaskooda, ayaa waxaa wasiirka looga baahan yahay, isaga oo la tashanaya hay'adaha kale ee dawladda ee ay khuseyso iyo wakiillada ururrada loo-shaqeeyayaasha iyo wakiillada xoogsatada:

**b)** Si loo hubiyo dabaqid aan takoor laheyn ee la xiriirta dhalashada, isirka, diinta ama jinsiga ( lab iyo dheddig) ee doolka si sharci ah u daggan gudahaJamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, loona siiyo daryeel la mid ah muwaadiniinta dalka sida: xurmeynta arrimaha shaqo iyo habraacyada fursadaha shaqo siinta, xaaladaha iyo shuruudaha shaqo siinta, tababarka,xorriyadda ka qeybgalka iyo wada xaajoodka gorgortanka guud,badbaadada bulshada, habraacyada sharciyeed, khidmadda shaqo siinta, fiiga caymiska ee shaqaalaha, dammaanad qaadka amniga shaqo siinta, helidda beddel shaqo siin, ka nasinta shqada iyo dib u tababaridda shaqaalaha;

**t)** In la qaado dhammaan wixii tallaabooyin lagama maarmaan ah, kuna haboon:

i. In la xakameeyo dhaqdhaqaaqa qarsoodiga ah ee shaqo siinta doolka iyo shaqo siinta aan sharciga waafaqsaneyn ee doolka;

ii. Si wax-ku-ool ah loo ogaado shaqo siinta sharci darrada ah ee shaqaalaha doolka ah, isla markaana loo qeexo laguna qaado ciqaabta ku aaddan abaabulka dhaqdhaqaaqa shaqo siinta sharciddarada doolka ah, si looga macaasho ama si kale looga faa'iideysto;

iii. Loogu hortago qaban qaabiyayaasha dhaqdhaqaaqyada sharci darrada ah ee qarsoodiga ah, kuna wajahan muhaajiriinta tagaya, sii gudbaya, soo galaya xuduudaha Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya, iyo ka hortagidda kuwa shaqo siiya shaqaalaha doolka ah ee sifo sharci darra ah dalka ku soo gala;

iv. Ka hortigidda fududeynta dhoofinta, safrinta iyo soo dhoweynta doolka ah si loo shaqo siiyo.

**6.** Loo-shaqeeye waxaa:

**b)** Waajib ku ah inuu ka saaro siyaasadda shaqo siinta iyo habraacyada shaqada wixii xadgudub iyo takoorid ah ee ku jira;

**t)** In aanu si toos ah ama si dadban midna u oggolaan in la faquuqo ama la dhibaateeyo qof shaqaale ah ama mustaqbalka shaqaale noqon raba, iyada oo:

i. Lagu saleynayo sinji, midab, ceyn, jinsi (lab iyo dheddig), luqad, diin, aragti siyaasadeed ama ra'yi kale, Jinsiyad, haybta ama asalka bulsho, naafannimo, uur, xaalad maskaxeed, da' ama fayruska dila difaaca jirka aadanaha (HIV Aids);

ii. Lagu saleynaayo arrimo kale oo kala soocid, gooni u saarid iyo kala mudnaysiin ah, taas oo baabi'in karta ama wax u dhimi karta usinnaantii fursadaha shaqo siinta iyo mihnadda. wasiirka ayaa caddeyn kara jiritaanka arrintaas ka dib markii uu la tashado wakiillada loo-shaqeeyeyaasha iyo ururrada shaqaalaha ee jooga meelaha laga soo sheegay faquuqa, iyo hay'adaha kale ee ay khuseyso;

iii. La eegayo dhinacyada shaqo-qoridda, tababarka, dallacaadda, heshiiska iyo shuruudaha shaqa siinta, shaqo ka joojinta iyo arrin kasta oo la xiriirta shaqasiinta;

iv. Lagu saleynaayo xubinamada urur shaqaale ama hawlaha sharciyadda leh ee ururrada shaqaalaha.

**7.** Waa sharci daro takooridda qofka shaqaala ha ama qof kasta oo raadiniya shaqo siin iyo xaquuqdiisa lagu aqoonsaday xeerkan.

**8.** Waxyaabaha soo socda ma'ahan takoorid ku saleysan xeerkan:

> **b)** Fal kasta oo ku aaddan sixidda arrimaha la xiriira kor u qaadiddasinnaanta iyo baabi'inta faquuqa ka jira goobta shaqada;
> **t)** In aad u kala saartid, u kala reebtid ama u kala dooratid qof kasta dhanka shaqada sababo shuruudaha shaqadaas u baahan tahay darteed.

**9.** Loo-shaqeeye kasta waxaa waajib ku ah inuu shaqaalihiisa siiyo xuquuq siman oo leh qiimo isu dhigma ama isla eg kuwooda isku shaqada ah.

**10.** Marka eedeyn takoor ah la soo jeediyo, loo-shaqeeyaha waa culays dul saaran in uu caddeeyo in takoorka uusan ka dhicin goobta shaqada sida lagu soo eedeeyay, falka takooriddaas ama iska bariyeelidda ma ahan mid ku saleysan sababaha lagu caddeeyay qodobada xeerkan.

**Qodobka 7aad**
**Shaqo khasab ah**

**1.** Waxaa reeban shaqo qoris khasab ama jajuub ah nooc kasta oo ay tahay

**2.** Qofna looma oggola in uu qof kale ka caawiyo qorista, tahriibinta iyo isticmaal khasab ah ama shaqo jajuub ah.

**3.** Erayga ah "Shaqo khasab ama jajuub ah" laguma dabbaqayo hawlaha soo socda:

> **b)** Shaqo ama adeeg kasta oo si sharci ah loogu baahday, marka loo eego shaqo adeeg ciidan ah ama shaqo dhammaanteed leh dabeecad ciidan sida difaaca qaranka, ama marka loo baahdo gurmadka iyo wax ka qabashada masiibooyinka qaran, laakiin aaney ku jirin shaqo qoris khasab ama jajuub ah iyo askarayn carruureed ee loo adeegsado colaadaha hubeysan;
> **t)** Shaqo ama adeeg kasta oo laga rabo maxbuus uu ku dhacay xukun ay meel marisay maxkamad awood u leh, taas oo aanu ku jirin qof loo qoray ama lagu meeleeyay shakhsi yaad gaar ah, shirkado ama ururro, hawshaas ama adeeggaas lafulinayo iyada oo ay kormeereyso dushana ka maamuleyso hay'ad dawladeed;
> **j)** Shaqo ama adeeg kasta oo fudud oo ay qabsanayaan xubnaha bulshadu, iyaga oo u arkay danahooda gaarka ah, loona gartay in ay ka mid tahay waajibaadka caadiga ah ee bulshada ka saaran dalkooda, iyada oo la tixgelinaayo xubnaha bulshada ama wakiilladoodu xaq ay u leeyihiin in lalatashado;
> **x)** Shaqo ama adeeg kasta oo lagu fuliyey xaalad degdeg ah oo jirta awgeed, ama guud ahaan ama duruuf kasta oo halis gelin karta jiritaanka ama ladnaanta dadka qeyb ka mid ah ama idil ahaantood.

**4.** Qofkii lagu helana jabinta qodobkan, waxaa la horgeynayaa maxakamadda awoodda u leh, waxaana lagu dhaqayaa habraacayada ku xusan Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed iyo Xeerarka kale ee Dalka.

## Qodobka 8aad
## Xadgudub Damac Galmo iyo Faduullin (Faduullin, ama Qash-qashaad Dhaqan Xumo ah)

**1.** Xadgudub, faduulin, qafal-xumo iyo qash-qashaad (Sexual Harassment) shaqaale waxay ka dhacdaa goobaha shaqada marka loo-shaqeeyaha, wakiilka loo-shaqeeyaha ama shaqaalaha kale:

**b)** Uu si toos ah ama si dadban uga codsado qof shaqaalaha ka mid ah galmo, taataabasho jirka ah ama dhaq-dhaqaaqyo kale oo galmo la xiriira oo ay ka mid yihiin:

i. Ballanqaad mudnaan siin leh ee xagga shaqada;
ii. Hanjabaad in dhibaato shaqada ah ka soo gaari doonto;
iii. Hanjabaad ku saabsan xaaladda shaqo siinta hadda ama mustaqbalka ee qofka shaqaalaha ah, haddii ballanqaadkaas ama hanjabaadaas ay caddahay ama maldahan tahay.

**t)** Inuu adeegsado erayo damac galmood xambaarsan oo qoraal ah ama af ah;

**j)** Inuu adeegsado waxyaabo muuqaal ah oo dareen galmo kicin leh;

x) Inuu muujiyo dhaq-dhaqaaq jireed oo damac galmo leh taas:

i. Oo uu dhibsanayo ama aanu dhibsaneyn qofka shaqaalaha ahi ee lagula kacayo;
ii. Oo sida ay tahay, raad xun ku reebeysa shaqadiisa qofka shaqaalaha ah, waxqabadkiisa shaqo ama ku qanacsanaantiisa shaqada;
iii. Oo ujeedadeedu tahay abuuris handadaad, cabsi gelin, qash-qashaad, iyo jawi nacayb leh ee bay'ada lagu shaqeeyo.

**2.** Loo-shaqeeye kasta waa in uu la tashadaa shaqaalaha ama wakiilladooda, oo uu soo saaro, kuna soo jeediyo dareenka shaqaalaha bayaan la xiriira siyaasad ku saabsan xadgudubka damaca galmo iyo faduullin, taas oo ay lagama maarmaan tahay in ay ku jiraan:

b) Qeexidda xadgudub damac galmo iyo faduullin oo waafaqsan sida ku xusan qeybtan;

t) Qoraal:

i. Mamnuucaya xadgudub damac galmo, qash-qashaad, tilmaamo maldahan iyo fuduullin;
ii. Muujinaya dammaanad qaad ah in loo-shaqeeyuhu uu ku dhaqaaqi doono tallaabooyin lagu xaqiijinayo in shaqaalaha aan loo geysan doonin xadgudub damac galmo iyo faduullin;
iii. In tallaabo anshax-marineed oo ku habboon laga qaado qof kasta oo xadgudub damac galmo, qash-qashaad, tilmaamo maldahan iyo faduullin kula kaca qof shaqaalaha ka mid ah;
iv. In loo-shaqeeyuhu sameeyo habraacayo shaqaaluhu ku soo gudbiyaan cabashadooda la xiriirta xadgudub damac galmo, qash-qashaad, tilmaamo maldahan iyo faduullin loo geysto;
v. In loo-shaqeeyahu qariyo magaca cabtaha ama nooca xaaladaha cabashadiisa, marka laga reebo goortii ay shaacintu lama huraan noqoto si loo qaado tallaabooyin wax lagu saxayo.

**3.** Loo-shaqeeyaha waa in uu si deg deg ah oo madax banaani ku jirto uu u baaro wixii cabasho ah ee ku aaddan xadgudub damac galmo iyo faduullin leh, isla markii caddaato cabashadaas, waa in uu u gudbiyaa hay'adaha sharciga si loogu qaado dacwo waafaqsan Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed iyo Xeerarka kale ee Dalka.

**Qodobka 9aad**
**Xoriyadda ku Biiridda**

**1.** Shaqaale kasta waxa uu xaq u leeyahay;

b) In uu ka qayb galo sameynta urur shaqaale ama xirriiro ururro shaqaale;
t) In uu ku biiri karo urur shaqaale;
j) In uu ka tegi karo urur shaqaale.

**2.** Qof kasta oo shaqaale ah ama shaqo raadinaya waa in aan lagu takoorin in uu isticmaalay xuquuqda xeerkan siinayo darteed.

**3.** Loo-shaqeeye kasta wuxuu xaq u leeyahay:

**b)** In uu ka qayb qaato sameynta urur loo-shaqeeye ama xiriir ururro loo shaqeeye;
**t)** In uu ku biiro urur loo-shaqeeye ama xiriir ururro loo-shaqeeye, si waafaqsan dastuurka ururradaas;
**j)** In uu ka baxo urur loo-shaqeeye ama xiriir ururro loo-shaqeeye.

**4.** Loo-shaqeeye waa in aan lagu takoorin in uu isticmaalay xuquuqda xeerkan siinayo darteed.

**5.** Shaqaale ama loo-shaqeeye kasta waxa uu xaq u leeyahay in aanu ku biirin urur shaqaale ama urur loo-shaqeeye ama xiriir urur ama ururro shaqaale ama loo-shaqeeye, isaga oo aanan luminayn xuquuqdii sii sharciga aheyd.

**Qodobka 10aad**
**Xuquuqda Shaqaaluhu Waa Lama Taabtaan**

**1.** Sida xeerkan qabo, xuquuqda la siiyay qofka shaqaalaha ahi, ma'aha mid laga gaari karo heshiis lagu diidayo, lagu dhimayo ama lagu xaddidayo, heshiis kasta oo noocaas ah na waxaa laga soo qaadayaa wax kama jiraan.
**2.** Xuquuq ama daryeel kasta oo horey loo-shaqeeyuhu u siiyey shaqaale, isaga ikhtiyaarkiisa ama heshiis lagula galay, kaas oo shaqaalaha faa'iido dheeraad u ah ayaa mudnaanta leh marka loo eego kuwa ku xusan xeerkan.

**Qodobka 11aad**
**Qodobada Lagu Xallinayo Khilaafaadka Shaqada**

**1.** Khilaafaadka aan xalkooda laga heleynin qodobbada xeerkan iyo heshiiskii shaqo ee qofka lala saxiixday, waa in lagu gaaraa go'aan waafaqsan shareecada Islaamka, mabaadii'da sinnaanta, mabaadii'da guud ee shuruucda shaqada ama baaqyo iyo talooyinka ururka shaqaalaha adduunka oo

ay saxiixday Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, mabaadii'da xeerka caadiga ah ee aan ka hor imaaneyn kuwa xeerka shaqada iyo curfiga.

**2.** Haddii la isku khilaafo fasiraadda ama dhaqan gelinta shuruucda ku saabsan arrimaha shaqada, waxaa la qaadanayaa fasiraadda iyo dhaqan gelinta u roon shaqaalaha.

## QEYBTA II:
## MAAMULKA, KORMEERKA IYO BAARISTA SHAQADA

## CUTUBKA 3AAD:
## MAAMULKA HEER WASIIR

### Qodobka 12aad
### Wasiirka

**1.** Wasiirka mas'uulka ka ah arrimaha shaqada, waxaa lagu magacaabayaa si waafaqsan Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

**2.** Wasiirka, waa madaxa ugu sarreeya maamulka wasaaradda u qaabilsan arrimaha shaqada.

**3.** Awoodaha iyo waajibaadka shaqo ee wasaaradda waxaa ka mid ah:

**b)** In ay xaqiijiso u hoggaansanaanta qodobada xeerkan ama xeer nidaamayaasha halkan ku dhigan ama sharci kasta oo nidaaminaya arrimaha shaqada, shaqo siinta, ilaalinta iyo daryeelka shaqaalaha;

**t)** In ay dejiso siyaasado, xeerar, tilmaamo iyo barnaamijyo la xiriira shaqada iyo shaqo siinta;

**j)** In ay ka caawiso, markii laga codsado, ururrada shaqaalaha diiwan gashan iyo ururrada loo-shaqeeyayaasha ee diiwangashan ama loo-shaqeeyeyaal ama xiriiradooda iyo qoridda heshiisyada guud ee shaqada;

**x)** In ay qaaddo talaabooyinka ku habboon si loo xalliyo khilaafaadka shaqada ee ka dhex dhasha hay'adaha heer qaran ama khilaafaadka culeyska gaarka ah leh;

**kh)** In ay jiheyso waxbarashada iyo tababarrada xirfadeed ee shaqaalaha iyo meeleynta kuwa shaqodoon ka ah;

**d)** In ay mas'uul ka noqoto dhammaan arrimaha ku saabsan xiriirrada shaqada, duruufaha shaqada, shaqo siinta shaqaalaha, badqabkamihnadda iyo caafimaadka goobaha shaqada, xoogsatada ama dhaqdhaqaaqa muruqmaalka iyo tirakoobka shaqada;

**r)** In ay magacawdo saraakiil lagama maarmaanka u ah in ay adeegsadaan awoodaha xeerkan lagu siiyay iyo socodsiinta hawlaha Wasaaradda islamarkaa na ay bixiso tilmaamaha ku habboon adeegsiga awoodaha iyo waxqabadka.

**4.** Si waafaqsan xeerkan iyo shuruucda kale ee hagta adeegga bulshada, wasiirka waxa uu magacaabayaa saraakiisha soo socota:

**b)** Gudoomiyaha Guddiga Sare Shaqada Federaalka;

**t)** Agaasimaha Shaqada;

**j)** Agaasimaha Badqabka Mihnadaha iyo Caafimaadka Goobta Shaqada;

**x)** Diiwaanhayaha Ururrada Shaqaalaha iyo Urrurrada Loo-shaqeeyayaasha;
**kh)** Saraakiil kale oo lagama maarmaan u ah ujeeddooyinka maamulka shuruucda la xiriira shaqada iyo shaqo siinta.

**5.** Wasiirka inta aanu magacaabin saraakiisha sare ku xusan wuxuu hubinayaa in lagu soo xulay tartan iyo daah furnaan.

**6.** Wasiirka waa in uu xaqiijiyaa saraakiisha magacaaban gudasha awooda hooda iyo waxqabadka hawl-gudasha dooda si habsami leh isugu duwan si loo gaaro halbeegyada hawlaha wasaaradda.

**7.** Wasiirka, isaga oo adeegsanaya awooddiisa, gudanayana hawlihiisa shaqo, waa in uu si joogta ah u ilaaliyaa mabaadii'da iyo nuxurka seddex geesoodka, kalana tashadaa wakiillada shaqaalaha iyo kuwa loo-shaqeeyeyaasha arrimaha la xiriira siyaasadaha, xeerarka iyo ku dhaqanka khuseeya ama saameeya danaha shaqaalaha iyo loo-shaqeeyaha.

## Qodobka 13aad
## Guddiga Sare ee Shaqada Federaalka

**1.** Guddiga Sare ee Shaqada Federaalka ayaa mas'uul ka ah nidaaminta iyo kormeerka shaqada iyo xiriirrada shaqo siinta, dabagalka, xoojinta ku dhaqanka xeerkan iyo shuruuc kasta oo kale ee shaqada, si loogu nidaamiyo shaqada iyo xiriirrada shaqo siinta.

**2.** Guddiga Sare ee Shaqada Federaalka wuxuu si qoraal ah u wakiilan karaa sarkaal kasta oo shaqo qeyb ka mid ah awooddiisa, hawlihiisa iyo waajibaadkiisa, isaga oo:
**b)** Ku xiraya duruufaha awood u wakiilashada, isaga oo wax ka beddelaya ama kala noqonaya wakiilnimada waqti kasta;
**t)**Wax-ka-beddeli karaa ama ka kaaftoomayaa go'aannada uu gaaro qofka awooddaas loo wakiishay.

## Qodobka 14aad
## Agaasimaha Shaqada

**1.** Agaasimaha shaqada ayaa mas'uul ka ah nidaaminta iyo kormeerka maamulka shaqada, dabagalka, baarista ama xoojinta ku dhaqanka xeerkan iyo shuruucda kale ee shaqada si ay u nidaamiyaan maamulka shaqada.

**2.** Agaasimaha shaqada wuxuu si qoraal ah ugu wakiilan karaa sarkaalka shaqada qeyb kasta oo ka mid ah awooddiisa, hawlihiisa iyo waajibaadkiisa, isaga oo:
***b)*** Ku xiraya duruufaha awood u wakiilashada, isaga oo wax ka beddelaya ama kala noqonaya wakiilnimada waqti kasta;
***t)*** Wax ka beddeli karaa ama ka kaaftoomayaa go'aannada uu gaaro qofka awooddaas loo wakiishay;

**Qodobka 15aad**

**Agaasimaha Badqabka Mihnadda iyo Caafimaadka Goobta Shaqada:**

**1.** Agaasimaha badqabka mihnadda iyo caafimaadka goobta shaqada ayaa mas'uul ka ah diiwaangelinta, nidaaminta iyo kormeerka dhammaan goobaha shaqada iyo dabagalka ama xoojinta ku dhaqanka xeerkan iyo shuruuc kasta oo kale ee shaqada si loo nidaamiyo badqabka, caafimaadka iyo daryeelka goobta shaqada.

**2.** Agaasimaha badqabka mihnadda iyo caafimaadka goobta shaqada wuxuu si qoraal ah ugu wakiilan karaa sarkaal kasta ee badqabka mihnadda iyo caafimaadka goobta shaqada qeyb kasta oo ka mid ah awooddiisa, hawlihiisa iyo waajibaadkiisa, isaga oo:

*b)* Ku xiraya duruufaha awood u wakiilashada, isaga oo wax-ka- beddelaya ama kala noqonaya wakiilnimada waqti kasta;

*t)* Wax-ka-beddeli karaa ama ka kaaftoomayaa go'aannada uu gaaro qofka awooddaas loo wakiishay.

**Qodobka 16aad**

**Saraakiisha kale: Magacaabidda, Awoodaha iyo Hawlaha**

**1.** Saraakiisha wasiirku u magacaabay si waafaqsan qodobka 12 Farqadda (4) Xarafk (*kh*) waxaa loo magacaabi karaa:

**b)** Saraakiil shaqo;

**t)** Saraakiil shaqo siin;

**j)** Saraakiisha badqabka iyo caafimaadka Goobta shaqada.

**2.** Sarkaalka shaqadu, iyada oo looga jeedo dabagalka ama xoojinta ku dhaqanka xeerkan iyo shuruuc kasta oo kale ee shaqada, kuna saabsan xiriirrada shaqada iyo shaqo siinta, waxa uu:

**b)** U baahan karaa in loo soo daabaco galalka ama faylasha shaqada ee ku jira keydka xasuus reebka (Arkiifiyo) loo-shaqeeyaha si uu:

i. U baaro oo hubiyo keydka galalkaas;

ii. Nuqul ka reebto gal walba oo loo soo daabaco.

**t)** Uga baahan karaa qof kasta oo shaqeynaya ama shaqaale kasta in uu u soo gudbiyo wixii xog ah ee uu awood u leeyahay, iyada oo laga eegayo:

i. Magacyada iyo cinwaannada dadka shaqada la siiyey ama cidda shaqada laga helay;

ii. Lacagta loogu tala galay shaqada.

**j)** baarayaa:

i. Qof kasta oo sarkaalka shaqadu u arko in ay jirto sabab maangal ah uu ku rumeysto inuu yahay ama ahaan jiray shaqaale;ama

ii. In loo-shaqeeyuhu qofkaas, ama adeegihiisu ama wakiilkiisu ka shaqaaleeyay goobta shaqada ee loo-shaqeeyaha, waxaana looga baahan yahay in qofkaas uu saxiixo caddeyn uu ku xaqiijinayo in uu ka run sheegay warbixintii laga qoray iyo dhammaan waxyaabihii laga wareystay.

**x)** Sarkaalku wuxuu si xor ah u baarayaa saacad kasta habeen ama maalin, wuxuuna geli karaa, kormeeri karaa oo uu baarayaa dhulka, guryaha iyo

dhismooyinka kale ogeysiis la'aan, taas oo uu sarkaalku u heysto sabab maangal ah oo uu ku rumeysan karo in qof shaqaale ahi deggan yahay ama uu ku shaqeeyo si loo hubiyo dhaqan galka xeerkan;

**kh)** Sarkaalka shaqada wuxuu si xor ah oo ogeysiis la'aan ah saacad kasta, habeen ama maalin dalban karaa:

i. In loo-shaqeeyuhu uu u soo daabaco dukumintiyada tilmaamaya shaqaalaha sida loo shaqaaleeyey;

ii. In shaqaale kasta uu u soo daabaco dukumintiyada tilmaamaya shaqo siintiisa.

**d)** Baarayaa oo nuqul ka reebanayaa diiwaanka, buugga keydinta iyo dukumintiyada kale ee la xiriira ama u muuqda in ay la xiriiraan shaqo siinta, waxaa kale oo uu la wareegayaa dukumintiyada koobaya diiwaanka, buugga ama keydka xasuus reebka kale haddii ay jirto sabab maangal ah oo uu ku rumeysto in caddeyn muujineysa xadgudub lagu sameeyay xeerkan ama sharciyada kale ee shaqada;

**r)** Gelayaa, baarayaa oo hubinayaa dhammaan musqulaha (lab iyo dheddig), goobaha kale ee nadaafadeed iyo socodka biyaha;

**s)** Uu baarayaa oo hubinayaa dhammaan cunnooyinka la siiyay ama u muuqda in la siinayo shaqaalaha, wuxuuna ka qaadanayaa labo muunad (Sample) oo la tijaabinayo, isla markaasna uu goobjoog ka yahay loo-shaqeeyaha ama wakiilkiisa, iyada oo labadii muunadood si xafidan loo xirayo, mid ka mid ahna loo reebayo loo-shaqeeyaha;

**sh)** Uu amrayaa in dhammaan dhismayaasha iyo goobaha ay shaqaalaha deggan yihiin ama ay ku shaqeeyaan in xaaladdooda nadaafadeed laga dhigo mid hagaagsan oo aad nadiif u ah;

**dh)** Iyadaoo aanay waxba u dhimmeyn awoodaha kale ee hay'adaha xeer ilaalinta ee heer federaal ama qof kale toona, wuxuu billaabayaa dacwo oogis madani ah ama mid fal-dambiyeed ah oo ku saabsan qodobbo xeerkan oo la jebiyay ama xadgudub loo-shaqeeyuhu ku sameeyay ama sharci kasta oo shaqaale;

**c)** La wareegayaa shaqaale kasta oo tuhun ka galo in uu carruur yahay, laguna shaqaaleeyay sifo ka soo horjeedda xeerkan iyo shuruucda kale ee shaqada, wuxuuna u celinayaa waalidkiisa, xannaaneeyihiisa ama ciddii kale ee ku habboon;

**g)** Bixinayaa amarro laga rabo loo-shaqeeyaha inuu u hoggaansamo qodobbada xeerkan;

**f)** Fulinayaa hawlaha iyo tilmaamaha, wuxuu na adeegsanayaa awoodaha kale ee uu siiyay Guddiga Sare ee Shaqada Federaalka.

**3.** Haddii sarkaalka shaqada uu qaato, diiwaan, gal, keyd-buug ama dukumintiya kale si uu uga guto waajibkiisa, Sarkaalku waa inuu u reebaa loo-shaqeeyaha ama wakiilkiisa warqad caddeyn rasmi ah in uu ka hayo dukumintigaas.

**4.** Sarkaalka shaqada wuxuu gali karaa dhexdhexaadin laba dhinac oo khilaaf ka dhexeeya, si uu u xalliyo khilaafaadka ku xusan xeerkan iyo sharci kasta oo ku saabsan xiriirka shaqada iyo shaqo siinta.

**5.** Iyada oo ujeeddadu tahay uruurinta xogta suuqa shaqada, sarkaalka shaqadu waxa uu adeegsanayaa awooodahiisa, isaga oo keligii fulinaya hawlaha soo socda ama la kaashanaya saraakiisha kale ee shaqada:

**b)** Wuxuu dalbanayaa in loo soo daabaco galalka shaqo siinta ee uu u hayo loo-shaqeeyuhu si uu:

i. U baaro, fatisho, uuna hubiyo xogta ku jirta galalkaas;
ii. Nuqul uga reebto shay walba u baahan yahay.

**t)** Wuxuu ka dalbanayaa qof kasta oo shaqada ku jira ama dhammaystay ama shaqaale ka baxaya in ay usoo gudbiyaan wixii xog ah ee ay hayaan ee ay awood u leeyihiin bixinteeda oo ku saabsan:

i. Magacyada iyo cinwaannada dadka shaqada loo diray ama kuwa shaqada soo qabtay; iyo
ii. Xaddiga lacageed ee lagu bixiyay shaqada.

**j)** Sarkaalka shaqada wuxuu si xor ah oo ogeysiis la'aan ah saacad kasta, habeen ama maalin, dalban karaa:

i. In loo-shaqeyuhu uu u soo daabaco dukumintiyada tilmaamaya shaqo siinta shaqaale kasta;
ii. In shaqaaluhu soo daabaco dukuminti kasta oo la xiriira hannaanka shaqo siintiisa;

**x)** Baarayaa:

i. Qof kasta oo sarkaalka shaqadu uu u arko in ay jirto sabab maangal ah oo uu ku rumeysto in uu yahay shaqaale ama ahaan jiray shaqaale;
ii. In loo-shaqeeyuhu qofkaas, ama adeegihiisu ama wakiilkiisu ka shaqaaleeyay goobta shaqada ee loo-shaqeeyaha, waxaana looga baahanyahay in qofkaas uu saxiixo caddeyn uu ku xaqiijinayo in uu ka run sheegay warbixintii laga qoray iyo dhammaan waxyaabihii laga wareystay.

**kh)** Baarayaa oo nuqul ka reebanayaa diiwaanka, buugga keydinta iyo dukumintiyada kale ee la xiriira ama u muuqda in ay la xiriiraan shaqo siinta.waxaa kale oo uu la wareegayaa dukumintiyada koobaya diiwaanka, buugga ama keydka xasuus reebka kale haddii ay jirto sabab maangal ah oo uu ku rumeysto in caddeyn muujineysa xadgudub lagu sameeyay xeerkan ama sharciyada kale ee shaqada;

**d)** Fatashayaa, oo nuqul ka mid ah ka sameynayaa dhammaan keydka liiska shaqaale ee loo-shaqeeye ee ka hawlgala meel ka baxsan goobta shaqada;

**r)** Wuxuu amrayaa in loo-shaqeeye kasta uu u hoggaansamo qodobbada xeerkan;

**s)** In uu fududeeyo meeleynta shaqaalaha; iyo

**sh)** Waa in uu fuliyaa hawl iyo awaamiir kasta uu bixiyey agaasimaha shaqada, isagoo adeegasanaya awoodihiisa shaqo ee xeerkan tilmaamay;

**6.** Marka uu la wareegayo sarkaalka shaqada diiwaan, keyd xasuus-reeb ama dukumintiya kale si uu uga guto waajibkiisa, sarkaalku waa in uu sii yaa loo-shaqeeyaha ama wakiilkiisa warqad caddeyn rasmi ah in uu ka hayo dukumintigaas;

**7.** Iyadoo ujeedadu tahay dhaqangelinta xeerkan, sarkaalka badqabka mihnadda iyo caafimaadka oo adeegsanaya awoodahan soo socda, una fulinya waajibaadkiisa si madax bannaan ama isagoo kaashanaya saraalka shaqada wuxuu:

**b)** Si xor ah u baarayaa digniin la'aan saacad kasta habeen ama maalin, wuxuu na geli karaa, kormeeri karaa oo uu fatashayaa dhulka, guryaha iyo dhismooyin ka kale, taas oo uu sarkaalku u heysto sabab maangal ah oo uu ku rumeysan karo in qof shaqaale ahi deggan yahay ama uu ku shaqeeyo si loo hubiyo dhaqan galka xeerkan;

**t)** Sarkaalka shaqada wuxuu si xor ah ogeysiis la'aan saacad kasta, habeen ama maalin u dalban karaa:

i. In loo-shaqeeyuhu uu u soo daabaco dukmintiyada tilmaamaya shaqosiinta shaqaalaha;

ii. In shaqaaluhu soo daabaco dukuminti kasta oo la xiriira hannaanka shaqo siintiisa.

**j)** Baarayaa:

i. Qof kasta oo sarkaalka shaqadu uu u arko in ay jirto sabab maangal ah oo uu ku rumeysto in uu yahay shaqaale ama ahaan jiray shaqaale;

ii. In loo-shaqeeyuhu qofkaas, ama adeegihiisu ama wakiilkiisu ka shaqaaleeyay goobta shaqada ee loo-shaqeeyaha, waxaana looga baahan yahay in qofkaas uu saxiixo caddeyn uu ku xaqiijinayo in uu ka run sheegay warbixintii laga qoray iyo dhammaan waxyaabihii laga wareystay;

iii. Baarayaa oo nuqul ka reebanayaa diiwaanka, buugga keydinta iyo dukumintiyada kale ee la xiriira ama u muuqda in ay la xiriiraan shaqo siinta. Waxaa kale oo uu la wareegayaa dukumintiyada koobaya diiwaanka, buugga ama keydka xasuus reebka kale haddii ay jirto sabab maangal ah oo uu ku rumeysto in caddeyn muujineysa xadgudub lagu sameeyay xeerkan ama sharciyada kale ee shaqada;

iv. Gelayaa, baarayaa oo hubinayaa dhammaan musqulaha (lab iyo dheddig), goobaha kale ee nadaafadeed iyo socodka biyaha;

v. Uu baarayaa oo hubinayaa dhammaan cunnooyinka la siiyay ama u muuqda in la siinayo shaqaalaha, wuxuuna ka qaadanayaa labo muunad (Sample) oo la tijaabinayo, isla markaasna uu goobjoog ka yahay looshaqeeyaha ama wakiilkiisa, iyada oo labadii muunadood si xafidan loo xirayo, mid ka mid ahna loo reebayo loo-shaqeeyaha;

vi. Uu amrayaa in dhammaan dhismayaasha iyo goobaha ay shaqaalaha deggan yihiin ama ay ku shaqeeyaan in xaaladdooda nadaafadeed laga dhigo mid hagaagsan oo aad nadiif u ah;

vii. Iyada oo aanay waxba u dhimmeyn awoodaha kale ee hay'adaha xeerilaalinta ee heer federaal ama qof kale toona, wuxuu billaabayaa dacwo oogis madani ah ama mid faldambiyeed ah oo ku saabsan qodobbo xeerkan oo la jebiyay ama xadgudub loo-shaqeeyuhu ku sameeyay ama sharci kasta oo shaqaale;

viii. Amrayaa in isbitaal loo diro qofkii shaqaale ah ee buka, kaas oo xaaladda ka jirta goobta shaqadu aanay caawineynin, loo-shaqeeyaha ayeyna waajib ku tahay in uu bixiyo kharashka isbitaalka;

ix. Joojinayaa cunto walba oo loogu talagalay shaqaalaha, taas oo aan ku habbooneyn in la quuto. cuntadaas oo kale, waxaa lagu gubayaa sarkaalka badqabka iyo caafimaadka goobta shaqada hortiisa;

x. Dalbayaa, iyada oo uu lacagta bixinayo loo-shaqeeyuhu, cuntooyinka kala

duwan ee lagama maarmaanka u ah qofka shaqaalaha ah, taas oo aan kharash keedu ka badneyn qoondadii caadiga aheyd ee loo-shaqeeyuhu siin jiray shaqaalaha;

xi. Hubinayaa dhismooyinka iyo goobaha kale ee shaqaaluhu ay deggan yihiin ama ay ku shaqeeyaan, kuwaas oo sarkaalku u arko in aanay munaasab ku aheyn marka la eego qaab dhismeedkooda, xaaladda ama ku habboonaanta ujeeddooyin kii loo dhisay;

xii. Ku amrayaa loo-shaqeeyaaha inuu siiyo shaqaalaha uu la saxiixday heshiiska shaqo dhar, kabo shaqo, bustooyin iyo qalabka ka hortaga shilalka iyo halista dhaawacyada, kuwaas oo loo-shaqeeyuhu bixinayo qiimahooda;

xiii. Hubinayaa dhammaan daawooyinka la siinayo ee loogu talogalay in ay isticmaalaan shaqaalaha;

xiv. Lagu amraa loo-shaqeeyaha in uu u hoggaansamo qodobada xeerkan; iyo

xv. Fulinayaa wixii kale oo hawl iyo tilmaamo ah, wuxuuna isticmaalayaa awoodaha kale ee uu siiyo agaasimaha badqabka iyo caafimaaadka goobta shaqada.

**Qodobka 17aad**
**Warqadda Awoodsiinta Iyo Kaarka Aqoonsiga**

1. Wasiirka wuxuu siinayaa warqadda awood siinta iyo kaarka aqoonsiga sarkaal kasta oo idman, Guddiga Sare ee Shaqada Fedaraalka, Agaasimaha Shaqada iyo Agaasimaha Badqabka iyo Caafimaadka Goobta Shaqada.

2. Guddiga Sare Shaqada Fedaraalka wuxuu warqadda awood siinta iyo kaarka Aqoonsiga siinaya Saraakiisha lashaqaysa. Sarkaalka shaqada waxaa warqadda awood siinta iyo kaarka Aqoonsiga siinaya Agaasimaha Shaqada. Sarkaalka ka tirsan Agaasinka Badqabka iyo Caafimaadka Goobta Shaqada waxaa warqadda awood siinta iyo kaarka Aqoonsiga siinaya Agaasimaha Badqabka iyo caafimaadka Goobta Shaqada.

3. Sarkaalka Idman marka uu wajibaadkiisa shaqo u gudanayo si waafaqsan xeerkan, waa in uu mar kasta tusaa warqadda Awoodsiinta iyo kaarkiisa aqoonsiga qofkii ay khuseyso oo si sax ahna uga dalbadaa.

**Qodobka 18aad**
**Awoodda Gelidda Goobaha Shaqada**

**1.** Sarkaalka idman, waxaa loo oggol yahay in uu galo dhisme ama meel kasta oo ay shaqaale ku shaqeynayaan ama ay suurto gal tahay in ay ka hawlgalaan shaqaale, isagaoo wajibaadkiisa shaqo u gudanaya si waafaqsan xeerkan ama sharciyada kale ee shaqada.

**2.** Sarkaalka idmani waa in uu ogeysiiyaa loo-shaqeeyaha ama wakiilkiisa sababta joogitaankiisa

goobta shaqada marka ugu horreysa ee uu fursad u helo, haddii aanu ogeysiintaasi aheyn mid wax u dhimaysa ujeeddadii iyo waajibaad gudashadiisa uu meesha u yimid.

**3.** Sarkaalka idman waa in aan laga hor-istaagin, lagana carqaladeyn gudashada waajibaadkiisa shaqo si wafaqsan xeerkan, qof kasta oo:

**b)** Si ula kac ah sarkaalka u hor istaaga ama ku dhiba shaqadiisa; ama

**t)** Iska dhagatira ama ku guuldarreysta in uu u hoggaansamo dalab kasta ama amar kasta oo uga yimaada sarkaalka shaqada, waxaa lagu ciqaabayaa habraacayada ku xusan xeerka ciqaabta Soomaaliyeed iyo xeerarka kale ee Dalka.

**Qodobka 19aad**
**Iskaashiga Hay'adaha Dawladda**

Saraakiisha idmani, waxay ka dalban karaan markii loo baahdo hay'adaha Dawladda iskaashi la xiriirta sidii loo dhanqan gelin lahaa qodobbada xeerkan iyo xeer-nidaamiyaashiisa.

**Qodobka 20aad**
**Mamnuucid**

1. Sarkaalka idmani waa in uusan:

**b)** Dan toos ah ama dadban toona ka yeelan hawl kasta oo uu qabanaayo;

**t)** Sheegin, xataa haddii uu ka tago shaqada, sirta wax-soo-saarka iyo tan ganacsiga ama qaabka ay hay'adda u shaqeyso, kuwaas oo uu ogaaday muddadii uu shaqada ku jiray;

**j)** Shaacin halka ay kasoo gaartay cabashada lagu soo wargeliyay ee ku saabsan dhibaatada jirta, jebinta qodobo sharci ama aanu ku handadin loo-shaqeeyaha ama wakiilkiisa in booqashada baaritaankiisu ay ka dhasheen cabashooyinkaas.

**Qodobka 21aad**
**Awood La mid ah Tan Saraakiisha Booliska**

Saraakiisha idmani, waxa ay leeyihiin awood iyo maqaam la mid ah tan saraakiisha booliska, hase yeeshee, ku xaddidan oo keliya awoodda iyo waajibaadka uu siinayo xeerkan, xeer-nidaamiyaashiisa iyo sharciyada kale ee shaqada.

**Qodobka 22aad**
**Soo Gudbinta Warbixinnada iyo Ilaalinta Siraha**

**1.** Guddiga Sare Shaqada Federaalka, Agaasimaha Shaqada iyo Agaasimaha Badqabka Mihnadaha iyo Caafimaadka Goobaha Shaqada waxaa looga baahan yahay in ay diyaariyaan oo ay daabacaan warbixinnada sanadlaha ah ee hawlahooda kala duwan, kuwaas oo la doonayo in ay ku jiraan xogaha iyo macluumaadka soo socda:

**b)** Guddiga Sare Shaqada Federaalka ama Wakiilkiisa waxaay kasoo warbixinayaan:

i. Horumarka sharciyada la xiriira shaqada iyo xeer- nidaamiyaashooda;
ii. Shaqaalaha;
iii. Tirakoobka goobaha shaqada iyo shaqaalaha oo ay ku jiraan (dadka

baahiyaha gaarka ah qaba iyo kaalmadii loo fidiyay), dacwooyinka la xiriira khilaafaadka shaqada iyo sidii loo maareeyay; iyo hakin shaqo ka dhacday qaar ka mid ah qeybaha;

iv. Natiijooyinkii baaritaannada.

**t)** Agaasimaha Shaqada wuxuu ka warbixinayaa;

i. Horumarka siyaasadaha la xiriir shaqo siinta;
ii. Shaqaalaha;
iii. Heerka wax-soo-saarka;
iv. Macluumaadka suuqa shaqada iyo heerka shaqo siinta.

**j)** Agaasimaha Badqabka Mihnadda iyo Caafimaadka Goobha Shaqadu waxa uu ka warbixinayaa:

i. Horumarka shuruucda la xiriirta shaqadiisa, xeer- nidaamiyaashooda iyo anshaxa shaqada;
ii. Shaqaalaha;
iii. Xaaladda goobaha shaqada, tirakoobka goobaha shaqada iyo shaqaalaha oo ay ku jiraan (dadka baahiyaha gaarka ah qaba iyo wixii kaalmo ah ee la siiyay), shillalka Warshadaha iyo cudurada shaqada;
iv. Natiijooyinka baaritaannada;
v. Tirakoobka xadguduyada la ogaaday iyo ganaaxyada lagu soo rogay.

**2.** Waa reeban tahay in sarkaalka idman ama qofkale oo uu soo bandhigo macluumaad maamul si waafaqsan xeerkan, marka laga reebo:

i. Mid waafaqsan sharci kasta oo qoran; ama
ii. Ujeedada dacwad kasta oo looga maarmi waayey si sharci ah ama maareyn sax ah oo ku aaddan xeerkan;

## Qodobka 23aad
## Diiwaangelinta Ururrada Shaqaalaha iyo Ururrada Loo-Shaqeeyayaasha

**1.** Diiwaangeliyaha ururrada shaqaalaha iyo loo-shaqeeyayaashu waxa uu mas'uul ka yahay diiwaangelinta iyo xeerarka ururrada shaqaalaha iyo ururrada loo-shaqeeyaha iyo xiriir kasta oo ay ku midoobaan labo (2) urur.

**2.** Wasiirka ayaa magacaabi kara diiwaangelyaha, ku xigeenka diiwaangeliyaha, kaaliyeyaasha iyo saraakiisha kale ee loogu baahdo ujeeddoyinka xeerkan.

**3.** Diiwaangeliyuhu isaga oo qoraal isticmaalaya waxa uu ku xigeenkiisa ku wareejin karaa qeyb ka mid ah awooddiisa, hawlihiisa iyo waajibaadkiisa shaqo.

**4.** Diiwaangeliyuhu waxa uu:

**b)** Shuruudo ku xiri karaa, wax-ka-beddeli karaa ama baabi'in karaa wakiilashadiisa xilligii uu doono;

**t)** Beddeli karaa ama iska dhaafi karaa go'aan kasta oo uu sameeyo qofka uu wakiishay;

**Qodobka 24aad**
**Daadejinta Awoodaha iyo Hawlaha Saraakiisha**

**1.** Wasiirka, waxa uu markii loo baahdo abuuri karaa xafiiisyada Guddiga Sare Shaqada Fedaraalka, Agaasimaha Shaqada iyo Agaasimaha Badqabka mihnadda iyo Caafimaadka goobaha Shaqada, isaga oo u daadejinaya heer ka hooseeya midka heerka Federaal, haddii loo arko in ay muhiim tahay,iyada oo awoodaha, waajibaadka iyo hawlaha ee heer kasta sida ugu haboon loo adeegsanayo.

**2.** Wasiirku, waxaa uu abuuri karaa, uuna hirgelinayaa xafiisyada shaqada iyo Badqabka mihnadda iyo caafimaadka goobaha shaqada heer ka hooseeya midka heer federaal haddii loo arko in ay muhiim tahay, iyada oo awoodaha waajibaadka iyo hawlaha ee heer kasta sida ugu haboon loo adeegsanayo.

## CUTUBKA 4AAD:
## GUDDIGA SHAQADA FEDERAALKA

**Qodobka 25aad**
**Sameynta Guddiga**

Waxaa halkan lagu aasaasayaa Guddiga Sare Shaqada Federaalka ayadoo loo marayo si waafaqsan qodobka 12aad faqraddiisa 4aad.

**Qodobka 26aad**
**Ka Koobnaanta iyo Magacaabista**

**1.** Xubnaha Guddiga Sare Shaqada Federaalka wuxuu ka kooban yahay:

**b)** Guddoomiyaha Guddiga Sare Shaqada Federaalka;

**t)** Agaasimaha shaqada;

**j)** Agaasimaha Badqabka mihnadda iyo Caafimaadka Goobaha Shaqada;

**x)** Diiwaanhayaha Ururrada Shaqaalaha iyo Ururrada loo-shaqeeyeyaasha;

**kh)** Wakiil ka socda guddiga sare Xallinta khilaafaadka heer federal;

**d)** Xubno uu magacaabayo wasiirka shaqada:

i. Xubin khibrad iyo aqoon xeeldheer u leh arrimaha la xiriira shaqada;
ii. Xoghayaha guud ee xiriirka ugu matalaadda badan ururrada shaqaalaha;
iii. Guddomiyaha guud ee xiriirka ugu matalaadda badan ururrada loo-shaqeeyeyaasha;
iv. hal (1) xubin oo laga soo magacaabayo xiriirka ugu matalaadda badan ururrada loo-shaqeeyeyaasha ee ka shaqeeya arrimaha shaqada;
v. hal (1) xubin oo laga soo magacaabayo xiriirka ugu matalaadda badan ee ururrada shaqaalaha;
vi. hal (1) xubin oo madax bannaan, aqoon iyo khibrad durugsan u leh arrimaha xiriirka shaqada, qodobada xeerkan iyo xeerarka kale ee



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

khuseeya shaqada;

2. Xubin ka socota xafiiska Guddiga Sare Shaqada Federaalka, ayaa noqonaya xogheynta guddiga.

**Qodobka 27aad**
**Awoodaha iyo Hawlaha Guddiga**

**1.** Hawsha ugu weyn ee Guddiga Sare Shaqada Federaalka waa in uu talo ka siiyo wasiirka guud ahaan arrimaha la xiriira shaqada, xiriirka shaqada, shaqo siinta iyo goobaha shaqada oo ay ku jiraan xaaladaha adeeggooda iyo daryeelka shaqaalaha.

**2.** Iyada oo aan la xaddideyn awoodahooda guud iyo hawlaha Guddiga Sare Shaqada Federaalka, waxa ay kala talinayaan wasiirka:

**b)** Xeerarka la xiriira shaqada iyo shaqo siinta, maamulka shuruucda shaqada, xeerarka iyo hab dhaqanka wanaagsan ee shaqada;

**t)** Sameynta iyo horumarinta siyaasadaha shaqada;

**j)** Adeegyada guud ee shaqo siinta;

**x)** Xiriirrada shaqada, ururraynta shaqaalaha, xeer-nidaamiyaha iyo korjoogteynta wadarta xiriirrada shaqada;

**kh)** Jiheynta xirfadaha, tababbarrada xirfadaha iyo shaqo siinta dadka naafada ah;

**d)** Horumarinta kheyraadka aadamiga;

**r)** Hannaanka iyo habraacayada baarista shaqada;

**s)** Cabirka wax-soo-saarka iyo horumarintiisa;

**sh)** Magacaabidda golaha xuquuqda shaqada;

**dh)** Dejinta daryeelka iyo dheefta magdhowga, iyada oo la raacayo si waafaqsan qodobbada xeerkan iyo shuruucda kale ee la xiriirta shillalka mihnadaha iyo cudurrada shaqada;

**c)** Diiwaangelinta, hakinta iyo dib u diiwaangelinta ururrada shaqaalaha, kuwa loo-shaqeeyeyaasha iyo xiriirradooda guud; iyo

**g)** Wax kasta oo kale oo la xiriira hawlaha guddiga ee wasiirku talo uga baahdo.

**3.** Guddiga Sare ee Shaqada Federaalka wuxuu:

**b)** Sameynayaa baaris kasta oo uu u arko in ay lagama maarmaan tahay iyo cilmi baaris la xiriirta shaqada, dhaqaalaha, iyo siyaasadda bulshada;

**t)** Go'aaminayaa habraacyada la xiriira wax-qabadka hawlihiisa.

**Qodobka 28aad**
**Sameynta Guddiyada**

Guddiga Sare ee Shaqadu, wuxuu sameyn karaa Guddi-hoosaadyo haddii loo arko in ay lagama maarmaan u tahay gudashada hufnaanta, wax-ku-oolnimada awooddooda iyo waxqabadka hawlaha guddiga.

**Qodobka 29aad**
**Xuquuqda Guddiga**

Guddoomiyaha iyo xubnaha kale Guddiga, waxaa la siinayaa xuquuq, khidmad ama gunnooyin loogu talagalay in ay u adeegsadaan kharashaadkooda kala duwan, taas oo uu go'aan ka gaarayo wasiirka isaga oo la tashanaaya wasiirka maaliyadda.

**Qodobka 30aad**
**Habraacyada Xeer-Hoosaadka**

Guddiga Sare ee Shaqada Federaalka, wuxuu sameynsanayaa habraacyo iyo xeer-hoosaad u gaar ah oo ku aaddan adeegsiga awoodihiisa iyo wax qabadka hawlihiisa shaqo.

**QEYBTA III:**
**SAMEYNTA XEER-NIDAAMIYAASHA GOOBAHA SHAQADA**

**CUTUBKA 5AAD:**
**MAAMULKA IYO DHAQANGELINTA**

**Qodobka 31aad**
**Agaasimaha**

**1.** Agaasimaha Badqabka Mihnadda Goobta Shaqada iyo Caafimaadka ayaa mas'uul ka ah maareynta iyo hirgelinta qodobbada qeybtan.

**2.** Wasiirku, wuxuu magacaabi karaa xubno kale, sida ku xigeennada iyo kaaliyeyaasha agaasimaha, hadba intii aan looga maarmin caawinta agaasimaha.

**Qodobka 32aad**
**Awoodaha iyo Waajibaadka Agaasimaha Guud**

**1.** Awoodaha iyo waajibaadka Agaasimaha waxaa ka mid ah:

**b)** Diiwaangelinta goobaha shaqada;

**t)** Horumarinta, hirgelinta iyo dhaqangelinta, heerarka badqabka mihnadda iyo caafimaadka goobaha Shaqada, iyadoo la raacayo habdhaqanka iyo xeer nidaamyaasha shaqada, xasuus reebka, si looga sameeyo warbixinno la xiriira heerka dayacnaanta shaqaalaha ee maaddooyinka iyo walxaha halis gelin kara caafimaadka iyo badqabka shaqaalaha;

**j)** Dhiirrigelinta, badqabka mihnadaha iyo caafimaadka dhammaan goobaha shaqada iyo guud ahaan bulshada dhexdeeda si loo dhiirigeliyo dhaqan caafimaad iyo mid badbaado oo ka hirgala goobaha shaqada;

**x)** Fududeynta sameynta barnaamijyo la xiriirra shaqooyinka la islaqaatay sida loo qabanayo ama qeybo loo gooyey oo u gaar ah dadka naafada ah si ay ugu suuro

gasho in ay uga soo guuraan shaqooyinka xaddidan (Sheltered Employment), uguna soo gudbaan suuqa shaqada ee furan;

**kh)** Sameynta barnaamijyo caafimaad iyo tijaabooyin hadba goorta loo baahdo si loo ogaado shilalka cudurrada mihnadda iyo u nuglaanta shaqaalaha cudurrada ka dhasha shaqada;

**d)** Sameynta Baaritaanno iyo tijaabooyin la xiriira warshadaha iyo qalabka la adeegsado ee goobaha shaqada;

**r)** Abaabulidda baaritaan caafimaad oo lagu sameynayo xaaladda shaqaalaha, laguna ogaanayo caafimaadka dadka la shaqo siinaya iyo kormeerro loogu kuur galayo caafimaadka iyo badqabka goobaha shaqada,si loo ilaaliyo caafimaadka dadka shaqeeya, iyo fayadhowrka caafimaadka goobaha shaqada;

**s)** Qabanqaabinta waxbarasho iyo tababar ku saabsan caafimaadka iyo badqabka mihnadda goobaha shaqada oo loo qabanayo shirkadaha gaarka ah, kooxaha ama shaqsiyaadka iskood u shaqeysta iyo saraakiisha ku hawlan badqabka mihnadda iyo caafimaadka goobaha shaqada;

**sh)** Ururinta iyo baahinta xogaha iyo macluumaadka ku saabsan badqabka mihnahada iyo caafimaadka goobaha shaqada;

**dh)** Sameynta cilmibaaris, tijaabooyin iyo bandhigyo la xiriira badqabka mihnadda iyo caafimaadka, oo ay ku jiraan daraasadaha la xiriira waxyeellada xaga maskaxda ama dhimirka ee ku aaddan hababka, farsamooyinka iyo nidaamyada cusub ee lagula tacaalayo dhibaatooyinka badqabka mihnadda iyo caafimaadka goobta shaqada iyo dhibaatooyinka ka abuurma tiknoolojiyada casriga ah;

**c)** Horumarinta halbeegyo wax looga qabanayo maaddooyinka sunta ah, qalabka iyo curiyayaasha waxyeelleeya jirka aadamiga, halbeegyadaas oo tilmaamaya heerka dayacnaanta, kuwaas oo suurtagalinaya in si badqab mihnadeed loogu shaqeeyo xilliyada kala duwan ee shaqada;

**g)** Horumarinta iyo joogteynta barnaamijyo wax-ku-ool ah oo ku saabsan soo ururinta, isku duwidda iyo falanqaynta tirakoobka badqabka mihnadda iyo caafimaadka goobta shaqada oo koobaya cudarrada, shilalka iyo dhaawacyada shaqada;

**f)** Rukhsadsiinta iyo Oggolaanshaha hay'adaha bixiya tababarka la xiriira badqabka mihnadda iyo caafimaadka goobta shaqada;

**q)** Awoodaha iyo hawlaha kale ee lagama maarmaanka u ah in uu si habsami leh oo wax-ku-ool ah loogu guto awooddaha iyo waajibaadka uu xeerkani dhigayo.

**2.** Agaasimaha wuxuu wasiirka kala talin karaa:

**b)** Dejinta iyo horumarinta siyaasad qaran oo ku saabsan badqabka mihnaddaiyo caafimaadka goobaha shaqada;

**t)** Soo jeedinta sharciyo ku saabsan badqabka mihnadda iyo caafimaadka goobaha shaqada oo ay ku jiraan qaabab lagu dhaqan gelinaayo talooyinka iyo heshiisyada ururrada shaqaalaha aaduunka iyo kuwa heer gobol, sidoo kale heshiisyada iyo nidaamyada kale ee la xiriira badqabka mihnadda iyo caafimaadka goobaha shaqada, magdhawga iyo adeegyada kale ee dhaqancelinta shaqaalaha;

**j)** Diyaarinta nidaamyo istaraatijiyadeed oo lagu dhiirrigelinayo qaababka ugu habboon ee badqabka mihnadda iyo caafimaadka goobaha shaqada;

**x)** Sameynta, joogteynta iyo horumarinta dhaqan shaqo oo looga hortagayo



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

dhibaatooyinka ka dhasha badqab la'aanta mihnadda iyo caafimaadka goobaha shaqada;

**kh)** Dib u eegista qodobbada xeerkan, xeerar kale iyo xeer-nidaamyo, halbeegyo, hab dhaqanka guud ee hay'adaha gaarka loo leeyahay;

**d)** Falanqeynta tirakoobka geerida iyo dhaawacyada la xiriira shaqada;

**r)** Arrimaha kale ee saameeya badqabka mihnadda iyo caafimaadka goobaha shaqada ee agaasimuhu u arko in ay muhiim u yihiin sare u qaadidda tayada goobaha lagu shaqeeyo oo munaasab ah;

**3.** Agaasimuhu wuxuu dhisi karaa guddi farsamo oo tala-bixineed, ama kooxo lataliyayaal ah oo ka caawiya inuu si fiican u guto hawlihiisa, una adeegsado awoodihiisa sharci.

**4.** Agaasimaha ama sarkaal kasta oo idman ee ka hoos shaqeynaya, wuxuu gudbin karaa dacwad, qaban qaabin karaa ama ka difaaci karaa maxkamadda awoodda u leh horteeda wixii eed ah, macluumaad, cabasho ama dacwado kale oo ka dhashay xeerkan ama gudashada hawlihiisa shaqo.

**5.** Agaasimaha ama sarkaal kasta oo idman oo ka hoos shaqeynaya, wuxuu waqti kasta, isaga oo ku wargeliya qofka ka shaqeeya goobta ama wakiilkiisa goobta shaqada, ka qaadan karaa muunad (Sample) la xiriirta alaabta loo isticmaalo ama loogu talagalay in loo adeegsado goobta shaqada, si loo soo baaro, alaabtaas oo uu u arko in ay jebineyso qodob ka mid ah xeerkan, ama uu aamin sanyahay in baaristeeda lagu ogaan karo in ay dhaawacyo jireed u geysan karaan shaqaalaha.

**6.** Agaasimaha ama sarkaal kasta oo idman oo ka hoos shaqeynaya, wuxuu la wareegi karaa oo uu ka dhigi karaa mid aan waxyeello geysan karin agab ama walxa kasta oo uu ka helo dhismaha, kuwaas oo uu u hayo sabab maangal ah oo uu ku rumeysto in uu agabkaas ama walxahaas ay keeni karaan khatar muuqata ama uu dhaawac halis ah gaarsiin karo shaqaalaha.

**7.** Agaasimaha ama sarkaal kasta oo idman oo hoos yimaada, wuxuu digniin hagaajin ah siin karaa cid kasta oo uu u arko in:

**b)** Ay jebiyeen mid ka mid ah qodobbada xeerkan ama xeerar kale ee jira;

**t)** Ay jebiyeen mid ama dhowr ka mid ah xaaladaha ku xusan qodobbada xeerkan, taasoo ay dhici karto in ay soo noq-noqdaan.

**8.** Agaasimaha ama sarkaal kasta oo idman oo ka hoos shaqeynaya, wuxuu diginin shaqo ka joojin ah siin karaa qofkii uu u arko in shaqada uu qabanayo ama uu rabo inuu qabto ay dhaawacyo halis ah ku keeni karto shaqaalaha.

**9.** Agaasimaha ama sarkaal kasta oo idman ee hoos yimaada waa in uu bixiyaa amarro mamnuucid awood fulineed degdeg ah, haddii uu u arko in ay mamnuucis taas tahay mid la xiriirta hawlaha la haayo ama ku dhow in ay sii socdaan, kuwaas oo hoos tagaya xakameynta iyo awoodda qofka ku lug leh in ay gaarto khatar muuqata xagga badqabka mihnadda iyo caafimaadka goobaha shaqada.

**10.** Qof kasta oo la siiyo digniin shaqo ka joojin ah si waafaqsan qodobkan, haddii uu sii wato hawshii laga joojiyay ama qaado tallaabo kale oo xadgudub ku ah digniintii la siiyay, waxaa lagu ciqaabayaa habraacyada ku xusan xeerka ciqaabta Soomaaliyeed iyo xeerarka kale ee Dalka.

**11.** Haddii ay sii wataan hawlaha ogeysiiska ku saabsan ama qaab kasta oo looga soo

horjeesanayo ogeysiis kaas, waxaa laba jibaarmaya ganaaxa iyo ciqaabta lagu xusay faqradda 10[aad] ee sare.

**12.** Qof kasta oo dood ka qaba digniinta toosinta ah ama digniinta shaqo ka joojinta ah ee la siiyay wuxuu afar iyo toban (14) maalmood gudahood, laga billaabo maalinta digniinta la siiyay, cabasho u gudbisan karaa agaasimaha guud (haddii digniinta uu siiyay sarkaalka badqabka mihnadda iyo caafimaadka goobta shaqada) ama wuxuu cabasha diisa u gudbisan karaa wasiirka (haddii digniinta uu siiyay agaasimuhu).

**13.** Agaasimaha guud ama wasiirka hadba kii cabasho loo geeyo, markii uu cabashada ka baaraan dego kadib, wuxuu hab qoraal ah ku joojin karaa ama ku waafaqi karaa digniintii qofka la siiyay.

**14.** Qof kasta oo aan ku qancin go'aanka wasiirka, wuxuu cabasho u qaadan karaa maxkamadda awoodda u leh.

## CUTUBKA 6AAD:
## SAMEYNTA IYO DIIWAANGELINTA

### Qodobka 33aad
### Diiwaanka Goobaha Shaqada

**1.** Agaasimaha waxaa waajib ku ah in uu hayo diiwaan ka goobaha shaqada oo uu booqanayo iyadoo goob kasta shaqo uu ka diiwaan gelinayo xogaha gaarka u ah goobahaas iyo waxyaabaha lagama maarmaanka u ah diiwaangelinta si waafaqsan xeerkan.

**2.** Faahfaahinta laga diiwaan gelinayo goobaha shaqada waxaa ka mid ah:

- **b)** Magaca oo seddexan iyo cinwaanka oo faahfaahsan iyo haddiishaqaaluhu aanu milkiile aheyn;
- **t)** Meesha ay ku taallo goobta shaqada;
- **j)** Cinwaanka rasmiga ah ee lagala xiriiri karo goobta shaqada;
- **x)** Dabeecadda ganacsiga ama shaqada lagu qabanayo ama lagu qaban doono goobta shaqada;
- **kh)** Tirada iyo jagooyin ka shaqo ee shaqaalaha ka hawlgala goobta shaqada;
- **d)** Dabeecadda ganacisga haddii ay tahay warshad, mashiin,qalab, agab kale waxaa muhiim ah in laga diiwaan geliyo goobta shaqada ee lagu rakibay ama lagu rakibi doono iyo khataraha ugu waaweyn ee laga filan karo;
- **r)** Liiska walxaha kiimikeed ee loo isticmaalay ama loogu talagalay in lagu isticmaalo goobta shaqada;
- **s)** Awood makaanikeed haddii la isticmaalay ama lafilayo in la isticmaalo;
- **sh)** Taariikhda iyo lambarka taxanaha shahaadada lagu diiwaangeliyey ama cusbooneysiin tooda lagu diiwaangeliyey.

**Qodobka 34aad**
**Diiwaangelinta Goobaha Shaqada**

**1.** Qof kasta oo doonaya in uu sameysto goob ganacsi, shaqo ama u isticmaalo dhisme uu ka dhigto goob shaqo waa in uu codsadaa diiwaangelin, isaga oo agaasimaha u diraya qoraal ogeysiis ah oo ay ku jiraan xogtan soo socta:

**b)** Magaca iyo cinwaanka milkiilaha goobta shaqada ama dhismaha;

**t)**Ciwaan wixii xiriir ah loogu dirayo goobta shaqada sida dhammaan qoraallada ama xiriirrada Iwm;

**j)** Dabeecadda nooca shaqada lagu qabanayo ama la soo jeediyey in lagu qabto goobta shaqada;

**x)** Xogta maareeyaha goobta shaqada si waafaqsan xeerkan;

**Kh)** Liiska iyo noocayada walxaha kiimikeed ee loo isticmaalayo ama loogu talagalay in lagu isticmaalo goobta shaqada;

**d)** Haddii ay isticmaasho awood makaanikeed ama wax kale oo lafilayo in la isticmaalo iyo dabeecaddooda;

**r)** Haddii la isticmaalo mashiin awood cadaadis ku shaqeya ama la filayo in la isticmaalo, haddii ay sidaas tahay, waa in la sheegaa nooca mashiinka, faahfaahintiisa, lambarka u gaarka ah, dalka iyo sannadka la sameeyay;

**s)**Haddii la isticmaalay wiish dadka iyo alaabta lagu qaado ama lagu talo jiro in la isticmaalo; haddii ay sidaas tahay, waa in la sheego noociisa, faahfaahintiisa, lambarka u gaarka ah, dalka iyo sannadka la sameeyey; iyo taariikhdii ugu dambeysay ee la mariyay tijaabo lagu hubinayo shaqadiisa, qofkii ugu dambeeyay ee tijaabiyay iyo tanka ugu badan ee uu qaadi karo;

**sh)** Haddii la isticmaalay mashiinnada biyaha karkariya ama lagu talo jiro in la isticmaalo, haddii ay sidaas tahay, waa in la sheego nooociisa, faahfaahintiisa, lambarka gaarka u ah, dalka iyo sannadka la sameeyay, iyo taariikhdii ugu dambeysey ee la tijaabiyey shaqadiisa iyo qofka tijaabiyay; iyo cadaadiska ugu badan ee mashiinka ku dul qoran ($1lb/inch^2$);

**dh)** Tirada guud ee shaqaalaha ka shaqeeya, ama lagu talo jiro in ay kashaqeyn doonaan goobta shaqada;

**2.** Markii uu helo codsiga diiwaangelinta, Agaasimuhu waa in uu qaadaa tallaabooyinka lagama maarmaanka u ah hubinta in goobta shaqada ama goobta ganacsi ay tahay mid ku habboon hawsha lagu sheegay codsiga diiwaangelinta.

**3.** Marka uu ku qanco codsiga ka dib, Agaasimuhu wuxuu diiwaangelinayaa goobta shaqada ama goobta ganacsi, wuxuuna siinayaa codsadaha shahaaddada diiwaangelinta.

**4.** Qof kasta oo ganacsi ama goob shaqo ku shaqeysanaya, isaga oo aan haysan rukhsad diiwaangelin, haddii lagu helo waxaa loo maraayaa habraaaca sharciga Maareynta Maaliyada Guud.

**5.** Haddii uu sii socdo xadgudubku xukunka ka dib, qofkaas wuxuu galay dambi dheeraad ah, waxaana la laba jibaarayaa ciqaabta iyadoo loo maraayo habraaaca sharciga Maareynta Maaliyada Guud.

**6.** Haddii uu Agaasimuhu diido inuu soo saaro shahaadada diiwaangelinta, waa in uu qoraal ku sheegaa sababaha diidmadaas.

**7.** Qofka ka shaqeeya ama milkiilaha ka ah goob shaqo oo diiwaangashan waa in uu Agaasimaha ugu gudbiyaa qoraal uu ku ogeysiinayo isbeddellada la soo jeediyay in lagu sameeyo xogtii u diiwaangashanayd inta aan isbeddalka la sameyn ka hor.

**8.** Qofka ka shaqeeya goob shaqo ama milkiile ka ah oo magaciisa ku diiwaangashan oo aan Agaasimaha soo ogeysiin isbeddeladii soo kordha, wuxuu gelayaa dambi la mid ah ciqaabaha farqadaha (4) iyo (5) ee isla qodobkan.

**9.** Qofkii cabasho ama dacwad ka qaba go'aanka Agaasimaha ee ku saabsan diiwaangelinta, wuxuu cabasho u qaadan karaa Wasiirka afar iyo toban (14) maalmo shaqo gudahood, laga billaabo taariikhda go'aanka.

**10.** Wasiirka wuxuu magacaabayaa Guddi ka kooban wakiilo ka kala socda ururrada shaqaalaha iyo kuwa loo-shaqeeyeyaasha, kuwaas oo uu hoggaaminayo Agaasimaha Guud ee Wasaaradda, soona baara sababaha cabashada keentay, ka dibna ka soo gudbiyaan warbixin, si go'aan ku habboon looga gaaro.

**11.** Waxaa reeban in goob ganacsi ama shaqo laga dhaafo rukhsadda diiwaangelinta sabab kastaba ha ahaatee.

12. Lacagta Diiwaangelinta goob Ganacsi waa inay noqotaa Shan Dollar ilaa Shan iyo Labaatan Dollar ($5 ilaa $25), iyadoo loo eegayo hadba inta uu ganacsigu la egyahay.

## CUTUBKA 7AAD:
## XAALADAHA GOOBAHA SHAQADA

### Qodobka 35aad
### Waajibaadka Guud ee Qofka Mas'uulka ka ah Goobta Shaqada

**1.** Waxyaabaha soo socda waa waajibaadka guud ee qofka mas'uulka ah:

**b)** Inuu si guud u hubiyo badqabka mihnadda, caafimaadka iyo daryeelka shaqada dhammaan dadka ka shaqeeya goobta shaqada, taas oo ay ka midtahay:

i. Inuu taxadar muhiim ah u yeesho hay'adiisa, si loo ilaaliyo nolosha, caafimaadka iyo niyadda shaqaalaha;
ii. Inuu hubiyo in shaqaalaha ay helaan tilmaamaha lagama maarmaanka u ah ka hortagga shillalka warshadaha, cudurrada mihnadda ka dhasha iyo khataraha kale ee la xiriira xirfaddiisa shaqo;
iii. Dayactirka makiinadaha, qalabka korontada iyo mashiinnada warshadaha, iyada oo qalabka iyo agabyada kale xaaladdooda la wanaajinayo, si loo xaqiijiyo badqabka guud;
iv. In la helo qalabka muhiimka u ah ee loo istcmaalo badqabka, laguna dhejiyo mashiinnada iyo warshadda meelo ka mid ah;
v. Dayactirka qalabka dabdamiska iyo in shaqaalaha loo tababaro isticmaalka qalabkaas;
vi. In la helo goob dayactir, hab, iyo habraacyo shaqo oo ammaan ah oo aan wax khatar u keenayn caafimaadka shaqaalaha;
vii. In la helo nidaamyo lagu xaqiijanayo ammaanka iyo khatar la'aanta

caafimaadka goobta, kaas oo la xiriira isticmaalka, ka shaqeynta, kaydinta, iyo raridda alaabta iyo walxaha kale;

viii. In la helo meelo si fudud looga bixi karo, oo amman ah oo aan lahayn wax khatar caafimaad ah;

ix. In lagu wargeliyo dhammaan Shaqaalaha; halista ka imaan karta teknooloojiyada cusub iyo khataraha muuqda, lana hubiyo in qof kasta oo shaqeeya uu ka qayb qaato dhaqan gelinta iyo dib u eegista hababka badqabka mihnadda iyo caafimaadka goobaha shaqada;

x. bixinta qalabka, qalab sahlahawlaha, fududeeyaiyo wixii kale oo taageero ah ee ay u baahan yahiin isticmaalkooda dadka naafada ah;

**t)** In la qaado tallaabooyin qiimeyn ah oo la xiriirta khataraha ku aaddan shaqaalahaku hawlan badqabka mihnadda iyo caafimaadka goobta shaqada, iyada oo laga duulayo natiijooyinkii ka soo baxay qiimeyntaas, si loo qaado tallaabooyin ka hortag iyo ilaalin intaba;

**j)** In sarkaalka badqabka mihnadda iyo caafimaadka ee qeybtan loo diro nuqul ka midah warbixintii qiimeynta khatarta ee la sameeyay si waafaqsan xeerkan;

**x)** In la qaado tallaabooyin degdeg ah oo lagu joojinaayo hawl kasta oo loo arko in ay halis ku tahay badqabka mihnadda iyo caafimaadka goobta shaqada isla markaana laga daad gureeyo si habboon dhammaan shaqaalaha ku sugan goobta;

**kh)** In la diyaariyo dib u sixid qoraal lagu sameeyo mar kasta oo ay ku habboon tahay qodobada siyaasadda guud badqabka mihnadda iyo caafimaadka goobta shaqada, lana dejiyo nidaam lagu dhaqan gelinaayo siyaasaddaas qoran, isla markaas sixiddaas lagu wargeliyo dhammaan shaqaalaha ka hawl gala goobaha shaqada;

**d)** Lama eryi karo qof kasta oo shaqaale ah, waxba looma dhimi karo, lama faquuqi karo, loo mana diidi karo fursadaha shaqo ee jira, hoosna looma dhigi karo darajadiisa, iyada oo lagu ciqaabayo qofka shaqaalaha ahi, sababtuna ay tahay:

(i) In qofka shaqaalaha ah uu ka cawday arrin uu u arkay in aanay ammaan aheyn ama ay khatar ku tahay caafimaadkiisa;

(i) In qof kasta oo shaqaale ah ee xubin ka noqday guddiga badqabka mihnadda iyo Caafimaadka goobta shaqada kaasoo loo dhisay dabagalka, meelmarinta xeerkan, ama isaga oo gutay hawlihiisa shaqo ee ku aaddan xubinnimada Guddigaas.

**r)** Waa in goobta kasta ee shaqo laga dhisaa gudddiga badqabka mihnadda iyo Caafimaadka, si waafaqsan xeer-nidaamiye wasiirka soo saaray, xubin ka mid ahna waa in ay noqotaa dadka naafada ah ee ku sugan goobtaas, haddii:

i. ay ka shaqeeyaan shaqaale ka badan labaatan (20) qof; ama

ii. Agaasimuhu uu amro sameynta guddiga badqabka mihnaddaiyo caafimaadka.

**s)** Si aan waafaqsaneyn xeerkan, lama jari karo, la mana dhimi karo xuquuq shaqaale oola xiriira badqabka mihnadda iyo caafimaadka goobta shaqada;

**sh)** In la qabanqaabiyo baaris qoto dheer oo lagu sameeyo badqabka mihnadda iyo caafimaadka goobta shaqada ugu yaraan sanadkiiba mar, baaristaas waxaa sameynaya howlwadeen ama sarkaal badqabka mihnadda iyo caafimaadka goobta shaqada, kaasoo qoraya warbixinta baarista, una diraya agaasimaha warbixintaas.

**2.** Qofkasta oo ku guuldarreysta ama ku fashilma, kana soo bixi waaya waajibaadka uu saaray

qodobkan, waxaa lagu ciqaabayaa habraacayada ku xusan xeerka ciqaabta Soomaaliyeed iyo xeerarka kale ee Dalka.

**3.** Qof kasta oo shaqaale ah oo aaminsan in dayac uu loo-shaqeeyuhu ka dhacay awgiis, naftiisuna ay ammaan ahayn, halisna ku jirto, khatar muuqato oo caafimaad nafeed ahna uu wajahayo, wuxuu xaq u leeyahy shaqaaluhu in uu u gudbiyo loo-shaqeeyaha wargelin qoraal ah oo si faahfaahsan u tilmaameysa khatarta jirta. Sidaa daraadeed, shaqaaluhu kuma muteysan karo ganaax ama shaqo ka joojin ama fal kale oo waxyeello ku keeni kara adeegsiga xuquuqdiisa awgeed.

**Qodobka 36aad**
**Daryeel**

**1.** Mas'uul kasta waxaa waajib ku ah:

- **b)** In uu u diyaariyo qalab uu ku fariisto, kuna habboon qofkasta oo ka shaqeeya howl taagni lagu qabanayo, lana helo fursad shaqaalaha ay ku nastaan waqti cayiman, kuna soo laabtaan shaqada;
- **t)** In uu keeno biyo la cabbo oo nadiif ah, kuwaas oo ku filan shaqaalaha oo dhan, si fududna loo heli karo xilliga lagu guda jiro saacadaha shaqada;
- **j)** In uu ku rakibo (dhejiyo) goobta shaqada qalabka gargaarka degdega ah, uuna qaado tallaabooyin suurto gelinaya in gurmad lagama maarmaan ah oo degdeg ah la siiyo qofkasta oo ku dhaawacma ama ku xanuunsada shaqada;
- **x)** In laga helo goobta shaqada qol dhar beddelasha iyo goob cibaado oo u kala baxsan raga iyo dumarka oo ay shaqaalaha isticmaalaan;
- **kh)** In uu u sameeyo shaqaalaha naafada ah daryeel dhammeystiran oo baahidooda ku filan xilliga shaqada;

**2.** Mas'uul kasta oo u hoggaan sami waaya waajibaadka ku xusan qodobkan farqadihiisa sare, waxaa lagu ciqaabayaa habraacayada ku xusan xeerka ciqaabta Soomaaliyeed iyo xeerarka kale ee Dalka.

**Qodobka 37aad**
**Caafimaadka Goobaha Shaqada**

Mas'uul kasta waxaa waajib ku ah;

**1.** In uu hubiyaa in caafimaadka goobtu tahay mid hagaagsan oo ku habboon, iyadaoo goobta loo sameynaya hawo nadiif ah, lana gaarsiinaya hawadaas qol walba.

**2.** Mas'uulku waa inuu hubiyaa:

- **b)** In goobta shaqadu aanay aheyn xilliga shaqada meel ciriiri ah oo shaqaaluhu isdul dhooban yihiin, taas oo qofka ka shaqeynaya, kuna keeni karta halis, dhaawac iyo khatar caafimaad;
- **t)** In goobta shaqadu ay tahay meel waasac ah oo si fudud loogu shaqeyn karo, waana in ay leedahay meelo bannaan oo lagu kala nafiso, lana tixgelinayo nooca shaqada, lagana heli karo hawo ku haboon shaqaale kasta.

**3.** Mas'uul kasta waa inuu hubiyaa in qeyb walba oo ka mid ah goobta shaqada ee shaqaalaha ku shaqeynayaan ama ay marayaan in ay leedahay iftiin ku filan kuna habboon, ha ahaado iftiin dabiici



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

ah ama mid la sameeyay.

**4.** Mas'uul kasta waa in uu hubiyo in goobta shaqada ay tahay mid nadiif ah, oo aaney jirin wax ur ah oo kasoo baxaya bullaacadaha, musqulaha, isla markaana aaney jirin sawaxan ama dhawaaq oo shaqaaluhu dhibsadaan, kasoo ka baxsan dabeecada shaqada.

**5.** Mas'uul kasta waa in uu hubiyaa in tubooyinka (qasabadaha) qaada biyaha wasaqda ah, una gudbinaya bullaacadaha dhulka hoostiisa maraya, kuwaas oo loo baahanyahy in aaney yeelan wax qoyaan ah oo uu shaqaaluhu ku sibxan karaan.

**6.** Mas'uul kasta waa in uu u dhigaa qalab ku habboon oo qashinka looga qaado goobta shaqada.

**7.** Mas'uul kasta waa inuu goobta shaqada u yeelaa musqulo ku habboon shaqaalaha naafada ah, lana sameeyo musqulo u kala soocan lab iyo dheddig iyo qeybo wax lagu dhaqdo, shaqaalahana ay ka heli karaan, nadiifna ah, aadna u habeysan.

**8.** Mas'uulkii u hoggaansami waaya qodobkan, waxaa lagu ciqaabayaa habraacyada ku xusan xeerka ciqaabta Soomaaliyeed iyo xeerarka kale ee Dalka.

**Qodobka 38aad**
**Badqabka Goobaha Shaqada**

**1.** Dhammaan warshadaha, mashiinnada waaweyn iyo qalabka kale ba:

- **b)** Haddii uu yahay mid rakiban ama mid guurguura, waa in loo adeegsadaa oo kaliya shaqadii loogu tala galay, kuna shaqeeyo shaqaale aqoon iyo karti u leh isticmaalkiisa;
- **t)** Waa in si xilliyeysan u baaraa qof karti iyo takhasus u leh qalab kaas, si looogaado in xaaladdoodu wanaagsan tahay oo aanay khatar gelineyn badqabka iyo caafimaadka shaqaalaha iyo qofkasta oo soo booqda goobta shaqada.

**2.** Qof kasta oo si toos ah uga shaqeeya ama isticmaala warshadaha, mashiinnada waaweyn iyo qalabka kale, kaasina waa in uu leeyahay aqoon ku filan, si loo hubiyo in shaqada ama howlgalka, isticmaalkuna aaney wax halis ah u keeneynin badqabka iyo caafimaadka qofkaas, shaqaalaha kale ama cid kasta ee soo gasha goobta shaqada.

**3.** looma oggola qof kasta oo farsamo-barad ah in uu u dhawaado mashiinnada culus, agabka iyo qalabka kale ilaa uu la joogo kormeerihiisa tababarka, lana helo wax ka difaaca khataraha iyo halista ka imaaneysa shaqada adag, bey'ada ama loo diyaariyo jawi ammaan ah.

**4.** Qofna lagama shaqasiin karo mashiin ama shaqo kale oo sababi karta caafimaad xumo ama dhaawac jireed, iyada oo aan si buuxda loogu sheegin khatarta uga imaan karta shaqadaas iyo waxyaabaha loo baahan yahay inuu ka feejignaado, lana hubiyo in:

- **b)** Shaqaaluhu uu helo tababar ku filan oo ku saabsan shaqada mashiinka ama hawsha kale;
- **t)** Shaqaaluhu uu markasta kormeer ku sameeyo qof aqoon iyo waayo-aragnimo u leh mashiinka ama shaqada.

**5.** Tababarka lagu soo sheegay farqadda (4) waa in la qabtaa markii:

- **b)** Shaqaale cusub la qorayo;



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

t) Qof la beddelayo ama shaqo kale loo dhiibayo;
j) Mashiinno iyo qalab cusub soo baxaan ama mashiinnada iyo qalabka shaqada oo la beddelayo;
x) Tiknoolojiyad cusub la soo bandhigaayo ama la adeegsanayo.

6. Tababarka waa in uu ahaadaa:
b) Mid la socda isbeddelka cusub iyo khataraha imaan kara;
t) Mid si joogto ah loo qabto xilliyo kala duwan oo muddeysan;
j) Mid shaqaalaha aan wax u dhibeynin, lana qabtaa saacadaha shaqada gudahooda.

7. Mas'uul kasta waa in uu hubiyaa in shaqaalaha kale iyo qandaraas la yaasha ka howlgala goobta shaqadu ay heleen tilmaamo ku habboon oo la xiriira halista badqabka mihnadda iyo caafimaadka, loona sheegaa nidaamka gargaarka degdegga ah ee laga helayo goobta shaqada inta howshu socoto iyo tallaabooyinka la qaadayo haddii ay timaaddo xaalad degdeg ah.

8. Mas'uul kasta waa in uu u sameeyaa shaqaalaha qalab gaar ah oo ay ku jiraan qalabka ka hortaga khataraha, iyo kuwa loogu tala galay shaqaalaha naafada ah ee ku sugan goobta shaqada iyo deegaanka, lana qaadaa tallaabooyin munaasab ah, si looga hortago in uu yimaado dhaawacyo iyo shilal ka dhaca goobta shaqada.

9. Wasiirka wuxuu soo saari kara tilmaamo ka dib markii uu la tashado ururrada shaqaalaha iyo ururrada loo-shaqeeyayaasha oo ku aaddan si baaris caafimaad oo ku habboon lagu sameeyo shaqaale ama kooxo shaqaale ah oo ka howlgala goob ay ku sugan yihiin, una baahan in loo sameeyo qorshe maangal ah si loo ilaaliyo badqabka iyo caafimaadka ee heerar kala duwan ee goobta shaqada oo leh:
b) Cudurro lagu arkay goobta shaqada oo uu hayo sabab maangal ah oo uu ku rumeysto in uu ka dhashay nooca shaqada ama xaaladda goobta shaqada;
t) In ay sabab u tahay isbeddelka ku dhacay qaabka shaqada, walxo loo isticmaalay hab cusub ee shaqada ama maaddooyin kale oo lagu soo kordhiyay qaabka shaqada, kuwaas oo keeni kara in ay timaado khatar dhaawac soo gaari kara caafimaadka qofka ka hawlgala goobta shaqada;
j) Ay jiri karto halis dhaawac ku ah caafimaadka qofka shaqaalaha, kana soo gaari karta maaddooyin ama walxa cusub oo la keenay warshadda si loogu shaqeeyo, halisna ka imaan karta isbeddel kasta ee ku yimaada xaaladda guud ee warshadda.

10. Xeer-nidaamiyeyaasha khuseeya qeybtan ayaa waajibinaya in kormeer caafimaad ay ku sameeyaan shaqaale aqoon iyo khibrad u leh, kana diiwaangashan agaasinka, kuwaas oo soo buuxiyey shuruudaha looga baahan yahay in la diiwaangeliyo si waafaqsan ujeeddooyinka xeerkan.

11. Haddii Wasiirku ay u caddaato in goobta shaqada ay ka jirto arrimo halis caafimaad ku keeni karta Shaqaalaha, wuxuu soo saarayaa amarro iyo haggeyaal lagama maarmaan ka dhigaya in la sameeyo arrimahan soo socda:
b) In baaris caafimaad lagu sameeyo shaqaalaha ka hor inta aan la shaqaalaysiin, inta ay ku guda jiraan shaqada, iyo marka ay shaqada ka baxaan ama laga joojiyo kadibba;

t) In la sameeyo baaritaan caadi ah ama mid gaar ahaaneed ama in daraasad caafimaad



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

lagu sameeyo daawada iyo nadaafadda warshadda guud ahaan.

**12.** Kharashka ku baxaya baaritaannada lagu sheegay farqadda (11) waxaa bixinaya loo-shaqeeyaha.

**13.** Loo-shaqeeyuhu waa inuu hubiyaa in baaritaanka lagu sheegay qaybtani la qabanayo, iyada oo qofka shaqaalaha ahi aanu lumineyn wax xuquuq ah oo uu shaqeysan lahaa iyo in haddii ay suurtogal tahay in baaritaanka la sameeyo inta lagu guda jiro saacadaha shaqada ee caadiga ah.

**14.** Shaqaalaha cusub iyo kuwii hore u shaqeynayey, waxaa waajib ku ah in ay maraan baaritaan caafimaad, si waafaqsan xeerkan.

**15.** Loo-shaqeeye kasta, waxaa waajib ku ah in shaqaalaha ka shaqeeya goobahashaqada ama shaqo kasta oo halis ah, uu siiyaa qalab ilaalin ama ka hortag tayo leh oo ku habboon kana mid yihiin dhar, gacma-gashiyo, kabo, ookiyaalo iyo koofiyado ay isaga difaacaan khataraha ka jira goobaha ay yaalliin waxyaabaha qoyan iyo maaddooyinka halista ah.

**16.** Loo-shaqeeye kasta waa waajib inuu bixiyaa ookiyaalo ama shaashado ku habboon oo waxtar leh si loo ilaaliyo indhaha shaqaalaha ku hawlan shaqo halis gelin karta ama dhaawici karta indhaha shaqaalaha.

**17.** loo-shaqeeye kasta oo leh goob shaqo, waa inuu sameeyaa qeyb u gaar ah oo u xiran alxanka, si looga ilaaliyo shaqaalaha aan aheyn kuwa alxanka in hillaaca alxanku uu Indhaha ka saameeya ama ka rido.

**18.** Qof kasta oo ku xadgudba qodobkan ama xeer-nidaamiyayaashiisa, waxaa lagu ciqaabayaa habraacayada ku xusan xeerka ciqaabta Soomaaliyeed iyo xeerarka kale ee Dalka.

## Qodobka 39aad
## Diiwaan Gelinta Tababar-xilliyeed ama Mid Billaw ah

**1.** Looshaqeeye kasta ee goob shaqo waxaa waajib ku ah in uu u diyaariyo diiwaan oo lagu qorayo faahfaahinta tababarrada billowga ah iyo tababar xilliyeedka la siiyo shaqaalaha ka shaqeeya goobta shaqada.

**2.** Faafaahinta lagu qorayo diiwaanka waxaa ka mid ah:

**b)** Taariikhda, muddada, habka iyo nooca tababarka;
**t)** Heerka aqoonta iyo waayo-aragnimada ay leeyihiin dadka tababarka bixinaya ee la xiriira maaddooyinka iyo habka tababarku uu ku saabsan yahay;
**j)** Shaqaalaha la tababarayo iyo xilalka ay ka hayaan goobta shaqada;
**x)** Nooca qiimeynta iyo wax-ku-oolnimada tababarka.

## Qodobka 40aad
## Wargelinta Cudurrada Mihnadda iyo Shilalka Ka Dhaca Goobaha Shaqada

**1.** Loo-shaqeeye kasta waxaa waajib ku ah inuu soo wargeliyo agaasimaha ama sarkaalka badqabka mihnadda iyo caafimaadka ee aaggiisa dhammaan shilalka, naafonimada joogtada ah



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

ama tan aan aheyn, dhimasho, dhawaac iyo cudurrada mihnadda ee ka dhasha goobta shaqada, uuna ku keydiyo diiwaan u gaar ah.

**2.** Faahfaahinnada ay tahay in diiwaankaas lagu qoro waxaa ka mid ah:

**b)** Taariikhda iyo nooca shilka;

**t)** Shaqaalaha dhaawacmay iyo nooca dhaawacooda, kuwa ka bogsooday, kuwa si joogta ah u naafoobay iyo kuwa dhaawaca dartiis u dhintay;

**j)** Nooca cudurka ka dillaacay goobta shaqada, shaqaalaha uu ku dhacay, goortii la diiwaan geliyay iyo qofkii diiwaan geliyay;

**x)** Loo-sheeqeeyaha taallaabooyinkii uu qaaday markii uu ogaaday shilka dhacay ama cudurka ka dillaacay goobta shaqada.

## Qodobka 41aad
## Wargelinta Xogta Shillalka iyo Cudurrada Mihnadda ee Goobaha Shaqada

**1.** Loo-shaqeeye kasta waxaa waajib ku ah in uu si dhakhso ah ugu gudbiyo agaasimaha ama sarkaalka badqabka mihnadda iyo caafimaadka aaggiisa dhammaan wixii keenay shillalka dhacay, kuwa si joogta ah u naafoobay ama sababay dhimasho iyo dhaawac bogsaday iyo kiisaska cudurrada mihnadda ee laga helay goobta shaqada.

**2.** Warbixintu waa in ay ahaataa mid qoraal ah, waana in ay ku jiraan faafaahinada lagu caddeeyay Qodabka 40aad faqraddiisa 2aad.

**3.** Warbixinta waa in ay la socoto nuqul ka mid ah kormeerkii iyo baaristii la sameeyay ama warbixintii caafimaadka ee la diyaariyey.

## Qodobka 42aad
## Xarumaha Caafimaadka

1. Goob kasta oo shaqo ee sida caadiga ah ay ka shaqeeyaan in ka badan toban (10) shaqaale ah, waa in laga helaa sanduuqa gargaarka degdegga ah, uuna joogaa qof u tababaran gargaarka dagdaga ah.

2. Goob kasta oo shaqo ama xarun kasta gaar ahaanteeda oo sida caadiga ah ay ka shaqeeyaan in ka badan 100 shaqaale ah, waa in ay yeelataa goob bukaan- eegto ah iyo shaqaale caafimaad oo tababaran kuna filan.

## Qodobka 43aad
## Gurmadka Shaqaalaha Dhaawacma iyo kuwa Xanuunsada

Loo-shaqeeyaha waa in uu leeyahay nidaam uu sida ugu degdegga badan ugu gaarsiin karo goob caafimaad shaqaalaha ku xunuunsada ama ku dhaawacma goobta shaqada, kuwaas oo ay xaaladdooda caafimaad aan wax looga qaban karin xarumaha shaqada, wixii kharash ah ee ku baxa gurmadkaas loo-shaqeeyaha ayaa bixinaya.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

**Qodobka 44aad**
**Dhejinta Habraaca Badqabka Mihnadda iyo Caafimaadka Shaqaalaha**

1. Loo-shaqeeye kasta waxaa waajib ku ah in uu habraaca iyo qodobada khuseeya badqabka mihnadda iyo caafimaadka uu gaarsiiyo dhammaan shaqaalaha ku sugan goobta shaqada, kuna dhejiyo habraacaas meel ku habboon oo shaqaale kasta uu ka arki karo.

2. Habraacyada iyo qodobada badqabka mihnadda iyo caafimaadka waa inay ku qoran yihiin af ay shaqaaluhu fahmi karaan.

**Qodobka 45aad**
**Meel Marinta Hannaanka iyo habraacyada Badqabka Mihnadda iyo Caafimaadka Goobaha Shaqada**

1. Wasiirka wuxuu soo saarayaa hannaan iyo habraacyo ka dib markii uu la tashado wakiillada ururrada shaqaalaha iyo kuwa loo-shaqeeyaha, khuseeya nabad qabka mihnadda iyo caafimaadka goobta shaqada, heerka badqabka mihnadda iyo caafimaadka guud ama mid gaar u ah goobo shaqo ama hey'ado oo ay ka mid yihiin shaqooyin kooda ee la xiriira:

**b)** Warshadaha, Mishiinnada iyo Qalabka, oo ay ka mid yihiin:

i. Dhaqaajiyayaasha kowaad (Prime Movers);
ii. Gudbinta Mashiinnada kale;
iii. Qalabka korontada ku shaqeeya ee gacanta lagu qaadan karo;
iv. Dhismaha iyo dayactirka xayndaabka ama dayrka la adeegsano;
v. Beddelidda iyo Rakibidda Mashiinno cusub;
vi. Mashiinnada iswada (Self Acting);
vii. Mashiinnada wax qaada iyo wiishashka;
viii. Silsiladaha, xargaha iyo kuwa dallaca ama qaada qalabka loo baahan yahay
ix. Wiishashka waaweyn iyo qalabka kale ee wax lagu qaado;
x. Makiinnadaha sameeya uumiga haamaha iyo kunteenarrada;
xi. Haamaha iyo Tubbooyinka dhaliya cadaadiska, dareeraha iyo gaasas kala nadiifiyey;
xii. Warshadda Qaboojiyaasha waaweyn.

**t)** Qalabka iyo dharka badqabka;

**j)** Ka hortagga iyo xakameynta dabka;

**x)** Kiimikooyinka halista ah;

**kh)** Sii deynta qaaca khatarta ah;

**d)** Dikhowga hawada, buuqa iyo gariirka;

**r)** U carbinta badbaadada iyo habraaca daadgureynta.

## QEYBTA IV:
## SHAQO SIIN

## CUTUBKA 8AAD:
## ADEEGGA HESHIISKA CAADIGA AH

### Qodobka 46aad
### Qaabka Heshiiska

**1.** Heshiiska shaqo siinta waxa uu noqon karaa qaab af ah ama qoraal ah.

**2.** Caddaynta ama burrinta eedeymaha shuruudaha shaqo siinta ee lagu qeexay heshiis af ah, qeyb af ah iyo qeyb qoraal ah, waa mas'uuliyadda loo-shaqeeyaha.

**3.** Heshiis shaqo siin kasta waa in uu ahaadaa qoraal, haddii muddadiisa shaqo ay tahay seddax (3) bilood oo xiriir ah.

**4.** Ka hor inta aan la dhaqangelin shaqo siinta, sarkaalka shaqada ee awoodda u leh waa in uu hubiyaa heshiiska in uu waafaqsan yahay qodobada xeerkan, xeer nidaamiyayaasha ama sharciyada kale ee khuseeya shaqada.

**5.** Sarkaalka shaqada ee awoodda u leh haddii ay u caddaato inay jiraan wax ka soo horjeeda qodobada xeerkan, xeer nidaamiyaasha ama sharciyada kale ee shaqosiinta, sarkaalku waxaa uu:

**b)** Farayaa dhinacyada in ay dib u sixid ku sameeyaan heshiiska, si loo hubiyo in uu heshiisku waafaqsan yahay qodobada xeerkan;

**t)** Farayaa dhinacyada haddii ay u hoggaansami waayaan muddo soddan (30) Maalmo shaqo gudahood ee taariikhda heshiiska la galay, dib u sixidda heshiiska lagu sameeyey waxaa loo qaadanayaa in uu buray, waana waxba kama jiraan, hasa yeeshee, xuquuqda dhinacyada ee xeerkani lagu qeexay waa in la dhawraa, muddadii uu shaqaaluhu shaqeynayay xuquuqdiisa shaqaalinnimo waa u ansax.

### Qodobka 47aad
### Faahfaahinta Shaqo siinta

**1.** Iyada oo la raacayo qodobbada xeerkan ama xeer-nidaamiyaashiisa, heshiiska qoraalka ah ee shaqo siinta waa in lagu caddeeyaa tilmaamaha soo socda:

**b)** Magaca, da'da, jinsiga (lab iyo dheddig) cinwaanka iyo mihnadda shaqaalaha

**t)** Haddii qofku yahay naafo iyo nooca naafanimadiisa;

**j)**Magaca loo-shaqeeyaha cinwaankiisa iyo mihniddiisa;

**x)**Shaqa qeexidda shaqosiinta;

**kh)**Taariikhda shaqada la billaabayo;

**d)**Muddada heshiiska;

**r)**Saacadaha iyo goobta shaqada;

**s)**Xuquuqda la siinayo qofka shaqaalaha ah iyo muddada lagu bixinaayo, heerka kororka, habka xisaabinta xuquuqda iyo faahfaahinta dheefaha kale;

**sh)**Qodobada iyo Shuruudaha la xiriira:

i. Fasax sanadeedka iyo fasaxyada kale; iyo fasaxa loo lacageynayo;

ii. Shaqo gudasho la'aan ka dhalatay xanuun ama dhaawac, oo ay ka mid tahay wixii dhaqaale ah ee la siinayo qofka xanuunsan;
iii. Hawlgabka, qorshaha hawlgabka iyo liiltirka shaqaalaha;

dh) Muddada qofka shaqaalaha waajib ku ah in uu kusoo gudbiyo codsigiisa ogeysiiska shaqo-ka-tegista, si loo soo afjaro heshiiska shaqosiinta;
c) Wixii heshiisyo wadareed ah ee si toos ah u saameynaya qodobada heshiiska iyo shuruudaha shaqosiinta;
g) Haddii shaqaalaha looga baahan yahay inuu ka shaqeeyo dalka dibadiisa muddo ka badan hal bil:
i. Muddada ay tahay qofkaas shaqaalaha ahi in uu shaqeeyo;
ii. Nooca lacagta uu xuquuq ahaan ku qaadanayo;
iii. Wixii xuquuq dheeraad ah oo la siinayo qofka shaqaalaha ah, iyo wixii dheef ah oo uu qofka ku helayo inuu dalka dibaddiisa ka shaqeynayo darteed;
iv. Wixii heshiis iyo shuruudo ah ee la xiriira dib u soo celinta shaqaalaha.

f) Habraaca hakinta ama dhammaadka heshiiska;

q) Xeerarka iyo qodobada kale ee la xiriira qaabka anshax-marinta.

2. Waa in helitaanka qoraalka faahfaahinta shaqosiinta, tixraacyadiisa oo dhan iyo dukumintiyada kale ee la cuskaday qaarkood loo fududeeyaa shaqaalaha.

3. Mar kasta oo faahfaahinta heshiiska wax iska bedelaan, loo-shaqeeyuhu isagoo la tashanaya shaqaalihiisa, waa in uu ku sameeyaa dib u eegis lagu saxayo is-bedelkaas, waana in shaqaalaha uu ku wargeliyaa si qoraalah oo ku saabsan wax ka beddelka ku yimid heshiiska.

## Qodobka 48aad
## Waajibaadka Loo-shaqeeyaha

1. Loo-shaqeeyaha waxaa waajib ku ah arrimaha soo socda:
b) In uu bixiyo ujuurada lagu heshiiyay, isaga oo raacaya shuruudihii, goortii iyo meeshii la isku raacay bixinta ujuurada sida heshiiska ku cad ee waafaqsan xeerkan, xeer-nidaamiyayaashiisa ama heshiisyo wadareedkii jiray;
t) In uu qaado, si waafaqsan xeerkan iyo xeer-nidaamiyayaashiisa tallaabooyinku habboon oo uu ku wanaajinayo xaaladaha badqabka mihnadda iyo caafimaadka goobta shaqada, oo ay ku jirto ka hortagidda dhaawacyada shaqada.
j) In shaqaalaha si lacag la'aan ah loogu sameeyo marag-furka iyo caddeynta waayo aragnimada shaqada marka ay codsadaan;
x) Inuu tixgelin buuxda siiyo cabashooyinka dhabta ah ee shaqaalaha;
kh) In uu fuliyo waajibaadyada kale ee ku xusan xeerkan, xeer- nidaamiyayaashiisa ama shuruucda kale ee shaqada;
d) In aanu wax ka goyn karin ama ka hakin karin qeyb ka mid ah lacagaha shaqaalaha iyo lacagta kale ee uu muteystay, marka laga reebo meelaha uu banneeyey xeerkani;
r) In aanu weydiinsan karin, kana qaadan karin shaqaalaha lacag caddaan ama haddiyado nooc kasta oo ay yihiin, isaga oo uga beddelanaya shaqosiin ama wax



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

la xiriira qodobada heshiiskii iyo shuruudihii lagu shaqaaleysiiyay shaqaalaha;

**s)** In aan lagu qasbin ama lagu boorrin shaqaalaha inay badeecadaha ka iibsadaan dukaammada ama goobo cayiman;

**sh)** In aanay saameyn ku yeelan shaqaalaha aragtidiisa siyaasadeed ama ururrada shaqaale ee uu daacadda u yahay darteed.

**Qodobka 49aad**
**Waajibaadka Shaqaalaha**

**1.** Shaqaalaha waxaa waajib ku ah arrimaha soo socda:

**b)** In uu ka shaqeeyo ilaalinta danta shirkadda iyo danta guud ee wax soo saarka Qaranka isaga oo markasta maanka ku haya nooca shaqo ee laga doonayo;

**t)** Inuu dhawro tilmaamaha ku saabsan qaabka fulinta iyo nidaamka shaqada ee uu soo saaro loo-shaqeeyaha ama ciddii kale ee uu u wakiisho si waafaqsan xeerkan;

**j)** In uu si weyn u ilaaliyo hantida shirkadda ee lagu aaminay.

## CUTUBKA 9AAD:
## HESHIISKA FARSAMO BARADKA

**Qodobka 50aad**
**Qeexid, Ujeedooyin iyo Wax-ka-dhaafid**

**1.** Heshiis farsamo-barad waa xiriir shaqosiin gaar ah oo qoraal ah, loo-shaqeeyuhuna uu ballan qaadayo in uu qofka farsamo-baradka ah siinayo ama uu u keenayo cid siisa tilmaamo tababar, si uu u noqdo shaqaale xirfadle ah oo tababaran.

**2.** Tababar xirfadeedka farsamo-baradku wuxuu ka kooban yahay tababar farsamo oo gacanta laga qabanayo iyo mid qoraal iyo akhris ah.

**3.** Ujeeddada tababar howleedku waa in la siiyo qofka farsamo-baradka ah xirfadaha lagama maarmaan ka u ah shaqada lagu qori doono, ka dib markii uu si tartiibtartiib ula soo qabsado hawsha.

**4.** Ujeeddada laga leeyahay tilmaamaha waxbarasho waxa ay tahay in qofka farsamo-baradka ah la siiyo aqoon farsamo ee uu u baahan yahay si uu u noqdo shaqaale leh xirfad dhammeystiran.

**5.** Wixii kharashka wax lagu baranayo waxaa bixinaya loo-shaqeeyaha.

**6.** Heshiiska farsamo-baradka waxaa laga dhaafayaa dhammaan wixii kharashaad ah iyo lacagta diiwaangelinta.

**Qodobka 51aad**
**Faahfaahin**

**1.** Heshiis kasta oo farsamo-barad waa in uu ka koobnaadaa arrimaha soosocda:

**b)** Magaca, Nooca Ganacsiga ama Shaqada iyo Cinwaanka loo-shaqeeyaha;

**t)**Magaca,Da'da, Xaaladda Qoysnimo, Dhalashada iyo Cinwaanka farsamo-baradka;

**j)**Shaqo, Farshaxan ama Ganacsi wax kasta oo ay tahay ujeeddada farsamo-baradka;

**x)**Adeegyada farsamo-baradka uu ballan qaaday in uu fulinaayo;

**kh)**Muddada farsamo-baradka iyo goobta uu ka shaqo geli doono;

**d)**Lacagta la siinaayo farsamo-baradka oo ah ujuurada iyo daryeel kale muddada lagu jiro farsamo-baradnimada;

**r)** Xaaladaha cuntada, jiifka iyo waxbarashada ee farsamo-baradka.

**Qodobka 52aad**
**Muddada iyo Xaaladda Farasamo-baradka**

**1.** Dhalinyarada ay da'doodu u dhaxeysa 15 ilaa 30 Sano ayaa loo qaadan karaa farsamo-baradnimo, iyada oo ku xiran markasta xaddidaadda dhanka da'da iyo shuruudaha kale ee shaqo siinta ee uu dhigayo xeerkan iyo xeer-nidaamyeyaashiisa ama shuruucda kale ee dalka.

**2.** Muddada heshiiska farsamo-baradnimada waa in aanay ka badnaan Saddex (3) Sano.

**3.** Muddada farsamo-baradku uu u shaqeeyey labo (2) loo-shaqeeye ama in ka badan oo kala duwan in la isu geeyaa markii la xisaabinayo muddada ugu badan ee qof kaloo oggol yahay in uu farsamo-baradnimo ku shaqeeyo, waxaase shardi ah in muddada labada (2) farsamo-barasho u dhexeysaa aanay ka badneyn hal (1) sano, sidoo kale, labada (2)xirfadood ee uu baranayey waa in ay isku nooc yihiin.

**4.** Saacadaha shaqada ee farsamo-baradku waa in aanay ka badnaan Todoba (7) Saacadood Maalintii iyo 42 Saacadood Toddobaadkiiba.

**5.** Waqtiga ku baxay tababar qoraalka waxaa lagu tirinayaa saacadaha farsamo-baradka ee caadiga ah.

**6.** Hawlaha farsamo-baradka, nooc kasta oo ay yihiin waxaa ka mamnuuc ah in la qabto inta u dhaxaysa 10:00 PM ilaa iyo 6:00 AM.

**Qodobka 53aad**
**Baaris Caafimaad**

Ka hor inta aan la qaadan qofka farsamo-baradka ah, loo-shaqeeyuhu waa in uu marsiiyaa baaris caafimaad si loo hubiyo in uu ku habboon yahay mihnadda loo tababaraayo.

**Qodobka 54aad**
**Shaqo Sii wadasho**

Haddii ay dhammaato muddada farsamo-baradka, heshiiskiina aan la joojin, Farsamo-baradku wuxuu sii wadi doonaa inuu ku shaqeeyo howl u dhiganta shahaadada uu ku helay imtixaankii laga qaaday, muddada farsamo-baradkauu ku jirana waxaa loogu xisaabinayaa muddadii uu hore u tababartay.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

**Qodobka 55aad**
**Waajibaadka Loo-shaqeeyaha**

**1.** Waajibaadka loo-shaqeeyaha ka saaran farsamo-baradka waa:

**b)**In uu siiyo ama uu keeno cid siisa farsamo-baradka tilmaamaha tababarrada ee u suurta gelinaya in uu yeesho aqoonta uu u baahan yahay si uu u noqdo shaqaale xirfadle ah oo tababaran;

**t)**Inuu iskaashi la yeesho hay'adaha dawliga ah iyo kuwa gaarka loo leeyahay ee ka mas'uulka ah abaabulidda koorsooyinka tilmaamaya ee lagu kaabayo tababarka gacanta.

**j)**In xuquuqda la siinayo farsamo-baradka ay noqotaa mid ku filan oo u qalanta;

**x)**In uu hubiyo in farsamo-baradka aan loo dhiibin howl ka baxsan awooddiisa jireed ama howl aan xiriir la laheyn mihnadda loo tababaraayey;

**kh)**In uu siiyo farsamo-baradka dhammaan xuquuqdiisa oo aan waxba laga jarin, uuna siiyo waqti ku filan ee uga qeyb qaadan karo koorsooyinka lagama maarmaanka ah ee la xiriira tababarkiisa, uuna hubiyo in farsamo-baradku uu ka qeyb qaatay koorsooyinkaas;

**d)**In uu siiyo farsamo-baradka waqtiga uu u baahan yahay in uu uga qeyb qaato imtixaannada uu ku heli lahaa shahaadada uu mudan yahay;

**r)** In uu ku wargeliyo qofka farsamo-baradka mas'uulka ka ah horumarka uutababartuhu ka sameeyay tababarradii la siiyay;

**s)** In uu hubiyo in farsamo-baradka aan loogu shaqeyn sidii shaqaalaha joogtadaah, loona dirin shaqooyin xamaali ah;

**Qodobka 56aad**
**Waajibaadka Farsamo-baradka (Apprentice)**

**1.** Waajibaadka saaran farsamo-baradka waa:

**b)** In uu u hoggaansamo loo-shaqeeyaha ama ciddii uu u wakiisho howsha tababarka, waana in uu raaco timaamaha la siinayo;

**t)** In uu u guto shaqadiisa si ay ku dheehan tahay mas'uuliyad;

**j)** In uu si joogta ah u xaadiro qaadasha koorsooyinka waxbarasho eemihnidaha tababbarka la xiriirta;

**x)** In uu ilaaliyo shuruudaha heshiiska tababbarka.

**Qodobka 57aad**
**Imtixaanka Qiimeynta**

**1.** Marka uu farsamo-baradku dhammeysto tababbarrada gacanta iyo kuwa koorsooyinka ee uu soo qaatay, waxa uu geleyaa imtixaanno lagu hubinayo aqoonta uu u leeyahay xirfadda la baray.

**2.** Shahaadooyinka la siiyey dhammaadka xilliga tababarka waa in lagu qoraa, laguna keydiyaa diiwaanka shaqada.

**Qodobka 58aad**
**Shaqosiin Waajib ah**

Loo-shaqeeye kasta oo ay u shaqeeyaan labaatan (20) shaqaale ama in ka badan, waa in uu qaataa ugu yaraan hal qof oo farsamo-barad ah.

## CUTUBKA 10AAD: QANDARAASYO HOOSAAD

**Qodobka 59aad**
**Ogeysiiska iyo Soo Gudbinta Nuqullada**

**1.** Qandaraas-hoosaad-qaatuhu waa in uu goob kasta oo shirkaddiisa shaqo uga socoto ama goobo qandaraas-hoosaad isaga laga qaatey leeyahay si joogta ah oo muuqata loogu soo bandhigaa ogeysiisyada, laguna faafiyaa in uu yahay qandaraas-hoosaad-qaate, kuna qoraa Magaca, Shaqada iyo Cinwaanka qandaraas bixiyaha uu qandaraas-hoosaadka ka haysto.

**2.** Marka uu jiro heshiis qoraal ah oo u dhexeeya qandaraas-hoosaad-qaataha iyo qandaraas bixiye kasta, qandaraas-bixiyaha waxaa waajib ku ah inuu laba nuqul oo qandaraaska ah u gudbiyo sarkaalka shaqada ee awoodda u leh, isaga oo tilmaamaya meesha ay ku taal goobta shaqada laga fulinayo.

**Qodobka 60aad**
**Mas'uuliyadda**

**1.** Haddii goob shaqo lagu qabanayo ay tahay hooso Shaqo (Garaash) ama goobo ganacsi kale oo uu leeyahay qandaraasluhu ama goobo kale oo aanu laheyn, qandaraasluhu wuxuu shaqada iyo mas'uuliyadda shaqaalaha kala wareegayaa qandaraas-hoosaad-qaataha, haddii qandaraas-hoosaad-qaatuhu uu kaco ama musallafo oo uu iska bixin waayo deyntii lagu lahaa. Heshiiskan u dhexeeya qandaraaslaha iyo qandaraas-hoosaad-qaataha wuxuu ansax noqonayaa haddii aanu sidaas si ka duwan u qoraynin.

**2.** Haddii ay dhacaan xaaladaha noocaas oo kale ah ee uu Shaqaalaha xuquuqdiisa waayo, qofka Shaqaalaha ahi wuxuu xaqiisasi toos ah uu ugu yeelanyaa qandaraaslaha.

**3.** Haddii heshiiskii hore oo ay wadagaleen shaqaalaha uu qandaraas-qaataha siineyn xuquuq dheeraad ah, shaqaalaha qandaraas-hoose-qaatuhu waxay xaq u leeyihiin inay helaan xuquuq dhaqaale iyo daryeel la mid ah kan ay qaataan shaqaalaha qandaraaslaha ee heshiiska qandaraas kula jira qandaraas-hoosaad- qaataha.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

## CUTUBKA 11AAD
## XAALADAHA IYO SHURUUDAHA

### Qodobka 61aad
### Xaaladaha Ugu Yar ee Aasaasiga u ah Shaqosiinta

**1.** Qodobbada cutubkan waxa ay tilmaamayaan xaaladaha ugu yar iyo shuruudaha aasaasiga u ah heshiiska shaqosiinta.

**2.** Haddii xaaladaha iyo shuruudaha heshiiska shaqosiinta la waafajiyey xeer- hoosaadyo waafaqsan heshiis wadareed laba dhinac ay isla ogolaadeen ama lagu xusay sharci qoran ama xukun Maxkamadda khuseyso ay soo saartay ama amar kale oo Maxkamadeed, ay shaqaalaha u dhaamaan xaaladaha ku xusan qodobbada cutubkani waxaa la qaadanayaa xaaladaha iyo shuruudaha shaqaalaaha ay dantoodu ku jirto.

### Qodobka 62aad
### Saacadaha Shaqada

**1.** Saacadaha shaqada waxaa loola jeedaa muddada uu qofka shaqaalaha ahi xaadirka ku yahay goobta shaqada, oo aanay ku jirin saacadaha nasashada eeqoran ama loogu heshiiyay si waafaqasan xeerkan iyo xeer hoosaadyada ama shuruucda kale ee dalka.

**2.** Saacadaha shaqada caadiga ah ee shaqaaluhu, haddii ay tahay mid ku xaddidan Waqti, gabal shaqo, ama shaqo go'an si kastoo loo xisaabiyo, waa in aanay ka badan siddeed (8) saac maalintiiba ama 48 saac toddobaadkiiba.

**3.** Saacadaha la shaqeeyey ee dheeraadka ku ah saacadaha caadiga ah ee shaqada waa:

**b)**In aanay ka badnaanin laba (2) saac maalintiiba oo ah 12 saac toddobaadkiiba;

**t)** Saacadaha dheeraadka ah ee uu shaqaale shaqeeyey wuxuu ku kasbanayaa xuquuq ka badan saacadihii caadiga ahaa ee shaqada, waana in aysan ka yaraan 50% saacaddiiba.

### Qodobka 63aad
### Shaqooyinka aan Xiriirka Aheyn

Mihnadaha aan shaqadooda xiriir aheyn ama joogitaan shaqaale looga baahanayn ama hawlo daryeel ah, saacadahooda shaqada ee caadiga ahi waa toban (10) saacadood maalintii ama 60 saacadood todobaadkii.

### Qodobka 64aad
### Fasaxyada Nasashada ee Todobaadka

**1.** Shaqaale kasta wuxuu xaq u leeyahay hal maalin oo nasasho ah toddobaadkiiba, kaas oo sida caadiga ah noqonaysa maalinta Jimcaha.

**2.** Marka laga reebo awoodaha gaarka u ah wasiirka ee ku xusan faqradda shanaad ee isla qodobkan, maalinta nasashada waxay ka kooban tahay ugu yaraan 24saac oo xiriir ah toddobaadkiiba.

**3.** Ilaa iyo intii suurtagal ah, nasashada todobaadlaha ah waa in waqti isku mid ah la siiyaa

dhammaan shaqaalaha ku shaqeeya halgoob.

**4.** Shaqaaluhu waxa ay sidoo kale xaq u leeyihiin in ay helaan nasasho maalmaha munaasabadaha qaranka ee dawladdu aqoonsan tahay.

**5.** Wasiirka marka uu la tashado wakiillada ururrada shaqaalaha iyo kuwa looshaqeeyayaasha, wuxuu tilmaamo ka soo saarayaa mihnadaha u baahan fasaxyo gaar ah sida:

**b)**Fasaxyada u baahan kara si kaltan ah;

**t)**Wax-ka-beddelista fasax dhaqameedyada iyada oo la tixgelinayo duruufaha gaarka ah;

**j)**In uu soo rogo fasaxyo ka badan hal (1) toddobaad, iyada oo la tixgelinayo daruufaha gaarka ah.

## Qodobka 65aad
## Fasaxyada Qaranka

**1.** Qofka shaqaalaha ah wuxuu xaq u leeyahay in uu helo xuquuqdiisa oo buuxda maalmaha uu ku jiro fasaxyada Qaran ama fasaxyada guud.

**2.** Qofkii shaqaale ah ee shaqeeya maalin fasax ah, wuxuu xaq u leeyahay in mushaarkiisa loogu kordhiyo xuquuq aan ka yareyn boqolkiiba konton (50%) saacaddiiba.

**3.** Haddii shaqaale uu shaqeeyo maalmaha Munaasabadaha Qaranka iyo fasaxyada guud wuxuu muteysanayaa boqolkiiba konton (50%) ee mushaarka asaasiga ah Saacaddiiba.

**4.** Fasaxyada Qaranku waa sidan:

**b)** Maalinta Shaqaalaha ee 1da May (Hal Maalin)

**t)** Maalinta Midowga ee 1da Luulyo (Hal Maalin)

**j)** Maalinta qorista Afka Soomaaliga 21ka Jannaayo (Hal Maalin)

**x)** Maalinta Ciidul-Fitri (Laba Maalmo shaqo)

**kh)** Maalinta Ciidul-Adxaa (Seddex Maalmo Shaqo)

**d)** Maalinta Xuriyadda ee 26ka Juun (Hal Maalin)

**r)** Maalinta Dhalashada Nabi Muxamed (N.N.K.H) ee 12ka Rabiicul-Awal (Hal Maalin)

**s)** Fasaxyada kale ee caadiga ah ee Dowladdu ogolaato kuna soo saarto faafinta rasmiga ah.

## Qodobka 66aad
## Biyaha

Loo-shaqeeye kasta waxaa waajib ku ah inuu siiyo biyo nadiif ah oo ku filan, kuna habboon isticmaalka shaqaalaha ka shaqeeya goobta shaqada, sidoo kale waa in uu deegaanka shaqaalahana siiyaa biyo nadiif ah.

**Qodobka 67aad**
**Cuntada**

1. Loo-shaqeeyaha waxaa waajib ku ah in uu siiyo cunto shaqaalihiisa marka si cad loogu heshiiyo oo kaliya, ama ay ku qoran tahay waqtiga la gelayo heshiiska shaqosiinta.

2. Loo-shaqeeyuhu waa in uu hubiyaa in shaqaalaha si habboon loo quudiyo, uuna u keeno maacuun ku filan iyo qalabka waxkarinta, uuna u diyaariyaa cunto kariye, kharashkana waxaa bixinaya looshaqeeyaha.

3. Qodobbada ku xusan faqradda (1 iyo 2) ee qaybtan, looshaqeeyaha mas'uuliyadi kama saarna qofka shaqaalaha ah muddada uu ka maqan yahay goobtiisa shaqada.

**Qodobka 68aad**
**Daryeelka Caafimaadka**

1. Loo-shaqeeyuhu wuxuu mas'uul ka yahay daryeelka caafimaadka shaqaalaha haddii ay ku caddahay heshiiska shaqada ama siyaasadda loo-shaqeeyaha haddii aanay ka hor imaaneynin qodobada xeerkan.

2. Loo-shaqeeyuhu waa in uu hubiyaa in shaqaalaha naafada ah ay helaan daryeel caafimaad oo munaasab ah marka ay ku sugan yihiin goobta shaqada.

3. Loo-shaqeeyuhu waa inuu si deg deg ah u qaadaa talaabo kasta oo ku habboon sidii lagu soo ogeysiin lahaa jirrada qofka shaqaalaha ah, marka ugu horreysa ee lagu arko xanuunka.

4. Loo-shaqeeyaha waxaa laga dhaafayaa mas'uuliyadda haddii:

   **b)** Uu caddayn karo in uusan ogeyn in shaqaaluhu uu xanuunsan yahay;
   **t)** Uu qaaday dhammaan tallaabooyinkii lagama maarmaanka u ahaa in la soo ogeysiiyo;
   **j)** Ay jirto duruuf awooddiisa ka baxsan in uu ogaan waayo in qof shaqaalaha ka mid ahi jirran yahay.

5. Qodobkani ma khuseeyo xaaladaha soo socdo:

   **b)** Haddii qofka shaqaalaha ahi uu jirraday ama uu dhaawac soo gaaray, isaga oo shaqada uga maqan si sharci darro ah ama cudurdaar la'aan.
   **t)** Haddii la caddeeyo in qofka shaqaalaha ah sabab uu u yahay xanuunkiisa ama isagu dhawaac is-gaarsiiyay;
   **j)** Haddii daaweynta caafimaad ee shaqaalahaasi si lacag la'aan ah ay ku bixineyso dawladda ama laga bixinayo qorshe ceymis oo loogu talo galay in shaqaalaha laga kaabo, kaasoo ku saleysan sharci qoran.

## Qodobka 69aad
## Fasax Sannadeedka

1. Qof kasta oo shaqaale ah wuxuu xaq u leeyahay 30 maalmo shaqo oo fasax ah sanadkasta, iyada oo xuquuqdiisiina ay u socoto, ka dib markii uu shaqeeyay hal sano oo buuxda oo xiriir ah.

2. Marka shaqada laga joojiyo shaqaalaha sannado xiriir ah ka dib oo uu shaqeeyay, wuxuu xaq u yeelanayaa in loo qoondeeyo hal bil oo fasax ah laba iyo toban (12) biloodkii kasta ee uu shaqeynayay, dhinaca kale haddii shaqaalaha shaqada laga joojiyey sannadkii oo aan u buuxsamin, waxaa loo xisaabinayaa jajabka bilihii sannadkaas oo ay ku jirto bisha ugu dambeysay ee uu shaqeeyay haddii ay ka badan tahay shan iyo toban (15) cisho.

3. Marka xiriirka shaqada ka istaago shaqaalaha ka hor inta aanu qaadan fasaxyadii uu xaqa u lahaa, waxaa la siinayaa xuquuqdii bil kasta oo aanu fasaxeeda qaadan.

4. Fasax sanadeed kasta oo sida joogtada ah loo qaato, waxaa la bixinayaa waqti uu gooyay loo-shaqeeyuhu, isaga oo la tashanaya shaqaalaha ama wakiilkooda, isla markaasna tixgelinaya baahida goobta shaqada iyo danta shaqaalaha labadaba.

5. Loo-shaqeeyuhu waa in uu qofka shaqaalaha ah ugu yaraan toddobo (7) cisho ka hor ku sii wargeliyaa xilliga uu u qoondeeyay in uu fasax sanadeedkiisa qaato.

**6**. Muddo gaaban oo aan ka yareyn lix (6) maalmo-shaqo oo xiriir ah wuxuu shaqaaluhu ka hormarsan karaa ama ka qaadan karaa fasaxiisii sannadlaha ahaa haddii baahida shaqadu sidaas ku jirto.

**7.** Waqtiga la bixiyay ogaysiiska joojinta shaqada ee labada dhinac waa in aanay ku jirin fasax sanadeedka.

**8.** Dhammaan xuquuqda la siinayo qofka shaqaalaha ah bilawga fasaxa sanadlaha ah waa in la siiyaa xuquuqdiisa marka uu qaadanayo fasaxa.

## Qodobka 70aad
## Fasax Xanuun

**1.** Qof kasta oo shaqaale ah oo ka baxay muddadii tijaabada, kuna xanuunsada shaqada gudaheeda, waxaa waajib ku ah:

**b)** In uu la yimaado warqad caafimaad oo caddeyneysa in uusan shaqeyn karin xanuunka dartiis, taas oo uu soo qoray dhakhtar rasmi ah oo leh aqoonta cudurka uu sheeganayo;

**t)** In sida ugu dhakhsaha badan oo suurtagal ah loogu wargeliyo loos-haqeeyaha, loo-shaqeeyuhuna waa inuu tixgeliyaa xanuunka shaqaalaha u shaqeeya;

**j)** Muddada xanuunka shaqaalaha haddii:

i. Uu yahay (3 ilaa 7) maalmo-shaqo, wuxuu xaq uyeelanayaa 100% mushaarkii heshiisku ahaa;

ii. Uu yahay (8 ilaa14) maalmo-shaqo, wuxuu xaq u yeelanayaa 75%

mushaarkii heshiisku ahaa;

iii. Muddada xanuunka uu yahay bil (30) maalmo-shaqo, wuxuu xaq u yeelanayaa 50% mushaarkii heshiisku ahaa;

iv. Mar walba wixii ka badan (30) maalmo-shaqo waxa ay ku xirnaan doonaan nooca heshiiska dhinacyada ay wada galaan;

v. Qof kasta oo shaqaale ah oo aan ka bixin muddadii tijaabada, kuna xanuunsada shaqada gudaheeda, waxaa la raacayaa waxa ku qoran heshiiska ay wadagaleen labada dhinac, hase yeeshee, haddii aanu jirin wax ku tilmaaman heshiiskooda, waxaa la tixgelinayaa wixii labada dhinac ay markaas ku heshiiyaan.

## Qodobka 71aad
## Fasax Gaar ah

**1.** Loo-shaqeeyuhu waa in uu siiyaa shaqaalaha fasax gaar ah, oo mushaarkiisa u dhammeystiran yahay, kuwaas oo noqon karan sida:

i. Fasax guur, kaas oo noqonaya (3 ilaa 7) maalmo-shaqo;

ii. Fasax Xaj ama Cimro, kuwaasoo noqonaya muddada arrimaha Xajka ama Cimrada ay socdaan;

iii. Xaaladda ku xusan faqradda (ii) waxay ku xiran tahay la imaanshaha fiisaha (Visa) Xajka ama Cimrada;

2. Loo-shaqeeyuhu markii uu doono wuxuu siin karaa qofka shaqaalaha ah fasax uu isagu u gartay ama danqasho, si uu shaqaaluhu ugu soo qabsado hawl isaga u gaar ah, una noqota dhiirrigelin.

## Qodobka 72aad
## Diiwaanka Fasaxa

**1.** Loo-shaqeeyuhu waa inuu hayaa diiwaanka guud ee muujinaya macluumaadka fasaxyada:

**b)** Taariikhda shaqosiinta qof kasta oo ka mid ah shaqaalaha;
**t)** Taariikhda uu qaatay fasaxa;
**j)** Muddada fasaxyada;
**x)** Nooca fasaxyada;
**kh)** Xuquuqda shaqaalaha.

## CUTUBKA 12AAD:
## GO'AAMINTA IYO ILAALINTA XUQUUQDA

## Qodobka 73aad
## Xuquuq

**1.** Xuquuq (Remuneration) waa caddadda lacageed ee loo-shaqeeyuhu uu ku siiyo qofka shaqaalaha ah in u dhiganta shaqadii uu qabtay, iyada oo aan laga jarin wax lacag ah, marka laga reebo lacag loo jarayo sifo sharciga waafaqsan oo loogu talagalay arrimahan soo socda:

**b)** In lacagta loo jarayo ceymiska ama howlgabka qofka shaqaalaha ah;



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

**t)** In lacagta lagu darayo raashinka lagu cuno goobta shaqada, taas oo loo oggolaaday loo-shaqeeyuhu in uu ka bixiyo ujuurada shaqaalaha;

**j)** Lacag jaris kasta oo waafaqsan sifo sharci ah oo markaas dhaqangal ah oo loo-shaqeeyaha u oggolaanaya in uu lacag ka jaro ujuurada shaqaalaha;

**x)** Lacag lagu jarayo Codsiga uu soo qortay qofka shaqaalaha ah, taas oo aanay jirin wax dan ah, toos ah ama dadban oo ugu jiri karta loo-shaqeeyaha.

## Qodobka 74 aad
## Ku Filnaasho iyo U Sinnaansho

**1.** Qofkasta oo shaqaale ah wuxuu xaq u leeyahay in uu helo xuquuq ku filan oo u dhiganta Shaqada uu qabtay, xuquuqdaas oo dammaanad qaadaysa nolol ku habboon sharafta iyo karaamada aadanaha.

**2.** Marka la go'aaminayo saamiga xuquuqda, waa in aanay jirin kala-takoorid ku saleysan lab iyo dheddig, midab, isir, da', jinsiyadda dhalashada, af guri, diinta, asal, naafanimo, uur, fayriska yareeya difaaca jirka (HIV/Aids), aragtida ra'yi siyaadeed ama ka tirsanaan urur siyaasadeed ama mid shaqaale, xuquuqda iyo waajibaadka shaqaalaha oo dhan waa u siman yihiin xeerkan shaqada.

**3.** Xuquuq isku mid ah waa in la siiyaa dadka qabanaya shaqo isku mid ah, oo kuna salaysan nooca shaqada, hufnaanta, qiimaha shaqada iyo muddada intaba.

**4.** Qiimeyn kasta oo lagu sameynayo sinnaanta xuquuqaha waa in markasta loo adeegsado ujeeddooyin iyo heerar wax-ku-ool u ah shaqada.

## Qodobka 75aad
## Qaababka Bixinta Xuquuqda

**1.** Bixinta xuquuqda waxaa lagu saleyn karaa halbeeg waqti sida bil, shan iyo toban (15) maalmo-shaqo, toddobaad, maalin ama saacad ama halbeeg shaqo (sida gabal-shaqo ama shaqo-go'an).

**2.** Loo-shaqeeyuhu waa inuu hore ugu sii sheego qofka shaqaalaha ah:

**b)** Qeybaha uu ka kooban yahay sheyga uu ka shaqeynayo, shaqada la qabanayo iyo qiimaha lagu bixinayo midkiiba;

**t)** Tirada shaqada la qabanayo iyo waqtiga ay qaadaneyso in lagu dhammeeyo.

**3.** Loo-shaqeeyaha iyo shaqaaluhu waxa ay ku heshiin karaan in qayb ka mid ah xuquuqda ay noqoto mid ah faa'iido-wadaag saamiyada, khidmad ku xiran wax-soo-saarka ama adeegga la qabtay ama gunnooyin lagu bixiyo wax u dhigma lacag (in kind), si kastaba ahaatee:

**b)** Gunnooyinkaas waa in ay munaasab ay u yihiin adeegsiga qofeed iyo dheefta ay helayaan shaqaalaha iyo qoysaskooda;

**t)** Qiimaha ku xiran gunnooyinka noocan ah waa in ay noqdaan kuwa daahfuran, maangalna ah;

**4.** Haddii aanu jirin heshiis wadareed shaqo oo si kale u sheegaya ama heshiis si gaar ah loola galay qofka shaqaalaha, saamiga uu qofka shaqaalaha ah ku leeyahay faa'iidada shirkaddu waxa ay ku xiran tahay faa'iidada saafiga ah (Net Profit) ee usoo harta loo-shaqeeyaha.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AGALKA SARE

**5.** Markii aanu jirin heshiis wadareed shaqo oo dhigaya ama wax kale oo ay ku heshiiyeen dhinacyadu, khilaafyada soo kala dhexgala labada dhinac, waxaa lagu xallinayaa si waafaqsan Caadooyinka iyo Dhaqammada Degaankaas ka jira, hase yeeshee, haddii aanay jirin caadooyin iyo dhaqamo deegaankaas ka jira waxaa khilaafka lagu xallinayaa si waafaqsan nidaamka u sinnaanshaha Caddaaladda.

**Qodobka 76aad**
**Ujuurada ugu yar**

Iyada oo la tixgelinaayo xaaladda dhaqaale iyo kuwo bulsho ee Dalka ku sugan yahay, Wasiirka ayaa go'aamin kara ujuurada ugu yar oo ay qaadanayaan heerarka kala duwan ee shaqaaluhu, ka dib markii uu la tashado Golaha Jaan-goynta Xuquuqda, uuna dhegeysto talooyinka Guddiga Shaqada Federaalka.

**Qodobka 77aad**
**Dheef Kale oo Dheeraad ah**

**1.** Loo-shaqeeye waa in uu:

**b)** Siiyaa shaqaalaha degaan marka uu u shaqo tegayo meel ka fog degaankiisa caadiga ah;

***t)*** Siiyaa shaqaalaha cunto lacag la'aan ah, ama lacag cunto ugu filan, marka qofka shaqaalaha ah uu ka shaqeeyo meel ka baxsan degaankiisa caadiga ah, isla markaana aanay jirin goob shaqaaluhu ku wada cunteeyaan;

**j)** Siiyaa shaqaalaha Gaadiid shaqada geeya kana soo celiya, marka shaqaaluhu uu ka shaqeeyo magaalo ama degmo ka fog degaankiisa caadiga ah;

**2.** Wasiirku marka uu wadatashi la sameeyo inta ay khuseyso wuxuu go'aamin karaa:

**b)** Marka ay jiraan xaalado kale oo ah in shaqaalaha la siiyo degaan, Gaadiid ama Goobo ay ka wada Cunteeyaan; Iyo

**u)** Dheefaha kale ee dheeraadka ah oo ay tahay in loo-shaqeeyuhu siiyo shaqaalaha.

**Qodobka 78aad**
**Gunnooyinka Ciidaha**

1. Qof kasta oo shaqaale ah wuxuu xaq u leeyahay gunno Ciideed.

2. Shaqaalaha aanan shaqeyn hal (1) sano oo dhammeystiran waxay xaq u leeyiihiin Liiltir/Xuquuq ku qiimeysan intii bilood oo ay ka shaqeeyeen laba iyo tobankii (12) biloodba oo ay ku jiraan bilihii ay ka shaqeeyeen wax ka badan shan iyo toban (15) beri, kuwaas oo laga soo qaadayo bil buuxda.

3. Marka shaqaalaha laga joojiyo shaqada, wuxuu xaq u leeyahay in la siiyo Liiltir/Xuquuq ku qiyaasan bilihii uu sanadka ka shaqeeyay ama jajabka bishii ugu dambeysay ee uu ka shaqeeyay in ka badan shan iyo toban (15) cisho, Liiltirkaas/ Xuquuqdaas oo la siinayo ka dib markii xisaabtiisa la xiro.

4. Marka xuquuqda shaqaaluhu ku saleysan yahay inta shey ee qofku soo saaray ama khidmad boqolley ah oo loogu dhuftay wax-soo-saarkiisa guud, gunnada shaqaalaha waxaa lagu cabbirayaa celceliska lacagtii uu ku helay intii shey ee uu soo saaray ama



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

celceliska wixii uga soo baxay khidmadda boqolleyda ee loogu dhuftay wax-soo-saarkiisa guud seddaxdii (3) billood ee ugu dambeysay ama bilo kayar, markii laga jaro wixii kharash ah ee lagu leeyahay qofka, haddii ay khidmadaasi tahay mid hal mar la wada bixinayo iyo haddii kaleba.

**Qodobka 79aad**
**Nooca iyo Muddada Lacag Bixinta**

1. Iyada oo la raacayo qodobbada xeerkan ama xeer-nidaamiyeyaashiisa, Xuquuqda shaqaalaha waa in lagu bixiyaa lacagta sharciga ah.

2. Bixinta ujuurada ee qaab ballanqaad ah, qaansheegato, boonooyin ama qaab kale oo loo ekeysiiyey mid sharci ah waa reeban tahay.

3. Lacagta waa in lagu bixiyaa goobta shaqada iyo maalinta ugu dambeysa ee muddada mushaar bixinta.

4. Marka dhaqan sidaas ahi goobta shaqada aanu ka jirin, xuquuqda waa in lagu bixiyaa waqti joogta ah oo aan ka badneyn shan iyo toban(15) cisho marka shaqaaluhu aanu joogto aheyn, hasa yeeshee, shaqaalaha rasmiga ah waa in bixinta xuquuqdooda aanu ka badnaanin muddo bil ah.

5. Marka laga hadlayo gabal shaqo oo socotay in ka badan shan iyo toban (15) cisho, qofka shaqaalaha ahi wuxuu dalban karaa in lasii siiyo xuquuqdiisa shan iyo toban maalmo shaqo oo u dhiganta shaqadii la qabtay, oo aan ka yareyn boqolkiiba **80%.**

6 Marka aanu jirin heshiis qoraal ah oo si kale sheegaya, xubnaha shaqaalaha ee mushaharkoodu ku saleysan yahay saami boqolley oo loogu dhuftay wax-soo-saarkooda guud, wuxuu xaq u leeyahay in loogu dhufto khidmadda loogu dhufto shaqaalaha ka howlgala laamaha la midka ah laantiisa shaqo.

7. Khidmadda gunno ee shaqo ganacsi la sameeyay saddexda (3) bilood waa in la bixiyaa dhammaadka rubuca ku xiga.

8. Saamiga faa'idooyinka lagu yeesho faa'iidada guud ee shirkaddu hesho sanad miisaaniyadeed kasta, waa in la dhiibaa horraanta sanad miisaaniyadeedka ku xiga.

**Qodobka 80aad**
**Warqadaha Lacag Bixinta**

**1.** Bixinta xuquuqda waxaa lagu caddeeyaa warqad lacag bixineed oo uu saxiixay qofka shaqaalaha ah ama uu suulka saaray haddii uu yahay mid aan wax qorin.

**2.** Warqadaha lacag bixinta waa in uu keydiyaa loo-shaqeeyuhu oo dhigaa Meesha ay yaallaan Dokumiintiyada kale ee muhiimka ah, waana in uu soo saaraa markii uu ka dalbado Sarkaalka Shaqada.

### Qodobka 81aad
### Dhisidda Golayaasha Xuquuqda

**1.** Wasiirku wuxuu Dhisayaa Guddiga Xuquuqda ee heer Federaal si ay u go'aamiyaan xuquuqda, muddada iyo shuruudaha shaqada ugu yar ee heer Federaal.

**2.** Wasiirka wuxuu ansixinayaa Guddiyada Xuquuqda oo ay soo dhisteen Wasiirrada Shaqada ee heer Maamul Goboleed, Guddigaas oo go'aaminaya xuquuqda, muddada iyo shuruudaha shaqada ee heer Maamul Goboleed iyo wixii ka sii hooseeya.

**3.**Magacaabista Guddiyada, waxa ay ku soo baxaysaa wareegto lagu baahiyay faafinta Rasmiga ah ee Dowladda, taas oo laga doonayo in:

b) Ay caddeyso:
   i. Waajibaadkooda shaqo, oo ay ku jirto muddada shaqadu;
   ii. Magacyada xubnaha la magacaabay;

**t)** Ay cayinto muddada uu Guddigu u baahan yahay si baaritaan uu ku sameeyo, warbixinna ugu diyaariyo Wasiirka;

**j)** Ay u yeerto wakiillada ka socda dhinacyada danaynaya.

**4.** Guddiga Xuquuqda ee heer Federaal ee uu magacaabayo Wasiirku, waxa uu ka kooban yahay xubnaha soo socda, kuwaas oo lagadoonayo in ay leeyihiin aqoon iyo waayo-aragnimo ay ku go'aamin karaan muddada iyo shuruudaha ugu yar ee shaqosiinta, waxa ayna ka kooban yihiin:

**b)**Guddoomiye;

**t)**Xubno ka kooban saddex (3) oo ay soo magacaabeen wakiilladaururrada shaqaalaha;

**j)** Xubno aan ka kooban saddex (3) oo ay soo magacaabeen wakiillada ururrada loo shaqeeyayaasha;

**x)**Xubno madaxbannaan oo ka kooban seddax (3).

### Qodobka 82aad
### Waajibaadka iyo Awoodaha

**1.** Shaqooyinka Guddigu waa in:

**b)** Ay baaraan Xuquuqda iyo xaaladaha shaqada;

**t)** U yeero, soona dhoweeyo xubnaha ay wakiillada daneeyayaasha ahi si af ama qoraal ahay kusoo magacaabeen;

**j)** Ay Wasiirka u soo jeediyaan talooyin ku saabsan Xuquuqda iyo xaaladaha shaqada ee ugu yar.

2. Guddigu marka uu howshiisa gudanayo waa in uu tixgelin weyn siiyaa arrimahasoo socda:

**b)** Baahida shaqaalaha iyo qoysaskooda, iyaga oo tixgelin siinaya heerka guud ee ujuurada dalka, heer nololeedka maciishadda, xuquuqda la siiyo howlgabka iyo heerarka noloshaee kooxaha kale ee bulshada;

**t)** Isirrada dhaqaalaha, oo ay ku jiraan shuruudaha looga baahan yahay horumarka dhaqaale, heerarka wax-soo-saar, rabitaanka joogteynta iyo sare u-qaadista heerka shaqosiinta iyo baahida loo qabo dhiirrigelinta maalgashiga.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

**j)** Awoodda loo-shaqeeyayaasha ay u leeyihiin in ay shaqadooda ku guuleystaan;
**x)** Howlaha ganacsatada yaryar, kuwa dhexe iyo kuwa aadka u sii yaryar;
**kh**) Qiimaha heerka maciishadda ee nololeed;
**d)** Yareynta heerka saboolnimada;
**r)** Heerka ugu hooseeya ee nolosha;
**s)** Saamaynta ay suurtagal tahay ee in shuruudo la soo jeediyay ee shaqo siinta ee hadda jirta ama shaqo abuuristaba; iyo
**sh)** Wixii arrimo kale ee la xiriira.

3. Marka Guddigu gudanayo shaqadiisa, wuxuu:
   *b)* Su'aalo waydiin karaa qof kasta oo bixin kara macluumaad la xiriira baaritaanka;
   *t)* Si qoraal ah, uga codsan karaa qof kasta inuu siiyo wixii macluumaad, buug, dukuminti ama sheykale ah oo la xiriira baaritaanka; iyo
   *j)* Qaban karaa doodo dadweyne.

4. Qof kasta oo isaga oo sabab sharci ah haysan diida ama ka gaabsada:
   *b)* In uu ka jawaabo su'aal kasta oo la xariirta baaritaanka; ama
   *t)* In uu dhiibo macluumaad, buug ama dukumenti kasta oo uu ka codsaday Guddigu, waxaa lagu ciqaabayaa habraacyada ku xusan xeerka ciqaabta Soomaaliyeed iyo xeerarka kale ee Dalka.

**Qodobka 83aad**
**Dalabka Xuquuqaha**

**1.** Talooyinka Guddiga Xuquuqda Shaqada uu usoo gudbiyo Wasiirka, waxaa marka la faafinayo loo isticmaalayaa magaca ah "Dalabka Xuquuqaha".

**2.** Ka hor inta aan la faafin Dalabka Xuquuqaha, Wasiirku waa in uu soo saaraa ogeysiis, kaas oo:
   *b)* Caddaynaya in la soo jeediyey in uu soo saaro dalab ujuuro;
   *t)* Caddaynaya goobta laga heli karo nuqullada qabya-qoraalka dalabka;
   *j)* Soo dhoweynayaa talooyinka laga dhiibanayo qabya-qoraalka dalabka, muddo ku habboon oo aan ka yareyn Soddon (30) Cisho laga soo billaabo markii ogeysiiska la daabacay.

**3.** Qof kasta oo daneynaya waxna ka qaba dalabka qabya-qoraalka wuxuu muddadala cayimay dhexdeeda kusoo gudbin karaa ra'yigiisa, kaas oo haddii uu diidan yahay qabya-qoraalka aragtidiisa ku billaabaya:
   *b)* Waxyaabaha uu ku sababeeyay diidmadiisa; iyo
   *t)* Waxyaabaha uu soo jeediyay in dalabka qabya-qoraalka laga tiro, lagu daro ama si kale loo qoro.

**4.** Wasiirku:
   *b)*Waa in uu u gudbiyaa Dalabka Ujuurada diidmada laga keenay,iyo tixgelinta talooyinka kaleba; iyo
   *t)*Wuxuu ka codsan karaa Guddiga Xuquuqda Shaqada in ay ka baraan degaan arrinta oo ay talo ka bixiyaan diidmada la soo jeediyay.

**5.** Haddii Wasiirka ay soo garaan diidmooyin, talooyin, ama uu sidaas ku aqbalo; iyo haddii



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

aanay wax diidmo ah soo gaarinba, Wasiirku wuxuu qabyo qoraalka Dalabka Xuquuqaha u gudbinayaa Golaha Wasiirrada muddo kow iyo labaatan (21) maalmo shaqo gudahood si waafaqsan xeerkan, Go'aanka Golaha Wasiirradu ka soo saaraan dalabka xuquuqaha waxaa lagu daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda;

**6.** Dalabka Xuquuqda:

**b)** Wuxuu dejiyaa heerka ugu hooseeya ee xuquuqda;

**t)** Wuxuu caddeeyaa arrimaha keeni kara in loo-shaqeeyuhu lacag ka gooyo xuquuqda shaqaalaha iyo inta ugu badan ee laga jari karo;

**j)** Wuxuu sheegayaa xadka ugu badan ee loo-shaqeeyuhu lacag ahaan u goosan karo raashinkii uu shaqaalaha siiyay kadib markii shaqaalaha iyo loo- shaqeeyuhu isla oggolaadaan tayada cuntada iyo qiimaha lacageed ee ay ku kaceyso lana helo oggolaanshaha sarkaalka shaqada;

**x)** Wuxuu kala caddeynayaa shaqada ku saleysan hawl-qabad (task-based) iyo midda gabal shaqo ah (Piece Work);

**kh)** Wuxuu kala caddeynayaa shaqada dibadda lagu soo qabtay, shaqada aan joogtada aheyn iyo heshiis shaqo;

**d)** Wuxuu dejiyaa heerarka ugu hooseeya fayadhowrka shaqaalaha deggan dhismaha loo-shaqeeyaha;

**r)** Waxaa kala caddeynayaa wax kasta oo ku saabsan xuquuq bixin ama xaaladaha shaqada;

**s)** Wuxuu qodobbo kala duwan ku tilmaami karaa heerarka shaqaale ee kala duwan; qodobbada qaarkood wax buu ka beddeli karaa, dalab xuquuq hore u jirayna wuu baabi'in karaa.

7. Markii la dajiyo Amarka Xuquuqda:

**b)** Wuxuu ka koobnaanayaa shuruudaha iyo xaaladaha shaqada ee ugu yar;

**t)** Wuxuu qeybka mid noqonayaa heshiis kasta oo qofeed ama mid wadareed, markalaga reebo haddii heshiiskaay ku jiraan qodobbo dan u ah shaqaale ama dhammaan shaqaalaha.

8. Loo-shaqeeyaha ku guuldarreysta inuu:

**b)** Siiyo shaqaalaha dalabkani khuseeyo xuquuqda ugu yar ee ku qeexan dalabkan;

**t)** Ku dhaqo shaqaalaha xaaladaha shaqo ee lagu qeexay dalabka, wuxuu galayaa dambi, waxayna Maxkamadda awoodda u leh amri kartaa, iyada oo ay wehliyaan ciqaab, iyo in uu bixiyo lacag la'eg farqiga u dhaxeeya lacagtii ku qorneyd amarkii ujuurada iyo qaddarka lacagtii uu isagu si dhab ah u bixiyay

9. Sarkaalka shaqada ayaa isaga oo ka wakiil ah shaqaalaha, wuxuu furi karaa dacwad ka dhan ah loo-shaqeeyaha si uu usoo celiyo lacagta ay shaqaaluhu ku leeyihiin, sababtuna ay tahay loo-shaqeeyaha oo ku guuldarreystay in uu:

**b)** Siiyo shaqaalaha xuquuqda ugu yar ee dalabka oggol yahay;

**t)** Ku dhaqo shaqaalaha xaaladaha shaqo ee ku qeexan dalabkan.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AGALKA SARE

**Qodobka 84aad**
**Ilaalinta**

1. Ujuurada Shaqaalaha ka maqan waxay mudnaan wayn ka tahay qaansheegadka

   hantida guud ee looshaqeeyaha marka loo eego dhammaan deymaha kale ee shirkadda lagu leeyahay.

2. Xuquuqda qofka shaqaalaha ah marna lagama jari karo, loomana qoondeyn karo, wax kalena luguma xiri karo, marka laga reebo qaddar aan ka badneyn afar meelood meel (1/4) ka mid ah xuquuqda.

3. Lacagaha lagu leeyahay Dawladda ama hay'ad Dawladeed oo kale shaqo loo qabtay darteed ma qaadan karo dhinac saddexaad, mar haddii ay tahay lacagtaas mid la xiriirta xuquuqdii looshaqeeyaha siin lahaa shaqaalaha.

4. Dhammaan xuquuqda uu shaqaaluhu xaqa u yeeshay waa in la siiyo, si waafaqsan xiriirka shaqada, waxaana ku imaaneysa xayiraad xaddidan, haddii aan lagu bixin muddo saddex (3) sano gudahood ah oo kasoo billaabata maalintii uu qofka shaqaalaha ahi xaqa u yeeshay lacagtaas.

5. Wasiirku wuxuu soo saarayaa wareegto uu ku war gelinayo looshaqeeyaha aan diiwaan gashaneyn ama aan degganeyn Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya inuu bixiyo lacag rahan ahoo u dhiganta xuquuqda ay bishii qaataan dhammaan shaqaalaha u shaqeeya ama uu ku talo jiro in uu shaqaaleeyo mustaqbalka.

6. Rahanta laga qaadayo loo-shaqeeyaha wuxuu dhigayaa Akoon gaar ah oo Wasaaraddu uga furan Bankiga dhexe, caddeynta lacag bixinta ayuu keenayaa xafiiska Wasaaradda, Lacagtaas looma isticmaali karo wax aan ka aheyn in lagu bixiyo ujuurada iyo xuquuqda kale ee uu muteysto shaqaalaha u shaqeeya loo-shaqeeyahaas. Haddii loo-shaqeeyuhu uu iska bixin waayo xuquuqdii lagu lahaa,waxaa lacagtaas lagu soo saari karaa saxiixyada loo-shaqeeyaha ama wakiilkiisa iyo Agaasimaha Guud ee Wasaaradda, waxaana faahfaahin doona habraac gaar ah uu soo saarayo Wasiirka oo arrintaas khuseeya.

7. Marka uu geeriyoodo qof shaqaale ah, sabab kasta ha ku timaadee, laguna soo wargeliyo ama uu ogaado loo-shaqeeyihiisu, loo-shaqeeyuhu waa in uu sida ugu dhaqsaha badan ee suuragalka ah markaa ka dib ogeysiiska geerida ugu diraa sarkaalka shaqada isaga oo ku qoraya foomka cayiman ee loogu talagalay, haddii aanu jirin sarkaalka shaqada, waa in uu ogeysiiska geerida u diraa Guddoomiyaha Degmada ama Saldhigga Booliska Degmadii uu shaqaalaha dhintay ka shaqeynayay.

8. Haddii qofka shaqaalaha ahi ee geeriyooda inta uu socdo heshiiskiisa shaqo, wakiillada sharciga ah ee qofka shaqaalaha ahi waa in ay keenaan Warqadda Caddeynta Geerida, waxayna xaq u yeelanayaan ujuuradii iyo xuquuqihii kale ee shaqaalaha iyo hantiidiisiiba in lagu bixiyo muddo Soddon (30) maalmo-shaqo gudahood laga billaabo maalintii uu geeriyooday.

9. Loo-shaqeeyaha qofka geeriyooday waxaa waajib ku ah in uu toddoba (7) maalmo-shaqo gudahooda laga billaabo maalintii uu lacagta bixiyay, uu u soo gudbiyo sarkaalka shaqada dokuumiintiyadii caddeynta lacag bixintaas.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

10. Haddii muddo seddex(3) bilood ahi ay kasoo wareegto geeridii shaqaalaha.

**b)** Oo la waayo wax wakiillo sharciyeysan ah oo soo dalbada mushaarkii iyo hantidii shaqaalaha geeriyooday; ama

**t)** Uu loo-shaqeeyuhu ka shakiyo ama uu diido dalabka looga soo codsaday mushaarka iyo hantida shaqaalaha geeriyooday, looshaqeeyuhu waa in uu sarkaalka shaqada ku wargeliyaa dhammaan mushaarkii iyo hantidii qofka dhintay ku lahaa, intaa ka dib si loo maamula xaaladdaas, waxaa faahfaahin doona habraac gaar ah oo uu soo saarayo Wasiirka, oo waafaqsan sharciga la xiriira dhaxalka ama sharciyada kale ee qoran ee ku saabsan bixinta hantida dadka geeriyooday.

**11.** Haddii qof shaqaale ahi, isaga oo shaqadiisa gudanaya la dilo ama uu soo gaaro dhaawac keenay in uu shaqadiisa gudan kari waayo muddo Saddex (3) maalmo shaqo gudahood, loo-shaqeeyuhuwaa in uu sida ugu dhaqsiyaha badan Sarkaalka shaqada ugu gudbiyaa warbixin faahfaahsan oo la xiriirta xaaladda shaqaalahaas.

**Qodobka 85aad**
**Lacag Ka Jarista iyo Ganaaxyada Anshax Marinta**

1. Ma jirto wax laga jari karo qofka shaqaale ah oo aan ka aheyn kuwa uu qorayo xeerkan iyo xeerhoosaad yadiisa iyo shuruucda kale ee dalka ama uu dhigayo heshiis wadareed shaqo, oo aan ka aheyn lacag dib u celin ah oo caddeyn qoraal wadata oo loo-shaqeeyuhu uu u hormariyay shaqaalaha.

2. Qof kasta oo shaqaale ah ee iskiisa shaqada fasax la'aan uga maqnaada, waxa uu weynayaa dhamman xuquuqdii uu heli lahaa muddadii uu maqnaa.

3. Qof kasta oo shaqada cudurdaar la'aan ka maqnaada saddax todobaad (21) maalmo-shaqo oo xiriir ah ama inka badan, waxaa loo qaadanayaa in uu shaqada si rabitaan kiisa ah iskaga tagay.

4. Qof kasta oo shaqaale ah haddii uu gudan waayo waajibaadkii shaqo ee lagula heshiiyay, iyada oo aan isla markiiba la soo saarin amar lagu joojinayo heshiiskii sii shaqo siinta, waxaa lagu anshaxmarinayaa sidan:
   **b)** Waxaa la siinayaa digniin qoraal ah;
   ***t)*** Waxaa shaqada laga joojinayaa muddo aan ka badneyn toddoba (7) maalmo-shaqo oo lacag la'aan ah.

5. Loo-shaqeeye kasta waa inuu si deg deg ah shaqaalaha ugu wargeliyaa tallaabooyinka ka dhanka ah ee laga qaadayo kuna xusan faqrada 4aad, Xarfaha (b iyo t) ee sare.

## CUTUBKA 13AAD
## DIIWAANNADA SHAQO SIINTA

### Qodobka 86aad
### Diiwaannada Laga Rabo in uu Keydiyo Loo-shaqeeyuhu

**1.** Loo-shaqeeyaha waxaa waajib ku ah inuu hayo diiwaannada soo socda:

**b)** Liiska dhammaan shaqaalaha uu shaqaaleeyay ee uu la galay heshiis qoraal ama Af ah (Written or Oral);

**t)** Faahfaahinta ku saabsan carruurta uu shaqaaleeyay;

**j)** Wixii la xiriira habdhaqan siyaasadeed (Policy) ama xeer-dhaqan shaqo ah oo xeerkani waajibiyay, oo ay ka mid yihiin kuwa la xiriira Xadgudub Damac Galmo iyo Faduullin (Sexual Harassment);

**x)** Heshiisyada qoran iyo heshiis wadareedyada;

**kh)** Faahfaahin kasta oo waajib ku ah in uu hayo loo-shaqeeyuhu;

**d)** Diiwaan kasta ee loo-shaqeeyaha looga baahan yahay inuu abuuro,heysto kuna shaqeeyo;

**r)** Qoraallada caddeynaya lacag ka jarista shaqaalaha ee la oggolyahay;

**s)** Rahanta loo dhigayo ujuurada shaqaalaha;

**sh)** Qoraallada digniinta;

**dh)** Ogeysiiska joojinta heshiiskii shaqada ee kasoo baxday shaqaalaha ama loo-shaqeeyaha;

**c)** Waraaqaha shaqo ka saarista;

**g)**Faahfaahinta fasaxa dhalmada;

**f)** Faahfaahinta fasaxa jirrada;

**q)** Faahfaahinta la xiriirta deegaanka marka loo-shaqeeyuhu uu shaqaalaha dejiyo deegaan;

**k)** Faahfaahinta ku saabsan inta ujuurada shaqaalaha kaga soo aadeyso gunnada guriga la dejiyey;

**l)** Faahfaahinta ku saabsan garaamka raashinka, haddii ay munaasab tahay.

**2.** Loo-shaqeeye kasta waa in uu u oggolaadaa sarkaalka idman, haddii uu ka dalbado in uu soo gudbiyo qoraalladii la keydiyay muddo kasta oo ka mid ah lix iyo soddonkii (36) bilood ee la soo dhaafay, si loo baaro.

### Qodobka 87aad
### Qoraal Been-Abuur ah

Qof kasta oo sameeya, sababa in la falo ama oggolaada in xog been abuur ah la geliyo diiwaan ama dukuminti kale oo uu xeeriyey xeerkan in la abuuro, la keydiyo, lana ilaaliyo isaga oo og in xogta la gelinaayo diiwaan kaas ama dukumintigaas uu yahay mid la soo been abuuray ama isaguba ka qeyb noqday been abuurkaas, ka dibna loo soo gudbiyey sarkaalka idman, waxaa

lagu ciqaabayaa habraacyada ku xusan Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed iyo Xeerarka kale ee Dalka.

## CUTUBKA 14AAD:
## CEYMISKA IYO ILAALINTA SHAQAALAHA

### Qodobka 88aad
### Ceymiska iyo Ilaalinta Shaqaalaha

Wasiirka waxaa waajib ku ah, isaga oo la tashanaayo ururrada shaqaalaha iyo ururrada loo-shaqeeyaha in uu abuuro siyaasado, dhaqan geliyo shuruuc gaar ah uuna dejiyo xeerar iyo xeer-nidaamiye la xiriira nidaaminta iyo istaraatiijiyado lagu ilaalinayo shaqaalaha, oo ay ka mid yihiin kaalmeynta shaqaalaha, caymiska shaqaalaha iyo hannaanka sinnaanta shaqaalaha iyo la socodka isbeddalka iyo wax ka qabadka suuqa shaqada.

## CUTUBKA 15AAD:
## HESHIISKA SHAQOSIINTA DIBEDDA

### Qodobka 89aad
### Awoodda Gelidda Heshiiska

1. Heshiiska shaqo siinta dibeddu waa heshiis lagu galay Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya gudaheeda, hase yeeshee shaqada gebi ahaanteed ama qeyb ka mid ah lagu qabanayo Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya bannaankeeda, taas oo shaqaalahana looga baahan yahay in ay muddada heshiiska inteeda badan ku qaataan meel Jamhuuriyadda FS ka baxsan, si waafaqsan xeerkan, shuruucda kale ee qoran, siyaasadaha iyo Habraaca Shaqosiinta Dibadda ee shaqaalaha Soomaaliyeed.

2. Heshiiska shaqo siinta dibedda waa in lagu qoraa foom cayiman oo dhinacyadusaxiixeen, ayna xaqiijisay Waaxda ku shaqada leh ee Wasaaradda.

3. Qofna looma oggola in uu galo heshiis shaqo siin Dibedeed oo aysan oggolaanWaaxda ku shaqada leh ee Wasaaradda.

4. Inta aan oggolaanshaha la siinin, Waaxda ku shaqada leh ee Wasaaradda waa inay ku qanacdaa marka hore in heshiiku ka maran yahay khiyaano, jajuub, saameyn khaldan, ka been sheegid iyo marin habaabin keeni karta in qofka shaqaalaha ahi uu ku khaldamo (Sirmo) gelidda heshiiskaas oo ah:

b) In la helo raalli ahaanshaha shaqaalaha heshiiska lala galay;

t) Heshiisku waa inuu ku saleysnaadaa Foomka cayiman ee sare ku xusan;

j) In xaaladda iyo shuruudaha shaqo siinta ee heshiisku qorayo ay waafaqsan yihiin qodobbada xeerkan, uuna hubiyo in qofka shaqaalaha ah uu si sax ah u fahmo;

x) In qofka Shaqaalaha ah caafimaadkiisu taam yahay, uuna fulin karo waxqabadka shaqada ee uu heshiisku qorayo; iyo

kh) Qofka Shaqaalaha ah looma adeegsan karo in uu qabto shaqo kale muddada



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

lagu jiro heshiiska shaqada ilaa uu ka dhamaanayo heshiiska dibedda.

**Qodobka 90aad**
**Dammaanad**

1. Marka ay Waaxda ku shaqada leh ee Wasaaradda ula muuqato in loo-shaqeeyaha gelaya heshiis shaqo siin dibadeed oo aan degganayn ama aan ku laheyn ganacsi Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya gudaheeda, loo-shaqeeyuhu waa inuu dhigaa lacag rahan ah si waafaqsan foomka cayiman, iyo laba dammiin oo deggan JFS gudaheeda oo ay oggolaatay Waaxda ku shaqada leh ee Wasaaradda.

2. Haddii loo-shaqeeyaha uu u joogo wakiil sharciyeysan, degganna dalka, Waaxda ku shaqada leh ee Wasaaradda waxay dalban kartaa in wakiilku uu bixiyo rahanta,wakiilkuna uu qof ahaan tiisana u ballanqaado in uu ku dhaqmayo shuruudaha heshiiska rahanta, kumana xirnaan doonto arrintani in uu la socod siiyo ciddii wakiilatay.

**Qodobka 91aad**
**Ku Qalqaalinta ama ku Khasbidda Shaqo Dibadeed Heshiis La'aan**

1. Qof ama shirkad kasta oo:

**b)**Shaqo siiya, ka shaqeeya ama isaga oo og gacan ka geysta shaqo siintiisa ama hawlgaliya qof ujeeddada laga leeyahay shaqo siintaas ay tahay in loo diri doono shaqo dibadda ka ah Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;

**t)** Ku qalqaaliya, isku daya in uu tashkiiliyo, ku khasba ama isku daya in uu ku khasba qof shaqaale ah in uu u safro meel ka baxsan JFS si aan waafaqsaneyn xeerkan, qofkaasi waxaa lagu ciqaabayaa habraacyada ku xusan xeerka ciqaabta Soomaaliyeed iyo xeerarka kale ee Dalka.

**CUTUBKA 16AAD:**
**MAAREYNTA SHAQADA**

**Qodobka 92aad**
**Agaasime ama Sarkaal Idman**

**1.** Cutubkan:

**b)** "Agaasimaha" waxaa loola jeedaa Agaasimaha Waaxda Shaqada,
**t)** Meeshii lagu xuso "Sarkaalka Idman" waxaa loola jeedaa Agaasimaha Shaqada iyo Sarkaalka Shaqada.

**2.** Iyadoo aan laga leexaneynin hawlahooda iyo waajibaadkooda guud, Agaasimaha Shaqada iyo Sarkaalka idman, waa in ay u fududeeyaan hubinta iyo horumarinta:

**b)** Baxnaaninta, dhaqan-celinta iyo adeegyada dadka lixaadkoodu dhimman yahay oo ay ku jiraan barnaamijyada tababarka Shaqaalaha ka howlgala Adeegyadaas.
**t)** Barnaamijyada ku saabsan tababarka xirfadaha iyo adeegyada shaqada dadka lixaadkoodu dhimman yahay.

**Qodobka 93aad**
**Ogeysiisyada**

1. Loo-shaqeeyaha ayaa laga doonayaa inuu ku wargeliyo Agaasimaha markii jago ka bannaanaato shirkaddiisa ama goobtiisa shaqo, waana inuu kusoo qoraa foomka cayiman, kaasoo ay ku qoran yihiin macluumaadka soo socda:

**b)** Magaca looshaqeeyaha iyo cinwaankiisa oo buuxa;
**t)** Faahfaahinta booska bannaan;
**j)** Shahaadada ugu hooseysa ee looga baahan yahay qofkii jagadan soo dalbanaya;
**x)** Goobta iyo nooca shaqada, ha ahaato shaqo joogto ah, mid ku-meel-gaarah ama heshiis muddo cayiman leh, iyo
**kh)** Macluumaadka kale ee Agaasimuhu uu u baahan karo.

2. Jago waxay bannaanaataa markii:

**b)** Loo-shaqeeyuhu uu abuuro jago u baahan shaqaale buuxiya ama uu go'aansado in uu buuxiyo jago bannaanaatay;
**t)** Loo-shaqeeyuhu ka joojiyo shaqaale shaqada ama loo-shaqeeyuhu uu baabi'iyo jagadaas.

3. Marka shaqo la oggeysiiyey Agaasimaha in ay bannaan tahay la buuxiyo ama la baabi'iyo, loo-shaqeeyuhu waa inuu qoraal ahaan ugu wargeliyaa Agaasimaha muddo laba toddobaad gudahood ah.

4. Loo-shaqeeye waxaa looga baahan yahay inuu shan (5) maalmo shaqo gudahood ugu gudbiyo sarkaalka Idman magaca iyo xirfadaha shaqaale kasta oo u shaqeynayay, shaqadana laga joojiyay sabab kasta ha ahaatee.

5. Qofka shaqaalaha ah ee ku jira diiwaanka guud ee liiska keydka shaqadoonka, waxaa looga baahan yahay in uu shaqo billaabiddiisa ku ogeysiiyo sarkaalka idman toddoba (7) maalmo shaqo gudahood, haddii loo shaqaaleeyay siwaafaqsan qodobada cutubkan.

6. Qofka ku jira liiska keydka shaqadoonka, haddii uu shaqo la'aan sii ahaado, waa in uu isdiiwangelintiisa ka cusbooneysiistaa sarkaalka idman seddexdii biloodba mar, laga soo billaabo maalintii uu isdiiwaangeliyay.

**Qodobka 94aad**
**Diiwaangelinta Shaqaalaha**

1. Qof kasta oo doonaya in uu shaqo helo, waxaa looga baahan yahay in uu iska diiwaangeliyo Diiwaanka Guud ee keydka shaqadoonka ee uu hayo sarkaalka idmani.

2. Qofna looma oggola inuu iska diiwaangeliyo wax ka badan hal sarkaal idman oo kaliya.

3. Qofna looma oggola in lagu qoro diiwaanka guud ee shaqadoonka, haddii aanu weli gaarin da'da ugu yar ee shaqada loo oggol yahay sida xeerkani qabo ama xeer-nidaamiye ama sharciyada kale ee dalka ee la xiriira oggolaanshada shaqo siinta.

4. Diiwaangelinta ka dib, sarkaalka idmani wuxuu qofka shaqa doonka ah u soo saarayaa kaarka diiwaangelinta, kaas oo u sameysan qaabka ku tilmaanan xeer- nidaamiyayaasha.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

5. Dadka soo codsanaya diiwaangelinta, waa in diiwaangelinta shaqa doonka loo geliyaa sida ay usoo kala horreeyaan.

6. Haddii qof diiwaangashanaa ee mar intuu shaqo helay haddana, shaqadii laga saaray, uu doonayo in mar kale liiska shaqa doonka lagu daro, wuxuu diiwaanka ka gelayaa halka uu marayo marka uu codsiga dambe keensado.

7. Sarkaalka idman waa in uu qof kasta oo la diiwaangelinayo ku diiwaangeliyaa liiska u gaarka ah mihnadiisa shaqo, shaqo walbana waa in ay leedahay diiwaan u gooni ah.

**Qodobka 95aad**
**Meeleynta Shaqaalaha**

Meeleyntu waa adeeg bulsho, waana in loo fuliyaa si waafaqsan qodobbada xeerkan iyo xeer-nidaamiyayaashiisa.

**Qodobka 96aad**
**Shaqo siinta Shaqo-doonka**

**1.** Loo-shaqeeyaha wuxuu u madax bannaan yahay in uu ciddii ku habboon dalabkiisa shaqo fulisana shuruudaha shaqada, ka qaadan karo dadka ku jira diiwaanka guudee shaqadoonka.

**2.** Shaqo siintaasi ma khusayso:

- **b)** Loo-shaqeeyaha xaaskiisa ama eheladiisa isaga la nool ee uu dhaqaaleeyo;
- **t)** Qofka xil Agaasime ama Maamule ka haya hay'ad;
- **j)** Shaqaalaha ka shaqeeya adeeggyada guryaha;
- **x)** Shaqaalaha loogu talagalay shaqooyinka warshadaha, ganacsiga ama beeraha ee ay ka shaqeeyaan afar (4) qof;
- **kh)** Shaqaalaha ka shaqeynaya shaqooyinka ku meelgaarka ah ee aan soconeyn wax ka badan toddoba (7) maalmo shaqo.

3. Shaqaalaha laga shaqo siiyey Adeegga hay'adaha gaarka ah heer Federaal iyo Maamul Goboleedyada Dalka, wakaaladaha madaxabannaan iyo hay'adaha ay dawladdu qeyb ka tahay, waxaa shaqo siintooda la ogeysiinayaa saraakiisha idman ee goobahooda jooga, iyada oo shaqaaluhu ay gelayaan imtixaan la baahiyay oo tartan furan loo galay oo ay goobjoog ka yihiin wakiillo ka socda Guddiga Sare Shaqo siinta Federaalka (GSShF).

**Qodobka 97aad**
**Araajida Shaqo siinta Shaqaalaha**

1. Marka laga reebo arrimaha ku xusan farqadaha qodobka 96aad, loo-shaqeeye kasta oo doonaya in uu dadka shaqosiiyo, waxaa looga baahan yahay in uu soo ogeysiiyo Sarkaalka Idman ee jooga degaanka laga shaqosiinayo.

2. Sarkaal idmani wuxuu diiwangelinayaa ogeysiiska uu soo gudbiyey looshaqeeyuhu si hadhaw diiwaanka shaqada looga saaro ciddii shaqada la siiyey.

3. Araajida lagu codsanaya shaqaalaha waa in ay ku cad yihiin:

- **b)** Tirada looga baahan yahay nooc kasta oo shaqo ah iyo shaqada laga rabo;
- **t)** Aqoonta looga baahan yahay;



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

j) Xaaladaha iyo shuruudaha shaqo siinta, iyo
x) Muddada suurto-galka ah ee ay shaqadu soconeyso.

4. Araajida shaqada waa in lagu soo dalbadaa Magaca shaqadoonka haddii:
b) Shaqaalaha looga baahan yahay shaqo ku dhisan ammaano oo qofka loo dhiibanayo goobaha tababbarada lagu qabto, xarumaha shaqada ama hantida kale ee shirkadda.
j) Qof shirkadda tababbar farsamo barad ah ku dhammeystay;
x) Uu yahay Shaqaale horey goobtaas uga soo shaqeeyay.

5. Sarkaalka idmani, marka uu helo ogeysiiska loo-shaqeeyaha, waa in uu ku qancaa in xaaladaha iyo shuruudaha loo soo bandhigayo qofka shaqa doonka ah ay waafaqsan yihiin qodobbada xeerkan, xeer-nidaamiyayaashiisa ama heshiis wadareedkii shaqo ee la wada galay haddii uu jiray.

## Qodobka 98aad
## Mudnaanta iyo Tixraaca Shaqo siinta

1. Marka laga reebo xaalado gaar ah, shaqadoonka waxaa loo oggol yahay in ay magacyadooda ku soo dalbadaan shaqada, shaqaaluhu waa in ay shaqada u helaan sida ay uga kala sarreeyaan natiijada imtixaanka. Waxaana diiwaanka guud loogu qorayaa sida ay u kala sarreeyaan.

2. Shaqadoon ka ku nool degmada ay ku taallo goobta shaqada ayaa xaq u leh mudnaanta koowaad, haddii uu soo buuxiyo shuruudaha shaqada.

3. Shaqaale shaqadiisa ku waayay shaqaale dhimis guud oo la sameeyey ayaa ugu mudan in dib loogu bandhigo ku soo noqoshada shaqada muddo hal sano gudaheed ah laga soo billaabo maalintii shaqada laga saaray.

4. Marka shaqaale la siiyo warqad tixraac shaqo wanaag ah, sarkaalka idmani wuxuu raacinayaa warqad ku socota loo-shaqeeyaha isaga oo tixraacaya warqaddii loo soo qoray.

## Qodobka 99aad
## Loo-shaqeeyeyaashu Waa Ay Diidi Karaan In Ay Aqbalaan Shaqaalaha Qaarkood

1. Loo-shaqeeyaha wuxuu xaq u leeyahay in uu imtixaano, xusho shaqaalaha uu qaadanayo, si uu u xaqiijiyo kartidooda farsamo ama ku habboonaanta shaqada loo dhiibayo.

2. Loo-shaqeeyuhu waa uu diidi karaa shaqaale uu hore shaqada uga ceyriyay sababo macquul ah oo jiray dartood.

3. Marka loo-shaqeeyuhu qaadanaayo shaqaale, sarkaalka idman ee degmadaas waa in uu goobjoog ahaadaa.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

**Qodobka 100aad**
**Howlgelinta Tooska ah ee Shaqaalaha**

1. Loo-shaqeeyuhu wuxuu si toos ah u howlgelin karaa shaqaale, haddii howlgelintaas lagu sababeyn karo baahi degdeg ah oo jirta si looga fogaado dhibaato nafeed iyo mid agabeed oo la filan karo.

2. Mar kasta oo shaqaale si toos ah loo howlgeliyo muddo ka badan hal (1) toddobaad, loo-shaqeeyuhu waa in uu u diraa sarkaalka idman magaca shaqaalaha, nooca shaqada uu qabanayo, baahida keentay in toos loo howlgeliyo iyo xaaladaha shaqada.

**Qodobka 101aad**
**Ka Dhaafid**

Wasiirka oo la tashanayaa hay'adaha ay khuseyso ee dawladda, ururrada loo- shaqeeyaha iyo kuwa shaqaalaha, wuxuu ka dhaafi karaa ama ka dabcin karaa qodobbada cutubkan muddo cayiman oo si toos ah u taabanaya xaaladaha nolosha shaqaalaha, shaqada, qeybaha wax-soo-saarka iyo dhaqan-dhaqaale.

**Qodobka 102aad**
**Dembiyada ka Dhalan kara Jebinta Qoddobada Cutubkan**

Loo-shaqeeye kasta oo jebiya mid ka mid ah qoddabada cutubkan ku jira, waxaa lagu ciqaabayaa habraacyada ku xusan xeerka ciqaabta Soomaaliyeed iyo xeerarka kale ee Dalka.

## CUTUBKA 17AAD
## SHAQO KA SAARIS

**Qodobka 103aad**
**Shaqo Ka Saaris Ogeysiis Leh**

1. Mid kasta oo ka mid ah dhinacyada heshiiska wada galay, waa uu ka bixi karaa heshiiska, isaga oo bixinaya ogeysiis qoraal ah oo:

**b)** Aan muddadiisu ka yareyn toban (10) maalmo shaqo shaqaalaha muruqmaalka ah;

**t)** Aan Muddadiisu ka yareyn Soddon (30) maalmo shaqo, shaqaale aan muruqmaalka aheyn.

2. Looma baahna in wax ogeysiis ah la bixiyo marka muddada heshiiska shaqadu aanay ka badneyn hal (1) bil.

3. Inta lagu jiro muddada ogeysiiska, xiriirka shaqadu waxa uu ku sii soconayaa qaabkii asalka ahaa, wuxuuna haysanayaa dhammaan awooddiisa asaasiga ah, marka laga reebo haddii cidda ogeysiiska loo diray ay dalbato in lagu joojiyo markii ogeysiisku soo gaaray.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

**Qodobka 104aad**
**Magdhawga Beddalka Shaqo Ka Saaris Ogeysiis La'aan**

Mid kasta oo ka mid ah dhinacyada heshiiska wada galay, wuu ka bixi karaa heshiiska ogeysiis la'aan, Dhinaca heshiiska ka baxay, wuxuu bixinayaa beddalka xuquuqdii uu lahaan lahaa muddadii ogeysiiska, haddii uu shaqeyn lahaa, sida uu qabo xeerkan iyo xeerarka hoos yimaada.

**Qodobka 105aad**
**Habka u Beddelidda Shaqo siin Shaqaale Ku-Meel-Gaar ah Heshiis Shaqo**

1. Shaqaale ku-meel-gaarka ahi haddii:

**b)** Uu shaqeeyo dhowr maalmo shaqo oo xiriir ah, kuwaas oo isugeyn toodu aanayka yareyn hal (1) bil;

**t)** uu qabanayo shaqo ayna suuragal aheyn in lagu dhammeystiro, ama uu shaqeeyo maalmo shaqo oo xiriirah oo isugeyn toodu ay u dhiganto seddex (3) bilood ama ka badan, heshiiska shaqo siinta ee shaqaale ku-meel-gaar ah, wuxuu noqonayaa mid mushaarkiisu bille yahay, wuxuuna yeelanayaa shuruudaha heshiiska shaqo ee shaqaalaha joogtada ah.

2. Marka la xisaabinayo mushaarka iyo maalmaha shaqo ee xiriirka ah ee ku xusan farqadda (1), shaqaalaha ku-meel-gaarka ahi wuxuu xaq u leeyahay in mushaarkiisa loogu daro hal (1) maalin nasasho oo lacag ah, lixdii (6) maalmo shaqo ee uu shaqeeyaba iyo maalmaha nasashada ama wixii fasax qaran ah ee soo dhexgala maalmahaas uu shaqeynayey oo loo xisaabinayo xuquuq la mid ah tan maalmaha caadiga ah ee shaqada.

3. Shaqaalaha ku-meel-gaarka ah ee heshiiskiisa shaqo siin loo beddelay si waafaqsan farqada (1), kaas oo si joogto ah u shaqeynayey laba (2) bilood ama ka badan, laga billaabo taariikhdii laga dhigay shaqaale ku meel-gaar ah, wuxuu xaq u yeelanayaa qodobbada iyo shuruudaha heshiiska shaqo siin ee lala galo shaqaalaha joogtada ah.

**Qodobka 106aad**
**MuddadaTijaabada ah**

1. Muddada heshiiska tijaabadu kama badan karto seddax (3) bilood, balse waxaa lagu kordhin karaa muddo dheeraad ah oo aan ka badneyn seddax (3) bilood kale, haddii lagala heshiiyo qofka shaqaalaha ah.

2. Loo-shaqeeyaha looma oggola inuu qofna ku shaqo siiyo muddo tijaabo ka badan inta lagu jideeyay farqada (1) ee qodobkan.

3. Dhinac ka mid ah dhinacyada wada galay muddada tijaabada waa uu ka bixi karaa,haddii uu bixiyo ugu yaraan toddoba (7) maalmo shaqo oo ogeysiis ah, ama haddii loo-shaqeeyuhu ka baxayo muddada ogeysiis la'aan, wuxuu bixinayaa xuquuqdii toddoba (7) maalmo shaqo oo shaqo ah.

4. Haddii loo-shaqeeyuhu uusan si cad u joojin muddada tijaabada ah oo muddadiisu dhammaato iyada oo aan wax ogeysiis ah laga helin labada dhinac, muddada tijaabada ah waxaa loo qaadanayaa in shaqaaluhu noqday shaqaale joogto ah.

5. Marka muddada tijaabada loo beddalo mid joogto ah, muddadii uu shaqeeyey ee tijaabada



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

ahayd ka hor inta aan la joogtayn, waxaa loo tixgalinayaa muddada heshiiska adeegga shaqadiisa.

6. Inta lagu guda jiro muddada tijaabada ah, haddii ay timaado jirro, shil, gudasho shaqo qaran, waajibaad madani ah ama masiibo dabiici ah, haddii aan heshiiska si kale loo joojin, waxaa loo arkaa in la kordhiyey muddada tijaabada si waafaqsan xeerkan.

**Qodobka 107aad**
**Shaqaale Dhimis**

1. Loo-shaqeeyaha looma oggola in uu ka baxo heshiiska shaqada, isaga oo ku sababeynaya in uu shaqaalihii ka maarmay, ilaa uu:

**b)** Loo-shaqeeyuhu wargeliyo urur shaqaale oo shaqaaluhu xubin ka yahay;

**t)** Loo-shaqeeyuhu ku wargeliyo sarkaalka shaqada ee mas'uulka ka ah goobta shaqaaluhu uu ka shaqeeyo sababta shaqaale ka maarmidda keentay, wargelin taasina waa in ay dhacdaa bil ka hor taariikhda la qorsheeyay shaqo dhimista la xiriirta shaqaalaha laga maarmay;

**j)** Haddii shaqaaluhu aanu xubin ka aheyn urur shaqaale, waa in loo-shaqeeyuhu uu qoraal ku ogeysiiyo qofka shaqaalaha ah naf ahaantiisa iyo sarkaalka shaqadaba;

**x)** Marka la doonayo in la dhimo shaqaale ama laga maarmo shaqaalaha qaar kood, waxaa lagu kala saarayaa waayo-aragnimadooda, sidii ay shaqada ugu soo kala horreeyeen, xirfaddooda, kartidooda iyo kalsoonida lagu qabi karo shaqaale kasta ama waxaa la eegayaa qeybaha shaqada (Category) gaarka ah oo ay saamaysey shaqaale dhimistu;

**kh)** Marka uu jiro heshiis wadareed shaqo oo u dhexeeya loo-shaqeeye iyo urur shaqaale ee qeexaya xuquuqda la bixinayo, haddii ay dhacdo in la eryo shaqaale shaqadiisii laga maarmay, xuquuqdaas oo kale ayuu helayaa shaqaalihii aan xubin ka aheyn urur shaqada laga saaro;

**d)** Haddii shaqaale la gaaray xilligii fasaxiisa,shaqo dhimisna shaqada looga saaray, wuxuu xaq u helayaa in la siiyo lacagtii fasaxa oo gacansaar ah;

**r)**Haddii shaqaale shaqo dhimis shaqada looga saaro, iyadoo aan la siin bil ogeysiis ah, waa in loogu beddelaa bil mushaar ah beddalka ogeysiiska; iyo

**s)** Shaqaalaha laga maarmay shaqaalanimadooda uu siiyo magdhaw u dhigma sanadkiiba bil mushaarkeed intii sanadood ee uu soo shaqeeyay, kaas oo lagu saleynaayo bishii ugu dambeysay mushaarkeeda.

2. Farqada 1aad ee qodobkani ma khuseeyo marka sababta shaqaale dhimistu ay ku timid shirkadda oo musalaftay ama ay kacday darteed.

3. Wasiirku wuxuu soo saari karaa nidaam looga dalbanayo in loo-shaqeeye kasta oo heysta tirada ugu yar ee shaqaale ah in ay shaqaalaha ka badbaadiyaan khatarta shaqo dhimista iyaga oo raacaya nidaamka ceymiska shaqo la'aanta oo waafaqsan Xeerka Ceymiska qaran, kaas oo heysta dammaanad sharci ah ama shirkad kasta ee ceymis oo ay dawladdu aqoonsan tahay.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

**Qodobka 108aad**
**Dhaqan Xumo**

1. Loo-shaqeeyaha marka uu qofka shaqaalaha ah shaqada uga saarayo arrimo la xiriira anshax xumo, waxqabad yari ama karti-darro jireed, waa in uu qofka shaqaalaha ah af uu garanayo ugu sheegaa sababta shaqada looga saarayo,uuna sababeeyaa anshax xumada, waxqabad la'aanta ama karti-darrada jireed ee uu qabo shaqaaluhu, uguna sharxo luuqadda qofka shaqaalaha ahi uu fahmi karo, sababta uu loo-shaqeeyuhu shaqada uga joojinayo, sidoo kale, qofka shaqaalaha ahi wuxuu xaq u yeelanayaa inuu u yeerto qof shaqaalaha ka mid ah ama xubin matesha urur shaqaale oo uu isagu doorto, kaas oo goobjoog ka noqda dhegeysiga sharraxaadda.

2. Ka hor inta aan shaqada laga joojin qofka shaqaalaha ah ogeysiin la'aan, waa in loo-shaqeeyaha uu dhagaystaa, uuna tixgeliyaa wixii caddeymo ah ee uu isku difaacayo shaqaaluhu, oo ay ku jiraan dukumiinti ama marqaatiyaal. Shaqaaluhu wuxuu keensan karaa qof difaaca oo isaga matela.

3. Haddii la isku fahmi waayo in lagu xalliyo khilaafkaas goobta shaqada, waxaa loo tixraacayaa nidaamka xallinta khilaafaadka ee ku xusan qodabada xeerkan.

**Qodobka 109aad**
**Caddeynta Sababta Shaqo ka Saarista**

1. Eedayn kasta oo sababi karta in laga baxo heshiiska shaqada, loo-shaqeeyaha waxaa looga baahan yahay inuu caddeeyo sababta ama sababaha heshiis ka baxa ah, haddii uu ku guul darraysto loo-shaqeeyuhu in uu caddeeyo sababahaas, heshiis ka baxaas waxaa loo aqoonsanayaa waxba kama jiraan iyo caddaalad darro xagga xeerkan.

2. Sababta ama sababaha heshiis ka baxa waa waxyaalaha loo-shaqeeyuhu uu adeegsado waqtiga heshiis ka baxa, taasoo sababtay in loo-shaqeeyaha uu joojiyo adeeggii qofka shaqaalaha ah. Waxyaalahaas lama qaadanayo haddii aysan maangal ahayn si waafaqsan xeerkan.

**Qodobka 110aad**
**Shaqo Ka Saaris Degdeg ah**

**1.** Shaqo ka saarista degdegga ahi waxay dhacdaa marka loo-shaqeeyuhu uu joojiyo shaqaalanimadii shaqaalaha ogeysiis la'aan ama uu soo ogeysiiyo muddo ka yar waqtigii uu shaqaaluhu xaqa u lahaa ama waqti ka yar muddadii uu xeerkani dejiyay ama heshiiska shaqo siinta qorayey.

**2.** Iyadoo la tixraacayo qodobbada xeerkan, waxaa reeban shaqo ka saaris degdeg ah.

**3.** Loo-shaqeeyaha wuxuu shaqo ka saaris degdeg ah sameyn karaa oo kaliya, marka qofka shaqaalaha ahi uu si ula kac ah u jebiyo waajibaadkii shaqo, kaas oo heshiiska shaqo siinta dhexdiisa lagu yiraahdo "dhaqan xumo culus".

4. Mid kasta oo ka mid ah arrimaha soo socda ayaa lagu tilmaami karaa anshax xumo culus, waxaana ka mid ah, haddii:



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

b) Shaqaaluhu fasax ama sabab sharci la'aantood uu ka maqnaado goobtii shaqo ee loo cayimay;

t) inta lagu jiro saacadaha shaqada, uu qofka shaqaalaha ahi noqdo saqraan, taasina ay keento in uusan diyaar u aheyn ama uuna awood u laheyn in uu shaqadiisa si qumman u guto;

j) Shaqaaluhu si u lakac ah u dayaco shaqo ay waajibkiisa aheyd in uu qabto; ama haddii uu si xun oo xilkas darro ah u sameeyo shaqo laga rabay in uu si qumman u qabto;

x) Shaqaaluhu ku hadlo ereyo gef ama aflagaado ah, ama uu u dhaqmo qaab aflagaado ku ah loo-shaqeeyihiisa ama ciddii kale ee uu shaqada u wakiisho;

kh) Shaqaaluhu si u lakac ah u buriyo ama u diido in uu qaato amar sharci ah oo uu siiyey loo-shaqeeyihiisu ama ciddii kale ee uu shaqada u wakiisho;

d) Iyadoo la isticmaalayo awood sharci oo wax lagu xiro taas oo waafaqsan xeerkan, haddii qofka shaqaalaha ah loo xiro fal-dambiyeed keeni kara ciqaab xabsi oo aan ka yareyn muddo bil ah, haddaan qofkii shaqaalaha ahaa lagu sii deyn dammaanad ama si kale oo sharci ah; ama

r) Shaqaaluhu galo fal-dambiyeed waxyeello ku ah loo-shaqeeyaha ama hantidiisa; ama uu jiro tuhun leh aasaas macquul ah oo loogu maleyn karo in shaqaaluhu uu galay fal-dambiyeed.

s) Shaqaalihii looga cabsado qatar amni ama amni daro (fal-argagixiso) waxaa laga saari karaa shaqadda.

5. Arrimaha noocaas ah ama go'aanka uu loo-shaqeeyuhu ku gaaro in uu shaqo ka saaris degdeg ah sameeyo si waafaqsan farqadda (4) ee qodobkan kama hor istaagayso loo-shaqeeyaha ama shaqaalaha, sida ay u kala horreeyaan, in ay ka doodaan eedaha lasoo jeediyay sida ay u waafaqsan yihiin xaqiiqada dhabta ah; ama jiritaanka arrimo aan halkan lagu xusin oo loo cuskan karo shaqo ka saarista degdeg ah ee shaqaalaha.

## Qodobka 111aad
## Shaqo Ka Saaris Caddaalad Darro ah

1. Shaqo ka saarista uu sameeyo loo-shaqeeyuhu, waxaa loo arkayaa caddalad darro, haddii:

b) Loo-shaqeeyuhu uu ku guuldarraysto in uu caddeeyo:

i. In sababta shaqo ka saaristu ay sax tahay;

ii. In sababta shaqo ka saaristu ay tahay sabab gaar ah oo la xiriirta anshaxa, mas'uuliyadda iyo kartida shaqaalaha, ama ay ku saleysan tahay howlgalka shaqada ee loo-shaqeeyaha; iyo

iii. In shaqo ka saarista loo marin habraacii loo baahnaa.

t) Haddii la caddeeyay in loo-shaqeeyuhu uusan u dhaqmin si waafaqsan caddaalad iyo sinnaanta marka uu sameynayay shaqo ka saarista shaqaalaha, iyadoo la tixgelinayo:

i. Nidaamka loo-shaqeeyuhu uu u maray go'aanka shaqo ka saarista qofka shaqaalaha ah, sidii in qofka lala wadaagay go'aankii shaqo ka saarista iyo sida loo maareeyay racfaankii uu shaqaaluhu ka qaatay go'aankaas;

ii. Hab-dhaqanka iyo kartida shaqaalaha ee ilaa taariikhdii shaqo ka saarista;

iii. Ilaa iyo inta uu loo-shaqeeyuhu u hoggaansamay shuruudaha sharciga ee la xiriira shaqo ka saarista, oo ay ku jirto soo saarista



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

shahaadada shaqada iyo shuruudaha habraaca ee lagu xusay qodobka 122aad ee xeerkan;

iv. Tillaabooyinkii hore ee loo-shaqeeyaha ee la xiriira nooca xaaladaha keenay shaqo ka saarista; iyo

v. jiritaanka waraaqo digniin hore ah oo la siiyay shaqaalaha.

2. Shaqo ka saarista cadaalad darrada ah ee shaqaaluhu waa ay reeban tahay;

3. Shaqaalihii si joogto ah ugu shaqeynayay loo-shaqeeyahiisa muddo aan ka yareyn seddex iyo toban (13) bilood inta aan shaqada laga saarin, wuxuu xaq u leeyahay in uu ka dacwoodo in si xaq darro ah shaqada looga saaray.

**Qodobka 112aad**
**Ka Cabasho Caddaalad Darro iyo Shaqo Ka Saaris Degdeg ah**

1. Qofkii shaqaale ah oo si degdeg ah shaqada looga saaro ama heshiskiisii shaqo si caddaalad darro ah looga baxo, wuxuu seddex (3) bilood gudahood cabasho ugu gudbin karaa Sarkaalka Shaqada, kaas oo marka uu labada dhinac si fiican u dhegeysto ka dib, dhinacyada u gudbin doona go'aan uu u arko xalka ugu fiican ee khilaafka labada (2) dhinac.

2. Xaqa uu shaqaaluhu u leeyahay in uu cabasho usoo guddbiyo si waafaqsan farqadaha qodobkan, waxaa u dheer xaqa uu siinayo heshiis wadareedka shaqada iyo Maxkamadda awooda u leh.

**Qodobka 113aad**
**Magdhawga Shaqo ka Saarid Khaldan ama Heshiis ka Bixid Caddaalad Darro ah**

1. Haddii hal dhinac uu kaligii ka baxo heshiiska shaqada ama uu sameeyo shaqo ka saaris sharci darro ah ama aan wadan sabab macquul ah, dhinaca kale wuxuu xaq u yeelanayaa in uu dalbado magdhaw.

2. Marka sarkaalka shaqada uu u arko in shaqo ka saarista degdegga ah ama heshiis ka bixiddu ay tahay caddaalad darro, sarkaalka shaqadu wuxuu kula talin karaa, ama maxkamadda ku amri kartaa, loo-shaqeeyaha in:
   **b)** Uu dib u soo celiyo shaqaalaha, u lana dhaqmo si xushmad leh, taas oo ah in aan marna shaqadiisa la joojin; ama
   **t)** Uu dib u siiyo shaqaalaha shaqo la mid ah shaqadii uu qaban jiray intii aan shaqada laga saarin; ama uu geeyo shaqo kale oo macquul ah, lana mushaar eg tii hore;

3. Inta Sarkaalka shaqadu aanu ku talin, ama Maxkamadda awoodda u leh aanay amrin, dib u soo celinta ama dib-u-hawl gelinta shaqaalaha, waa in la tixgeliyaa mid ka mid ah ama dhammaan arrimaha soo socda:
   **b)** Rabitaanka shaqaalaha;
   **t)** sida xaaladaha shaqo ka saaristu ay ku dhacday, ilaa iyo xadka ay gaarsiisan tahay, haddii ay jirto, in uu shaqaaluhu ku lug lahaa ama uu gacan ka geystay shaqo ka saariddiisa iyo sida dhaqangal ku noqon karto talada dib- u-soo- celinta ama dib

u hawl gelinta;

**j)** Mabda'a guud ee xeerkan waa in aanay jirin hab gaar ah oo ay isugu xigaan qabashada waajibaadka heshiiska shaqo, marka laga reebo xaalado gaar ah oo aad dhif iyo naadir u ah;

**x)** Dheeraanta muddada uu shaqaaluhu la shaqeynayey loo-shaqeeyaha;

**kh)** Rajada uu qofka shaqaalaha ahi ka qabo muddada ay sii socon doonto shaqo siinta uu kula jiro loo-shaqeeyaha, marka laga reebo taariikhda uu heshiiskoodu ku eg yahay;

**d)** Fursadaha uu shaqaaluhu u heysto sida uu loo-shaqeeye kale uga heli karo shaqo la mid ah ama ku habboon shaqadii laga saaray;

**r)** Qiimaha magdhaw kasta oo uu sharcigu jideeyay;

**s)** Xaqa uu u leeyahay in uu u dacwoodo xuquuqdiisa ama ujuuradiisa aan lasiin, kharashaadka kale iyo xuquuqaha uu leeyahay shaqaaluhu;

**sh)** Kharashka qofka shaqaalaha ahi uu galay sababo la xiriira shaqo ka saaristiisii;

**dh)** Dabeecadaha qofka shaqaalaha ahi uu la yimid, taas oo ay keentay ama ka qeyb qaadatay shaqa ka saaristiisa;

**c)** Shaqaale kasta oo ku guul darraysta in uu si maangal ah u yareeyo khasaarooyinka ka dhashay shaqo ka saaristii xaqdarrada aheyd; iyo

**h)** Magdhaw kasta, oo ay ku jiraan lacagaha xaqsiinta ah, iyada oo la xushmeynayo heshiishka dhammaaday, taas oo uu dhiibay loo-shaqeeyuhu, uuna guddoomay shaqaaluhu.

## Qodobka 114 aad
## Hakinta Xiriirka Shaqo Siinta

1. Xiriirka shaqada waa in la hakiyo haddii hawsha shaqadu ay si ku-meel-gaar ah u joogsato ama loo-shaqeeyuhu uu ogeysiis u soo diro shaqaalaha toddoba (7) maalin ka hor ama uu boorka shaqada kusoo dhejiyo;

2. Ogeysiiskan waa in muddadaas oo kale lagu gaarsiiyaa sarkaalka idman ee ku shaqada leh, iyada oo la raacinayo sababta keentay shaqo hakinta ku-meel-gaarka ah iyo muddada ay sii soconeyso shaqa hakintaas;

3. Hakinta xiriirka shaqadu waa in aanay ka badnaan 30 maalmo shaqo, iyada oo uu sarkaalka shaqadu awood u leeyahay in uu muddada kordhiyo oo uu ka dhigo ilaa 90 maalmo shaqo ka dib markii uu la tashado loo-shaqeeyaha, haddii xaaladaha jira iyo duruufaha xilliyada degaanku ay sidaas kallifayaan;

4. Xiriirka shaqada waa in sidoo kale la joojiyaa haddii:

   **b)** Shaqaalaha loogu yeero shaqo millatari;

   **t)** Shaqaalaha la xanibo muddo aan ka badneyn seddex (3)bilood arrin la xiriirta xeerka nidaamka degganaanshaha iyo xasiloonida guud, ka dibna uu shaqada kusoo laabto markii la soo daayey;

   **j)** Haddii qofka shaqaalaha ah loo xiro dambi kale, laakiin ugu dambeyntii la sii

daayo oo uu ku noqdo shaqada;

5. Marka loo eego faqradda 4aad Xarfaha (t) iyo (j) ee qodobkan, shaqaaluhu wuxuu xaq u leeyahay in lagu celiyo shaqadiisa, muddada shaqa hakintana, waxaa loo xisaaabinaya maalmo uu shaqeystay;

6. Haddii qof shaqaale ah lagu xiro dembi ku lug leh shaqo siintiisa, shaqaalahaas wuxuu xaq u leeyahay in uu ka helo loo-shaqeeyaha seddex-meelood meel (**1/3**) ka mid ah mushaarkiisa aasaasiga ah ilaa inta lagu xukumayo, haddii dambiga lagu waayo ee lasoo daayo, wuxuu xaq u yeelanayaa inuu dib u helo xuquuqihii u uruuray ee mushaarka ka haray, haddii xukun ku dhacana wuxuu weynayaa dhammaan xuquuqiihi mushaarka ka dheeraadka ahaa ee xeerkani siinayay.

**Qodobka 115aad**
**Musallafidda Loo-shaqeeyaha**

1. Loo-shaqeeyaha musallafay (kacay) waxaa loola jeedaa xeerkan gudahiisa waa haddii:
   **b)** Loo-shaqeeyuhu uu yahay qof, kaas oo:
      i. Lagu dhawaaqay ama lagu xukumay in uu musallafay, wada-hadal ama wadaxaajood la galay dadkii deynta ku lahaa;
      ii. Geeriyooday, hantidiisana ay tahay in loo maamulo hab waafaqsan sharciga dhaxalka Islaamka.
   **t)** Loo-shaqeeyuhu yahay shirkad:
      i. Amar xiritaan ama xukun maamul oo ka soo baxay Maxkamad ama iyaga si iskood ah u go'aansadeen in ay shirkadda xiraan, iyada oo la xushmeynayo shirkadda;
      ii. Maxkamadi ay u magacaawday wakiil lagu aaminay hantidii iyo milkiyaddii shirkaddii musallaftay (kacday), si uu ula wareego mas'uuliyadda bixinta deymaha iyo dhammaan wixii shirkadda lagu lahaa.

2. Marka shaqaale loo-shaqeeyahooda musalafay ay codsi qoraal ah u soo dirsadaan ama qof wakiil u ah Wasiirka, uuna ku qanco in:
   **b)** Shaqaalaha loo-shaqeeyahooda uu musalafay ama kacay;
   **t)** Shaqo siinta shaqaalaha ay dhammaatay;
   **j)** Waqtiga ku habboon in shaqaalaha ay xaqooda helayaan in la siiyo
   **x)** Wasiirka waxaa uu tixgelinayaa xaquuqda ka maqan shaqaalaha, sidaas darteed loo- shaqeeyaha waxaa waajib ku ah in uu shaqaalaha siiyo xuquuqdoodii deynta ku aheyd. dhammaan ama qeyb ka mid ah deyntii xuquuqdooda;

3. Waxaa muhiim ah in la magacaabo guddi la aaminay oo ku-meel-gaar ah (Interim Trustees) ama xaraashaha musallafka (Liquidator) iyada oo la tixigelinayo heshiis hoosaad dhexmaray loo-shaqeeyaha iyo ciddii deynta ku laheyd ama guddi la aaminay oo lagu wareejiyey hantidii loo-shaqeeyaha kacay, ayagoo u furayo koonto u gaar ah sidaas awgeed Wasiirka waa in aanu amrin bixinta wax lacag ah ilaa uu ka helo waraaq qoraal ah guddiga loo magacaabay maamulidda qaddarka deynta ee aan la bixin, lana filayo in ay helayaan shaqaalihii kadibna ciddii kale ee deynta lahayd.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

4. Guddiga la aaminey la aaminay, isaga oo fulinaya codsiga Wasiirka, waa inuu usoo diyaariyaan warbixin dhan oo tifaftiran sida ugu dhakhsaha badan ee suurtagalka ah.

5. Marka gudddiga wakiilka la aaminay uu bixiyo dhammaan wixii deymo ah ee lagu lahaa musallafaha, wasiirku wuxuu amrayaa dhammaan haraaga hantida in ay ku siijirto Sanduuqa kor ku xusan, taas oo loo adeegsan karo oo kaliya xaalad tan la mid ah ee lagu soo tilmaamay Qodobka 115[aad]faqradihiisa 2[aad] ee xeerkan.

**Qodobka 116aad**
**La Kala Wareegid Goob Shaqo**

Haddii laba loo-shaqeeye oo nool ay si sharci ah ugu kala wareegaan mas'uuliyadda goob shaqo; ama qof dhintay mas'uuliyaddiisii lagu wareejiyo ama laga kireeyo qof seddexaad, heshiiskii shaqo ee jiray wax waa laga badali karaa.

**Qodobka 117aad**
**Arrimaha Mamnuuca ka ah ee Qof Shaqada Looga Saari Karin**

1. Arrimaha soo socda ma'ahan sababo banneyn kara in qof shaqaale ah shaqada laga saaro ama tallaabo anshaxmarin ah looga qaado:

**b)** Haweenka uurka leh, ama sabab kasta oo la xiriirta uurkooda;
**t)** Fasax qof shaqaale ah oo socda, ama in loo soo jeediyo fasax qofka shaqaalaha ah inuu qaato fasax uu xaq u lahaa ee lagu xusay heshiiska shaqo siinta, kaas oo waafaqsan xeerka shaqada;
**j)** Xubinnimo urur shaqaale darteed ama in loo soo jeediyo shaqaalaha xubin ka noqosho urur shaqaale;
**x)** ka qaybgalka ama in loo soo jeediyo shaqaale in uu ka qayb galo dhaqdhaqaaqa iyo hawlaha urur shaqaale waqti ka baxsan saacadaha shaqada ama, oggolaanshaha loo-shaqeeyaha, saacadaha shaqada dhexdooda;
**kh)** Shaqaalaha oo raadsada in uu qabto xafiiska urur shaqaale ama ku shaqeeyo sarkaal urur shaqaale ama wakiil shaqaale;
**d)** Shaqaalaha oo diida ku biirista urur shaqaale ama ka baxa urur shaqaale oo uu horey uga tirsanaa;
**r)** Wax la xiriira sinjiga shaqaale, midabkiisa, qabiilkiisa, ahaanshihiisa lab iyo dheddig, fikirkiisa siyaasadeed ama ku-xirnaanshihiisa koox siyaasadeed, dalka uu kasoo jeedo, jinsiyaddiisa, asalkiisa bulsho, xaaladda xaas ahaaneed, xaaladda HIVAIDS iyo naafanimadiisa;
**s)** Cabashada shaqaalaha, soo jeedinta cabasho ama dacwado kale oo sharci ah oo ka dhan ah loo-shaqeeyihiisa, marka laga reebo cabashada loo arkay inay tahay mid mas'uuliyad darro aan sal laheyn; ama
**sh)** ka qaybgalka shaqo joojin sharci ah.

**Qodobka 118aad**
**Dheefta Duugta (Geerida)**

Haddii uu dhinto qof shaqaale ahi isagoo shaqeynayo, loo-shaqeeyuhu waa inuu siiyaa cidda dhaxalka shaqaalaha iska leh lacag duug ah oo ah kaalmada kharashka aaska.

**Qodobka 119aad**
**Shahaadada Adeegga**

1. Loo-shaqeeyuhu waa in uu siiyaa shaqaalaha shahaadada caddeynta adeegga marka ay dhammaato shaqada, haddii shaqada aanay ka yareyn afar (4) toddobaad oo xiriir ah.

2. Shahaadada adeegga ee lagu bixinayo si waafaqsan faqraddan, waa in ay ku jiraan arrimaha soo socda:

**b)** Magaca loo-shaqeeyaha iyo Cinwaankiisa Boostada;
**t)** Magaca shaqaalaha;
**j)** Jagada, shaqada shaqaalaha uu hayey;
**x)** Taariikhda ay billaabatay shaqo siinta shaqaalaha;
**kh)** Dabeecadda iyo goobta caadiga ah ee shaqadiisa;
**d)** Taariikhda ay joogsatay shaqada; iyo
**r)** Faahfaahintii kale ee lagu dari karo.

3. Si waafaqsan farqadda (1) ee sare ku xusan, loo-shaqeeyuhu kuma khasbana in uu shaqaalaha siiyo maragfur, tixraac ama shahaado ku saabsan dabeecadda iyo waxqabadka shaqaalaha

4. Loo-shaqeeyihii si ula kac ah ugu guuldarraysta in shaqaalaha uu siiyo shahaadada adeegga si waafaqsan farqadda (1) ee sare ku xusan, ama loo-shaqeeyihii ku qora shahaadada adeegga qoraal uu ogyahay in ay been tahay; loo-shaqeeyahaasi waxaa loo gudbinayaa hayadaha cadaallada.

**QEYBTA V**
**DARYEEL GAAR AH**

**CUTUBKA 18AAD**
**QODOBBADA GUUD**

**Qodobka 120aad**
**Qeexidda "Shaqada Habeenkii"**

Ujeeddada qaybtan, 'Shaqada Habeenkii' waxaa loolaa jeedaa shaqo kasta oo la qabto inta u dhaxaysa saacadaha 10:00 (Habeennimo) ilaa 6:00 (Subaxnimo.

**Qodobka 121aad**
**Shaqo Reebban (Mamnuuc)**

1. Waa sharci-darro in carruurta laga shaqeysiiyo habeenkii goobaha warshadaha, ganacsiga, beeraha iyo qeybaha kale oo kuwaas ku xiran, marka laga reebo meelaha ay xubnaha isku qoyska ah oo keliya ka shaqeeyaan.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

2. Mamnuucidani ma khuseyso shaqaalaha ay da'doodu gaartay 16 sano:

**b)** Haddii ay ka shaqeeyaan shaqo nooceedu yahay in habeen iyo maalinba la shaqeyn karo;

**t)** Haddii uu jiro heshiis ka reebaya in ay ka shaqeeyaan Hawlaha Caadiga ah ee la qabanayo.

3. Kiisas ka hoos yimaada Farqada 2aad (t) ee kor ku xusan loo-shaqeeyuhu waa inuu si dhakhso ah u wargeliyaa sarkaalka idman, isaga oo u sheegaya xaaladaha in lagu shaqeeyo ayna lama huraanka tahay, tirada carruurta shaqeysa, saacadaha la shaqeynayo iyo inta habeenkii shaqada lagu jiri karo;

4. Shaqada habeenkii waxa lagu xaqsiinayaa kororsiimo aan ka yareyn Shan iyo labaatan boqolkiiba 25% xuquuqda caadiga ah marka laga reebo shaqada caadiga ah ee kaltanka.

**Qodobka 122aad**
**Awoodaha Wasiirka ee la Xiriira Shaqada Habeenkii**

1. Iyada oo aan loo eegin faqradaha hoos yimaada qodobka 122, Wasiirka oo la tashanaya wakiilada ururrada shaqaalaha iyo looshaqeeyeyaasha waxa uu:

**b)** Yareyn karaa waqtiga habeenkii la shaqeeyo gaar ahaan meelaha cimiladoodalaga digo;

**t)** Fasaxayaa oo sheegayaa xaaladaha shaqosiinta carruurta ee habeenkii shaqaynaysa inta lagu gudo jiro xilliyada iyo xaaladaha marka ay shaqadu tahay mid ku xiran alaabooyinka ceeyriin oo howshooda socoto ama xaalado la mid ah, lana filan karo haddii la hakiyo in ay dhaqso u hallowdo, haddii tallaabadani ay lagama maarmaan u tahay badbaadinta hanti khasaaraysa.

## CUTUBKA 19AAD
## CARRUURTA

**Qodobka 123aad**
**Macnaha "Shaqosiin"**

1. Cutubkan erayga "Shaqosiin" waxaa loola jeedaa shaqo siinta carruurta oo ay ku jirto xaaladaha:

**b)** Carruurta la siinayo shaqo uu ku caawinayo qof kale kaaliye ahaan, shaqadaa soo ay ujeeddadeedu tahay in carruurtu lacag ku helaan;

**t)** Uu jiro adeeg heshiis shaqo bixin, adeeg bixiyahana uu yahay curruur, iyada oo caruurtana la siinayo shaqo sharciga waafaqsan, waana in uu jiraa qadar lacageed oo la isku afgarto inta ay doonto ha la ekaato.

**Qodobka 124aad**
**Carruur**

1. Wasaaradda oo la tashaneysa ururrada shaqaalaha iyo loo-shaqeeyeyaasha ayaa soo saareysa siyaasad iyo xeer-nidaamiyeyaal lagu faahfaahinaya noocyada shaqo ee khatarta ah ama



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

caafimaadka carruurta u daran ama shaqooyinka u baahan xoog ama feejignaan dheeraad ah, qeybtani waxaa looga baahan yahay in isbeddal lagu sameeyo, lana tilmaamo da'da ugu yar ee carruuri shaqeyn karto

2. Marka aan la hubin da'da Carruurta, waa in lagala tashadaa dhaqtar oo aqoon gaar ah u leh arrimaha da'da.

**Qodobka 125aad**
**Shaqosiinta Carruurta**

1. Carruurta da'doodu u dhaxayso 13 ilaa 15 sano oo aan weli dhammeystirin waxbarashadooda waajibka ah, waxaa loo oggolaan karaa in ay qabtaan shaqooyin fudud.

2. Shaqo siinta carruur da'doodu ka yartahay 18 sano, waa in uu lahaadaa awood jireed iyo mid maskaxeed.

3. Da'da ugu yar ee loo oggolaan karo nooc kasta oo shaqo siin ah ama shaqo nooceeda, duruufaha iyo xaaladaha lagu fulinayo, laga yaabo haddii lagu shaqeeyo inay halis galiyaan caafimaadka, badqabka ama qiyamka carruurta waa 17 sano.

4. Sida ku xusan faqrada (3) ee qodobkan, laga bilaabo da'da 16 sano, iyada oo shuruud looga dhigayo dhismaha jirka, caafimaadka, badqabka iyo niyadda carruurta si buuxdana loo ilaaliyo ayna helaan casharro ku filan ama tababar ku saabsan hawsha ay qabanayaan.

5. Qodobbada qaybtaani ma khuseeyaan shaqada ay qabtaan guud ahaan carruurta dugsiyada caadiga ah, barashada mihnadaha, xirfadaha iyo farsamooyinka, xarumaha kale ee tababarrada, ama hay'adaha ay ka shaqeeyaan carruurta ay da'doodu ka yartahay 15 jir, waana in la fuliyaa hawshaas si waafaqsan xeerkan, siyaasadaha iyo xeer-nidaamiyeyaasha shaqada, waxaana xuddun u ah in la helo:

**b)** Koorso waxbarasho ama tababar uu marka hore mas'uul ka yahay dugsi ama hay'ad tababar;
**t)** Barnaamij tababareed oo inta badan ama gebi ahaan ba la qabanayo, barnaamijkaas oo leh manhaj la aqoonsan yahay; ama
**j)** Barnaamij hagitaan ama hanuunin ah, kaas oo loogu talagalay in lagu fududeeyo xulashada mihnadda ama qaab kale oo tababar.

6. Xaddidaadda la xiriirta da'da oggolaashaha shaqada ma khuseeyaan qoysaska iyo meheradahooda yaryar ee soo saara waxyaalaha laga isticmaalo dalka, kuwaas oo aan si joogto ah u shaqo siinin shaqaale toos u shaqeeya.

7. Marka laga soo tago qodob kasta oo sharci qoran ah, qofna looma oggola inuu shaqo siiyo, isticmaalo, qoro, ama u bandhigo carruur hawl shaqo oo ay ka dhalaneyso si xun ugu shaqeysiga carruurta, ama shaqo ka soo horjeedda da'da ugu yar ee qawaaniinta shaqadu oggoshahay.

8. Wasaaradda oo la tashaneysa ururrada shaqaalaha iyo kuwa loo-shaqeeyeyaasha waxay soo saareysaa xeer-nidaamiye faahfaahinaya shaqo kasta, hawlaha ama heshiis kasta oo waxyeello u geysanaya caafimaadka, badqabka iyo qiyamka carruurta.

9. Qof kasta oo lagu eedeeyey in uu galay dembi shaqo siin carruureed sida ku xusan xeerkan,



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

waqtiga uu dembiga ka galayeyna carruurta la isku khilaafay da'da uu markaas jiray, maxkamadda awoodda u leh dhegeysiga dacwadda oo tixgelineysa xaaladahaas oo la xiriirta da'da carruurta. Maxkamadda ayaa mas'uul ka ah caddeynta da'da.

10. Sida ku cad xeerkan, xukun, go'aan ama amar maxkamadeed laguma burin karo caddeymo da'da qofka oo dib laga keenay kuwaas oo aan hore maxkamadi u caddeynin ama aan si sax loo sheegin.

11. Mar kasta oo ay su'aal ka timaaddo da' shaqaale carruur ah, caddeyn ku filanna loo heli kari waayo, sarkaal caafimaad ayaa go'aaminaya da'da shaqaalahaas carruurta, isaga oo adeegsanaya muuqaalkiisa/keeda, baaris caafimaad ama wixii macluumaad ah ee la heli karo, da'daas la go'aamiyey ayaana loo adeegsan doonaa ujeeddooyinka xeerkan, ilaa iyo inta laga soo caddeynayo wax taa ka duwan, go'aamintaas la sameeyey ayaana ahaan doonta da'da runta ah ee shaqaalaha carruurta ah.

12. Qofka shaqo siiya, ku lug yeesha, ama adeegsada carruur, si aan waafaqsaneyn xeerkan (qodobbada cutubkan), waxa uu galay dembi.

13. Qofkii u adeegsada carruur hawl kasta oo ka mid ah ku shaqeysashada ama si xun u shaqo siinta carruurta, waxaa lagu ciqaabayaa habraacayada ku xusan xeerka ciqaabta Soomaaliyeed iyo xeerarka kale ee Dalka.

14. Qofka la soo eedeeyay waxaa u furan in uu is difaaco haddii uu hayo sabab maangal ah oo uu ku rumeysto in carruurta la sheegayo ay da'doodu ka weyn tahay xadka da'da dacwada ku xusan.

15. Haddii carruurtu ku naafowdo, geeriyoodo ama uu la il darnaado dhaawac jireed oo soo gaaray sababo la xiriira loo-shaqeeyaha oo si xun ugu shaqeystay carruurta, kuna xadgudbay qodob ka mid ah cutubkan, marka lala akhriyo ciqaabo kale, waxaana la hor geynayaa maxkamadda awoodda u leh.

16. Loo-shaqeeye mas'uul kama aha ciqaabaha faqradda (15aad):

**b)** Haddii uu dhaco dhaawac caafimaad, kaas oo si toos ah ama si dadban aanu sababin ku xadgudubyo shaqo oo loo-shaqeeyuhu sameeyey;

**t)** Haddii dacwada lagu soo oogo sida xeerkan ku xusan, iyada oo ficilka ama dayaca sababay dhimashada ama dhaawaca, la caddeeyey in shaqaaluhu shaqada ka baxay ka hor inta aanu dhibku gaarin.

## Qodobka 126aad
## Diiwaanka Shaqo siinta Carruurta

1. Loo-shaqeeyahii shaqo siiya carruur waa in uu hayaa diiwaan ay ku jiraan xogta carruur kasta oo u shaqeeya, xogtaas oo ay ka mid tahay:

**b)** Da'da iyo goobta dhalashada;

**t)** Waqtiga soo gelidda iyo ka bixidda shaqada;

**j)** Xogihii kale ee faahfaahinaya xaaladda carruurta ee la heli karo.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

**Qodobka 127aad**
**Baaris Caafimaad**

1. Carruurta waa in aan la shaqo siin in ilaa loo-shaqeeyaha uu mariyo baaritaan caafimaad si loo xaqiijiyo in ay ku habboon yihiin dhammaan ama qaar ka mid ah waajibaadka loo-shaqaaleynayo.

2. Baaritaanka hore ee caafimaadka ka dib, loo-shaqeeyuhu waa inuu carruurta mariyaa baaritaan caafimaad sanadkiiba mar ilaa ay ka gaaraan 18 sano.

3. Saraakiisha adeegyada caafimaadka waa in ay sameeyaan baaritaan caafimaad oo kale, waana in ay bixiyaan caddaymaha baaritaankaas oo munaasab ah.

4. Marka la ogaado in carruurta caafimaad ahaan aanu awoodin in uu shaqadiisa sii wato, isla markaasba heshiiska shaqo siinta si toos ah ayuu uburayaa.

**CUTUBKA 20AAD**
**HAWEENKA**

**Qodobka 128aad**
**Shaqosiinta Haweenka**

1. Xaaladaha shaqosiinta haweenka waxaa lagu soo saarayaa siyaasado iyo xeer-nidaamiyeyaal faahfaahinaya, hase yeeshee, Wasiirka oo la tashanaya wakiillada ururada shaqaalaha iyo wakiillada loo-shaqeeyayaasha, wuxuu marka uu tixgeliyo xaalado gaarka ah iyo kuwa deg degga ah soo saari karaa:

**b)** Amarro ama habraacyo qeexaya nooca shaqooyinka ka reebban haweenka uurka leh iyo hooyooyinka nuujinaya;
**t)** Waxa uu nidaaminayaa xaaladaha goobta shaqada si loo ilaaliyo caafimaadka iyo fayoqab ka haweenka uurka leh iyo hooyooyinka nuujinaya iyo carruurtooda;
**j)** Waxa uu sheegayaa shuruudo gaar ah iyo xaalado ay haweenku ku shaqeyn karaan, iyada oo loo eegayo nooca dabeecaddooda, laakiin shuruudahan waa in aanay keeneyn takoor.

**Qodobka 129aad**
**Fasax Dhalmo**

1. Waxaa reeban in haweeney shaqaale ah shaqada looga saaro muddada ay uurka leedahay, ka dib markaay soo caddeeyaan dhaqaatiirtu, ayna la timaaddo warqadda caddeynta uurkeeda, marka laga reebo xaaladaha soo socda:

**b)** Haddii la xiro ama ay kacdo (Musallafto) goobta ay ka shaqeyneysay haweeneyda;
**t)** Haddii uu Dhammaado muddada heshiiskeedii shaqada.

2. Haweeney shaqaale ah waxaa ay xaq u leedahay marka ay la timaado warqad dhaqtareed oo caddeyneysa taariikhda la filayo in ay umusho, waxayna xaq uyeelaneysaa 14 toddobaad oo ah fasax dhalmo, iyadoo leh mushaarkeeda oo buuxa, fasaxaa soo ugu yaraan 6 todobaad oo ka



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

mid ah fasaxa dhalmada, ayna qaadanayso dhalmada ka hor, iyadoo ay u shaqeyneysay shaqo-bixiyaha ugu yaraan lix bilood oo xiriir ah, marka laga reebo jirro dhab ah oo dhaqaatiirtu xaqiijisay.

3. Marka uu dhammaado fasaxa dhalmada, haweenka shaqaalaha ah waxaa xaq loogu leeyahay in ay si dhaqso ah ugu soo noqdaan shaqadii ay hayeen markii ay qaadanayeen fasaxa dhalmada ka hor.

4. Haweeney Shaqaale ah waxa ay xaq u leedahay fasaxa dhalmo oo keliya iyadoo si qoraal ah ku soo wargelinaysa loo-shaqeeyaha muddo toddobo (7) maalmo shaqo gudahood, ka hor ama ka dib waqti laga yaabo inay macquul tahay xaaladaha ay rabto inay isku diyaariso fasaxa dhalmada waqti cayimaniyo muddada ay ku soo noqoneyso shaqada markaas kadib.

5. Haweeney Shaqaale ah waxa ay xaq u leedahay fasaxeeda sanadlaha ah oo ka baxsan fasaxa dhalmada

6. Shaqaalaha lab ka ah oo loo dhalay wuxuu xaq u leeyahay fasax muddo labo (2) toddobaad ah, oo mushaar buuxa ah, marka uu soo caddeeyo dhalmada xaaskiisa.

**Qodobka 130aad**
**Naas-Nuujinta**

Haweeney shaqaale ah oo ilma nuujinaysa waxa ay xaq u leedahay ugu badnaan hal sano oo ka dambaysa marka ay dhasho in labo waqti nuujiso maalintiiba (min hal saac). Nuujintana waxaa lagu tirinayaa saacadaha shaqada oo kale, xuquuqdeedana waa caadi.

## CUTUBKA 21AAD
## DADKA NAAFADA AH

**Qodobka 131aad**
**Xaqa Shaqada iyo Takoor La'aanta Shaqo siinta**

1. Dadka naafada ah waxay xaq u leeyihiin in ay shaqeystaan, iyadoo dadka kale si siman ula shaqeystaan, waxaana ka mid ah sidan; in fursadaha shaqada ay ula siman yihiin dadka kale, waxayna xaq u leeyihiin in ay si xor ah u doortaan xirfadooda shaqo oo ku habboon suuqa shaqada iyo bii'ada, waana in aan lagu takoorin shaqada naafonimadooda awgeed, ha ahaato waqtiga shaqo xayeysiinta, shaqo qoridda, inta ay socoto shaqadu ama marka ay dhamaato intaba.

2. Wasiirka, Guddomiyaha Guddiga sare Shaqada ee Federaalka, Agaasimaha Shaqo siinta, Agaasimaha Badqabaka iyo Caafimaadka iyo Diiwaanhayaha Ururrada Shaqaalaha iyo Ururrada loo-shaqeeyayaasha iyadoo la tixgelinaayo mid kasta awooddiisa shaqo ee xeerkan, waxaa waajib ku ah in ay ilaaliyaan, horumariyaan, xaqiijiyaan xaq u yeelashada shaqo siinta dadka naafada ah, iyaga oo qaadaya tallaabooyin munaasib ah sida:

**b)** In la ilaaliyo xuquuqda dadka naafada ah, iyagoo lala simayo dadka kale xagga shaqo siinta, duruufo shaqo oo ku habboon, fursado loo siman



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

yahay, xuquuq siman oo u dhiganta shaqada, badqabka iyo caafimaadka goobaha shaqada, in laga ilaaliyo xadgudubka iyo in si deg deg ah loo abaaro cabashadooda;

**t)** In la xaqiijiyo in dadka naafada ah ay awood u yeeshaan shaqo gudashadooda, xaqa ka mid noqoshada ururro shaqaale iyagoo dadka kale ula siman;

**j)** In ay awood u yeeshaan dadka naafada ah helitaanka tababbarrada guud ee farsamada gacanta, barnaamijyada hanuuninta farsamadaha, xirfadaha gaar ka ah, adeegga meelaynta shaqosiinta, iyo tababbarxirfad kobcin joogta ah si aqoontooda iyo xirfadahooda sare loo qaado;

**x)**In kor looqaado fursadaha shaqosiinta dadka naafada ah iyo hormarinta aqoontooda ku habboon suuqada shaqada iyo sidoo kale, in laga caawiyo, laguna ilaaliyo shaqada ay haystaan, loona sameeyo shaqo kucelin kuwooda shaqada laga saaray sababo aan macquul aheyn;

**kh)** In loo abuuro fursado ay iskood ugu shaqeysan karaan dadka naafada ah, loona diyaariyo jawi u suurtagalin kara abuurid aragti ganacsi cusub, sidoo kale in la hormariyo awoodda iskaashatooyinka jira, iyo ugu dambeyn in la gaarsiiyo in ay bilaabaan shaqo ganacsi oo iyaga u gaar ah;

**d)**In sare loo qaado fursadaha shaqosiinta ee dadka naafada ah hay'adahadawliga ah iyo kuwa gaarka loo leeyahay intaba, iyada oo loo marayosiyaasado iyo halbeegyo u adeegaya barnaamijyo si gaar ah loogu dhiiragaliyo dadka naafada ah;

**r)** In la xaqiijiyo in dadka naafada ahi ka helaan goobaha shaqada soo dhaweyn, dhiirigelin macquul ah iyo jawi shaqo oo ku habboon duruufahooda gaarka ah;

**s)** In kor loo qaado in dadka naafada ahi ay helaan waaya-aragnimo shaqo oo ku habboon suuqa shaqada furan;

**sh)** In kor loo qaado xirfadaha dadka naafada ah, mihnadaha dib u dhaqan celintooda, ku nagaashadooda shaqada iyo in ay dib ugu noqdaan barnaamijyada shaqo abuurka ee khuseeya dadka naafada ah;

**dh)** In la xaqiijiyo in dadkaas naafada ahi aan shaqada lagu bahdilin, laguna dhibin, laguna khasbin ama aan lagu waajib yeelin shaqo aysan qaban Karin duruufahooda gaarka ah darteed, ayna helaan xuquuq la mid ah sida shaqaalaha kale;

3. Qof kasta oo shaqaale naafo ah waa in aan lagu takoorin shaqada naafanimadiisa darteed, ha ahaato, xilliga xayeysiinta ama inta lagu guda jiro habraaca shaqo qorista,shaqo siinta, iyadoo la tixgelinaayo noocyada shaqo siinta, shaqo ka saarista iyo arrimo kasta oo khuseeya kobcinta xirfaddooda, badqabka iyo caafimaadka goobahooda shaqada.

**Qodobka 132aad**
**Hawlgelin Shaqo oo ku Habboon**

Loo-shaqeeye kasta waa inuu xaqiijiyaa in shaqaalaha naafada ah ee u shaqeeya in uu u dejiyo nooca iyo xaddiga shaqada naafonimadooda iyo in aan lagu meeleyn shaqo khatar ama halis ku ah nabadgelyadooda iyo caafimaadkooda intaba, iyadoo oo loo eegayo awooddooda wax qabad iyo xadka naafonimadooda.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

**Qodobka 133aad**
**Bixinta Taageerada Lagama Maarmaanka ah**

Loo-shaqeeye kasta waa inuu hubiyaa in shaqaalaha naafada ah la siiyo taageerada lagama maarmaanka u ah inuu waajibaadkiisa shaqo u guto si kalsooni oo degganaan leh.

## QEYBTA VI:
## CUDURRADA, DHAAWACYADA IYO SHILALKA MIHNADDA

### CUTUBKA 22AAD:
### MAAMULKA

**Qodobka 134aad**
**Agaasimaha**

1. Ujeeddooyinka qaybtan, "Agaasime" waxaa loola jeedaa Agaasimaha badqabka mihnadda iyo caafimaadka.

2. Awoodaha iyo howlaha soo socoda ayaa Agaasimahu leeyahay iyada oo la tixgelinayo arrimaha ku xusan qaybtan:

**b)** In uu diiwaangeliyo loo-shaqeeyayaasha;
**t)** Inuu kormeero hirgelinta qaybtan ee xeerkan;
**j)** In uu xaqiijiyo in dhammaan loo-shaqeeyayaashu ay hubiyaan shaqaalahooda ay ku jiraan ceymis;
**x)** In uu xaqiijiyo si munaasab ahna uu u ilaaliyo dadka naafada ah, loogana hortago shilalka mihnadda, dhaawacyada iyo cudurada si aanay u imaan wax sababaya naafanimo dheeri ah;
**kh)** In uu helo warbixinnada shilalka iyo in uu sameeyo baaritaanno iyo wareysiyo la xiriira qaabka shilalkaas;
**d)** In uu hubiyo shaqaalaha dhaawacmay in ay heleen magdhow si waafaqsan qodobbada xeerkan iyo xeer hoosaadyadiisa.

3. Agaasimaha waxaa ka caawinaya hirgelinta awooddiisa iyo fulinta waajibaadkiisa shaqo cid kasta oo loo arko in ay muhiim u tahay meelmarinta maamulka qodobada qaybtan ee ku xusan xeerkan.

**Qodobka 135aad**
**Diidmooyinka iyo Cabashooyinka Laga Qaato Go'aanada Agaasimaha**

1. Qofkasta oo ka cabanaya go'aanka Agaasimaha ee ku aaddan arrin kasta oo hoos timaada qeybtaan,waa in muddo lixdan (60) maalmo shaqo gudahooda uu ku soo gudbiyaa qoraal diidmo ah oo uu uga soo horjeedo go'aanka agaasimaha, diidmadaas oo faahfaahsanna uu u soo gudbiyaa Agaasimaha.

2. Agaasimaha waxaa looga baahan yahay, muddo afar iyo toban (14) maalmo shaqo gudahood ah marka ay diidmada soo gaarto ka dib:

**b)** In uu bixiyo qoraal jawaab u ah diidmada, isaga oo go'aankiisii hore beddelaya ama ku adkeysanaya, soona raacinaya sababaha uu u qaatay go'aanka



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

diidmada laga keenay;

**t)** In uu u diro nuqul ka mid ah warbixinta qof kasta oo uu saameeyey go'aanka.

3. Marka qof uu ka cawdo jawaabta Agaasimaha, waxa uu cabasho u qaadan karaan maxkamadda awoodda u leh muddo soddon (30) maalmo shaqo gudahood ah ka dib marka uu helo jawaabta Agaasimaha.

## CUTUBKA 23AAD
## WAAJIBAADKA AGAASIMAHA, LOO-SHAQEEYAHA, SHAQAALAHA EE KU AADDAN SHILALKA MIHNADDA, DHAAWACYADA IYO CUDURRADA SHAQADA

### Qodobka 136aad
### Waajibaadka Guud ee Loo-Shaqeeyaha

1. Marka la eego qeybtan arrimaha soo socda waa waajibaadka loo-shaqeeyaha:

**b)** In uu xaqiijiyo oo si munaasab u ilaaliyo dadka naafada ah, iyadoo laga hortagayo shilalka mihnadda, dhaawacyada iyo cudurrada shaqada si aanay u imaanin wax sababaya naafanimo dheeri ah;

**t)** Loo-shaqeeyayaasha wa in ay yeeshaan siyaasad caymis oo u gaar ah taas oo waafaqsan siyaasadda caymiska qaranka;

**j)** In uu iska diiwaangeliyo, uuna muddada Agaasimuhu u cayimay kusoo gudbiyo dhammaan faahfaahinta iyo macluumaadka la xiriira shaqadiisa, iyo wixii kale oo xog ah oo uu Agaasimuhu ka dalbado;

**x)** Muddo soddon (30) maalmo shaqo gudahood, haddii uu isbeddel ku yimaado macluumaadka iyo faahfaahintii la soo gudbiyey, waa in lagu soo wargeliyaa Agaasimaha;

**kh)** In la keydiyo dhammaaan xasuus reebka diiwaannada, qoraallada kale ee dakhliga iyo xogaha shaqaalaha ugu yaraan muddo lix (6) sano oo ka bilaabaneysa taariikhdii la diiwaangeliyey xogtii ugu dambeysay, waxaana loogu soo saari karaa dukumintiyada kor ku xusan dalabka Agaasimaha si loo baaro, loona diiwaangeliyo ama dib loogu soo saaro waqti dambe, haddii loo baahdo;

**d)** Waa in Agaasimaha lagu wargeliyo sida ugu dhaqsiyaha badan muddo toddoba (7) maalmo shaqo gudahood ka dib shil dhaco ama cudurro shaqo la ogaado in qof shaqaale ah uu ku dhaawacmay shil ama ka dhashay goobta cudurro mihnadeed;

**r)** Waa in la siiyaa shaqaalaha iyo ku tiirsanayaasha la nool nuqul ka mid ah ogeysiiska shilka ee loo-shaqeeyuhu u soo gudbiyey Agaasimaha, haddii ay dalbadaan, iyada oo loo eegayo dalabka magdhawga shaqaalaha ama ku tiirsanayaashooda;

**s)** Muddo toddoba (7) maalmo shaqo gudahood ka dib marka ay timaado warbixinta caafimaad ama dukuminti kale ama macluumaad la xiriira sheegashada magdhawga, warbixinta, ama macluumaadka waa in loo gudbiyaa Agaasimaha;

**sh)** Waa in la xalliyo magdhow sheegasho kasta oo uu ku soo oogo agaasimuhu.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

2. Loo-shaqeeyihii ku guuldarreysta ama dayaca inuu fuliyo mid ka mid ah waajibaadyada, waxaa lagu ciqaabayaa habraacyada ku xusan xeerka ciqaabta Soomaaliyeed iyo xeerarka kale ee Dalka.

## Qodobka 137aad
## Waajibaadka Guud ee Shaqaalaha

1. Qeybtan soo socota waxa ay tilmaamaysaa waajibaadka shaqaalaha:
   **b)** In si taxadir iyo feejignaan leh looga shaqeeyo goobta shaqada, iyo in la hubiyo in aanu qofna sameyn habdhaqan naftiisa ama qof kale oo jooga goobta shaqada u keeni kara halis dhaawac ama mid dhimasho;
   **t)** In shil kasta oo dhacaya inta lagu jiro shaqada loogu sheego loo-shaqeeyaha si af iyo qoraalba ah, iyo in Agaasimaha, saldhiga booliska degmada loo diro nuqul qoraal ah iyo af lagu wargaliyo muddo afar iyo labaatan (24) saac gudahood ah marka uu shilku yahay dhimasho;
   **j)** Marka shil, dhaawaca ama xanuun dhacay looga warbixinayo loo-shaqeeyaha ama Agaasimaha, waa in warbixinta lagu daraa macluumaadka iyo dukumintiyada lagama-maarmaanka u ah ama ay dalbadaan loo-shaqeeyaha ama Agaasimaha;
   **x)** Marka uu qofku dalbado ama helo magdhow, haddii Agaasimaha ama loo-shaqeeyuhu uu codsado, waa in qofkaasi laftiisu tagaa goorta iyo goobta caafimaad ee ku cayiman warqadda ogeysiiska, si loogu sameeyo baaris caafimaad, taas oo uu sameynayo xeeldheere caafimaad oo uu tilmaamay Agaasimuhu ama loo-shaqeeyuhu, sidoo kale uu oggolaaday shaqaaluhu ama wakiilkiisa; iyo
   **kh)** Waa in shaqaaluhu uu soo codsado magdhow si waafaqsan xeerkan muddo 12 bilood gudahood ah taariikhda shil ama dhaawac dhacay ama xanuun shaqadu keentay ka dib; haddii uu shaqaaluhu geeriyoodo, mas'uuliyaddu waxa ay ku wareegaysaa qofka wakiilka u ah shaqaalaha.

2. Sida uu dhigayo xeerkan xuquuqaha waa ay laalmayaan, haddii shil, dhaawaca ama xanuun aan lagu wargelin loo-shaqeeyaha 12 bilood gudahood taariikhda shilka, dhaawaca ama xanuunku dhacay ka dib.

3. Ku soo wargelin la'aanta loo-shaqeeyaha shil ama dhaawac dhacay ama xanuun shaqadu keentay, ma baabi'ineyso magdhawga laga rabo loo-shaqeeyaha haddii ay caddaato in loo-shaqeeyuhu uu ogaaday dhacdadaas, muddo 12 bilood ka hor si kastaba ha ku soo gaartee.

4. Ku wargelin la'aanta loo-shaqeeyaha shil ama dhaawac dhacay ama xanuun shaqadu keentay, si kasta oo khaldan oo wax loogu soo sheego ma baabi'ineyso magdhawga laga rabo mar:
   **b)** Haddii loo-shaqeeyaha aanu dembi weyn ku laheyn wargelin la'aanta, khaladka ama saxnaan la'aanta wargelinta, haddiiba uun loo sheegay, sax iyo khalad wax ay doontaba ha ahaatee ama dib laga saxay;
   **t)** Haddii wargelin la'aanta, khaladka ama saxnaan la'aanta warbixintu ay aheyd mid lama filaan ah ama ay sabab u aheyd maqnaasho shaqaaluhu ka maqnaa dalka.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

**Qodobka 138aad**
**Waajibaadka Agaasimaha**

1. Haddii loo-shaqeeyuhu uu ku guul darraysto inuu soo sheego shil ama dhaawac dhacay ama xanuun shaqadu keentay ama macluumaadkii uu Agaasimuhu ka codsaday, markaa Agaasimuhu wuxuu:

**b)** Sameynayaa baaritaan, waxana bixinaya kharashka baaritaanka loo- shaqeeyaha, taas oo ah qaan lagu lahaa;
**t)** Loo-shaqeeyaha waxaa lagu soo rogayaa ganaax.

2. Ka dib markii ay soo gaartay wargelinta shil ama dhaawac dhacay ama xanuun shaqadu keentay ama uu ogaado in qof shaqaale ah shil ku dhaawacmay ama cudurrada mihnadda, Agaasimaha waxaa looga baahan yahay inuu sameeyo baaritaannada lagama maarmaanka ah si uu u go'aamiyo wixii sheegasho ama mas'uuliyad ah ee waafaqsan xeerkan.

3. Marka uu Agaasimuhu ansixiyo wixii sheegasho ah ee laga rabo loo-shaqeeyaha ama caymiyaha, waa in sheegashadaas uu ku soo oogo loo-shaqeeyaha ama caymiyaha, si ay u xalliyaan muddo 90 maalmo shaqo gudahood ah.

4. Agaasimaha ayey waajib ku tahay, in muddo soddon (30) maalmo shaqo gudahood uu lacagta u qabto, kuna siiyo lacagtiisa shaqaalahii soo sheegtay ama ehelkiisa.

5. Loo-shaqeeyihii ama caymiyihii bixin waaya magdhowga laga dalbaday waxaa lagu ciqaabayaa habraacyada ku xusan xeerka ciqaabta Soomaaliyeed iyo xeerarka kale ee Dalka.

**Qodobka 139aad**
**Daryeel Caafimaad**

1. Loo-shaqeeyaha waxa waajib ku ah in uu keeno, hagaajiyo qalabka iyo adeegyada loogu talagalay gargaarka deg degga ah ee shaqaalihiisa, si loo adeegsado haddii uu dhaco shil.

2. Loo-shaqeeye kasta oo ku guuldareysta in uu u hogaansamo faqradda 1aad ee qodobkan waxa uu galay dembi.

3. Wasiirka marka uu la tashado Agaasimaha, wuxuu ogeysiis ku soo gudbinayaa faafinta rasmiga ah, marka laga reebo in loo-shaqeeyaha ama koox loo-shaqeeyayaal ahi ay qeybtan nidaamyo kale oo ay u sameysteen xallinta shilalka si waafaqsan xeerkan.

4. Haddii shaqaale uu ku dhaawacmo shil ama xanuunka ku sii siyaado, uuna u baahan yahay in la geeyo isbitaal uu ka helo adeeg caafimaad ama laga wareejinayo isbitaal oo la geynayo xarun caafimaad oo ku taal deegaanka shaqaalaha, loo-shaqeeyuhu waa inuu keenaa gaadiidkii lagu geyn lahaa.

5. Loo-shaqeeyaha waa inuu bixiyaa dhammaan kharashaadka lagu soo dallaco shaqaalaha shil ama dhaawac ku dhacay ama xanuun shaqadu keentay, kharashaadkaas oo ay ka mid noqon karaan:

**b)** Daawaynta ilkaha, caafimaadka, qalliinka ama daawada isbitaalka;
**t)** Adeegyada kalkaaliyaha xirfadlaha ah;
**j)** Daawada iyo dharka qalliinka;



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

**x)** Socdaalka, nolol maalmeedka iyo waxyaabaha la xiriira safarka caafimaad ee shaqaalaha, safarkaas oo loo aadayo meel ka mid ah dalka, halkaas oo dhaqtarkiisu kula taliyey in uu isku soo daweeyo ayna joogaan xeeldheerayaal caafimaad;

**kh)** Keenidda, Hagaajinta, dayactirka iyo beddelidda agabka macmalka ah, ulaha cuuryaamiinta, iyo qalabka kale ee ay isticmaalaan dadka jir ahaan naafada ah.

6. Waxyeello kasta oo soo gaarta qalabka ama aaladaha ku qeexan faqrada 5[aad] ee xarafka (*kh*) waxaa loo tixgelinayaa inuu yahay dhaawac.

6. Xeeldheere caafimaad ee baaraya Shaqaalaha Dhaawacmay, waa in muddo afar iyo toban (14) maalmo shaqo gudahood ah baaritaanka koowaad lagu sameeyo shaqaalaha shil ku dhaawacmay. Haddii la ogaado in cudur ka dhashay shaqada Muddo (14) afar iyo toban maalmo shaqo gudahood, waa in xeeldheere caafimaad warbixin caafimaad u soo gudbiyaa caymiskiisa, loo-shaqeeyaha iyo Agaasimaha.

## CUTUBKA 24AAD
## MAGDHAWGA, DEMBIYADA, SHURUUCDA GAARKA AH IYO XEER-NIDAAMIYEYAASHA

### Qodobka 140aad
### Xaqa Magdhowga

1. Loo-shaqeeye kasta waa inuu bixiyaa magdhow si waafaqsan qodobbada xeerkan, haddii shaqaale uu ku dhaawacmo ama uu cudur shaqada ka dhashay waxyeelo ka soo gaartay inta uu shaqada ku jiray.

2. Shaqaale xaq uma laha magdhow, haddii shil, dhaawac ku dhacay, ama cudur shaqadu keentay aanay ka dhalaneyn naafanimo halis ah ama dhimasho, shilkaas oo ku yimid dhaqan xumo iyo ula kac iyo bareer qofka shaqaalaha ahi uu sameeyey.

3. Shil mihnadeed ama cudur ka dhasha shaqo, kaas oo keena naafanimo halis ah ama dhimasho ku timaadda shaqaalaha, waxaa loo qaadanayaa mid ka dhashay shaqada, haddii shilku yahay mid ka yimid ficil uu sameeyay qofka shaqaalaha ah, isaga oo ku dadaalaya danta shaqada ee loo-shaqeeyaha, iyada oo aan loo eegeyn xaaladda uu ku sugnaa, waqtigii uu shilku dhacayey sida:

**b)** Ku xadgudbid sharci ama wacyigelin uu bixiyey loo-shaqeeyaha ama wakiilkiisa;

**t)** Isaga oo aan ku socon tilmaamaha loo-shaqeeyaha.

4. Muddada qofka shaqaalaha ah loo sii wado ama laga soo wado goobta shaqada,iyada oo lagu qaadayo gaadiid shirkaddu leedahay oo uu amray loo-shaqeeyuhu, wixii shil ah ee yimaada waa kuwa la mid ah kuwa ka dhaca goobta shaqada.

5. Dhaawac kasta oo natiijadiisu noqoto naafonimo daran, haddii ay ku keeneyso shaqaalaha naafanimo joogta ah oo gaareysa boqolkiiba afartan (40%) ama kabadan.

6. Agaasimuhu wuxuu diidi karaa in magdhow la siiyo shaqaale isagoo cuskanaya xeerkan haddii:



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

b) Waqti kasta oo Shaqaale laga ogaaday in uu si bareer ah ama been abuurah ugu soo bandhigo loo-shaqeeyaha in uu ku dhacay dhaawac halis ah ama cudur shaqada ka soo gaaray ama cudurro kale oo halis ah;

t) Ay u caddaatay Agaasimaha, in shaqaale uu qarsado cudur ama uu diido in gargaar caafimaad uu soo dalbado ama loo fidiyo dhaawac ama cudur daba dheeraaday awgiis, xaalkana uu gaaray heer dhimasho ama in la gooyo xubin ka mid ah jirkiisa oo ay keentay diidmada ama dayacaadda shaqaalaha, dhaawacaas ama cudurkaasi ha ahaado mid shilka shaqada sababay ama mid ka hor jiray.

7. Haddii, la soo sheegto magdhow si waafaqsan xeerkan, ayna muuqato in heshiiska shaqada ama farsamo baradku uu yahay mid aan ansax aheyn, waxaa suurtagal ah in Agaasimuhu uu ansixiyo sheegashada magdhowga sida haddii heshiisku uu ansax ahaa goortii shilka dhacay

8. Iyada oo loo eegin qodobada ka soo horjeeda ama xeer kasta oo jira, magdhowgu waa inaanu noqon:

b) Mid la qoondeeyay ama la ballan qaaday;

t) Mid awood loo adeegsado ama nooc kasta oo fulin ah iyada oo la raacayo xukun ama amar maxkamadeed;

j) Mid looga bixinayodeyn lagu lahaa qofka xaqa u leh magdhowga.

9. Qodob kasta oo heshiis ka mid ah, kaas oo dhigaya in shaqaale lagu magacaabo, ama u muuqda in lagu magacaabo, lagu ruqseeyo ama u muuqda in la ruqseenayo ama la doonayo in uu ka tanaasulo xaq uu lahaa marka loo eego xeerkan waa mid aan ansax aheyn.

10. Magdhaw dhimasho shaqaale oo lagu muteystay si waafaqsan xeerkan, looma siin karo u-hare (survivor) qeyb ka mid ah xuquuq mushaar ama hanti uu ku lahaa shirkadda.

## Qodobka 141aad
## Xad-Gudubyada iyo Ciqaabaha

1. Si waafaqsan xeerkan, qof kasta oo abaabula sheegasho magdhow, ama jawaab celin, ogeysiis, warbixin ama qoraal kasta oo lagu soo gudbiyey ama lagu soo bandhigay iyadoo la adeegsanayo xeerkan oo si ula-kac ah u sameeya ama sababa in la sameeyo qoraal been abuur ah iyadoo loola jeedo in dhaqaale lagu helo, waxa uu galay dembi.

2. Qofkii lagu helo dembiga ku xusan faqradda 1[aad] ee qodobkan, iyada oo loo cuskanayo xeerkan oo aan loo heyn ciqaab kale,waxaa lagu ciqaabayaa habraacyada ku xusan xeerka ciqaabta Soomaaliyeed iyo xeerarka kale ee Dalka.

3. Qof kasta oo laga doonayo in uu soo gudbiyo macluumaad looga dalbaday si waafaqsan faqradda 1[aad] ee qodobkan ama xeer-nidaamiyaashiisa qofkaas oo:

b) Ku guuldarreysta in uu ku soo gudbiyo waqtiga loo cayimay dhexdiisa;

t) Dalbada ama sababa in loo dalbo xog, taas oo uu og yahay in ay been tahay;

j) ku guuldarreysta markii laga dalbo in uu bixiyo macluumaad ama sharaxaad la xiriirta xuquuqda uu dalbanayo, waxaa lagu ciqaabayaa habraacyada ku xusan xeerka ciqaabta Soomaaliyeed iyo xeerarka kale ee Dalka.

x) haddii sharci-jebin qofka lagu xukumay uu ku sii socdo waxa uu noqonayaa



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

dembi kale oo lagu ciqaabayo iyada oo lagu ridayo ganaax lacageed oo aan ka badneyn US$ 25 maalin kasta oo xadgudubku sii socdaba

3. Haddii fal dembiyeedka lagu xukumay qodobkan ay tahay Shirkad ama Guddoomiye, Agaasime kasta ama Sarkaal kasta oo ka tirsan shirkadda, waxay galayaan dembi la mid ah kii uu galay qofkii la xukumay, ilaa inta uu Qofkaasi soo caddeeyo in falka ama ficilka sababay dembiga uu ku dhacay ogaal ama oggolaansho la'aan haysata qofka.

## Qodobka 142aad
## Ansixinta Shuruucda Gaarka ah, Xeer-nidaamiyayaasha La-xiriira Magdhawga Shilalka Mihnadaha, Dhaawacyada iyo Cudurrada Shaqada

1. Wasaaradda oo la tashanayso wakiillada ururrada shaqaalaha iyo kuwa loo-shaqeeyayaasha waxa ay sameyneysaa siyaasado, xeer-nidaamiyeyaal iyo qawaaniin kale oo lagu dhaqayo shilalka mihnadaha, dhaawacyada dhaca, cudurrada shaqadu keentay oo ay ka mid yihiin kuwa soo socda:

**b)** Go'aaminta heerka dhaawaca;

**t)** Shilalka mihnadaha ee dhaca inta uu shaqaaluhu ku jiro tababarka ama adeegyada gurmadka degdegga ah;

**j)** Shilalka mihnadaha, dhaawacyada dhaca, cudurrada shaqadu keentay marka shaqaale loo diro meel dalka ka baxsan;

**x)** Habka xisaabinta dakhliga shaqaalaha;

**kh)** Go'aaminta nooca ama xaddiga magdhowga, oo ay ka mid yihiin:

- i. Magdhawga shaqaale u baahan gargaar joogto ah;
- ii. Magdhawga ama magdhaw waqti ku eg oo la siinayo qof naafo buuxa ama bar naafo ah;
- iii. Magdhawga naafanimada joogtada ah;
- iv. Magdhawga shaqaale kal hore qaatay magdhaw, iyo
- v. Xaddiga magdhawga haddii dhimasho dhacdo;

**d)** Habka bixinta magdhowga; iyo

**r)** Sheegashooyin la xiriira dhinaca saddexaad.

2. Wasiirku, isagoo la tashanaayo wakiillada ururrada shaqaalaha iyo kuwa loo-shaqeeyayaasha waxa uu abuuri karaa habraacyo ujeeddadeedu tahay in ay si wanaagsan u dhaqan galaan qodobbada xeerkan, iyada oo aan wax u dhimeyn guud ahaan awoodda kor ku xusan, wasiirku waxa uu abuuri doonaa habraacyo:

**b)** Jideynayaa hannaan, qaabab iyo khidmado;

**t)** Jideynayaa wax kasta oo ay tahay in lagu qoro xeerkan;

**j)** Laga rabo loo-shaqeeyayaasha iyo ceymisyada dalka ka howlgala gaar ahaan kuwa loo-shaqeeyayaasha ka ceymiya qaamaha uu xeerkani tilmaamayo in ay si xilliyeysan u bixiyaan qaamaha iyo wixii kale ee daryeel ah ee Wasiirku u arko lama huraan, waana in ay muddo go'an u yeelaan bixinta qaamahaas.

## QEYBTA VII
## XIRIIRKA SHAQO WADAREEDKA

## CUTUBKA 25AAD
## XORRIYADDA KU BIIRISTA

### Qodobka 143aad
### Xaqa iyo Xorriyadda ku Biirista Urrurada Shaqaalaha

1. Waa sharci darro in laga qayb qaato fal kasta oo midab takoor ah ama ficil kasta oo xakameynaya xuquuqda xorriyadda ku biirista, gaar ahaan:
   **b)** Shaqosiin shaqaale oo shuruud looga dhigayo in shaqaalahaasi aanu ku biiri karin urur shaqaale ama aanu ka tegi karin xubinnimada urur shaqaale;
   **t)** Shaqa ka saaris ama si kale u dhibaateyn shaqaale, iyada oo sabab u tahayin uu xubin ka yahay urur shaqaale ama sababo la xiriira ka qaybgalka hawlaha urur shaqaale.

2. Waa sharci darro in loo-shaqeeye uu ku lug yeesho ficil kasta oo faragelin ah, oo ay ka mid tahay faragelin maaliyadeed ee abuurid ama hawlgelin urur shaqaale.

3. Shaqaale kasta waxa uu xaq u leeyahay:
   **b)** Ka qayb qaadashada sameynta urur shaqaale ama xiriirka ururrada shaqaalaha;
   **t)** Ku biirid urur shaqaale;
   **j)** Ka tegid urur shaqaale.

4. Xubin kasta oo ka tirsan urur shaqaale waxay xaq u leedahay iyadoo laga duulayo dastuurka ururka:
   **b)** Ka qayb qaadashada hawlaha sharciga ah;
   **t)** Ka qayb-galka doorashooyinka mas'uuliyiinta iyo wakiilladooda;
   **j)** Isu soo taagid doorasho iyo magacaabid uu u qalmo sida sarkaal, haddii la doorto ama la magacaabana uu xafiiska qabto;
   **x)** Isu soo taagid doorasho ama raadin magacaabid in uu wakiilka noqdo urur shaqaale iyo, haddii la doorto ama la magacaabana, uu fuliyo shaqooyinka wakiil urur shaqaale si waafaqsan qodobbada xeerkan ama qodobbada heshiis wadareedka.

5. Xubin kasta oo ka tirsan urur shaqaale oo xubin ka ah xiriirka ururradashaqaalaha oo ku xiran si waafaqasan dastuurka xiriirka guud wuxuu xaq u leeyahay:
   **b)** In uu ka qayb qaato hawlo sharci ah;
   **t)** In uu ka qayb-galo doorashooyin ka saraakiisha ama wakiilladooda;
   **j)** In uu isu soo taago doorasho ama uu raadiyo magacaabis xafiis ama sarkaal, haddii loo doorto ama loo magacaabo, wuxuu qabanayaa xafiiska;
   **x)** In uu isu soo taago doorasho ama uu raadiyo magacaabis isagoo wakiil ka ah xiriirka, haddii loo doorto ama loo magacaabo, wuxuu qabanayaa hawlaha wakiilnimada si waafaqsan qodobada xeerkan ama heshiis wadareedka.

**Qodobka 144aad**
**Ilaalinta Xuquuqda Shaqaalaha**

1. Dowladda waa in ay ilaaliso dhammaan shaqaalaha noocyadooda kala duwan iyo dabaqaadda xeerkan haday yihiin ururada, kuwa fulinta, aqoonyahanada ama caaqilada, lataliyaasha iyo dadka muruq maalka ah, sidoo kale waa in ay sare u qaado xaaladaha shaqaalaha u ogolaanaya in ay si wax ku ool ah u raadsadaan xuquuqdooda iyo in ay fuliyaan waajibaadka lagu sheegay Xeerkan.

2. Xuquuqda shaqaalaha ee hoos imaanaysa qodobada sharcigan lama inkiri karo, lama beenin karo, lagumana xadidi karo heshiis. Heshiis kasta oo ka hor imaanaya sharcigan waa waxba kama jiraan(null and void), marka loo eego faa'iido kasta oo la siiyo shaqaalaha ama heshiis uu ku qaato taas oo aad u anfacaysa ama faa'iido u leh shaqaalaha waxay mudnaan ka yeelanaysaa sharcigan.

3. Faqradda 2aad ee qodobkan kama hor istaagayso dhinacyada in ay ka doodaan oo ay heshiis ka gaaraan sidii loo xallin lahaa dooddaas. Waxaana lagu go'aaminayaa iyada oo loo eegayo mabaadi'ida sinnaanta, mabda'a guud ee sharciga shaqaalaha caalamiga, mabaadi'ida caadiga ah ee aan ka hor imaanaynin xeerkan, kiis hore loo xaliyay iyo dhaqanka iyo caadada.

**Qodobka 145aad**
**Xaqa iyo Xorriyadda ku Biirista Urrurada loo-shaqeeyeyaasha**

1. Loo-shaqeeye kasta waxa uu xaq u leeyahay:

**b)** In uu ka qayb qaato sameynta urur loo-shaqeeye ama xiriirka guud eeloo-shaqeeyeyaasha;

**t)** Sida uu qabo dastuurkoodu, in uu ku biiro ururrada loo-shaqeeyeyaasha ama xiriirka guud loo-shaqeeyaayaasha.

2. Xubin kasta oo ka mid ah ururrada loo-shaqeeyeyaasha waxa uu xaq u leeyahay sida uu qabo dastuurka ururka, in:

**b)** Uu ka qayb qaato hawlahooda sharciga ah;

**t)** Uu Kaqayb qaaato doorashada mid ka mid ah xubnaha ururka ama mas'uuliintiisa sar sare;

**j)** Uu u istaagto doorashada ama uu raadsado magacaabis sida xafiis ama sarkaal, haddii la doorto ama loo magacaabana, uu qabto xafiiska;

**x)** In uu isu soo taago doorasho ama uu raadiyo magacaabis isagoo wakiil ka ah xiriirka loo-shaqeeyaha, haddii loo doorto ama loo magacaabo, wuxuu qabanayaa hawlaha wakiilnimada si waafaqsan qodobada xeerkan ama heshiis wadareedka.

3. Loo-shaqeeye kasta, xubin haka ahaado ama aanu ka ahaanin ururrada loo-shaqeeyeyaasha, kaas oo isna xubin ka ah xiriirka guud ee loo-shaqeeyeyaasha, waxa uu xaq u leeyahay sida uu qabo dastuurka xiriirka guud in:

**b)** Uu ka qayb qaato hawlahooda sharciga ah;

**t)** Uu ka qayb qaaato doorashada mid ka mid ah shaqaalihiisa ama mas'uuliintiisa sar sare;

**j)** In uu isu taago doorasho ama uu raadiyo in loo magacaabo sida xafiis ama



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

mas'uuliintiisa sar sare ee ururka;

*x)* In uu isu soo taago doorasho ama uu u qalmo magacaabis isagoo wakiil ka ah xiriirka loo-shaqeeyaha, haddii loo doorto ama loo magacaabo, wuxuu qabanayaa hawlaha wakiilnimada si waafaqsan qodobada xeerkan ama heshiis wadareedka.

4. Loo-shaqeeye ka shaqeeya adeeg sharci ayaa laga yaabaa inuu adeegsado xaqa uu u leeyahay inuu u istaago doorasho oo uu xil ka qabto urur loo-shaqeeye ama xiriirka guud ee loo-shaqeeyeyaasha isaga oo wakiil ka ah.

**Qodobka 146aad**
**Ilaalinta Xuquuqda Loo-shaqeeyeyaasha**

1. Loo-shaqeeye kasta, waa sharci darro in lagu takooro isagoo adeegsanaya xuquuq kasta oo uu siinayo xeerkan

2. Waxaa sharci darro ah in lagu kaco fal ama lagu handado in uu sameeyo mid kamid ah arrimahan soo socda:

**b)** In laga dalbado, lagu amro loo-shaqeeye in aanu xubin ka noqon ama uu ka tanaasulo xubinimada urur loo-shaqeeye;

**t)** Ka horistaagid loo-shaqeeye adeegsiga xaquuqdiisa ama dacwo khuseysa in uuisticmaalo xuquuqdiisa si waafaqsan xeerkan;

j) Si kastaba in lagu duudsiiyo loo-shaqeeye:

i. Sababo la xiriira xubinnimada urur loo-shaqeeye ee mar hore, hadda, ama la filayo in uu ku biiro;

ii. In uu ka qayb qaato sameynta ama hawlaha sharciga ah ee urur loo-shaqeeye;

iii. In uu adeegsado xuquuq kasta oo la siiyey, ama ka qayb qaadashada dacwo ku xusan xeerkan;

iv. In uu ku guul darreysto ama diido wax loo-shaqeeyuhu aanu sharci u laheyn in uu sameeyo.

3. Waa sharci darro in wax la siiyo ama loo ballan qaado dan gaar ah si looga faa'iideysto (Sandareerto) loo-shaqeeye, iyada oo looga beddelanayo in uu ka tanaasulo xuquuq uu leeyahay ama in aanu ka qayb qaadan dacwooyinka xeerkan loogu oggolaaday

4. Faqradda 3aad ee qodobkan kama hor istaagayso dhinacyada in ay ka doodaan oo ay heshiis ka gaaraan sidii loo xallin lahaa dooddaas.

**Qodobka 147aad**
**Xuquuqda Guud iyo Waajibaadka Ururrada Shaqaalaha, Ururrada Loo-shaqeeyeyaasha iyo Xiriirka Ururada Shaqaalaha/loo-shaqeeyeyaasha**

1. Ururka shaqaalaha iyo ururrada loo-shaqeeyuhu waxa ay leeyihiin xuquuqahaan soo socda:

**b)** In la galo heshiis shakhsi ama mid wadareed, iyada oo loo raacayo xaaladaha shaqada, si ay u bariyeelaan, una xoojiyaan xuquuqaha ku jira



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

heshiiska iyo in ay qaadaan ficil kasta oo sharci ah oo ka dhasha heshiisyadaas si waafaqsan xeerkan;

**t)** In lagu wargeliyo hay'adaha awoodda u leh dhammaan ficillada keeni kara nacaybka danaha guud ee mihnadaha shaqaalaha uu matalo;

**j)** In la helo xuquuqda lahaanshaha hantida guurtada iyo ma guurtada ah si loogu isticmaalo oo kaliya ujeeddooyinka loo aasaasay ururrada shaqaalaha ama loo-shaqeeyeyaasha;

**x)** In la saameeyo tallaabo kasta oo sharci ah oo lagu gaarayo himilooyinka iyo ujeeddooyinka loo aasaasay.

2. Ururrada shaqaalaha, iyo ururrada loo-shaqeeyeyaasha iyo Xirirka Ururada Shaqaalaha/ loo-shaqeeyaha waxa ay leeyihiin waajibaadyada soo socda:

**b)** In lagu wargeliyo Diiwaanhayaha Shaqaalaha iyo Ururradaloo-shaqeeyayaasha muddo toban (10) maalmo shaqo gudahood dhammaan isbeddelada xubinnimada guddiga maamulka iyo wixii wax-ka-beddel ah ee dastuurkooda ama xeer-hoosaadkooda oo leh nuqullo rasmi ah oo caddaynaya dukumeentiga khuseeya;

**t)** In lagu wargeliyo Diiwaanhayaha la soo sheegay sanad kasta tirada xubnaha cusub ee ku soo biiray iyo kuwa ka baxay;

**j)** In la fuliyo waajibaad kasta ee uu soo rogay xeerkan, xeer-nidaamiyayaasha xeerkan ama qaanuun kale, kuwaas oo waajibaadkooduaanu farageline yn maamulka gudaha iyo hawlaha ururrada shaqaalaha, ururrada loo-shaqeeyeyaasha iyo xiriirka ururada shaqaalaha/loo-shaqeeyeyaasha

## Qodobka 148aad
## Madax Bannaani

**1.** Urur kasta oo shaqaale, loo-shaqeeye iyo xiriirka ururka shaqaalaha/loo-shaqeeye waxa ay xaq ugu leeyihiin xeerkan gudihiisa:

**b)** In uu sameysto dastuurkiisa iyo xeerarkiisa,

**t)** In uu wakiiladiisa si xorriyad buuxda ku doorto;

**j)**Inay nidaamiyaan maamulkooda iyo hawlahooda iyada oo la raacayo mabaadi'ida guud ee xeerkan;

**x)** Dejinta barnaamijyadooda;

**kh)** Ka qayb qaadashada sameynta xiriirka guud ee ururrada shaqaalaha ama xiriirka guud ururrada loo-shaqeeyeyaasha;

**d)** In uu ku biiro xiriirka guud ee ururrada shaqaalaha ama xiriirka guud ururrada loo-shaqeeyaasha sida uu qabo dastuurkooda, iyo in ay ka qayb qaataan hawlaha sharciga ah;

**r)** Ku biirista, iyo ka qaybgalka arrimaha urur shaqaale heer gobaleed iyo kuwa caalami ah, urur loo-shaqeeyeyaal kasta oo caalami ah, ururrada shaqaalaha adduunka sida ugu habboon, iyo in gacan laga geysto ama laga helo kaalmo dhaqaale oo ka timaadda ama la siiyo ururradan.

**2.** Heshiis kasta oo shaqo siineed ama wadareed, haddii uu dhammaado ka hor ama ka dib dhaqangalka xeerkan, kaas oo ka hor imaanaya ama xaddidaya qodob ka mid ah qaybtan, waa mid aan sharci aheyn, ilaa iyo inta qodobada heshiiskaas si muuqata uu u oggol yahay mooyee.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

**Qodobka 149aad**
**Khilaafaadka Ka Dhalan Kara Cutubka**

**1.** Haddii uu jiro muran ku saabsan fasiraadda ama ku dhaqmidda qodob kasta oo ku xusan cutubkan, dhinac kasta dooddooda oo qoraal ah waxa uu ula laaban karaan:

**b)** Guddiga Sare Xallinta Khilaafaadka heer Federaal si uu u magacaabo dhexdhexaadiye sida ku xusan xeerkan;

**t)** Haddii muranka aan lagu xallin dhexdhexadinta, waxaa loo gudbin doonaa maxkamadda awoodda u leh.

**2.** Dacwo kasta oo ku xusan xeerkan:

**b)** Dhinacii ku andacooda in la xadgudbay xaq ama ilaalin uu xeerkani siinayay, waxaa waajib ku ah in uu caddeeyo dhabnimada eeddiisa;

**t)** Dhinacii lagu eedeeyeyin uu ku lug leeyahay xadgudub kaas, waxaa waajib ku ah inuu caddeeyo in habdhaqan koodu aanu ku xadgudbin wax kasta oo kamid ah cutubkan.

**Qodobka 150aad**
**Xayiraadda Ururrada, Mas'uuliyadda Dembiyada Ciqaabta Iyo kuwa Madaniga ah**

**1.** Abuurid ururro shaqaale oo ujeeddooyin koodu yihiin in lagu xayiro ururro kale oo kaliya waa sharci darro,waana in la joojiyo xubin ka noqoshadooda, waxaa ka dhalan kara dacwad ciqaabeed.

**2.** Heshiis kasta oo lagu galay magaca ururradaas waa in la joojiyaa, lana baabi'yaa.

**Qodobka 151aad**
**Nuxurka Dastuurka iyo Qawaaniinta**

**1.** Dastuurka ama xeerarka urur kasta oo ka mid ah ururrada shaqaalaha iyo loo-shaqeeyeyaasha waa inay ku jiraan qodobbo ku saabsan arrimaha soo socda:

**b)** Magaca iyo cinwaanka;

**t)** Goobta xafiiskooda;

**j)**Wadarta tirada xubnaha;

**x)** Waxyaabaha loo aasaasay, ujeeddooyinka ay ku habboon tahay in loo isticmaali kara dakhligooda ama hantidooda;

**kh)** Habka loo sameeyo wax looga beddelo, dib u eegis, burinta dastuurka iyo qawaaniinta;

**d)** Magacaabista, doorashada, ka saarista xubinnimada hawlwadeenada iyo saraakiisha sar sare;

**r)** Nidaamka keydinta iyo heynta xisaabaadka ee khasnajiga;

**s)** Nidaamka Maalgelinta raasamaalka iyo hantidhawrka sanadlaha ah ama xiliyeysan;

**sh)** Nidaamka baarista buugaagta iyo magacyada xubnaha taas oo uu sameynayo qof kasta oo daneynaya dakhligooda ama hantidooda;



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

**dh)**Nidaamka qabashada go'aannada dooroshooyinka mas'uuliyiinta iyo saraakiisha sar sare, wax-ka-beddelka dastuurka, bannaanbaxyada, baabi'iniyo arrimaha kale ee saameynta ku leh guud ahaan xubnaha ururrada shaqaalaha;

**c)** Xuquuqda xubin kasta ay u leedahay in ay fursad u hesho in ay codeyso;

**g)** Nidaamka qaddarka diiwaangelinta iyo khidmadda laga rabo in ay bixiyaan xubnaha;

**f)** Nidaamka kala diridda ururka.

**Qodobka 152aad**
**Soo Gudbinta Nuqullada Dastuurka iyo Qawaaniinta**

Laba nuqul oo dastuurka iyo qawaaniinta ururka shaqaalaha ama ururka loo-shaqeeyeyaasha iyo wax-ka-beddel kasta waa in loo soo gudbiyaa Diiwaanhayaha Ururrada Shaqaalaha iyo Ururrada Loo-shaqeeyeyaasha wakhtiga dhisidda ama wax-ka-beddelka ururka, hadba xaaladda sida ay tahay.

**CUTUBKA 26AAD**
**SAMEYNTA IYO DIIWAANGELINTA URURRADA SHAQAALAHA IYO URURRADA LOO-SHAQEEYAYAASHA**

**Qodobka 153aad**
**Ururrada iyo Ujeeddooyinka**

Urur shaqaale ama urur loo-shaqeeye waa in hadafkooda koowaad uu ahaadaa ilaalinta, dabagalka, dhowrista danaha shaqaalaha, loo-shaqeeyaha iyo hormarinta wax-soo-saarka dalka, haddii ay tahay ururka shaqaalaha ama loo-shaqayeeyeyaasha.

**Qodobka 154aad**
**Hawlaha Ururrada Shaqaalaha**

1. Hawlaha ururrada shaqaalaha waxaa ka mid ah:

**b)**Wakiilnimada iyo ilaalinta danaha shaqaalaha, danahaas oo la xiriira xaaladdooda shaqo iyo xiriirka ay la leeyihiin maamulka;

**t)** Fududeynta ka qaybgelinta shaqaalaha qorsheynta iyo maareynta hay'adda ay ka shaqeeyaan;

**j)** In la hubiyo in maamulku si adag u ilaaliyo xeer-nidaamiyeyaasha ku saleysan shaqada, daryeelka bulshada, bixinta ujuurada, hagaajinta nadaafadda iyo ka badqabka shilalka;

**x)**La socod siinta mas'uuliyiinta dawladda ee awoodda u leh sida loogu takrifalo looguna danaysto shaqaalaha.

**Qodobka 155aad**
**Asaasid Urur**

**1.** Qof kasta oo ku hawlan shaqo, isaga iyo dad kaleba, waxay abuuri karaan urur shaqaale, waxayna xor u yihiin in ay ku biiraan urur shaqaale oo ka shaqeeya mihnaddiisa.

**2.** Loo-shaqeeye kasta wuxuu ka qeyb qaadan karaa abuurista urur loo-shaqeeye ama ku biiri



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

karaa mid hore.

**3.** Iyada oo la tixraacayo qodobbada xeerkan, xubin kasta waxay waqti kasta ka bixi kartaa urur shaqaale, si kasta oo ay u jiraan shuruudo lid ku ah.

**4.** Iyada oo la tixraacayo qodobbada xeerkan, loo-shaqeeye kasta wuxuu waqti kasta ka bixi karaa urur loo-shaqeeye, si kasta oo ay u jiraan shuruudo lid ku ah.

**5.** Si xor ah ayey isugu biiri karaan Ururrada shaqaaluhu si ay u sameystaan xiriir guud oo danahooda caadiga ah ilaaliya.

**6.** Si xor ah ayey isugu biiri karaan ururrada loo-shaqeeyeyaashu si ay u sameystaan xiriir guud oo danahooda caadiga ah ilaaliya

**7.** Farac kasta oo ay leeyihiin ururro shaqaale ama ururro loo-shaqeeye waxay ka bixi karaan ururradooda, iyada oo aan wax shuruud ah lagu xirin, waxayna ku xiran tahay oo keliya dastuurka xiriirka guud waxa uu qabo.

**8.** Ururrada shaqaalaha iyo ururrada loo-shaqeeyaha, waxay dhammaan qodobbada xeerkan iyo xeer-nidaamiyeyaashooda ugu adeegsanayaan xiriirradooda guud sida ugu habboon.

### Qodobka 156aad
### Arjiga Diiwaangelinta Urur Shaqaale ama Urur Loo-shaqeeye

Urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama Xiriirka Ururada Shaqaalaha/loo-shaqeeyeyaasha waa inay diiwaan hayaha kacodsadaan diiwaangelintooda.

### Qodobka 157aad
### Shuruudaha Diiwaangelinta Urur Shaqaale

1. Urur shaqaale ayaa dalban kara diiwaangelin haddii:
   - **b)** Uu dalbado diiwaangelin si waafaqsan xeerkan;
   - **t)** Uu ku dhaqmay dastuur waafaqsan shuruudaha xeerkan;
   - **j)** Uu xafiis, iyo cinwaan ku leeyahay JFS;
   - **x)** Uu leeyahay cinwaan boosto (P.O. Box);
   - **kh)** Magaciisu aanu la mid ahayn mid ka mid ah urur shaqaale ee hadda jira, kaas oo keeni kara marin habaabin iyo jahwareer;
   - **d)** Shirka lagu gaaray go'aanka diiwaangelinta ay ka soo qeybgaleen ugu yaraan afartan (40) xubnood;
   - **r)** Uu ka madax bannaan yahay si toos ah ama si dadbanba gacan loo-shaqeeye ama urur loo-shaqeeyeyaal;
   - **s)** Ujeeddada kaliya ee urur shaqaale ay tahay fulinta hawlaha iyo danaha ururka shaqaalaha.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

**Qodobka 158aad**
**Shuruudaha Diiwaangelinta Urur Loo-Shaqeeye**

1. Urur loo-shaqeeye ayaa codsan kara diiwaangelin haddii:

**b)** Uu dalbaday diiwaangelin si waafaqsan xeerkan;

**t)** Uu ku dhaqmay dastuur waafaqsan shuruudaha xeerkan;

**j)** Uu xafiis, iyo cinwaan ku leeyahay JFS;

**x)** Uu leeyahay cinwaan boosto (P.O. Box);

**kh)** Magaciisu aanu la mid ahayn mid ka mid ah urur loo-shaqeeye ee hadda jira, kaas oo keeni kara marin habaabin iyo jahwareer;

**d)** Shirka lagu gaaray go'aanka diiwaangelinta ay ka soo qeyb galeen ugu yaraan toban (10) loo-shaqeeye ;

r) Uu ka madax bannaan yahay si toos ah ama si dadbanba gacan urur loo-shaqeeye ama xiriir guud ee urur loo-shaqeeye;

s) Ujeeddada kaliya ee urur loo-shaqeeye ay tahay fulinta hawlaha iyo danaha ururka loo-shaqeeyaha.

**Qodobka 159aad**
**Shuruudaha Diiwaangelinta Xiriirka Guud ee Ururro Shaqaale**

1. Shuruudaha diiwaangelinta xiriirka guud ee ururro shaqaale ee la aasaasi doono ama la diiwaan gelin doono sharcigan marka uu soo baxo kadib waa in:

**b)** Uu dalbado diiwaangelin si waafaqsan xeerkan;
**t)** Uu ku dhaqmay dastuur waafaqsan shuruudaha xeerkan;
**j)** Uu xafiis, iyo cinwaan ku leeyahay JFS;
**x)** Uu leeyahay cinwaan boosto (P.O. Box);
**kh)** Dastuurkoodu uu caddaynayaa in xubnahoodu ay ka diiwaan gashan yihiin urur shaqaale oo kaliya;
**d)** Lagu aasaasay shir ay ka soo qaybgaleen wakiillada ugu yaraan saddex (3) urur shaqaale oo diiwaangashan oo ay la socdaan guddiyadooda fulinta ee idman;
**r)** Magaciisu aanu la mid aheyn mid ka mid ah urur shaqaale ama xiriir guud ee hadda jira, kaas oo keeni kara marin habaabin iyo jahwareer.
**s)** Uu ka madax bannaan yahay si toos ah ama si dadbanba gacan urur loo-shaqeeye ama xiriir guud ee loo-shaqeeyeyaal;

**Qodobka 160aad**
**Shuruudaha Diiwaangelinta Xiriirrada Guud eeUrurrada Loo-shaqeeyeyaasha**

1. Shuruudaha diiwaangelinta xiriirrada guud ee ururrada loo-shaqeeyeyaasha waa in:

**b)** Uu dalbado diiwaangelin si waafaqsan xeerkan;
**t)** Uu ku dhaqmay dastuur waafaqsan shuruudaha xeerkan;
**j)** Uu xafiis, iyo cinwaan ku leeyahay JFS;
**x)** Uu leeyahay cinwaan boosto (P.O. Box)
**kh)** Uu xiriirka guud caddeeyo in ay xubnahoodu ka diiwaangashan yihiin ururrada



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

loo-shaqeeyeyaasha oo kaliya;

**d)** Lagu aasaasay shir ay ka soo qaybgaleen wakiillada ugu yaraan saddex (3) urur loo-shaqeeye oo diiwaangashan oo ay la socdaan guddiyadooda fulinta ee idman;

**r)** Magaciisu aanu la mid ahayn mid ka mid ah urur loo-shaqeeye ama xiriir guud ee hadda jira, kaas oo keeni kara marin habaabin iyo jahwareer;

**s)** Uu ka madax bannaan yahay si toos ah ama si dadbanba gacan urur loo-shaqeeye ama xiriir guud ee urur loo-shaqeeye;

**Qodobka 161aad**
**Arjiga Diiwaangelinta**

1. Codsi ku saabsan diiwaangelinta urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriirka ururada shaqaalaha/loo-shaqeeyeyaasha waa in la adeegsadaa foomka diiwaangelinta ee xafiiska diiwaanhayaha oo ay ku lifaaqanyihiin:

**b)** Lacagta loo qoondeeyay diiwaangelinta;

**t)** Nuqul rasmi ah oo caddeynaya dastuurka ururka shaqaalaha, ururka loo-shaqeeyaha ama xiriirka ururada shaqaalaha/loos-haqeeyeyaasha;

**j)** Nuqul rasmi ah oo cadddeynaya diiwaanka xaadiriska iyo kulan-qorka (meeting minutes) kulamada, lagu aasaasay ururka shaqaalaha, ururka loo-shaqeeyeyaasha ama xiriirka ururada shaqaalaha/loo-shaqeeyeyaasha

2. Arjiga diiwaangelinta urur shaqaale waa in ay saxiixaan shan (5) xubnood oo katirsan ururka shaqaalaha.

3. Codsiga diiwaangelinta urur loo-shaqeeye waa in ay saxiixaan saddex (3)xubnood oo ka mid ah ururka loo-shaqeeyeyaasha.

4. Codsiga diiwaangelinta xiriirka guud waa in ay saxiixaan saddex (3) xubnood oo ka tirsan xiriirka ururada shaqaalaha/loo-shaqeeyeyaasha

5. Diiwaangeliyuhu wuxuu:

**b)** U baahan karaa macluumaad dheeraad ah iyada oo ujeeddadu tahay qiimeynta arjiga diiwaangelinta;

**t)** Codsadaha diiwaangelinta siin karaa fursad uu ku saxo codsiga muddada uu u cayimay diiwaangeliyuhu.

6. Haddii magaca la soo bandhigay ee urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud ay isku mid yihiin ama ay isku dhow yihiin mid ka mid ah urur hadda jira, kaas oo keeni kara marin habaabin iyo jahwareer, diiwaanhayuhu waa inuu:

**b)** Ka dalbadaa codsadaha diiwaangelinta in uu beddelo magaca ururka shaqaalaha, ururka loo-shaqeeyaha ama xiriirka guud ee uu soo codsaday;

**t)** Aanu diiwaangelin ururka shaqaalaha, ururka loo-shaqeeyaha ama xiriirka guud ilaa uu isbeddel ku habboon sameeyo.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

**Qodobka 162aad**
**Diiwaangelinta Ururrada Shaqaalaha, Ururrada Loo-shaqeeyeyaasha ama xiriirka ururada shaqaalaha/loo-shaqeeyeyaasha**

1. Haddii Diiwaangeliyuhu uu ku qanco, in urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriirka ururada shaqaalaha/loo-shaqeeyeyaasha ee codsaday diiwaangelinta uu waafaqo shuruudaha xeerkan, Diiwaanhayuhu waa inuu diiwaangeliyaa ururka shaqaalaha, ururka loo-shaqeeyaha ama Xiriirka Ururada Shaqaalaha/loo-shaqeeyeyaasha, uuna:

**b)** Soo saaraa shahaadada diiwaangelinta rasmiga ah (foomka cayiman);
**t)** Geliyaa magaca iyo macluumaadka ururka shaqaalaha, ururka loo- shaqeeyaha ama xiriirka guud diiwaanka ku habboon.

2. Shahaadada diiwaangelinta ee lagu soo saaray faqrada 1[aad] ee qodobkan waa caddeyn rasmi ah in ururka shaqaalaha, ururka loo-shaqeeyaha ama Xiriirka ururada Shaqaalaha/loo-shaqeeyeyaasha si sax ah loo diiwaangeliyey sida ku cad xeerkan, ilaa laga xaqiijiyo in shahaadada lagala noqday ama laga hakiyey.

**Qodobka 163aad**
**Diidista Diiwaangelinta Ururro Shaqaale, Ururro Loo-shaqeeyeyal ama Xiriirka Ururada Shaqaalaha/loo-shqeeyeyaasha**

1. Haddii diiwaangeliye aanu ku qancin in urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriirkaUrurada Shaqaalaha/loo-shaqeeyeyaasha in uusan buuxin shuruudaha diiwaangelinta, uuna diido codsiga diiwaangelinta, diiwaangeliyuhu waa inuu qaab rasmi ah (Foomka Cayiman) ugu wargeliyaa sababaha diidmada.

2. Diiwaangeliyuhu waa inuu siiyaa ururrada shaqaalaha, ururrada loo-shaqeeyeyaasha ama xiriirka ururada Shaqaalaha/loo-shaqeeyeyaasha fursad ay kaga jawaabaan sababahaas, afar iyo toban (14) maalmo shaqo gudahood.

3. Haddii ay dhacdo in Diiwaangeliyuhu aanu ka noqon go'aanka ah in aanu diiwaangelin, urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud, waxaa cabasho loo qaadan karaa Wasaaradda. Cabashada waa in lagu soo gudbiyaa muddo labaatan iyo siddeed (28) maalmo shaqo gudahood ah oo ka bilaabata maalinta go'aanka diidmada la gaaray.

4. Wasaaraddu waa in ay go'aamisaa cabashada kuna wargelisaa go'aanka ururrada shaqaalaha, ururrada loo-shaqeeyeyaasha ama xiriirka ururada Shaqaalaha loo-shaqeeyeyaasha iyo sababaha uu go'aankaas ay u qaadatay mudddo 28 maalmo shaqo gudahood ah oo laga billaabo marka ay hesho cabashada.

5. Ururrada shaqaalaha, ururrada loo-shaqeeyeyaasha ama xiriirka Ururada Shaqaalah/loo-shqeeyeyaasha ee aan ku qanacsaneyn go'aanka Wasaaradda waxa ay cabasho u qaadan karaan maxkamadda awoodda u leh.

**Qodobka 164aad**
**Waxyaabaha Sharci Ahaanka Dhalan karaDiiwaangelinta**

1. Urur shaqaale, urur loo-shaqeye ama xiriirka ururada Shaqaalaha/loo-shqeeyaasha waxaa loo diiwaangeliyaa sida hay'ad sharci ah oo leh:

**b)** Jiritaan waara iyo astaan guud ee lagu garto;

**t)** Awoodda, iyadoo magaceeda adeegsaneysa, in ay:

i. Dacwooto ama la dacweeyo;

ii. Gasho heshiisyo;

iii. Yeelato, Iibsato, la soo wareegto ama iska wareejiso hanti guurto ama maguurto ah;

iv. Sameyso dhammaan waxyaabaha kale ee muhiimka u ah danaha jiritaanka hay'adda.

2. Laguma soo oogi karo dacwad magdhow urur shaqaale, urur loo-shaqeeye xiriir guud, saraakiishooda sare ama xubnahooda in ay qabsadeen ama ay ka baaqsadeen hormarinta hawlahoodii gaarka u ahaa ee sharcigooda u oggolyahay;

3. Iyadoo la tixgelinayo qodobbada xeerkan, ururka, maamulka, baabi'inta iyo kala diridda urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud, waxaa marka koowaad xukuma dastuurkooda, marka labaadna xeerarka guud ee ay leeyihiin ururrada sharciyeysan ee xafiisyadoodu ku yaallaan dalka.

**Qodobka 165aad**
**Waxyaabahaka Dhalan Kara Is-Diiwaangelin La'aanta**

1. Qofna ma sii wadi karo wax ficil ah oo ku saabsan abuurista urur shaqaale ama urur loo-shaqeeye ama xiriirka Ururada Shaqaalah/loo-shqeeyeyaasha ilaa:

**b)** Laga diiwaangeliyo sida ku xusan xeerkan; ama

**t)** Inta laga tixgelinayo arjigiisa diiwaangelinta.

2. Marka laga soo tago qodobka ku xusan faqradda 1[aad], urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriirka Ururada Shaqaalah/loo-shaqeeyeyaasha waxa ay qaban karaan hawlaha looga baahan yahay xaqiijinta fulinta shuruudaha diiwaangelinta.

3. Qodobbada qaybtan ma khuseeyaan hawl kasta oo la fuliyey iyada oo ay ujeeddadu tahay:

**b)** Difaacidda dacwadaha ka dhan ah urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriirka Ururada Shaqaalah/loo-shqeeyeyaasha;

**t)** Kala dirista urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriirka Ururada Shaqaalah/loo-shqeeyeyaasha iyo xaraashidda hantidooda si waafaqsan qawaaniintooda.

4. Marka laga soo tago sida ku qeexan xeerkan, qofna looma oggola inuu u sheegto ama u dhaqmo sidii sarkaal ama mas'uul ka tirsan urur shaqaale, urur loo-shaqeeyee ama xiriirka Ururada Shaqaalah/loo-shqeeyeyaasha oo aan diiwaangashaneyn ama diiwaangelintiisa la baabi'iyey.

**Qodobka 166aad**
**Xafiis Diiwaangashan**

1. Urur kasta oo shaqaale, loo-shaqeye ama xiriirka Ururada Shaqaalah/loo-shaqeeyasha waa in:

**b)** Uu leeyahay xafiis rasmi ah, cinwaan guud iyo cinwaan boosto oo dhammaan xiriirrada iyo ogeysiisyada loogu soo hagaajin karo;

**t)** Ay u soo sheegaan Diiwaangeliyaha wixii isbeddel ah ee lagu sameeyo



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

xafiiskooda rasmiga ah cinwaan guud iyo cinwaan boosto, si diiwaangeliyuhu ugu geliyo macluumaad kooda diiwaanka ku habboon.

2. Waa sharci darro in urur shaqaale, urur loos-haqeeye ama xiriirka Ururada Shaqaalah/ loo-shqeeyeyaasha in:

**b)** Ay shaqeeyaan iyaga oo aan laheyn xafiis rasmi ah oo diiwaangashan;

**t)** Ay ku guuldareystaan in ay soo ogeysiin waayaan xafiiskooda iyo cinwaankooda ama isbeddel kasta ee xafiiska ama cinwaanka lagu sameeyey sida ku xusan faqrada 1[aad].

**Qodobka 167aad**
**Laamaha**

1. Urur shaqaale, loo-shaqeeye ama xiriir guud waa inay ka codsadaan Diiwaanhayaha foomka cayiman si uu ugu diiwaangeliyo laamahooda.

2. Shuruudaha arjiga diiwaangelinta laanta ee uu sameeyo diiwaanhayuhu, waxaa laga rabaa sharuudo la mid ah midda diiwaangelinta xarunta dhexe ee ururka, haddii aanay jirin shuruudo kale.

**Qodobka 168aad**
**Midoobid**

1. Urur shaqaale, urur loo-shaqeye ama xiriirka Ururada Shaqaalah/loo-shqeeyaasha ee diiwaangashan, waa ay la midoobi karaan mid ama dhawr urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriirka Ururada Shaqaalah/loo-shqeeyeyaasha, hadba xaaladdu sida ay tahay.

2. Waxaa midoobi kara ururro shaqaale, ururro loo-shaqeeye ama xiriirro guudiyada oo aan la baabi'in jirtaan kooda, sidoo kalena aan la kala qaybin miisaaniyadda ururrada midoobaya.

3. Sida qeybtan ku xusan, midoobidda ururro shaqaale, ururro loo-shaqeeye ama xiriirro guud waxay dhici kartaa oo keliya haddii:

**b)** Mid kasta oo ka mid ah ururrada midoobaya uu sameeyey cod bixin qarsoodi ah oo waafaqsan shuruudaha u cayiman;

**t)** Ugu yaraan boqolkiiba konton (50%) xubnaha mid kasta oo ka mid ah ururada midoobaya ee xaqa u leh in ay codeeyaan, waa in ay codeeyeen;

**j)** Si midowgu ansax u noqodo, tirada xubnaha u codeeynaya midowga lasoo jeediyey waa in ay ka badataa ugu yaraan (2/3) tirada xubnaha guud ee u codeeyey.

4. Ogeysiiska soo jeedinta midowga ururro shaqaale, ururro loo-shaqeeye ama xiriirro guud waa in loo adeegsadaa foomka cayiman, waana in ay saxiixaan wakiilka idman ee qeyb kasta oo ka mid ah ururrada midoobaya;

5. Marka ururrada midoobay isku diiwaangeliyo sida ku cad xeerkan, Diiwaangeliyuhu waa in uu:

**b)**Ku soo saaro shahaadada mideynta foomka cayiman ee horay loo dejiyey;

**t)** Ka saaraa ururrada midoobay diiwaannadii hore.

6. Diiwaangeliyuhu ma diiwaangelin karo ururro midoobay, haddii magacooda la mid yahay, ama uu u eg yahay mid ka mid ah midowyada ururro ama xiriirro guud ee jira, taas oo laga



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

yaabo in ay keento marin habaabin ama jahwareer.

7. Marka uu Diiwaanhayuhu diiwaangeliyo ururro midoobay:

**b)**Dhammaan hantida, xuquuqda, waajibaadka iyo mas'uuliyadaha ururrada midoobay waxa ay ku wareegaysaa Ururka lagu midoobay;

**t)** Ururka lagu middoobay waxa uu la wareegayaa ururradii midoobay iyada oo loo eegayo:

i. Xuquuq kasta oo lagu midoobay;

ii. Dhaqaale kasta oo lagu aasaasay qaanuunkooda ama sharuuckasta oo kale;

iii. Dacwad kasta, amar maxkamadeed, abaalmarin dhexdhexaadiye, heshiis wadareed ama heshiis kale ah waa in aanay ka hor istaagin dhinacyada in ay dib-uga-gorgortamaan heshiisyadii horeyu jirey;

iv. wax kasta oo xubin ka mid ah ururrada midoobay ay ku oggolaatay qoraal oo ay horey u bixin jirtay ama la joogo xilligii ay bixin jirtay, ha ahaato qaaraan ama tabaruc looga qaadi jiray si xilliyeysan.

## Qodobka 169aad
## WargelintaWax Ka Beddelka Magaca ama Dastuurka

1. Urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriirka ururada shaqaalaha/loo-shaqeeyeyaasha ayaa waxa uu go'aansan karaa:

**b)** In uu wax ka beddelo Dastuurkiisa;

**t)** In uu wax-ka-beddelo Magaciisa.

2. Urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriirka ururada Shaqaalaha/loo-shaqeeyeyaasha oo diiwangashan ayaa waxa ay ka codsan karaan Diiwaanhayaha in uu u ansixiyo wax-ka-beddel ka magaca ama dib u eegista dastuurka iyo qawaaniinta ururka iyada oo loo soo gudbinayo Diiwaanhayaha:

**b)** Lagu soo ogeysiiyo foomka cayiman oo si dhammaystiran loo soo buuxiyey, uuna soo saxiixay Xoghayuhu;

**t)** Nuqul ka mid ah go'aanka wax-ka-beddel ka oo faahfaahsan;

**j)** Shahaaddo uu saxiixay xoghayaha oo sheegaysa in go'aanka loo ansixiyey si waafaqsan dastuurka iyo qawaaniinta.

3. Ogeysiiska wax-ka-beddelka ku xusan faqrada 2[aad] waa in loo gudbiyaa Diiwaanhayaha muddo afar iyo toban (14) maalmo shaqo gudahood ah wixii go'aan ah ee lagu beddelay magaca ama dastuurka.

4. Marka la helo ogeysiiska wax-ka-beddelka magaca ama dastuurka, Diiwaanhayuhu waa inuu ku soo wargeliyaa ugu yaraan kow iyo labaatan (21) maalmo shaqo gudahood wargeyska maalinlaha ah ama Warbaahinta Dowladda ee dalka ka soo baxa iyo faafinta rasmiga ah ee dawladda, iyadoo lagu muujinayo wixii diidmo ah oo ku saabsan wax-ka-beddelka ay xubnaha ururku ku sameeyeen magaca ama dastuurka ururka iyo, marka diidmo noocaas ah ay timaaddo, Diiwaanhayuhu waa inuu baaraa cabashada iyo gunta waxyaabaha ay ku salaysan tahay waxa uuna:



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

**b)** Arrintan u gudbin karaa maxkamadda awoodda u leh;
**t)** Diidi karaa in uu aqbalo wax-ka-beddelka la soo jeediyey;
**j)** Sameeyn karaa amar kasta oo diiwaanhayuhu u arko in ay ku habboon tahay duruufaha jira.

5. Diiwaangeliyuhu waxa uu oggolaan karaa wax-ka-beddelka magaca ama dastuurka, haddii uu waafaqsan yahay nidaamka iyo shuruudaha diiwaangelinta ururka shaqaalaha, ururka loo-shaqeeyaha ama xiriirka guud.
6. Diiwaanhayuhu waa inuu ku soo saaraa foomka cayiman shahaadada wax-ka-beddelka magaca ama dastuurka

7. Wax-ka-beddel kasta oo lagu sameeyo magaca ama dastuurka iyo qawaaniinta urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud oo diiwaangashan, waxa ay dhaqangeli kartaa oo kaliya marka diiwaanhayuhu uu oggolaado sida ku xusan qodobada qeybtan.

8. Wax-ka-beddelka magaca urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud ma:

**b)** Saameynayso xuquuqdiisa ama waajibaadkiisa;
**t)** Cilladeyn karto dacwo kasta oo sharci ah oo laga keeno ama ka soo horjeedda. dacwo kasta oo lagu soo oogayna intii uu jiray magacii hore waa la sii wadi karaa ama la billaabi karaa kadib marka magaca cusub loo bixiyey.

9. Haddii Diiwaanhayuhu uu diido inuu oggolaado wax-ka-beddelka qodobada qeybtan, diiwaanhayuhu waxa uu soo saarayaa war qoraal ah oo ku saabsan go'aankaas iyo sababaha uu ku diiday.

10. Urur shaqaale, urur loo-shaqeye ama xiriirka Ururada Shaqaalah/loo-shqeeyeyasha kasta oo aan ku qanacsaneyn go'aanka diiwaanhayaha, waxa uu adeegsan karaa si waafaqsan qodobka 165[aad].

## Qodobka 170aad
## Baabi'in ama Hakin Diiwaangelin

**1**. Diiwaanhayuhu waa inuu baabi'iyaa ama hakiyaa diiwaangelinta urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriirka Ururada Shaqaalah/loo-shqeeyeyaasha haddii:
**b)** Ururka la kala diray;
**t)** Diiwaanhayuhu uu ku qanco in ururku uu jiritaankiisa dhammaaday.

**2.** Diiwaanhayuhu waxa uu baabi'in karaa ama uu hakin karaa diiwaangelinta urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud haddii Diiwaanhayuhu uu ku qanco in ururka:
**b)** Lagu diiwaangeliyey musuqmaasuq, matalaad been-abuurah ama khalad;
**t)** Uu ku shaqaynayo si aan waafaqsaneyn qodobada xeerkan;
**j)** Loo isticmaalayo ujeeddo aan sharci aheyn;
**x)** Uu ku guul darreystay inuu u qabto doorasho si waafaqsan shuruudaha xeerkan;
**kh)** Aanu madaxbannaaneyn.

**3.** Diiwaanhayuhu waa in aanu baabi'in ama hakin diiwaanka urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriirka Ururada Shaqaalah/loo-shqeeyeyaasha sida ku xusan faqrada 2[aad] ee qodobkan ilaa laga siiyo:

b) Ogeysiis ugu yaraan laba (2) bilood ah, iyada oo ujeeddadu tahay in la baabi'inayo ama la hakinayo diiwaankiisa iyada oo la isticmaalayo foomka cayiman;

t) Tixgelin matalaadda ay ururradu sameysteen muddo laba bilood (2) gudahood ah.

**4.** Haddii Diiwaanhayuhu uu baabi'iyo ama hakiyo diiwaangelinta urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriirka Ururada Shaqaalaha/loo-shqeeyeyaasha, Diiwaanhayuhu waa inuu:

**b)** Ku wargeliyaa ururrada go'aankaas isagoo adeegsanaya foomka cayiman;

**t)** Caddeyaa sababaha go'aankaas loo qaatay.

**5.** Urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriirka Ururada Shaqaalah/loo-shqeyeyaasha, waxa ay maxkamadda awoodda u leh cabasho uga qaadan karaan go'aanka Diiwaanhayaha.

**6.** Maxkamadda awoodda u leh ayaa go'aan kagaareysa, marka laga reebo cabashooyinka Dastuurka Soomaaliya ee la xiriira xad-gudubyada xuquuqda aasaasiga ah.

**Qodobka 171aad**
**Kala Dirid**

**1.** Iyada oo loo eegayo qodobada xeerkan ama sharci kale, diiwaanhayuhu wuxuu ka codsan karaa maxkamadda awoodda u leh in ay kala dirto urur kasta oo shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriirka Ururada Shaqaalah/loo-shqeeyeyaasha, kaas oo loo arko in hawlahoodu ay khatar ku yihiin danaha xubnaha ururrada.

**2.** Urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriirka Ururada Shaqaalah/loo-shqeeyeyasha waxaa kala diri kara xubnahooda iyada oo la raacayo qodobbada dastuurkooda.

**3.** Marka urur shaqaale, urur loo-shaqeye ama xiriirka Ururada Shaqaalaha/loo-shaqeeyeyaasha xubnahoodu kala diraan iyagoo adeegsanaya foomka cayiman, ogeysiiska kala diristana waa in:

**b)** Loo gudbiyaa Diiwaanhayaha muddo afar iyo toban (14) maalmo shaqo gudahood ah laga billaabo taariikhda go'aanka kala dirista;

**t)** Ay saxiixaan:

i. Wakiilka idman;

ii. Shan (5)xubnood oo ka mid ah urur shaqaale ama saddex (3) xubnood oo ka mid ah urur loo-shaqeeye ama saddex (3) xubnood oo xiriir guud ah.

**4.** Diiwaanhayaha waxaa looga baahan yahay:

**b)** In uu qoraal ku soo saaro shahaadada kala dirista isagoo adeegsanaya foomka cayiman;

**t)** In uu diiwaangeliyo kala dirista, haddii uu ku qanco in ay waafaqsan tahay dastuurka ururrada.

**5.** Kala dirid urur shaqaale, urur loo-shaqaaeeye ama xiriirka Ururada Shaqaalaha/loo-shqeeyeyaasha wuxuu dhaqangelayaa taariikhda kala dirista la diiwaangeliyo.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

### Qodobka 172aad
### Cabasho ka Qaadashada Go'aanka Diiwaanhayaha

**1.** Qof kasta oo aan ku qanacsaneyn go'aanka Diiwaanhayaha sida ku cad qodobka 172[aad] ee xeerkan wuxuu cabasho u qaadan karaa maxkamadda awoodda u leh muddo soddon (30)maalmo shaqo gudahood ah laga billaabo taariikhda go'aanka la diiwaangeliyey.

**2.** Maxkamadda awoodda u leh ayaa go'aan ka gaareysa, marka laga reebo cabashooyinka Dastuurka Soomaaliya ee la xiriira xad-gudubyada xuquuqda aasaasiga ah.

## CUTUBKA 27AAD
## XUBINNIMADA IYO MAAREYNTA

### Qodobka 173aad
### Xubinnimada Urur Shaqaale

**1.** Iyadoo la raacayo qodobbada xeerkan:

**b)** Qof kasta oo da'diisu tahay 18 sano ama ka weyn wuxuu ku biiri karaa urur shaqaale;

**t)** Qof kasta oo da'diisu u dhaxeysa 15-17 sano ayaa ku biiri kara urur shaqaale, balse looma magacaabi karo, loomana dooran karo xil fulineed ee ururrada;

### Qodobka 174aad
### Xubnaha Cod-bixinta ee Urur Shaqaale

Ma noqon karo xubin cod bixiye urur shaqaale ilaa ururkaasi uu ka yeesho cinwaan rasmi ah ama xafiis uu ku leeyahay JFS gudaheeda.

### Qodobka 175aad
### Saraakiil Sar-sare

**1.** Saraakiisha sar-sare ee urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriirka Ururada Shaqaalaha/loo-shqeeyeyaasha ayaa la dooran karaa ama la magacaabi karaa, hase yeeshee, waa inay:

**b)** Deggan yihiingudaha JFS;

**t)** Haystaan Warqadda Dhalasho, Kaarka Aqoonsiga Qaranka ama Baasaboor;

**j)** Hore u jirin xukun maxkamadeed oo ka hor istaagaya qabasho xil xafiis dadweyne ama aanu hore looga hor istaagin xafiis dadweyne.

**2.** Qofna looma oggola inuu ka noqdo sarkaal sare in ka badan hal urur shaqaale ama urur loo-shaqeeye ama xiriirka Ururada Shaqaalaha/loo-shqeeyeyaasha.

**3.** Sarkaal xil sare ka haya urur shaqaale, waxaa uu sidoo kale xil sare ka qaban karaa xiriirka guud ee ururkiisa shaqaale ee uu ka mid yahay.

**4.** Sarkaal sare oo ka tirsan urur loo-shaqeeye waxaa uu sidoo kale xil sare ka qabankaraa xiriirka guud ee ururrada loo-shaqeeyeyaasha ee uu ka midyahay.

**5.** Qofkii lagu helay fal-dembiyeedyo, khiyaano ama been-abuur, looma oggola inuu xil sare ka

qabto urur shaqaale ama urur loo-shaqeeye.

**6.** Waa sharci darro in loo-shaqeeye uu u wareejiyo shaqo kale ama uu ka saaro shaqada uu hayey, xubin kasta oo ka tirsan urur shaqaale kaasoo ah sarkaal sare,isaga oo aan marka hore oggolaansho ka helin ururka shaqaalaha ee ay khusayso.

## Qodobka 176aad
## Doorashada Saraakiisha Sare

1. Saraakiisha sare urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriirk a Ururada Shaqaalaha/loo-shaqeeyeyaasha waxaa loo dooranayaa si waafaqsan dastuurkooda diiwaangashan

2. Dastuurka urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama Ururada Shaqaalaha/loo-shaqeeyeyaasha waa in:

**b)** Aanay ku jirin qodob si aan caddaalad aheyn u kala soocaya xubnaha xafiisyada hayo iyo musharrixiinta kale ee doorashooyinka u sharxan;

**t)** Doorashooyinku noqdaan codbixin qarsoodi ah, oo ay ka qeyb qaataan dhammaan xubnaha ururka, ugu yaraan shantii (5) sano mar.

3. Sida qodobkan ku xusan ,doorashada saraakiisha sare waa in diiwaan hayaha lagu wargeliyaa iyadoo la adeegsanayo foomka cayiman, muddo afar iyo toban (14) maalmo shaqo gudahood marka ay doorashadu dhacdo ama wax isbeddal ah ku yimaado.

4. Xubin aan loo dooran ama loo magacaabin si waafaqsan dastuurka u yaala urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud, looma oggolo in ay u dhaqanto ama sheegato sarkaal sare ee urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud ama laan urur.

**b)** Khilaafaadka ka dhasha doorashooyinka la qabtay, khilaafaadkaas oo ah mid toos ah ama mid dadban ee qeybtan, waxaa loo gudbin karaa Maxkamadda awoodda u leh.

**t)** Diiwaanhayuhu waxa uu soo saari karaa tilmaamo ku socda urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud si loo xaqiijiyo in doorashooyinka loo qabtay si waafaqsan qeybtan, dastuurkoodana waafaqsan.

## Qodobka 177aad
## Wargelinta Saraakiisha Sare

1. Urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama Xirirrka Ururada Shaqaalaha/ loo-shaqeeyaasha waa inay si cad u muujiyaan in:

**b)** Xafiiskooda diiwaangashan, iyaga oo soo sheegaya dhammaan magacyada iyo xilalkooda;

**t)** Xafiiska laan kasta sida lagu sheegay faqrada 1aad (b), waxaana intaa dheer magacyada iyo xilalka saraakiisha laanta.

## Qodobka 178aad
## Waajibaadka Saraakiisha Sar-sare

Waajibaadka saraakiisha sar-sare ee urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriirka Ururada Shaqaalaha/loo-shqeeyeyaasha waa inay matalaan oo ilaaliyaan danaha xubnahooda, iyaga oo aan wax u dhimeyn xuquuqda xubnaha u leeyihiin in ay si toos ah ula xiriiraan sarkaalka idman ama maxkamadda awoodda u leh.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

## CUTUBKA 28AAD:
## LACAGAHA, HANTIDA, XISAABAADKA IYO DHEEFAHA

### Qodobka 179aad
### Saraakiisha Sare oo ah Guddiga Sare ee Maamulka

1. Dastuurka urur Shaqaale, urur loo-shaqeeye iyo Xirirrka Ururada Shaqaalaha/loo-shaqeeyeyaasha waa inuu siiyaa:

**b)** Dhammaan saraakiisha sare ee ururka lagu aaminay ilaalinta, dhawridda iyo in ay si mas'uuliyad ku dheehan tahay u isticmaalaan una adeegsadaan ururka guud ahaan, waxaana loo arkaa inay u yihiin ilaaliyaasha hantida ururka;

**t)** Saraakiisha Sar-sare waxaa lagu dhaqayaa xeerka iyo xeer-nidaamiyaasha Guddiga Sare, iyadoo kalsoonida iyo aaminaadda lagu qabo lamid tahay tan Guddiga Sare haddii loo magacaabi lahaa maamulka hantida guurtada iyo maguurtada ee ururka.

2. Iyada oo loo eegayo qodobbada faqradda 1aad iyo 3aad, Guddiga Sare waxa ay magacaabi karaan ama dooran karaan saddex (3) ka mid ah saraakiisha sare ee ururka iyagoo si gaar ah ugu xil saaran hawl gaar ah.

3. Qof kasta oo aan lagu xukumin dembi ah khiyaano, been-abuur ama musuq maasuq iyo wax is dabamarin, waxaa loo oggol yahay inuu ka mid noqdo Guddiga Sare.

4. Qof kasta oo loo magacaabay Guddiga Sare waa inuu u hoggaansamaa xilka iyo waajibaadka Guddiga Sare sida ku xusan shuruucda ama xeer-nidaamiyaasha Guddiga Sare u degsan.

5. Hantida urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud ee diiwangashan, haddii ay tahay guurto ama ma guurto, Guddiga Sare waxa lagu aaminay adeegsiga iyo uga faa'iideynta ururka iyo xubnahiisa.

6. Haddii isbeddel ku yimaado mid ka mid ah xafiiska Guddiga Sare, ma saameynayso hantida urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud oo diiwaangashan, muddada ku meel gaarka ah waxa ay mas'uuliyaddu ku wareegeysaa Guddiga Sare iyada oo ay hantidii ay sideedii tahay oo waxba laga wareejinin, cid kalena loo xilsaarin, ilaa ay qofkii xafiiska qabta ammaanadu ugu wareegeyso.

### Qodobka 180aad
### Qaaraanka Xubnaha

1. Xubin ka mid ah urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama Xirirrka Ururada Shaqaalaha/loo-shaqeeyaasha ayaa laga yaabaa inay bixiyaan qaaraan ku waajibay, kaas oo noqon kara qaaraan, khidmad bille ah iyo wixii kale ee dastuurkoodu jideeyey.

2. Loo-shaqeeye lacag kama jari karo shaqaale u soo gudbiyey loo-shaqeeyahiisa ogeysiis qoraal ah oo uu ku caddeynayo in uu iska casilay xubinnimada ururka

3. Ogeysiiska is casilaadda ah ee ku xusan faqrada2aad waxa uu hirgalayaa bisha ogeysiiska la keenay midda ku xigta.

4. Loo-shaqeeyuhu waa inuu u gudbiyaa nuqulka ogeysiiska is casilaadda ah ururka shaqaalaha.

**Qodobka 181aad**
**Lacag ka Jarista Shaqaale la Ururreyn karo oo ku Jira Heshiis Wadareed**

Ma jiro urur shaqaale oo loo oggolyahay in uu ku amro shaqaale aan xubin ka aheyn inuu bixiyo qaaraanka ururka shaqaalaha, ama uu ku wargeliyo loo-shaqeeye in shaqaale aan xubin ka aheyn ururka uu loo-shaqeeyuhu lacag ka jaro una soo gudbiyo ururka shaqaalaha iyada oo sababta dhabta ah ay tahay keliya in qofku yahay mid ka mid noqon kara ururka, iyo in jagada shaqaaluhu ku shaqeeyo lagu dabaqayo nidaamka heshiis wadareedka dhex maray ururka shaqaalaha iyo loo-shaqeeyaha.

**Qodobka 182aad**
**Qodobbo Guud ee Lacag Ka-Jarista**

1. Lacag kasta oo laga jaro shaqaalaha si waafaqsan qodobbada qeybtan, waa in lagu shubaa xisaabta ururka shaqaalaha ee loo qoondeeyey muddo (10) maalmo shaqo gudahood ah ka dib maalintii la jaro.

2. Ururka Shaqaalaha ayaa ka codsan kara Wasiirka inuu soo saaro amar ku wajahan loo-shaqeeyaha ay u shaqeeyaan in ka badan Shan (5) Shaqaale oo xubin ka ah Ururka Shaqaalaha, si looga jaro Mushaharka Shaqaalaha lacagta ujuurada ee Xubinimada Ururka Shaqaaalaha, laguna shubo xisaabta Ururka Shaqaale.

3. Urur shaqaale wuu ka noqon karaa, joojin karaa ama wax ka beddali karaa heshiis ay isla gaareen loo-shaqeeye iyo urur shaqaale haddii uu ogaado ururku in:

**b)** Xogtii iyo macluumaadkii ku jiray heshiiska la galay la khiyaanay ama Lacagtii loo isticmaalay ujeeddo aan wafaqsaneyn heshiiska;

**t)** Lacagta aan lagu shubin xisaabta loo qoondeeyey;

4. Lacag kasta oo laga jaro ujuurada xubin ka mid ah urur shaqaale si waafaqsan qodobkan,waa in xubintu ay ka soo baxdaa mas'uuliyadda ka saaran bixinta khidmadda ururka u waajibtay.

5. Ma jiro loo-shaqeeye loo oggol yahay inuu lacag ka jaro ujuurada shaqaale iyada oo ay ujeeddadu tahay in lacag la siiyo urur kasta, haddii aanay waafqsaneyn qodobada xeerkan.

6. Ururka shaqaaluhu marka uu lacagta helo, waa in uu afar iyo toban (14) maalmo shaqo gudahood ku soo qoro warqad uu ku sheegayo in uu lacagtii helay.

7. Loo-shaqeeyuhu waa inuu u hoggaansamaa heshiiska ay isla gaareen urur shaqaale, isaga oo bixinaya lacagta qaaraanka kuna shubaya xisaabta ama xisaabaha kale ee loo qoondeeyey.

8. Wasiirka oo la tashanayo wakiillada ururro shaqaale iyo ururro loo-shaqeeye waxa uu soo saari karaa in shaqaalaha laga jari karo qadar aan ka badneyn 5% qaaraan loogu adeegayo gurmad iyo dan guud oo qaran si wafaqsan sharciga.

9. Urur loo-shaqeeye ama xiriir guud waxa uu dastuuri ka dhigi karaa in xubnahiisu ay bixiyaan lacagaha qaaraanka ama khidmad iyada oo shuruuddu tahay xubinimada ururka.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

**Qodobka 183aad**
**Isticmaalka Lacagaha**

1. Iyada oo la raacayo qawaaniintooda iyo qodobada xeerkan, ujeeddooyin kaan soo socda oo keliya ayaa urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriirka ururada shaqaalaha/loo-shaqeeyeyaasha u isticmaali karaan lacagahooda:

**b)** Bixinta mushaarka, gunnooyinka iyo kharashaadka guud ee ururka;

**t)** Bixinta kharashka maamulka ururka shaqaalaha, ururka loo-shaqeeyaha ama xiriirka guud oo ay ku jiraan baarista xisaabaadkooda;

**j)** Dacwad oogis ama difaaca wax kasta oo sharci ah oo urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud ama xubin kasta oo ka tirsan ururradaas, marka la soo dacweeyo ama la difaacayo si loo xaqiijiyo ama loo ilaaliyo xuquuqdooda ama xuquuqda xubin kasta oo ka mid ah ururka, arrin kasta oo khuseysa shaqo siin ama meelmarinta sharci kasta oo ku saabsan shaqada;

**x)** Sameynta doodo lagu difaacayo khilaafaadka ganacsiga isaga oo matalaya ama ka wakiil ah xubin kasta oo ka mid ah ururka;

**kh)** Magdhowga xubnaha khasaaraha ka dhasha khilaafaadka shaqada;

**d)** Bixinta gunnooyinka xubnaha ama qofka ku tiirsan haddii ay ku timaaddo dhimasho, hawlgab, xanuun ama shil shaqo;

**r)** Bixinta qaaraanka iyo khidmada xiriir guud kasta oo diiwaangashan, kaas oo lagu biiray;

**Qodobka 184aad**
**Mamnuucidda Bixinta Ganaaxyada ama Lacagaha Ciqaabta**

Lacagaha urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriirka Ururada Shaqaalaha/loo-shqeeyeyaasha, waa in aan loogu bixin si toos ah ama si dadban intaba, dhammaan ama qeyb ka mid ganaax ama ciqaab lagu soo rogo qof ay maxkamad xukuntay, marka laga reebo ganaaxa ama ciqaabta lagu soo rogey ururka ama xiriir guud sida ku cad xeerkan ama Xeer-nidaamiyeyaashiisa.

**Qodobka 185aad**
**Ku Takrifalka Lacagta iyo Hantida Kale**

Markuu dhaco ku Takrifalka Lacagta iyo Hantida; Diiwaanhayaha ama saddex (3) qof ama in ka badan waxay ka codsan karaan maxkamadda awoodda u leh in ay xannibto bixinta lacagaha urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriirka Ururada Shaqaalaha/loo-shqeeyeyaasha oo loo isticmaalo si sharci-darro ah ama kharashaad aan loo fasaxin.

**Qodobka 186aad**
**Diyaarinta iyo Awoodda Xisaabaad Faahfaahsan**

1. Qeybtan, "Sarkaal" waxaa loola jeedaa mas'uul kasta oo u xilsaaran ururinta, bixinta, keydinta, ilaalinta miisaaniyadda, lacagaha iyo xisaabaadka urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriirka Ururada Shaqaalaha/loo-shqeeyeyaasha.

2. Sarkaal kasta waxaa looga baahan yahay inuu soo bandhigo xisaab celin sax ah oo ku saabsan dhammaan lacagaha uu ka qabtay ama uu ku bixiyey:



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

b) Urur shaqaale, urur loo-shaqeye ama xiriirka Ururada Shaqaalah/loo-shaqeyeyaasha iyo xubnahooda:

i. Marka uu iscasilayo ama ka tagayo xafiiska;

ii. Ugu yaraan hal-mar sannad kasta waqtigaas oo ay dhici karto in lagu caddeeyo sharciyadda urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud;

iii. waqti kasta oo ay ka dalbadaan xubnaha urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud ama sharciga ururka ku qoran.

**t)** Diiwaanhayaha, marka uu ka codsado Diiwaanhaye urur shaqaale ama urur loo-shaqeeye

**j)** Isaga oo Caddeynaya:

i. Dhammaan lacagaha uu qabtay ama uu bixiyey Sarkaalku tan iyo markii uu xafiiska la wareegayama haddii Sarkaalku uu horay u soo gudbiyey xisaab iyo taariikhda xisaabtii ugu dambeysay;

ii. Lacagta haraaga aheyd marka Sarkaalku uu la wareegay xisaabta;

iii. dhammaan xisaabaadka la gudbiyey, rahanta, amaahda ama hantida kale ee ururka ee loo xilsaaray Sarkaalka in uu hayo, ama ilaaliyo.

3. Xisaabta waa in ay baaraan dad aqoon fiican u leh xisaab-xirka ama dad uu ururku u magacaabay, nuqul ka mid ah xisaab-xirkana waa in loo gudbiyaa diiwaanhayaha muddo soddon (30) maalmo shaqo gudahood ah.

4. Sarkaal kasta oo ka tirsan urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud ama qof kasta oo:

**b)** Dayaca ama ku guuldarraysata in uu u hoggaansamo mid ka mid ah qodobada qeybtan;

**t)** Si ula kac ah u sameeya, amra, sababa, dalbo ama qalqaaliyo iib, in lagu daro qoraal been ah, la geliyo ama laga saaro xisaab-xirkii, waxa uu galay dembi si waafaqsan qeybtan.

**Qodobka 187aad**
**Baarista Xisaabaadka iyo Xasuus Reebka**

1. Xisaabaadka urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriirka Ururada Shaqaalah/loo-shaqeeyeyaasha iyo liiska xubnahoodu waa inay u furan yihiin in uu baaro:

**b)** Sarkaal Sare ama xubin ka mid ah ururka waqtiga lagu qeexay dastuurkooda;

**t)** Diiwaanhayaha ururka, ama qof kasta oo qoraal diiwanhayahu ugu idmaday in uu baaro, waqti kasta oo munaasab ah.

2. Waa dembi qof kasta oo xanniba ama is-hortaaga diiwaanhayaha, ama qofkasta oo uu u idmaday diiwaanhayuhu baarista xisaabaadka ururka.

3. Diiwaanhayuhu, waqti kasta, waxa u yeeri karaa sarkaal sare oo ka mid ah urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud in uu soo gudbiyo xisaabaad faahfaahsan ama lacagaha laan kasta xilliga uu dalbado iyo hadba macluumaadka Diiwaanhayuhu dalbado.

4. Waa dembi qofkii ku guuldarreysta inuu u hoggaansamo codsiga Diiwaanhayaha sida ku xusan faqradda 3aad ee qodobkan.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

**Qodobka 188aad**
**Ku Takrifal Hanti**

1. Maxkamadda awoodda u leh waxay:
   **b)** Ku amri kartaa qof kasta oo mas'uul ka ah ama u xilsaaran in uu maamulo hanti kasta oo uu leeyahay urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriirka Ururada Shaqaalaha/loo-shaqeeyeyaasha ee ku xadgudba qawaaniinta ama si sharci darro ah u isticmaala ama lacag u xayiro si uu u gaarsiiyo hantidaas ama siiyo lacagtaas Guddiga Sare;
   **t)** ka hakin kartaa shaqada sarkaal kasta oo ku xadgudba faqrada 1aad (b).

2. Cabashada la xiriirta qeybtan, waxaa soo gudbin kara;
   **b)** Diiwaanhayaha;
   **t)** Xubin ka mid ah urur shaqaale, ururka loo-shaqeeye ama xiriirka Ururada Shaqaalaha/loo-shaqeeyeyaasha.

**Qodobka 189aad**
**Xisaab-xirka Sannadlaha ah**

1. Wakiilka idman ee urur shaqaale, urur loo-shaqeeye, ama xiriir guud ee diiwaangashan waxaa laga rabaa in uu si sannadle ah ugu soo gudbiyo Diiwaanhayaha waqtiga loo cayimay:
   **b)** Warbixinta guud ee ku saabsan dhammaan lacagaha la qabtay iyo kharashaadka baxay inta lagu guda jiray sanadka dhammaanaya:
      i. Dhammaan lacagaha la helay deeq ama tabarucaad;
      ii. Wixii kaalmo caawinaad ah ee laga helay ilo kala duwan;
      iii. Liiska hantida iyo deymaha ee sannad maaliyadeed.
   **t)** Nuqul ka mid ah warbixinta hantidhowrka oo ay ku jiraan macluumaad gaar ah oo faahfaahsan loona diyaariyey hannaan cayiman;
   **j)** Liiska tirada hantida guud;
   **x)** Nuqulka mid ah qawaaniintooda la dhaqangaliyey, kuwa wax laga bedelay iyo dhammaan qawaaniintooda cusub;
   **kh)** Liiska dhammaan isbeddellada saraakiisha sar-sare ee sanadkii hore.

2. Xubin kasta oo ka mid ah urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriirka ururada shaqaalaha/loo-shaqeeyeyaasha waxa ay xaq u leeyihiin in marka ay codsadaan ay lacag la'aan ku helaan, nuqulka mid ah warbixinta guud ee ku xusan faqrada 1aad ee qodobkan.

3. Waa dembi in wakiil idman oo ka mid ah urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriirka ururada shaqaalah/loo-shqeeyeyaasha in uu:
   **b)** Ku guul darraysto inuu u hoggaansami waayo shuruudaha qeybtan;
   **t)** Si ula kac ah u sameeyo, amro, sababo, dalbo ama qalqaaliyo iib, in lagu daro qoraal been ah, la geliyo ama laga saaro dukumintiyada, waxa uu galay dembi si waafaqsan qeybtan.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

# CUTUBKA 29AAD:
# AQOONSASHADA URURRADA SHAQAALAHA

## Qodobka 190aad
## Aqoonsasho

1. Loo-shaqeeye, ay ku jiraan loo-shaqeeye dawladeed, waa in uu aqoonsadaa urur shaqaale iyada oo ay ujeeddadu tahay in uu galo heshiis wadareed haddii ururka shaqaalaha uu si rasmi ah u diiwaangashan yahay.

2. Koox ka mid ah loo-shaqeeyeyaasha, ama ururro loo-shaqeeye, oo ay ka mid yihiin urur loo-shaqeeye dawladeed, waa inay aqoonsadaan urur shaqaale iyada oo ay ujeeddadu tahay in uu gali karo heshiis wadareed, haddii ururka shaqaaluhu inta badan uu matalo shaqaale la ururreyn karo oo u shaqeeya koox loo-shaqeeye ah ama ururro loo-shaqeeye xubno ka ah.

3. Meesha aanu jirin urur shaqaale oo inta badan matalaya shaqaalaha, ururrada shaqaalaha ee matalaya xubnaha, waa in ugu yaraan loo suurtogeliyaa wadaxaajood ka, si wadajir ah ama si goonni gooni ah, iyaga oo wakiil ka ah xubnahooda.

4. Loo-shaqeeye, koox loo-shaqeeye ah ama urur loo-shaqeeye sida ku xusan faqradda 2[aad] iyo ururro shaqaale ee ku xusan faqradda 3[aad], waxaa looga baahan yahay inay soo gaaraan heshiis aqoonsi oo qoraal ah oo muujinaya shuruudaha loo-shaqeeye ama urur loo-shaqeeye ay ku aqoonsadeen urur shaqaale ama ururro shaqaale.

5. Haddii uu jiro khilaaf ku aaddan dhinaca xuquuqda ee urur-shaqaale lagu aqoonsanayo kuna saabsan heshiis wadareed si waafaqsan qeybtan, baabi'inta heshiiska aqoonsiga, ururka shaqaaluhu waxaa uu khilaafkaas u gudbin karaa maxkamadda awoodda u leh, iyada oo ay mudnaan gaar ah siinaysa dacwaddaas in si degdeg ah loo galo.

6. Heshiiska aqoonsi waa in ay ku jirtaa xubnaha ururka shaqaalaha ee goobta shaqada ku sugan in ay soo doortaan wakiillada ururka shaqaalaha iyaga oo raacaya dastuurka ururka shaqaalaha, marka laga reebo arrimo kale oo laga yaabo in ay ku jiraan.

7. Wakiilka urur shaqaale ee lagu soo doortay faqradda 6[aad] wuxuu xaq u yeelanayaa:

**b)** In uu ku matalo xubnaha arrimaha cabashada iyo dhegeysiga anshax- marinta goobta shaqada;

**t)** Qabashada wixii howla kale ah ee lagu sheegay heshiiska aqoonsiga ama dastuurka urur shaqaale.

8. Marka laga reebo arrimo kale oo laga yaabo in ay ku jiraan, heshiiska aqoonsiga waa in uu dhigaa in loo-shaqeeye uu awood u siiyo saraakiisha ama wakiillada idman ee ururka shaqaale in uu geli karo goobaha ama dhismayaasha shaqada ee loo-shaqeeyaha si ay ula socdaan hawlaha sharciga ah ee ururka shaqaalaha oo ay ku jiraan:

**b)** Qorista xubnaha urur shaqaale;

**t)** Kulamada lala yeesho xubnaha urur shaqaale iyo loo-shaqeeye kale waqti ka baxsan saacadaha shaqada;

**j)** Matalaadda xubnaha urur shaqaale si ay ula macaamilaan loo-shaqeeyaha;

**x)** Qabashada codbixinta iyada oo la raacayo dastuurka ururka shaqaalaha



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

9. Loo-shaqeeye waxa uu:

**b)** Soo rogi karaa shuruudo maangal ah oo ku aaddan goobta iyo goorta xuquuq kasta lagu xusay qeybtan, si looga feejignaado carqaladaha aan munaasabka aheyn ee ku imaan kara hawlaha iyo badqabka goobta shaqada;

**t)** Ka dalban karaa saraakiisha ama wakiillada urur shaqaale ee soo codsanaya oggolaansho-siin gelid, lana yimaadaan caddeymo aqoonsi oo muujinaya xilalkooda.

10. Khilaaf kasta oo ka dhasha oggolaansho-siin gelid, ama shuruudaha lagu bixinayo oggolaanshaha, waxaa si degdeg ah loogu gudbin karaa Maxkamadda awoodda u leh.

## CUTUBKA 30AAD
## HESHIIS WADAREEDYO

### Qodobka 191aad
### Dhinacyada Heshiisku Khuseeyo

1. Ujeeddooyinka qeybtan, heshiis wadareed waa heshiis la xiriira shuruudaha iyo xaaladaha shaqada ee ay gaareen wakiillada hal ama dhowr urur shaqaale oo dhinac ah, iyo wakiillada hal ama dhowr loo-shaqeeye oo dhinaca kale ah.

2. Heshiiska wadareed waa inuu ahaadaa mid qoraal ah oo ay saxiixaan:

**b)** Sarkaalka madaxa fulinta ee loo-shaqeeyaha, madaxa fulinta ama xoghayaha guud ee urur loo-shaqeeye kaas oo qayb ka ah heshiiska ama wakiil uu u xilsaaray qofkaas;

**t)** Xoghayaha guud ee urur kasta oo ka mid ah urur shaqaale oo qayb ka ah heshiiska ama wakiil uu u xilsaaray xoghayaha guud.

### Qodobka 192aad
### Habraaca Diyaarinta Heshiiska

1. Heshiis wadareed Shaqaale waa inuu ku salaysnaado mabaadii'da guud ee xeerarka shaqada, waa in si xor ah dhinacyadu uga wada xaajoodaan, heshiisyadaas oo u dhaxeeya loo-shaqeeye, koox loo-shaqeeye, ururro loo-shaqeeye oo dhinac ah iyo hal iyo wixii ka badan ururo shaqaale oo dhinac kale ah.

2. Nuxurka heshiisku waa in uu tixgeliyaa siyaasadda qaran ee ku aaddan bulshada.

3. Heshiis wadareedka shaqaale waa in ay ahaadaan qaab qoraal ah, waa in loo gudbiyaa nuqul ka mid ah: Diiwaanhayaha, urur shaqaale, urur loo-shaqeeye iyo Guddiga Sare Shaqada ee federaalka.

4. Marka laga wadaxaajoonayo heshiis wadareedka, loo-shaqeeye kasta waxaa looga baahan yahay in uu soo bandhigo dhammaan macluumaadka laga wadaxaajoonayo kaas oo u oggolaanaya urur shaqaale in uu si wax-ku-ool ah ugala xaajoodo loo-shaqeeye, isaga oo matalaya shaqaalaha. Macluumaadkaas waa in ay qarsoodi ahaadaan, loona shaacin cid aan shaqo ku laheyn wadaxaajoodkaas.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

5. khilaaf kasta oo khuseeya shaacinta macluumaadka si waafaqsan qodobada qeybtan, waa in qoraal ahaan loogu gudbiyaa dhinacyada ay khuseyso sida; Guddiga Sare Federaalka ee Xallinta Khilaafaadka Shaqada, si ay u xalliyaan, haddii ay xallin waayaan, waxaa si degdeg ah loogu gudbinayaa maxkamadda awoodda u leh.

**Qodobka 193aad**
**Dulucda Heshiis Wadareedka**

1. Iyadoo la raacayo qodobbada xeerkan ama xeer-nidaamiyeyaashiisa, heshiis wadareedku oo ay isku waafaqsan yihiin dhinacyadu waa in lagu qeexaa arrimaha soo socda:

**b)** Dhinacyada heshiiska galaya;
**t)**Qeybaha shaqaalaha ee ay khuseyso;
**j)**Muddada uu jirayo heshiiska;
**x)**Habraaca heshiisiinta ama dhaxdhaxaadinta haddii uu khilaaf yimaado; iyo
**kh)**Habraaca iyo shuruudaha lagu baabi'in karo, lagu cusbooneysiin karo ama dib lagu eegi karo.

**Qodobka 194aad**
**Diiwaangelin Heshiiska**

1. Heshiis wadareed kasta waa in loo gudbiyaa Wasaaradda muddo afar iyo toban (14) maalmo shaqo gudahood ah marka la soo gabagabeeyo.

2. Waxaa waajib ku ah loo-shaqeeye ama urur loo-shaqeeye ee dhinac ka ah heshiiska in ay u gudbiyaan Wasaaradda si loo diiwaangeliyo.

3. Haddii loo-shaqeeye ama urur loo-shaqeeye ku guul darraysto inay u soo gudbiyaan heshiiska wadareedka Wasaaradda sida ku xusan faqradda 1aad iyo 2aad ee qeybtan, ururka shaqaalaha ayaa soo gudbin kara.

4. Wasaaradda waxa ay dib u eegis ku sameyn kartaa heshiis wadareedyada si ay u xaqiijiso in ay waafaqsan yihiin qodobada xeerkan iyo sharci kale oo xiriir la leh.

5. Wasaaradda waa in ay ku diiwaangelisaa heshiiska muddo afar iyo toban (14) maalmo shaqo gudahood, marka ay xaqiijiso in heshiisku uu buuxiyey shuruudaha sharciga ah iyo habraacyada looga baahan yahay.

6. Marka ay Wasaaradddu go'aansato in heshiisku aanu buuxin shuruudaha, waa in ay ku wargelisaa muddo afar iyo toban (14) maalmo shaqo gudahood dhinacyada ay khuseyso ee looga baahan yahay in ay saxaan, kuwaas oo looga baahan yahay in ay ku soo jawaabaan muddo afar iyo toban (14) maalmo shaqo gudahood, markaa waa in Wasaaraddu sii waddaa shuruudaha lagu xusay faqradda 5aad ama faqraddan ee qodobkan hadba tii ku habboon.

**Qodobka 195aad**
**Saameynta Sharciga ee Heshiis Wadareedka**

1. Muddada Heshiis wadareedku wuxuu dabrayaa:

**b)** Dhinacyada heshiiska galay;
**t)** Dhammaan xubnaha urur shaqaale ee u shaqeeya loo-shaqeeye, koox loo-



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

shaqeeye ah ama xubnaha ka mid ah ururrada loo-shaqeeyayaasha ee heshiiska dhinac ka ah;

**j)** Loo-shaqeeyayaasha xubinta ka ah ama ka noqday urur loo-shaqeeye, kaas oo ilaa xad heshiiska qayb ka ah, ilaa iyo inta heshiisku la xiriiro shaqaalahooda.

2. Shuruudaha heshiis wadareedka waxaa loo arkaa in uu ku jiro heshiiska shaqo siinta ee shaqaale kasta oo daboolayo heshiis wadareedka.

3. Heshiis wadareed wuxuu noqonayaa:

**b)**Mid la meelmarin karo oo la hirgeliyo marka ay diiwaangeliso Wasaaradda;
**t)** Mid dhaqangal ah laga billaabo taariikhda ay isku afgarteen dhinacyadu

**Qodobka 196aad**
**Qodobbo U Roon Shaqaalaha**

Heshiis wadareed waxaa ku jiri kara qodobbo ay shaqaaluhu u roon kuwa ku jira xeerkan iyo xeer-nidaamiyeyaashiisa ama sharci kale, laakiin waa in aaney khilaafin qodobbada waajibka ah ee xeerkan.

**Qodobka 197aad**
**Ka Dhaafidda Khidmada Shaabadda iyo Diiwaangelinta**

Heshiis wadareedka waa laga dhaafayaa dhammaan khidmadda shaabadda, daabacaadda iyo khidmadda diiwaangelinta.

**Qodobka 198aad**
**Xudduudaha iyo Muddada uu Ansax Yahay Heshiisku**

1. Heshiis wadareedka shaqaale:

**b)** Waxaa loo gali karaa heer Qaran, Gobol, Degmo ama Deegaan maxalli ah, Warshad ama heer Shirkadeed;
**t)** Muddada uu shaqaynayo waa in aanay ka badneyn saddex sano, waana in aanay ka yareyn hal sano;
**j)** Wuxuu shaqeynayaa muddada uu ansaxa yahay, marka laga reebo haddii ay dhacdo xaalad isbeddel weyn oo saameyn toos ah ku leh fulinta heshiiska.

2. Marka uu waqtigiisu dhaco heshiiska haddii aanay diidmo ka imaanin dhinacyada midkood, waa sii soconayaa muddo la mid ah kii hore.

3. Haddii laga baxayo heshiiska waa in la keenaa wargelin ugu yaraan saddex (3) bilood ka hor taariikhda uu dhacayo.

**Qodobka 199aad**
**Ka Qeyb Noqosho Heshiiska Xiga**

Urur kasta oo shaqaale ama loo-shaqaaye oo aan ku jirin sameynta heshiis wadareed shaqaale wuxuu qeyb noqon kara heshiiska xiga.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

**Qodobka 200aad**
**Dhaqangal**

1. Si looga fogaado shakiga, xaaladaha iyo shuruudaha shaqada ee ku jira heshiis wadareedka, saameynaya dhamman shaqaalaha ay khuseyso haddii ay xubin ka yihiin urur shaqaale ama aynay ku jirin, haddiiba ilaa xad ay ku jiraan shuruudo iyo xaalado u roon shaqaalaha.

2. Haddii loo-shaqeeye uu qabto hawlo ganacsi oo kala duwan, kalana madaxbannaan, heshiis wadareedka lagu maamulayo mid kasta oo ganacsiga goonida ah, waxaa lagu dhaqayaa xiriirka shaqo ee mid kasta khuseeya.

3. Heshiiska shaqo siinta shakhsiga ah waa in aanu ka hor imaan heshiis wadareedyada, marka laga reebo qodobbo u roon oo ay dani ugu jirto shaqaalaha.

**Qodobka 201aad**
**Baabi'in Heshiis Wadareed**

1. Iyada oo la raacayo qodobbada xeerkan, heshiis wadareed waxa lagu baabi'in karaa:

**b)** Marka dhinacyadu ay isla oggolaadaan ama sababo la isla oggolaaday oo ku jira heshiiska, dhinacyada waa in ay ogeysiiyaan Waaxda Shaqada ee Wasaaradda xaaladahaas;
**t)** Marka lagu beddelo heshiis midkan ka dambeeya;
**j)** Marka ay jiraan xaalado lama filaan ah ama duruufo aan laga waaban karin (Force Majeure), oo ay ansaxiso maxkamadda awoodda u leh.

**Qodobka 202aad**
**Heshiisyo Shaqo oo Dheeraad ah**

Iyadoo lagu dhaqayo qodobbada heshiis wadareedyada xaalado gaar ah oo la qabanayo, heshiisyo dheeraad ah ayey geli karaan dhinacyada oo u dhaxeeya loo-shaqeeyaha iyo ururka shaqaalaha ee ay khusayso.

**Qodobka 203aad**
**Xiriirrada Shaqo siinta ee Aan ku Xirneen Xeer-nidaamiyeyaal Wadareed**

Shaqaalaha rayidka ah ee ku jira maamulka Dawladda waxaa laga reebay qodobbada qeybtan, iyagoo ku xiran in Dawladdu u dejiso nidaam gaar ah oo haga gorgortanka guud ee la xiriira qeybaha shaqaalaha dawladda.

**Qodobka 204aad**
**Xallinta Khilaafaadka**

1. Loo-shaqeeye, koox loo-shaqeeyeyaal ah ama ururro loo-shaqeeye iyo urur shaqaale ayaa gaari kara heshiis wadareed dhigaya in:

**b)** Heshiis laga gaaro nooc kasta oo khilaafaad ganacsi ama hawl ah, kaas oo lagu tilmaamay dhexdhexaadiye madaxbannaan oo dhexdhexaad ah, isagoo lagu magacaabay heshiis ay dhinacyadu wada gaareen;
**t)** Ka garnaqidda nooc kasta oo khilaafaad ganacsi ama hawl ah ee ku qeexan heshiis wadareedka oo uu qaaday garqaade madaxbannaan oo dhexdhexaad



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

ah oo lagu magacaabay heshiis wadareed ay dhinacyadu wada gaareen.

2. Dhinacii u soo gudbiyey dhexdhexaadiye khilaaf uu doonayo in lagu xalliyo qodobbada heshiis wadareed lagu gaaray si waafaqsan faqradda 1[aad] ee xeerkan, looma baahna in loo sii gudbiyo Guddiga Sare Xallinta Khilaafaadka ee heer Federaal, hase yeeshee, wuxuu Guddiga Sare ka dalban karaa in ay ka caawiyaan raadinta dhexdhexaadiye ku habboon.

3. Go'aanka uu gaaray garqaade ama dhexdhexaadiye marka loo eego heshiis wadareedka ku xusan farqadda 1[aad] ee qodobkan waa kama dambeys, waana mid aan laga bixi karin:

**b)** Waxaana cabasho looga qaadan karaa maxkmadda awoodda u leh;
**t)** Maxkamadda awoodda u leh waxay dhinac iska dhigi kartaa marka ay hesho sabab kale oo Sharcigu aqoonsan yahay; ama
**j)** Maxkamadda awoodda u leh waa ay dhaqan gelin kartaa go'aanka uu gaaray garqaade ama dhexdhexaadiye.

4. Codsiga dib u eegista go'aanka garqaadista ama dhexdhexadinta waa in loogu soo gudbiyaa Maxkamadda awoodda u leh muddo soddon (30) maalmo shaqo gudahood ah laga billaabo maalinta go'aanku soo baxay.

## CUTUBKA 31AAD:
## GUDDIGA BAARISTA

### Qodobka 205aad
### Magacaabista iyo Waajibaadka

1. Wasiirku, wuxuu wareegto ku soo saarayaa magacaabista guddi baaris, guddigaas oo baraaya arrin kasta oo wasiirku u arko in ay la xiriirto, khuseeyso khilaaf kasta oo shaqo ama guud ahaan khilaafaadka shaqada, ama khilaaf nooc kasta ama heer kasta ee khilaaf shaqo ah, khilaafkaasi ha ahaado mid lagu soo wargeliyey Wasiirka ama yaanu ahaanin sida ku xusan xeerkan.

2. Marka wasiirku uu arrin u gudbiyo Guddiga Baarista ee ku xusan faqradda 1[aad], waxaa wasiirku uu Guddiga Baarista u gudbin karaa wixii kale ee arrin ah ee uu u arko in loo baahan yahay in Guddiga loo gudbiyo.

3. Guddiga Baaristu waxa uu ka kooban yahay saddex (3) xubnood ama ka badan, oo guddoomiye huna uu ku jiro, ama hadba tiradii wasiirku u arko in loo baahan yahay, Wasiirkuna waxa uu sarkaal ka tirsan u magacaabi karaa inuu noqdo Xoghayaha Guddiga Baarista.

4. Wasiirku ayaa si degdeg ah u buuxin kara jago kasta ee ka bannaanaato Guddiga Baarista.

### Qodobka 206aad
### Warbixinnada

Guddiga Baaristu waa in ay baaraan oo warbixin ka diyaariyaan arrin kasta oo loo soo gudbiyo, warbixintana u gudbiyaan wasiirka, iyaga oo soo raacinaya talooyin ku habboon, kolkaas oo wasiirkuna uu go'aamiyo sidii wax looga qaban lahaa xallinta arrintaas.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

## CUTUBKA 32AAD
## XALLINTA KHILAAFAADKA SHAQADA

### Qodobka 207aad
### Khilaafaadka Shaqada ee Dhinacyada

1. Dhinac kasta waxaa uu u soo gudbinayaa Baaraha Shaqada Degmada (District labour Inspector) Khilaafaadka xudduuddiisa ka jira ee shaqada si loo dhexdhexaadiyo, kaasoo isku deyaya inuu ku xalliyo khilaafka mudo 14 maalmo shaqo gudahood ah laga billaabo taariikhda loo soo gudbiyay.

2. Dhinacii aan ku qancin go'aanka Baaraha Shaqada Degmada, waxaa uu muddo 14 maalmo shaqo gudahood ah oo ka billaabata taariikhda go'aanku soo baxay u gudbinayaa Baaraha Shaqada Gobolka, si uu u xalliyo khilaafka muddo 14 maalmo shaqo gudahood ah, laga billaabo maalinta uu qabto.

3. Dhinacii aan ku qancin go'aanka Baaraha Shaqada Gobolka waxaa uu muddo 14 maalmo shaqo gudahood ah oo ka billaabata taariikhda go'aanku soo baxay u gudbinayaa maxkamadda awoodda u leh.

4. Qofka Shaqaalaha ah oo u shaqeeya ama horey ugu shaqeyn jiray shirkad ama hay'ad xarunteedu ku taalo dibaddda, balse ka howlgasha JFS, wuxuu si toos ah dacwad ugu gudbin karaa maxkamad ku taala dalka dibadiisa oo uu rumeysan yahay inay awood u leedahay qaadidda dacawada.

4. Qofka Shaqaalaha ah wuxuu si toos ah Dacawad ugu gudbisan karaa Maxkamadda awoodda u leh, isaga oo aan marin baarayaasha shaqada.

### Qodobka 208aad
### Baaraha Shaqada Gobolka

1. Wasiirka oo tixraacaya qodobada xeerkan waxa uu magacaabayaa Baaraha Shaqada Gobolka iyo Kaaliyaashiisa iyo waajibaadkooda shaqo.

2. Baaraha Shaqada Gobolka iyo Kaaliyaashiisa waxa ay ka koobnaanayaan afar (4) Baare iyo Xogheyn oo kala ah sidan:

**b)** Baaraha shaqada gobolka (Guddoomiye);
**t)** Seddex (3) kaaliye baare shaqo (Xubno);
**j)** Xoghaye-Baare (Xubin).

### Qodobka 209aad
### Khilaafaad Wadareed Shaqo

1. Khilaafaad Wadareedka Shaqo waxaa marka hore lagu xallinayaa heshiis laba (2) geesood (Urur Shaqaale iyo Urur Loo-shaqeeye), haddii lagu guul darreysto xallinta khilaafkaas waxaa loo gudbinayaa Baaraha Shaqada Gobolka.

2. Haddii Baaraha Shaqada Gobolka ku guuldarreysto xallinta khilaaf wadareedka shaqo waxaasi toos ah loogu gudbinayaa maxkamadda awoodda u leh.

**Qodobka 210aad**
**Cabashada Laga Qaato Go'aannada Maxkamadda Gobolka**

Cabashada laga qaato go'aannada Maxkamadda Gobolka waxaa loo gudbinayaa maxkamadda awoodda u leh.

**Qodobka 211aad**
**Xuquuqda Shaqo joojin iyo Xirasho Goob Shaqo (Lockouts)**

1. Xuquuqda Shaqo joojinta waxaa loo adeegsanayaa si waafaqsan xeerarka laga dejiyey.

2. Shaqo joojinta waa xaquuq aasaasi ah oo uu leeyahay shaqaale kasta si waafaqsan xeerkan, xuquuqahaas waxaa adeegsan kara shaqaalaha, ururrada shaqaalaha iyo xiriirrada guud ee ururrada shaqaalaha.

3. Shaqaalaha dawladda iyo kuwa hay'adaha gaarka ah waxay si siman u adeegsan karaan xuquuqda shaqo joojinta, marka laga reebo:

**b)** Shaqaalaha adeegga rayidka ee joogtada ah oo ku hawlgala magaca Qaranka;

**t)** Shaqaalaha ka shaqeeya adeegyada guud ee aasaasiga ah si waafaqsan xeerkan, waa kuwa khatar gelin kara guud ahaan nolosha, badqabka iyo caafimaadka ama qeyb ka mid ah dadweynaha, adeegyada lagama maarmaanka u ah xaaladaha degdega ah ama musiibo qaran.

4. Xaqa shaqo joojin shaqaalaha waa waajib, hase yeeshee, waa in loo adeegsadaa si nabadgelyo ah

5. Cidna looma ogola in uu qeyb ka noqdo shaqo joojin ama in uu u hawl galo abaabullidda shaqo joojin muddo dheer, haddii:

**b)**Sharci kasta, xukun maxkamadeed, heshiis wadareed, heshiis wadaxaajood la isku raacay, heshiisyadaas oo reebaya in la sameeyo shaqo joojin iyada oo la xushmeenayo arrimihii la isku khilaafay;

**t)**Arrimaha shaqo joojin keenaya lagu nidaamiyey heshiis wadareed iyo heshiis wadaxaajood oo ay isku raaceen dhinacyada is khilaafsan;

**j)** Dhinacyada heshiiyey ay isku khilaafaan, wuxuu dacwaddiisa u gudbin karaa Baaraha Shaqada Gobolka ee ku xusan Qodobka 209aad ee xeerkan;

**x)**Khilaafka khuseeyo aqoonsiga urur shaqaale, ururkaas wuxuu dacwaddiisa u gudbin karaa Baaraha Shaqada Gobolka ee ku xusan Qodobka 209aad ee xeerkan;

**kh)**Dacwad urur shaqaale aan loo xallin hab garnaqid oo waafaqasan xeerkan, ama qodobbo heshiis wadareed lagu gaaray garnaqid;

**d)**Shaqaalaha iyo loo-shaqeeyaha ku hawlan adeegyada aasaasiga ah ee bulshada;

**r)**Shaqo joojin aan sii hurinayn ama uga dareyn khilaafka shaqada, mid leh dabeecad siyaasadeysan, ama marka laga reebo shaqo joojin lagu raadinayo xaalado taabanaya siyaasadda dhaqaalaha iyo arrimaha bulshada.

6. Urur kasta oo shaqaale ama koox shaqaale oo dooneysa in ay sameyso shaqo joojin shaqo, waxaa looga baahan yahay in ay ku soo wargeliyaan loo-shaqeeyaha ama koox loo-shaqeeyeyaal ah iyo wasiirka muddo 14 maalmo shaqo gudahood oo ka bilaabata maalinta uu dhacaaayo bannaanbax shaqo.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

7. Wargelintu waa in ay tilmaantaa:

**b)**Arrimaha saldhig u ah shaqo joojinta;

**t)**Arrimaha khuseeya loo-shaqeeye ama koox loo-shaqeeyeyaal ah iyada oo aan loo raaceynin cid gaar ah;

**j)**Waqtiga shaqo joojinta shaqo, haddii aan la xallinin arrimaha keenay shaqo joojin keenay, shaqo joojintu waa uu dhacaysa;

**x)**Haddii la isku dayey in laga heshiiyo arrimaha shaqo joojinta keenay ama qaabab kale oo xallin khilaafaad ah (QXKH) iyo in isku dayadaas lagu guul dareystay;

**kh)**Haddii inta badan shaqaalaha ay si qarsoodi ah ugu codeyaan sameynta shaqo joojin.

8. Waxaa mamnuuc ah shaqo joojin laab-lakaca ah, marka laga reebo kuwa sharciga waafaqsan.

9. Shaqaaluhu waxay xaq u leeyihiin in ay si nabad ah u sameeyaan shaqo joojin shaqo, kaas oo aan ku lug yeelaneyn wax keeni kara fal-dambiyeed, isla markaana aan faragelineyn xuriyadda shaqo ee kuwa aan qeybta ka aheyn shaqo joojinta.

10. Wasiirku wuxuu awood u leeyahay in uu go'aan ka gaaro adeegyada gaarka ah ee aasaasiga ah isaga oo latashanaya ururrada shaqaalaha iyo kuwa loo-shaqeeyayaasha ah.

11.Wasiirku wuxuu awood u leeyahay in uu ku soo rogo goobaha shaqo joojin ugu yaraan adeegyada badqabka xaalad kasta oo shaqo joojin ah iyada oo danta laga leeyahay xaqiijinta badqabka dadka, ka hortagga shilalka iyo ilaalinta mishiinada iyo qalabka.

12. Wasiirku wuxuu awood u leeyahay in uu dejiyo nidaamka adeegga ugu yar ee ay ku hawlgeli karaan hay'adaha ama ururrada ee uu saameynayo shaqo joojin gaar ahaan adeegyada guud iyo adeegyada kale ee aasaasiga ah oo muhiimka ah.

13.Wasiirka waa in uu xaqiijiyaa in ururrada shaqaalaha, loo-shaqeeyayaasha iyo hay'adaha dawladda ee wadashaqeynta la leh in ay si wadajir ah u go'aamiyaan sida ugu yar ee shaqada loo qaban karo iyo badqabka lagama maarmaanka u ah shaqada.

14.Loo-shaqeeye kasta waxaa ka reeban in uu qorto shaqaale badala shaqaalaha shaqo joojinta ku jira, marka laga reebo shaqo joojin ku aaddan adeegyada aasaasiga ah ama duruufaha culus ee gaarka ah iyo xaaladaha la xiriira musiibo qaran oo aad u daran.

15. Waa sharci daro in loo-shaqeeye eryo, ka qaado tallaabo anshax marin ama si kale u xaddido xuquuqda saraakiisha urur shaqaale ama shaqaale in ay abaabulaan ama ka qeyb galaan dhaqdhaqaaq kasta oo la xiriira tallaabo lagu qorsheynayo qabashada shaqo joojin sharci ah.

16. Dacwad madani ah laguma soo oogi karo qof kasta oo ka qeyb qaata ama ku dhaqma talaabo hore loogu qaadayo shaqo joojin sharci ah.

17. Shaqaale kasta oo ka qeybqaata, u yeero, kiciya ama abaabula dadka kale in ay ka qeyb qaataan shaqo joojin aan waafaqsaneyn xeerkan, waxaa loo qaadanayaa in uu jibiyay heshiiskii sii shaqo iyo:

**b)**In uu muteysanaya anshax marin; iyo

**t)**Wax xaq ah uma yeelanayo in la siiyo mushaarkiisa iyo xuquuqaha kale ee ku



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

xusan xeerkan muddadii uu ka qeybqaadanyey shaqo joojinta.

18.Qof kasta oo diida in uu ka qeyb qaato ama ku adkeysta in aanu ka qeyb qaadan shaqo joojin sharci darra ah:

**b)** Lagama saari karo urur shaqaale ama urur kale, kumana waayi karo diidmadaas awgeed xuquuq kasta ama wixii dheef ah ee uu xaq u lahaa;

19. Marka ay shaqaaluhu sameeyaan shaqo joojin sharci darro ah, loo-shaqeeyuhu wuxuu xaq u leeyahay in uu dhaqangeliyo ujuuro jaris maalmaha shaqo joojinta.

20.Arrimo kasta oo khuseeya shaqo joojin ama hanjabaad shaqo joojin oo la isku khilaafay waafaqsanaantiisa xeerkan, waxaa loo gudbin karaa maxkamadda awoodda u leh

21. Shaqaaluhu waxay xaq u leeyihiin in ay u sameeyaan shaqo joojin si waafaqsan xeerkan.

22. Waxaa reeban in loo-shaqeeyuhu ku dhaqaaqo xirasho goob shaqo (Lockouts) isaga oo ku cadaadinaya shaqaalihiisa dalabkiisa marka ay jirto shaqo joojin.

## QEYBTA IX
## QODOBBO GUUD

## CUTUBKA 33AAD:
## CIQAABAHA

### Qodobka 212aad
### Is-hortaagista Baarayaasha Shaqada

Qof kasta oo si bareer ah isu hortaaga baare shaqo isaga oo gudanaya waajibaadkiisa shaqo, waxaa lagu ciqaabayaa habraacayada ku xusan Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed iyo Xeerarka kale ee Dalka.

### Qodobka 213aad
### Xadgudubyada Kale

Qof kasta oo jebiya qodobada xeerkan ama xeer-nidaamiyeyaashiisa oo aan ciqaabtiisa la xusin, waxaa lagu ciqaabayaa habraacayada ku xusan Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed iyo Xeerarka kale ee Dalka.

### Qodobka 214aad
### Lacagta Ganaaxyada

Lacagta ganaaxyada ee ku xusan xeerkan, waa in lagu shubaa khasnada dhexe ee dowlada.

### Qodobka 215aad
### Dembi ku Soo Noqnoqosho

Haddii dembi ku xusun xeerkan uu soo noqnoqdo, ciqaabta halkan lagu sheegay waa ay labalaabmi kartaa.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

**Qodobka 216aad**
**Gal Furid Cabasho**

Haddii loo baahdo ka dib marka uu siiyo digniin dhinicii laga soo dacwooday, Baaraha Shaqada Degmada ama kan gobolka, wuxuu furayaa gal warbixineed oo la xiriira jebinta qodobbo ku aaddan xeerkan ama xeer-nidaamiyeyaashiisa, wuxuuna u gudbinayaa Maxkamadda awoodda u leh isaga oo nuqul u soo diraya Wasaaradda.

**Qodobka 217aad**
**Xeer-Nidaamiye**

Wasaaradda waxa ay soo saaraysaa xeer-nidaamiye lagu faahfaahinaayo dhaqan gelinta xeerkan.

**Qodobka 218aad**
**Baabi'in**

Waxaa la baabi'iyey Xeerka Shaqada ee Lam. **65** soo baxay **18[kii]** **Oktoobar** ee 1972.

s

**Qodobka 219aad**
**Dhaqangal**

Xeerkani wuxuu dhaqangelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JFS, isla markaana lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**XEER MADAXWEYNE LR.317** **TAARIIKH: 02-DA NOFEEMBAR 2024**

**MAGACAABIS TALIYAHA CIIDAMADA GAARKA AH EE C.X.D.S.**

**MADAXWAYNAHA J.F.S.,**

| | |
|---|---|
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobada 87aad iyo 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka KMG ee J.F.S. |
| **MARKUU ARKAY:** | **Sharci Lr.15** ee **6/4/1960**, kuna saabsan Dhismaha Xoogga Dalka Soomaaliyeed. |
| **MARKUU TIXGELIYAY:** | Soo jeedinta Wasiirka Gaashaandhigga warqadda summadeedu tahay **WG/XW/0421/10/24,** ee soo baxday 3**0/10/2024,** Ujeeddaduna tahay Soo jeedin Magacaabis Taliye. |

FR

**Waxa uu Madaxweynaha soo saaray Xeerkaan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxwaynaha J.F.S. saxiixo Xeerkaan, waxaa G/Dhexe Xasan Saalax Cabdi loo magacaabay Taliyaha Ciidanka Gaarka ah ee C.X.D.S.

**Qodobka 2aad**

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

**Madaxweynaha J.F.S.**
**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN- 022- 2025
TAARIIKH: 10-05-2025
SAXIIX:
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
2_ MAR 2025
BY: Fadumo Mohamed Omar Salah
SAACAD ______ SAXIIX ______

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**XEER MADAXWEYNE LR.320** **TAARIIKH: 02-DA NOFEEMBAR 2024**

**MAGACAABIS TALIYAHA CIIDANKA DHULKA C.X.D.S.**

**MADAXWAYNAHA J.F.S.,**

| | |
|---|---|
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobada 87aad iyo 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka KMG ee J.F.S. |
| **MARKUU ARKAY:** | **Sharci Lr.15** ee **6/4/1960**, kuna saabsan Dhismaha Xoogga Dalka Soomaaliyeed. |
| **MARKUU TIXGELIYAY:** | Soo jeedinta Wasiirka Gaashaandhigga warqadda summadeedu tahay **WG/XW/0415/10/24**, ee soo baxday **29/10/2024,** Ujeeddaduna tahay Soo jeedin Magacaabis. |

FR

**Waxa uu Madaxweynaha soo saaray Xeerkaan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxwaynaha J.F.S. saxiixo Xeerkaan, waxaa **S/Guuto Sahal Cabdullaahi Cumar** loo magacaabay Taliyaha Ciidanka Dhulka ee C.X.D.S.

**Qodobka 2aad**

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

**Madaxweynaha J.F.S.**
**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-026-2025
TAARIIKH: 10-03-2025
SAXIIX:
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
29 MAR 2025
BY: Faduma Mohamed Omar
SAACAD ______ SAXIIX ______

Address: Office of the President, Villa Somalia, Mogadishu, Somalia
Tell: +252 1 861000 / 261000 | Email: contact@presidency.gov.so | Web: www.villasomalia.gov.so

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**XEER MADAXWEYNE LR.325** **TAARIIKH: 18-KA NOFEEMBAR 2024**

**XILKA-QAADIS TALIYIHII HORE EE TALIYAHA CIIDANKA XOOGGA DALKA SOOMAALIYEED IYO MAGACAABIS TALIYAHA CIIDANKA XOOGGA DALKA SOOMAALIYEED**

**MADAXWAYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobada 87aad iyo 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka KMG ee J.F.S.

**MARKUU ARKAY:** **Sharci Lr.15** ee **6/4/1960**, kuna saabsan Dhismaha Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Soo jeedinta Golaha Wasiirradda warqadda summadeedu tahay **XRW/347/11/2024,** ee soo baxday **12/11/2024,** Ujeeddaduna tahay Soo jeedin Magacaabid Taliyaha Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

FR

**Waxa uu Madaxweynaha soo saaray Xeerkaan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxwaynaha J.F.S. saxiixo Xeerkaan, waxaa **S/Gaas Ibraahim Sheekh Muxudiin** laga qaaday xilkii Taliyaha Ciidaanka Xoogga Dalka, waxaana loo magacaabay Taliyaha Ciidanka Xoogga **S/Gaas Odawaa Yuusuf Raage**.

**Qodobka 2aad**

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

**Madaxweynaha J.F.S.**
**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-025-2025
TAARIIKH:
SAXIIX
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowrha Guud Ee JFS

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
29 MAR 2025
BY: Faduma Mohamed Omar Sacbi
SAACAD ______ SAXIIX ______

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**XEER MADAXWEYNE LR.354** **TAARIIKH:01-DA DISEEMBER, 2024**

**MAGACAABIS XUBNAHA GUDDIGA MADAXA BANNAAN EE DOORASHOOYINKA QARANKA & SOOHDIMAHA**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobada 87aad iyo 90aad ee Dastuurka KMG ah ee J.F.S.

**MARKUU ARKAY:** Qodobada 47aad ee Dastuurka KMG ah ee J.F.S.

**MARKUU ARKAY:** Sharci **Lr.26,** ee soo baxay **21/11/2024**, ee ku saabsan Sharciga dhisidda guddiga madaxa bannaan ee doorashooyinka Qaranka iyo soohdimaha.

**MARKUU ARKAY:** Sharci **Lr.28,** ee soo baxay **23/11/2024**, ee ku saabsan Sharciga doorashooyinka Qaranka ee J.F.S.

**MARKUU ARKAY:** Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee summaddeedu tahay **XGGSH/639/B11/24**, ku taariikheysan **27/11/2024**, ujeeddaduna tahay Soo Gudbin Ansixinta Xubanaha Guddiga Madaxa-Bannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha.

FR

**MARKA UU TIXGELIYAY:** Taariikh nololeedka musharixiinta loo soo jeediyay in ay kamid noqdaan Guddiga Madaxa bannaan ee dooroshooyinka Qaranka iyo soohdimaha.

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxwaynuhu saxiixo xeerkaan, waxa uu u magacaabay Guddiga Madaxa-Bannaan **ee** Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha, magacyadooduna waa sida hoos ku xusan:

| Lr. | Magaca |
|---|---|
| 1. | Cabdikariim Axmed Xasan |
| 2. | Saadiq Abshir Garaad |

| | |
|---|---|
| 3. | Avv. Maxamed Cabdiraxmaan Aadan |
| 4. | Yuusuf Cabdiqaadir Maxamed-Baafo |
| 5. | Cumar Abuukar Cumar |
| 6. | Farxiya Maxamed Yuusuf |
| 7. | Dr. Cumar Jaamac Maxamed |
| 8. | Faarax Cabdi Xasan |
| 9. | Sahro Diiriye Muuse |
| 10. | Cabdullaahi Salaad Yaroow |
| 11. | Maxamed Amiin Xasan Cabdullaahi |
| 12. | Cabdi Cadow Maxamed |
| 13. | Cabdishakuur Abiib Haayir |
| 14. | Khaalid Ibraahim Ismaaciil |
| 15. | Aamina Sheekh Cismaan Maxamed |
| 16. | Naasir Maxamed Shire |
| 17. | Cabdiraxmaan Cabdullaahi Shaafici |
| 18. | Maxamed Cumar Ismaaciil |

FR

**Qodobka 2aad**

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

**Madaxweynaha J.F.S**
**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
29 MAR 2025
BY: Fadumo Maxamed Omar Salihi
SAACAD ______ SAXIIX ______

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-024-2025
TAARIIKH : 10-0?-2025
SAXIIX :
AVV. Axmed Ciise Gutaale
Hantidhowraha Guud ee JFS

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**XEER MADAXWEYNE LR. 357** **TAARIIKH:10-KA DISEEMBER, 2024**

**XILKA-QAADIS GUDDOOMIYIHII HORE EE GOBOLKA BENAADIR AHAANA DUQA MAGAALADA MUQDISHO & MAGACAABIS GUDDOOMIYAHA CUSUB EE GOBALKA BENAADIR AHNA DUQA MAGAALADA MUQDISHO**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka J.F.S.

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 90aad, Xarafka 'K' ee Dastuurka J.F.S

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 8aad, Faqradda 4aad ee Xeer Lr. 6 ee soo baxay 12/02/1980, kuna saabsan in G/Banadir iyo Dowladda Hoose ay hoos yimadaan Madaxtooyada J.F.S.

**MARKUU ARKAY:** Warqadda summadeedu tahay **WAGF&D/XW/2810/2024**, ku taariikheysan **10/12/2024**, kasoo baxday Xafiiska Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka & Dib-U-Heshiisiinta, ujeeddaduna tahay soo jeedinta Magacaabista Guddoomiyaha Gobolka Benaadir,ahna Duqa Magaalada Muqdisho.

FR

**MARKUU TIXGELIYAY:** Waayo-aragnimada uu leeyahay mudanaha loo magacaabayo xilkan.

**MARKUU GARWAAQSADAY:** In ay jirto baahi loo qabo in loo magacaabo G/Benaadir Guddoomiye Cusub.

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxwaynuhu saxiixo xeerkaan;

1. Waxaa **Mudane Yuusuf Xuseen Jimcaale** laga qaaday xilkii guddoomiyaha Gobolka Benaadir, ahna Duqa magaalada Muqdisho.
2. Waxaa **Mudane Maxamed Axmed Amiir** loo magacaabay in uu noqdo **Guddoomiyaha Gobolka Benaadir ahna Duqa Magaalada Muqdisho**.

**Qodobka 2aad**

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAAL-023
TAARIIKH
SAXIIX

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
29 MAR 2025
BY: Faduma Mohamed Omar Salihi
SAACAD SAXIIX

**Madaxweynaha J.F.S.**
**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

Address: Office of the President, Villa Somalia, Mogadishu, Somalia
Tell: +252 1 861000 / 261000 | Email: contact@presidency.gov.so | Web: www.villasomalia.gov.so

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**XEER MADAXWEYNE LR. 358** **TAARIIKH:14-KA DISEEMBER, 2024**

**XILKA-QAADIS AGAASIMIHII GUUD EE HAY'ADDA ISTAATISTIKADA QARANKA & MAGACAABIS AGAASIMAHA GUUD EE HAY'ADDA ISTAATISTIKADA QARANKA**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

| | |
|---|---|
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka J.F.S. |
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobka 90aad, Xarafka 'K' ee Dastuurka J.F.S |
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobka 21aad, faqaradaha 1aad iyo 2aad ee sharciga Istaatistikada Qaranka (**Sharci Lr. 24**, ee soo baxay **24/02/2020**). |
| **MARKUU ARKAY:** | Warqadda summadeedu tahay **XRW/352/11/2024**, ku taariikheysan **21/11/2024**, kasoo baxday Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha, ujeeddaduna tahay soo jeedinta Magacaabista Agaasimaha Guud ee Hay'adda Istaatistikada Qaranka. |
| **MARKUU TIXGELIYAY:** | Waayo-aragnimada uu leeyahay mudanaha loo magacaabayo xilkan. |
| **MARKUU GARWAAQSADAY:** | In ay jirto baahi loo qabo dardargalinta howlaha Hay'adda Istaatistikada Qaranka |

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxwaynuhu saxiixo xeerkaan;

1. Waxaa **Mudane Sharmaake Maxamed Faarax** laga qaaday xilkii **Agaasimaha Guud ee Hay'adda Istaatistikada Qaranka**.
2. Waxaa **Mudane Cabdisalaan Cabdiraxmaan Maxamed** loo magacaabay in uu noqdo **Agaasimaha Guud ee Hay'adda Istaatistikada Qaranka**.

**Qodobka 2aad**

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-032-2025
TAARIIKH: 10-05-2025
SAXIIX

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
29 MAR 2025
BY Fadumo Mohamed Dhaqsadili
SAACAD ______ SAXIIX ______

**Madaxweynaha J.F.S.**
**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**XEER MADAXWEYNE LR.359** **TAARIIKH: 17-DA DISEEMBAR 2024**

**XILKA QAADIS AGAASIMIHII GUUD EE HEY'ADDA SOCDAALKA & JINSIYADDA IYO MAGACAABID AGAASIMAHA GUUD EE HEY'ADDA SOCDAALKA & JINSIYADDA**

**MADAXWAYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 90aad, xarafka 'k'ee Dastuurka J.F.S.

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad ee Dastuurka J.F.S.

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 15aad ee **Sharciga Hey'adda Socdaalka iyo** Jinsiyadaha (Sharci Lr.**12** ee soo baxay **20/03/2023**).

**MARKUU ARKAY:** Warqadda summadeedu tahay **XRW/361/12/2024**, ku taariikheysan **12/12/2024**, kuna saabsan Go'aan Gole Ansixinta Magacaabidda Agaasimaha Guud ee Hey'adda Socdaalka & Jinsiyadaha Soomaaliyeed.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Aqoonta iyo waayo-aragnimada uu leeyahay Agaasimaha Guud ee loo magacaabayo xilkan.

FR

**Waxa uu Madaxwaynuhu soo saaray xeerkaan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkaan, waxa uu **Mudane Axmed Saciid Maxamed** ka qaaday xilkii Agaasimaha Guud ee Hey'adda Socdaalka iyo Jinsiyadaha.

**Qodobka 2aad**

Madaxweynaha J.F.S waxa uu u magacaabay **Mudane Mustafa Sheekh Cali Dhuxuloow** Agaasimaha Guud ee Hey'adda Socdaalka iyo Jinsiyadaha.

**Qodobka 3aad**

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa isla maalinta uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRAHA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-021-2025
TAARIIKH: 10-04-2025
SAXIIX:
AVV Axmed Cisse Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
29 MAR 2025
BY: Faduma Mohamed Omar Sacibi
SAACAD
SAXIIX

**Madaxweynaha J. F.S.**
**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**